


# BOQOL MAQAAL IYO BARAKADA QALINKA



Cabdullaahi M. Cawsey

# BOQOL MAQAAL IYO BARAKADA QALINKA

Cabdullaahi M. Cawsey

© 2019, Cabdullaahi M. Cawsey.

Buuggan qofkasta oo daneynaya si lacag la’aan ah buu ku rogan karaa ama u daabacan karaa.

Xuquuqda sawirrada jeldiga, Google Images.

# Tusmada Buugga

**Hordhac** ........ **8**

**Cutubka Koowaad: Falsafadda iyo Cilmiga Sayniska** ........ **10**

1. Falsafadda Libaaxa ........ 10
2. Suuleey: Faylasuufkii la Toogtay ........ 12
3. Xalka Falsafadaysan ee Xanaaqa ........ 16
4. Falsafadda Lacalla ........ 21
5. Gurmad Ehelnimo iyo Aragti Falsafadaysan ........ 22
6. Falsafad: Kawaankii Fikradaha ........ 26
7. Faan iyo Farxad Falasafadaysan ........ 27
8. Fadhigii Farxadda iyo Falsafadda ........ 31
9. Buuqii Boorsada iyo Baaqii Buugga ........ 34
10. Raadinta Runta iyo Dhugashada Dhulka ........ 36
11. Saxankii iyo Xaqqii Lagu Xiiqay ........ 38
12. Falsafadda Labiska ........ 39
13. Falsafadda Naarta iyo Jannada ........ 41
14. Falsafadda Afrikaanka ........ 43
15. Faylasuufkii Sawiray Fekerka Soomaalida ........ 45
16. Qalanjadii Qarxisay Quraafaadkii Qorraxda ........ 47
17. Qasaaraha Qarsoon ee Aqoonta ........ 50
18. Qubuuraha Qarsoon ........ 51
19. Buuggii Sannadka iyo Saadaasha Bani’aadannimada ........ 53
20. Tiirarka Fekerka iyo Fahamka Tirooyinka ........ 57
21. Kiiladii Tubaakada iyo Kaalinta Waqtiga ........ 61
22. Xadka Riyada iyo Runta ........ 63
23. Qasbanaanshaha Qarsoon ........ 65

**Cutubka Labaad: Caqliga iyo Cilmi Nafsiga** ........ **67**

24. Naxariista Caqliga ........ 67
25. Ceebaha Caqliga ........ 71
26. Baahida Maskaxda ........ 76
27. Buufiska loo Baahan yahay in laga Bogsado ........ 78
28. Gurmadka iyo Garashada Guud ee Soomaalida ........ 81

29. Su'aashii iyo Safarkii Nafsadda .......... 82
30. Caqliga, Cibaadada iyo Caafimaadka .......... 85
31. Cayaaraha Dhaqanka iyo Caafimaadka Dhimirka .......... 87
32. Ciyaaraha, Colaadaha iyo Caafimaadka .......... 89
33. Waxtarka iyo Wareerka Waalidka .......... 92
34. Fannaan Kuluc: macalinkii aan ka bartay xirfadda xifdinta .......... 93
35. Jeneraal Galaal iyo Gabadhii Jidbootay .......... 95
36. Duruusta ku Duugan Dulqaadka .......... 97
37. Muuqaalka iyo Maskaxda Manaxayaasha .......... 99
38. Macnooyinka Daahsoon iyo Muuqaallada Deegaanka .......... 101
39. Raadraaca Cabsida .......... 103
40. Garashada iyo Go'aanka .......... 106
41. Caqliga iyo Cabsida Cidlada .......... 108
42. Qiimaha Qosolka iyo Qaraaxada .......... 110
43. Buufiskii iyo Baqdintii Baska .......... 112
44. Maalayacniga Iyo Madaxbannaanida Maskaxda .......... 114
45. Shanta Luqaddood ee Jaceylka .......... 116
46. Qalalaasaha Qarsoon ee Qarnigan .......... 117
47. Gaajada iyo Gacan ka Hadalka .......... 120
48. Caafimaadka Maskaxda iyo Caqliga Madaxda .......... 121

**Cutubka Saddexaad: Cilmiga Bulshada iyo Siyaasadda Soomaalida .......... 124**

49. Aqoon Baaris: Waa maxay Dhaqan? .......... 124
50. Dhiraandhirin: Dhoofka iyo Dhaqanka Soomaalida! .......... 135
51. Cudurrada aan laga Caafimaadin ee Siyaasadda Soomaaliya .......... 141
52. Hormarka iyo Waxbarashada .......... 149
53. Asalka Xumaanta iyo Samaanta Qofka .......... 151
54. Faa'iidooyinka Xanta .......... 154
55. Saadaashii Faylasuuf Suuleey .......... 157
56. Saaxiibtinimada Soomaalida iyo Korontada Kenya .......... 161
57. Soomaalida iyo Sawirrada Sakiinta ah .......... 164
58. Qaladaadka mudane Qaad-diid .......... 166
59. Cilmiga Calaacalaha .......... 168

60. Tirada Tolka ku Taageersan ........ 169
61. Faca Cusub ee Soomaalida Facebook ........ 171
62. Doqonniimada iyo Duruufaha Qabyaalada ........ 173
63. Bulshada iyo Boosteejooyinka Garashada ........ 174
64. Su'aal Saaxiib: Xaaska Maxay iiga Nixisaa? ........ 176
65. Maxaa Talo ah Marka Lagu Takooro? ........ 177
66. Maxay Wadaagaan Maraykanka iyo Mudug? ........ 181
67. Baranbarada Canada iyo Burcadda Congo ........ 184
68. Boqol Boqol Boosaaso ........ 185
69. Maktabado Camiran iyo Miisas Cidlo ah ........ 187
70. Danbi-baarihii ila Dardaarmay ........ 189
71. Qado iyo Qarannimo ........ 191
72. Barakada Obama iyo Abaabulka Bulshada ........ 193
73. Qaladaadka Aqoonta Qallalan ........ 195
74. Qaab-dhismeedka Qalbiga Farmaajaysan ........ 198
75. Dooddii Diyaaradda ........ 200
76. Waalida iyo Wareerka Waddaniyiinta ........ 202
77. Dhaxalkii Xerownimada ........ 204
78. Libintii Laangabyada ........ 206
79. Farmaajo iyo Foolxumeynta Federaalka ........ 210
80. Garashada iyo Gefafka Guulwadayaasha ........ 213

**Cutubka Afaraad: Diinta Islaamka iyo Fahamka Nolosha ..... 216**

81. Bandhiga Diinta iyo Duruufaha Bulshada! ........ 216
82. Sumcadda Islaamka iyo Su'aalaha Sayniska ........ 219
83. Is Bar-Bardhig: Diinta iyo Shaqsiyadda Qofka ........ 222
84. Qadarta Ilaahay iyo Qorshaynta Nolosha ........ 227
85. Cilmaaniyiinta Cusub iyo Cabsida Carruurta ........ 231
86. Karaamada iyo Kartida Kabanka ........ 233
87. Heesaha Iyo Hannuunka Nolosha ........ 235

**Cutubka Shanaad: Khalaawada Qalinka iyo Quruxda Nolosha ........ 239**

88. Sheekadii iyo Shaxaadkii Shinbirka ........ 239
89. Cabashadii iyo Cashadii Shinbiraha ........ 240

90. Farriintii Fududayd ........ 243
91. Qalbi Xab-xabkii Xanaaqay ........ 245
92. Madaxbannaanida Malaa'ikta, Maalqabeennada iyo Mukulaalaha . 247
93. Khilaafkii iyo Qirashadii Khudaarta ........ 250
94. Qushuucii iyo Qosolkii Quraanjada ........ 252
95. Shaydaanka ma soo galaa Facebook ........ 254
96. Wareerka Gabdhaha iyo Gad-gaddoonka Wiilasha ........ 257
97. Warqaddii lagu Furay Waddada ( Sheeko Gaaban) ........ 260
98. Geeridii Gaashaanle Githeri (Sheeko Gaaban) ........ 263
99. Dareenka Awliyada iyo Amniga Diyaaradaha ........ 265
100. Quruxda Dhimashada ........ 267

# Hordhac

Waqtigii aan yaraa waxaan ahaa wiil muran badan oo jecel in fekradaha maskaxdiisa ka guuxaya la wadaago dadka ka waaweyn. Muddo markii aan murmayay ayaan ogaaday in muranka macno badan lahayn waayo qof walba qumanihiisa ayaa qoorta ugu jiri doona illaa qiyaamaha laga gaarayo. Maadaama maskaxdayda marwalba mashquul ahayd, murankii lagu nafisi lahaana macno darro noqday, waxay noqotay in dhanka qoraalka aan ka wardoono isla markaana aan qoro qalad iyo sax waxa aan ka fekerayo markaas.

Wixii ka danbeeyay sannadkii 2004 illaa hadda waxaa si joogto ah u qorayay maqaallo kala duwan oo ku saabsan mawduucyo cilmi ah oo aan xiisayn jiray iyo duruufaha u gaarka ahaa nolosha guud ee Soomaalida. Maqaalladaas waxay gaarayaan boqollaal, waxaana ku jira qaar badan oo muujinaya in garaadkayga wali si fiican u qaan gaarin markii aan qorayay. Culumada nafsiga waxay qabaan in qofka dhallinyarada ah inta uu ka gaarayo da'da 25 sanno in koriinshaha maskaxdiisa wali si fiican u cago dhiganin!

Dhanka kale, maqaalladaas waxaa ku jira qaar badan oo tilmaamaya in aan xiiseeyo falsafadda, cilmiga bulshada, cilmi nafsiga iyo, fahamka diinta iyo khalaawada qalinka. Waxaa laga yaabaa maqaallada ku saabsan mawaadiicdan in aan qoray markii caqligayga cago dhigtay oo da'da 25 sanno aan dhaafay. Hadda oo la joogo da'dii aan ka tallaabi lahaa xadka u dhaxeeya dhallinyarada caadiga ah iyo dhallinyarada cuslaatay, waxaan go'aansaday in maqaalladaas aan ku uruuriyo buuggan la magac baxay: Boqol Maqaal iyo Barakada Qalinka!

Akhristasha sharafta leh wuxuu buuggan ugu tagi doonaa shan cutub oo kala madax bannaan. Cutubka koowaad waxaa lagu uruurriyay maqaallo la qoray waqtiyo kala duwan balse ku midoobay dallada falsafadda iyo fahamka cilmiga casriga ah ee sayniska. Sidoo kale, cutubka labaad ee buugga waxaa loo gaaryeelay maqaallo muujiyana qiimaha caqliga iyo dhaxalka cilmi nafsiga! Dhanka kale, cutubka saddexaad ee buugga waxaa ku bahoobay maqaallo xiliyo kala duwan dhashay balse ku abtirsada bahweynta cilmiga bulshada iyo siyaasadda Soomaaliya.

Dhinaca kale, cutubka afaraad waxaa isku bahaystay maqaallo aan badnayn balse qaraabo hoose ah kuwaas oo u taagan difaaca diinta islaamka iyo fahamka fudud ee nolosha. Ugu danbayntii, cutubka shanaad ee buugga waxaa xaflad sagootin ah loogu qabtay qoraallo muddo ku soo jiray khaalawada qalinka isla markaana muujiyay quruxda iyo xikmadda nolosha!

Ujeeddada ugu weyn ee buuggan waa in akhristaha sharafta leh uu helo buug ay ku uruursanyihiin mawaadiic kala duwan oo maskaxda fakeraysa ku jimicsan karto marka ay ku caajisto mashquulka iyo maalayacninga nolosha.

Waxaan ka afeefanayaa in buugga qalladaad badan oo xagga qoraalka iyo fekerka ah ku jiri karaan maadaama uu ka koobanyahay maqaallo waqtiyo kala duwan la qoray. Waxaan rajeynayaa in akhristaha sharafta ila wadaagi doono naqdinta khaladaadkaas si daabacaddaha danbe ee mustaqbalka looga saxo. Akhris wacan!

# Cutubka Koowaad: Falsafadda iyo Cilmiga Sayniska

## 1. Falsafadda Libaaxa

Marka caqli xor ah loogu kuur galo sida ay nolosha ku socoto waxaa kuu so baxaya caddaalad darro weyn oo nolasha ka jirta. Nolosheenna waxay ku xidhantahay dhimashada iyo cunidda nafley kale oo badan. Boqortooyada Geedaha “Plantae “oo ayadu cuntadeeda sameysata marka laga reebo, dhammaan noocyada kale ee noolaha ee aynu ka mid nahay, waxaan tamar ka helnaa cunidda noole kale. Tusaale ahaan Bakteeriyada ilma aragtada ah, waxay ku noolyihiin waxa ay ka calafasadaan jirka bani’aadamka iyo oogada xoolaha kale oo dhammaantood ka wada mid ah boqortooyada waxa Afka qalaad lagu dhaho “Animalia”.

Ugaarsi yaab leh oo arxan daran ayaa ka dhex socda noolaha dhexdooda si ay u helaan tamar ay dheefsadaan taas oo ah sida kaliya ee ay ku sii noolaan karaan. Qoraalkan kooban wuxuu isku dayi doonaa in uu soo bandhigo Falsafadda libaaxa laga baran karo ayadoo laga jawaabayo su’aalahan ah: “Waa maxay sababta dadku u cunaan ama u ugaarsadaan qayb ka mid ah xoolaha ayagoo ka caaggan ama u arka xaaraan xoolaha qaarkood?

Dhammaan dhaqamada iyo diimaha bulshooyinka adduunka ku nool, waxaa ka dhaxeeya hal xaqiiqo oo yaab leh, xaqiiqaduna waxay tahay ma jiro dhaqan ama diin ay u fuddudahay in ay ugaarsadaan ama xalaaleeyaan cunidda hilibka Libaaxa. Xaqiiqadan waxay innaga caawinaysaa in aan jawaabo cilmi iyo caddeymo ku dhisan u helno su’aalaha kor ku xusan. Dhammaan xoolaha la cunno, iyo kuwa la ugaarsado waxay ka siman yihiin garaad hooseeyn ama waxa Afka qalaad lagu dhaho “ Low intillegence”.

Dhammaan nafleyda nasiibka u helay garasho ay ku fahmaan halista deegaanka iyo nolosha ku lammaansan sida Libaaxa, Wiisha iyo Maroodiga, waxay noqdaan kuwo laga caaggan yahay oo dhaqamada iyo diimaha qaar lagu xaaraantinnimeeyay in la cunno ama la dhaqdo. Xoolaha qalbiga wanaagsan ama daacadda ah sida Idaha iyo Riyaha waxay halis ugu jiraan in barqo cad la qasho ayadoo loogu marmarsiyoonayo in ay yihiin xalaal Eebbe weyne ugu tala galey in la dheefsado.

Waxaa jirta oraah caan ah oo sidan loo adeegsado “Kani waa doqon, waa hore ayaa la qalan lahaa, ee ilkaha sare ayaa xaaraantinnimeeyay”. Hadalkan wuxuu caddeyn u yahay in dhammaan doqomada iyo wixii garashadoodu liidato la soo qalan jirey ka dib na hilibkooda la solan jirey ama la shiilan jiray

Sidoo kale hadalkan waxaa lagala soo dhex bixi karaa dhammaan noolaha ilkaha sare ama miciyaha leh in laga cabsan jirey oo aan lagu dag- dagi jirin qalashadooda.

Aqoonyahannada u kuur gala cilmi- nafsiga bulshada "Social Psychology" waxay ogaadeen arrin ka yaabisay oo tusaale cilmi ah loogu soo qaadan karo xiriirka ka dhaxeeya dadka iyo xoolaha. Waxay cilmi baaris ku ogaadeen in xoolaha ama dadka loo arko in ay garasho ama tabar yaryihiin in waligood taariikhda nolosha ku dulmanaayen. Tusaale ahaan, muddo aan sidaas u sii fogeyn, waxaa dunida dhaqan ka ahaa in qof ku doodo ama sheegto in uu hanti ahaan u leeyahay xero ay ka buuxaan dad addoomo ah iyo xoolo kala duwan.

Libaaxa oo lagu naaneyso boqorka xayawaanka, wuxuu si fudud ku ogaadey halista ay leedahay noloshan caddaalad darida ku dhisan. Wuxuu fahmey sida kaliya ee uu ku badbaadi karo in ay tahay in garasho dheeri ay feejignaan la socoto uu noloshiisa ku dabaro. Intii aan lagu cunin, waa in aad wax cuntaa, falasafad noocaas ah ayuu libaaxa noloshiisa ku dabartaa. Geesinnimo iyo xeelad aan innaba caadi ahayn ayuu ka dhaxley libaaxa falsafaddan qiimaha badan. Waddo kale oo libaaxa u bananaanayd ma aysan jirin haddii kale waa hore waxaa dhici lahayd in dhaqamada ama diimaha qaar lagu xalaaleen lahaa cunidda hilibkiisa. Waxaa la hubaa haddii dhurwaaga maskiinka ah ee Wahaabiyadu ku qasheen Koonfurta Soomaaliya uu sida libaaxa u fakeri lahaa, in waa hore kutubta lagu sheegi lahaa in uu xaaraan yahay cuniddiisa. Nacasninada iyo fuleynimada isbarkan ee dhurwaaga ayaa sababtay in Wahaabiyada ku dhiiradaan cuniddiisa!

Wixii ka danbeeyay burburkii dawladnimada, dadka Soomaaliyeed waxay ku sifoobeen liidnimo iyo taagdarri aad u daran. Arrintan waxay bulshooyinka iyo dawladaha adduunka u fasirteen in Soomaalidu yihiin dad garasho liita oo doqomo ah oo aan fahmi karin halganka nolosha ka socda, waana taas sababta ka danbeysa in qofka Soomaaliga lagu ugaarsado meel kasta oo adduunka lagu arko. Soomaalida ku silicsan geeska Afrika iyo dacallada adduunka, waxay wax badan ka baran karaan falsafadda libaaxa oo ah falsafad barako badan oo la hubo in lagu liibanayo. Libaaxa wuxuu ogaadey in adduunka aysan ka jirin sharci, caddaalad, naxariis iyo waliba damqasho. Dhammaan sharciyada, dhaqamada, iyo xeerarka adduunka ka jira waxay u dhisan yihiin in lagu ugaarsado dhammaan noolaha laga dareemo garaad yari iyo tabar darro.

Qalbi wanaagga iyo dabacsanaanta Beelaha laga tirada badan yahay, waayeelka, carruurta iyo dumarka waxay dadka intiisa kale u fasirtaan tabar darri, waana taas sababta dhammaan dhaqamada adduunka ka jira ay ugu dhibban yihiin oo loogu bahdilo. Sida kaliya ee ay uga hortagi karaan dhibaatooyinka haysta waa in ay wax ka bartaan falsafadda Libaaxa uu ku soo caano maaley intii la soo noolaa. Dhaqatarkii caanka ahaa ee cudurrada Maskaxda, Dr Frantz Fanon, wuxuu ku dooday in dadka la adoonsaday sida kaliya ee ay caafimaadkooda

maskaxeed iyo gobanimadoodii ay ku hanan karaan ay tahay in ay dagaal lagu riiqmo la galaan kuwii gumeesan jiray.

Akhirstaha qiimaha badan wuxuu is waydiin karaa su'aashan garta ah: "Sidee noloshu noqon doontaa haddii dadkii iyo xoolihii oo dhan ay wada noqdaan Libaaxyo?" Qof si dhab ah uga jawaabi kara su'aashan ma jiro, balse waxaa la hubaa in mar walba ay noqon doonto nolol dhaanta noloshan caddaalad darrada ku caan baxdey ee lagu qasho xoolaha daacadda ah, laguna adoonsado dadka tabarta daran. Qoraalka waxaan ku so gabagabeynayaa oraahdii caanka ahayd ee hoggaamiyihii dawladdii Fajiistaha ee Talyaaniga, mudane Benito Mussolini. Mudane Mussolini wuxuu ku dooday in hal maalin oo sida libaaxa loo noolaado ay ka fiicantahay ama ka barako badan tahay boqol sano oo sidii Idihii loo noolaado!

## 2. Suuleey: Faylasuufkii la Toogtay

Waqti ka mid ah yaraanteydii waxaan qaxooti ku aha magaalada Kismaayo oo ah magaalo barakeysan marna si u bahdilan. Waqtigaas magaalada- Kismaayo, waxaa ku soo qaxay dad badan oo laga soo barakiciyay magaalo madaxda waddanka ee Muqdisho. Intii aan Kismaayo ku sugnaa ayaan si kadis ah waxaan ula kulmay nin faylasuuf ahaa oo xog iyo xikmad badan ka hayay arrimo badan oo xiiso lahaa markaas. Qoraalkan kooban, waxaan aqristaha kula wadaagi doonaa: qaabkii iyo goobtii aan ku bartay faylasuufkaas; casharadii falsafadaysnaa ee aan ka bawsday; iyo sida fikradihii iyo xikmadihii aan ka bartay ay iiga caawiyeen waxbarashayda sare.

Maalin anigoo maqaayad buush ah shaah ka cabbaya ayaa waxaa i maagay labo nin oo dhankeyga midig fadhiyay. Sababta ay igu maageen waxay ahayd, in aan ahay wiil yar oo waqtigiisa luminaya oo intii uu dugsi ama iskool aadi lahaa odayaal ka waaweyn dhex fadhiya. Aad baan uga xumaadey sida ragaas ay balwadeyda u so faro gashadeen. Nasiib wanaag intii aysan hadalka dhammeynin, waxaa u jawaabey, oday taagnaa oo kursi uu ku fadhiisto raadinayay. Odaygaas wuxuu igu difaacay hadal sidan ahaa: "Muxuu wiilka dugsi iyo meel kale ba aadaa, sow tan raggiina meesha ku qayilaya aad wadankii oo idil burburiseen oo dalkiiba laga qaxayo. adeer shaahaada iska cab kuwan adiga ayaa dhaama oo ka mustaqbal fiican, waaba haddiiba aad noolaatid". Raggii intay aamuseen ayaa mid ka mid ah wuxuu yiri" Oo Suuleeyoow wiilkan aan la kaftamayno ma adeer baad u tahay?"

Maalintaas ayay ahayd waqtigii aan la kulmay Suuleey oo ahaa nin falsafadda iyo qayilaadda ku waalan. Faylasuuf Suuley wuxuu ahaa oday sannadda lixdamaadka lugaha la sii galey. Muuqaal ahaan, wuxuu ahaa nin hilboon oo labo lafood ah oo badanaa bakoorad midabkeeda huruud yahay ku xarragooda. Marka laga soo tago, sida uu iiga dhiciyay raggii i maagay,

waxaan judhiiba garashadaydii carruurnimo ku dareemay in uu ahaa nin ka duwan odayaashii badnaa ee sheekadooda aan dhageysan jiray.

Dhowr iyo toban sanno ka dib, ayaan ku baraarugay in maalintaas Suuley igu difaacay waxa afka qalaad lagu dhaho “Sociological imagination” oo ah qaacido saldhig u ah cilmiga-bulshada oo laga soo dheegtay caalimkii weyna mudane C.Right Mills. Ardayda barata cilmiga bulshada waxaa marka ugu horreysa lagu waaniyaa in ay yeeshaan mala-waal bulshadeed “Sociological imagination” si ay maskaxdooda uga helaan sawirka guud ee bulshada ka hor inta aan la darsin muuqaal kamid ah muuqaallada kala duwan ee nolosha bulshada ka muuqan kara. Tusaale ahaan, Suuleey wuxuu fahamsanaa ka hor inta aan la canaanin carruurta sidaydoo kale odayaasha shaaha la caba, in la malawaalo sawirka guud ee bulshada si loo helo qodobbo bulshadaysan “ Sociological factors” ee sababi kara in wiil yar uu balwad ka dhigto sheeko iyo shaah.

Waxaan goob joog u ahaa doodo kala duwan oo faylasuuf Suuley ka qayb qaatey. Inta badan dooddahaas waxay ku saabsanaayeen qabyaaladda, taaariikhda Soomaalida, diinta, xuquuqda dumarka iyo waliba saadaalinta mustaqabalka Soomaaliya. Qodobbada uu Suuleey u adeegsan jiray dooddihiisa way ka duwanaayeen muranka macno darrada ah ee Soomaalida ku caan baxeen. Suuleey wuxuu ahaa nin cod kar ah oo xubinta hadalka heli og, qodob walbana raaciya caddeymo maan-gal ah oo garashada ku qanci karto.

Waxaa xiiso lahayd sidii uu faylasuuf Suuleey uga qayb qaatey dood ku saabsanayd qabyaaladda Soomaalida ay caabudo. Nin ka mid ah raggii maqaayaddii buushka ahayd fadhiyay ayaa wuxuu na soo dhex dhigay su’aal sidan ahayd: ”Ilma adeerayaaloow, horta Soomaalida qabiilkee ugu doqomo badan. Halmar baa inta la wada qoslay nin walba qabiilka uu sida gaarka ah u necbaa ku tilmaamay in doqomadu ku badan yihiin ciddaas. Si aan la filanaynin ayuu Suuleey uga jawaabay su’aashii. Wuxuu sheegay in doqomadu ku badanyihiin qabiilkiisa oo ragii meesha fadhiyay ka soo jeedeen. Halmar baa raggii caroodeen ayagoo ku qayliyay waa waalidii suuley; mid baaba yiri: War heedhe, Suuleeyow maanta ma bargo’ baad tahay!

Suuleey dooddiisa wuxuu u cuskaday qodob waa danbe aan ogaadey in cilmiga casriga ah oo dhan ka farcamo. Asagoo qoslaya oo laan qaad ah fiiqanaya, ayuu wuxu yiri: war heedhahaya, ma waxaad rabtaan in aad ogaataan cidda doqomadu ku badan yihiin mise qoloda ay fiicnaan lahayd in ay doqomadu ku bataan? Su’aashaas uu Suuleey ilma adeeradiis dib ugu celiyay ayaa ah qaacidada falsafadeed ee lagu kala soofo hadal dhammaantiis marka si falsafadaysn loo falanqeynayo doodaha la isku diidan yahay.

Tusaale ahaan haddii ay su’aashu tahay: qabiilkee doqomadu ku badanyihiin, waa weydiin laga doodi karo oo xaqiiqda cilmiga taariikhda la barbardhigi karo si looga jawaabo. Hadalka noocaas ah waxaa afka qalaad lagu dhahaa “Positive statement” waana su’aalaha uu cilmiga casiriga “ Science” looga jawaabi karo.

Haddiise hadalku yahay qolodee fiicnaan lahayd ama ay ba tahay in doqomadu ku bataan waa weydiin aan guul laga gaarayn oo qof walba jihada uu jecelyahay la beegsanayo. Hadalka noocaas ah waxaa afka qalaad lagu dhaa " Normative statement." Waana hadalka qaybtiisa la xariira qofku wuxuu aaminsanyahay ama jeclaan lahaa in nolosha sidaa ahaato. Waa nooca hadalka ee dagaallada, xanaaqa iyo waliba is maan dhaafka ka dhex abuura dadka.

Haddii su'aasha qaab cilmi ah "Positive statement" looga jawaabo, Suuley wuxuu sheegay ayadoo la fiirinayo dhacdooyinkii siyaasadeed ee Soomaaliya, iyo qaladaadkii taariikhiga ahaa ee dalka ka dhacay, in doqomadu u badnaayeen qabiilka ay ka soo jeedaan raggii meesha ku qayilayay ee uu ka midka ahaa. Sidoo kale maalintaas wuxuu Suuleey sheegay hadal raggii meesha fadhiyay marqaan jabis ku noqday oo ahaa in tolka u badan yihiin rag fulayo ah oo haddana faan jecel!

Waxaan xasuustaa in maalin uu na harowsaday nin waddamada carabaha maalmo ka soo xamaashey. Ninkaas wuxuu ku dheeraaday ka sheekaynta dhaqanka carabta, shaqadiisii iyo magaalooyinkii uu booqday intii uu carabaha ku noolaa. Sheekadiisa wuxuu ku muujiyay sida uu ilbax u yahay. Markii uu sheekadii dhammeeyay, Suuley wuxuu weydiiyay ninkii su'aal uusan filanaynin oo ahayd: adeer immisa jir ayaad tahay? Ninkii ayaa asagoo yaaban yiri: kolley afartankii waxba ii dheer. Su'aal kale oo ku saabsanayd tirada sannadihii uu sacuudiga joogay ayuu Suuleey weydiiyay ninkii markale. " Adeer toban sanno ayaan darawal ka ahaa Sacuudiga" sidaa waxaa yiri ninkii oo koob shaah ah gacanta bidix ku haysta. Suuley intuu qosol la dhacay ayuu ninkii kaga naxsaday hadal sidan ahaa: "Adeer haddaba tobankii sano ee Sacuudiga aad joogtay waad nooga sheekaysee, maxaad noola wadaagi weysay soddonkii sano ee aad geela ku raacaysay baadiyaha hawd ee Itoobiya?"

Waqti dhow ayaan ogaadey in su'aalaha uu Suuleey maalintaas weydiiyay geeljirihii Sacuudiga ku soo ilbaxay in ay ka mid tahay farsamooyinka la adeegsado marka la dhex dabaalanayo farac falsafadda ka mid ah oo afka qalaad lagu dhaho "Dialectical." Faylasuufkii weynaa ee reer Jarmal mudane Hegel ayaa soo shaacbixiyay falsafadda qaybteeda "Dialectical" si loo dhiraandhiriyo isku aadka iyo gunaanadka hadal walba oo mugdi ku jiro si runta looga sal gaaro. Tusaale ahaan, geeljirihii na harowsanayay wuxuu sheekadiisii ku balballaariyay sannadihii koobnaa ee sacuudiga uu joogay si uu muujiyo in uu yahay nin dhul mareen ah oo ilbax ah.

Su'aalaahii la weydiiday waxay soo bandhigeen sannadihii soddomeeyada ka badnaa ee geeljirahu ku tabiyay baadiyaha dhulka hawd. Sidaa daraadeed, sheekadii uu nala wadaagay ma aysan ahayn mid aan kaga bogan karnay taariikhdiisa iyo qofnimadiisa dhabta ah. Dad badan ayaa marka ay dhageystaan sheeko xariir, wacdi diimeed ama khudbad siyaasadeed iska aamina wixii loo sheegay. Dadkaas aad baa loo wareeriyaa, loogana danaystaa. Sida kaliya ee dadkaas feejignaan ku muujin karaan ayaa ah in ay Suuley ka

bartaan qaabka su’aalo falsafadeysan loo weydiiyo qofka noo sheekaynaya, siyaasiga noo khudbeynaya ama wadaadka na wacdinaya si aan sawirka dhabta ah ee mowduuca laga hadlayo u helno.

Waxaa xiiso gaar ah leh aragtida uu Suuley ka qabey guud ahaan ragga diinta ee wadaaddada loo yaqaan. Waxaa dhacdey in maalin maqaayaddii buushka ahayd la keenay sheeko ku saabsanayd dagaal dhex marey Suufiyada iyo Wahaabiyadii waqtigaas Kismaayo ku sugnaa. Dagaalka wuxuu ku saabsanaa mowliidka oo markaas maalmo kooban naga xigeen. Raggii maqaayadda ku qayilayay aad bay ugu xiiqeen doodda mowliidka. Waxay isku jireen rag wahaabiyada taageersan iyo koox la safan suufiyada. Sida caadada ah, Suuley aragti u gooni ah ayuu wadaadadii is hayay ka qabey.Wuxuu sheegay in wadaadada murmaya ay agtiisa kala mid yihiin carruur dagaalantay oo kale marka la eego dhanka garashada ay adeegsanayaan. Sida uu Suuley caddeeyay, carruurta badanaa waxay ku murmaan wax aan muhiimad nolosha u lahayn. Tusaale ahaan, wuxuu xusay Suuley in ragga ku murmaya mowdliid xilli ciidan col ah magaalada Kismaayo dul fadhiyo in ay carruurta meelaha ku ciyaaraysa aysan waxba garasha ku dhaamin!

Nin ka mid ah raggii meesha ku qayilayay oo ka yara xun carruurnimada lagu tilmaamay wadaaddada ayaa Suuleey weydiiyay: “Adeer haddii ay raggu carruur yihiin maxaad salaadaha masaajidka Suufiyada ugu tukataa ?” Intuu qosol la dhacey, si uu xanaaqa ninka ka muuqda u dajiyo ayuu yiri” Adeer suufiyada waa carruur xoogaa edboon oo salaadaha jamaacada ah iyo midda jimcaha lagu xiran karo!” Wuxuu intaa raaciyay in uu waligiis uusan tagi doonin masaajidda wahaabiyada sababtoo ah sida uu sheegay wahaabiyadu waa carruur basar xun oo aan nasiib u helin waalid edbiya. Maalin dhoweyd ayaa anigoo dhageysanaya dood diimeed dhex martay wahaabiyada iyo suufiyada oo ku saabsanayd “Injirta” ayaan soo xasuustay carruurnimadii uu Suuley tilmaamay. In kulan diimeed loo abaabulo dood ku saabsan “Injir” waqtigan aynu ognahay daruufaha adag ee Soomaalidu ku jiraan, ayaa caddeyn u ah carruurnimadii uu dhowr iyo toban sanno ka hor Suuley ku sifeeyay wadaaddadeena meelaha ka qayl qayliya ama isku qarxiya.

Saddexdii sanno ee aan Suuley aqaaney waxaan ka faa’idey hadiyadda ugu qaalisan ee wiil ama gabar yar ay nolosha ku hesho. Waa hadiyadda afka qalaad lagu dhaho “ critical thinking” oo ah in qofku garashada u kaalmeysto fahmida iyo dhiraadhirinta wax walba oo nolosha ku saabsan. Aqoon walba, waayo aragnimo kasta iyo waliba guul walba oo aan loo cuskan “ Critical thinking” waxaa laga dhaxlaa liidnimo iyo gunnimo lagu waaro. Muddo sannad ku beegan markii aan Kismaayo ka soo maqnaa dib, ayaa Suuleey la toogtey. Sida la ii sheegay, nin uusan ka filanayin oo qori watay aya xabado ku furay Suuleey ka dib markii uu la kaftamay. Maalintii aan maqley geerida Suuleey aad baan u argagaxay. Naxdintii geerida faylasuuf Suuleey waxaan kaga nafisay xasuusta dood dhimashada ku saabsan oo Suuleey si falsafadeysan uga qayb qaatey.

Waxaan rajeynayaa in Suuleey jannada kula sheekaysanayo faylasuufkii weynaa Cali Dhuux iyo faylasuufkii kale ee isaga na sidookale alleystay Mudane Cabdullaahi Dhoodaan. Labadaas gabyaa waxay ahaayeen rag uu aad u qaddariyo marka ay timaado dhanka garasho dheerida oo ah xirfad Soomaalida laga habaarey. Way yareyd dood uu ka qeyb qaatey Suuleey oo uusan ku so darin gabayada raggaas.

Sidoo kale Suuleey wuxuu jeclaa fanka iyo heesaha. Mararka qaar asagoo marqaasan ayuu wuxuu cod dheer kula qaadi jiray heesahii laga sii dayn jiray barnaamijka salaamaha ee BBCda. Si gaar ah wuxuu u jeclaa codka halaasiga ah ee fanaankii mudane Tubeec oo sannadkii 2014tii xijaabtay.

Guusha waxbarashada sare “Higher education” waxaa saldhig u ah “Critical Thinking.” Arday kasta oo ku hubaysan hadiyaddii aan suuley ka dhexlay wuxuu ku ka miro dhaliyaa waxbarashada sare. Dad badan oo waxbarasho sare soo qaatey ayaan nasiib u helin in ay helaan hadiyadda qaaliga ah ee “Critical Thinking.” Suuley qudhiisa waxbarasho sare iyo mid hoose ba mid na ma uusan nasiibsan. Wuxuu ahaan jiray sida uu ii sheegay qaadwale ka hor inta uusan musallifin. Mar walba oo aan Suuley la sheekaysto, waxaan xasuusan jiray aayadda qiimaha badan ee qur’aanka ku jirta ee ah “wa man yu’tal xikmata faqad uutiyah kheryan kathiiran” (Albaqara: 269) oo micnaheedu noqonayo: Qofkii la siiyay xikmad waxaa la siiyay Kheyr badan. Runtii waa ayaad ay niyadda ku dhisan karaan dadka sida Suuley oo kale fakera oo garashada u cuskada fahmidda sheekooyinka waalan ee nolosha bar bar socda.

## 3. Xalka Falsafadaysan ee Xanaaqa

Xanaaqa oo ah dareen ku abuuran noole badan ayaa mararka qaar horseeda dhibaatooyin dhaxal xumo reeba. Dadka uu xanaaqa dhaxal siiyay dhibaatooyinka aan dhammaadka lahayn waxaa ka mid ah Soomaalida oo si dirqi ah ugu nool dacallada adduunka. Dood badan kama taagna in qofka Soomaaliga ah marka lagu daro adiga akhristaha ah iyo aniga ba in xanaaqa noo yahay dareen dabiici ah oo nolosha aan ku maareyno.

Maalintii aan garaadsaday ilaa waqtigan la joogo waxaa xasuustayda ku kaydsamay dad tiro badan oo siyaabo kala duwan aan is kugu xanaaqnay. Dadkaas aan is xumaansanay waxaan ula muuqday wax-magarad fuley ah oo shaqo ka dhigtay in hadba uu muran macno darro ah dadka la soo doonto. Dhanka kale, qof walba ama qolo kasta aan isku qaro baxno waxay iigu muuqdeen doqomo aan dan iyo muraad midna ka lahayn guulaha laga gaari karo doodaha maangalka ah (logic).

Sidaas si la mid ah, dadka Soomaaliyeed ee siyaabaha kala duwan iskugu caraysan waxay ku doodaan in qof walba, qofka kale uu daandaansi iyo doqoniimo ula yimid. Haddaba arintan waxaa laga dhaxlay in qalbiga la iska naco ka dib na af iyo adin la iskula tago. Waa taariikh dheer oo looga bogan karo oo kaliya qoraalo cilmi ah oo wax ka qora qaababka kala duwan ee dadka Soomaaliyeed iskugu xanaaqeen. Ilaa hadda xal dhab looma hayo xanaaqa dadka Soomaaliyeed u diiday in ay dareemaan farxada iyo quruxda ku lamaansan nolosha.

Culimada nafsiga ayaa isku dayay in xanaaqa xal u raadiyaan ayagoo uruuriyay cilmi dhan oo gacan ka gaysan kara daweynta carada iyo ciilka. Cilmigaas ay uruuriyeen wuxuu ka koobanyahay talooyin “counseling’ iyo waliba dhiraadhirin dhimireed “ Psychoanalsis” si qofka caraysan loo dajiyo ayadoo la adeegsanayo farsamada dhayida-dhimirka “ Psychotherapy” . Inkastoo Culimada nafsigu dadaaleen, haddana kuma aysan guulaysan in dawo dhammasytiran u horseedaan bukaannada la ildaran xannuunada maskaxa ee laga dhaxlay dareenka xanaaqa waayo waxaan argagnaa dad culimada nafsigu maalmo ay la taliyeen ama daaweeyeen oo muddo ka dib caradii iyo ciilkii qaab sidii hore ka xooggan u dareema.

Sidoo kale, mararka qaar wadaaddada ayaa jeediya wacdi diimaysan oo ku aadan xalka iyo qaababka looga bogsan karo carada iyo ciilka. Sida caanka ah, wadaadadu waxay dadka kula taliyaan in la-acuudu billeysto si sheydaanka dadka isku diray loo naaro, mararka qaarna waxay intaas ku daraan in weyso iyo wardi lagu la dagaalamo carada dhex ceegaagta qalbiyadeenna. Inkastoo wadaaddadu dadaaleen, haddana kuma aysan guuleysan in xal kama danbeys ah u keenaan xanaaqa, waayo sida aan ognahay dadka Soomaaliyeed ee dareenka xanaaqa calanka u sida waxaa hormuud u ah wadaaddada qudhooda.

Tusaale ahaan, waxaa dhacda in wadaaddo xanaaqsan amar ku bixyaan in carada iyo colaada u gaarka ah bulshada lagu dhex baahiyo si loo colaadiyo qofka ama qolooyinka markaas ay qoonsadeen. Sidoo kale waxaa laga warhayaa in wadaaddada qaar, markay caroodaan in qaylo iyo qarax isku daraan qolooyinka markaas ay ku sannifeen. Sidaa daraadeed wadaaddadu xal dhammaystiran uma hayaan xanaaqa, waa haddii lagu dhaqmayo xikmada ku duugan maahmaahda Soomaaliyeed ee tiraahda: qofka aad kabahaada ka tolanaysid, kabihiisa ayaa la eegaa!

Haddaba, su’aasha garta ah waxay tahay: muxuu noqon karaa xalka runta u dhow ee xanaaqa loo heli karo mar haddii wacdigii wadaaddada iyo waanadii culimada nafsiga laga quustay?

Sida qoraalkan ku doodi doono, xalka waxaa laga baadi goobi karaa falsafadda oo ah hooyadii dhashay dhammaan laamaha kala duwan ee cilmiga casriga ah “science.” Falsafaddu waxay caan ku tahay in dube ama burus ku burburiso dhammaan aragtiyooyinka beenta ah ee badanaa dadka u diida in runta nolosha

u dhawaadaan. Sidaa si la mid ah, falsafaddu waxay si madax banaan ku ogaatay in xanaaq oo dhan laga dhaxlo aragtiyooyin kooban oo dadku si guud oo aan ka fiirsi lahayn u aamineen. Qoraalkan kooban wuxuu si guud isku dul taagi doona aragti been ku dhisan oo badanaa horseeda carada iyo ciilka qofwalba farxadda nolosha ka hor istaagi kara.

Dumar iyo rag badan oo u dhuun daloola falsafadda ayaa isku dayay in qaab falsafadaysan loo fahmo sababaha qarsoon ee gadaal ka riixaya dareenka xanaaqa ah. Waxaa jira faylasuuf si gaar ah looga qadariyo golaha faylasuufyada ku murmaan marka ay timaado in dubaha falsafadda lala dul istaago dareenka xanaaqa. Odaygan faylasuufka ah waxaa la dhahaa mudane Seneca. Wuxuu ahaa faylasuuf ku dhashey magaalada Cordoba ee dalka Spain sannadii 1AD. Waqtigii uu barbaarka ahaa mudane Seneca ayuu ku baraarugay waxyeelada xanaaqu u geystay dadka iyo deegaankii uu ku noolaa markaas.

Tusaale ahaan, mar uu shaqaale iyo waliba siyaasi ka ahaa dawladdii Romanka ee talinaysay waqtigii uu noolaa ayuu wuxuu la kulmay dhacdooyin badan oo laga dhaxlay xanaaq xawaare sare ku socda. Noloshii waqtigaas waxay ahayd mid qalafsan oo dhan walba oo laga eego qatar kaga gadaamantahay. Cudurro, colaado, iyo waliba abaaro ayaa dawladdii Romanka waqtigaas la daalaa-dhacaysay. Noloshuna waxay ahayd mid dirqi ah oo tan dugaagga aan waxba dhaamin. Waxaa intaa sii dheeraa in Seneca dhallinyaronimadiisii ku dhammeystay dhibaatooyin u gaar ah oo aan ka xusi karno xanuuno badan sida: qaaxo (TB), taasoo nolosha la qeybsatay.

Sidaa daraadeed, waqtigii uu noolaa mudane Seneca waxaa jiray inta badan sababo u muuqan kara maangal oo qof walba ka xanaajin kara. Duruufihii qalafsanaa ee waqtigaas taagnaa wuxuu mudane Seneca ka dhexlay quus iyo qulub qarka u saartay inuu nafta iska qaado “Suicide.” Qulubkii iyo qalbi jabkii qabsaday mudane Seneca waxay qasabtay inuu qoro buuggaag labaatameeyo gaaraaya oo dhammaantood soo gudbinaya talooyin taabo gal ah “ Practical” oo qofka ka heli karo qaababka ugu habboon ee looga dabaalan karo badweynta qalafsan ee nolosha. Qoraal caan ah oo loo gaaryeelay waxyeelada uu leeyahay dareenka “Xanaaqa” ayuu duq Seneca dhaxal ahaan uga tagay jiilasha dhalan doona ilaa qiyaamaha laga gaarayo.

Nuxurka doodda buuggan ayaa ah in xalka kaliya ee xanaaqa loo hayo uu yahay faham falsafaddaysan oo ku aadan aragtida beenta ah ee gadaal ka riixaysa dareenka xanaaqa. Seneca wuxuu ku dooday in dadku badanaa aysan ku qaldanayn in xanaaq dartii la qarxaan. Dooddiisan wuxuu ku diiday aragtida ku baaqaysa in xanaaqa loo arko dareen qaldan oo qof walba laga doonayo inuu la dagaalamo.

Oday Seneca wuxuu la soo shir tagay dood ku baaqaysa sidan: intii xanaaqa dadka laga la talin lahaa ayagoo sida carruurtii la sasabayo sida ay qabaan culimada nafsiga ama dadka laga wacdin lahaa xumaanta carada iyo ciilka ayada oo dadka loo tusinayo in caradu tahay dab uu shaydaan shiday, waxaa ka habboon kana fudud in aragtida qaldan ee xanaaqa ka danbaysa lagu burburiyo dubaha falsafadda.

Baaritaan badan oo lagu barbarwaday baraarug joogtaysan ka dib, mudane Seneca wuxuu hoosta ka xariiqay in xanaaq dhammaantii uu ka soo askumay aragtida aan maangalka ahayn “Irrational “ ee badanaa dhammaan aadanaha u aaminsanyihiin si toos ah ama si dadban. Aragtidan beenta ah ee dadku badanaa aaminsan yihiin ayaa ah mid ku baaqaysa in nolosha laga fisho wanaag, laguna dadaalo sidii lagu gaari lahaa guul iyo gobanimo. Aragtidan waxaa afka qalaad lagu dhahaa “Optimisim”.

Haddii filashada noocaas ah aan dooddo falsafadaysan laga furin, mudane Seneca wuxuu qabaa in xanaaqu noqon doono xalka kaliya ee nolosha lagula xariiftamo. Waxaa yaab leh in mudane Seneca uusan xanaaq iyo calool xumo midna u muujinin markii dawladdii Romanka ku xukuntay inuu is dilo asagoo adeegsanaya toorey. Murugo iyo muraaro dilaac ayay dareemeen ehelka iyo asxaabta mudane Seneca markii ay maqleen xukunka caddaalada ka fog ee lagu riday. Mudane Seneca wuxuu ehelka iyo asxaabta ka dalbaday inay is dajiyaan waayo xukunka maxkamaddu riday waa mid ka mid ah nacasnimada laga filan karo maamullada ay madaxda ka yihiin doqomadu!

Dadka badanaa barwaaqo iyo bashbash kaliya ka fisha nolosha waxay la qarxaan xanaaq laga argagaxo marka ay ku baraarugaan in runta nolosha tahay mid ka fog fayoobi iyo waliba farxad joogtaysan. Dadka fahamsan runta nolosha badanaa waxay ku baraarugsan yihiin in dhabnimada noloshu tahay sida ay tibaaxayso maahmaahda Soomaaliyeed ee tiraahda: Noloshu waa harka labadiisa galin. Haddii maahmaahdan lagu kaabo dooda falsafadaysan ee mudane Seneca, waxaa muuqanaysa in badanaa dadka aalaaba caraysan yihiin dad aan doonayn in ay ku noolaadaan harka labadiisa galin.

Tusaale ahaan, qof baa wuxuu ku farxayaa wanaag uu qof ama xaalad jirta markaas uu kala kulmay asagoo filanaya in wanaaggaas noqon doono mid joogtaysan. Galinka danbe marka la gaaro ayaa waxaa la arkayaa qofkii faraxsanaa oo xanaaq dartii la niyad jabsan waayo wuxuu xumaan iyo nacasnimo ku arkay shaqsigii ama xaaladdii uu la dhacsanaa galinkii hore ee maanta! Sida uu ku doodayo Seneca, xalka falsafadaysan ee qofkan xanaaqsan loo hayo wuxuu noqon karaa baraarug ku aadan in xaaladaha iyo waliba dadka aan laga filanin wanaag oo kaliya, balse la soo dhaweeyo laguna qanco marka nolosha noo dhigto qob moos ka dhigan dhibaato lama filaan ah, waayo xumaanta iyo wanaagu waxay ka dhigan yihiin harka labadiisa galin oo kale.

Dadka la dagaalama ama ka xanaaqa xumaanta iyo nacasnimada ku lamaansan nolosha iyo xaaladaha taagan waxay ku jiraan dagaal gacmo daalis ah waayo waxaysan fahmin dabciga iyo duruufaha dhabta ah ee nolosha.

Maadaama qoraalka nala fogaaday, waxaa habboon in aan ku soo gunaanado sida doodan falsafadaysan ee mudane Seneca aan ugu xaliyay xanaaq ii gaar ahaa, ayada sidoo kale dooddu iga caawisay inaan la tacaalo caro iyo ciil aan muddo badan bahwadaag ahayn. Muddo dheer ayaan waxaan aaminsanaa labo aragtiyood oo aan maangal ahayn kuwaas oo badanaa ii horseedi jiray in waqti badan oo qaali ah aan ku tabiyo caro iyo ciil aan macno badan lahayn. Labadaas aragtiyood waxay kala ahaayeen: in dumarka iyo ragga la isku abuuray sidii ay iskugu xasili lahaayeen; iyo in dadka Soomaaliyeed yihiin qawmiyad qatar ah oo qaranimadoodii qiimaha badnayd ka dumiyeen cadow guun ah iyo quruumo qarsoon.

Aragtida koowaad ee ku baaqaysa in dumarka iyo ragga la isku abuuray sidii ay isku xasili lahaayeen waxaan ka dhaxlay xanaaq badan waayo marwalba waxaan arki jiray dumar iyo rag is doortay sidii ay iskugu xasili lahaayeen, balse buuq iyo bara kac joogto kala kulmay damacoodii ku aadanaa baadigoobka xasilloonida. Markii aan ku baraarugay in ragga iyo dumarka aan loo abuurin xasillooni joogto ah waxaan xal falsafadaysan u helay xanaaqii macno darada ahaa anigoo ku qancay inta qiyaamaha laga gaarayo in damaca dhex mara dumarka iyo raggu yahay mid danaysi ah oo isku baddala sida harka labadiisa galin ayadoo la eegayo duruufaha ka jira deegaanka markaas lagu noolyahay.

Aragtida labaad ee beenta ah waxay ku baaqaysaa in Soomaalidu tahay qawmiyad qatar ah oo qaranimadoodii qiimaha badnayd ka dumiyeen quruumo qarsoon oo cadow ah. Markii aan aaminsanaa aragtidaas beenta ah, waxaan marwalba ka xanaaqi jiray silica iyo dhibaatada ka muuqda nolosha qof walba oo Soomaali ah marka lagu daro adiga akhristaha ah iyo anigaba. Doodda mudane Seneca ayaa iga caawisay in aragtidaas aan ku ifiyo toosh falasafadaysan, dabadeedna aan ku baraarugo sida ay bug u tahay aragtida aan ka aaminsanahay burburki ku dhacay qaranimada Soomaaliya.

Baaritaan badan oo ku saabsan Sooyaalka Soomaalida waxaan ku qancay in Soomaalidu tahay qawmiyad xoolo dhaqato ah oo taariikh aan u lahayn qaranimo iyo maamul dawladeed. Dhaqanka xoolo dhaqatada Soomaaliyeed waxaa laf dhabar u ah qabyaalad gaarsiisan in oday labadiisa bahood is bahdilaan. Sidaa daraadeed, xanaaqii badnaa ee ku saabsanaa burburkii ku dhacay qaranimada Soomaaliya waxaa ii baddalay qosol iyo qaraaxo joogto ah, waayo marwalba waxaan siyaasadda Soomaaliya ka daawadaa qabylaaddii dumisay qaranimada oo adeegsigeeda dib loogu baadigoobayo qaranimo cusub.

Haddii loo fiirsado doodda mudane Seneca waxaa suurta gal ah in si fudud lagu fahmo aragtiyooyin badan oo been ah kuwaas oo si aan ka fiirsi lahayn loo

aaminay, dabadeedna laga dhaxlay xanaaq joogto ah. Waxaa hubanti ah in xanaaq walba oo la dareemo si fudud lagu xalin karo haddii farsamo falasafadaysan lagu furfuro aragtida beenta ah ee gadaal ka riixaysa dareenka xanaaqa. Tusaale ahaan, waalidiin badan oo Soomaaliyeed ayaa ciil iyo caro badan dhaxlay ka dib markii carruurtii ku caasiyeen. Xalka falsafadaysan ee waalidiinta caraysan loo hayo ayaa ah faham falsafadaysan oo ku baaqaya in Ubad ku barbaaray burbur iyo barakac aan laga filan karin baarrinimo joogto ah!

**Tixraac:** Lucius Annaeus Seneca. “On Anger.” *Moral Essays*. Vol. 1. Trans. John W. Basore. London: W. Heinemann, 1928.
http://www.sophiaproject.org/uploads/1/3/9/5/13955288/seneca_anger.pdf

# 4. Falsafadda Lacalla

Faylasuuf reer Jarmal ah oo lagu magacaabi jiray Hans Vaihinger ayaa bilowgii qarnigii labaatanaad qoray buug la magac baxay: (The Philosophy of 'As if': A System of the Theoretical, Practical and Religious Fictions of Mankind oo Af Soomaali ku noqonaya: Falsafada Lacalla: Qaababka Feker, Farsamo iyo Mala-awaalka Diimaha ee Aadanaha. Doodda ugu weyn ee odaygan reer Jarmal soo gudbiyay ayaa ah in dadku aysan marnaba ogaan karin xaqiiqda dhabta ah ee jiritaankooda iyo sirta nolosha. Sidaa daraadeed, dadku waxay mala-awaalaan hanaan feker iyo farsamooyin u fududaynaya in ay u dhaqmaan sida in ay runta iyo ujeedada nolosha ogyihiin oo kale.

Nuxurka doodda falsadafadaysan ee mudane Hans Vaihinger, waxaa ayadoo faahfaahsan laga heli karaa riyaawadii Lacalla ee ay hal-abuureen marxuumiinta kala ah Jeyte iyo Ilkacase taasoo lagu soo bandhigay Muqdisho bilowgii sagaashanaadka. Sida riwaayada Lacalla ku jirta, Ilkacase iyo Saaxiibkiis Jeyte waxay dhisanayaan sheeko Lacalla ah oo aad u macaan. dabadeedna sheekadii ayay isku dagaalayaan ayagoo hilmaamaya in sheeko dhalanteed ah oo Lacalla ah u socotay. Mar danbe ayay xasuusanayaan in waxa ay ku dagaalamayaan ay tahay sheeko mala-awaal ah oo daqiiqado ka hor hawada ka hal-abuureen.

Oday Hans Vaihinger wuxuu buuggiisan ku soo bandhigayaa in dhammaan dhaqamada iyo taariikhihii hore oo dhan yihiin sheekooyin mala-awaal ah oo lagu saleeyay falsafadda Lacalla.

Dhanka kale Ina Vaihinger, wuxuu ku dooday in Falsafadda Lacalla aadanaha ku soo caano maalay waayo waddo kale oo furan ma jirin maadama bani'aadamku dhex dabaalanayo badweyn doqonnimo iyo aqoon daro ah. Waa tii lagu maahmaahay, cayri caymo ma diido, Hans Vaihinger wuxuu

akhristayaasha la wadaagayaa sida Falsafadda Lacalla aadanaha uga caawin karto safarka dhibta badan ee nolosha.

Falsafadda Lacala waxay ku doodaysaa in qofku u dhaqmo sida asagoo og runta nolosha iyo dhabnimada naftiisa. Mar haddii aadan si cilmi ah u ogaan karin meesha aad ka timid asal ahaan iyo halka aad u socotid mustaqbalka, waxaa maangal ah inaad ku dhaqantid sheekooyinka laga qiimeeyo dhaqankaada, adigoo ka soo qaadaya in run yihiin oo kale si noloshaada ujeedo iyo ka jeedo u yeelato.

Tusaale ahaan, mar haddii aadan hubin in aad ahlu janno tahay iyo inkale, waxaa fiican inaad u dhaqantid lacalla in Janada aad ka macsuuman tahay oo kale. Dhanka kale waa inaadan colaadin ama aadan ku jihaadin dadka Lacala aad u maleenaysid in ay ahlu-naaryihiiin waayo sheekada waxay la mid noqonaysaa dagaalkii lacalla ee dhaxmaray Jeyte iyo Ilkacase oo kale!

Soddonkii sanno ee la soo dhaafey, Soomaalida waxaa ku adkaatay in ay fahmaan nuxurka dawladnimada iyo danta siyaasada casriga ah laga leeyahay. Sidaa daraadeed, waxaa fiican in qoraalka aan ku soo gunaanadno casharada laga baran karo falsafadda Lacalla, si loo helo siyaasad laga yaabo in lacalla ay xasisho mustaqbalka. Tusaale ahaan waxaa marqaati ma doonto ah in madaxda iyo siyaasiyiinta Soomaalida ee waqtigan jooga ay matalaan calooshooda iyo carruurta ay dhaleen oo kaliya.

Haddaba si loo yareeyo dhibaatada dabo dheeraatay ee dawlad la'aanta, waxaa habboon in madaxda dawladda federaalka iyo dawlad-goboleedyada laga soo qaado lacala inay yihiin madaxdii qaranka dabadeedna loola shaqeeyo sida madax la doortay oo dadka matala oo kale. Haddii sidaa la yeelo, falasafadda lacalla waxay sheegaysaa in si fudud looga dabaalan karo colaadaha iyo dagaallada dabo dheeraaday ee Soomaaliya ka socday muddooyinkan.

## 5. Gurmad Ehelnimo iyo Aragti Falsafadaysan

Nolosha aadamiga waxaa ku lammaansan musiibooyin dabiici ah iyo xaaladdo argagax leh oo marwalba ku habsada habsami-usocodka nolosha. Fasiraadaha laga bixiyo sababaha ka danbeeya musiibooyinka dabiiciga ah way kala duwanyihiin, waxaana lagu jaangooyaa hadba dhaqanka ka jira deegaanka ay musiibadaas ka dhacday.

Qoraalkan kooban waxaan ku ogaan doonnaa in sawirka iyo fasiraadaha laga bixiyo guud ahaan dhibaatooyinka dabiiciga ah ee nolosha barbar socda in ay tahay asalka quruxda iyo fool-xumada nolosha. Haddii si fudud aan u

sharaxo,waxay noqonaysaa sidan: quruxda iyo fool-xumada nolosha waxay ku xirantahay hadba micnaha iyo tilmaanta laga qaato daruufaha dabiiciga ah ee nolosha aadanaha ku gadaaman. Sidoo kale qoraalkan kooban, wuxuu qayb ka yahay gurmadka iyo gargaarka loo fidinayo xigtada iyo qaraabada ku waxyeeloobay musiibadii dabiiciga ahayd oo ka dhacday Dhul-Udug "Puntland." Ujeeddada ugu weyn ee qoraalkan waa in aan gurmadka ehelnimo ee Dhul-Udug aan uga qayb qaato aragti falsafadaysan oo sawir iyo tilmaan ka bixisa daadadkii iyo roobabkii dadka iyo duunyada ku wax yeelloobeen.

Barnaamij muuqaal ah oo laga diyaariyay gurmadka isdaba jooga ah ee deegannadii musiibada ka dhaceen ayaa igu dhaliyay dareen aan waligey hadda ka hor dareemin. Waa dareen ku qotoma qabyaalad oo qofkasta ah oo Soomaali uu Rabbi ku abuuray. Waxaan aad uga naxay sawirka iyo fasiraadaha laga bixiyay musiibadaas dabiiciga ah iyo sababahii ka danbeeyay. Micnaha iyo tilmaamaha laga bixiyay sababahii musiibada keentay ayaa ah kuwo niyad jab ku abuura qof kasta oo aragti falsafadaysan nolosha ka haysta. Sidoo kale waxaa murugo ah talooyinkii laga bixiyay qaababka ugu habboon ee loola tacaali karo musiibadaas. Sidaa daraadeed waxaan go'aansaday in sawir iyo fasiraad falsafadaysan aan uga qayb qaato gurmadka iyo hiilka socda.

Falsafadda waxaa lagu qeexaa sidan fudud: Waa raadinta runta iyo xikmada nolosha. Dadku aad bay iskugu khilaafaan maxaa run ah maxaase been ah. Balse falsafaddu waxay dajisay qaaciddo weyn oo lagu kala ogaado beenta iyo runta. Qaacidaas waxaan ku ogaan doonnaa qaybaha danbe ee qoraalka.

Rag iskugu jira siyaasiyiin, culimo, iyo wax-garad ayaa ka mid ahaa dadkii ka hadley micnaha iyo sababaha ay la tahay in ay ka danbeeyeen musiibadii dhacdey. Intii aan ka maqlay ama aan ka daawaday dadkaas waxay isku raaceen sidan: musiibada dhacday waa mid Rabbaani ah, sidaa daraaddeed dadka Dhul-Udug waa in ay Rabbi u laabtaan oo ay toobad keenaan. Dhanka kale, waxay dadka ugu baaqeen in gurmad iyo taakulo nooc kasta ah dadka lala soo gaaro. Nin ka mid ah raggaas oo mar danbe aan ogaadey in uu ka mid yahay musharaxiinta u taagan xilka madaxweynannimo ee Dhul-Udug, ayaa wuxuu si af-garoocnimo ah u sheegay hadal sidan ahaa "Dadka Reer Dhul-Udug waxaa la idinka doonahayaa in aad Rabbi u laabataan. danbiyada musiibooyinka sababay na aad danbi dhaaf ka weydiisataan ilaahay." Hadalkaas aad baan uga xumaannay haddii aan nahay dadka falsafadda wax uga bilaaban yihiin ee reer Dhul-Udug.

Waxaan is weydiinnay, waa maxay danbiga ay galeen dadka xalaal quudatada ah ee naf iyo moodba ku waayay musiibadii dhacdey.Waa iska dawdarnimo in dad musiibo dabiici ah wax yeelaysay hadal wacdi iyo qiiro ah lala soo dul istaago.

Musiibooyinka dabiiciga ah ma ahan wax caro Rabbi ku yimaada. Sidoo kale ma ahan ciqaab cirka laga soo diray oo dad gaar ah loola dan leeyahay. Nolosha

waxaa ku lammaansan dhibaatooyin badan oo si fudud looga gaashaaman karo haddii garasho iyo aqoon la adeegsado. Garasho kasta iyo aqoon kasta oo aadanaha ku dabaro noloshiisa waxaa laga soo dhiraandhiriyaa “falsafad” oo aan ku soo qeexnay in ay tahay raadinta runta iyo xikmadda nolosha.

Halbeeg asaasi ah “qaaciddo” ayay falsafadda u dajisay baadi-goobka runta iyo xikmadda nolosha. Qaaciddada ay falsafadda runta iyo beenta ku kala ogaato ayaa ah sidan: Aragti kasta iyo aqoon kasta oo dadka ku gaaraan awood ay kaga gaashaantaan ama kula tacaalaan dhacdooyinka iyo musiibooyinka dabiiciga ah ayaa ah runta aan nolosha looga maarmeyn. Sidoo kale aragti walba iyo aqoon kasta oo dadka dhaxalsiisa liidnimo iyo itaaldarri ayaa ah foolxumada iyo beenta nolosha.

Faylasoofkii weynaa ee reer Jarmal mudane **Friedrich Nietzsche** wuxuu is weydiiyay su’aalahan “Waa maxay wanaag, Waase maxay xumaan?” Wuxuu iskugu jawaabay sidan: “ Wanaag waxaa ah awood kasta oo bani’aadamka kaga adkaado itaaldarrada ka muuqata naftiisa iyo noloshiisaba, sidoo kale waxaa xumaan ah liidnimada walba iyo itaaldarro kasta oo ka muuqata deegaanka iyo nolosha qofka!”

Falsafadda waxay aad u bogaadisay cilmiga lagu barakoobay ee Sayniska ka dib markii aadanaha ay ku gaareen awood yaab leh oo ay kaga gaashaantaan halista dabiiciga ah ee nolosha ku gadaaman. Wixii ka danbeeyay markii caqliga iyo dhashiisa cilmiga ee Sayniska la kaashaday, nolosha aadanaha waxay noqotay mid awood badan, sidoo kale sawirka guud ee nolosha aadanaha waxay isku badashey nolol dhan walba uga sarreysa ugana qurux badan noloshii hore ee aadanaha. Haddaba ehelka Dhul-Udug waxay falsafadda ugu laab qaboojinaysaa in wixii ku dhacay aysan ahayn caro iyo musiibo Rabbaani ah, kaliya waxa dhacey waa aqoon iyo itaal darro is barkaday. Haddii kartida iyo aqoonta sayniska la yeelan lahaa si fudud ayaa looga gaashaaman lahaa daadadka iyo duufannada sahlan ee na soo salaamay.

Falsafaddu waxay ku dooddaa asalka xumaanta iyo foolxumada nolosha in ay tahay hadba sawirka laga qaato duruufaha markaas jira. Noloshii aan lagu sawiranin awood iyo aqoon is garabsanaya, waxay yeelataa muuqaal foolxun. Dadka iyo dugaagu na waxay noqdaan kuwo isku darajo ka ah xagga nolosha iyo garashadaba.

Haddii Falsafadda iyo Sayniska aan la kaashan, waxaa dhacaya in lagu argagaxo musiibooyinka dabiiciga ah ka dibna baqdin daraadeed masaajidyada laga buuxsamo ayadoo la maleenayo in caradii Eebbe ay deeganka ku dhacday. Kuwo diinta ka bartay qaybta cabsida ayaa ku doodi doona masaajidkii iyo cibaadadii ayaa wax laga sheegay. Waqti aan kula doodno kuwaas hadda ma hayno, waayo waxaan ku guda jirnaa gurmad ehelnimo iyo talo bixin falsafadeysan. Kaliya waxaan u sheegaynaa kuwaas in ay diinta si fiican u bartaan, waayo Nabi Muxamed NNKH, muslimiinta wuxuu kula taliyay muddo

qarniyaal laga joogo, in ay awood iyo dadnimo yeeshaan. Waa tii uu xadiithka ku lahaa, “Mu’minka awoodda leh ayaa ka kheyr badan Mu’minka daciifka ah” Waqti aan sidaa u sii fogeyn Soomaalida waxay ahaayeen Mu’miniin awood leh oo Ilaahay agtiisana sharaf iyo magac ku leh. Tusaale ahaan, Sannadkii 1974, dawladdii kacaanka iyo shacabkii Soomaaliyeed waxay muujiyeen iimaan awooddiisa lala yaabay kadib markii ay si dadnimo leh iskaga caabiyeen abaartii hororka ahayd ee soo booqatay geeska Afrika. Awoodda iimaanka kuma xirna in masaajidyada rajo la’aan la is dhoobo ayadoo gacmaha cirka loo taagayo. Soomaalida hadda joogta wax ka salaad badan lama arko, haddana wax ka awood liita oo ka tuugsi badan caalamka lama hayo. Soomaalidii hore inta masaajid ku tukata waxaa ka badnaa kuwa salaadaha isbuucii mar jamciya, balse waxay lahaayeen dawlad iyo hay’addo dastuuri ah kuwaas oo u sahlay in burhaanta iimaankooda muuqato.

Ehelka iyo xigtada Dhul-Udug joogta waxaa la gudboon in ay falsafadda u kaashaadaan duruufaha cusub ee deegaanka iyo dadka la soo gudboonaaday. Runtii falsafadda aad bay u amaantaa dadka deegannada Dhul-Udug ku nool, waayo deegaannadooda waxay ka abuureen xasilooni iyo hormar ay ku soo hirteen dad badan oo Soomaaliyeed wixii ka danbeeyay burburkii iyo hallaagi ka dhacay Soomaaliya. Xasilloonida deegaanka Dhul-Udug ka jirta waxaa loo kaashaday garasho iyo dhaqan saaxiib la ah falsafadda. Waqtigan la joogo waa in ay aragti cusub oo falsafadda hormuud u tahay in ay ku eegaan nolosha iyo baahida deegaankooda. Waa in aqoonta iyo sayniska si fiican u bartaan si ay uga digtoonaadaan aafooyinka dabiiiciga ah.

Tusaale ahaan lacagta badan ee masaajidyada la iskugu faano lagu dhisayo, waa in la galiyaa cilmi baaris iyo hay’addaha waxbarashada. Si la mid ah sida ay hormuudka uga yihiin nidaamka federaalka ee Soomaaliya, waa in ay hormuud uga noqdaan aragti falsafadeysan oo lagu la tacaalo dhacdooyinka dabiiciga ah ee ku soo noqnoqda geeska Afrika.

Gurmadkeyga ehelnimo waxaan ku soo gabagabaynayaa talo ku aadan doorashooyina soo socda ee ka dhici doona Dhul-Udug. Waa in aan la dooranin madax markii ay musiibo dabiici ah dhacdo dadka uga hormara masaajidyada cabsi daraadeed. Waa in la doortaa hoggaan fahamsan qiimaha falsafadda iyo cilmiga sayniska ay nolosha aadanaha u leeyihiin. Ragga hadda tartamaya waa in la weydiiyaa su’aalo ku aaddan siyaasadahooda mustaqbalka ee dhinaca cilmiga sayniska iyo falsafadda.

## 6. Falsafad: Kawaankii Fikradaha

Maalmahan waxaa soo badanaya dhallinyarada Soomaaliyeed ee ku wareersan macnaha iyo ujeeddooyinka Falsafad. Waqti kasta dhallinyarada Soomaalida waxay isku wareersanaayeen aragtiyooyin ama aqoon laga qiimeeyo dunida qalaad.

Wareerkaas waxaa sababay in aqoonyahannada Soomaaliyeed aysan dhalinyarada la wadaagin waayo-aragnimo ku saabsan wareerkii ay kala kulmeen waddada dheer ee barashada aqoonta casriga ah. Sidaa daraadeed, qoraalkan wuxuu dhallinyarada ku wareersan fahamka falsafadda la wadaagayaa waayo aragnimo kooban oo ku saabsan baaritaanka iyo barashada cilmiga falsafadda.

Waxaa fiican in cilmi kasta lagu tusaaleeyo muuqaalo laga soo dheegtay luqadda iyo dhaqanka markaas lagu soo dhex bandhigayo cilmigaas. Haddii aan sidaa la yeelin, aqoonta qaarkeed waxaa laga qaadaa wareer ka daran wareerka markaas jira.

Maadaama Soomaalidu hodan ku yihiin xoolaha la dhaqdo, aadna u cunaan noocyada kala duwan ee hilibka waxaa u sahlan in ay fahmaan kaalinta qofka kawaanlaha ah kaga jiro bulshada iyo muhiimadda ay leedahay shaqada xoolo-qalidda.

Qofka xoolaha qala dan iyo heelo kama galo muuqaalka iyo quruxda neefka kawaanka saaran. Mar haddii horay loo soo go'aansaday in neefka la keeno kawaanka hilibka, shaqada kawaanlaha waa inuu hilibka u kala soocaa jiir iyo jeeni dabadeedna lafaha iyo haraga midba meel ku guraa.

Falsafaddu waxay ka dhigantahay kawaankii lagu qalayay firkadaha markaas bulshadu ka aaminsanyihiin nolosha. Ujeedada ugu weyn ee kawaanka fikradaha "falsafadda" laga leeyahay waa in la helo ama la garto aragtida ugu dhow ee si fudud u tilmaami karta xikmadda nolosha.

Qofka faylasuufka ah wuxuu kawaanka saaraa fikradaha iyo aragtiyooyinka bulshada ka aaminsanyihiin nolosha, dabadeedna wuxuu mindiyaha maskaxda ku jar-jaraa aragti walba oo kawaanka la keeno asagoo kala soocaya fekradaha la jaan-qaadi karta isbaddallada joogtada ah ee nolosha ku dhaca, aragtiyooyinka asalka ah ee ka madax banaan isbaddalka nolosha iyo waliba fekradaha aan laga fiirsan ee sababi kara rafaadka nolosha.

Waxaa jira bulshooyin ku wareera kaalinta kawaanlaha fikradaha bulshada kaga jiro. Badanaa bulshooyinka noocaas ah uma baahna in fekradaha nolosha ay ka aaminsanyihiin kawaanka la saaro, waxayna la midyihiin bulsho xoolo- dhaqato ah oo ka caagan cunida hilibka aadna u neceb in laga dhiijyo neefka xoolaha ah!

Bulshooyinka ka caagan in fekradaha nolosha laga aaminsanyahay kawaanka la saaro sida Soomaalida iyo Carabta oo kale waxaa ku badan buufiska laga qabo kawaanka fikradaha. Sannado hore ayaa mar akhriyay buug uu qoray caalim

caan ah oo ka hadlaya buufiska noocan ah ee bulshooyinka aan soo sheegnay ka qabaan kawaanlayaasha fikirka- faylasuufyada.

Waa buugga lagu magacaabo ت هف فة سـ فلا الـ "isdiidka falaasifada" ee uu qoray mudane Al-Ghazali. Markii aan dhammeeyay akhriska buugga waxaan ku baraarugay in Shiikh Ghazali uu weerar cidlo ah ku qaaday niman masaakiin ah oo ka shaqaysta kawaanka fikradaha. Doodda mudane Ghazali waxaa lagu tusaalayn karaa nin u dooda xuquuqda xoolaha oo weerar ba'an ku qaaday ragga iyo dumarka subax walba ku kallaha kawaanka hilibka.

Maadama Shiikh Ghazali xirfadiisu ahayd in nolosha la qurxiyo ayadoo nolosha lagu qaabeeynayo aragtiyooyin qotoma, “theologian" wuxuu u qaadan waayay shaqada ay qabtaan nimanka ku mashquulsan in fikrad walba kawaanka la saaro! Haddaba waxaa la dhihi karaa oday Ghazali wuxuu ku wareeray in shaqooyinka aan la isku qaldin waayo waxaan ognahay in bulsho walba u baahantahay xirfadlay nolosha qurxiya oo dadka qalbiga u qaboojiya “theologian" iyo qaar ka shaqeeya kawaanka fikradaha iyo hilibka si loo helo aragti la fahmi karo iyo hilib la cuni karo!

Gabagabadii, dhallinyarada Soomaaliyeed ee daneeya guud ahaan barashada cilmiga waa in buufis aysan ka qaadin kawaanlayaasha fikradaha faylasuufyada. Waa in ay ogaadaan in kawaanlayaasha fikradaha yihiin niman masaakiin ah oo ku mashquulsan shaqo muhiim u ah bulshada. Kawaanlayaasha fikradaha waxay ku mashquulsanyihiin kala shaandheynta aragtiyooyinka shaqayn kara ayadoo la baadigoobayo xikmadaha ku qarsoon nolosha.

## 7. Faan iyo Farxad Falasafadaysan

Inta badan dadka waxay ku dhibtoodaan in si maangal ah oo garasho ku dhisan u lafa guraan dareennada kala duwan ee nafta la soo gudboonaada. Waxaa laga yaabaa in ay kula soo darsaan dareenno is daba joog ah sida cabsi ama farxad aan cuskanayn sabab maan gal ah oo lagu qanci karo. Qoraalkan kooban waxaan akhristaha kula wadaagi doonaa muhiimadda ay nolosha u leedahay in dareen walba oo kula soo gudboonaada aad u raadisid sabab falsfadadaysan oo caqliga qaangaarka ah lagu fahmi karo. Anigoo falsafadda cuskanaya, waxaan isku dayi doonaa in dood lagu qanci karo aan ku daabo faraxadda iyo faanka maalmahan ay igula yaabeen dad badan oo falsafadda wax uga bilaabanyihiin.

Inta aynaan guda galin doodda uu qoraalka is dul taagi doono, waxaa habboon in aan qeexno erayada kala ah “Falsafad iyo Dareen.” Falsafaddu waa raadinta runta nolosha adigoo adeegsanaya xaqiiqooyin la taaban karo ama garashada lagu fahmi karo. Haddii si fudud loo fasiro waa sidan: falsafaddu waa jacey loo qaado guud ahaan xikmadda nolosha. Dhanka kale, Dareenku waa caadifad

dabiici ah oo nafta ku lamaansan sida: cabsi,farxad, jaceyl, xanaaq, welwel iwm. Dareenka iyo falsafadda waxaa ka dhaxeeya xiriir weyn, waayo falsafadda oo dhan ayaaba ku dhisan dareenka ah: jaceylka xikmadda nolosha. Inkasta oo falsafaddu ka bilaabato jaceyl loo qaado runta nolosha, haddana jiritaanka falsafadda waxay ku xirantahay in la aqbalo oo lagu dhaqmo xikmadda iyo runta la caashaqay.

Sida ay falsfadda ku doodayso, dareen walba oo kula soo gudboonaada, waxaa fiican in aad u haysid sababo maangal ah “ logic” oo runta nolosha laga soo dhiraan-dhiriyay.Tusaale ahaan, haddii la arko adigoo la ilmeynaya qiiro iyo hilow dartood, waa in aad garan kartid arrimaha dhabta ah ee sababay qiirada ama hilowga ku soo booqday. Maan-gal ma ahan haddii aad ku doodid in aad dhagaysatay qasiido lagu amaanayo shiikh Cabdulqaadir Jeylaani dabeedna aad qiiro la ilmeysay. Falsafaddu ma fahmi karto in qof qaan gaar ah ku jidboodo geeraar carabi ah oo loo tiriyay awliyada Ilaahay ee mootan.

Haddaba waa in aad taqaanid sida looga jawaabo su’aalaha falsafadaysan ee muranka galin kara qiirada iyo hilowga aad la jidbaysan tahay.

Dhaqanka Soomaalida waxaa ku jira maahmayo lagu muujinayo muhiimadda ay leedahay in dareen walba loo hayo sabab caqliga ku qanci karo. Maahmaahda caanka ah ee dadku badi wada yaqaaniin ee “ Baroorta orgiga ka weyn” ayaa ah oraah muujinaysa muhiimadda ay leedahay in garasho falsafadaysan loo kaashado fahamida sababaha ka danbeeya dareenada kala duwan ee dadku muujiyaan. Sida la sheegay, odaygii hal-abuuray maah-mahdan,wuxuu la yaabay, sida gabar uu dhalay waqti badan ugu tabisay u baroorashada orgi reerka ka dhintay. Maan-gal ma ahayn in gabadhu saacado badan u baroorato geerida ku timid orgigii reerka. Odaygii oo yaaban ayaa yiri: Baroorta orgiga ka weyn ee sidee wax u jiraan gabaryahay? Mar danbe waxaa la ogaadey in sababta dhabta ah ee gabadhu u barooranayso in ay tahay geerida ku timid wiil ay jeclayd.

Odayga, kheyr allaha siiyee, wuxuu dhaqanka Soomaalida uga tagey dhaxal barakaysan oo ah maahmaah falsafadaysan. Labadii qarni ee ugu danbeeyay, Soomaalida su’aalo falsafadaysan iskama aysan weydiinin dareennada la soo gudboonaada qofka. Arrintaas waxay sababtay in dadkii Soomaaliyeed horboodeen hoggaamiyaal aan garasho adeegsanin ee hadba la duula dareenkooda. Hoggaamiyaashaas, waxay qaateen go’aanno mustaqbal mugdi ah u horseeday Soomaalida marka la fiiriyo xaaladdooda dhaqan, dhaqaale iyo mid siyaasadeed. Qaybaha danbe ee qoraalka ayaan ku xusi doonaa tusaale yaal badan oo ku saabsan cawaaqib xumada laga dhaxli karo marka qof hoggaamiye ah aanan su’aalo falsafadaysan laga weydiin dareenkiisa iyo waliba damaciisa siyaasadeed

Waxaa fiican in la soo xigto taariikh lagu muujinayo barakada iyo burhaanta ay falsafadda u leeedahay nolosha mar haddii dooda qoraalka gudbinayo tahay

dood falsafadaysan. Aabbihii falsafadda, mudane Socrate ayaa muddo laga joogo 2400 sano, wuxuu cashar qiimo badan oo ku saabsan muhiimadda ay falsafadda u leedahay nolosha u jeediyay saaxiibkiis Crito mar uu ku sugnaa xabsi uu dil suge ku ahaa. Mudane Crito ayaa ku soo booqday xabsiga Socrates asagoo ka xun xukunka dilka ah ee lagu xukumay saaxiibkiis. Intii uu booqashada kula joogay, ayuu Critos wuxuu u soo jeediyay saaxiibkiis talo ahayd in si dhuumaalaysi ah ay xasbiga uga baxsadaan.

Taladii ka dib, Socrates iyo Crito waxaa dhaxmaray sheeko iyo garnaqsi falsafasadaysan oo ku saabsan muhiimadda ay nolosha u leedahay in dareen walba iyo damackasta lagu eego garasho falsafadaysan. Doodii iyo sheekadii dhexmartay Socrates iyo Crito waxay ku caan baxday waxa loo yaqaan " Dialogue" oo ah sheeko ardayda falsafadda barata ay ka dhul-bilaabaan marka ay ku socod baranayaan waddooyinka runta loo maro. Sheekadaas dheer waxaan ka soo qaadanayna qaybta qoraalkeenna ku aadan ee ah sida falsafadda loogu fahmo dareennada nafta la so gudboonaada.

Mudane Socrates ayaa wuxuu mudane Crito weydiiyay sababta ku bixisay talada uu soo jeediyay. Crito oo hadalkii qaatey ayaa yiri " Waad ogtahay in aad tahay saaxiib qaali igu ah oo igu dheer. Waxaan haystaa dhaqaale aan ku laalushi karno waaridiyaasha xabsiga. Haddii aan maanta xasbiga kaa fakinin oo beri lagu dilo, dadka isku kaaya yaqaanna waxay igu eedayn doonaan in aan ahay saaxiib xun oo aanan waxba ku qabanin. Sidaa daraadeed waxaan go'aansaday in aan waqtigan aan xabsiga ka fakiyo anigoo diyaariyay sidii aan ku baxsan lahayd " Socrates asago fahmsan gacaltooyada saaxiibkiis ayuu wuxuu isku dayay in uu falsafad ku qanciyo mudane Crito.

Marka lagu guda jiro baadigoobka runta, in dareenka dadka iyo aragtidooda aysan muhiim ahayn ayuu Socrates u sheegay saaxiibkiis. Wuxuu saaxiibkiis Crito u sharaxay in eedda uu ka baqayo ee ah midda dadka uga iman doonta in ay tahay dareen aan run ku dhisnayn marka si falsafadaysan loo fekaro. Wuxuu Socrates ku dheeraaday muhiimadda ay leedahay in markasta runta nolosha loo dhawaado, mararka qaarna looba dhinto haddii wado kale la waayo.Wuxuu sababo falsadaysan u cuskaday go'aankiisa ah in dilka lagu xukumay sugo intii uu noqon lahaa fuley baxsaday oo runta nolosha ka raacay dareenka iyo huuhaada dadka. Maalmo ka dib, sun ayaa la cabsiiyay mudane Socrates, halkaas ayuuna ku shahiiday asagoo ka mid noqday dadka fara ku tiriska ah ee runta darteed u god galay.

Taariikhdaas kooban ee falsafadda waxaan u soo xiganay muujinta in dareenka qofka iyo runta nolosha ay kala duwanyihiin. Qofka marka dareenka la soo gudboonaada uusan garasho u kaashanin, wuxuu qaataa go'aanno halis galiya naftiisa iyo dadka deegaanka kula nool. Tusaale ahaan, taariikhda Soomaaliya waxaa ku xusan in Sayid Muxammed Cabdulle Xassan ka xanaaqay canshuur la weydiiyay markii uu dekada Saaxil " Berbera" ka soo dagey asagoo ka yimid carabaha. Waxaa la sheegaa in in Sayidka oo dhiiga ku karey in uu askaragii

ingiriiska aha weydiiyay “adiga yaa canshuur kaa qaadey gaalyahow buurya qabka ah” Xanaaqii uu ina Cabdille Xasan maalintaas qaaday ayaa ah sababta ku bixisay in uu jihaad ugu baaqo xoola dhaqatadii Soomaaliyeed.

Haddii si falsafadaysan dhacdadaas taariikhiga ah loo fiiriyo, maan-gal ma ahayn in Sayidku sidaa u xanaaqo. Marka ugu horaysa waa laga qurux badnaa in qof shiikh ah oo musaafir ah oo dalka muddo ka maqnaa in uu la murmo askari dable ah oo canshuur guraya. Waxay ahayd in uu is dajiyo oo magaalada tartiib ugu gudbo ka dibna xog aruurin iyo xuuraansi u galo isbaddelka gumeysi ee dalka ku soo kordhay. Asagoo dagan ayay ahayd in uu is weydiiyo su’aalo cilmi ah oo ku saabsan sababta ka danbeysa in wiilal cadaan ah oo dhul fog ka yimid in ay si fudud ku qabsadaan dhulka barakeysan ee Soomaalida. Sidaa ma u yeeline, xanaaqii uu dekadda Saaxil ka soo bilaabay ayuu Sayidinaa Maxamed ku hoggaaminayay halgan dheer oo sababay in Soomaali badan ay aakhiro u guuraan.

Dad badan ayaa iskaga mashquulsan muujinta dareen aan caqli gal ahayn. Waxaa marwalba warbaahinta laga arkaa madexweyanaha Soomaaliya oo iska qoslaya oo iska faraxsan. In aad iska qososhid marwalba adigoo madaxweyne u ah dal burbursan ayaa ah tusaalaha loo soo qaadan karo sida dadka u muujiyaan dareen ka fog garasahada. Dareenka ku habboon in la muujiyo marka aad madax ka noqotid wadan burburay ayaa ah deganaan iyo feejignaan is barkan. Mar walba oo wafdi cadaan ah oo u badan wiilal kurayo ah ay waddanka yimaadaan, waxaan aragnaa madaxweynaha iyo wasiiradiisa oo u faraxsan sida carruur nacnac loo qaybiyay oo kale. Haddii si falsafadaysan loo fekero, dareenka uu madaxweynaha muujiyo iyo daruufaha waddanka ka jira isma lahan.

Waxaa laga yaabaa in aad aragtay qof Soomaali ah oo ku faanaya ama ku faraxsan qabiilka uu ka dhashey. Marka la fiiriyo sida nacasnimada ah ee qabiillada Soomaaliyeed isku xasuuqeen, waxaa aad u yar qabiil sheegan kara sharaf lagu faani karo. Haddaba faanka iyo tookha ka socda fadhi ku diriryada oo dhan ayaa ah dareen aan loo cuskanin garasho waayo qabiilada intooda badan waxay ka qayb qaateen dugaagnimadaii dalka lagu burburiyay. Anigoo sidaa aamisan ayaa maalin waxaan arkey nin Soomaali ah oo si falsafadeysan ugu faanaya qabiilkiisa.Wuxuu faankiisa qabyaaladeed u cuskaday sababo maan-gal ah oo la fahmi karo. Wuxuu sheegay in beeshiisa Biimaal ay tahay beel gardarada neceb. Asagoo taarikhda cuskanaya, wuxuu xusay in beesha biimaal ay geesinimo leh iska difaaceen Talyaanigii gumeysta ahaa ee soo weeraray. Sidoo kale wuxuu sheegay in beesha Biimaal ay hadda ku jirto jihaadkii ugu barakada badnaa ee Soomaaliya ka dhaca kaas oo ah dagaalka loogu caqli celinayo walaalaha Mudug iyo Galgaduud ka soo naqraacay ee ku habsaday gobolka Shabeellaha hoose.

Maalmahan waxaa farxad iyo faan ka badbadis ah laga waldaaminayay Dhul-Udug “ Puntland” Doorashadii ka dhacdey Dhul-Udug waxaa lagu tilmaamay

tartan dimuqoraadi ah oo si xor ah u dhacday. Haddii si falsafadeysan loo fakero, wixii dhacay doorasho dimuqoraadi ah laguma tilmaami karo. Wixii dhacay waxa lagu tilmaami karaa qabyaaladdii oo si miyir qab ah loogu dhaqmay. Niman isku qabiil ah oo qol isku soo xiray ayaa kala doortay labo nin oo ilma adeer ah. Kaliya hormarka iyo wanaaga la gaaray ayaa ah in qabyaaladdii la isku dili jiray si degan loogu kala garqaatay. Haddaba faanka iyo farxada lagu wareeray waxaa fiican in laga nasto oo dadku ay danahooda raacdaan oo aysan nafta been u sheegin. Haddii dareenka hadda socda run loo maleeyo waxaa imanaysan in danihii runta ahaa ee Dhul-Udug la seego kadib na xaflado qiyaali ah lagu mashquulo.

Maalmahan dad badan oo aan saaxiibbo nahay ayaa igula yaabay farxad iyo faan aan kala joogsi lahayn. Mar aan doodnay ayaan farxadayda waxaan u cuskaday sabab fudud oo ah in wali aan noolahay oo aanan dhimanin. In qofku noolaado ayaa ah nasiib weyn marka la fiiriyo tirada dhimatay iyo inta dhimanaysa daqiiqad kasta. Faanka bootada ahna waxaan ku sababeebay in aan ka mid ahay dadka faro ku tiriska ah ee ku mashquulsan ogaanshaha halka ay ku kala baxaan hurdada iyo soo jeedka. Dadka intooda badan way iska hurdaan wayna iska soo tooosan. Waxaa yar dadka is weydiiya masaafada u dhaxeysa hurdada iyo soo jeedka. Haddii aad wax uun kala tagaysid qoraalkan dheer, waxaan rajeynayaa iy ay noqdaan in marwalba dareenka kula soo gudboonaada aad garashada ku eegtid adigoo sababo maan-gal ah cuskanaya.

## 8. Fadhigii Farxadda iyo Falsafadda

Maadaama dhammaan muslimiinta adduunka maanta u dabaal dagayaan farxadda ciidda furitaanka bisha Ramaadan, waxaa fiican in falsafadda iyo farxadda loo qabto fadhi gaar ah si ay u wada qayilaan dabadeedna u qaraaxaystaan.

Inta fadhigaas uusan bilaaban ka hor, waxaan ku hormaraynaa shaqooyinka guud ee falsafadda iyo farxadda kaga qayb qaataan nolosha bal si aan u aragno waxyaabaha majliskan ay ku wadaagi karaan ama iskaga wareysan karaan.

Falsafaddu waxay xoogga saartaa ogaanshaha xikmaddaha aan muuqan ee nolosha halka farxaddu daaha ka feedo dareenada qurxoon ee ku qarsoon nolosha. Tusaale ahaan, qofka marka uu si falasafadaysan u fakerayo, wuxuu si xikmaddaysan u fahmaa in maalmaha ciidaha aysan lahayn muhiimad sidaa u weyn waayo waxaa ka badan maalmaha murugada ah ee ku laamaansan nolosha.

Dhanka kale farxaddu badanaa waxay xiisaysaa in xikmaddaha falsafaddaysan xoogaa laga war-wareegto si loo dareemo dareenada wanaagsan ee nolosha laga

shaxaadi karo. Tusaale ahaan, qofka marka uu faraxsanyahay uma fududa inuu ka fekero dhibaatooyinkii dhacay iyo kuwa dhici kara mustaqbalka.

Sidaa daraadeed farxaddu waxay ku doodaysaa in maanta oo kale munaasabada ciidda aan la falsafadayn waayo waxaa horteena ka muuqda xalwad iyo xoogaa buskut ah oo lagu farxi karo!

Haddii aan ogaanay shaqooyinka kala duwan ee farxadda iyo falsafadda qabtaan, waxaa haddaba is weydiin mudan maxaa laga filan karaa fadhiga sida gaarka ah maanta loogu qabtay falsafadda aan faraxsanayn iyo farxadda aan xiisaynin fariimaha falsafadda?

Majliska maanta ee ciidda doodaha way ku yaraan doonaan waayo falsafadda iyo farxadda waxay ku heeshiiyeen in si fiican loo marqaamo, islama markaana la iskaga garaabo dhaliilaha qolo walba u gaarka ah, dabadeedna la is weydaarsado waxyaabaha guud ee farxadda iyo falsaddu wadaagi karaan.

Falsafaddu waxay qiratay dhaliisha ku saabsan in marwalba nolosha aysan u baahnayn in la falsafadeeyo waayo sidaas waxaa ku lumaya fursado badan oo lagu farxi karo. Dhanka kale farxadda ayaa dhankeeda qiratay a in qosol iyo qaraaxo kaliya aan lagu maarayn karin qalaalasaha ka taagan nolosha waayo dad badan ayaa waqtigii kaga lumay farxad lagu faro-maranyahay sida madaxweyne Xassan Shiikh Maxamuud oo kale!

Qirashadaas ka dib falsafadda iyo farxadda waxay soo wada saareen baaq guud oo loo dirayo dadka xiiseeya xiriirka dhex mari kara falsafadda iyo farxadda.

Baaqaas waxaa lagu soo bandhigay buugga cinwaankiisu yahay Fekradihii Farxadda " The Happiness Hypothesis" ee uu qoray aqoonyahan lagu magacaabo Jonathan Haidt oo xiiseeya fadhiyada gaarka ah farxadda iyo falsafadda mararka qaar ay qabsadaan. Mudane Jonathan waa bare-sare oo cilmi nafsiga ka dhiga Jaamacada New York State ee dalka Maraykanka.

Farriimo falsafadaysan oo haddana faraxsan kuwaas oo toban gaaraya ayaa lagu soo bandhigay buuggan. Maadama qoraalka nala dheeraaday, waxaan xuseynaa oo kaliya hal fariin oo saldhig u ah fariimaha buuggu xanbaarsanyahay. Waana farriin ku habboon in fadhiga maanta ee munaasabadda Ciidda si fiican loogu marqaamo.

Farriintan oo lagu furay cutubka ugu horreeya ee buugga waxaa laga soo xigtay xikmad ay muddo badan iska soo dhaxlayeen faylasuufyada caalamka taas oo ku saabsan furaha farxadda.

Faylasuufyadu waxay muddo badan ku doodayeen in furaha koowaad ee farxaddu tahay qof walba laga doonayo inuu si dagan oo aayar ah u fahmo isdiiddooyinka dabiiciga ah ee ku lammaansan abuurka nafta sida: shaydaannimo iyo shariifnimo wada socda, najaaso iyo daahirimo is barkan, wanaag iyo xumaan wada sheekaysta , iyo waliba doqoniimo iyo garasho is dabo orda!

Dadku dhibaato kuma qabaan ogaanshaha ku saabsan najaasada dabiiciga ah ee nagu abuuran waayo waxaa iska cad in waa hore wasaqdu lagu dhex beeray jirkeena. Tusaale ahaan, haddii aad aragtid sheekh khamiis cad qaba oo ku qudbeenaya inuu daahir yahay, waxaa laga yaabaa in shiikha sheekada aad u camirtid, balse waxaad si hoose u ogtahay in shiikha caloosha ku wato kiishad wasaq ah oo illaa qiyaamaha laga gaarayo u qarsoonaan doonta.

Falsafaddu waxay ku doodaysaa in nolosha farxad la’aan laga dhaxlayo haddii shiikha ku adkaysto sheekada uu la soo shirtagay ee ku saabsan inuu daahir yahay marwalba. Tusaale ahaan, haddii sheekha iyo xertiisa ku adkaystaan daqiiqad walba in daahir la noqdo, nafta waxaa la soo darsaya cabur cadow ku ah farxadda dabiiciga ah ee nolosha, waxaana laga yaabaa in shiikha iyo xertiisa dhagxaan iskaga murxiyaan xubno ka mid ah jirkooda ayaga oo ka baqaya in biyaha kaligood dahaarada ku filnayn.

Sidaa si la mid ah, falsafaddu waxay ku doodaysaa in dhammaan xumaanta iyo shaydaanimada noo muuqda yihiin waxyaabo qof walba ku abuuran oo loo baahanyahay in si niyad ah loo aqbalo. Farxad la’aaanta aduunka ugu weyn waxay dhacdaa marka qofku diido shaydaanimadiisa asagoo ku kaaftoomaya qaybta shariifnimada ah oo kaliya.

Dagaalada, colaadaha iyo waliba isku dhaca aduunka ka socda waxaa u sabab ah sida falsafaddu ku doodayso marka qof walba ama qolo kasta soo xawisho shaydaanimada iyo xumaanta ku abuuran. Mararka qaar waxaaba dhacda in bani’aadamka si guud shaydaanimada ku abuuran ugu xawilo awoodaha dhuumaalaysta sida jinka oo kale.

Mudane Jonathan, wuxuu cutubka ugu horreeya buuggan ku qaada dhigay farriintan falsafadaysan asaga oo xoogga saaray sharaxaad ku saabsan sida cilmi nafsiga u sharaxay qaybsanaanta ku lamaansan nafta (The Divided Self).

Tusaale ahaan, wuxuu abuurka nafta ee u kala qaybsan shaydaanimda iyo shariifnimada ku tusaaleeyay qof maroodi saaran oo kale. Damaca joogtada,doqonimda aan laga daalin iyo waliba daan-daansiga nolosha wuxuu ku sheegay in ay ka dhigan yihiin qaybaha kala duwan ee jirka maroodiga halka qofka maroodiga saarana uu ku tilmaamay qaybta qofka u qaabilsan samaha iyo wanaaga.

Haddaba mudane Jonathan wuxuu ku doodday in doonista qofka ee ku aaddan wanaagga uu ka xoog badan yahay damaca xumaanta marka la eego murqaha waaweyn ee ka muuqda maroodiga uu qofku dulsaaranyahay.

Sidaa daraadeed, dooda faylasuufyada ee ku aadan farxadda nolosha wuxuu mudane Jonatahan ku taageeray caddeymo cilmi nafsi ah oo muujinaya muhiimadda ay leedahay in maroodiga si fiican loo tababaro waayo haddii damaca maroodiga la sii daayo farxadda iyo xasiloonida nolosha waxay la mid noqonayaan cawskii ku gacan galay maroodigii dagaalamay oo kale.

Dhaliisha ugu weyn ee buuggan lagu soo bandhigay baaqyadii ka soo baxay fadhigii farxadda iyo falsafadda waxaa lagu tilmaami karaa in qoraha buuggan uu xoogga saaaray doodaha iyo cilmi baarisyada u gaarka ah cilmi nafsiga taas

oo malaha ku adkaan karta akhristayaasha horay aan u soo baranin cilmi nafsiga.

Marka laga soo tago dhaliishaas, buuggan waxaa laga heli karaa faham guud oo ku aadan xiriirka weyn ee ka dhaxeeya falsafadda iyo farxadda dabiiciga ah ee ka madaxa banaan farxadda goos gooska ah ee la dareemo maalmo kooban sida munaasabadaha Ciidda oo kale. Sidoo kale buuggan waxaa laga baran karaa xikmadihii falsafadaysnaa ee laga dhaxlay ummadihii hore kuwaas oo waqtigan casriga wali ka shaqeeynaya caalamka farxadda.

## 9. Buuqii Boorsada iyo Baaqii Buugga

Waxaa jirta boorso ka mid ah boorsooyinkayga faraha badan oo dabeecad ahaan la mid ah baarlamaanka federaalka ee Soomaaliya. Waxaan ogsoonnahay in baarlamaanka federaalka ee Soomaaliya ay ka buuxaan rag iyo dumar buuq badan kuwaas oo waxyaabo badan isku diidan balse heeshiis ku ah qaadashada wixii shilimaad ah oo Rabi u calfo. Boorsadan dabci ahaan la midka ah baarlamaanka Soomaaliya waxaan daris ahayn muddo ka badan toban sanno. Waa boorso ay ka buuxaan buuggaag xanbaarsan aragtiyooyin iska soo horjeeda, kuwaas oo dhaliya buuq aan dhammaad lahayn oo badanaa boorsada ka dhex qarxa!

Buuqa ka dhex aloosma buuggaagta ku jira boorsadan badanaa wuxuu ku dhammaadaa bullaan iyo foori dib u dhac ku keeni kara dadaalka loogu jiro baadigoobka runta nolosha. Inkastoo buuggaagta boorsada ku jira si guud uga simanyihiin sawaxanka iyo sacabka, haddana waxaa jira buuggaag aan ka nasan qaylo joogto ah kuwaas oo la mid ah xildhibaan Jeesoow iyo xildhibaan Kulalihi oo ah xildhibaanada ugu carabka dheer baarlamaanka federaalka ee Soomaaliya!

Buuggaagta sida gaarka ah looga baqo buuqooda waxaa ka mid ah kuwa taariikhda iyo falsafadda u dooda oo badanaa laf dhuun gashay ku noqday mooshinada ay keenaan buuggaagta kale ee boorsada ku jira! Buuqa buuggaagta falsafadda iyo taariikhda waxaa si gaar ah loogu beegsadaa buuggaagta u doodda dadaalka diimaha, qalbi wanaaga doqomada, iyo waliba xuquuqda dumarka. Waxaa mararka qaar si dirqi ah ku meel mara mooshinada ay keenaan buugaagta u dooda diimaha waayo waxay si hoose u laaluushaan buuggaagta taariikhda si loo daboolo damaca iyo danaha gaarka ah ee lagu darsaday doodaha diimaha!

Marwalba oo buuqa iyo bullaanka boorsada is qabsado, xaaladduna isku cakiranto, ayaa waxaa cod caato ah oo la mid ah codka afhayeenka baarlamaanka Soomaaliya mudane Jawaari oo kale ku calaacala buugga kaliya

ee Carabka ah ee boorsada ku jira. Sababta cilmiyaysan ee ka danbaysa in buuggaagta ku qoran af Carabiga laangaab ku noqodaan boorsadan ayaa lagu sheegay in waa dhexdaas ah buuggaag badan oo Carabi ah qaxeen ka dib markii dabci xumo daraadeed ay u adkaysan waayeen doodaha adag ee ka dhex socda boorsada!

Buuggan Carabiga ku qoran wuxuu buuggaagta kale ee boorsada ku jira ka kasbaday xushmad iyo qaddarin gaar ah waayo wuxuu muujiyay dadnimo iyo dulqaad badan oo aad uga duwan buuggaagtii carabiga ahaa ee waa dhexdaas ah boorsada ka cararay sida carruur cabsatay oo kale! Sidaa daraadeed, marwalba oo buuqa boorsada bato waxaa loo baxsadaa xikmada iyo waanada uu badanaa buuggan Carabiga ah ku baaqo.

Waxaa jirta sabab kale oo buugan ka dhigtay buugga ugu baraka badan dhammaan buuggaagta ku jira boorsada! Waa buugga kaliya ee boorsada kaga soo biiray magaalada barakaysan ee Makka Al Mukarrama!. Dhowr iyo toban sanno ka hor mar uu milkiilaha boorsada (Xaaji Cabdullaahi Cawsey) tagay magaalada barakaysan ee Makka si uu soo guto waajibaadka Xajka ee alle nagu waajibiyay ayuu buuggan wuxuu ka soo iibiyay rugta buugaagta ee jaamacada Umul Quraa!

Cnwaanka buugga waa هكذا علمتني الحياة oo Af Soomaali ku noqonaya " Sidan ayay Nolosha i Bartay". Buugga waxaa qoray Dr Musdafa Subaaci (مصطفى السباعي) oo ahaa maskaxshiil iyo wadaad waayo arag ku ah is baddallada waayaha iyo waqtiga. Waxaa jirta oraah badanaa Buuggan ku baaqo oo buuqa iyo bullaanka ka aloosan boorsada marar badan xal u noqday. Waana oraahda ku baaqaysa sidan "Qofka caqliga leh waa midka caadifadiisa aysan ka awood badin fekerkiisa, qofka xikmadda leh waa qofka wax ka barta casharrada nolosha, qofka falsafadda u dhuun daloola waa midka isku daya in uu garto waxa aan la aqoon asagoo adeegsanaya waxyaabaha la yaqaan" p. 75.

# 10. Raadinta Runta iyo Dhugashada Dhulka

Maskax shiilka u fiirsada sida bulshooyinka u fekeraan ama u dhaqmaan waxaa ka yaabiyay xiriirka ka dhaxeeya raadinta runta nolosha iyo dhugashada dhulka aynu ku noolnahay. Dhammaan aadanaha kuwii dhintay, kuwa hadda jooga iyo kuwa dhalan doona waxay runta ka raadiyaan dhinaca ama aagga ay ka ka daganyihiin ama kaga beermeen dhulka oo ka dhigan dhibic ka mid ah balaayiinta meere- planets ee haahaabaya hawada maran – space.

Sida taariikhda dhaqamada iyo luqadaha laga dheehan karo,qolo walba dhulka waxay ula baxday magac gooni ah oo laga soo xulay luqaddooda u gaarka ah. Sidoo kale, bulsho walba ama qolo kasta waxay hal-abuureen dhaqamo, diimo iyo waliba afaf la falgalay duruufaha iyo fursadaha ka jira deegaanka ay ka daganyihiin dhulka.

Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in waxyaabaha laga qiimeeyo dhaqanka qalafsan ee Soomaalida sida qabyaaladda iyo dhaqashada geela laga dhaxlay duruufaha ka jira dhulka badankiisa oomanaha ah ee Soomaalida kaga beermeen geeska Afrika.

Dhammaan bulshooyinka adduunka waxay ka simanyihiin baahi-dabiici ah. Baahidan dabiciiga ah waa mid ku aadan raadinta run soo koobaysa bilowga iyo dhammaadka nolosha loo helo macno maangal-ah oo ku habboon maareynta nolosha. Sida aan kor ku soo xusnay, qolo walba waxay ku qasbanyihiin in baadigoobka runta ka bilaabaan aagga ay ka daganyihiin dhulka. In bulsho kasta oo dunida ku nool runta nolosha ka raadiyaan dhugashada aagga ay ka daganyihiin dhulka waxaa laga dhaxlay faa’iidooyin iyo qasaaro wada socda.

Faa’idooyinka laga dhaxlay baadigoobka noocan ah ee ku aaddan raadinta runta guud ee nolosha waxaa ka mid ah, in bulsho kasta dhidibada u taageen dhaqan u gaar ah si ay u dheefsadaan faa'idooyinka ku duugan deegaanka ay kaga noolyihiin dhulka, Isla markaana kaga badbaadaan dhibaatooyinka u gaarka ah deegaankaas. Sida ku xusan taariikhda nolosha aadanaha, bulsho walba waxay muddo ku soo caano maalayeen dhaqanka u gaarka ah ayagoo hal-abuuray run qabyo ah oo ka dhigan qaybta ay dhulka kaga noolyihiin.

Markii bulshooyinka dunidu bilaabeen isku socodka iyo is dhaafsiga ganacsiga, waxaa soo shaac baxay dhibaatooyinka laga dhaxlay baadigoobka runta guud ee nolosha. Dumar iyo rag badan oo ka mid ah bulsho walba oo dunida ku nool ayaa ku baraarugay in runta laga taageero aagga ay ku noolyihiin aysan ka dhigneen run dhammaystiran. Sidaa daraadeed waxay ku baaqeen in bulshooyinka is dhaafsadaan waxyaabaha ay ka dhaxleen dhugashada aagga ay dhulka ka daganyihiin si l loo helo sawirka dhabta ah ee dhulka iyo runta guud ee nolosha.

Baaqa ay soo jeediyeen dumarka iyo raga ku baraarugay qabyo-nimada runta ka caaleema saaran aagga ay ku noolyihiin waxaa ka dhashay kacaanka ay ku curteen kooxo iskugu jira faylasuufyo, gabyaa, qorayaal, cilmi-baarayaal caalami ah ah iyo waliba siyaasiyiin sawirran kara siyaasad looga samata baxo runta-qabyada ah ee deegaanka ka jirta. Sidoo kale, baaqa iyo baraaruga ku aaddan runta dhiciska ah ee dhaqan walba u gaarka ah waxaa ka dhashay buuq markii danbe isku rogay madax-faluuq ku dhaca bulshooyinka qaar.

Sida taariikhda ku xusan, bulshadii aanan helin farsamo looga faa'idaysto isu socodka iyo is dhaafsiga ganacsiga dunida ka curtay waxaa ku dhacay madax-faluuq labo nooc loo kala qaadi karo. Bulshooyinka qaar waxay diideen oo waliba dagaal ka galeen in runta ka jirta deegaankooda ay la sheekaysato ama shukaansato runta ka soo martisay aagag kale oo dhulka ka mid ah. Waana nooca koowaad ee madax-faluuqa ku dhaca bulshooyinka qaar.

Nooca labaad ee madax-faluuqa ah wuxuu ku dhacay bulshooyin sida dharka iskaga siibay dhaqankii ka jiray deegaanka ay ku noolyihiin dabadeedna ku labistay dhaqanka dhoofka ku yimid ee ka soo martiyay dhulka dheer. Bulshooyinkan waxay aamineen in runta ka jirta deegaankooda aysan ahayn mid la isku halayn karo dabadeedna waxay ayagoo dhego xeran isku dhiibeen diimaha, iyo waxyaabaha laga qiimeeyo dhaqamada markaas suuqa caalamka haysta. Mararka qaar bulshooyinka noocan ah waxaa ka mid ummado xoog lagu qabsaday ka dibna loo gumeeyay dhaqamo kale.

Labadaas nooc ee madax-faluuqa ah waxaa barbar socday maskax-furnaan ay hormuud ka ahaayeen aqoonyahano iyo cilmi-baarayaal caalami ah si loo helo runta guud ee nolosha. Nasiib wanaag halgankii aqoonyanada iyo cilmi baarayaasha waxaa laga dhaxlay cilmiga casriga ah " science " oo ka dhigan farsamada ugu fiican ee lagu gaari karo run guud oo ka madax banaan daqamada ka jira aaggaga iyo deegaanada dadku kaga noolyihiin dhulka.

Dhammaadkii qarnigii sagaal iyo tobanaad iyo billowgii qarnigii labaatanaad aqoonyahanada iyo cilmi baarayaasha caalamiga ah waxay dunida u horseedeen nolol casri ah ah si kor loogu qaado tayada nolosha dadka. Dadaalka iyo cilmi baaristii aqoonyahanadaas waxaa laga dhaxlay qaacidooyin cilmi ah oo laga soo dheegtay aqoonta sayniska kuwaas oo runta guud ee nolosha lagula sheekaysan karo. Tusaale ahaan, aragtida cilmiga ah ee laga soo dheegtay aqoonta fiisikiska "The theory of Relativity" ayuu mudane Albert Einstein bulshooyinka dunida kula wadaagay in xawaaraha -spead walxaha cufan ku xirantahay hadba dhanka laga eego.

Sidaa si lamid ah, runta guud ee nolosha waxay ku xirantahay hadba duruufaha ka jira deegaanka ay ku noolyihiin dadka baadigoobaya runtaas. Sidoo kale aqoonyannada cilmiga bulshada “Sociologists" waxay baaritaano badan ku

ogaadeen in dhaqamada ka jira deegaan walba qaabeeyaan waxyaabaha dadku ka aaminsanyihiin runta-guud ee nolosha.

Sidaa daraadeed, waxay ku taliyeen in ay fiicantahay in bulsho walba ku baraarugto sida dhulka loo wada daganyahay oo qolona aysan u sheegan karin lahaansha guud ee dhulka, in si la mid ah runta guud ee nolosha qolo walba aag u gaar ah ka dagantahay. Haddii sidaa la yeelo, waxaa suurta gal ah in runta nolosha noogu abaal guddo nabad waarta oo dunida ka hanaqaada.

## 11. Saxankii iyo Xaqqii Lagu Xiiqay

Saaxiibkey iyo aniga waxaa na dhexmaray dood dheer oo ku saabsan raadinta runta iyo ogaanshaha xaqiiqda nolosha. Dood dheer ka dib, si aan hadalka iskula helno, waxaan ku heeshiinnay in saxan nooga muuqday kushiinka markaas aan ku mataalno xaqqa aan ka doodayno.

Haddaba asagoo qof walba saxanka dhan ka eegaya, ayaa hadalkii aniga ku hormaray, waxaana ku dooday in xaqiiqda ku egtahay wixii markaas iiga muuqda gudaha saxanka. Marka aan sidaas ku doodayo waxaan adeegsanayaa garasho ku sargo'an heerka aqoontayda, xubnaha dareemayaashayda, iyo waliba kartidayda ku aaddan sawir qaadashada ama humaaga maskaxdayda.

Dhanka kale, hadalkii waxaa qaatay saaxiibkay, wuxuuna soo badhigay wixii aan ku xiiqay ee aan xaqiiqda mooday in humaag ahaayeen, sidaa daraadeedna xaqa uu ka dilaacay saxanka dacaladiisa ama geesihiisa oo waxa gudaha iiga bidhaamay ay yihiin baadil iyo been lasoo dhoodhoobay!

Haddaba tani waxay muujinaysa in labadeenaba aynaan haleeli karin sawirka guud ee xaqiiqada saxanka oo mid waliba oo naga mid ahi uu ku xiiqay wixii uu ka dhex heli karay dookhiisa, kartida garashadiisa iyo waliba humaaga masaxdiisa.

Annagoo saxanka maran dul taagan oo hadalkii naga taagtaagmey ka dib markii aan ku heeshiin weynay xaqiiqada dhabta ah ee saxanka ayaa waxaa innoo soo galey saaxiibkeen oo cilmiga fiisikiska (physics) inkaar ku qaba, asxaabta oo dhanna ay ku qaddariso. Markii uu dooddeena dhageystay ka dib, saaxiibkeen wuxuu noo sheegay in mowduuca aan ka murmeynaa( jiritaanka Saxan) ka dhiganyahay waxba kama jiraan oo xaqiiqada dhabta ah ee saxanka yahay malaayiin iyo dheeraad atoms oo heehaabaya hawo maran (empty space). Sheekada hadda ayayba ka dartay oo doodda cusub ee saaxiibkeen waxay ka dhignayd wiish samada sare nala aadey. Wuxuu dooddiisa u cuskaday cilmi aynaan wali maqlin oo afka qalaad lagu dhaho"Quantum Physics." Waana aqoonta waayahan danbe lagu ogaaday in walxaha noo muuqda dhabnimadooda yihiin hawo maran oo haawanaysa.

Sii aan u saxno aragtida saaxiibkeenna ee laga soo dheegtay cilmiga fiisikiska, aniga iyo adigii horay isku haysannay waxaan midaynnay labadii xaqiiqo ee aan ka soo kala dheegannay saxanka gudihiisa iyo dacalladiisa si aan u muujino jiritaanka walax "Saxan" la dhaho. Waxaan aragnaa qosolka iyo yasmada saaxiibkeen muujinayo marwalba oo aan isku dayno in aan aan raadino baadilka iyo beenta uu la soo shir tagay ee ku baaqaysa in xaqiiqda saxanku tahay hawo maran.

Saddexdeena oo oo madaxa iskula jira ayaa waxaa noo yimid saaxiib kale oo suuqa nooga raadiyay raashin aan qado ka dhiganno maadama aynaan maanta waxba karsan!

Markii uu kushiinka noogu soo galay, wuxuu durbadiiba raashinkii ku gadiyay saxankii aynu ka murmaynay jiritaankiisa si aysan qadada nooga qaboobin. Saaxiibkeena qadada noo soo gaday wuxuu nagu wargaliyay in dhabnimada saxanka ay tahay in wax lagu cuno, wixii soo harana lagu weeleeyo. Sidaa daraadeedna wixii aan ka murmeynay maanta oo dhan ay ka dhignaayeen hal bacaad lagu lisay!

Dooddii lagu xiiqay ee ku saabsanayd jiritaanka walax saxan la dhaho, waxaa lagu soo gunaanaday garasho iyo garawshiiyo ku aadan sirta iyo ujeedada dhabta ah ee saxanka taasoo ah in wixii la calafsado lagu cuno! Afarteenii oo qadada kala boobayna ayaa si wadajir waxaan iskula garannay si lamid ah sida xaqiiqda saxanka aan loogu heeshiin karin, in ay adkaan doonto in runta iyo dhabnimada nolosha si fudud la iskula garto. Dhanka kale, sida saxanka noogu saamaxay in wadajir aan wax ugu wada cunno anagoo isku diidan xaqiiq ahaan jiritaankiisa, ayaan waxaan qirnay in nolosha noo saamaxayso in qaab nabad galyo ah loogu wada noolaado, annagoo isku diidan runta, dhabnimada iyo waliba ujeedada nolosha laga leeyahay.

## 12. Falsafadda Labiska

Bac ay ka buuxaan dhar aan soo dhaqay oo muddo aan la soo lugeeyay ayaa saaka iiga dilaacday culeys dartiis. Anniga oo la yaaban sida fudud ee bacda ku dilaacday ayaan is weydiiyay sidee ku dhacday dhar aad dhib la'aan ugu labisatid in culeyskooda aad dhibsatid.

Su'aashaas markii aan is weydiiyay ayaan hadana waxaan sawirtay taariilkhda guud ee labiska aadanaha. Qadar daqiiqado ah ayaan sawirtay dharkii uu gashanaa awoowgaygii tobonaad subaxii uu shukaansayay ayeeydayda tobanaad. Waxaa laga yaabaa in odaygaas awoowgay ah subaxaas uu xirnaa funaanad lagu farsamayeeyay gudaha Soomaaliya.

Taariikhdaas waxay ila gashay in aan mala-awaalo waqti malaayiin sanno laga joogo oo dadka iyo dugaagu si wada jir ah u qaawanaayeen. Waxaa laga yabaa in waqti aad u fog in qof lacag jecel uu ku fekeray in ganacsi laga sameeyo qaawanaanshaha dadka. Waxaa macqluul ah in qofkaas uu faafiyay in qaawanaanshaha tahay foolxumo sidaa daraadeedna ay qurxoon tahay in labis la qaato.

Dadka damaca badan badanaa waxay hal-abuuraan ganacsiyo waaweyn oo been iyo baqdin ku dhisan. Waxaa laga yaabaa in qofkaas lacagta damaca ka gashay inuu hal-abuuray been ku saabsan xishoodka iyo quruxda dabadeedna u bilaabay mashruuc dhar soo saarid ah.

Waxaa sidoo kale macquul ah in ganacsadahaas damaaciga ah uu dadka ku abuuray kalsooni darro ku saabsan jirkooda! Sidoo kale waxaa laga yaabaa in ganacsadahaas uu si hoose u la heeshiiyay wadaado mashaqaystayaal ah oo dadka ku wacdiya qiimaha xishoodka si dhar waaweyn oo waliba culus loo iibsado!

Waqtigan casirga ah ee la joogo, warshadaha waaweyn ee dharka waxay maalin walba soo saaraan dhar cusub ayaga oo suuqa ka saaraya dharkii hore. Waqtigan warshadaha waaweyn ee dharka sameeya waxay shaqaaleeyaan shayaadiin xayaysiis u sameysa kuwaas oo dadka nacsiiya dharkoodii hore ee wali aan dhammaanin!

Markii muddo aan ka fekaray taariikhda labiska ayaan acuudu billeystay waayo waxaan ku baraarugay in shaydaan uu ii sheekaynayo asaga oo iska soo dhigay cashar ku saabsan taariikhda labiska dadka.

Halkaas ayaan uga haray u kuur galida taariikhda dharxirashada dadka. Waxaana bilaabay in aan ka fekero falsafadda labiska!

Waxaan ogaaday in falsafadda labiska lagu dhisay aragti ah in marba shay ama labo shay kaliya lagu labisto. Haddii dhammaan labiska kuu yaala aad wada xiratid ama bac ka soo buuxisid, falsafadda labiska waxay kaaga digaysaa culeys iyo gacmo daalis bilaa macno ah.

Waxaan haddana ka sii fakaray sida falsafadda labiska loogu xawilo karo culeyska laga dhaxli karo fekeradaha faraha badan ee qofka ku soo labisto. Mar haddii ay dhib tahay in dharkaada oo dhan aad ku soo labisatid, maxaa keenaya in bulshada aad la dhex wareegtid bac ama danbiil ay ka buuxaan fekradaha faraha badan ee kuu gaarka ah!

Tusaale ahaan waxaan ognahay in dharka badan ee kuu yaala marba mid aad soo qaadatid ama ku xaragootid adigoo eegaya jawiga jira markaas ama qofka aad rabtid in aad shukaansatid.

Way adagtahay in adiga oo masaajid ama shukaansi u socda in aad soo wada gashatid dhammaan kastuumooyinka kuu yaala waayo ma rabtid ciriiri nafsi oo cibaadada ama haasawaha culeys kaa galiya!

Sidaa si la mid ah, jawiga qaboobaha ama kuleelaha waxaad soo gashataa dhar ku habboon cilmilada markaas jirta. Haddaba maxaa ku diidaya in fekradahaada faraha badan marba mid aad ku soo labisatid adigoo eegaya duruufaha markaas jira! Tusaale ahaan waqti lagu jiro baroordiiq iyo tacsi oo jawiga aad u kacsanyahay in aad ku soo labisatid fekrado lagu mucaaradayo dawladda Soomaaliya waxaa laga dhaxli karaa culeys nafsi iyo gacmo daalis macno la'aan ah!

Haddaba falsadda labiska waxay ku baaqaysaa in fekradaha iyo waxyaabaha aad aaminsantahay ay la mid noqdaan dharka faraha badan ee guriga ku yaala oo kale!

Sidaa daraadeed, mar walba waxaad ku soo labisataa fekrado kuu fududayn kara noloshaada gaarka ah ama la jaanqaadi kara duruufaha markaas jira. Haddii kale waxaad la mid noqonaysaa qof ku soo labistay qamiiska cad oo Sacuudiga laga keenay ka dibna ku dhex xaragooday dhiiqada xaafada Islii ee magaalada Nayroobi.

## 13. Falsafadda Naarta iyo Jannada

Marka laga soo tago sharaxaadaha kala duwan ee diimaha ka bixiyaan jiritaanka janno iyo naar, qofka fekeraya wuxuu is weydiin karaa xikmadda ku jirta in mustaqbalka dadku ku danbeeyo qolo la janneeyay iyo qaar badan oo naar loo qoondeeyay.

Waxaan ognahay in diin walba sheegato in dadka diintaas haysta jannada gali doonaan halka qolooyinka diimaha kale ku dufbaxay loo xawilo doono naar ololaysa. Inkastoo diimaha adduunka oo dhan sidaa sheegtaan, haddana xikmadda ku jirta jiritaanka naar iyo janno way ka madax bannaantahay sheekooyinka ay niyadda ku dhistaan dadka haysta diimaha kala duwan ee adduunka ka jira!

Aqoonyahannada cilmi nafsiga ee u kuur gala dabciga iyo damaca ee hoose ee ku abuuran qofka waxay ogaadeen in dadka loo kala qaybin karo qolo qalbi-xabxab ah oo marwalba ku mashquulsan qurxinta nolosha iyo qaar aan jixin jixin oo ku raaxaysta xanuunka iyo foolxumada nolosha.

Qofka qalbi xab-xabka ah iyo qofka aan jixin jixin ee xanuunka nolosha ku raaxaysta waxaa laga heli karaa dhaqan kasta, diin walba iyo waliba qoys kasta. Tusaale ahaan dhaqan walba ama diin kasta waxaad ku arkaysaa dad badan oo qalbi xab-xab ah oo marwalba ku mashquulsan sidii farxad iyo wanaag dadka ugu wada noolaan lahaayeen.

Dhan kale waxaa laga yaabaa in qoys dhaqmaya ama wada dhashay aad ku aragtid qof ku mashquulsan qurxinta iyo hormarinta nolosha qoyska, halka qof kale oo qoyska ka tirsan uu ku mashquulsan yahay burburinta nolosha qosyka.

Tusaale ahaan waxaad arkaysaa ma jixin-jixe macan-gag ah oo marwalba dhibaataynaya marwo daacad ah oo u taagan qurxinta nolosha qoyskooda iyo qumayo qaylo badan oo laf dhuun gashay ku noqotay maskiin maalin iyo habeen ku mashquulsan hormarka qoyskiisa.

Faylasuufyada ka fekera asalka dhibaatada nolosha waxay tilmaamaan in dhulka uu ka dhigan yahay xabsi ay ka buuxaan dad dabciga iyo dadninamda aad ugu kala duwan. Sidaa daraadeed, dhibaato walba oo dunida ka taagan waa isku dhac ka dhex dhashay dadka qalbi xab-xabka ah iyo qolooyinka aan jixin jixin.

Taxanaha taariikhda waxaa ka buuxa keyd badan oo tilmaamaya isku dhacyada noocaas ah. Dhibaatooyinka ka dhacaya nolosha casriga waa qayb ka mid ah silsilada taxan ee tilmaamaysa lagdanka u dhaxeeya dadka qalbiga wanaagan iyo qolooyinka asal iyo farac ahaan u qalbiga xun.

Faylasuufyada waxay tilmaamaan in lagdanka noocan ah aan laga baxsan karin waayo qufulka weyn ee xabsiga nolosha waxaa gacanta ku hayaa maqaadiir aan la garanaynin waxa ay maagan tahay.

Dhanka kale faylasuufyada waxay mala-waalaan dhammaadka lagdanka noocan ah. Mala-waalka noocan ah waxay faylasuufyada ka dhaxleen ogaanshaha xikmadda ku jirta jirtaanka janno iyo naar.

Tusaale ahaan waxay ogaadeen in guud ahaan dhimashada ka dhigan tahay xornimo ay si lama filaan ah ku heleen maxaabiistii ku lagdamaysay xabsiga nolosha adduunka. Sida dabiiciga ah marka maxaabiista ooda laga qaado, maxbuus walba wuxuu beegsadaa bartii uu ku nafisi lahaa si uu uga soo baanto dhibaatadii uu kala kulmay xabsiga.

Sidaa daraadeed, falsafadda jannada iyo naarta waxay tilmaamaysaa in qolooyinkii qalbi xab-xabka ahaa ee xabsiga nolosha ku dhibaataysnaa qaab dabiici ah u beegsan doonaan janno ay kaga nafisaan buuqii iyo balaayadii ay kala kulmeen qolooyinkii qalbiga xumaa ee xabsiga nolosha kuwada jireen.

Dhanka kale qolooyinka qalbiga xun ee marwalba xabsiga nolosha ku dhibaateeya dadka qalbiga wanaagsan waxay si dabiici ah u beegsan doonaan naar ay uga nafisaan wacdigii iyo waanadii ka socon jirtay xabisga nolosha ayaga oo ku raaxaysan doona xanuunka iyo rafaadka ay mudada dheer baadigoobayeen.

Sidaa daraadeed, dadka ku dhinta qaraxyada ka dhaca goobaha bulshadu ku baashaasho waa wada ahlu janno waayo waa shacab qalbi xab-xab ah oo qaab aad u foolxun loo xumeeyay! Muhiim ma ahan diinta ay hastaan dadka la

qarxiyay waayo sida aan qoraalka billowgiisii ku xusnay qalbi xab-xabnimada iyo qalbi xumaanta kuma xirna diinta qofka uu haysto.

Dhanka kale, kuwa shacab masaakiin ah isku qarxiya ee sidaa ku dhinta waxay beegsadaan naar ay muddo dheer baadigoobayeen. Waxaa laga yaabaa in naarta ay ku farxaan waayo waa goob ay ka heli doonaan fursado ay ku fuliyaan dhammaan xumaanta qalbigooda ka buuxda.

Gabagabadii, xikmadda ku jirta jiritaanka janno iyo naar ah ma ahan mid tilmaamaysa ciqaab iyo abaalmarin midna. Xikmaddan waxay tilmaamaysaa in dhimashada ka dib qof walba qaab dabiici ah u beegsan doono goob uu ka helo wixii uu niyadda ka jeclaa iyo himilooyinkii uu nolosha adduunka ka baadi goobayay muddada dheer. Tusaale ahaan waxaa laga yaabaa qumayadii qaylada badnayd ee ciriirga ku dareemi jirtay guurka iyo la noolaanshaha qalbi-xabxabkii miskiinka ahaa in naarta ay ka hesho nafis weyn waayo waxay halkaas ka heli doontaa fursad ay ku guursato macan-gag ma jixiin jixe ah oo nolosha adduunka ku soo dhibaateeyay marwo masaakiin ah!

## 14. Falsafadda Afrikaanka

Falsafadda Afrikaanka waxay ku dhisantahay wada jir iyo wax wada qabsi in nolosha lagu maareeyo. Inkastoo Afrikaanku lahayn falsafad qoran oo tixraac lagu samayn karo, haddana maahmaahyada guud ee Afrika oo ah kuwo aad iskugu dhow ayaa noo muujin kara Falsafaddan nagu baraarujinaysa muhiimadda wada jirka iyo wax wada qabsiga.

Tusaale ahaan Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa" Far kaliya fool ma dhaqdo, halka qawmiyadda -Sotho oo ka tirsan bahweynta Bantuuga ay ku maahmaahan "Motho ke motho ka batho" oo macnaheedu noqonayo- ninwalba wuxuu rag ku yahay dadkiisa.

Sidoo kale qawmiyada ku hadasha luqadda Xhosa ee ku nool galbeedka koonfur Afrika waxay ku maahmaadaa " Umuntu ngumuntu ngabantu" oo la micnaha maahmaadii hore reer Sotho.

Qowmiyadaha Rabbi iskaaya baday ee geeska Africa na gula nool ee ku hadla luqadda Swahiliga waxay ku maahmaahaan "Kidole kimoje hakiui chawa" oo macnaheedu noqonayo " Far kaliya ma disho injir ama qindhicil!

Falsafadda reer Afrika waxay qofka faraysaa in jiritaankiisa uu ka baadi goobo jiritaanka iyo wada jirka guud ee dadkiisa "collectivism" halka falsafadda reer Yurub qabto in qofku yahay shaqsi ka madax bannaan jiritaanka guud ee bulshadiisa " Individualism".

Falsafadda nolosha ee Afrika haddii ay guuleysato badanaa wuxuu qofka shaqsiga ah ka dhaxlaa farxad dabiici ah waayo waa falsafad laga soo dheegtay nolosha guud ee dabiiciga ah ee aan kala maarmin.

Balse haddii falsafadan ay fashilanto oo wada jirka bulshada uu meesha ka baxo, badanaa qofka Afrikaanka ah waxaa ku dhacaa walaahow iyo wareer aan dhammaad lahayn waayo nolosha Afrika qof kaligiis meel taagan uma bareeri karo.

Dhanka kale, Falsafadda reer Yurub ee qabta aragtida ah: qof walbow naftaa, nabiyoow ummaddaa marka ay guuleysato waxaa laga dhaxlaa qab iyo in qofku aamino qurraafaad sheegaya in noloshiisa gaarka ah u madaxbanaan yahay.

Nasiib darro qabkaas iyo quraafaadkaas waxaa ku dhex qarsoon qulub "depression" iyo farxad la'aan waayo asal ahaan Falsafaddan waxay ka soo horjeedaa habsami u socodka dhabta ah ee nolosha.

Faylasuufyada u fiirsada qaab dhismeedka guud ee xabsiga maqaadiirta 'nolosha' waxay qabaan in falsafad walba oo ku baaqaysa madaxbannaanida shaqsiga tahay falsafad asalkeedii uu faafiyay shaydaan ku mashquulay naftiisa gaarka ah.

Nasiib wanaag aqoonyannada iyo maskaxshiilka bulshooyinka reer Galbeedka ee baara xannuunada dhimirka ah ee ku soo badanaya dadkooda waxay ku baraarugeen in daawada farxad la'aanta iyo qulubka laga baadi goobo farriimaha ku duugan falsafadda Afrika ee ku baaqaysa in qofka magan iyo maxbuus u yahay wanaagga iyo xumaanta bulshadiisa.

Sidaa daraadeed, qofkii raba farxad dabiici ah waa in uusan ku mashquulin farxadiisa gaarka ah. Farxada gaarka ah oo lagu mashquulo waa falsafad shaydaan. Sidaa daraadeed farxadda dabiiciga ah waxay ku xirantahay farxadda guud ee laga dareemayo deegaanka ay daganyihiin bulshada qofka ka soo jeedo.

Qof walba oo Soomaali ah meel walba uu dunida ka joogo wuxuu ku suganyahay walaahow iyo wareer aan dhammaad lahayn. Qofka Soomaaliga ee waqtigan jooga si walba uu shaqsi ahaan u guuleysto ma dareemi doono farxad dabiici ah marka la eego farxad la'aanta guud iyo foolxumada baahsan ee ka jirta Soomaaliya.

Soomaaliya waxaa lagu burburiyay falsafad shaydaan oo ku baaqaysa in qof walba iyo qabiil kasta danihiisa gaarka ah uu ka dhex raadiyo Qarannimada aan looga maarmayn nolosha casriga ah. Sidaa daraadeed, sida kaliya ee Soomaalida rafaadsan lagu samata bixin karo waa in falsafadda shaydaanka la iska naaro oo loo soo laabto falsafadda Afrika ee ku baaqaysa wada jir iyo wax wada qabsi.

## 15. Faylasuufkii Sawiray Fekerka Soomaalida

Haddii aad ka mid tahay dadka jecel in qaab falsadafaysan nolosha u fahmaan waxaa hubanti ah in aad ku caajisi doontid gabayada ciidaa ka badan ee Soomaalida tiriyaan. Inta badan dumarka iyo ragga gabya ama geeraara waxay ku celceliyaan haddallo qaab qurxoon la iskugu aadiyay kuwaas oo lagu caleemo saarayo ama lagu canbaareeynayo dhaqanka iyo siyaasadda markaas lagu mashquulsanyahay.

Sida uu ku dooday gabyaagii weynaa ee geeska Afrika marxuum Dhoodaan, Soomaalida waxaa ku yar abwaannada sida falsafadaysan u fasiri kara nolosha markaas taagan si loo fahmo ama loo furfuro aragtida foosha xun ama xikmadda qurxoon ee gadaal ka riixaysa xaaladda markaas lagu sugan yahay. Marxuum Dhoodaan wuxuu kaloo xusay in qofka gabya uusan badanaa ahayn abwaan waayo shaqada ugu weyn ee qofka abwaanka ah qabto waa daawashada muuqaallada ku qarsoon nolosha bulshada si loo helo fekrado cusub oo fadhiga looga kaco.

Tusaale ahaan, mudane Dhoodaan wuxuu xusay, in badanaa faylasuufyada Soomaalida( Abwaannada) ay curin jireen sheekooyin iyo waliba maahmaahyo asal u ah nolosha guud ee aadanaha iyo duruufaha u gaarka ah dhaqanka guud ee Soomaalida. Sidaa daraadeed, abwaan waxaa noqon karaa qof gabya oo hadallo dhaadheer ku baadigooba sirta nolosha , ama qof af-gaaban oo waqti badan ku qaata feker qoto dheer dabadeedna curiya errayo ama sheeko kooban kuwaas oo sawiraya muuqaallada qarsoon ee nolosha.

Aniga oo xasuusan tilmaamaha Abwaan dhoodaan ka bixiyay Faylasuufka Soomaaliyeed, ayaan waxaa muddooyinkan ku mashaquulay dhagaysiga sheekooyinka, khudbadaha iyo wareysiyada lala yeesho suugaanleyda, hal-abuurka iyo fannaaniinta Soomaaliyeed. Nasiib darro, lama kulmin suugaanley badan oo ku sifoobay tilmaamaha abwaannimada waayo badanaa dadka gabya ama buraanbura waqtiyadan danbe waxay u badanyihiin dumar iyo rag u mashxarada sheekooyinka ay xiiseeyaan waddaniyiinta wareersan!

Balse nasiib wanaag si lama filaan ah waxaan ku daawaday muuqaal laga duubay khudbad uu jeediyay marxuum Xassan Shiikh Muumin oo ka mid ahaa hormuudkii dhidibada u taagay suugaanta iyo fanka casriga ah ee Soomaalida. Marxuumka wuxuu hadal kooban ka jeediyay shirkii dib-uheeshiisinta ee magaalada Boorama lagu qabtay sannadkii 1993. Sheeko ku saabsan Mukulaasha oo lagu sawiray sida Soomaalida u fekeraan dabadeedna u dhaqmaan ayuu abwaanka ka sheegay madashaas.

Intii sheekada aan dhagaysanayay, waxaa hortayda ka muuqday dhammaan tilmaamahii abwaan Dhoodaan ka xusay sifooyinka u gaarka ah faylasuufka Soomaaliyeed. Tusaale ahaan, waxaa yaab leh qoto dheerida iyo xikmadda ay xanbaarsantahay sheekada mukulaasha ee Abwaan Xassan Sheekh Muumin ku sifeeyay waxyaabaha ka qaldan garashada guud ee Soomaalida iyo dabciga u gaarka ah qofka Soomaaliga ah.

Qofka faylasuufka ah kuma mashquulo erayada caadiga ah ee la isku aad-aadiyo sida gabayada oo kale, balse wuxuu maskaxdiisa ka baadi goobaa muuqaal iyo maah-maahyo la bar-bardhigayo fekradaha hoose ee gadaal ka riixaya dhaqanka guud ee bulshada ama dabciga gaarka ah ee shaqsiga. Haddii si kale loo dhigo, qofka faylasuufka ah wuuxu farriimahiisa ku gudbiyaa hadallo maah-maahyo ah (metaphorical language) waayo wuxuu rabaa inuu helo sawirrada iyo sababaha asalka u ah duruufaha markaas taagan.

Tusaale ahaan, Faylasuuf Xassan Sheekh Muumin wuxuu sheekadan ku xusay farriin weyn oo lagu sawirray fekerka guud ee Soomaalida. Xikmadda ku jirta sheekadan waxay tahay in dhibaatada Soomaalida ku dhacday ay tahay dhaqan bisadeed loola soo dhuuntay nolosha bani'aadamnimada! Haddii lagu baraarugo in bisadaha iyo bani'aadamka ku kala duwanyihiin dhaqanka nolosha, Abwaanka wuxuu qabaa in dhibaaatada taagan xal fudud loo heli karo.

Waxaa xaqiiq ah in Abwaan Xassan Sheekh Muumin ahaa faylasuuf ku fogaaday ka fekerka iyo fahamka sawirrada ku qarsoon dhaqanka guud ee qawmiyadda Soomaaliyeed. Riwaayado badan, iyo heeso taariikhda galay ayuu curiyay Abwaanka. Riyaawadahiisa caanka ah waxaa ka mid ah Shabeel Naagood iyo Dunida Maskaxday Magan u Tahay, kuwaas oo safka hore kaga jira riwaayadihiisa la tartatami kara kuwa caalamiga ee ummadaha kale.

Sidoo kale wuxuu leeyahay heeso badan oo xul ah. Tusaale ahaan heesahiisa xulka ah waxaa ka mid ah heesta: Dadweynaha ayaan hannuuninaa oo ah hees ay qaado Hibo Nuura. Waa hees lagu difaacayo looguna dabaal-dagayo kaalinta fannaanka, suugaanleyda, qorayaasha, taariikhyanannada iyo waliba abwaannada ka ciyaaraan hormarinta garaadka guud ee bulshada. Heestan oo ah hooyada dhammaan heesaha Soomaaliyeed waxay ku habboontahay in la qaado inta lagu jiro jihaadka lagu difaacayo suugaanta iyo fanka Soomaaliyeed.

## 16. Qalanjadii Qarxisay Quraafaadkii Qorraxda

Nin walba oo nin-karmeed ah wuxuu qirsan yahay in noloshiisa mar uu la kulmay qalanjo qurux badan oo qalbigiisa isku dhex qarxisay. Dhanka kale, waa yar yihiin xarfaanta qirsan in dumarku iyo ragga ka simanyihiin garaadka iyo kartida. Sidaa daraadeed, qoraalkan kooban waxaan ku baran doonnaa qalanjo qurux iyo aqoonba loo dhammeeyay oo si fudud u qarxisay quraafaadkii Qorraxda laga aaminsanaa qarniyaal badan. Barashada qalanjadan waxaa looga danleeyahay in lagu baraarugo in qooro iyo xaniinyo laa-laada kaliya aysan waxba soo kordhinaynin marka ay timaado kartida iyo aqoonta aan looga maarmin furfurida sirta qarsoon ee nolosha iyo sidoo kale fahamka saxda ah ee sameyska dunta hoose ee dunida.

Qorraxda oo ka mid ah balaayiinta xiddigood ee heehaaba hawada maran “space” ayaa xiriir iyo xannaanayn joogta ah waxay u muujisaa noolaha dul dagan dhulka oo ah meere “planet” aan daqiiqadna ka maarmi karin qosolka qorraxda! Dadka oo ka mid ah noocyda malaayiinta ka badan ee ku dul nool dhulka ayaa iska jecel in sheekooyin mala-awaal ah laga sameeyo wax-walba oo ay ku wareeraan ama garan waayaan. Dadku markii ay garan waayeen samayska dunta hoose ee qorraxda ayaa sida dhaqanka ah waxay iska dhex dabaasheen huu-haa iyo ku tiri ku teen la yaab leh.

Bulshooyinka qaar baa la soo shirtagay sheeko ah in qorraxdu tahay Ilaah mudan in la caabudo ka dibna loo nacamleeyo. Taariikhda waxaa ku qoran in quruumihii hore qaar u aqoonsadeen in qorraxadu ka mid tahay koox Ilaahyo ah oo hawada sare hadba dhan isku cayrsada sida carruur ciyaaraysa oo kale! Tusaale ahaan, ardayda barata taariikhda diimaha, waxay ka warqabaan in xoolo dhaqatadii “Aztec” ee shan qarni ka hor ku noolaa koonfurta Amerika oo waqtigaas loo yaqaannay “Mesoamerica” in ay aaminsanaayeen sheeko xariir “ myth” ah in “Huitzilopochtli” yahay Ilaah doortay dadka reer “ Aztec”. Waxaa yaab leh Ilaaha sida gaarka ah ugu u caleemo saaran ciddan reer “ Aztec” mudane “Huitzilopochtli” inuu yahay qoraxdeena aanan aqoonin eex iyo kala xigsasho ku aadan dhammaan noolihii dhintay, inta nool iyo waliba kuwa dhalan doona!


Dadku waxay muddo dheer iskaga soo dhaqmayeen quraafaad dhaxal siiyay dhaqamo halis ku ah jiritaanka nolosha guud ee dhulka. Muddo aanan sidaa u sii fogayn ayay dadka waxay ku baraarugeen farsamo cusub oo casri ah oo si qurux badan loogu qeexi karo sameyska dunta hoose ee dunida iyo waliba nolosha. Qaabkan cusub ee casriga ah “ science” wuxuu daaqadda kala baxay dhammaan quraafaadkii iyo ku tiri kuteentii dadka ku mashquulsanaayeen qarniyo badan.

Ka hor inta qaabkan cusub si fiican u soo shaac bixin, dadku waxay adeegsan jireen qaabab laga qurxoonyahay marka ay timaado ogaanshaha walxaha muuqda iyo awoodaha dhuumaalaysta!

Tusaale ahaan, xiddigaysiga “Astrology “ ayaa ahaa qaab quruumihihii hore ku ogaan jireen meerayaasha iyo xidigaha heehaaba hawada maran ka hor inta uusan soo shaac bixin cilmiga casriga ah ee xidigaha “Astronomy” oo si yaab leh u qeexay mucjisooyinka caalamka “ Universe” ayadoo la adeegsanayo farsamo iyo waliba qalab casri ah.

Inkastoo cilmiga casriga ah “science” u babac dhigay sheeko-barraley badan, haddana waxaa jira sheekooyin raqiis ah oo si fudud looga saari waayay maskaxda iyo maanka raggii hormuudka u ahaa aqoonta casriga ah. Sheekooyinkaas raqiiska ah waxaa ka mid ah in dumarka ka garasho hooseeyaan ragga. Sidoo kale aqoonyahankii cilmiga xiddigaha "Astronomy" hormuudka ka ahaa waxay rumeysnaayen sheeko xariir ah in qorraxda laga sameeyay dhammaan walxaha dhulka ka buuxa “earth material” oo kale oo ay la mid tahay dhuxul dab dulsaaran oo holaca ka baxaya ay ka dhasheen dhamacda iyo fallaaraha iftiinka ah ee tooska ugu dhaca oogada dhulka iyo dhafoorada dadka.

Waqti ku aadan sanaddii 1925 ayaa qalanjo lagu magacaabi jiray Cecilia Payne oo u dhalatay dalka Britain, waxay si qurux badan u qeexday walxaha “maters” ay qorraxda ka samaysantahay. Waxaa yaab leh sida aqoonyahanad Ceicilia ku ogaatay sameyska dunta hoose ee qorraxda. Qalabka afka qalaad lagu dhaho “ Spectrograph “ ayay hordhigtay iftiinka qoraxda ka imaanaya. Cadcadeedii qoraxda markii la hor dhigay qalabka “Spectrograph” waxaa soo baxay midabyo isku dheelitiran oo la mid ah qaanso roobaad oo kale “Rainbow.” Nasiib wanaag, aqoonyahanka ku takhasusay maaddooyinka ay ka samaysan yihiin curisyada “chemicals” waxay ogaayeen midabyada u gaarka ah iftiinka ka dhasha curisyada qaar “chemicals” haddii dab lagu shido. Sidaa daraadeed, waxaa is yeeshay muuqaalka qaanso roobaadii ka dhalatay iftiinka qoraxda iyo midabyada ka dhasha marka dab lagu shido walxaha kala ah “ Hydrogen” iyo “Hellium.”




Haddaba, aqoonyahanad Cecilia Payne waxay hoosta ka xariiqday in qorraxda inteeda badan ay ka samaysantahay maaddooyinka kala ah “ Hydrogen” iyo “Hellium.” Halkaas waxaa ka baxay quraafaadkii la aaminsanaa iyo buufiskii laga qabay qorraxda, shakigiina waxaa baddalay waxa af carbeekda lagu dhaho “Yaqiin” oo ka dhigan hubsiimo hal baa la siistaa! Sidoo kale, Cecilia waxay beenisay beentii laga faafiyay hooyooyinka iyo hablaha ee ahayd in dumarka ka garasho hooseeyaan ragga!

Waqtigii ay Cecilia Payne ku soo biirtay aqoonyahanka daraaseeya Jid-Cirirka "Milky Way” aynu ku dhex noolnahay, nimankii hormuudka u ahaa aqoonta afka qalaad lagu dhaho “ Astrophysics” waxay buufis ka qabeen kartida iyo garashada bilcaamaha! Sidaa daraadeed, Cecilia iyo gabdho badan oo la mid ah waxay la kulmeen cadaadis badan. Balse dadaal iyo daraasayn badan ka dib, dumarkii aqoonta casriga ah soo galay billowgii qarnigii dhammaaday waxay muujiyeen karti lala yaabey. Waa tiro dhaaf haweenka caqli iyo cududba ku biiriyay aqoonta casriga ah “Science” ee maanta aadanaha maganta u yahay.

Oromada iyo Soomaalida waxaa ka dhashay gabdho qalanjooyin ah oo qurux iyo qaayaba Rabbi u abuuray, balse nasiib darro qalanjooyinkaas badankooda waxay u afduubanyihiin rag qawsaaro ah oo dhaqanka qaldan ee qawmiyadahan qiimayn gaar ah ka helay. Sidoo kale Oromada iyo Soomaalida waa qawmiyado si yaab leh ugu silicsan geeska Afrika ka dib markii abaaro joogto ah iyo gaajo

goos-goos ah ay ku soo jireen muddo dheer. Haddaba, ma is tiri waxaa la gaaray waqtigii la arki lahaa in ay soo baxaan qalanjooyin Oromo iyo Soomaali ah oo sida Cecilia oo kale qarxiya quraafaadka la haray qawmiyadaha ay ka dhasheen!

**Xigasho:** J. O. Bennett, M O. Donahue, N. Schneider (Author), M. Voit. Cosmic Perspective. The (7th Edition).

## 17. Qasaaraha Qarsoon ee Aqoonta

Waqtiyadan danbe waxaa soo badanaya in aad loo buun-buuniyo barashada aqoonta nooc yadeeda kala duwan. Buun-buuninta noocaas waxay bulshada ku dhex baahisay sheeko baraleey ah in qofka aqoonyahanka ah uu ka qiimo badan yahay qofka aan aqoonta lahayn.

Sheeko walba oo la buun-buuniyo waxaa fiican in la bar-bardhigo dhabnimada nolosha si loo ogaado in sheekada lala soo shirtagay ay ka shaqeyn karto nolosha dhabta ah. Tusaale ahaan, waxaa la is barbar dhigi karaa nolosha qofka aqoonyahanka ee si fiican u bartay aqoonta qallalan iyo guulaha uu ka gaaray nolosha dhabta ah.

Saddexdii sano ee la soo dhaafay waxaa ku guulaystay abaal marino iyo aqoonsiga Jaamacadda aan ardayga ka ahay u qoondaysay ardayda guulaha waaweyn ka gaaray maaddooyinka ay bartaan. Ardayda noocaas waxaa lagu qoraa liis gaar ah oo loogu magacdaray Deans List.

Inkastoo aqoonta qallalan aan guulo waaweyn ka soo hoyiyay, haddana igama caawinin guulaha laga gaari karo nolosha dhabta ah waayo nolosha dhabta ah loogama baahna aqoon qalallan oo kaliya ee waxaa looga baahan yahay aqoon ku baraarugsan jihooyinka ay ka soo dhacayaan dabeylaha isbaddalka ee ku lamaansan nolosha si jaanta iyo jiibta iskula helaan qofka iyo bulshada uu la noolyahay.

Marar badan ayaan is weydiiyaa, aqoonta qallalan ee aad baratay maxay ku tartay haddii aadan la qaraaxaysan karin islaanta dariskaada ah?

Qasaaraha ugu weyn ee aqoonta qallalan laga dhaxlo waxaa lagu tilmaami karaa in qofka aqoonyahanka ka habsaamo baraaruga aan kor ku soo xusnay. Badanaa qofka aqoonyahanka ah wuxuu maxbuus u noqdaa aqoon lagu mataali karo qol mugdi ah oo aan hawo fiican lahayn ka dib markii daaqadii dabaysha ka soo gali lahaayeen la awday.

Haddii si fiican loogu fiirsado nolosha qofka aqoonyahanka ah, waxaa muuqanaya maxbuusnimadaas oo ah qasaaraha qarsoon ee laga dhaxlo aqoonta qalallan. Sannadihii ugu danbeeyay waxaa Soomaaliya soo buux dhaafiyay

aqoonyahanno ku dooday in ay qaban karaan hoggaaminta siyaasadda dalka maadama ay muddo badan baranayeen aqoonta qalallan.

Mar haddii bulshada aad loogu buun-buuniyay qiimaha iyo qaddarinta uu mudan yahay qofka aqoonyahanka, waxaa waqti kooban gudahood la arkay aqoonyahanno qurbo joog ah oo siyaasaddii iyo hoggaamintii dalka la wareegay. Muddo kooban ka dib, badanaa bulshadu waxay ku baraarugtay in aqoonyahannadii hoggaanka loo dhiibtay aysan ahayn niman lagu aamini karo waxar jabtay.

Haddaba waxaa fiican in lagu baraarugo qasaaraha u qarsoon aqoonta badanaa la buun-buuniyo. Qof walba ayaa aqoon baran kara, balse qof walba uma abuurna baraaruga ku habboon xikmadaha ku hoos jira dabaylaha daqiiqad walba isbaddala ee ku lamaansan nolosha dhabta ah. Haddii la helo hoggaamiye ku baraarugsan dabaylaha isbaddala ee nolosha dhabta ah, waa laga maarmi karaa boqolaal professor oo beenaalayaal ah.

## 18. Qubuuraha Qarsoon

Labadii maalmood ee la soo dhaafay waxaan ka fakerayay xiriirka ka dhaxeeya aqoonta, nolosha taagan markaas iyo waliba xabaalaha dadka lagu aaso. Arrintan inaan u kuurgalo waxaa sababay baraarug lama filaan ah oo isoo booqday mar aan booqday Jaamacadda caanka ah ee Cambridge ee dalka Uk.

Intii aan booqashada ku jiray, waxaan arkay dad badan oo adduunka dacaladiisa ka yimid kuwaas oo u soo xajiyay in ay arkaan xarumihii iyo waliba goobihii ay ku shaqayn jireen dumar iyo rag reer Britain ah oo aqoonta sayniska ku soo kordhiyay aragtiyo cilmi noqday. Tusaale ahaan, Jaamacadda Cambridge waa jaamacad boqolaal sano dhisan waxayna xarun u ahayd niman ay ka mid ahaayeen Darwin iyo Newton.

Sida badan, dadka jecel aqoonta casriga ah ee waqtigan jooga waxay qaddarin iyo qiimo u hayaan xarumaha aqoonta sida Cambridge oo kale iyo culumadii caanka noqday ee xarumahaas ka soo caan baxay. Inkastoo aan ogaa qaddarinta iyo qiimaha loo hayo xarumaha aqoonta ee qadiimiga ah, haddana kuma baraarugsanayn in booqashada Jaamacadaha noocan ah ka dhiganyihiin booqashooyinka lagu tago xurmaha kala ah Biyooleey iyo Baladul kariim.

Dhowr iyo toban sanno ka hor ayaa si lama filaan ah waxaan ku booqday tuulada Baladul- kariim oo ah xarunta uu ku aasan yahay Shiikh Nuur oo ka mid ahaa awliyadii ilaahay ee dhulka dhoobayda aadka looga qaddariyo. Intii aan Baladul- Kariim joogay, waxaan xarunta qabriga Shiikh Nuur ku arkay xer aad ugu jajaban maamuska iyo waliba qaddarinta shiikhooda. Nasiib darro qabrigii shiikh Nuur waxaa muddo dhexdaas ah burburiyay kooxo ka xanaaqa qiimaha iyo qaddarinta raggii hore!

Markii aan joogay Jaamacadda Cambridge, waxaan soo xasuustay muuqaalka xertii dul fadhisay qabriga Shiikh Nuur. Waxaan arkay dad adduunka dacaladiisa ka yimid oo ku mashquulsan daawashada qalabkii iyo qolalkii ay ku shaqayn jireen Darwin iyo Newton. Tusaale ahaan waxaa iigu la yaab badnaa markii aan arkay dad hoos jooga dhismo dabaq ah si ay u daawadaan daaqad iyo qol loogu sheegay inuu Newton daganaan jiray.

Ka hor inta aanan jaamacadda Cambridge iman waxaan aaminsanaa in aan soo booqan doono mid ka mid ah xarumaha caanka ku ah aqoonta casriga ah. Balse markii aan imid, oo aan meesha ku arkay xer u dhaqmaysa sida xertii aan ku arkay Baladul-kariim oo kale ayaan ku baraarugay in aan soo booqday qabuuro qarsoon!

Si aan ugu dhabo galo waxyaabaha aan ka baran karo baraaruggaas, waxaan is weydiiyay su'aalahan: macquul miyaa in dhabnimada nolosha lagu garto aqoonta ku kaydsan xabaalaha muuqda iyo waliba qubuuraha qarsoon oo ah kayd ay ka tageen dumar iyo rag waa hore aakhiro u guuray?

Maxaa qasbaya ama sababaya qaddarinta guud ee dhaqamada bulshooyinka caalamka u muujiyaan xabaalaha muuqda iyo qubuuraha qarsoon. - Shaqsiyad iyo dabeecad noocee ah ayay leeyihiin dadka badanaa waqtigooda ku qaata qabuuraha qarsoon- Jaamacadaha?

Jawaabaha su'aalahan waxay ii horseedeen baaritaan kooban oo ku saabsan xiriirka guud ee ka dhaxeeya dadka iyo xabaalaha muuqda iyo qubuuraha qarsoon ee qoraalkan sida gaarka ah u quseeyo

Ka hor inta aqoonta casriga ah dunida ku faafin, dadku waxay dugsan jireen khuraafaad iyo sheekooyin khiyaali ah (myths). Sheekooyinkaas khuraafaadka iyo qiyaaliga iskugu jira badanaa waxaa hal-abuuri jiray dumar iyo rag iskugu jira qaar afmiishaaro ah iyo kooxo daacad ah oo la sheekaysta awoodaha dhuumaalaysta.

Ujeedadoodu waxay ahayd in dadka la maaweeliyo si looga nasto shaqada iyo culeyska nolosha waqtiga markaas la joogo. Waxay aaminsanaayeen falsafad ku baaqaysa in maaweelada iyo sheeko xariirta muhiim u yihiin dhaqaajinta nolosha markaas taagaan.

Dhibaato weyn ayaa dhacday markii dumarka iyo raggii hal-abuuray sheekooyinka khuraafaadka iyo khiyaaliga ah toodii u timid oo xagga Rabbi iyo aakhiro looga yeeray. Qaar ka mid ah dadkii sida gaarka ah u xiisayn jiray sheekooyinka khiyaaliga ah waxay bilaabeen in xarumo waaweyn ka dhisaan xabaalahihii lagu aasay dumarkii iyo raggii allifay sheekooyinka xiisaha badan.

Badanaa dadka sida gaarka ah u xiisayn jiray sheekooyinkii ay hal-abuureen raggaas aakhiro u guuray waxay u badnaayeen dad qalbi jilicsan iyo kooxo mashaqaystayaal ah. Tusaale ahaan, qabuuraha muuqda ee awliyada ilaahay waxaa badanaa dul fadhiya dadka qalbiga jlicsan ee nolosha qallafsan ee caadiga ah aan u dul qaadan karin. Dhanka kale qabuuraha qarsoon-Jaamacadaha iyo xarumaha kale ee waxbarashada waxaa badanaa isku mashquuliya kooxaha neceb shaqada adag ee nolosha iyo buuqa ka dhex socda bulshada.

## 19. Buuggii Sannadka iyo Saadaasha Bani'aadannimada

Dhammaadka sannadkii (2017) waxaan akhriyay dhowr buug oo kala duwan. Buuggii ugu xiisaha badnaa ee sannadkaas aan akhriyo wuxuu ahaa dhiganaha caanka ah "Homo Deus: A Brief History of Tomorrow" ee uu qoray taariikhyahanka dhalinta yar mudane Yuval Noah Harari. Ujeeddada ugu weyn ee buugga waa in raadraac lagu sameeyo sawirka dadka uu ka qabo awoodaha iyo qiimaha bani'aadannimada 'humanism' iyo muuqaallada ku qarsoon mustaqbalka ku soo fool leh sawirka bani'aadamku ka haysto qiimaha jiritaankiisa. Sidoo kale buugga wuxuu saadaal ka bixinayaa dhowr muuqaal oo ku aadan mustaqbalka dhaqanka iyo dhaqaalaha guud ee dunida.

Dadka xiiseeyaa daawashada muuqaallada qarsoon ee nolosha si loo saadaaliyo mustaqbalka wuxuu buuggan ku martiqaadayaa socdaal kooban oo ku saabsan taariikhda dhow ee aadanaha. Mudane Hariri wuxuu ugu bishaaraynaa akhristaha in waqtigan casriga ah ee la joogo uu yahay waqtigii ugu wanaagsanaa ee nolosha aadanaha soo marka marka la eego muuqaallada murugada badan ee ku xusan keydka taariikhda. Tusaale ahaan, waqtigan la joogo dadka u dhinta cudurrada laga dhaxlo dharagta ayaa ka badan dadka u dhinta gaajada iyo macluusha.

Dhowr cadow oo halis ku ahaa sii socoshada nolosha aadanaha sida colaadaha, abaaraha iyo cudurrada way ka sii dabar go'aayaan guud ahaan dunida marka la eego guulaha laga gaaray cilmiga casriga ah "science "iyo siyaasada guud ee caalamka. Mudane Harari wuxuu ku doodayaa in abaarahii dabiiciga ahaa "Famine" dunida laga cirib tiray. Abaaraha waqtigan ka taagan dunida waa macluul aadanaha uu sababay "man made" marka la eego qalaalasaha siyaasadeed iyo colaadaha ka jira dunida qaarkeed. Tusaale ahaan, abaaraha soo noq-noqda ee Soomaaliya ma ahan kuwo dabiici ah balse waa musiibo ay masuul ka yihiin siyaasiyiinta maangaabka ah ee talada dalka isku haysta.

Qoraaga wuxuu billowga buugga akhristaha kula wadaagayaa dhowr cutub oo taariikh kooban ka bixinaya qaabka aadanaha uga soocmay noolaha kale ee deegaanka dabiiciga ah la wadaaga sida xayawaanka "animals' iyo qaabkii dadku u aamineen qiimaha bani'aadamnimada ayaga oo ka duulaya damaca iyo dareenka u gaarka ah dadka. Marka la eego damaca iyo dareenka u gaarka ah ee dadka, aadanaha wuxuu ku jiraa waqtigii ugu wanaagsanaa ee noloshiisa marka la eego halgankii dheeraa iyo rafaadkii laga soo maray dhismaha xadaaradda guud ee bani'aadamka.

Waqtigan la joogo dadka u dhinta gabowga iyo waayeelinimada ayaa ka badan dadka u dhinta cudurada faafa " infectious diseases' oo waagii hore aad u leyn jiray aadanaha. Sidoo kale dadka is dila "suicide" ayaa tiro ahaan ka badan waqtigan casriga ah dadka ku dhinta qaraxyada iyo dagaallada. Marka laga soo tago taariikhdaas dheer iyo hormarka la gaaray, qoraaga wuxuu is weydiinayaa mustaqbalka aadanaha ayada oo loo kuur galayo muuqaallada ku qarsoon guulaha laga gaaray farsamooyinka carsiga ah "Technology."

Qoraaga wuxuu qabaa in waqti dhow dadku samayn doonaan waxyaabo iyo hal-abuuro mucjiso u muuqan kara. Tusaale ahaan marka la eego xawaaraha ay ku socdaan farsamada casriga ah sida garashada gacanku-samayska ah "Artificial Intelligence" waxaa dhaboobi doona in la xaqiijiyo damaca ugu sarreeya ee bani'aadamka oo ah in geerida loo gooyo oo dadku awoodaan in waxyaabaha ka guuxaya maankooda iyo qalbigooda loo xawilo karo kumbiyuutarro qofka ku sii dhex noolaado marka jirka ay ka dhammaato oo gurbaanka geerida la tumo.

Sida uu qabo qoraaga, qarnigan la joogo aadanaha dharagsan wuxuu ku mashquuli doonaa soo saarida farsamooyin looga guuleeysan karo geerida oo ah xaqiiqada dhabta ah ee hortagaan damaca iyo dareenka u gaarka ah ee bani'aadamnimada "Mortality."

Waxyaabaha hadda lagu soo bandhigo filimada loo yaqaan "science fiction" ayay u badantahay in nolosha dhabta ah ka soo dhex muuqdaan sida uu qabo mudane Harari. Su'aasha sixirka ka daran waxay tahay haddii farsamada casriga ah sidan ku sii socoto sida garashada gacan ku samayska "AI", muuqaallo noocee ah ayaa ku qarsoon mustaqbalka dhaqaalaha iyo dhaqanka guud ee aadanaha? Sidoo kale, guusha farsamada carsiga ah saamayn noocee ah ayay ku yeelan doontaa sawirka aadanaha uu ka qabo nafsadiisa iyo qiimaha bani'aadanimada " Humanism"?

Mudane Harari wuxuu ku doodayaa in dunida ay ka billaaban doonto diin cusub uu u bixiyay " techno-religion" taas ah diin lagu caabudi doono ballanqaadyada farsamooyinka casriga ah ee ku baaqaya in geerida laga hortagi karo. Cibaadada

farsamada casriga ah dadku waxay ka dhaxli doonaan awoodo iyo mucjisooyin ka waaweyn dhammaan balanqaadyada diimaha kale oo dhan.

Sidoo kale qoraaga wuxuu qabaa in farsamada casriga ah ay suuqa ka saari doonto shaqaalayaal badan oo mustaqbalka dhow noqon doona koox aan qiimo u lahayn nolosha casriga ah “useless class” kuwaas oo fursado shaqo ka weyn doona suuqa shaqada ka dib markii kumbuyuutarada iyo garashada gacan ku samayska ah “AI” qiimo jaban iyo tayo sare ku qaban doonaan shaqooyinka badankood.

Sidoo kale, shaqo la’aanta baahsan ee laga dhaxli doono hormarka farsamada casriga ah waxaa barbarsocda in dhaqaalaha dunida gacanta u galo shirkado kooban oo ah milkiilayaasha qalabka ku shaqeeya garashada gacanku samayska ah “Robots” ee la wareegi doona dhammaan shaqooyinka muhiimka ah. Sida uu qabo Mudane Harari, qalabka noocan ah wuxuu xataa qaban doonaa shaqooyin badan oo maanta loo arko kuwo aad u sarreeya sida duuliye diyaarad, iyo qaliinka maskaxda!

Inkastoo hormarka iyo wax soo saarka guud ee aadanaha kor u kici doono, haddana farqiga u dhaxeeya dabaqada sare iyo masaakiinta cirka ayuu isku shareeri doonaa marka la eego muuqaalada ku qarsoon dhaqaalaha mustaqbalka ee adduunka.

Muuqaalkan aan qurxoonayn ee dhaqaalaha dunida ku soo fool leh waxaa laga dhaxli karaa qalalaase siyaasadeed iyo mid dhaqan oo halis ku ah sawirka aadanaha uu ka haysto qiimaha bani’aadamnikada iyo hormarkii guud ee aadanaha uu ka gaaray guulaha nolosha.

Dhanka kale, mudane Harari wuxuu cutubyo badan oo buugga ka mid ah ku lafa gurayaa muuqaallada ku qarsoon akhlaaq ahaan “ethics” marka qaybo badan oo dadka ka mid an noqdaan waxmataryaaal aan lahayn awood dhaqaale iyo mid siyaasadeed.

Inkastoo mucjisooyin iyo karaamo badan laga dhaxli doono hormarka qalabka casriga ah iyo garashada gacan ku samayska ah, haddana waxaa hoos u dhac ku iman doonaa qiimaha qofka iyo sawirka guud ee bani’aadamnimada “ Humanism”. Dadku waxay malaayin sano aaminsanaayeen in bani’aadamku yahay boqorka dhulka marka la eego garashada sare ee dadka u saamaxday in ay ka soocmaan noolaha kale ee deegaanka dabiiciga ay la wadaagaan. Balse muuqaallada qarsoon ee mustaqbalka waxay tilmaamayaan in markii ugu horreysay taariikhda nolosha in bani’aadamka ka garasho hoosayn doono qalabka ku shaqayn doona garashada gacan ku samayska ah “AI”

Ujeeddada ugu weyn ee laga lagaa lahaa hormarinta “ AI” iyo farsamada casrig ah waxay ahayd in tayada nolosha aadanaha kor loo qaado lalana dagaallamo geerida,gaajada iyo colaadaha. Balse ujeedadaas inta aan la gaarin ka hor, waxaa soo ifbixi doonaa qiima dhac ku yiimada bani’aadamnimada waayo waxaa lagu baraarugi doonaa qalab ka garasho sareeya qofka ugu caqliga badan dadka. Haddii ay sidaa dhacdo, mudane Harari wuxuu saadaalinayaa in la arki doono qalab go’aan ka gaara mustaqbal aadanaha si la mid ah sida dadku go’aan uga gaaraan nolosha xayawaanka.

Arrintan ma ahan mid mustaqbalka fog dhici doonta, waayo saansaanteeda hadda ayaa la arkaa. Qoraaga wuxuu tusaale u soo qaadanayaa in waqtigan la joogo qofka marka uu meel aadayo inuu tilmaanta caadiga ah iyo xasuustiisa gaarka ah kaga kalsoonyahay hagida farsamada casriga ah ee Google Map . Waqti dhow waxaa iman doonta in farsamada casriga ah la weydiiyo su’aalaha waaweyn ee nolosha sida talo ku saabsan qofka aad guursanaysid ama siyaasiga aad u codaynaysid. Sidaa daraadeed, waxaa dhaawac xooggan ku iman doonaa qiimaha iyo sawirka aadanaha uu ka qabo garashadiisa iyo dadnimadiisa.

Mustaqbalka dhow waxyaabaha suuqa lagu qiimayn doono ma noqon doonaan badeeco la soo saaray iyo bariis la beeray. Shayga ugu qaalisan ee suuqa casriga lagu kala iibsan doono wuxuu noqon doonaa xog “ Information” ayada oo laga shidaal qaadanayo falsafad qatar ku ah maamuuska bani’aadamnimada. Mudane Harari wuxuu falsafaddaas ugu magac daray “ Dataism” oo ah falsafad saldhig u ah diinta soo shaac bixi doonta ee lagu magacaabo “ techno-religion.” Falsafadda Dataims waxay qabtaa in qofka uu yahay qalab bayoolooji ah “ biological machine” oo xog ku shaqeeya. Haddii la helo qalab casri ah oo xogta qaab fiican oo sare u kaydiya waxna ugu xaliya, looma baahan doono xoogga iyo xeeladda bani’aadamka.

Mudane Harari kuma doodayo in muuqaalka mustabalka aadanaha inu sidan kaliya noqon doono waayo waxaa adag in qof uu saadaal dhab ah ka bixiyo waxa berri dhici doona. Ujeeddada buuggan waa in la daawado muuqaallada kala duwan ee ku qarsoon mustabalka si hadda loo doorto hadba mustaqbalka danta ugu jirto qiimaha bani’aadamnimada “Humanisn” Sidaa daraadeed, Mudane Harari wuxuu ku doodayaa in qalabka casriga ah uusan noqon mid faraha ka baxa oo ka garasho sarreeya aadanaha haddii kale waxaa si lama filaan ah daaqada uga bixi doona guulihii laga gaaray halganka aadanaha. Waxaana dunida ka talin doona qalab aan lahayn qalbi iyo damqasaho midna kaas oo dunida qaab qasab ah ku maquunin doona!

Buuggan waa buug aad u buuran oo baalashiisa lagu daalayo. Inkastoo cutubyo badan iyo xog aad u qiimo badan aan ka tagay, haddana qoraalkan waxaan ku soo koobay nuxurka dooda buugga. Mudane Harari wuxuu ka digayaa mustaqbal mugdi ah oo ku soo fool leh guulaha bani’aadamka marka la eego

xawaaraha sare ee farsamada casriga iyo garashada gacan ku samayska ah. Waqti dhow dadku waxay nolosha ka xaqiijin doonaan waxyaabo u muuqaallo eg mucjisooyin iyo karaamo, balse guushaas waxaa laga dhaxli doonaa isbaddal ku yimaada dhaqanka iyo dhaqaalaha guud ee dunida.

Ugu danbayntii guushan waxay horseedi doontaa in dhaawac daran uu soo gaaro sawirka dadka uu ka qabo awoodaha iyo qiimaha bani'aadamnimada 'humamism' waayo markii ugu horreesay taariikhda caalamka waxaa maamulka dunida la wareegi doona qalab aan qalbi lahayn kaas oo ku shaqeeya garasho gacan ku samays ah!

## 20. Tiirarka Fekerka iyo Fahamka Tirooyinka

Inkasta oo dadka isku muuqaal iyo magac dhow yihiin, haddana waxaa kaaf iyo kala dheeri ah qaabka dadka u fekeraan iyo qalabka ay adeegsadaan marka ay fekerayaan. Qoraalkan wuxuu qaada dhigi doonaa qaabka ay u fekeraan dadka aragtidooda iyo go'aamadooda ku dhisa tiirarka tirooyinka (numbers).

Dadka marka arrin go'aan ay ka gaarayaan ama aragti aaminayaan adeegsada tiirarka tirooyinka tiro ahaan ma badna, waayo waxaa ka badan qolooyinka fekerkooda ku dhisa dhagxaan ay ka mid yihiin: dhaliilaha dhaqanka, khuraafaadka taariikhda, dareennada qalbiga iyo waliba caadooyinka markaas la caashaqsan yahay!

Dadka ku dhisa fekerkooda tiirarka tirada (numbers) waxay badanaa xoogga saaraan ogaanshaha tirada guud ee hadba mawduuca markaas la gorfeynayo si go'aanno macquul ah looga gaaro tallaabo walba oo la qaadayo ama la joojinayo.

Tusaale ahaan haddii dadka fekerkooda ku dhisa tiirarka tirada la weydiiyo, dagaalka Tuka-raq kusoo noqnoqday qalad miyaa mise waa sax, dooddooda kuma bilaabayaan hadallo cuskan caadooyin la caashaqay iyo dhaliilaha dhaqanka. Dhanka kale dooddooda ay ku diiddan yihiin dagaalladaas Tuka-raq kuma dhisayaan hadallo caadifad ah sida: Soomaalida waa wallaalo muslimiin ah oo wadaaga dhaqan iyo dhiig, mana habboona in ay is laayaan.

Sidoo kale dadka tirooyinka ku fekera aad uma xiiseeyaan hadallada qiiraysan ee ku saabsan wada dhalashada iyo dhaqanka soo jireenka ah ee Soomaalida. Kaliya waxay eegaan tiro ahaan kharashka iyo dhaqaalaha ku baxaya dagaalladaas in ay maangal yihiin ama siyaabo kale looga faa'idaysan karo iyo in tirada dadka ah ee halkaas ku dhimanaya u qalmaan loo hibeeyo tukaha ka qaraabanaya aagga Tukaraq.

Tusaale ahaan waxay is weydiinayaan waa immisa qarashka guud ee maalintii lagu maalgaliyay dagaalladii Tuka-raq iyo immisa qof oo reer Puntland ama Soomaaliland ah ayaa gaajo beerka dhulka ku haya?

Haddii dadka tirooyinka ku fekera ogaadaan in dad badan oo baahan ay joogaan Puntland iyo Somaliland, waxay ku baraarugayaan in dagaalka Tukaraq ka dhacay uu yahay mid aan marnaba macquul ahayn, waayo waxay ogyihiin in lacagaha lagu maalgaliyay dagaalladaas lagula tacaali karo gaajada baahsan ee ka taagan Geeska Afrika.

Marka hore inta aysan ku dhawaaqin xaaraantinnimada dagaalka Tukaraq, dadka ku fekera tirooyinka waa in ay helaan tirada guud ee saxda ah ee ku saaban dhaqaalaha ku baxa iska horimaadyadaas maalintii.

Soomaalida waxaa ku badan dadka marka ay dooddayaan aragtidooda aan ku dhisin tiro la taaban karo balse marwalba ku xiiqa dooddo loo cuskaday caadifad caato ah iyo calaacal aad uga fog caqli fahamsan tirooyinka guud.

Inkasta oo Soomaalida ku badan yihiin dadka noocaas ah ee neceb ama ka caaggan in tirooyin guud la adeegsado, haddana marmar waxaa goobaha la isku dhaafsado doodaha ka soo qayb gala aqoonyahanno ama siyaasiyiin faro ku tiris ah oo dhiraadhirinta fekerkooda u cuskada tirooyinka guud ee laga caaggan yahay.

Tusaale ahaan, siyaasiyiinta faro ku tiriska ah ee tirooyinka adeegsada marka ay fekerayaan waxaa ka mid nin aad macquul u ah oo lagu magacaabo Salaad Cali Jeelle. Siyaasigan wuxuu maalin dhoweyd ka qayb galay madal looga hadlayay waxqabadka dawladda Federaalka ee Soomaaliya.

Madashaas waxaa ka hadlay siyaasi kale oo ka caagganaa in tirooyinka si fiican loo adeegsado. Siyaasiga ka caaggan tirooyinka wuxuu ku dooday in bisha barakaysan ee Ramadaan magaalada Muqdisho lagu dilay illaa 37 qof. Sidaa daraadeedna xaaladda amni ee magaalada ay aad u xuntahay.

Salaad Cali Jeelle oo ka jawaabaya doodda loo cuskaday tirooyinka la caadifadeeyay ayaa isku dayay in dooddaas hadal macquul ah looga jawaabo. Mudane Jeelle wuxuu tiradii la soo bandhigay u qaybiyay labaatankii maalmood ee laga soo gudbay bisha Ramadaan. Dabadeed na wuxuu tiradii qaybtaas ka soo baxday oo ahayd celcelis ahaan maalintii in bisha Ramadaan magaalada Muqdisho lagu dilay ugu yaraan labo qof uu barbardhigay tirooyinkii xad-dhaafka ahaa ee maalin walba sannadihii la soo dhaafay lagu dili jiray Muqdisho inta lagu guda jiro bisha barakaysan ee Soonqaad.

Dhiraandhirintaas ka dib, wuxuu Salaad Cali Jeelle dooddiisa ku sheegay in amniga magaalada Mudisho uu soo hagaagay marka doodda iyo aragtida ku saabsan amniga caasimadda loo cuskado tiirarka tirada!

Soomaalida kaliya kuma badna aqoonyahanka iyo siyaasiyiinta u cuskada doodahooda dhaliilaha dhaqanka iyo dhiillada qalbiga "moralists". Waqtigan casirga ah waxaa soo badanaya aqoonyahanka iyo siyaasiyiinta ka caaggan tiirarka tirada marka ay fekerayaan kuwaas oo ku dooda in adduun gaddoonkii soo dhow yahay marka la eego anshax xumada iyo xaasidnimada faaftay ee aadanaha jooga qarnigan casrigah ah.

Maalin maalmaha kamid ah waxaan daawaday muxaadaro uu jeediyay macallin Jaamacadeed oo la yaaban aqoonyahannada soo badanaya ee ka caaggan ama u careysan in fekerka lagu saleeyo tiirarka fekerka iyo fahamka tirooyinka.

Macallinkan waxaa lagu magacaabaa Professor Steven Pinker. Mudane Steven waa saynisyahan caan ah oo Jaamacadda Harvard ka dhiga cilmiga-garashada “Cognitive Science.” Bishii ina soo dhaaftay, wuxuu mudane Steven qabtay muxaadaro dadka fekerka u cuskada tiirarka tirada aad ugu raaxaysteen.

Cinwaanka muxaadaradan waxaa saldhig looga dhigay su’aal iyo u kuurgalid sidan loo tarjumi karo: Dunida ma soo hagaagaysaa mise way ka soo daraysaa? Jalleecadii Tirada (Is the world getting better or worse? A look at the numbers).

Muxaadaradan waxay jawaab u ahayd qaylo dhaanta badanaa ka soo yeerta aqoonyahannada u cuskada doodahooda dhaliilaha dhaqanka iyo dhiillada qalbiga- moralists iyo warbaahinta caalamka kuwaas oo ku dooda in dunida ay ka soo darayso marka la eego dhankasta.

Dagaallo joogto ah, macluul, argagaxisnimo, faqri, musiibooyin dabiici ah iyo kaligood-taliyaal shacabkooda gumaaday ayaa ah badanaa dhibaatooyinka dadkaas balaayo sheegga ah warbaahinta ku soo bandhigaan. Sidoo kale aqoonyahannada iyo siyaasiyiinta diiddan in fekerka lagu dhiso tiirarka tirada waxay faafiyaan jamasho iyo xiiso loo cuskaday sheeko ku saabsan in noloshii hore ee aadanaha ay ka fiican tahay nolosha maanta taagan “Nostalgia”.

Mudane Steven, mar uu ka jawaabayay balaayada aqoonyahannadaas kor ku xusan iyo warbaahinta ka faafiyaan nolosha casriga ah ee qarnigan 21aad, wuxuu sheegay in sababta ugu weyn ee waayihii hore wanaag loogu tuhmo in ay tahay xusuus qaldantay.

Marka taariikhda iyo tirada guud ee nolosha aadanaha la eego, wuxuu mudane Steven sheegay in sawir qurxoon oo ka duwan midka foosha xun ee la baahiyo in si fudud lagu arki karo. Haddaba si sawirkaas qarsoon loo muujiyo, mudane Steven wuxuu ku dooday in kaydka tirooyinka ee soddonkii sano ee la soo dhaafay “ Data” la barbardhigo tirada hadda ee ku saabsan dagaallada dunida ka socda, inta qof ee faqri ah, cadadka kaligood taliyaasha dalalka qaar ka taliya iyo waliba gantaalaha nukliyeerka ee dunida yaalla.

Tusaale ahaan, sannadkii 2017-dii, dunida waxaa ka socday 12 dagaal; waxaana dalalka qaar ee dunida ka talinayay 60 kaligood-taliyaal; boqolkiiba toban 10% bulshada caalaamka ayaa ku sugnaa faqri aad u baahsan; halka madaxyada nukliyeerka ee dunida yaalla gaarayeen toban kun oo gantaal.

Dhinaca kale, soddon sano ka hor, dunida waxaa ka socday 23 dagaal; waxaana dunida meelo ka mid ah ka talinayay 85 kaligood-taliyaal; tirada dadka caalamka ee faqriga ba'an ku sugnaa soddon sano ka hor waxay ahayd 37%; halka madaxyada gantaallaha ee dunida yaallay ay gaarayeen in ka badan 60,000 oo gantaal.

Mudane Steven wuxuu ku dooday in marka tirada hadda ee nolosha casriga ah la barbardhigo tirooyinka tilmaamaya muuqaalkii nolosha aadanaha ee soddon sano ka hor in lagu baraarugayo hormarka la taaban karo ee bani'aadamka uu ka gaaray nolasha. Dhanka kale Steven wuxuu sheegay in sawirkan quruxda badan la arki karo oo kaliya marka la fahmo tirooyinka islama markaana fekerka loo cuskado tiirarka tirada.

Haddii loo kuurgalo doodaha loo cuskaday tiirarka tirada ee mudane Steven iyo siyaasi Salaad Cali Jeelle soo jeediyeen, wuxuu qofka Soomaaliga ah ee tirooyinka ku fekera si fudud ku fahmi karaa in nolosha guud ee aadanaha iyo gaar ahaan xaaladda Soomaaliya hormar weyn laga gaaray sannadihii la soo dhaafay.

Nasiib darro dadka tirooyinka ku fekera waxaa ka badan dadka badanaa u cuskada fekerkooda caadifad caato ah iyo dhiilo markaas taagan. Qolooyinka caadifadda iyo dhiilada markaas taagan u cuskada fekerkooda ayaa badanaa qalqal galiya qaab fekerka bulshada waayo waxay daaqad dhow dadka ka tusaan qiyaamihii oo soo guurguuranaya.

Dhibaatooyinka ay baahiyaan dadka ka caaggan adeegsida tirooyinka waxba lagama qaban karo waayo in sidaas ay u fekeraan waxaa ku kala socda suuqa beenta iyo borobogaandada oo ah barta laga hago dhaqaalaha iyo siyaasadda caalamka.

Haddii dadka tirooyinka ku fekera sida mudane Salaad Cali Jeelle iyo Macallin Steven talada loo dhiibo, waxaa bandow lagu soo rogayaa beenta iyo borobogaanka nolosha. Nasiib darro, maqaadiirta waxay go'aamisay in aqlabiyadda badanaa talisa noqdaan dadka ka caaggan adeegsiga tirooyinka.

Ugu danbeyntii, markii tiro ahaan laga batay dadka fekerkooda ku dhisa tiirarka tirada ee si fiican u fahansan tirooyinka, taladii waxay noqotay in ay ku dhuuntaan jaamacadaha iyo xarumaha lagu barto noocyada kala duwan ee xisaabta sida "statistics" si kor looga daawado muuqaallada qarsoon ee nolosha.

Dadka tirooyinka fahamsan ee fursad aan u helin in dhufeysyada Jaamacadaha ku dhuuntaan sida Salaad Cali Jeelle oo kale badanaa waxay go'aan sadaan in beenta iyo borobogaanka lagula dagaallamo feker cuskan tiirarka tirada iyo muuqaallada qarsoon ee nolosha!

## 21. Kiiladii Tubaakada iyo Kaalinta Waqtiga

Sannadkii saddexaad ee Jaamacadda waxaan qaatay maaddo ku saabsan qaab dhismeedka feker ee Afrikaanka- African system of thought. Ujeedada ugu weyn ee class kan waxay ahayd in la akhriyo oo waliba la is barbar dhigo qoraalladii ay ka tageen mufakiriinta Afrikaanka ah ee dhiraandhiriya qaab dhismeedka guud ee Afrikaanka u fekeraan.

Aqoonyahannadii qoraalladooda aan aqrinnay waxaa ka mid ahaa faylasuuf Afrikaaan ah oo caan ahaa bartamihii qarnigii dhammaaday oo lagu magacaabo John Mbiti. Mowduuca ku saaban qaab dhismeedka fekerka Afrikaanka ee mudane Mbiti qoraalkiisa ku lafa guray wuxuu ahaa: waqtiga iyo dhaqanka guud ee Afrikaanka. Warqaddaas cilmiga ah wuxuu mudane Mbiti cinwaan uga dhigay :Time in Traditional African Thought.

Mbiti wuxuu ku dooday marka loo kuur galo dhaqan maalmeed ka guud ee Afrikaanka in waqtiga u qaybsan yahay laba qaybood oo muhiim ah. Qaybta koowaad wuxuu ku sheegay tagtada fog- long past , halka qaybta labaad ku tilmaamay waqtiga markaas taagan- present. Sida uu qabo Mbiti, timaadada- future muhiimad iyo macno badan kuma lahan qaab fekerka guud ee Afrikaanka.

Sababta timaadada macno badan ugu lahayn Afrikaanka ka wuxuu mudane Mbiti ku sheegay in dhacdooyinka mustaqbalka si fiican aan loo saadaalin karin ama loogu fahmi karin. Sidaa daraaddeed, waqti u qaybsan saddex qaybood (tagto, taagan iyo timaado) waa mid ku cusub qaab fekerka guud ee Afrikaanka waayo waa dhaqan dibadda laga soo waariday.

Mbiti wuxuu qabaa in waqtiga Afrikaanka uu yahay dhacdooyin is xig xiga oo markaas dhacaya, ama dhacdooyin waqti hore u dhacay oo hadda xusuustoodii lagu jiro ama loo dabaal dagayo.

Inkasta oo doodda mudane Mbiti daldaloollo badan leedahay, haddana waxaa marag ma doonto ah in Afrikaanka iyo waqtiga loo qorsheeyay mustaqbalka sida ballamaha in dhibaato badan isku qabaan. Dhowr iyo labaatankii

maalmood ee la soo dhaafay waxaan wareegayay magaalooyin ku yaalla geeska Afrika.

Mar Addis Ababa aan ka baxayay oo Nairobi u socday, diyaaraddii noo qorsheysnayd in aan raaco waxaa dib loo dhigay saacad iyo shan toban daqiiqo. Nin aan wada fadhinay ayaan ka sheekaysannay dib u dhaca ku yimid diyaaradda si waqtiga aan isku dhaafinno. Wuxuu ii sheegay in shirkada Ethiopian Airline waqtiga ilaaliso marka qaaradaha kale la joogo, balse markii Afrika la joogo in shaqaalaha shirkadda waqtigii la qorsheeyay ku tuntaan!

Hadalka ninkaas wuxuu dib ii xasuusiyay doodihii mudane Mbiti ku saabsanaa qaybaha waqtiga iyo guud ahaan qaab fekerka Afrikaanka! Waxaan magaalooyinka kale ee geeska Afrika u gudbay aniga oo maanka ku haya dooddii Mudane Mbiti.

Maalmihii aan wareegayay magaalooyinka geeska Afrika waxaan la yaabay in ballan walba oo qof aan dhiganno in dib u dhac ama baaqasho ku imaanaysay. Badanaa sababaha dib u dhaca ama baaqashada ballamahaas waxay ahaayeen dhacdooyin lama filaan oo daaqadda ka saarayay dhacdadii ama ballantii la qorsheeyay timaadada- future.

Aniga xattaa dhowr ballamood oo aan qoraheeyay ayaan ka baxay ama dib u dhigay dhacdooyinka markaas taagan awgood.

Sida uu qabo mudane Mbiti, qofka Afrikaanka ah wuxuu badanaa ku mashquulsan yahay dhacdo markaas taagan, taas oo muhiimadda ka qaadaysa ama daaqada ka tuuraysa qorshihii mustaqbalka. Sidaa daraadeed, qofka Afrikaanka ah badanaa wuxuu dhexda uga jiraa dhacdooyin markaas dhacaya oo aan xiriir la lahayn waxyaabihii iyo arrimihii horay loo qorsheeyay.

Tusaale ahaan, markii aan ka soo baxayay magaalada Garoowe oo aan u soo socday magaalada Gaalkacyo wuxuu qorshaha ahaa in 8:00 subaxnimo magaalada aan ka baxno. Dhacdooyin lama filaan ah oo dhacay dantood, gaarigii wuxuu soo baxay 9:00 subaxnimo. Rakaabka iyo anigaba waan faraxsanayn waayo saacad kaliya ayaa dib u dhacnay.

Farxaddaas waxay noqotay mid qabyo ah ka dib markii teleefoon u soo dhacay wiil ka mid ah rakaabkii gaariga saarnaa. Wiilkii dhallinyarada ahaa wuxuu darawalkii u sheegay in qofka soo wacay oo Gaalkacyo jooga uu doonayo in Kiilo Tubaako ah horay loogu soo iibiyo!

Darawalkii wuxuu yarkii u sheegay in magaalada laga soo baxay, aysanna macquul ahayn in kilo tubaako ah darteed loo laabto. Ninkii dhallinyarada ee kiilada tubaakada ah laga soo dalbaday si lama filaan ah ayuu ku xanaaqay. Wuxuuna ku hanjabay in gaariga iyo safarka oo dhan uu ka hari doono waayo wax walba waxaa uga daran in saaxiibkiis tubaako la'aan ku dhacdo!

Muddo markii yarkii iyo darawalkii murmayeen oo hadalkii uu ka taagtaagmay, ayaa waxaa soo kala dhex galay nin kale oo rakaab ahaa kaasoo xog fiican ka hayay suuqa guud ee Tubaakada Garoowe. Ninkaas wuxuu sheegay in kantaroolka magaalada looga baxo lagu iibiyo Tubaako aan ka tayo liidan tubaakada taalla suuqa weyn ee magaalada. Nasiib wanaag, kiilo tubaako ah oo sanka kaa galaysa ayaa ka helnay tabakaayo u dhow isbaarada magaalada looga baxo. Halkaas waxaa ku soo afjarmay murankii khatarta galiyay waqtigii safarka loo qorsheeyay.

Haddii dhacdadan lama filaanka ah iyo dalabkan ku saabsan kiilada tubaakada ah lagu eego dooddii Mudane Mbiti, waxaa muuqanaya in wiilka dhallinyarada ah qatar galiyay waqtigii safarka loo qorsheeyay asaga oo feker la'aan ula falgalaya dalabka deg-dega ah ee ku aaddan kiilada tubaakada ah ee saaxiibkiis soo dirsaday.

Ugu danbayntii, dhacdadan waxay muujinaysaa in kiilo tubaako ah ama kiis kale oo dhacay sabab u yihiin baajinta ballamaha iyo waliba burburinta waqtigii loo qorsheeyay shaqada mustaqbalka. Sidaa daraadeed, doodda mudane Mbiti waa mid maangal ah oo mudan in dooddo kale laga sii furo!

## 22. Xadka Riyada iyo Runta

Mucjisooyinka dadka caqliga leh ka yaabiya waxaa ka mid ah meesha ay ku kala baxaan hurdada iyo soo jeedka. Faylasuufyo dhowr ah ayaa muddo badan ku mashquulsanaa fahmida farqiga u dhaxeeya hurdada iyo soo jeedka. Tusaale ahaan, faylasuufkii reer Giriig mudane Aristotle wuxuu qoray buug u gaar ah hurdada iyo hurdo la'aanta. (On Sleep and Sleeplesness by Aristotlel).

Diimaha kala duwan iyo laamaha cilmiga casriga ah- science waxay doodo badan ku darsadeen farqiga u dhaxeeya hurdada iyo soo jeedka. Diimaha waxay ku doodaan in hurdada tahay geeri iyo safar gaaban oo lagu gaaray caalamka qarsoon, halka cilmiga science ka qabo in hurdada tahay fasax gaaban oo jirka uu ka qaato shaqada adag ee nolosha!

Mucjisooyinka hurdada waxaa ka mid ah riyooyin kala duwan oo marna macaan ah marna qaraar ah. Taxanaha taariikhda bulshooyinka adduunka waxaa saamayn weyn ku yeeshay riyooyin gaar ah oo saqda dhexe habeenkii ay ku riyoodeen niman iyo naago khuurinaya! Tusaale ahaan riyadii Nabi Yuusuf ee ku saabsanayd saacaha is cunaya waxay sababtay in sannado badan oo abaaro ah laga badbaado!

Inkastoo riyooyinka qaar saamayn yeeshaan haddana waxaa badan riyooyin lagu tilmaami karo in ay la mid yihiin hal bacaad lagu lisay. Tusaale ahaan waxaan mar ku riyooday aniga oo ka mid ah shacab soo dhoweynaya madaxweyne Farmaajo kadibna inta soo gaatamay si fufud u dafay koofiyadda barawaaniga ah ee Madaxweynaha. Koofiyadii madaxweynaha aniga oo gashan ayaan sawir soo dhigay Facebook ka dibna waxaa riyada dhexdeeda ku helay kun iyo konton iskugu jira likes iyo love!

Waxaa jira wadaaddo iyo aqoonyahanno ku taqasusay cilmiga nafsiga oo aad iskugu mashquuliya in riyooyinka la fasiro. Tusaale ahaan caalimkii weynaa ee cilmiga nafsiga mudane Freud wuxuu qoray buug caan oo u gaar ah fasiraada riyada "The Interpretation of Dreams." Doodda ugu weyn ee buuggan gudbinayo waxay tahay in riyada ka dhigantahay haraadigii runta soo jeedka oo si fiican aan loo ruugin!

Tusaale ahaan, Freud haddii la weydiiyo fasiraada riyadaydii ku saabsanayd dafida koofiyadda madaxweynaha wuxuu sheegi lahaa in aan ahay guulwade miskiin ah oo ku dhafray daawashada sawirro soo dhaweyn ahaa oo la xiriiray madaxweynaha ka dibna hurdada dhexdeeda ku sii guulwadeeyay!

Dhanka kale haddii wadaad mucaarad ah la weydiiyo fasiraada riyadan waxaa laga yaabi lahaa in uu sheego in aan ka mid ahay dad uu riyada ku duufsaday shaydaan weyn oo iska soo dhigay madaxweyne Farmaajo!

Inkasta oo fasiraadaha riyooyinka badan yihiin haddana waxaa jirta xad guud oo u dhaxeeya guud ahaan riyada iyo runta. Qofka wuxuu xadkan la tillaabi karaa asaga oo hurda ama soo jeeda. Tusaale ahaan waxaa jira dad soo jeedka ku riyooda kuwaas oo badanaa daawada muuqaallada qarsoon- Daydreaming.

Qaababka loo qeexo xadka runta Iyo riyada waxaa ka mid ah in riyadu tahay wax u gooni ah shaqsiga riyoonaya halka runtu na ka tahay waxyaabo dadka oo dhan ay wadaagi karaan ayaga oo adeegsanaya shanta dareen. Haddaba xadka runta iyo riyada waa isla xadka u dhaxeeya shaqsiga iyo bulshada. Haddii shaqsiga riyooday uu bulshada ka iibiyo sheeko ku saabsan riyadiisa, qofkaas iyo bulshadiisa waxay ka tallaabeen xadka riyada iyo runta.

Marwalba oo xadka riyada iyo runta laga tallaabo waxaa loo gudbaa deegaanka mucjisooyinka. Mucjiso walba oo adduunka ka dhacda waa riyo iyo run si lama filaan ah u midoobay. Tusaale ahaan waxaa macquul ah in madaxweyne Farmaajo asaga oo qaxooti ku ah America in uu ku riyooday Soomaalida oo si lama filaan ah magaciisa ku midoobay. Haddaba soo dhoweynta mucjisada ah ee Madaxweynaha uu la kulmay markii la doortay, waxaa laga yaabaa in ay ka dhigantahay in dawlada Soomaaliya iyo shacabka ka gubeen xadka riyada iyo runta!

## 23. Qasbanaanshaha Qarsoon

Qoraaga waxba ma qoro, balse qoraalka oo la mid ah askari wata qori cabaysan ayaa qoraaga ku qasba in uu wax qoro. Sidoo kale qoraalka waa waa sida oday qaylo badan oo carruurtiisa ku qasba in ay u soo qaaraamaan shilimaad uu ku marqaamo!

Dhanka ale hoggaamiyaha wanaagsan waxba ma hoggaamiyo, balse hogaaminta oo la mid ah islaan maro ku hagoogan oo kale ayaa hoggaamiyaha ku hogaamisa inuu qaab wanaagsan wax u hoggaamiyo. Hogaamiyaha haddii uu damco inuu diido talada hoggaaminta ee la midka ah islaanta hagoogsan, waxaa ku dhaca habaar horseeda kala haad ummadeed!

Sidoo kale, mucaashaqa meelaha ku calaacala waxba ma jecla balse jaceylka oo la mid ah labaatan jir ka tahriibaya Geeska Afrika oo kale ayaa mucaashaqa ku qasba inuu geed dheer iyo geed gaaban u fuulo dhadhaminta macaanka iyo qaraarka Jaceylka. Muddo ka dib mucaashaqii ku tahriibay saxaraha jaceylka, wuxuu caashaqa kala kulmaa niyad jab la mid ah qalbi jabka uu la kulmo labaatanjirka Yurub u tahriibay oo kale!

Waalidku waxba ma dhalaan, balse dhalmada oo la mid ah sida qunbulad ama miino qaraxday oo kale ayaa waalidka ku qasabta in ay dhalaan ubad aysan hadda ka hor la kulmin. Kuwa dashay qudhooda waxaa qaab qarsoon u qasbay dhalmada oo la mid ah makiinada cajiinka ee lagu shiido galleey aan lala tashan balse la soo garbaduubay!

Wadaadka waxba ma wacdiyo, balse wacdiga oo la mid ah wafdi ka yimid waddanka Waqooyiga Kuuriya oo kale ayaa wadaaddada ku qasba in uu ay bulshada u qabtaan muxaadarooyin looga sheekaynayo qiyaamaha iyo shukaansiga qaldan!

Soomaalida ma doonayn in ay is dilaan ama dagaallamaan, balse dagaalka oo la mid ah islaan masayrsan oo kale ayaa Soomaalida oo la mid ah xaaji iska hurda gurigiisa ku shubtay biyo karkaraya si Soomaalida loogu dhigo cashar ku saabsan basarxumada!

Waxaa laga yaabaa in dagaalka oo la mid ah islaan ka masayrtay odaygeedii oo kale in Soomaalida biyo karkarsan ku shubtay ka dib markii Soomaalida damceen in ay daandaansadaan dalalka dariska ah si la mid ah odayaasha shukaansiga ku daandaansada islaamaha dariska ah!

Qofna waxba ma cuno, balse cunista oo la mid ah ciidamo gadoodsan oo kale ayaa qofka ku qasba inuu xasuuqo raashinka oo la mid ah shacab aan hubaysnayn! Cunista la midka ah ciidamada gagoodsan oo kale waxay badanaa ka amar qaataan gaajada oo la mid ah Jeneraal Gabre oo kale!

Qofna waxba kuuma diidana, balse diidmada oo la mid ah diyaaradaha kaligood duula- drones ayaa marwalba dalabkaada ku duqeeya madaafiic laga soo riday hawada sare! Qofka wax kuu diidan oo kale waxba ma kala oga waayo waa moogane la la mid ah madfaca la soo riday oo kale!

Aniga qudheyda qoraalkan ma qorin, base qalinka oo la mid ah duulal qarsoon oo aan la qoon meel ay ka soo qaylinayaan ayaa qoraalkan igu qasbaya. Qasbanaanshaha qarsoon qudhooda waxay ka amar qaataan maqaadiir malaayiin sano amaro qarsoon bixinaysay.

Sidaa daraadeed qof walba ama qolo kasta oo kugu qaldoontay waa in aad cafisaa waayo dhammaantood waa masaakiin qaab qarsoon u qasban! Waxba ma cafin kartid haddii maqaadiirta kugu casuumin casho sharaf ku saaban cafiska!

# Cutubka Labaad: Caqliga iyo Cilmi Nafsiga

## 24. Naxariista Caqliga

Nolosha waxaa ku lammaansan dhibaatooyin badan oo siyaabo kala duwan nolasha ula xariira. Taariikhda aadanahana waxaa ka buuxa dhacdooyin xanuun leh iyo xaaladdo argagax badan oo soo taxnaa intii ay nololi jirtay. Cudurrada, Colaadaha, Gaajada, Musiibooyinka dabeecada iyo Geerida ayaa ah xaqiiqooyinka nolosha oo aan marnaba laga baxsan karin.

Inta badan taariikhda aadanaha waxaa ku xusan rafaad iyo silic laga dhaxlay xaqiiqada nolosha, marwalba na dhibaatada waxay le'ekayd hadba inta caqliga lala kaashado. Tusaale ahaan waqtiyadii bani'aadamka uu ka fogaa adeegsiga caqliga, noloshu waxay ahayd mid qalafsan oo dhibaato badan, balse wixii ka danbeeyay markii uu bani aadamku ku baraarugay naxariista caqliga, dhibaatada nololeed ee ilma aadan way sii yaraanaysay.

Noloshan casriga ah, waxaa jira qaybo badan oo caalamka ka mid ah oo dhibaatooyinka nolosha ku lammaansan ay si wayn uga muuqdaan. Gaajada, Colaadaha, Abaaraha, iyo waliba Xaasidnimada ayaa ah xaqiiqda ka jirta in badan oo ka mid ah qaaradda Afrika. Meelaha ay sida wayn uga muuqdaan dhibaatooyinka nolosha malaha waxaa horseed ka ah Soomaliya oo labaatan sanno ka badan ay noloshu ahayd mid aad u qalafsan oo dhan walba ciriiri ka ah. Inta aan wax walba xal loo raadin waxaa habboon in la sameeyo daraasad ama cilmi baaris lagu ogaanayo in dhibaatada jirta ay hore uga dhacday dunida. Sidoo kale waa in maanka lagu hayo in dhibaato kastaa ay leedahay xal u gaar ah oo ku jaango'an xaaladaha ku xeeran dhibaatadaas.

Maqaalkan kooban wuxuu isku dayi doonaa in jiho cusub uu ka sahmiyo xalka dhibaatada ragaaday ee aan garan la'nahay sidii aan uga bixi lahayn. Doodaha laga daalay waxaa ka mid ah in dhibaatada Soomaliya ay tahay adeegsiga qabyaaladda, sidoo kalena waxaa jirta aragti si guud dadka looga dhaadhiciyay oo ah in xalka Soomaliya uu yahay in diinta loogu dhaqmo hadba sida diinta ay u arkaan kooxaha kala duwan ee diinta ku raadiya xukunka Islaamka.

Doodahaas iyo kuwo kaloo badan ayaa lagu mashquulsanaa wixii ka danbeeyay burburkii dalka. Sidaa darteed qoraalkani wuxuu golaha keeni doonaa dood cusub oo mudan in si xilkasnimo ah looga qayb qaato. Doodda oo kooban waa in caqliga uu yahay meesha kaliya ee laga baadi goobi karo xalka dhibaato kasta oo nolosha la xariirta. Sidoo kale waxaan aaminsanahay in caqliga oo laga fogaado ay tahay isha dhibaato kasta oo nolosha laga dhaxlo.

Farsmo kasta iyo xeelad walba oo lagu maareeyo nolosha waxaa laga soo dhiraadhiriyay caqliga. Tusaale ahaan cudurrada iyo musiibooyinka dabeecada waxay halis ku ahaayeen jiritaanka aadanaha. Wixii ka horreeyay inta aanan

caliga laga qaan gaarin, bani’aadamku wuxuu xal uga baadi goobi jiray mashaakilka nolosha meel aan caqliga ahayn, waana taas sababta ay u bateen quraafaadka iyo baqdintu. Cuduro si sahal ah lagu daawayn karay, ayaa waxaa lagu fasiray ciqaab cirka a laga soo dajiyay, balse muddo aan sii fogayn ayuu aadanahu ku baraarugay naxariiska caqliga, waana markii la fahmay cudurrada in la dawayn karo oo aysan ahayn ciqaab cirka ka soo dhac ah! Sidoo kale waxaa si geesinimo ay ku dheehantahay lagu ogaaday in masiibooyinka dabeecadda laga dhaxlo laga hortagi karo misana lala tacaali karo.

Adeegsiga caqliga waxaa laga dhaxlaa aqoon iy waayo aragnimo baxaali ah oo si fudud loogu maarayn karo caqabadaha nolosha. Farsmada casriga ah iyo aqoonta cusub waxay sababeen in si fudud lagu xaliyo guud ahaan daruufaha qalafsan ee nolosha ku lammaansan. Cudurro badan oo si ba’an u layn jiray aadanaha ayaa laga cirib tiray dunida, sidoo kalena caqliga oo kaashanaya dhashiisa cilmiga waxay sahleen in musiibooyin badan oo dabeecadda laga dhaxlay si fudud lagu maareeyo. Tusaale ahaan aadanahu wuxuu maanta awoodaa in uu sii ogaado musiibo dhul gariir ah ama duufaan ah oo ku soo fool leh dhulka, waana taas midda sababtay in laga sii gaashaanto si qasaaraha loo yareeyo.

Dhibaatooyinka laga dhaxlay nolosha casriga ah waxaa ugu toolmoon, mashaakilka siyaasaddeed, dhaqaale iyo waliba dhaqan ee dunida casriga ah ka aloosan. Inta badan dunida waxaa ka jira is maandhaaf baahsan oo halis ku ah guud ahaan nolosha aadanaha. Colaado badan oo sababay dagaalo ay ku nafwaayeen malaayiin ilma aadan ah ka dib, waxaa la garowsaday in caqliga lagu xaliyo ismaandhaaf kasta oo ka dhasha danaha kala duwan ee bani aadamka ee la xariira siyaasadda, dhaqaalaha iyo waliba dhaqanka. Wixii ka danbeeyay dagaaladii waawaynaa ee dunida waxaa la isku afgartay in la xushmeeyo xoriyadda iyo xuquuqda shaqsiga ah si loo helo nabad buuxda.

Maqaal sidan u kooban loogama bogan karo marxaladihii uu caqligu u soo maray xal u helidda mashaakilka siyaasaddeed, dhaqaale iyo dhaqan ee dunidan casriga ah, balse waxaa habboon in aan si guud u ogaano qaacidada uu caqliga u dajiyay xalinta ismaandhaafka aadanaha. Caqligu wuxuu ku baaqayaa in meelo badan xalka laga raadiyo oo aan lagu xiiqin hal jiho oo kaliya. Sidoo kale caqligu wuxuu ina barayaa in daruufaha nolosha ay marwalba is baddalaan oo ay haboon tahay in garasho cusub lagu xaliyo mashaakilada curdunka ah.

Daruufaha kala duwan ee dunida ka jira, ayaa waxay sababeen in siyaabo kala duwan ay ummad walba xal ugu raadiso dhibaatada u gaarka ah, ayadoo adeegsanaysa caqliga. Qawmiyad kasta ama qaran walba waxaa waajiba ku ah in ay xaliyaan dhibaatada nololeed ee haysata, ayagoo mudnaanta siinaya caqliga iyo dhaqankooda u gaarka ah. Sidoo kale guud ahaan bani aadamka waxaa saaran mas’uuliyad guud oo lagu ilaalinayo danaha guud ee ka wada dhaxeeya aadanaha .

Waxaa la gaaray waqtigii aan is waydiin lahayn su'aal xaq oo malaha aan wali si dhab ah la isku waydiin, waana su'aasha ah "Dhibaatooyinka kala duwan ee Soomalida haysta waligeed ma lagu dayay in caqliga lagu xaliyo?" Inta aynaan ka jawaabin su'aasha ayaa waxaan jeclaystay in aan ku nasano barnaamij aad u qiimo badan oo aan ka daawaday Universal TV oo lagu wareysanayay abwaanka da'da yar ee Yuusuf Cismaan Cabdule ( Yuusuf Shaacir).

Si xaladaysan oo aad u xeeldheer ayuu abwaanku wuxuu u sharraxay dhaqankii Soomalidii hore, wuxuuna si yaab leh u soo bandhigay xeerarkii wanaagsanaa ee Soomaalidu ay ku maamuli jireen colaada iyo nabadda.Wuxuu ahaa barnaamij cuqdada ka saari kara dadka aaminsan in Soomaalidu aysan lahayn dhaqan iyo xeerar wanaagsan oo ay ku xalin karto dhibaatooyinka u gaarka ah.

Soomaalida cusub waxay ku fashilmeen in caqliga ay u kaashadaan xalinta dhibaatada dabada dheeraatay ee dalka ka aloosan. Guud ahaan waxyaabaha lagu mashquulsanyahay ma aha aragti laga soo dhalaaliyay maskax Soomaaliyeed. Waa dhibaato si guud u haysatada dunida saddexaad gaar ahaan qaarada Africa.

Waddooyinka loo maro xal u helida dhibaato dhaqaale, midda siyaasaddeed iyo tan dhaqan ee ka jirta dunida saddexaad oo dhan ayaa ah aragtiyo banaanka laga soo waariday, balse nasiib xumada ugu daran waxay haysataa Soomaalida oo ah qawmiyad si yaab leh ugu silicsan geeska Afrika. Soomaliya ayaa ah waddan loo soo dhoofiyay aragtiyo badan oo aan marna la jaan qaadi karin dhaqanka soo jireenka ah ee Soomaalida. Wixii ka danbeeyay burburkii dalka waxaa sii laba lixaadsaday dhaqdhaaqyadii dalka loogu soo daabulayay aragtiyo aan u fiicnayn aayaha ummadda Soomaaliyeed.

Ma xuma in ummaddaha ay kala dheegtaan ama kala qaataan fikradaha iyo hormarka ay ummad waliba gaarka u leedahay, balse taas macnaheeda ma ahan in wax walba oo ummad ay si gaar ah ugu dhaqanto in loo soo xawilo bulsho ay ku kala duwan yihiin wax kasta. Tusaale ahaan siyaabaha ay reer galbeedka ku dhisteen dawladnimada iyo dhaqaalaha ayaa ah aragti laga dhaxlay maskax shiil u dhashay dalalkaas oo ku jaan gooyay fikirkooda, waxa u wanaagsan dadkooda, ayagoo eegaya dhaqankooda u gaarka ah. Muddo dheer oo dagaalo iyo colaado raagay ka dib ayay ku ogaadeen maskax shiilka reer galbeedku, in hannaanka dimoqoraadiyadda iyo suuqa xorta ah ay yihiin waddada kaliya ee lagu hormarin karo dadkooda. Markii runta laga hadlo nidaamka dimoqoraadiga iyo suuqa xorta ah wuxuu gaarsiiyay hormar la taaban karo bulshooyinka reer galbeedka, taas macnaheeduna ma ahan in xoola dhaqatada Soomaaliyeed ay ku khayri doonaan oo kaliya in ay si duuduub ah u qaataan sida ay reer galbeedku ugu dhaqmaan dimoqoraadiyadda iyo suuqa xorta ah.

Qofkii sidaa ku fakara xal uma hayo guud ahaan dadka Soomaaliyeed ee xoolaha waligood ku raacan jiray geeska Afrika. Qofkii Soomaali ah ee ka damqanaya dhibaatda dadkiisa waa in uu u banbaxaa naxariista caqliga. Waa in uu caqligiisa ka shaqeesiiyaa oo u keenaa aragti siyaasaddeed, dhaqaale iyo

dhaqan oo dadka ka saari karta hoogga iyo silica. Marka laga fakarayo dhibaatada Soomaalida waa in maanka lagu hayo in loo fakarayo ummad si kasta uga duwan ummaddaha kale ee caalamka ku nool. Marka sidaas loo fakero waxaa imanaya in caqliga Soomaaliga ah uu u naxariisto dadkiisa oo uu si fudud ku helo xalkii dhabta ahaa.

Wadaadda qaar ee carabiga kula murma xoola dhaqatada Soomaliyeed, waxay hayaan dhabo aysan waligood ku liibaanayn. Waxaa is waydiin mudan Islaamka siyaasadaysan ma caqli Soomaali ah ayaa alifay?. Dabcan ma jiro dooddo la taaban karo oo maskax shiil Soomaaliyeed ay ku darsadeen xiriirka ka dhaxeeya islaamka iyo siyaasadda. Bilowgii dawladdii kacaanka ayaa lagu baraarugay dhallinyaro xanaaqsan oo hal ku dhig ka dhigtay xukunka islaamka ayaa ah xalka dhabta ah ee Soomaaliya. Waxay u badnaayeen niman inta ay u safreen carabaha la soo guryo noqday maskax carbeed iyo muuqaal Soomaliyeed. Wadaaddada diinta ee ummaddaha kale waxay adeegsadaan caqligooda, si xal ku jaan go'an duruufaha dadkooda ay uga helaan diinta, balse wadaaddada Soomaalidu waxay ku mashquuleen in ay burburiyaan jiritaanka dadkooda, ayagoo adeegsanaya diinta. Waana taas sababta marka ay xasuuqayaan maatada ay u akriyaan aayado ka mid ah quraanka!

Waxaa habboon in aan xusno sida uu caqligu uga qayb qaadan karo xalinta dhibaatada siyaasaddeed ee Soomaalida. Dadka ku dhaqan gobolada Waqooyi Galbeed iyo Waqooyi Bari ee Soomaaliya waxay dhisteen maamulo ugu yaraan hantay nabad galyada deegaanadaas. Odayaasha dhaqanka iyo siyaasiyiinta deegaanadaas ayaa adeegsaday caqligooda si deeganadaas looga hirgaliyo nidaam iyo kala danbayn, waxaanay ku saleeyeen dhaqanka qabyaaladda oo ah falsafadda kaliya ee Soomaalidu ay ka aaminsantahay nolosha. Inkastoo aan la dhihi karin waa xal dhab ah haddana waa sida kaliya ee degaanadaas ay ku sugi karaan nidaam guud oo Soomaaliya ka hirgala.

Adeegsiga caqligaagu wuxuu kuu sahlayaa in dhibaatooyinka kuu gaarka ah aad u xalisid si dantaadu ku jirto. Dhibaatooyinka dunida ka jira waa kuwo guud iyo qaar lagu kala duwan yahay. Dhibaatada siyaasadeed, dhaqaale iyo dhaqan ee waddan gaar ah waxaa xalin kara garashada iyo fakerka dadka u dhashay waddankaas. Haddaba waxaa habboon in qalalaasaha siyaasaddeed, darxumada dhaqaale, nabad galyo la'aanta, iyo waliba dhaqan xumada ka jirta waddankeenna lagu xaliyo aragti si dhab ah looga soo dhalaaliyay maskax Soomaaliyeed, waayo caqligeenna kaliya ayaa noo naxariisan kara!

## 25. Ceebaha Caqliga

Muddo laga joogo shan sanno ka hor waxaan akhristayaasha wardheernews la wadaagay maqaal aad u faafey oo la magac baxay Naxariista Caqliga. Waqtigaas aan qorayay maqaalkaa waxaan la mid ahaa mucaashaq jaceyl barad ah oo ku ashqaraaray quruxda, wanaagga iyo hufnaanta gabar ay isku cusub yihiin oo kale marka la fiiriyo sidii aan ula dhacay cududda iyo cuddoonida uu caqliga u leeyahay nolosha aadanaha.

Waxaan ku baraarugay in la gaarey waqtigii aan tilmaami lahaa ceebaha caqliga mar haddii laga soo gudbay maalmihii aniga iyo caqliga aan ku tabbinay shukaansiga iyo is xod-xodashada una gudubnay waqti qaan gaar ah oo la mid ah midka ay wada qaataan lamaanaha isku raaga ee isku noqda muraayad oo kale si midba midka kale uga dhex arko dhaliilaha u gaarka ah.

Caqliga oo la caashaqo waxaa laga dhexlaa guul iyo gobannimo aan qoraal sidan u kooban looga sheekayn karin. Guusha ugu weyn ee mudan in la tilmaamo ayaa ah in noloshaada aad ku dabaraysid garasho soofeysan oo si sahlan u xallisa arrimaha isku gudban ee nolosha la soo darsa. Waayo aragnimada caadiga ah waxaan ku ognahay in caashaq walba laga dhexlo xorriyad darro gooni ah marka la fiiriyo arrimaha kugu seegaya jaceylka ku indho tiray! Sidaa si la mid ah, caqliga oo la caashaqo waxaa kugu dhaafaya qaar ka mid ah dhadhanada kala duwan ee nolosha kuwaasoo garashada madaxa banaan aan lagu dhadhamin karin.

Marka aad daacad u noqotid caqliga waxaad abaal-gud ahaan u helaysaa awood dhanka garashada ah oo yaab leh oo kugu bixisa mararka qaar in aad quursatid dadka caqliga aan isku dhiibin sidaadoo kale. Awoodda noocan ah ee garashada caqliga laga dhexlo waxaa tusaale loogu soo qaadan karaa itaalka labaatan jir caafimaad qaba u adeegsan karo ku durdurinta oday waayeel ah oo matoobo ku tukubaya. Marwalba oo aad murantaan dad aan ku fiicnayn adeegsiga awoodda maskaxda waxaad ku raaxeysanaysaa guulaha aad ka gaartid doodaha doqomadu ay soo abaabuleen.

Inta lagu guda jiro doodaha noocaas ah, caqliga wuxuu ku hilmaamsiinayaa in doqomadu yihiin quruxda iyo sirta farxadda nolosha oo dhan. Hilmaamka noocan ah ayaa ah ceebta ugu weyn ee laga dhaxlo adeegsiga caqliga.

Dhaliishan caqliga uu leeyahay waxaa igu baraarujiyay nin suufi ah oo badweynta cibaadada iyo marqaanka si fiican u dhex dabaashey. Suufigaas wuxuu ka mid ahaa xerta taabacsan Shiikh Awliyo ah oo karaamadiisa garashada caadiga ah aan lagu fahmi karin. Dood iyo muran aan u adeegsaday garashada-qallalan “Intellect” ka dib, Suufigaas caabidka ah wuxuu ila wadaagey xaqiiqadii ugu horreesay ee igu bixisa in aan u kuur galo dhaliilaha garashada qallalan ee meelaha aan la wareegayay.

Dood dheer ka dib, suufigii wuxuu i weydiiyay su'aal sidan ah " Waligaa ma dareentay oo ma la faqday beerkaada, wadnahaada, calooshaada iyo xubnaha kale ee uur ku-jirka ah? Maya ayaan ugu jawaabey anigoo la yaaban dhanka uu ila aaday suufiga marqaansan. Inta uu aamusay ayuu yiri" Adeer madaxaada ayaad maxbuus ku tahay, ee min fadlak ka soo daadag madaxa oo dareen nolosha adigoo ka dhul bilaabaya u kuurgalida iyo barashada xubnahaada uur ku jirka ah si aad nolosha u dhadhamisid!"

Taladii suufigaas dhulka kama aanan qaadin waayo waxaan u arkayey miskiin isku dhiibay dareenada kala duwan ee xubnaha jirka la soo gudboonaada. Dhanka kale. hadalka wadaadkaas wuxuu iigala saameyn badnaa boqollaal wacdi iyo qoraallo diini ah oo aan dhageystay ama aan akhriyay intii aan noolaa.

Muddo badan oo aan si fiican u dhex wareegay xaafadaha kala duwan ee caqliga dagan yahay sida Falsafadda, Cilmi-nafsiga, Cilmiga –Bulshada, Taariikhda, iyo xaafaddo kale oo badan waxaan ku baraarugay labo qodob oo caqliga ka dhigaya maxbuus aan nasiibsan dhadhaminta quruxda iyo farxadda nolosha sida uu sheegay suufigii caabidka ahaa. Labadan qodob waxay kala yihiin " Waqtiga Iyo Magacyada." Waana qodobada ay ka farcamaan dhamaan ceebaha kala duwan ee caqliga u gaarka ah.

Caqliga wuxuu hal-abuuray "Waqtiga iyo Magacyada" oo ah labo khaanadood oo kala duwan si nolosha loogu dabaro garasho iyo aqoon isku dheelitiran. Nasiib darro labadan khaanadood ee awoodda maskaxda lagu hal-abuuray waxay sababeen in qofka garashada adeegsada uu nolosha ku seego waxyaabo badan oo hareerihiisa ka dhacaya oo dhadhan gaar ah leh kuwaas oo ka baxsan Magacyada kala duwan iyo Waqtigayada kala fog ee caqliga badanaa dhex wareego.

Waa badweyn ballaaran sida cilmiga fiisikiska u sharaxo adeegsiga waqtiga iyo hawada-maran "Time and Space." Balse qoraalka oo kooban dartiis waxaan ku kaaftomeynaa unugyada waqtiga ee dadka caadiga ah isticmaalaan si aan u muujinno maxbuusnimda garashada. Waxaan ognahay in dadku khaannada waqtiga u qaybiyaan saddex nooc oo kala ah: tagto, timaado iyo waqti markaas taagan.

Inta badan caqliga dadka wuxuu ku tabiyaa xasuusta waqtigii tagey iyo qorsheynta waayaha soo socda. Qorsheynta timaadada iyo xasuusta waayihii tagey waa arrimo farsamo aan looga fursanayn maareeynta nolosha caadiga ah. Balse caqligu wuxu hilmaamaa ku mashquullida tagtada iyo timaadada in aan lagu dhadhamin karin nuxurka iyo farxadda nolosha " the essense of life" Irrida kaliya ee laga gali karo quruxda iyo farxadda nolosha waa in aan lagu mashquulin wixii dhacay waqti hore ama lagu talax tagin qorsheyn waxa dhici doona mustaqbalka.

In lagu baraarugo waqtiga iyo goobta la joogo markaas, ka dibna la dhadhansado dheef iyo dhibaato wixii hareerahaada ka dhacaya ayaa ah wadada kaliya ee loo mari karo quruxda iyo farxadda nolosha. Badanaa caqliga qaangaarka ah ma jecla ku nagaanshaha daqiiqadda markaas taagan, waayo wuxuu dareema ciriiri iyo culeys aan la qiyaasi karin. Haddii garashada aysan ku mashquulin wixii dhacay iyo arrimaha dhici doona, qofku wuxuu nooqonayaa noole caadi ah oo aan waxba kaga duwaneyn nafleyda kale ee nolosha ay wadaagaan. Caqliga ma qaadan karo xaqiiqada nolosha ee ka muuqata waqtiga taagan oo ah dareemida nolosha dhabta ah.

Si looga baxsado waqtiga la joogo, caqliga wuxuu ku masqhuulaa ka faalleynta wixii dhacay taarikhihii hore iyo odorisidda waxa dhici doona maalmaha ama daqiiqadaha nagu soo aaddan. Halkaas waxaa ka abuurma xasuusta xanuunka badan ama walwelka micno daradda ah ee dadka u diiday in ay nolosha dhadhamiyaan.

Waqtiga oo ah farsamo lagu furdaamiyo nolosha oo ah hal-abuur laga soo dhiraandhiriyay  garashada ayaa ah dabinka badanaa uu caqliga dadka ku habsaamo. Tusaale ahaan waxaad arkeysaa Soomaali badan oo waqtiga markaas la joogo ku tabiya ka sheekeynta taariikhda mala-awaallka ah ee qabiilkooda ama waxa ay ka damacsanyihiin mustaqbalka siyaasadda Soomaaliya haddii ay yihiin reer qansax.

Sidoo kale waxaad maqlaysaa muxaadarooyin badan oo diini ah oo ku saabsan waxa dhici doona qiyaamaha ama rafaadka nagu soo aaddan maalinta uu iman doono Dijaal cawar oo ah nin sheekadiisa iyo shaqsiyaddiisaba aan macno buuran ugu fadhinin waqtiga taagan! Labadan tusaale iyo kuwo kale oo ciidaa ka badan waxay caqabad ku yihiin Soomaali badan oo aan ka mid ahay in dhadhaminta nolosha ay ka habsaamaan ka dibna buuqa  madaxooda  ka socda maxbuus ku noqdaan sida uu ka digay suufigii caabidka ahaa ee aan sheekaysannay.

Magacyada kala duwan sida caddaaan, madow, xumaan, samaan, guul, guur, diin, qabyaalad, ribo, ganaax, riddo, muslim, shiico, cilmaani, barwaaqo, madexweyne, baarlamaan, waddani, gaal, laangaab, midgaan iyo kuwo kaloo ciidaa ka badan ayaa waxay ka midyihiin magacyada laga heli karo luqad walba. Badanaa magacyada noolaha, walxaha  goobaha, aragtiyooyinka ayaa ah khaanad uu caqliga ku keydiyo arrimo badan si loo furdaamiyo muuqaallada kala duwan ee badanaa isku badbadela nolosha.

Ceebta ugu daran ee caqliga ayaa ah in magacyadii loo hal-abuuray arrimo farsamo iyo ka tilmaan qaadashada nolosha  in garashada looga mashquuliyo dhadhaminta quruxda iyo farxadda nolosha “ the essence of  life” ayadoo la aaminayo in ay yihiin run biyo kama dhibcaan ah. Sida loo badan yahay dadku waxay maxaabiis u yihiin magacyo ay maqleen ama ka dhaxleen dhaqankooda

ayagoo kartida caqligooda galiya sidii magacyadaas loo difaaci lahaa ama loo xaqiijin lahaa.

Nolosha dhabta ah ee jirta iyo magacyada luqadaha lagu hal-abuuray waxaa u dhaxeeya masaafo weyn oo caqliga caadiga ah goyn karin. Si loo gaaro gunta hoose ee nolosha oo ah halka farxadda dhabta iyo quruxda nolosha ceegaagto, waxaa laga maarmaan ah in sida dharka la iskaga siibo magacyada caqligu uu ka dhexlay dhaqanka uu ka soo jeedo markaas.

Waa qodobka uu fahmey suufigii marqaansanaa. Suufigu wuxuu fahmey in qofkii maxbuus ku noqda guuxa madaxiisa ka yeeraya in uu ku mashquullo sarifidda iyo kala baandheynta magacyo uu hawada ka maqlay ka dibna iska caleemo saarto midka mid ah fasiraadaha laga bixiyo magacyadaas. Waqtigii aan la murmayay suufiga waxaan dabo ordayay magacyo falsafadaysan oo aan nolosha dhabta ah saameyn ku lahayn. Nasiib wanaag wadaadkaas duceysan wuxuu si dhibyar igu tusay in ay jirto nolol ka qaro weyn falfasafad qallalan oo awliyada Ilaahay lagu harowsado!

Haddii qof walba hakad galiyo guuxa joogtada ah ee madaxiisa ka yeeraya, ka dibna neefsado asagoo si feejignaan ah ugu kuurgalaya garaaca wadnihiisa, dareenka xubnaha uurku jirka ah iyo waxa hareerihiisa ka dhacaya, wuxuu garan karaa in ay jirto nolol dhab ah oo ka baaxad weyn magacyada iyo waqtiga caqliga seejiyay dhadhaminta farxadda iyo quruxda nolosha.

Qofkii ku guuleysta in baraarug uu muujiyo daqiiqadda markaas taagan asagoo ka tallaabsanaya magacyada caqligiisa ka guuxaya wuxuu si dhib yar ku ogaanayaa in noolaha oo dhan iyo dhammaan dadka isku yihiin xigto iyo xigaalo aan kala maarmin. Wuxuu ogaanayaa in geedaha, cayayaanka, duurjoogta, bulshadiisa, dadka ay dalka ama deegaanka wadaagaan iyo dhammaan bulshaweynta caalamka yihiin silsilad nololeed xiriirsan oo midba midka kale uusan uga maarnin noloshiisa gaarka ah. Waa markaas marka ay suurta gal tahay in aad farxadda iyo quruxda nolosha aad dareentid.

Nasiib darro caqliga aynu dadka ku nahay arrintan wey ku adagtay waayo waa hab ka duwan qaabkii caqliga loo soo barbaariyay. Dhaqan kasta wuxuu caqliga dadkiisa ku shubaa magacyo ciidaa ka badan oo aan ka tarjumeynin nolosha dhabta ah. Arrintan waxay sababtey in caqliyada ka soo kala jeeda dhaqannada kala duwan ee adduunka ka jira in ay isku noqdaan cadow ayagoo isku ceersada magacyo kala duwan iyo waqtiyo ka baxsan daqiiqadda markaas la joogo. Tusaale ahaan, Soomaalida waxaa kala dilay magacyada kala duwan ee qabiillada la iskugu yeero. Caqliga Soomaaliga ah wuxuu kumashquulsan yahay magaca qabiilkiisa iyo sida uu mustaqbalka qabiilkiisa, gaar ahaan jufadiisa magac weyn ugu soo jiidi lahaa.

Dhanka kale, waxaa jira dad Soomaaliyeed oo isku arka in ay wax barteen, sidaa daraadeedna ay ka ilbaxsan yihiin Soomaalida kale ee magacyada qabiilka meelaha la wareega. Soomaalida ilbaxda ah waxaysan ogeyn in aysan ka badbaadin ceebaha caqliga waayo qudhooda magacyo iyo waqtiyo kale ayay ku mashquulsan yihiin.

Intooda badan waxay u qaybsan yihiin dad ku kala mashquulsan sidii loo hirgalin lahaa magacyo ay ka midyhiin “Islaamka Siyaasadeysan, Dimuqoraadiyad, Faafinta aqoonta qallalan” Academia” Xuquuqda insaanka, Nidaam-Federaal ah iyo la dagaalanka FGM. Magacyadan marka loo kuur galo ma ahan wax ka tarjumaya nolosha dhabta ah ee Soomaalida. Sidaa daraadeed ragga iyo dumarka ilbaxda ah waa in ay qaataan talada Suufigii marqaansanaa ayagoo ka soo dagaya guuxa madaxooda ka socda si ay u dhadhamiyaan nolosha hareerahooda ka socota.

Caqliga dadka isku heer ma ahan. Dadka intiisa badan waxay ku garasho yihiin Idaha oo hadba meeshii loo didiyo ayay iskaga yaaacaan. Waxaana ku adeegta dad faro ku tiris ah oo awooda caqliga ku baraarugay. Kuwaan dadka ka adeegta ee garashada sare leh waxay u badan yihiin kooxo manaxayaal ah oo shacabka ku wareeriya hadba magacyo been ah iyo ballan-qaad ku aadan waqtiyo kala duwan. Kooxdan shacabka sida damiirla’aanta ah ugu baarta awoodda caqliga waxay u badanyihiin siyaasiyiinta iyo wadaaddada. Waxaa jira koox daacad ah oo awoodda caqliga ku baraarugey oo badanaa ku mashquulsan in ay hal-abuuraan magacyo cusub si waqtiga soo socda looga baxo dhibka hadda taagan. Kooxdan waxaa ka mid ah hal-abuurka suugaanta sare iyo faylasuufyada oo badanaa Geeska Afrika laangaab ku ah.

Intaas marka laga soo tago, waxa jira rag iyo dumar dhif iyo naadir ah oo ka tallaabsaday caqliga una banbaxay barxada ka danbeysa darbiga garashada caadiga ah. Kooxdan waxaa ka mid ah suufigii igu baraarujiyay ceebaha caqliga. Waa koox fahantahay in farxadda iyo quruxda nolosha aan looga mashquulin magacyo iyo waqtiyo kooban. Waxay ogaadeen in daqiiqadda markaas taagan ay ka muhiimsantahay malaayiintii sanno ee la soo noolaa. Waxay kaloo xaqiiqsadeen muhiimadda ay leedahay u kuurgalida silsiladda nololeed ee xiriirsan ee isku xiraysa dhammaan nafleyda oo idil. Baraarugan wuxuu qalbigooda ku beeray naxariis iyo jaceyl ballaaran oo u saamaxday in si dhib yar ay ku dhadhamiyaan farxadda iyo quruxda nolosha.

Raggan iyo dumarkan uma lug xirna koox ama xaafad gaar ah. Waxay la faqaan oo la sheekaysataan dhammaan awoodaha muuqda iyo awoodaha dhuumaaleysta. Muuqaal ahaan waa dad caadi ah oo laga yaabo in mararka qaar lagu qaldamo. Waxay waqti badan ku tabiyaan khalaawo loo kaalmeystay goob cidlo ah si ay u dhex dabaashaan badweynta nolosha. Marka ay dhex dabaalanayaan badweynta nolosha waxay arkaan mucjisooyin iyo karaamooyin caqliga caadiga ah uusan qiyaasi karin. Qaarkood waxaa la tusaa ayagoo quraanjo ah, halka qaar kalena la tuso ayago xidigaha iyo meerayaasha ku

guuraya. Nin ragan ka mid ah oo la dhihi jiray Jalaludiin Ruumi ayaa mar uu la yaabey badweynta uu dhexdabaalanayo wuxuu yiri “Ma tihid dhibic biyo ah oo badweyn ku jirta, waxaad tahay badweyn ku dhex jirta dhibic biyo ah!”

Garashada madaxa bannaan ayaa ah wadada kaliya ee loo mari karo naxariista caqliga. Haddii adigoon cidna u lug xirnaynn aad garashada ka baarbaartid farsamo lagu furdaamiyo arrimaha murugsan ee nolosha waxaad hubanti ah in aad gaareysid guul iyo gobannimo loo aayo. Sidoo kale markasta oo aad ku baraarugtid ceebaha caqliga waxaad ka tallaabeysaa darbiga ama xeendaabka caqliga oo aan ku soo sheegnay in yihiin “Waqtiga iyo Magacyada” adigoo fursad u helaya in aad si dhab yar uga mid noqotid silsillada nololeed ee xiriirsan ee kugu xiraysa dareemida farxadda iyo quruxda nolosha.

## 26. Baahida Maskaxda

Sida uu qofkasta dareemi karo raashinka iyo biyaha ayaa ah baahida asaasiga ah ee qofku u baahanyahay noloshiisa, balse dad yar oo aan badneen ayaa fahmi kara baahida ay maskaxdu dareento inta qofku noolyahay. Dhammaan dadka xikmadda jecel ayaa isku raacsan haddii si hagaagsan aan loo daboolin baahida maskaxda in noloshu aysan wax qiimo ah yeelanaynin. Si la mid ah sida loo koriyo jirka qofka waa in loo barbaariyaa maskaxda baniaadamka. Waxaan ogsoonahay in dadka dunida ku nool ay ku kala hormareen habka nolosha, sababta ugu wayn oo dadku ay u kala hormareen aya lagu tilmaama sida loogu kala duwan yahay koriinshaha maskaxda.

Runtii lama soo koobi karo arimaha badan ee ay maskaxdu u oomantahay, balse maqaalku wuxuu si gaar ah u sharixi doona mid ka mid ah baahida ugu daran ee maskaxdu dareento. Qaabka ugu fudud ee maskaxdu ku kori karto waa in ay heshaa xog badan.

Haddaba baahida ugu daran ee maskaxda ayaa noqonaysa helida macluumaad badan oo maskaxda u sahasha in ay curiso fikrado badan oo hormarin kara nolosha qofka iyo guud ahaan tan dadka.

Dad badan ayaa aaminsan in waxbarashadu tahay habka ugu fudud ee lagu dabooli karo baahida maskaxda, balse haddii si kale loo fiiriyo waxbarashadu waxay qofku u sahlaysaa oo kaliya sidii uu ku baran lahaa xirfad uu ku shaqaysto si uu daboolo baahida asaasiga ah ee jirka. Haddaba lama dhihi karo qofkasta oo xirfad bartaa wuxuu ka qaan gaaray maskaxda waayo waxaan maalin kasta aragnaa kuwo badan oo aqoonyahano lagu sheego oo ka garasho liita inanta yare ee waxaraha ku ilaalisa baadiyaha fog ee dalka.

Waxaan soo ogaanay baahida ugu daran ee maskaxda in ay tahay helida xog badan si loo kobciyo garashada qofka, waxaa haddaba mudan in la iswaydiiyo habka ugu fudud oo ay maskaxdu ku heli karto macluumadka ay u baahantahay.

Dhammaan dadka lagu tilmaamo in maskaxda ka qaan gaareen waxay ka sinnaayeen hal dabeecad oo malaha ay ka dhaxleen baahida maskaxdooda. Dabeecadaas ayaa ah in si waali ah u jecelyihiin wax akhriska, runtii dadka dareema baahida wax akhriska ayaa ah dad fara ku tiris ah marka la fiiriyo dadka Soomaliyeed meelkasta oo ay joogaan.

Waddamada iyo qaaradaha ay ku noolyihiin dadyowga dareema baahida wax akhriska waxaa ku badan ganacsiga buuggaagta, sidoo kale waxaa ku badan rugaha wax lagu akhriyo iyo madbacadaha wax lagu daabaco.

Haddaba waa sidee baahida maskaxda ama baahida wax aqriska marka loo kuur galo sida ay u noolyihiin Soomalida meelkasta oo ay joogaan. Bulshada Soomalida waxay caan ku yihiin in ay ku liitaan wax akhriska taasoo laga dhaxlay ka dib markii baahida maskaxda laga waayay dhaqanka guud ee Soomaalida. Sidoo kale waxaan caan ku nahay dad jecel in ay aad u raadiyaan war cusub balse habka aan wararka u raadino ayaa ah qaab aad u danbeeya oo badi dadku ay ka hormareen. Tusaale ahaan, magaca waryaa oo Soomalida looga yaqaan dalalka dariska ayaa ka tarjumaya sida aan nahay dad ku nool hadalka oo jecel in ay marwalba qaab maqal ku raadiyaan wixii cusub.

Inta aynaan ka hadlin faa’idada laga heli karo wax akhriska ayaan waxaan ku dhaqsanaynaa in aan sharaxno siyaabaha ay u dhaqmaan dadka aan ka helin wax akhriska. Marka ugu horaysa qofka ama dadka aan waxba akhrin waxay u dhaqmaan sidii carruurta marka la fiiriyo sida ay u fakaraan iyo waliba sida ay u noolyihiin. Wax akhris la’aanta waxay garashada qofka dhaxalsiisa in uu adoon u noqdo habka ay u fakaraan dad asaga la mid ah. Akhristaha wuxuu ku wareeri karaa waxa aan ula jeedno addoon xaga garashada iyo fakarka ah.

Qofka jaahilka ah lama garan karo sidii uu u dhaqmi lahaa haddii uu wax baran lahaa, waxaa na laga yaaba haddii uu helo iftiinka aqoonta in uu ku mami lahaa wax akhriska, balse waxaan ka hadlaynaa dadka wax bartay balse dhaqan ka dhigtay in wax loo sheegay ay iskula dhax wareegan halkii ay wax ka akhrin lahaayeen.

Qofba qofka u ka akhris yar yahay waxuu ku jiraa ciriiri xaga fekarka ah, waana taas sababta Soomalida meelkasta oo ay joogan ay ugu adagtahay sidii ay ku heli lahaayen fikradii ay ku badbaadin lahaayen dalkooda burbursan muddada soddonka sanno ku dhow.

Soomalida dadkooda wax qora aad looma yaqaano, balse waxaa caan ah dadka meelaha ka wacdiya ama idaacadaha ka gabya, mar hadii aysan jirin baahi wax

akhris ma jirayso sabab loo qiimeeyo qof wax qora. Qiimaha waxkasta waxay ku xirantahay baahida loo qabo.

Wax akhriska wuxuu qofka ka dhaxlaa in uu maskaxda xor ka noqdo. Haddii aad u kuur gashid qaabka aan u fakerno waxaad ogaanaysaa in aan nahay dad aad u colaadiya qofkii isku daya in uu fikrad cusub baadigoobo asagoo daboolaya baahida maskaxda.

Tusaale ahaan wixii ka danbeeyay xilligii xornimada oo hadda laga joogo muddo 58 sano ah ma aysan dhicin in fikrad cusub oo xal u noqon karta dhibaatada ina haysa la baadi goobo. Sababta kaliya ee ay u suurta gali la'dahay in la helo fikraddii na badbaadin lahayd ayaa ah in aynaan marnaba isku dayin in la barbaariyo maskaxdii u sahan tagi lahayd fikradaha aan u omoonahay.

Buugga ayaa noqday saaxiibka ugu qaalisan noloshan casriga ah, waana saaxiibka kaliya ee kaa haqab tiri kara baahida maskaxda. Sidoo kale buugga ayaa noqday wehelka ugu fiican marka ay timaado cidlada, haddii aad si wanaagsan u saaxiibtaan buugga waxaa hubanti ah in uu kugu abaal marin doono fikrado noloshaada wax wayn ka baddala. Ceebta ugu daran ee Soomalida haysata ma ahan oo kaliya in aan nahay dad ku liita wax akhriska, waxaaba laga yaaba in la helo dad badan oo Afrikaan ah oo ku liita akhriska, balse ceebta aysan cidna nala wadaagin ayaa ah in aan nahay dadka kaliya ee madaxdooda aysan waxba akhrin.

Mar hadii siyaasiyiinti iyo madaxdii dalka aysan waxba akhrin sidee loo filan kara in dalka uu gaaro wax uun hormar ah? Malaha balwada ugu fiican ayaa ah balwada wax akhrinta, waa balwada kaliya ee quudin karta maskaxdeena. Maalmahan waxaa aad u soo shaac baxay balwad halis ah taasoo ah in si nacasnimo ah aan isku xamanno!

## 27. Buufiska loo Baahan yahay in laga Bogsado

Haddii si qalbi furnaan ah loo hadlo, qof walba wuxuu dareemaa buufis iyo baqdin u gooni ah oo si gaar ah ugu abuuran. Sidoo kale, bulsho kasta waxay leedahay buufis wadareed u gaar ah oo aysan la wadaagin ummadaha kale. Intaa waxaa dheer, bani'aadamka guud ahaan wuxuu kaga duwanyahay noolaha kale buufis iyo baqdin u gooni ah oo waa hore noolaha kale ka bogsadeen.

Haddaba, waxaa fiican in aan ku hormaro buufiska ii gaarka ah, kaddib na aan guda galo baqdinta bulshada Soomaaliyeed badday burburka iyo baaba jira, ugu danbeyntiina qoraalka aan ku soo gunaanado buufiska guud ee ka dhaxeeya aadanaha oo dhan.

Ma garanayo xilligii ay ku beegnayd waqtigii buufiska ii gaarka ah igu dhacay, balse waxaan xasuustaa in waa dhexdaas ah aan ku baraarugay in bulshada aan ka dhashey ee Soomaaliyeed yihiin masaakiin maqaadiirtu ka hiillisay. Baraarugaas waxaa ii xigay in aan qaado buufis sababay in aan ka soocmo bulshada annigoo aaminay in aysan jirin waddo looga baxsado balaayada na hareeraysay. Sidoo kale buufiska noocan wuxuu horseeday in ilbaxnimo iyo hormar aan u doonto dhaqamada bulshooyinka kale ee dacallada adduunka ku nool.

Nasiib wanaag Rabiga wuxuu qadaray in aan ka bogsoodo buufiska noocaan ah. Waqti badan oo garashada loo kaashaday dabadeed, waxaan garowsday in bulsho walba oo adduunka ku nool loo qoondeeyay qayb ka mid ah balaayada guud ee nolosha bani'aadamka la barbardhigay. Waa kud ka guur oo qanjo u guur haddii aad beegsatid bulshooyin kale adigoo rajeynaya in aad ka baxsatid balaayada u gaarka ah dadkaada. Caafimaad dag dag ah ayaa igu soo dagay markii aan ku baraarugay in biyaha badda dhan walba oo aad ka dhadhamisid ay dhanaan yihiin!

Waxaa jira buufis guud oo Soomaalida oo dhan ay ka siman yihiin. Buufiskan wuxu salka ku hayaa baqdin beerka goosay Soomaalida badankeed . Waxaan ognahay in dadka Soomaaliyeed si guud looga dhaadhicyay sheeko ku saabsan in ay yihiin ummad ka duwan dadka Rabbi ku abuuray geeska Afrika. Sidoo kale, waxaa si guud Soomaalida dhexdeeda loogu faafiyay in ummadaha ay isir iyo ood wadaagta yihiin ee kula nool geeska Afrika ka dhiganyihiin shayaadiin taageersan shaydaanka weyn ee fallaagada ku noqday Rabbiga mudan in la caabudo.

Sheekadan ku saabsan shayaadiinta waxaa laga dhaxlay buufis ku baaqaya in Soomaalida dhex daganyihiin badweyn cadow ah oo dhan kasta kaga hareeraysan. Natiijadii waxay noqotay in wax walba oo Soomaalida si guud u sameysato in lagu beegsado jihaad lala galayo shayaadiinta Geeska Afrika dagan. Sidoo kale, Soomaalida waxay aamineen, dhibaato kasta oo si guud ugu dhacda in uu soo maleegay shaydaan dagan dalalka dariska ah. Buufiska midka ugu daran waa midka kugu dira dadka iyo deegaanka aad ku dhex nooshahay. Labaatan iyo dheeraad sano ka dib, Soomaalida wali kama bogsoonin buufiska noocan ah.

Qofka buufiska qaba mararka qaar waxaa laga maqlaa errayo dawo u noqon kara buufiska uu la il daran yahay. Dhowr sanno ka hor, nin wasiir ahaa ayaa warbaahinta si kadis ah uga sheegay qaabka looga bogsoon karo buufiskan Soomaalida u diiday harsi iyo hoyaad, wuxuuna yiri: waa in xaduud beenaadka dalalka dariska ah iyo Soomaaliya la baabi'iyo , bulshooyinka walaalahaha ahna ay wada qaataan baasaboor guud iyo beeso (lacag) isku mid ah.

Dadka Soomaaliyeed ee qaatiga ka taagan dhibaatadii laga dhaxlay buufiska noocan ah waa in ay bilaabaan wacdi iyo waano looga bogsoon karo baqdinta ku iyo burburka laga dhexlay buufiskan.

Gabagabadii, waxaa jira buufis guud oo ka dhaxeeya aadanaha oo dhan. Dadka waa noolaha kaliya oo ku baraarugsan geerida sugaysa. Baraarugan u gaarka ah aadanaha wuxuu ka dhaxlay buufis iyo baqdin ku aadan dhimashada. Maadaama aan war sugan oo la isku raacsanyahay aan laga haynin waxa dhici doona dhimashada ka dib, aadanaha wuxuu mala-awaalay sheeko baralley badan oo marna baqdin hor leh abuurta, mararka qaarna dadka niyadda loogu dhiso. Dumarka iyo ragga u dhuun daloola falasafadda waxay si fudud ku ogaadeen in dhammaan wax walba oo bani'aadamku sameeyo looga dan leeyahay sidii looga badbaadi lahaa dhimashada aan la baajin karin ama looga baxsan lahaa dhibaatada ka danbeyn geerida dababeed.

Noolaha kale ee bani-aadamka ku wehliya nolosha waa hore ayay ka bogsadeen buufiska noocan ah. Waxayna ogaadeen in wixii dhacay iyo waxa dhici doona mustaqbalka ay dhacayaan waqtigan la joogo oo kaliya. Sidaa daraadeedna aysan muhiim ahayn in la isku mashquuliyo tagto iyo timaado aan jirin. Inkastoo dadku noolaha kale kaga horreeyo garashada qallalan " intelligence", haddana waxaa si falsafadaysan lagu ogaaday in noolaha kale kaga horreeyo dadka ogaanshaha sirta nolosha.

Tusaale ahaan dugaagga iyo duur-joogta kale waxay ku baraarugeen in sirta nolosha tahay in la noolaado laguna noolaado waqtiga markaas taagan, halka dadku wali ku mashquulsanyihiin dooddo ku saabsan habka ugu habboon ee loo noolaan karo mustaqbalka. Dhammaan is maandhaafka ka dhex aloosan dadka oo dhan wuxuu dhaafi la’yahay dooddaas macno darrada ah. Haddaba dadka si ay u fahmaan sirta nolosha, waa in ay ka bogsadaan buufiska iyo baqdinta ay ka qabaan dhimashada!

## 28. Gurmadka iyo Garashada Guud ee Soomaalida

Maalin dhexdaas ah waxaa tareen dhexdii ku sheekaysanay nin Itoobiyaan ah oo kursi aan wada fadhinay. Dood ku saabsan dhaqanka ayaa in a dhex martay. Anigu markaas waxaa taageersanaa dhaqanka Itoobiyaanka, halka ninkaas Itoobiyaanka ah uu niyad xumo badan ka muujiyay hormarka laga filan karo dhaqanka adag ee dadkiisa. Wuxuu aad u la dhacsanaa isku gurmashada iyo is gacanqabadka Soomaalida ay caanka ku yihiin oo laf dhabar u ah dhaqanka Soomaalida. Dhowr jeer ayuu iigu celceliyay: waad iga nasiib badan tahay, waayo haddii maanta wax kugu dhacaan waxaad leedahay bulsho dhaqankeedu yahay in laguu gurmado.

Ninkaas Itoobiyaanka ah wuu ku saxsanaa doodda uu ila wadaagay, waayo maanta waxaan arkaynaa Soomaali badan oo dacalada adduunka ugu gurmaday dhibaatada ku dhacday Maxamed yare oo ah wiil toban jir ah oo baabuur inta lug ka jiiray, dabadeedna uu ka cararay goobtii shilku ka dhacay.

Dadka balo sheegga ah "pessimist" sidaydoo kale, waa laga habaaray inta badan in ay arkaan wanaagga dadka kale u muuqda. Dhanka kale, dadka qalbiga wanaagsan iyo dhammaan inta jecel in dhacdo walba laga dhiidhiyo waxaa ku adag helidda sawirka guud ee qolooyinka balo sheegga ah badanaa u muuqda. Tusaale ahaan, dadka balo sheegga ah waxay arkayaan dhibaatada ku dhacday Maxamed yare in ay tahay silsilad dhaqan oo xariirsan taas oo soo taxnayd qarniyaal badan, lagana yaabo in loo sii gudbiyo jiilasha soo socda.

Maxamed yare waxaa ku dhacay shil caadi ah oo badanaa ku dhaca carruurta ku nool magaalooyinka waaweyn ee dunida. Dhibaatada u gaarka ah Maxamed yare ee carruurta caalamka uusan la wadaagin ayaa ah midda u baahan in la gorfeeyo si loo helo sawirka guud " Bigger picture" ee sababay in carruur iyo cirroolaba ku silcaan Geeska Afrika. Haddii gurmad dag- dag ah kaliya lagu mashquulo, waxaa la garab mari doonaa garashadii badbaadin lahayd in carruurta uu dhali doono ama awoowaha u noqon doono Maxamed yare in markooda aysan ka quusan nolosha!

Inkastoo dooddaydii ku saabsanayd dhaliilada dhaqanka Soomaalida laga gar helay, haddana ninkii Itoobiyaanka ahaa waxaan u sheegay in dhaqanka Soomaalida ku liito kala danbaynta iyo maamulka aan looga maarmin nolosha casriga ah. Tusaale ahaan, carruurta Maxamed Yare la midka ah, waxay u baahanyihiin hay'addo dawladdeed oo damaana qaada noloshooda inta ay ka qaan gaarayaan. Sidoo kale hay'adahaas dawladdeed waxay magan u yihiin garasho guud oo fahmi karta muhiimadda dawladnimada casriga ah u leedahay nolosha casriga ah.

Kontan iyo siddeed sanno oo xornimo ah ka dib dhaqanka Soomaalida wuxuu ku guuldaraystay inuu abuuro garashadaas guud “collective conscience” ee saldhiga u ah dawladnimadii damaana qaadi lahady caruurta iyo hooyooyinka ku silicsan Geeska Africa. Nasiib darro, dhaqanka guud ee Soomaalida (dhaqan siyaasadeedka, dhaqan diimeedka iyo dhaqanka bulsho iyo midka dhaqaale) waxuu dilaa dareen walba oo soo noolayn kara garashadaas guud.

Haddaba gurmadka joogtada ah ee Soomaalida ku mashquulaan marwalba waxaa ka muhiimsan soo noolaynta garashadii guud ee lagu garan lahaa in gurmadka Maxamed Yare iyo carruurta la midka ah u baahanyihiin in uu yahay soo celinta kala danbeyntii iyo dawladnimadii si ay u helaan mustaqbal dhaama midka hadda u muuqda!

## 29. Su'aashii iyo Safarkii Nafsadda

Nin saaxiibkay ah oo Sakariye la dhaho ayaa waxaa uu asxaabtiisa Facebook weydiisay su'aal qoto dheer oo ku saabsan nuxur ahaan qofka wuxuu yahay ama ka samaysan yahay. Su'aashaas waxay u qorneyd sidan: qofku muxuu yahay, ma jirbaa mise waa ruux?

Marka hore hambalyo ayaan leeyahay saaxiibkay, waayo su'aashan iyo kuwa la midka ah waxaa badanaa is weydiiya ama ku mashquula dad faro ku tiris ah oo maqaadiirta u qoondaysay in ay daawadaan muuqaalada qarsoon ee nolosha. Dadka noocan ah badanaa waxay ku mashquulaan su'aalo asal u ah waalida nolosha ka socota, halka dadka intooda badan ku qanacsanyihiin baashaalka iyo beenta magaalooyinka ama marfishyada ka shidan waqtigaas la joogo!

Muddo aad u dheer ayaa su'aasha noocan ah saaxiibo ahayn. Muddadaas su'aashan waxaan isla marnay safaro dhaadheer oo aan ku baadi-goobayno jawaab dhab ah oo aan kaga caafimaadi karno buufiskii iyo baqdintii aan ka dhaxalnay saaxiibtinimadii noo dhaxaysay. Qoraalkan wuxuu soo koobayaa waayo-aragnimadii dheerayd ee safarka noocaas ah lagala kulmay.

Safarkaas wuxuu ku saabsanaa booqashada saddex jiho ama aag oo dadka su'aasha noocan ah la saaxiibba ay ka qaraabtaan. Goobtii ugu horreeysay ee aan booqannay waxay ahayd doodaha ka socda mawlacyada iyo masaajidyada.

Sida badan waayadan danbe waxaa mawlacyada iyo masaajidda ku gaardiya rag mararka qaar su'aashan kaga jawaaba qaab qar iska tuurnimo ah. Ragga noocan ah waxay bulshadu u taqaanaa culumada diinta. Inta badan jawaabahooda waxay cuskan yihiin dooddo diimaysan oo aan laga murmi karin. Jawaabtooda oo kooban oo misana koombo ku jirta waa sidan: qofku waa ruux laga soo

xawilay lawxul maxfuudka, taas oo lagu afuufay jir laga soo dhiraan-dhiriyay dhoobo iyo dhiiqo la isku dhalaaliyay.

Dadka sida Sakariye oo kale ee daawada muuqaalada qarsoon ee nolosha, jawaabta noocan ah waxay ka qaadi karaan madax-wareer iyo wis-wis badan. Tusaale ahaan, qofku wuxuu ka wis-wisi karaa dhoobada iyo dhiiqada dhulka laga soo dhiraadhiriyay asagoo isla markaana qaab wareersan u caashaqi kara qaybta ruuxda ah ee lagu afuufay. Wareerka iyo wis-wiska noocan ah waxaa laga dhaxlay dhibaatooyin badan oo wax ku biiriyay waalida ka socota nolosha haddda taagan.

Haddii jawaabta noocan ah qaab duuduub ah loo qaato waxaa dagaal lama filaan ah ka dhex qarxi karaa qofka iyo jirkiisa. Qofku wuxuu si hoose u aamini karaa inuu yahay najis-najis dhalay! Tusaale ahaan, waxaad arkaysaa xer badan oo dhagxaan ku murxiya xubnaha tarankooda si ay u suuliyaan najaasada iyo wasaqda u diiday in ay daahir noqdaan. Taariikhda xerownimada adduunka waxaa ka xusan rag badan oo ku xanaaqay ama qarxiyay jirkooda, si ay u xoreeyaan ruuxdooda xanniban!

Markii jawaabta noocan ah aan ku wareernay ama aan ka wis-wisnay, waxaan u qalab qaadannay safar kale oo aan ku beegsanayno goob labaad oo ay ku badanyihiin ragga iyo dumarka adeegsada maskaxdooda iyo muruqooda marka laga jawaabayo su'aashan. Dhanka kale goobtan waxaa ka ag dhow badweyn ay ku dabaashaan dhammaan ragga iyo dumarka daneeya in su'aashan qaab falsafadaysan looga jawaabo.

Jawaabta guud ee goobtan lagu hayo waa in qofku nuxur ahaan yahay jiir iyo jeeni malaayiin sano ku soo jiray safar dheer oo midabyo badan lahaa- evolutionary biology. Jawaabta noocan ah qofku wuxuu ka qaadi kara qalbi jab iyo qarracan waayo qofku wuxuu ku baraarugayaa in asaga iyo kaneecada ay ka simanyihiin darajada jiritaanka qofnimo inta lagu guda jiro safarka nolosha. Jawaabta noocan ah kuma aynaan qancin, waayo gunnimo ka weyn majirto in dad waaweyn oo gar iyo gafuur leh in jiritaankooda lala garab simo Kaneecada meelaha ka calaacasha!

Dhanka kale jawaabta noocan ah waxay dunida casriga ah ka curisay nolol cakiran oo aad uga hooseysa darajooyinka dabiiciga ee qofka bani'aadamka ah ka gaari karo dunta hoose ee dadnimadiisa. Tusaale ahaan, waddamada horumaray ee reer Galbeedka waxay dadku si dadban u aaminsanyihiin in nuxurka nolosha iyo dhabnimada qofka lagu qiimeeyo yihiin wixii markaas muuqda ee la taaban karo- matter. Arrintan waxaa ka dhashay dhaqan iyo dhaqaale laga dhaxlay xanuunno badan oo dhimirka ah. Dhaqanka noocan ah waxaa lagu magacaaba- materialism.

Dadka daawada muuqaalada qarsoon ee nolosha kuma qanci karaan in qofnimadooda lagu soo koobo shilimaadka ka sharqamaya jeebkooda waayo dadkaas waxay dareemaaan waxyaabo badan oo u baaqaya sida codadka macaan ee muusika, dhoola-caddaynnta qurxoon ee carruurta iyo waliba farriimaha ku hoos qarsoon sharqanta geedaha iyo sheekada shinbiraha! Baaqa noocan ah waxaa afka qalaad lagu dhahaa- qualia oo ah dhadhan ku lammaansan jiritaanka noolaha isla sheekaysta sida bani'aadamka oo kale- subjective experiences!

Maadama jawaabo qabyo ah aan ka helnay goobahaas kor ku xusan, waxaan go'aansannay in baadi-goobkii aan sii wadano anagoo beegsanayna goob saddexaad oo naloogu sheegay in ay ku dhuuntaan awliyada Ilaahay ee la dhuunta jawaabta su'aashan. Markii aan goobtii tagnay, dumarka iyo ragga ka tarjuma awliyada Ilaahay waxay nagu wargaliyeen in erayadii aan soo maqalnay sida jir iyo ruux daaqada aan ka tuurno waayo sida ay qabaan adeegsiga erayada iyo luqadaha waa laqdabada ugu weyn ee naga hortaagan jawaab dhammaystiran oo su'aashan looga bogsan karo.

Tarjumaankii ugu horreeyay ee iga tarjuma awiliyada Ilaahay wuxuu ahaa muqayil weyn oo si kadis ah aan kula kulmay mar aan joogay magaalada Nairobi ee dalka Kenya. Muqayilkaas wuxuu muddo soddon sano ka badan arday u ahaa mid ka mid ah awliyada Ilaahay ee caanka ka noqotay Geeska Afrika. Haddii aad u baahantahay faah-faahin ku saabsan la kulankii muqayilkaas waxaad dib u akhrin kartaa maqaalkii Ceebaha Caqliga ee kamid ah maqaallada cutubka labaad ee buuggan.

Tarjumaankaas wuxuu noo sheegay in qadar daqiiqado ah aan aamusno, dabadeedna aan dhageysanno garaaca wadnaheena, shanqarta banaanka ka socota, annago isla markaa dareemayna kuraasta aan dabada ku haynno iyo hawada afkeena ka baxaysa. Aamusnaanta noocaan ah waxaa la socota baraarug ku saabsan qofka aad tahay dhab ahaan. Waxaad tahay dhammaan waxa dhacaya daqiiqada markaas la joogo. Dhammaan waxa dhacaya daqiiqada markaas la joogo waxay ka dhex dhacayaan caalam muuqda iyo waliba caalamyo qarsoon oo ciidaas ka badan.

Sidaa daraadeed, tarjumaankii wuxuu noo sheegay in aan nahay caalamka muuqda iyo waliba caalamyada qarsoon.

Jawaabta noocan ah caqligeena uma diyaarsaneen waxaana ka qaadnay wareer iyo madax xannuun hor leh. Balse muddo dheer ka dib, waxaan ku baraargnay in caqliga caadiga ah uusan garan karin qofka aad tahay dhab ahaan. Caqliga wuxuu garan karaa oo kaliya calaaamad ka mid ah jiritaaankaada. Sidaa daraadeed, jirka iyo ruuxda waa calaamado ka mid calaamadaha ciidaas ka badan ee tilmaamaya qofka aad tahay dhab ahaan.

Haddaba su'aashii hore ee safarka igula jirtay waxay wadada ku dhashay su'aal kale oo sixir ka daran. Waana su'aasha ah: Haddii tarjumaannada awliyada Ilaahay ku taliyeen in fasax loo diro caqligeena, sidee lagu aamini karaa ama lagu aqoonsan karaa waxyaabaha aan ogaanno sida qofka aan nahay?

Su'aashan iyo su'aashii hore ee waddada ku soo dhalatay wali waxaan ku wada sugannahay goobaha ay ku dhuuntaaan awliyada Ilaahay. Inkastoo wali aynaan helin jawaab dhammaystiran haddana waxaan ku kalsnoonnahay in jawaabta su'aashan ay ku dhex jirto qaababka badan ee awliyada ilaahay- Mystics u khalaaweeyaan. Sidaa daraadeed waxaan u rajeynayaa saaxiibkay Sakariye iyo dadka la mid ah in marar badan ay la sheekaysan doonaan awliyada Ilaahay iyagoo dusha sare ka qishaya jawaabaha ay la dhuuntaan ee ku saabsan su'aashii uu na weydiiyay Sakariye!

## 30. Caqliga, Cibaadada iyo Caafimaadka

Nolosha caadiga ah waa mid xannuun badan oo qofka ku qasabta inuu maskaxdiisa iyo muruqiisa maalo. Qofkii aan caqligiisa iyo cududiisa cuskan, dhibaatooyinka nolosha waxay kala dhacaan qarar waaweyn oo ay adagtahay inuu ka badbaado.

Caqliga waa hibada ugu weyn ee qofku adeegsan karo marka la furfurayo ama la xalinayo arrimaha cakiran ee nolosha. Marka garashada lagu ogaado sababaha dhabta ah ee ka danbeeya dhibaato kasta, waxaa fududaada in si niyad ah loo abbaaro xalinta duruufaha adag ee ka jira deegaanka ayadoo lagu shaqo tagayo murqo waaweyn oo waliba ku hubaysan qalab ama farsamo wixii markaas la heli karo.

Nasiib darro, dhibaatooyinka nolosha way ka ballaaranyihiin kuwo caqli iyo cudud kaliya lagula tacaali karo waayo dadka iyo duunyada waxaa dusha sare ka maamula maqaadiir malaayiin sano ka hor siyaabo aynaan ogayn wax u qorsheesatay! Wixii ka danbeeyay guulihii laga gaaray aqoonta casriga ah ee sayniska, dad badan ayaa aaminay in caqligooda iyo cududooda kaliya ku caano maali karaan.

Farriimaha ku duugan diimaha iyo falsafadda waxay marwalba dadka xasuusiyaan muuqaalada qarsoon ee nolosha ee ku baaqaya in dadka, duunyada, iyo waliba dugaaga la mid yihiin maxaabiis ku jira xabsiga korka ka furan. Sidaa daraadeed, caqliga iyo cududa dadka oo dhan haddii la soo aruuriyo ay adagtahay in laga baxsado xabsiga nolosha.

Inkastoo farriimaha diimaha iyo faslafadda sidaas ku baaqayaan, haddana qolyaha caleema saartay caqligooda iyo cududooda kaliya waxay ku doodaan in calool jileeca, iyo calaacalka sida cibaadada oo kale la joojiyo oo dhaxda maro lagu xirto si looga baxsado xasbiga nolosha.

Caleema saarka noocan ah ee caqliga lagu caashaqay waxaa laga dhaxlay dhibaatooyin badan. Qofkii raba in uu fahmo dhibaatooyinkaas wuxuu dib u aqrin karaa maqaalkii ceebaha caqliga!

Dadka u dhuun daloola nuxurka diinta iyo farriimaha falsafadda waxay fahmeen in caqliga iyo cududa dadka oo kaliya aan looga baxsan karin maxbuusnimada maqaadiirta qorsheeysay malaayiin sano ka hor. Haddaba dadkaas waxay garteen muhiimadda ay leedahay in mararka qaar la cibaadaysto si looga nafiso culeyska daran ee ka jira xabsiga nolosha.

Inkastoo diimaha ku kala duwanyihiin qaababka loo cibaadaysto, haddana waxay ka simanyihiin hal u jeedo oo kaliya. Ujeeddadaas waa in qofka ku daalay duruufaha qallafasan ee ka jira xabsiga nolosha inuu mararka qaar helo fursado uu ku xasuusto in xabsiga laga bixi doono maalintii maqaadiirta garato in maxaabiista laga farxiyo!

Xasuusta noocan ah ee ku aadan muhiimadda cibaadada wuxuu qofka ka helaa nafis dabiici ah oo u sahlaya inuu culeyska nolosha la tacaalo asaga oon caraysnanayn ama cuqdaysnayn. Carada iyo cuqadada waa labo cudur oo halis ku ah caafimaadka qofka, gaar ahaa caafimaadka maskaxda.

Badanaa dadka sida fiican u cibaadaysta waxay inta badan ka caafimaad qabaan cudurrada nafsiga ah isla markaana waxay ka farxad badanyihiin qolooyinka caashaqsan caqligooda iyo cududdooda oo kaliya. Caddeymo badan oo cilmiga bulshada iyo cilmi nafsiga ah ayaa soo bandhigay farxadda iyo faa'iadada nafsiga ah ee qofka uu ka heli karo marka duruufaha qallafasn ee nolosha looga nafiso daqiiqado cibaado ah.

Madaxweynaha cusub ee Soomaaliya loo doortay mudane Farmaajo waxaa horyaalla shaqooyin culus oo u baahan in loo adeegsado maskax iyo muruq si xalaal ah isku mehersaday! Nasiib wanaag, madaxweynaha Soomaaliya waa muslim dhab ah oo og muhiimadda ay leedahay cibaadada waayo wuxuu fahansanyahay in caqli iyo cudud kaliya aan loo adeegsan karin fulinta himilooyinkiisa iyo hiraalkiisa ku aadan nabadaynta iyo hormarinta Soomaaliya.

Gabagabadii, cilmaaniyiinta u careysan dadka cibaadaysta waxaa la gudboon in ay ku bararugaan in xabsiga nolosha aan looga baxsan karin muruq iyo maskax kaliya. Sidaa daraadeed, cilaamiyiinta neceb calaacalka iyo cibaadada waa in ay ku baraarugaan caafimaadka iyo faaa'idooyinka ku jira caqli iyo cudud loo cuskaday cibaado joogto ah!

# 31. Cayaaraha Dhaqanka iyo Caafimaadka Dhimirka

Hay'adda W.H.O. ee qaramada midoobay u qaabilsan caafimaadka ayaa sannadkii 2011 sheegtay in saddexdii qof ee Soomaali ah mid ka mid ah uu qabo xanuunada maskaxda ee laga dhaxlo dagaalada, colaadaha iyo waliba abaaraha joogtada ka noqday Geeska Afrika. Waa tiro tilmaamaysa in boqokiiba soddon in ka badan 30% bulshada Soomaaliyeed yihiin bukaan la ildaran xanuunada dhimirka.

Qaabab dhowr ah ayaa loo daweeyaa xanuunada dhimirka ee laga dhaxlo dhibaatooyinka nolosha. Aqoonyahanka cilmi nafsiga ayaa cilmi baarisyo badan ku sameeyay farsmayooyin casri ah oo bukaanka dhimirka lagu daweeyo. Tusaale ahaan waxay soo bandhigeen talooyin iyo tusaalayn "counselling" lagula tacaali karo isku- buuqa badanaa bukaanka ka dhaxlo dhacdooyinka xanuunka badan ee nolosha (Trauma).

Dhanka kale dhaqaatiirta dhimirka ( Psychiatrists) ayaa dawooyin la qaato u qora qofka dhimirka ka xanuunsayana ka dib marka ay si cilmi ah u ogaadaan noocaa xanuun ee bukaanku la ildaranyahay.

Nasiib darro aqoonyahanka cilmi nafsiga iyo dhaqaatiirta dhimirka aad bay ugu yaryihiin Soomaaliya. Dhanka kale cimi nafsiga iyo dhaqtarnimada dhimirka badanaa lagama qiimeeyo dhaqanka guud ee Soomaalida. Badanaa booska cilmi nafsiga iyo dhaqaatiirta dhimirka waxaa buuxiya wadaaddada oo mararka qaar waalidii jirtay waali ka daran ku biriiya ama ku abuura bukaanka dhimirka.

Tusaale ahaan, waxaa aad u soo badanaya waayadan wadaaddo qaabab qaldan sida garaac iyo qaylo ku daweeya bukaan badan oo dhimirka ka xanuunsanaya. Maalmahan waxaa baraha bulshada ee Soomaalida aad loogu faafiyay wadaaddo waalan oo daweenaya dadweyne waalan.

Aqoonyahanka cilmiga-bulshada "Sociology” iyo aqoonta barashada-bani'aadamka "Anthropology" ayaa muddo badan ku doodayay in ciyaaraha

dhaqanka qayb-weyn ka qaataan daaweeynta xanuunada dhimirka. Cilmi baarisyo badan oo ay sameeyeen waxay ku soo bandhigeen caddaymo cilmi ah oo muujinaya dhabnimada doodda ay soo bandhigeen. Waqtigan la joogo waddamada hormaray qaar ka mid ah ayaa qiray in daweynta xanuunada dhimirka loo cuskan karo ciyaaraha dhaqanka.

Tusaale ahaan, hay'adda dawladda gobolka Ontario ee Canada u qaabilsan xanuunada dhimirka ayaa sannadkii 2004-tii daabacday warbixin ku aaddan sida ciyaaraha dhaqanka ee caanka ku yihiin dadkii loogu yimid Waqooyiga Amerika kaalin weyn uga qaataan caafimaadka maskaxda ee qabiilada kala duwan ee Hindida gad-gaduudan- Red Indians.

Nasiib wanaag waxaan mar laanta Af- Soomaaliga ee idaacada VOA nala wadaagtay ciyaar dhaqameed aad u qurux badan oo dadkii asalka ahaa ee Xamar soo bandhigeen. Muddooyinkii dagaalada socdeen, ciyaaraha noocan ah badanaa bulshada looma soo bandhigi jirin.

Qoraalkan wuxuu ku doodayaa in noocyada kala duwan ee ciyaaraha dhaqanka ee bulshada Soomaaliyeedlaga laga dhaxlikaro fursado caafimaad oo ku aadan xanuunada dhimirka ee aad u soo badanaya. Sidaa daraadeed, waxaa fiican in qofka walba oo Soomaali ah si fiican u ciyaaro ciyaaraha dhaqanka marka uu arko fursadahan oo kale maadama wadanka ku yaryihiin, aqoonta cilmi-nafsiga iyo dhaqaatiirta dhimirka.

**Tixraac:**


http://www.who.int/hac/crises/som/somalia_mental_health/en/

http://ontario.cmha.ca/network/the-healing-dance/

## 32. Ciyaaraha, Colaadaha iyo Caafimaadka

Sida ay ku doodaan culimada nafsiga, caqliga hurda ” unconscious mind” ee qof walba waxaa ku dhuumanaya labo awoodood oo lid isku ah kuwaas oo daaha shishadiisa ka amraya caqliga soo jeeda “conscious mind.” Inta badan amarrada iska soo horjeeda ee awoodahaas ku dhuumanaya caqliga hurda waxay jahawareer ku abuuraan shaqada loo igmaday caqliga soo jeeda oo ah in loo sahan tago sidii lagu furdaamin lahaa geediga nolosha.

Sida cilmi baarisyo badan lagu cadeeyay awoodaha lidka isku ah ee caqliga hurda ama qarsoon ku dhuumanaya waxay ka dhiganyihiin boqolkiiba sagaashan iyo shan, halka awooda caqliga soo jeeda lagu sheegay boqolkiiba shan.

Tusaale ahaan, caqliga hurda wuxuu si qarsoon u maareeyaa dhammaan shaqooyinka muhiimka ah ee xubnaha uur-ku jirka ah sida wadnaha, beerka, sambabka si ay uga soo dhalaalaan xilalka loo xilsaaray ee kala ah: neefsashada, dheefshiidka, iyo maaraynta dhiiga iyo waliba dheecanada kalada duwan ee jirka.

Sidaa daraadeed nolosha qof walba waxaa si qarsoodi ah u haga caqliga qarsoon! Haddaba waxaa muhiim ah in lagu baraarugo awoodaha lidka isku ah ee ku dhuumanaya caqliga hurda si loo ogaado is diidka ka muuqda farriimaha soo gaaraya caqliga soo jeeda.

Awoodda koowaad ee ku dhuumanaysa caqliga hurda waa mid ku jihaysan jaceyl iyo baashaal qofka ku qasbaya inuu ka qayb qaato nolosha asagoo niyad wanaag u muujinaya dhammaan noolaha kale. Awoodda labaad ee la sheegay in ay isku qarinayso caqliga qarsoon ayaa ah mid faro-baxsi ugu jirta burburinta iyo dhibaataynta nolosha iyo dhammaan noolaha kale.

Aragtidan cilmiyaysan ee ku aaddan awoodaha ku dhuumaalaysanaya caqliga hurda “ unconscious” waxaa soo shaac bixiyay caalimkii weynaa ee cilmi nafsiga mudane Frued, asaga oo awoodda jaceylka iyo baashaalka ku jihaysan ugu magac daray “Eros” halka awooda u taagan burburinta ugu yeeray “Thanatos”.

Aragtida mudane Frued waxaa lagala hor yimid dooddo laga soo dheegtay dhaqmada kala duwan ee dadka kuwaas oo ku baaqaya in aysan jirin awoodo ku dhuumaalaysanaya caqliyada hoose ee dadka, balse dhibaatadu ay tahay lagdan ka dhaxeeya xaq iyo baadil, shar iyo kheyr, shaydaan iyo shariif, shiikh iyo shaxaari, iyo waliba jaceyl iyo naceyb. Inkastoo doodahan ay dadaaleen, haddana cadeymo cilmi ah oo culimada nafsiga lagu qancin karo lama aysan soo shirtagin.

Sidaa daraadeed cilmi nafsigu wuxuu ku qancay in labada awoodood ee kor aan ku soo xusnay ka dhiganyihiin mataano mucaarad isku ah kuwaas oo si dabiici ah ugu dhuumanaya dhimirka dadka, qof walbana laga doonayo karti u gaar ah oo uu kula gorgortami karo amarrada iyo farriimaha is diidan ee daqiiqad walba caqliga hurda u soo dirayo caqliga soo jeeda.

Dhanka kale mudane Frued wuxuu ku dooday dhammaan quruxda iyo foolxumada nolosha waxaa u sabab ah guusha iyo guuldarada laga gaaro sidii la iskugu dheeli-tiri lahaa awoodahaas ku dhex dhuumanaya dhimirka qof walba oo bani'aadam ah.

Haddaba su'aashu waxay tahay sidee ugu haboon ee caqliga soo jeeda "conscious mind" ula gorgortami karaa amarrada is diidan ee ka imaanaya awoodaha ku dhex dhuumanaya caqliga hurda "unconscious mind"? Haddii caqliga soo jeeda ku fashilmo la gorgortanka iyo maaraynta amarada ka imaanaya caqliga hurda, cawaaqib xumo noocee ayuu qofku la kulmi karaa?

Marka hore awoodda koowaad ee ku jihaysan jaceylka iyo baashaalka "Eros" badanaa dheef mooyee dhibaato lagala ma kulmo waayo qofku wuxuu ka dhaxlaa farxad iyo firfircooni ku bixisa in uu nolosha si fiican uga qayb qaato. Dhibaatadu waxay dhacdaa marka dhaqamada isbaaro u dhigtaan farriimaha baashaalka ah ee laga soo dirayo caqliga hurda si caqliga soo jeeda ugu howl galo qaabkii looga dhabayn lahaa jaceylka iyo baashaalka.

Tusaale ahaan dhaqamadu waxay dhaleecayn ama ceebayn kala dul dhacaan damaca iyo jaceylka la soo amray caqliga soo jeeda ee qofka ayagoo markaas danbi dusha uga tuura qofka oo ah miskiin ku faraxsan amarada jaceylka ah ee ka imaanaya caqliga hurda.

Haddaba xalka ugu habboon ee dhaqamadu la gudboon ayaa ah sida mudane Freud ku sheegay buuggiisa caanka ah ee (Civilization and its Discontents) in qof walba lagu dhiira galiyo sidii uu guul uga gaari lahaa farriimaha iskugu jira jeceylka iyo baashaalka ee qofka laga soo amray dhanka awoodda ku dhuumaalaysanaysa caqliga hurda.

Tusaale ahaan haddi igaar qooqan uu dhunkasho ula dhaqaaqo gashaanti ay sheeko iyo shukaansi ku heeshiiyeen, waa inaan la mala-awaalin ama la malayn sheydaan saddaxeeya ah basle lagu baraarugaa farriimaha ka imaanaya awoodda "Eros" ee ku dhuumanaysa caqliga hurda ee igaarka qooqan taas oo doonaysa in ay ka bogsato damac cuskan damqasho jaceyl!

Haddii aysan dhaqamadu si buuxda u dhiira galin karin farriimaha ka imaanaya awoodda ku baaqaysa jaceylka iyo baashaalka ee Eros, ugu yaraan waa in aysan qofka ku dhibaatayn waxyaabaha uu jacelyahay, hiwaayadaha u gaarka ah iyo waliba balwadaha uu la dhuunto.

Dhanka kale, dhaqamadu waa in ay dhigtaan shuruuc iyo qawaaniin qofka ku qasbaysa in uu xakameeyo farriimaha ka imaanaya awooda ku jihaysan burburinta iyo dhimashada "Thanatos" ee ku dhuumanaysa caqliga hoose ee qof walba. Sharciyadaas waa in ay noqdaan kuwo u diyaar in marwalba la baddali karo, lana hormarin karo si guul looga gaaro gorgortanka lala galayo farriimaha darandooriga ah ee ka soo faniinaya awoodda ku jihaysan burburinta iyo dhimashada ee ku dhuumanaysa caqliga hoose ee qofka.

Sidoo kale, qof walba waxaa la gudboon in uu ku baraarugo awoodaha is diidan ee ku dhex lagdamaya caqligiisa dabadeedna uu xoogga saaro sidii wax uga qaban lahaa. Tusaale ahaan, haddii farriimaha ka imaanaya awoodaha jaceylka kugu bataan balse aaddan haysan dad iyo duunyo u diyaar ah jaceyl iyo baashaal, waxaad jaceylkaada u jihayn kartaa fanka iyo suugaanta, waxaadna noqon kartaa hoobal ama hal-abuur dadka wax ka bara qaababka ugu habboon ee loo dabaalan karo badweynta jaceylka.

Dhanka kale haddii farriimaha ka imaanaya awoodda burburinta iyo dhimashada kugu bataan, waa in aaddan dadka iyo duunyada kula dhaqaaqin burburin iyo barakicin adigoo ku marmarsoonaya aragti diimaysan ama siyaasad qabyaaladaysan, balse aad la timaadaa xeelad awooda "Thrantos" qaab farsamaysan loogu jihayn karo.

Tusaale ahaan waxaad noqon kartaa kawaanle xoolaha qala oo subax walba dhowr neef nafta ka qaada! Haddii aad iska la weyntahay inaad kawaanle noqotid, waxaad noqon kartaa dhaqtar ku taqasusay qaliinka si awoodaada ku aaddan burburinta iyo dhimashada dhanka wanaagsan looga faa'idaysto!

Nasiib daro, rag badan ayaa awoodda burburinta ee ku xooggan dhimirkooda la beegsada xifrado looga baahayahay jaceyl, sida macallinimada iyo waliba shaqada waalidnimada. Waxaan ognahay niman badan oo macalimiin ka ah dugsiyada quraanka ama aabbe u ah qoys dhan in carruurta iyo dumarka u garaacaan qaab bilaa arxan ah ayagoo raacaya amarrada ka imaanaya awoodda burburinta iyo dhimashada.

Cilmi- baarisyo badan oo loo cuskaday cilmi nafsiga, waxaa lagu ogaaday in bulshooyinka ku baraaruga awoodaha iska soo horjeeda ee ku dhuumanaya maanka aan muuqan ee dadka " unconscious mind" in ay hal abuuraan ciyaaro ciidaas ka badan oo kala nooc ah kuwaas oo si farsamaysan loogu maarayn karo awoodaha jaceylka iyo burburinta ku jihaysan.

Tusaale ahaan bulshooyinka ilbaxda ah waxay sameeyeen goobo loo gaaryeelay qoobka ciyaarka iyo noocyada kala duwan ee niikada si dadka dhimirkooda ku badanyahay awoodda ku jihaysan jaceylka iyo baashaalka looga tumo dabadeedna u nafisaan. Sidoo kale, waxay leeyihiin xarumo lagu qabto ciyaaraha adag sida feerka, fardafuulka, kubada lalaado iyo mida la halgaado si

loo madadaaliyo dadka uu dhimirkooda ku badanyahay awoodda baas ee ku jihaysan burburinta nolosha.

Dhanka kale, cilmi baarisyada loo cuskaday cilmi nafsiga waxaa lagu ogaaday in bulshooyinka caburiya ama ceebeeya awoodaha sida dabiiciga ah ugu qarsoon caqliga hurda in ay ku yaryihiin noocyada kala duwan ee ciyaaraha iyo niikada. Ugu danbayntii cilmi baarisyo ay sameeyeen dhaqaatiirta iyo waliba aqoonyahanka cilmiga bulshada “sociologists” waxay caddeeyeen in dhaqankii aan bulshada u soo bandhigin ciyaaro kala nooc ah in laga dhaxlo colaado joogto ah iyo caafimaad xumo baahsan!

**Tixraac:** Freud, Sigmund, and James Strachey. *Civilization and its discontents*. WW Norton & Company, 2005.

## 33. Waxtarka iyo Wareerka Waalidka

Waxaan dhammeeyay akhriska cilmi baaris iga yaabisay oo ku saabsan sida waxtarka iyo tayada waalidka u saameeyo ubadka iyo carruurta ka sii farcami doonta. Sida waalidiinta ay ilmaha uga hiddo raacaan muuqaalka, midabka, iyo waliba awoodda maskaxda (IQ) ayay uga daydaan dadnimada, garashada, hiwaayaddaha iyo waliba balwadaha. Inkastoo ay jiraan, carruur badan oo cirka laga soo halgaaday oo dhan walba uga duwanaan doona labadii dhashay, haddana celcelis ahaan “Avarage”, cilmi baarisyadu waxay caddeeyeen in ilmaha dhashaa magan u yahay, dadnimada, caafimaadka iyo waliba dhaqaalaha labadii dhashey.

Waxaa yaab leh in waalidiinta qaar ee ku fashilmay nolosha, in ay tawalliyaan ama ku riyoodaan in ubadkooda noqdaan halyeeyo guulo ka gaara goobihii lagu jabiyay hankii ay lahaayeen dhallinyaranimadoodii. Tusaale, ahaan, waxaad maqlaysaa waalid ku dhahaya waxbarashadii waxaan uga haray korinta carruurta waayo waxaan rabaa in ubadkayga wax ii barto mustaqbalka. Waalidka noocan ah wuxuu ku wareeray fahamka nolosha casriga ah, waayo waqtigan la joogo ilmuhu wuxuu dhugtaa waa uun waddadii uu waalidkiis maray, wayna adkaan doontaa in ilmaha baadigoob ugu dhaqaaqo dhabbo ka duwan dhabbihii waalidku ku arooray. Wareerka noocan ee waalidiinta qaar la soo darsa, ubad badan waxay ka dhaxli doonaan waalli noocyo badan ah oo horseedi karta in ay u qaybsamaan qaar xabsiyada lagu xareeyo iyo qaar baan oo nolosha isku qarxiya.

Haddaba waxaa fiican in waalidku noqdo qof heer fiican ka gaara waxyaabaha uu niyadda ka caashaqay, lana jecelyahay carruurtiisa. Tusaale ahaan, haddii aad jeceshahay in carruurta kuu noqdaan rag quraan ka-adag ah (Xaafidul

Quraan) oo akhriska Quraanka looga danbeeyo waa in sida Shiikh Cali Suufi oo kale aad noqotaa macallin caan ah oo quraanka qaabab kala duwan ku akhrin kara. Haddii aad doonaysid, in wiilasha kuu noqdaan niman sheekada iyo shukaansiga ka jecel wax-akhriska sidaydoo kale, waa in aad noqotaa sida odayga aabbahay oo kale nin buuggaagta barkada oo ku falan akhriska wixii gacantiisa soo gala. Sidoo kale, haddii aad tawallinaysid in wiilasha ku noqdaan rag birta calashada oo qabiilka gar iyo gardarro ku difaaca, waa in aad noqotaa nin baqdin iyo quus midna aqoon sida Barre Hiiraale oo kale.

Dhanka kale, haddii aadan rabin in carruurta kaaga silcaan dalalka qurbaha. waa in aaddan tahriibin, haddii kale carruurtaada waxaa ku dhici doona argagixii qabsaday carruurtii ka farcantay odaygii Daarood ahaa ee la sheegay inuu doon ama qaab dabaal joog uga soo gudbay badda cas.

Ugu danbeyn, haddii niyadda aad ku haysid in carruurtaada habeenna aysan gaajo kaaga jiifan, waa in sida odaygii Hawiye oo kale aad carruurta bartaa xoog iyo xeelad lagu xamaasho!

## 34. Fannaan Kuluc: macalinkii aan ka bartay xirfadda xifdinta

Haddii been la iska dhowro, qof kasta ugu yaraan waxaa ku adag xirfad gaar ah oo malaha uu jeclaan lahaa in uu ku fiicnaado. Rabbiga ma qorin in aan xariif ku noqdo xifdiska oo ah xirfad muhiim ah marka ay timaado barashada cilmiga qaar. Waqtigii aan dhigan jiray dugsi quraanka ayaan ku baraarugay in Rabbiga uu qadaray in aan noqdo damiin ka qalbi madow inuu xifdiyo aayadaha Qur’aanka kariimka ah. Baraaruga noocan ah waxaa ii wehliyay baraarug kale oo ah in Rabbiga iigu deeqay xirfadda lagu ogaado doqomada. Nasiib darro, macallimiintii dugsiga quraanka waxay u badnaayeen doqomo, sidaa daraadeed iima fududeyn in qof doqon ah aan ka barto xirfadda la iga habaaray ee xifdiska. Tusaale ahaan waxaan ogaaday in doqoniimo ka weyn aysan jirin in nin weyn oo waliba xoog badan shaqo ka dhigto uleynta iyo ciqaabta carruur gaajeysan.

Carruurtii malcaamadaha quraanka ila dhigan jiray waxay iskugu jireen qaar hibo iyo hoodo u leh in ay kor ka qaybaan (xifdiyaan) quraanka oo dhan. Dhanka kale, waxaa jiray qaar badan oo sidaydoo kale damiin ah balse garaaca iyo cabsi galinta u kaalmeysta in ay casharka kor ka bartaan ayagoo waliba dabacsanaan iyo jaceyl badan u muujinaya macallinka iyo waliba kabiirka nacaska ah. Waqtigaas waxaan si hoose isku weydiin jiray sababta ka danbaysa in carruurta qaar jaceyl iyo waliba ixtiraam u muujiyaan macallinka laga habaaray dareenka naxariista.

Nasiib wanaag, muddo ka dib ayaan ogaaday sababta cilmiga ah ee ka danbeeya jaceylka noocaas ah. Culimada nafsiga waxay ogaadeen in uu jiro dareen jeceyl ah oo dhaxmara dadka la afduubo iyo afduubayaasha, dareenka noocan ah waxaa afka qalaad lagu dhahaa"Stockholm syndrome, or capture-bonding." Sababtan cilmiga ah waxay si fudud caddeynaysaa sida qof dhibane ah uu jaceyl iyo waliba qaddarin ugu hayn karoo qofkii dhibayay. Tusaale ahaan, Soomaalida waqtigan jooga waxay maskaxda uga afduuban yihiin wadaaddo calooshood la ciyaar ah, haddana lagama karo in laga xoreeyo afduubka loo haysto garashadooda waayo waxay difaac iyo waliba jaceyl waali ah muujiyaan mar walba oo la soo hadal qaado afduubayaasha maskaxda!

Aniga oo iska rafaadsan oo waliba aaminay in aan ahay damiin aan loo qorin in uu wax xifidiyo ayaan si kadis ah ula kulmay macallin si fiican wax u bari kara dadka sidaydoo kale ku dhiban xirfadda xifdinta. Kulankaas ma ahayn mid fool ka fool ah, balse wuxuu ahaa mid hawada sare nagu dhaxmaray. Waxaan xasuustaa in maalin anigoo la murugaysan jaceyl la igu diiday in midka ka mid ah idaacaddaha Muqdisho aan ka maqlay heesta caanka ah ee ku bilaabata " Waxaad jeceshahay lama helo naftaaday." Marka laga soo tago codka macaan ee fanaan Kuluc, waxaan si hoose oo waliba kalsooni cuskan ku dareemay in uu yahay macallinkii aan ka baran lahaa sida wax loo xifdiyo. Saddex arrimood ayaa loo sababayn karaa in mudane Kuluc aan u caleemo saaro macallinimadii aan u baahnaa marka ay timaado xirfadda xifdinta.

Marka hore, waxaan ogaaday inuu yahay nin caqli badan oo dhaninacyo badan uga garasho sarreeya dadka caadiga ah (average people). Caqliga iyo garashada nooca ah ma ahan mid u gaar ah mudane Kuluc, balse waa mid uu la wadaago dhammaan fanaaniinta Soomaaliyeed ee gartay in ay muhiim tahay in heesaha Soomaaliyeed la baahiyo waqti adag ayadoo la adeegsanayo cod halaasi ah oo qalbiyada dadka soo dhufan kara. Arrintan waxay horseeday in Soomaali badan ay fahmaan in fanka iyo suugaanta Soomaalida uu yahay mid safka hore ka gali kara fanka caalamiga ah ee lagu ixtiraamo hal-abuurka iyo mala-awaalka sare. Sidoo kale, fanaaniintii hore ee kuluc ka mid yahay waxaa garashadan fog u dheeraa geesinimo sababtay in ay ku dhiiradaan fanka iyo heesaha waqti Soomaalidu ka dhacsanayeen fanka casriga ah.

Arrinta labaad ee sababtay in Kuluc aan macallimo u caleemo saaro waxay ahayd in heesihiisa lagu qaaday Af aan si fudud ku fahmi karo. Culimada nafsiga waxay ogaadeen in dadka sidaydoo kale aan ku wanaagsanayn xirfadda xifdinta in ay wax ku baran karaan luqad ay fahmi karaan iyo waliba errayo si fiican loo macneeyay waxa loola jeedo. Dabcan, jaceyl daran oo daris ila ahaa waqtigaas ayaa buuxin kara kaalinta saddexaad ee sababtay in heesaha mudane Kuluc aan muddo gaaban ku xifdiyo.

Waxaa si cilmi ah lagu ogaaday, in qof walba guul ka gaari karo xifdinta wixii markaas uu daneynayo waayo awoodda maskaxda waxay shaqaysaa markii lagu kaabo foojignaan ( Attention) joogtaysan. Ugu yaraan waxaan hadda kor ka hayaa saddex hees oo mudane Kuluc ku luqeeyo. Si aan u muujiyo in aan wax xifdin karo, labo ka mid ah heesahaas waxaan ka qaaday fadhi gaar ah oo asxaabta qaar aan wadaagnay hadda ka hor. Heesta kale waxaan qaadi doonaa habeenka aan la garanaynin waqtiga uu ku beegan yahay balse la hubo in uu yahay habeenka aan la aqal gali doono gabadha ama garoobta ogolaata in aan is guursanno!

Haddaba waxaa la gaaray waqtigii aan u duceyn lahaa macallinkii aan ka bartay Xifdinta. Aniga oo ku hadlaya magaca dhammaan ardaydii xifdisay heesaha mudane Kuluc, waxaan tacsi u diraynayaa ehelkii marxuum Kuluc iyo waliba bulshada Soomaaliyeed ee jecel fanka iyo Suugaanta. Sidoo kale waxaan Rabbiga uga rajenaynaa marxuumka naxariis iyo danbi dhaaf. Ugu danbeyntii dhammaan dadka jecel mudane Kuluc waxaa loogu bishaaraynayaa in fanaanka uu qayb libaax ka qaadan doono bandhig faneedka lagu qaban doono Jannada!

## 35. Jeneraal Galaal iyo Gabadhii Jidbootay

Faa'idada ugu weyn ee aqoonta cilmiga bulshada iyo cilmi- nafsiga waa barashada farsamooyinka lagu daawado muuqaallada ku qarsoon dabeecadaha guud ee dadka ay wadagaan ama shaqsiyadda iyo dunta hoose ee qof walba ku qarsoon. Mar aan dhageystay wareysi lala yeeshay Jeneraal Galaal oo booqasho ku tagay magaalada Hargaysa ayaan waxaan soo xasuustay cashar hadda ka hor aan qaatay oo ku saabsanaa dabeecadaha guud ee ay wadaagaan dadkii dhintay, kuwa hadda nool iyo waliba kuwa dhalan doona illaa qiyaamaha laga gaarayo.

Casharkaas wuxuu ku saabsanaa shan dabeecadood oo la mid ah shanta qaaradood ee dadka adduunka ku nool kala daganyihiin. Dabeecadaha shanta ah ee ku saabsan shaqsiyada hoose ee dadka waxay leeyihiin calaamado cilmiyaysan oo midkasta lagu aqoonsan karo. Waxaa laga yaabaa in shan qof oo qoys qura ka soo wada jeeda in dhanka dabeecadaha kala dagan yihiin deegaano aad u kala fog oo la mid ah shanta qaaradood ee adduunka.

Mid ka mid ah shantaas dabeecadood ee sida cilmiyaysan loo daraaseeyay ayaa laga dhex daawan karaa wareysigii lala yeeshay Jeneraalka. Waa dabeecadda lagu Af- Soomaaliyeen karo camiraad. Dadka dabeecada camiraada ah u dhashay waa dad macaan oo sheekadooda aan laga daalayn waayo qof walba wuxuu jecelyahay in loo camiro oo aan lagu adkayn. Sidaa daraadeed, dadka maqaadiirta u qoondeysay dabeecadda camiraada waxay bulshada u hayaan shaqo muhiim ah oo aan ka xusi karno in beenta bulshadu niyada ku dhisato waqtiga markaas la joogo aan la ciidaynin oo loo camiro!

Jeneraalka oo ay ka muuqato deganaan nafsi ah iyo waayo aragnimo badan, ayaa wareysigiisa ku xoojiyay camiraada sheeko aad looga xiiseeyo deegaanada Somaliland oo ku saabsan wareerka iyo waalida u gaarka ah walaweynta! Dadka u dhashay dabeecada camiraada ah badanaa waxay aad u dabaal-degaan oo burhaantooda bannaanka u soo baxdaa waqtiyada ay booqanayaan deegaano kale ama ay ku jiraan dalxiis u gaar ah waayo waxay noqdaan marti la jecelyahay oo aad loo dhageysto!

Dadka Soomaaliyeed ee dabeecadda camiraada ah la wadaaga Jeneraalka Galaal waxaa ka mid ah gabar qoraa ah oo reer Somaliland ah oo khudbad qiiro leh ka jeedisay mid kamid ah xafladihii bandhiga buuggaagta ee lagu qabtay magaalada Muqdisho. Gabadhaas oo lagu magacaabo Naciimo Qorane ayaa ku jidbootay camiraada sheeko aad looga xiiseeyo magaalada Muqdisho oo ku saabsan waddaniyada lagu weeraro ama lagu wareeriyo nabadda iyo wada noolaanshaha bulshooyinka walaallaha ah ee degan Geeska Afrika.

Badanaa inta lagu guda jiro dalxiiska iyo booqashada deegaanada kale, dadka sheekada macaan ee ku fiican dabeecadda camiraada waxay hilmaamaan sheekooyinka laga xiiseeyo deeganaadii ay ka yimaadeen waayo waxaa qalbigooda af-duuba wanaagga ka muuqda dadka markaas ay la joogaan ee martida u yihiin. Macallinkii noo dhigayay casharkii ku saabsanaa calaamadaha u gaarka ah shanta dabeecadood ee dadka kala daganyihiin wuxuu xusay wanaagga iyo barakada ku duugan dabeecad walba.

Waxaan xasuustaa in uu macallinkaas ku nuux-nuuxsday in dadka u dhashey dabeecadda camiraadda aan lagu gaareyn farsamo muhiim u ah siyaasadda caalamiga ah. Tusaale ahaan, dadka sida dabiiciga ah dadka kale ugu camira waxay noqon karaan danjirayaal caalami ah oo siyaasadda dalkooda u matala dalalka kale. Hibada diblomaasiyada oo ah xirfadda ugu weyn ee laga doonayo danjiraha dalkiisa u matalaya dalalka kale waxaa saldhig u ah camiraada dhaqamada ka jira dalalka la doonayo in xiriiir siyaasadeed fiican lala sameeyo.

Qofka wax ka yaqaana qaababka iyo farsamooyinka cilmiga ah ee lagu daawado shaqsiyadda hoose ee qofka wuxuu tuhmi karaa inta wareysiga socdo in Jeneraalka uu qaab qaldan u qortay ciidanimada waayo dabeecadiisa iyo dabciga ay caanka ku yihiin xubnaha ciidamada xoogga dalka isma lahan. Wareysiga dhexdiisa Jeneraalka ayaaba xaqiijiyay tuhunkaas waayo wuxuu xusay in qaab qorsheysan uusan ugu biirin ciidamada xoogga waayo yaraantiisii wuxuu jeclaa inuu noqdo arday wax ka barta mid ka mid ah jaamacadaha adduunka.

Ogaanshaha shanta dabeecadood ee sida cilmiga ah loo dhiraandhiriyay waxay la midyihiin ogaanshaha deegaanka iyo qaarada qofka uu ka soo jeedo. Haddii

Jeneraal Galaal ogaan lahaa yaraantiisii inuu ku fiicanyahay dabeecadda camiraada waxaa laga yaabi lahaa inuu raadsan lahaa shaqo dhaanta mida ciidamada xoogga waayo waxaan ognahay in laga qurux badan yahay in warbaahinta laga daawado masuul darajada Jeneraalnimo ka gaaray ciidamada xoogga oo u camiraya sheekooyinka laga xiiseeyo deegaanada uu martida u yahay!

## 36. Duruusta ku Duugan Dulqaadka

Dadka duu-duulka badan waxay badanaa ku wareeraan waanada ku aaddan deganaanshaha iyo dulqaadka looga baahanyahay nolosha. Diinta xataa waa lagu xusay wacdi ku saabsan dulqaadka waxaana dadka dulqaata loo ballan qaaday darajo ka duwan martiqaadka maalinta qiyaame loo fidin doona dadka duul-duulka badan ee daqiiqad kasta iska daalan.

Inkastoo waanada loo cuskaday waayo aragnimada nolosha iyo wacdiga diimaysan si daran uga digeen duul-duulka badan, haddana dadka ku daalay duul-duulka joogtada ah looma soo bandhigo duruus cilmiyaysan oo laga soo dhiraadhiriyay degenaanta dabiiciga ah ee aan looga maarmin maaraynta nolosha. Sidaa daraadeed qoraalkan wuxuu dadka marwalba iska dedaala la wadaagaya duruusta ku duugan dulqaadka.

Darsi lama filaan ah oo ku saabsan faa'iido la'aanta laga filan karo fudeydka ayaa maalin maalmaha kamid ah ku baraarugay mar aan bannaanka u doontay qaxwe iyo qaraaxo! Badanaa maalmaha Axadda busaska ka shaqeeeya Toronto way daahaan oo sida maalmaha kale durba ma soo muuqdaan. Dad daris ah iyo aniga ayaa qadar daqiiqado kooban ku sugnay gaari magaalada aan u raacno goob basuska istaagaan oo u dhow guriga aan dagannahay.

Maadama aan ka tirsanahay jamaacada duul-duulka badan ee aaminsan in marwalba la iska dadaalo, waxaan goostay in aan lugeeyo mar haddii bus soo muuqda uusan jirin. Markaan daqiiqado ku lugeeyay hawo xoogaa qabow, oo meel dheerna aanan gaarin ayaan arkay buskii oo i garab maray iyo dadkii dariska ahaa ee aan ka soo lugeeyay oo buska dhexdiisa Rabbi ku xasuusan ama sheydaan kula sheekaysanaya waayo dadka aduunka ku nool waxay qaybsamaan koox Rabbi caabuda iyo jamaaco shaydaanka u camira sheekada!

Maadama qofka Soomaaliga ah in laga raayo uusan jeclayn, waxaa nafta ku sababay in dadaalkayga iyo dabeecadayda cuskan duul-duulka aan ka faa'iday, waayo waxaan helay xoogaa jimicsi iyo luga baxsi ah. Marka laga soo tago niyad dhiskaas caatada ah waxaa maskaxdayda u muuqday cashar aan ka baran

karo dadkii dariska ahaa ee dulqaadka muujiyay kuwaas oo hadda laga yaabo in masaafo aad u fog oo magaalada dhexdeeda ah mushaaxayaan.

Badanaa dadka iyo dawladaha dulqaadka muujiya waxay ka hormaraan dadka iyo dawladaha ku dufoobay duul-duulka iyo sal fudeydka. Tusaale ahaan, dawladaha dariska la ah Soomaaliya waxay muujiyeen dulqaad ku habboon duruufihii u gaarka ah waqtigii Afrika ka xorowday gumeystaha. Waqtigaas dawladdii Soomaaliya ma aysan muujin dulqaad waayo waxay durba dareentay in ay waajib ku tahay in dagaal iyo dadaal dheeri ah loo galo xoreyta Soomaalida kale ee xoolaha ku raacda Geeska Afrika.

Duul-duulkaas waxaa laga dhaxlay in xoola dhaqatadii la xoreenayay ay maanta nolol dhaamaan Soomaalidii u soo duushay in ay gumeysiga ka dulqaadaan. Waxay u badantahay in guud ahaan nolosha dadweynaha Soomaaliyeed maanta deganaan ka muuqan lahayd haddii dawladii Soomaaliya ee burburtay muujin lahayd dulqaad la mid ah dulqaadkii ay maanta muujiyeen dadka dariska ah ee daqiiqado ka hor xawaaraha igu dhaafay ayagoo dhaxanta dhacaysa ka dugsanaya buskii aan ka soo lugeeyay!

Mararka qaar dulqaadka noocan ah waxaa looga baahanyahay suuqa shukaansiga iyo shaqada. Waxaan aqaan dad badan oo shaqo yar oo ay haysteen ka lugeeyay ayaga oo aaminsan in la gaaray waqtigii lagu dadaali lahaa helitaanka shaqo dhaanta shaqada ay ka dhaqaajiyeen.

Muddo markii la joogay, kooxaha duul-duulka badan ee shaqada ka tagay waxay ku baraarugaan dadkii shaqada u dulqaatay oo heersare ka gaaray suuqa shaqada.

Sidoo kale waxaan arkay duul-duul iyo daganaansho la'aan badanaa ka muuqata gabdho badan oo suuqa shukaansiga aan ku sheekaysannay. Tusaale ahaan mid ka mid ah gabdhahaas ayaa hadda ka hor waxay go'aan ku gaartay in bacda banaan la ii dhigo waayo waxay suuqa shukaansiga kula kulantay mid ay ka heshay duul-duulkiisa balse ahaa doqon is qarinayay. Maqaadiirta waxay qorsheeysay in xariifaddii iyo aniga markale ku kullano suuqa shukaansiga ayadoo ka shallaynaysa dulqaad-la'aantii sababtay in bacda banaanka la ii dhigo.

Waxaan niyadda ugu dhisay in duul-duulkeedii aan lagu qasaarin waayo waxaa ka muuqday xoogaa jimicsi iyo lugo baxsi ah!

Muddo laga joogo toban sano ka hor waxaan magaalada Nairobi qol wada daganayn nin ka qalin jabiyay kuliyadda lagu barto cilmiga duul-duulka. Maalin walba ninkaas wuxuu maagi jiray qolka aan dagannahay, muddo ka dibna wuxuu go'aansaday in uu meelaha ka day-daydo qol dhaama midkii aan markaas wada daganayn. Muddo ka dib waxaan magaalada ku arkay ninkii oo deegaan la'aan ah oo raadinaya dad uu la dago!

Duul-duulka iyo degnaansho la'aanta waa xukun ay maqaadiirto qorsheeysay malaayin sano ka hor. Inkastoo maqaadiirtu waa hore qondeeysay qof walba inta uu qayb ahaan u heli doono dulqaad ama duul-duul, haddana waxaa fiican in mararka qaar nolosha laga soo dhiraadhiriyo duruusta iyo waayo aragnimada cilmiyaysan ee lagu caawin karo wacdiga iyo waanada diinta u qoondeeysay darajooyinka u gaarka ah dulqaadka. Dulqaad la'aantii baska iiga tagay waxaan ka dhaxlay in muddo aan ka fekero dhibaatooyinka laga dhaxli karo duul-duulka joogta ka noqday dhaqanka guud ee Soomaalida!

## 37. Muuqaalka iyo Maskaxda Manaxayaasha

Aqoonyahannada darsa danbiyada waxay ku daaleen dooddo badan oo ku saaban sababaha rasmiga ah ee ka danbeeya falalka foosha xun ee ay gaystaan dilaayaasha waaweyn ee minco darada u laaya dad masaakiin ah.

Doodaha aqoonyahanka dhex mara waxaa ugu caansan saddex dood oo waaweyn. Doodda hore waxay qabtaa duruufaha siyaasadeed ama dhaqaale ee jira markaas ayaa ah sababta ka danbeysa in dadka qaar noqdaan dilayaal halka kuwa kalena ka noqdaan dad wanaagsan oo dhibanayaal u noqda dilayaasha mustaqbalka dhalan doona.

Aragtidan waxay xoogga saartaa sidii wax looga qaban lahaa siyaasad xumada wadanka ka jirta iyo shaqo la'aan ku dhacda dhalinyarada si jiilasha soo socda looga weeciyo xanaaq ku aadan nolosha dabadeedna aysan noqon danbiilayaal dadka iska laaya.

Dooddan waxaa badanaa lagala hor yimaada caddeymo muujinaya in danbiyada aduunka ka dhaca ku yaryihiin bulshooyin dhaqaale ahaan ama siyaasad ahaan duruufaysan. Tusaale ahaan, haddii dooddan sax tahay dadka ugu danbiyada badan adduunka waxay noqon lahaayeen dadka madow ee ku nool qaaradda lagu faro maran yahay ee Afrika. Dilalka iyo danbiyada ka dhaca Afrika waxaa ka badan dilalka ka dhaca adduunka hormaray.

Doodda labaad ee ku saabsan sababaha ka danbeeya in danbiyada dilalka ah dhacaan waxay qabtaa in dhaqanka iyo waxyaabaha dadku ka aaminsanyihiin nolosha sida diinta oo kale kaalin weyn ka cayaaraan in qof si macno darro ah u laayo dad masaakiin ah.

Sidaa daraadeed dooddan waxay ku dadaashaa in diimaha iyo dhaqamada loo arko in dilalka ku badanyihiin la dacaayadeeyo ama lala dagaalamo. Tusaale ahaan qarnigan la joogo doodda noocan ah waxay bartilmaamsataa diinta Islaamka mar haddii badanaa danbiilayaasha laaya dad masaakiin ah wataan magac Islaam.

Inkastoo waqtigan la joogo dooddan suuq fiican haysato, haddana ma ahan dood iska difaaci karta caddeymaha muujinaya Muslimiinta bilyanka ka badan ee jecel nabadda iyo nolosha. Haddii diinta Islaamku tahay sababta ka danbeysa in dad masaakiin ah la laayo, waxaa la arki lahaa bilyanka iyo dheeraadka muslimiinta ah oo luuq walba la taagan billaawe ama baaruud!

Doodda saddexaad ee ku aadan sababaha ka danbeeya in dad masaakiinah la laayo waxay dul istaagtaa shaqsiyadda iyo sameyska dunta hoose ee qofka "Personality." Badanaa dooddan waxaa qaba culimada aqoonta nafsiga, waxayna doodaan ku soo bandhigaan caddeymo cilmi ah oo muujinaya in bulsho walba boqolkiiba hal 1% yihiin manaxayaal aan dan iyo heelo ka lahayn danaha iyo dareenka dadka kale " Psychopaths."

Culimada cilmi nafisiga waxay sheegaan in manaxayaashu ka mid yihiin bulsho kasta oo adduunka ku nool sida maqaadiirtu qorsheeysay malaayiin sano ka hor. Manaxayaasha waxay ka midaysan yihiin in dantooda iyo wixii markaas la quman la meel mariyo oo aan loo aabbo yeelin nolosha iyo danaha dadka kale. Culimada nafsigu waxay soo bandhigeen calaamado badan oo lagu aqoonsan karo muuqaalka iyo maskaxda manaxayaasha.

Sida ay ku doodaan culimada nafsiga, manaxayaashu waxay noqon karaan madaxda siyaasadda dalka dabadeedna dalka iyo dadkaba waxay galin karaan dagaalo lagu hoobto oo lagu laayo dadka markaas manaxayaashu masuugaan sida mudane Hitler oo kale. Sidoo kale manaxayaashu waxay ka mid noqon karaan mujaahidiinta sheega in ay diin u dagaalamayaan sida mudane Mateen oo kale oo dilay ka badan 50 qof oo caweynayay. Sidaa si la mid ah manaxayaashu waxay noqon karaan mucaashiqiin jaceylku madax maray dabadeedna dila jaceylkoodii sida mudane Cabdirisaaq oo xaaskiisii ku dilay magaalada London mar dhexdaas ah.

Nuxurka doodda culimada nafsiga ee ku aadan danbiyada iyo dilalka dhaca waxay tahay in la darso muuqaalka iyo maskaxda manaxayaasha si looga hortago masaakiinta maalin walba ay laayaan manaxyaasha. Sidoo kale culimada nafsigu waxay qabaan in manaxayaasha nagu dhex nool yihiin maqaadiir lagu qasbanyahay in lala noolaado ilaa qiyaamaha.

Saddexdan dood ee kor ku xusan marka la is barbardhigo laguna rog rogo maskax ka madax banaan siyaasadaha iyo xifaaltanka ka dhaxeeya dhaqamada bulshooyinka adduunka, waxaad ogaanaysaa in dooda culimada nafsigu ka culustahay doodaha kale. Marka adigoo xasuusan doodda culimada nafsiga ee ku aaddan muuqaalka iyo maskaxda manaxayaasha aad daawatid muuqaallada laga hayo Mateen, Hitler iyo Cabdirazaaq waxaad helaysaa muuqaalka guud ee ka dhaxeeya manaxayaasha aduunka ( Psychopaths).

## 38. Macnooyinka Daahsoon iyo Muuqaallada Deegaanka

Muuqaal walba oo ka muuqda deegaanka dabiiciga ah waxaa loo macnayn karaa malaayiin nooc. Nasiib darro, inta badan dadku waxay ku mashquulsanyihiin macno qur ah oo ku saabsan muuqaalka markaas muuqda. Macnaha qura ee dadku badanaa kaga maarmaan malaayiinta macno ee ku daahsoon muuqaal walba waxaa masu'uul ka ah maskax magan u ah mashquulka nolosha!

Dadka daawada malaayiinta macno ee ku daahsoon muuqaallada deegaanka dabiiciga ah waxay adeegsadaan u fiirsasho la falgashay faham fog oo ka farcamay feker muddo la falkinayay. Annaga oo dadkaas ku dayanayna, waxaan isku dayi doonaa in marti aan u noqonno macnooyinka daahsoon ee ku duugan muuqaal laga soo qaaday biyo soo booqday togga Bilcil ee u dhow deegaanka Dangoroyo ee gobolka Nugaal.

Maalmo ka hor togga Bilcil waxaa ka talinaysay boqortooyo lagu magacaabo abaar. Nasiib wanaag, boqortooyadii abaarta ahayd waxaa bara kiciyay oo dabada ka galay ciidan laga soo diray cirka oo ku hubaysan daruuro ay ka da'ayaan biyo markii danbe dul dagay togga Bilcil. Intaas waa muuqaalka guud ee u muuqan kara qof walba oo booqda Togga Bilcil ama daawada sawirrada laga soo qaaday.

Haddii loo kuurgalo muuqaalada daahsoon ee sawirrada laga soo qaaday biyaha soo booqday togga Bilcil waxaa muuqanaya sawir kale oo muujinaya daruuraha cirka oo dhex ceegaaga bartamaha biyaha togga bilcil. Muuqaalkan daahsoon wuxuu maanka ka sarifan karaa macnooyin badan oo dhowr ah.



Macnaha daahsoon ee ugu mudan wuxuu noqon karaa in muqaallada guud ee sida guud garashada dadka iskula qirsantahay sida cirka oo kale in mararka qaar meelo kale oo lama filaan ah ka soo muuqan karaan. Tusaale ahaan, garashada guud ee dadka waxay isla qirsantahay in kor la eego si loo daawado daruuraha iyo muuqaalka cirka.

Marka la dul taagan yahay togga Bilcil muhiim ma ahan in kor la eego si loo daawado muuqaalka cirka. Waxaa laga yaabaa in dadkii ku caqliyeestay waqtigii abaaraha in ay ku adkeystaan in sida kaliya ee muuqaalka cirka loo daawan karo ay tahay in marwalba indhaha kor loo taago sida wax jin uu qaaday oo kale!

Haddaba dadka daawada macnayaasha ku daahsoon muuqaalada ka muuqda deegaanka waa in ay wacdiyaan dadka ku caqliyaystay waqtigii abaaraha, una sheegaan in laga fiican yahay in luquntna laga daalo marwalba waayo si aayar ah ayaa muuqaalka cirka looga daawan karaa bartamaha biyaha soo booqday Togga Bilcil.

Waxay u badantahay in kooxaha garaadsaday sebenkii abaaraha in dood ay ka furaan dhabnimada muuqaalka cirka ee ka muuqda bartamaha biyaha togga Bilcil ayagoo aaminsan in muuqaalkan yahay dhalanteed la mid ah dhaan dabo gaale kaas oo markii loo sii dhawaado sii dheeraanaya!

Haddii dood noocaas oo kale ah ay soo qadimaan xarfaanta ilbaxday xiliyadii abaaraha waa in dadka daawada muuqaallada daahsoon ee ka muuqda

deegaanka aysan niyad jabin waayo waa fursad lagu hanuunin karo dadka marwalba ku mashquulsan macno qura oo maskaxdu u qoondeeysay muuqaallada deeganka dabiiciga ah.

Tusaale ahaan, dooda dhalanteedka ah waxaa loo xawili karaa muuqaalka cirka ee kor laga eego marwalba si loo muujiyo in muuqaalada muuqda dhammaantood soo hoos gali karaan xeyndaabka dhalanteedka. Sidaa daraadeedna aysan jirin muuqaal ka mid ah deegaanka dabiiciga ah oo qaadan kara darajada dhabnimo kama danbeys ah.

Dhalanteed iyo dhaan dabo gaale dhammaantiis waxay ka simanyihiin in markii loo sii dhawaado sii dheeraadaan. Sidaa la mid ah, waxaan oganahay in marwalba oo dhanka cirka loo duulo in cirku u dhaqmo sida dhaan dabo gaale oo kale oo uu sii fogaado. Sidaa daraadeed cirka ka muuqda bartamaha biyaha Togga Bilcil iyo Cirka ka korreeya madaxyada maqluuqaadka waa isku maqaam marka laga hadlayo dhabnimo iyo dhalanteed.

Inkastoo malaayiin macno oo daahsoon maanka ka sarrifan karo muuqaalka cirka ee ka muuqda biyaha soo booqday Togga Bilcil, hadda muuuqaalka ugu mudan ee maanka ku baraarugi karo waa in dhabnimada iyo dhalanteedka nolosha ka dhiganyihiin sida mataano wada dhashay oo kale!

## 39. Raadraaca Cabsida

Cabsida waa dareen dabiici ah oo noolaha ka difaaca halista jireed iyo midka nafeed ee deegaanka ka jirta. Haddii aysan cabsi jiri lahayn way adkaan lahayn in noolaha uu ka gaashaanto geerida iyo waxyaabaha qatarka ku ah jiritaankiisa.

Qayb ka mid ah maskaxda oo lagu magacaabo "amygdala" ayaa qaabilsan maaraynta guud ee cabsida dabiiciga ah. Qaybtan ka tirsan maskaxda waxay da' ahaan ka weyntahay qaybaha kale ee maskaxda u qaabilsan fekerka iyo furdaaminta nolosha. Sidaa daraadeed, qofka in uu cabsado iyo in uu fekero waxaa u fudud cabsida waayo baqdinta waa curudka ugu weyn carruurta maskaxda!

Marka laga soo tago cabsida dabiiciga ah ee ku aaddan halista dhabta ah ee nolosha ku lammaansan sida geerida iyo gaajada oo kale, waxaa jirta nooc kale oo cabsi ah oo dabiici ahayn balse laga dhaxlay duruufaha iyo dhaqanka guud ee deegaanka ka jira. Cabsida dabiiciga ah waxaa wadaaga dhammaan noolaha wax ugaarsada ama la ugaarsado balse baqdinta laga barto bulshada waxay u gaar tahay bani'aadamka.

Qoraalkan wuxuu raadraac ku samayn doonaa asalka cabsida aan dabiiciga ahayn ee bulshada laga barto waayo cabsidan waxay qofka u diidaa inuu nolosha ka xaqiijiyo himilooyikiisa u gaarka ah. Si raadraacan cilmiyaysan u sahlanaado waxaan raadqaadi doonaa labo baqdin oo ii gaar ah kuwaas oo waqti dhow aan ka bogsaday.

Muddo aad u fog ka hor waxaan ku baraarugay in aan ka baqo in dad badan hortooda aan ka hadlo ama ka heeso. Baqdinta noocan ah aad baan ula yaabay waayo waligey waxaan jeclaa in aan fekradahayga dadka la wadaago oo waliba aan ka qayb qaato doodaha culus ee hubka noocyadiisa kala duwan la isku adeegsado.

Nasiibwanaag waxaan ogaaday in cabsida noocan ah aysan ahayn mid dabiici ah waayo wali lama sheegin qof u dhintay dhibaato ka soo gaartay dadka hortooda oo laga hadlo ama laga heeso. Sidoo kale waxaan ogaa in baqdintan iga hortaagan tahay xaqiijinta himiladayda ah in aan jeediyo muxaadarooyin cilmi ah oo qayb ka ah duulaanka lagu xoreynayo maxaabiista maskaxda.

Inkastoo muddo labaatan sanno ah aan ku raadjoogay asalka cabsidan ii gaarka ah, sannadihii ugu danbeeyay ee Jaamacadda ayuu raadqaadkii baqdinta noocan ah ila galay noloshaydii carruurnimo. Maalin ayaan waxaan akhriyay mowduuc ku saabsan carruurta iyo cabsida iyo sida carruurta waligood uga cabsadaan waxyaabihii ay ka baqi jireen yaraantoodii.

Markii aan muddo ka fekerayay xiriirka ka dhaxeeya cabsida iyo nolosha carruurnimada, ayaa waxaa halmar hortayda yimid maalin gaar ah oo laga yaabo in ay tahay maalintii la ii caleemasaaray in inta cimrigayga ka dhiman aan ka cabsado dadka hortooda oo laga hadlo. Maalintaas waxaa laga joogaa muddo dhowr iyo labaatan sano ah, waxaana ku sugnaa dugsi quraan uu macallin ka ahaa xerow qatar ku ah sida carruurta loo cabsi galiyo.

Maalintaas waxay ahayd waqtigii ugu horreeyay ee subac aan ka qayb galo. Maadaama aan ku liitay xifdinta quraanka, waxaa intii subaca uu socday dhowr wareeg ku gafey aayadihii igu soo aaday, anigoo isla markaana kuwo badan oo la ii saxayna qaab laaxin ah u akhriyay! Subaxaas macallinka aad iima garaacin, balse wuxuu wareeg walba oo aan ku gefo igu soo eegayay indho kulul oo carruurta kale ee subaca ku jirta u tilmaamayay in aan ahay damiin ku ceeboobay dadka hortooda!

Xasuusta maalintaas waxay soo afjartay raadraacii ku saabsanaa cabsidan waayo waxaan ogaaday in subacii subaxaas la iga soo raacay mar haddii la igu maadsaday maalintii ugu horreysay ee dad hortooda aan ka hadlo.

Sidoo kale waxaan ogaaday in baqdinta noocan ah aan bartay aniga oo carruur ah, sidaa daraadeedna aysan maangal ahayn in cabsidii laga dhaxlay subac lagu gefay waqtigii carruurnimada in qof gar iyo gafuur leh u garbaduubnaado.

Waxaan horey ku soo xusnay in qaybta maskaxda u qaabilsan cabsida-amygdala ka da'weyntahay qaybaha kale ee maskaxda u qaablisan fekerka iyo furdaaminta nolosha. Haddaba baqdintan waxay i soo booqatay aniga oo aan awoodin in qaab maangal ah aan u fekero waayo wali maksaxdayda si fiican uma korin.

Cilmibaarisyada laga sameeayay xiriirka ka dhaxeeya asalka cabsida aan dabiiciga ahayn iyo nolosha carruurnimada waxay tilmaamayaan in badanaa waxyaabaha aad weynaanta uga baqdid yihiin been lagugu xuuxiyay yaraantaadii oo waliba ay adagtahay in lagaa xoreeyo haddii aaddan samayn raadraac joogto ah oo lagu beegsanayo barashada noloshaadii carruurnimo.

Cabsida labaad ee wadno kurkurka igu dishay waxay ahayd baqdin ku saaban cadaabul qabriga. Muddo dheer ayaan ka ka fekeri jiray ciqaabta qabriga, gaar ahaan dubaha iyo doodda munkar iyo nakiir. Toban sano ka hor ayaa habeen aniga oo meel mugdi ah oo ka mid ah wadooyinka xaafadda Islii ee Nayroobi maraya waxaa i qabtay labo askari oo ka tirsan Policeka Kenya.

Muuqaalka askartaas iyo meesha ay igu qabteen ayaa halmar waxay ii sawireen muuqaallada qarsoon ee cadaabul qabriga. Tusaale ahan, labadii askari ee i qabtay waxay ahaayeen niman sida mukar iyo nakiir u gaaban una madow. Meesha la igu qabtay waxay ahayd waddo ciriir ah oo waliba mugdi ah sida qabriga oo kale. Askartaas waxay i weydiiyeen su'aal ku saabsan sharcigayga oo la mid ah su'aalaha qabriga la isku weydiiyo.

Markii aan kala tagnay askartaas waxaan bilaabay raadraac ku saabsan meesha ay iga soo raacday cabsida qabriga. Maalmo ka dib raadqaadkii wuxuu ila galay galab gaab aan ka qayb galay aniga oo carruur ah aas loo sameeyay nin ay xabad ku dishay xaafadda Hodan ee magaalada Muqdisho billowga sagaashamaadkii. Waxaan xasuustay in qubuuraha tarabuunka galabtaas aan joogay.

Wadaadkii wacdiga ka jeediyay duugta galabtaas wuxuu ku dheeraaday sharaxaad ku saabsan muuqaalka u gaarka ah dubaha munkar iyo nakiir. Galabtaas waxaa maskaxdaydii carruurnimo sida cajalladii oo kale loogu duubay cabsi ku saabsan qalalaasaha qarsoon ee qubuuraha. Nasiib wanaag, wixii ka danbeeyay habeenkii aan sida kadiska ah u kullanay askartii sida Munkar Iyo Nakiir oo kale u madoobaa, cabsida qubuuraha way iga sii yaraanaysay.

Waxyaabaha weyntaaanta aad uga baqdid nooca ay yihiin muhiim ma ahan. Tusaale ahaan waxaad adiga oo weyn ka cabsan kartaa soo noqoshada nidaamka dawliga ah ee Soomaaliya ama shukaansiga garoobada. Culimada nafisga waxay kuugula talinayaan in aad raadraac ku samaysid noloshaadii carruurnino si aad uga caafimaadid cabsi aad dhaxashay adiga oo saqiir ah.

Ugu danbayntii, cabsida aan dabiiciga ahayn waxaa laga bartaa dhaqanka bulshada. Cabsida noocan ah waxay ka hor istaagi kartaa farxadda iyo xaqiijinka himilooyinka kuu gaarka ah. Sida kaliya ee cabsidan looga caafimaado karo waa raadraac ku saabsan noloshaadii carruurnimo waayo inta badan cabsida noocaan waxaad dareentay adiga oo yar oo maskaxdaada si fiican u korin. Sidaa daraadeed, waligaa carruur yar ha ku cabsi galinin baqdin aan dabiici ahayn!

## 40. Garashada iyo Go'aanka

Marka la qiimaynayo caqliga qofka waxaa la eegaa qoto dheerida garashada shaqsiga " IQ" ayada la adeegsanayo su'aalo ku saabsan xusuusta "memory", dhiraandhirinta "analysis", xalinta iyo furdaaminta mushkiladaha markaas la gorfeynayo- "problem solving."

Qofka caadiga ah ee Soomaaliga ah inta badan waa qof garasho dheer oo si fudud uga gudbi kara su'aalaha lagu cabbiro heerarka kala duwan ee garashada "IQ" isla markaana si fiican u fahmi kara hadba mawduuca markaas miiska saaran.

Marka la eego suugaanta hodanka ah iyo farsamooyinka kala duwan ee xoola dhaqatada Soomaalida ku maareeyaan nolosha qallafsan ee dhulka qorfaha ee Geeska Afrika, waxaa si fudud lagu ogaan karaa in caqliga qofka Soomaaliga ah uu yahay mid qoto dheer.

Haddaba su'aasha sixirka ka daran waxay tahay haddii qofka Soomaaliga ah sidan qotoda dheer u caqli badan yahay, waa maxay sababta ka danbaysa silica Ivo darxumada qof walba oo Soomaali ah uu la noolyahay qarnigan.

Dad badan oo Soomaali ah oo waliba u badan dad wax bartay ayaa ku dooda in Soomaalida uu la haray Jahli baahay; sidaa daraadeedna loo baahanyahay wacyi galin iyo muxaadarooyin diini ah oo bulshada lala gaaro.

Badanaa dadkaa aqoonyahanka ah ee sidaa ku dooda ma ahan dad u fiirsaday caqliga fog ee qofka Soomaaliga ah. Tusaale ahaan, aqoonyahankaas sidaa ku doodaya ma ahan dad aad u baaray dhaqanka iyo suugaanta Soomaalida.

Haddii suugaanta iyo maahmaahyada Soomaalida la eego, waxaad ogaanaysaa in Soomaalidii hore Iyo Soomaalida hadda joogta ay ka gabyeen ama ka buraanbureen wanaag walba iyo xumaan kasta oo nolosha ku saabsan.

Haddaba jawaabta su'aasha kor ku xusan ma ahan in qofka Soomaaliga ah laga saaro jahli ku raaggay ama aqoon darro diidan kala garashada wanaagga iyo xumaanta.

Muddo badan ayaa jawaabta su'aashan baadigoobayay. Waqti dheer ka dib waxaan xaqiiqsaday in garashada iyo go'aanka yihiin laba awoodood oo kala madax bannaan. Culimada nafsiga waxay ogaadeen in caqliga iyo fulinta waxyaabaha caqliga uu gartay uusan ka dhaxaynin xiriir sidaa u weyn.

Tusaale ahaan, qof caqli badan oo garashadiisa ku ogaaday in khamri cabida ama qayilaada qatar ku tahay caafimaadkiisa ayaa har iyo habeen ku mashquulsan qayilaad ama khamri cabid.

Qofkaas uma baahna wacdi iyo waano ku saabsan khamriga ama qayilaada balse wax u baahanyahay go'aan adag iyo dhaqan celis - rehabilitation.

Go'aanka badanaa waa karti qofka ku fulin karo qosho uu garashadiisa ka dhalaaliyay ka dib markii uu muddo gorfeeynayay dantiisa gaarka ah.

Marka aad u fiirsatid, khudbadaha xikmadaha badan ee lagu qurxiyay qiirada iyo farshaxanka ee siyaasiyiinta Soomaalida jeediyaan marka laga hadlayo wanaagga dawladnimada waxaad fahmaysaa in siyaasiga Soomaaliyeed uusan ka garasho iyo caqli liidan siyaasiyiinta adduunka.

Sidoo kale marka aad aragtid isku soo baxyada Iyo waliba baaqyada qurxoon ee ururrada bulshada Soomaalida soo bandhigaan waxaad garanaysaa in ururrada rayidka ah ee bulshada Soomaaliyeed yihiin kuwo aad u garasho fog marka la barbardhigo dhigooda qaarada Afrika.

Maadama garashada iyo fulinta wixii garashada lagu ogaaday kala madaxbanaan yihiin, waxaa si fudud lagu ogaan karaa in dhibaatada qofka Soomaaliga ah haysata ay tahay basarxumo isbaaro u dhigatay fulinta go'aamadii la isku ogaa!

Waxaan dhowr jeer goobjoog u ahaa dib u heeshiisiinta mucaashqiin Soomaali ah oo caashaqii ku dagaalamay. Ma yara inta jeer ee marqaati aan ka noqday

mucaashaq Soomaali ah oo ku calaacalay in qaladkiisa uu garawsaday, mar danbe na qaladkaas uusan u noqon doonin.

Nasiib darro, waxaan dhowr jeer arkay mucaashaqii calaacalay oo muddo yar ka dib isla qaladkii dib ugu noqday asaga oo qoslaya oo waliba la yaaban balaayada ku guuraysa ee u diidan fulinta go'aankii uu ka gaaray basarxumadii lagu dagaallamay!

Haddaba dhibaatada daba dheeraatay ee Soomaalida haysata ma ahan garasho la'aan balse waa go'aan xumo diidan fulinta wanaagga qofka Soomaaliga ah uu garanayo.

Basarxumada noocan ah ee diidan in go'aankii la isku ogaa la fuliyo waxaa looga caafimaadi karaa dhaqan celin baahsan iyo hawlgalinta xarumo la mid ah kuwa Dr. Xabeeb oo qofka Soomaaliga ah lagu barayo sida loo fuliyo waxyaabaha wanaagsan ee garashadiisa uu ku fahmay!

Gabagabadii, bulshooyinka badanaa sida Soomaalida cudurka uu kaga dhaco fulinta go'aan wadareed "collective decisions" uma banha dawlad dimoqoraadi ah iyo baarlamaan murma waayo wixii laga dooddo ama la doorto lama fulin doono oo daaqada ayaa laga tuuri doonaa.

## 41. Caqliga iyo Cabsida Cidlada

Sannadku markuu ahaa 1997 ayaa baabuur aan saarnaa ku jabay meel u dhaxaysa magaalada Baraawe iyo dagmada Jilib. Muddo isbuuc ku dhow ayaan waxaan fadhinnay dhul cidlo ah. Deegaan dad ku noolyihiin waxaa noogu dhowaa tuulada Kuunyo- barrow oo ah meel musaafiriinta jecel cunidda hilibka ay aad u dhararaan.

Dhowrkii maalmood ee baabuurka naga hallaysnaa waxaan ka fekarayay sababaha dadka uga cabsadaan ama u necebyihiin cidlada. Fekerkaas waxaan ka dhaxlay ogaanshaha in cidladu tahay dhalanteed iyo been aad loo dhoodhoobay!

Caqliga bani'aadamka wuxuu maxbuus u yahay garasho u garbo duuban danaha gaarka ah ee dadka. Haddii caqliga noocan laga cabir qaato, dhulka ama deeganka dadka uusan joogin wuxuu u muuqanayaa deegaan cidlo ah oo maangal tahay in laga cabsado dabadeedna la camiro ama laga cararo.

Caqliga noocan ah waa midka dabada ka riixaya in dadku kooxo kooxo isku uruursadaan dabadeedna dhisaan degmooyin laga dugsado cabsida iyo qatarta ku qarsoon duurka iyo deegaanka dabiiciga ah.

Haddii caqliga noocan ah laga fasax qaato oo waliba qaab falsafadaysan loogu fiirsado dhulka lagu tilmaamo cidlada waxaa muuqanaya deegaan camiran oo waliba noocyada kala duwan ee nolosha ku damaashadayaan.

Tusaale ahaan, maalmahii baabuurka nooga hallaysnaa goobta lagu sheegay cidlada, waxaan ku baraarugay in geed walba geed kale u muuqdo. Sidaa daraadeedna uusan jirin geed cidlo ah mar haddii geedaha dhammaantood isku wada muuqdaan oo waliba is dugsanayaan.

Sidoo kale duurkaas lagu sheegay cidlada ciirsi la'aanta ah waxaa ka muuqday noolayaal kala duwan oo qaabab kala madax bannaan ugu nool geedaha dushooda ama dacalladooda!

Sidoo kale maalmahaas waxaan ku baraarugay in geedka iyo dadka uu ka dhaxeeyo xiriir asaasi ah oo xiriirinaya hawada dadka iyo geedaha neefsadaan. Haddii geedaha iyo dadku midba midka kale u soo xawilo hawo asaasi u ah noloshooda, waxaan is tusay in aysan jirin sabab caqliga uga cabsado cidlada macmalka ah.

Dhanka kale, dadku waxay cidlo ku macneeyaan marka ay ku suganyihiin deegaan aysan joogin dad ay garanayaan ama is fahmayaan. Tusaale ahaan qofka marka uu qurbaha ku cusub yahay wuxuu caqligiisa ka sawirtaa cidlo cabsi abuuri karta.

Cabsida cidlada waxay caqliga qofka dhaxalsiisaa in uu dabo cararo dadka dabadeedna cabsi daraadeed camiro masaajiddaa ama marfishyada ayada oo lagu mashquulayo cibaado ama qayilaad looga dhuumanayo cidlada nolosha ee caqliga uu macmalay!

Cabsida ugu weyn ee caqliga qofka muslimka ah sawirto waa cabsida ku aadan cidlada laga sheegay nolosha qabyada ah ee qabriga ee loo yaqaan 'Xayaatul Barzaq.' Waxaan xasuustaa nin dhallinyaro ah oo maalin aan muxaadaro ku saaban nolosha qabriga ku wada dhagaysanayay masaajidka Sh. Cali Suufi in uu oohin qabsaday waayo caqligiisa ayaa madaafiic cabsi ah oo ku saabsan cidlada qabriga ku duqeeyay qalbigiisa dabacsan!

Muddo ka dib ayaan ogaaday in wadaadkii muxaadarada jeedinayay iyo Igaarkii ka ooyay mugdiga qabriga ahaayeen masaakiin maxaabiis u ah caqli ka cabsanaya cidlada. Tusaale ahaan, haddii wadaadka iyo wiilkaba ogaan lahaayeen in qabriga marti loogu yahay aboor atoore ka ah caalamka ka hooseeya ciida, waxaa fududaan lahayd in qaab falsafadaysan uga caafimaadaan cabsida caqliga ee ku aadan cidlada qubuuraha.

Haddaba su'aasha maangalka ah waxay tahay sidee cabsida cidlada ee caqligu sawirto looga caafimaadi karaa?

Inkastoo jawaabta su'aashan ku xirantahay dabciga iyo dookha qofka ka cabsanaya cidlada, haddana waxaa waayo aragnimo ka badan muddo labaatan sanno ah ku ogaaday in cidlada tahay dhalanteed si fudud loo fahmi karo.

Aragtidayda, ogaanshaha dhalanteedka cidlada waxaa lagu fahmi karaa in isbuucii waqti gaar ah aad ku qaadatid deegaanka dabiiciga ah dabadeedna aad ku baraarugtid in geed walba geed kale u muuqdo iyo waliba in geed walba hoostiisa ku noolyihiin noole kala duwan oo ku damaashadaya madaxbanaani laga soo xawilay dhanka maqaadiirta.

Ugu danbayntii haddii cabsida cidlada ku badato, waxaad xasuusan kartaa wanaagii iyo xasiloonidii aad ka dhaxashay sagaalkii bilood ee kaligaa aad ku damaashadaysay ururka hooyadaa. Xasuusta sagaalkaas bilood ee cidlada aad saaxiibada ahaydeen, wuxuu caqligaada uga caafimaadaadi karaa cabsida cidlada!

## 42. Qiimaha Qosolka iyo Qaraaxada

Marka la eego sida dabiiciga ah ee nolosha ku socoto, qof walba wuxuu dareemaa welwel iyo walbahaar aan dhammaad lahayn. Walwalka qof walba si qarsoodi ah u dareemo waxaa ugu weyn cabsida ku aaddan xanuunka dhimashada. Baqdinta geerida ayaa ah barta ay ka bilaabato dhammaan buufiska adduunka ka socda!

Inkastoo cabsidaas dabiiciga ah jirto, haddana nolosha waxaa barbar socda dhacdooyin ciidaa ka badan oo qofku kala soo dhex bixi karo ama ka dhaxli karo qosol iyo qaraaxo. Haddaba su'aasha cilmiga ah ee la doonayo in qaab falsafadaysan looga jawaabo ayaa ah: Waa maxay qiimaha qosolka iyo qaraaxada ugu fadhiyaan nolosha ku bilaabatay baqdinta kuna dhammaan doonta buufiska?

Waxaa jira aqoonyahanno ka mid ah culimada nafsiga oo si gaar ah u daraaseeya shaqada qosolka iyo qaraaxada u hayaan noloshan qaxarka badan. Baaritaan badan ka dib, aqoonyahannadan waxay ogaadeen in asalka qaraaxada iyo qosolka ka soo jeedaan qalbi aad u baqaya halka dhammaan shaactirada iyo sheekada ka socota adduunka ka soo askumeen dareen qosol gariir ah oo qof walba qarsanayo!

Tusaale ahaan, mar aqoonyahannadan u kuur galeen garashada iyo dabciga hoose ee dadka shactireeya ee kartida u leh in dadka laga qosliyo waxay ogaadeen labo arrin oo wax ka tilmaami kara qiimaha qosolka iyo qaraaxada. Arrinta koowaad waa in dadkaas yihiin dad aragti dheer oo si dhab ah ugu fiirsan kara dhabbaha ay nolosha ku dhammaan doonto oo ah dhimasho iyo

dhalasho wada dheelaya ciyaar la mid ah dhaantada laga ciyaaro Geeska Afrika oo kale!

Aragti dheeridaas waxay xarfaanta shactiraysa u horseeday cabsi joogto ah "Anxiety" taas oo marka la barbardhigo cabsida guud ee dadka caadiga ah ka qabaan nolosha noqonaysa mid xooggan oo waliba xanuun badan. Sidaa daraadeed waxay hal-abuureen sheekooyin qosol iyo qaraaxo leh kuwaas oo laga soo dheegtay dhimashada iyo dhalashada ku dhaanteenaya nolosha!

Dadweynaha caadiga ah waxay badanaa ku mashquulsanyihiin nolol u muuqata in aan laga dhimanaynin oo wax walba dhag-dhag yihiin. Inkastoo dadka caadiga noloshaas ku mashquulsanyihiin haddana qalbigooda wuxuu si hoose u dareemayaa baqdin iyo buufis ku aaddan dhimashada. Waxaa jira qolo kale oo laga tiro badanyahay kuwaas oo nolosha caadiga kaga mashquulay sheekooyin ku saabsan baqdinta iyo buufiska laga sheegay nolosha ka danbaysa geerida!

Labadan qolo ee dadka ka mid ah waxay ka midaysanyihiin qosol yaraan. Tusaale ahaan qolada nolosha ugu mashquushay in aan laga dhimanaynin oo kale waxay badanaa dareemaan daal laga dhaxlay degaansho la'aan, halka qoloda ku mashquushay baqdinta nolosha ka danbaysa dhimashada badanaa ay bandow ku soo rogeen in la qoslo ama la qaraaxaysto waayo waxay qabaan in qosolkga laga qaadayo qalbi madoobaad!

Haddaba dadka hal-abuura sheekooyinka shaactirada ah waxay ku baraarugeen in isku dheelitirka dhimashada iyo dhalashada ku dhaanteenaya nolosha laga la soo dhex bixi karo dhacdooyin qosol iyo qaraaxo wata oo cabsida iyo welwelka dabiiciga ee dhimashada iyo xanuunka ku saabsan looga caafimaadi karo!

Sidaa daraadeed, qosolka iyo qaraaxada waxay qiimo weyn ugu fadhiyaan nolosha waayo waxay tilmaamayaan dheelitirka iyo dhex-dhexaadnimada aan looga maarmin maaraynta cabsida dabiiciga ah ee nolosha ku lamaansan. Sida ay ku doodayaan culimada nafsiga. Qofka aan qoslin ama qaraaxaysan waxaa laga yaabaa in uu isku dhiibo baqdinta iyo buufiska dabiicga ah ee qalbigiisa uu ka dareemayo dabadeedna uu si lama filaan ah isku qarxiyo ama meelaha ka qayl-qayliyo asaga oo qalbi xun!

Gabagabadii, dhacdo walba oo laga dhaxlo farxad ama xanuun waxaa ka furan fursad laga heli karo xoogaa qosol iyo qaraaxo ah. Qofkii hela fursaddaas wuxuu si fudud ugu caafimaadi karaa welwelka iyo walbahaarka joogtada ah ee daqiiqad walba soo weerara qalbiga qofka. Fursaddan oo la fahmo oo waliba laga faa'idaysto ah ayaa ah qiimaha aan suuqa caadiga ah laga gooyn karin ee qosolka iyo qaraaxada ugu fadhiyaan nolosha qof walba!

## 43. Buufiskii iyo Baqdintii Baska

Buufis lama filaan ah ayaan is oo booqday maalmo ka hor mar aan soo raacay bas ka mid ah gaadiidka magaalada Toronto. Buufiskan wuxuu ka billowday su'aal fudud oo ku saabsan kalsoonida lagu qabi karo kartida darawalka Baska.

Baskii aan soo raacay waxaa ka maqnaa degenaanta ay caanka ku yihiin darawalada gaadiidka dadweynaha ee magaalada Toronto. Darawalka baskan wuxuu u muuqday nin deg-degsan oo laga yabo in xalay isa soo dagaaleen xaaska!

Aniga oo baska saaran ayaan is weydiiyay su'aashan: Ma la aamini karaa dawaralka baskan wada inuu yahay nin caafimaad qaba dhimir ahaan iyo in kale? Tusaale ahaan, maxaa caddeyn ah oo aad u haysaa in darawalkan gaariga wada inuusan ahayn nin waalan oo adiga iyo rakaabka ba halis galin kara?

Su'aalahaas waxaa saldhig u ahaa buufis iyo baqdin ku saaban xirfadda iyo kartida dawaralka iyo badbaadinta naftaydan bilaashka u baqaysa. Markii aan muddo ku mashquulay buufiskan ayaan ku baraarugay baskii oo caadi u socda iyo in su'aalahan cuskan baqdinta aysan macno badan u lahayn farxadda noloshayda!

Buufiskaas caatada ah waxaan uga sii gudbay ka fekerka muhiimadda iimaanka aan caddeymaha loo haynin u leeyahay nolosha iyo kaalinta guud ee kalsoonida ka cayaarto kala socodsiinta nolosha. Culimada nafsiga waxay qabaan in carruurta ku barbaarta waddamada iyo deegaanada ay ka jiraan qalalaasaha nolosha ama mashquul ku saaban qiyaamaha in ay dhaxlaan shaqsiyad didsan oo wax walba ka qaba buufis iyo baqdin.

Sidoo kale aqoonyannada kasmo-nafeeda waxay sheegaan in qofka yaraantiisii ku soo dhex barbaaray bulsho aan ku kalsooneen kartidooda ku aaddan maaraynta nolosha in uu noqdo qof daqiiqad walba ka shakisan tallaabooyinka uu qaadayo dabadeedna uu noqdo qof harkiisa ka carara oo harsi iyo hoyaadba waaya!

Haddii dooddan caatada ah ee cilmi nafsiga lagu eego buufiskii iyo baqdintii igu soo booqday baskii aan saarnaa, waxaa soo baxaya in dooddan ay cuskan tahay caddeymo cilmi ah waayo laba Cali iskuma hayso in aan ku soo dhex barbaaray waddan qalalaase weyni ka jiraan!

Iimaanka- faith iyo kalsoonida waa shidaalka kaliya ee qofka ku shaqeeyo marka uu wajahayo duruufaha qallafasan ee nolosha ku lamaansan. Haddii qofka laga qadiyo iimaanka iyo kalsoonida, nolosha waxay noqotaa mid aan

dhadhan lahayn oo laga dhaxlo xanuuno badan oo dhimirka ah kuwaas oo waliba horseedi kara nolol dirqi ah oo ka liidata nolosha dugaagga.

Qofka waxyaabaha uu aaminayo ama ku kalsoonyahay badanaa ma ahan kuwo caddeymo cilmi ah ama caqliga ku qanci karo loo hayo. Iridda laga galo dhismaha iimaanka waa kalsooni qofku ku qabo kartidiisa ku aaddan maaraynta naftiisa iyo nolosha. Haddi qofka kalsoonida noocan uu lumiyo, iimaankiisa waa mid dhaawacan xattaa haddii uu yahay qof rumeysan karaamada Shiikh Cabdulqaadir Jeylaani!

Marka nolosha adkaato, oo qofka ay soo foodsaaraan duruufo adag, waxaaa mugdi gala iimaanka qofku ku qabi karo kartidiisa waayo caqliga kuma qanci karo karti aan caddeymo loo haynin. Haddii qofku yahay ruux fahamsan in aysan muhiim ahayn caddeymo caqliga lagu qanciyo marka lagu labisanaayo dharka iimaanka, qofkaas wuxuu noqdaa qof ku xaragooda iimaan qurxoon si kasta oo duruufaha nolosha u qallafsanyihiin!

Qarnigan la joogo dadka qaar waxay buufis ka qabaan baaqyada diinta iyo aaminaadda ku saabsan waxyaabo aysan wali caqliga caddeyn u hayinin.

Tusaale ahaan, waqtiyadan danbe waxaa soo badannaya dad dareemaya buufis iyo baqdin ku aaddan iimaanka oo ah tiirka ugu weyn ee diinta. Waxaaba jira qaar badan oo dadka wax bartay ka mid ah oo diinta ku xanaaqay ayaga oo u qaatay walax la isku qatalayo ama la isku shirqoolayo!

Dadka noocan ah waxaysan ogayn ama illaaween in nolosha oo dhan ku kala socoto kalsooni iyo iimaan aan waxba la iska weydiinin caddeymahooda caqliga cuskan!

Tusaale ahaan, haddii buufiskan igu soo booqday baskii aan sii dabo galo waxaa dhici karta in baqdin darteed aan ka boodo baska oo socda waayo wax caddeyn ah uma hayo in darawalka uu waalan yahay iyo in kale.

Haddii xattaa aan isku qanciyo in daqiiqadan aysan walax waali ah ka muuqanin wadaha baska, waxaa jirta cabsi kale waayo cid damaana qaadi karta lama hayo daqiiqadaha soo socda ee baska aan saaranahay in darawalka uusan waalan doonin oo waliba rakaabka baska uu badbaadin doono!

Rakaabka iyo anigaba, buufiska noocan ah waxaan kaga bogsan karnaa xasuus ku saabsan in xasiloonida nolosha magaalooyinka waaweyn sida Toronto oo kale lagu saleeyay aaminaadda xirfadlay badan oo daqiiqada markaas la joogo aan caddeyn caqliga ku qanco loo haynin xirfaddooda iyo waliba caafimaadka maskaxdooda.

Sidaa si la mid ah, qofka buufis ka qaada iimaanka iyo kalsoonida diimaha waxaa la gudboon inuu ku baraarugo in nuxurka iimaanka yahay rumayn ku

saabsan waxyaabo caqliga caddeymo u haynin balse saldhig u ah xasiloonida guud ee qalbiga iyo nolosha. Haddii dadka diimaha ku xanaaqay, aysan buufiska noocan ah ka bogsanin, waxaa dhici karta in tareenka nolosha ka boodaan baqdin darteed!

Gabagabadii, waxaa fiican in qofka Soomaaliga ah ku kalsoonaado naftiisa dabadeedna iimaan ku qabo qoyskiisa. Marka iimaanka noocaas ah la helo, shacabka Soomaaliyeed waxaa u fududaan doono in dawladdooda iyo dalkooda ku kalsoonaadan oo danahooda raacdan. Haddii shacabka helaan kalsoonida iyo iimaanka noocaas ah, waddanka waxaa lagu arki doonaa wadaaddo Ilaahay rumaysan oo imaan leh kuwaas oo si fudud u wacdin kara dadka buufiska ka qaaday qalaalasaha nolosha iyo naxariista diinta Ilaahay. Marka intaa la wada helo, waxaa fiican in si wada jir ah looga duceysto in aan la noqon iimaanlaawayaashii uu sheegi jiray Madaxweyne Maxamed Siyaad Barre!

## 44. Maalayacniga Iyo Madaxbannaanida Maskaxda

Habeen habeennada ka mid ah ah mar magaalada hoose aan u sii socday ayaan waxaan bus wada raacnay wiilal iyo gabdho yar-yar oo isla socda. Intii aan baska sii saarnayn waxay indhahaygu qabateen wiil yar oo carruurta isla socota ka mid ah oo ka madaxbannaan buuqa iyo sheekada wiilasha iyo gabdhaha kale buska ka dhex bilaabeen.

Markii aan baskii ka dagannay si bus kale aan uga badallano, ayaa haddana waxaan arkay wiilkii yaraa oo meel gees ah uga dhex baxay carruurtii dabadeedna gaarkiis u faddhiistay intii baska kale la sugayay!

Markiiba waxaan ku baraarugay in wiilkan yar uu ka mid yahay ilmaha aan badnayn ee badanaa neceb in ay ka qayb qaataan buuqa iyo ciyaarta carruurta kale ku mashquulsanyihiin.

Sida badan carruurta noocan ah ee aan ka qayb qaadanin buuqa iyo ciyaarta socota waxay u qaybsamaan labo kooxdood. Kooxda koowaad waa carruur aad u caqli badan oo badanaa ka madax bannaan maalaayacniga markaas carruurta kale ku mashquulsanyihiin.

Kooxda labaad waa carruur dabeecad xun oo badanaa aan aqoon xirfadda loola sheekaysto ama loola ciyaaro carruurta kale. Carruurta noocan ah ee dabeecadda xun marka ay weynaadaan waxay noqdaan dad bulshada ka soocan oo badanaa ku mashquulsan danbiyo halis ku ah jiritaanka guud ee bulshada.

Carruurta ka tirsan kooxda koowaad ee caqliga badan waxay mustaqbalka noqdaan abwaanno ama aqoonyahanno ku xeeldheer qaybaha kala duwan ee

xikmadda iyo aqoonta waayo carruurnimadoodii waxay waqti badan ku tabiyeen daawashada muuqaallada qarsoon- Daydreaming.

Wiilkan yar ee aan arkay wuxuu u muuqday wiil dabeecad wanaagsan oo si guudna ula faraxsan carruurta kale balse maskaxdiisa way ka madax bannaanayd malaayacniga nolosha ee carruurta kale saacadaas ku mashquulsanaayeen.

Qofka maqaadiirta u qoondayso maskax ka madax bannaan maalaayacniga markaas lagu mashquulsanyahay, wuxuu badanaa fursad iyo waqti u helaa faham qoto dheer oo ku saabsan sooyaalka nolosha iyo sababaha ka danbeeya waalida markaas socota.

Dhanka kale madaxbanaanida maskaxda waxaa laga dhaxlaa ogaanshaha runta guud ee dusha sare ka maamuusha dhammaan runta iyo riyooyinka qabyada ah ee bulshooyinka adduunka ku mashquulsanyihiin.

Gabagabadii maalaayacniga nolosha oo looga mashquulo baadigoobka runta iyo madaxbanaanida maskaxda waxaa laga dhaxlaa farxad la'aan waayo farxadda waxay dhex degan tahay buuqa iyo baashaalka markaas bulshada u caleema saaran.Tusaale ahaan wiilkan yar farxaddii uu ka dhaxli lahaa ciyaarta iyo buuqa carruurta kale ku mashquulsanaayeen wuxuu ka doorbiday kelinimo lagu ogaanayo xikmadda ku duugan cidlada iyo runta laga dhaxli karo madaxbanaanida maskaxda!

# 45. Shanta Luqaddood ee Jaceylka

Mucaashiqiinta dunida waxay ku kala hadlaan shan luqadood oo lagu muujinayo dareenka caashaqa ah sida uu Dr.Garry Chapman ku sheegay buuggiisa caanka ah The Five Love Languages. Buuggan intii aan akhrin ka hor waxaan madaxa isla galnay mucaashiqiin badan oo aan ku kullanay xabsiga weyn ee Jaceylka.

Maxaabiista jaceylka waxaa ka mid ah sida uu qabo Dr. Garry qaar ku hadla erayo caashaq ah oo daqiiqad walba la isku liso " words of affirmation." Mucaashiqiinta adeegsada luqadda noocan ah waxay doorbidaan in ay maqlaan erayo kalgacal iyo ammaan iskugu jira oo laga soo xawilay dhanka lammaanaha nolosha ay iska doorteen.

Sidoo kale mucaashaqiinta noocan ah waxay aad u xiiseeyaan errayo dhiira galin ah oo qalbiga la iskugu dhiso. Mucaashaqiinta adeegsada luqaddan waxay aad u neceb yihiin in ay maqlaan errayo dhaawac ah ama meel ka dhac ah oo ka yimaada dhanka jaceylkooda.

Qaybta labaad ee mucaashqiinta waxay adeegsadaan luqad uu Dr. Garry ku sheegay "Quality time" oo lagu Soomaaliyeen karo wada qaadashada waqti qiimo leh. Mucaahaqiinta ku hadla luqaddan waxay aad u xiiseeyaan in dareenkada iyo maskaxaada uusan meelkale aadin inta lagu guda jiro waqti wada qaadashada muddada la qorsheeynayay!

Dhanka kale mucaashiqiinta daneeya adeegsiga luqaddan waxay necebyihiin in aan la is dhagaysan ama qorshe kale la soo dhex galiyo waqtiga qiimaha badan ee la wada qaadanayo. Sidoo kale qaybta ku hadasha luqaddan badanaa ma xiiseeyaan errayo jaceyl ay ah oo la isku liso sida qoladii kale ee kor aan ku soo xusnay.

Qaybta saddexaad ee mucaashaqiinta ka mid ah waxay adeegsadaan luqad lagu sheegay haddiyad is dhaafsi "recieving gifts." Qolada luqaddan ku hadasha hadallo macaan oo la isku lisay iyo waqti meel cidlo ah lagu wada qaato uma arkaan jaceyl la muujiyay waayo waxay doorbidaan in haddiyado la taaban karo la is dhaafsado kuwaas oo loogu dabaal dagayo dareenka kalacalka ah ee qalbigooda xaday.

Qoladan haddii haddiyado iskugu jira maryo cadcad iyo kalloorad oodkac ah uga soo dirtid baadiyaha Soomaaliya waxaa macquul ah in si fudud ay ku aqbalaan caashaqa ku indho tiray!

Qaybta afaraad ee muchaasqiinta ah waxay ku hadlaan luqad la mid ah luqada Meliteriga oo kale.

Muchaashaqiinta noocan ah waxay doorbidaan in luqada jacaylka uu noqdo hawlgal iyo wax qabad " Act of Service" waayo waxay aaminsanyihiin in waxqabadka uu ka qiimo badan yahay hadalka. Mucaashqiinta waxay

jaceylkooda ku muujiyaan caawin iyo gacan qabasho lagu xallinayo mashaakilka nolosha. Sidoo kale mucaashiqiinta noocan ah waxay necebyihiin in lammaanaha qalbiga ka xaday uu noqdo qof caajislow ah oo marwalba meel cidlo ah ka calaacala!

Qaybta shanaad oo ah qaybta ugu danbaysa ee Dr. Garry ku xusay buuggiisa waa mucaashqiin gacanta ka hadla oo doonaya in waqti walba bogga iyo beerka la isku hayo "Physical Touch" Mucaashqiintan haddii aaddan salaaxin marwalba ama gacanta aadan soo qaban waxay u qaadanayaan in caashaqa aad ka dhacsantahay. Mucaashqiinta gacmaha ka hadla waxay mararka qaar murmaan ama isku dhacaan wadaaddada aaminsan in lammaanaha is jecel asyan isa salaaxin illaa amar danbe!

Marka la eego buuqa iyo is qabqabsiga ka socda xabsiga weyn ee Jaceylka ka dibna la akhriyo buugga uu qoray Dr. Garry waxaad ku baraarugaysa in maqaadiirta aysan si fiican u qorsheyn qaabka ugu fudud ee la iskula fahmi karo muujinta dareenka caalamiga ah ee caashaqa. Sidoo kale waxaa lagu baraarugayaa muhiimadda ay leedahay in mucaashqiinta madaxa iskula jira u baahanyihiin tarjumaano u kala tarjuma!

**Xigasho**: The Five Love Languages: How to Express Heartfelt Commitment to Your Mate

## 46. Qalalaasaha Qarsoon ee Qarnigan

Sannadkii 2016-dii waxaa gacantayda soo galay buug ay xiiseeyaan dadka daawada muuqaalada qarsoon ee shaqsiyadda qofka. Buuggan wuxuu si cilmiysan u qaadaa dhigayaa qalalaasha qarsoon iyo burburka shaqasiyadeed ee sida dadban u horseeday isqabqabsiga siyaasadeed, dhaqan iyo dhaqaale ee taagan qarnigan la joogo.

Buuggu wuxuu ku doodayaa in qalalaasaha qarsoon ee qarnigan uu ku saabsanyahay qallooc ku dhacay qaab-sameysaka dunta hoose ee shaqsiyadda nool waqtigan casriga ah. Doodda ugu weyn ee buuggan soo gudbinayo waa in dhaqanka casriga ah iyo suuqa xorta ah laga dhaxlay shaqsiyad qaawan oo ku mashquulsan is muujin, magac raadis iyo muran joogto ah. Doodda buugga wuxuu cuskanayaa caddeymo cilmi ah oo laga soo dheegtay mid ka mid ah cudurrada ku dhaca shaqsiyadda qofka.

Labada aqoonyahan ee qoray buuggan waxay toban sanno ka hor bilaabeen cilmi baaris muddo socotay oo ku saaban faafida cudurka nafsiga ah ee afka qalaad lagu dhaho ” narcissism” oo lagu af soomaaliyayn karo “qof-isla dhacsan oo cirkaas maraya” iyo saameynta cudurkan ku leeyahay muuqaalada guud ee dhaqanka iyo dhaqaalaha reer galbeedka. Tusaale ahaan waxay ogaadeen in waqtigan la joogo boqolkiiba 80% dhallinyarada dhigata jaamacadaha waddanka Maraykanka aaminsanyihiin qataroosnimo aan loo gali karin.

Xogtan waxay barbardhigeen, cilmi baaris kale oo qarnigii dhammaaday bartamihiisa ardayda jaamacadaha maraykanka lagu weydiiyay su’aalo ku saabsan cudurka ” narcissism”. Tusaale ahaan sannadkii 1950 ardayda dhigata jaamacadaha maraykanka boqolkiiba 12% kaliya ayaa aaminsanaa in ay yihiin qataroos la mid ah ina-libaax sanka taabte oo kale.

Haddaba labada nin ee qoray buuggan waxay is weydiiyeen sababaha cilmiga ah ee ka danbeeya faafidda cudurka “narcissism” iyo dhibaatooyinka laga dhaxli karo cudurkan nafsiga ah ee faraha ka baxay.

Buuggan waxay ugu magacdareen “The Narcissim Epidemic” oo lagu af-soomaaliyayn karo daacuunkii ka dilaacay nafta-isla dhacsan! Cilmi baaristan waxay labada qoraa ku ogaadeen in daacuunka noocan ah dunida casriga ah u horseeday dhaqan qallafsan oo qof walba ku qasbaya innuu harsan waayo maadama lagu jiro tartan aan dhammaad lahayn oo lagu muujinayo magaca iyo mucjisooyinka qof walba u gaarka ah “Self admiration.”

Tusaale ahaan waxaa faafay dhaqanka ah in qofka lagu qiimeeyo muuqaalka iyo shilimaadka ka sharqama jeebkiisa. Qiimaynta noocan ah waxay horseeday in qof walba ku qanci waayo qiimaha dabiiciga ah ee looga soo qoondeeyay lowxul maxfuudka. Mar haddii cudurka noocan ah daaqada kala baxay qiimaynta dabiiciga ah ee ka madaxa bannaan muuqaalada nolosha, waxaa abuurmay shaqsiyad qaawan oo aan isku kalsoonayn oo had iyo jeer ku mashquulsan magac raadis joogto ah.

Magac raadiska joogta ah waxaa laga dhaxlay musuqmaasuq daran oo ku dhacay qaababkii dabiiciga ahaa ee loo qiimayn lahaa shaqsiyadda iyo wax qabadka qofka. Tusaale ahaan, aqoonyahannada buuggan qoray waxay ku dooddeen in qarnigan billowga ah la arki doono shaqsiyaad ku mashquulsan raadinta magac iyo manfac aan lagu kasban muruq iyo maskax midna marka la eego musuq- maasuqa socda dartiis.

Saadaalintii raggaas dheg jalaq looma siin, balse wixii ka danbeeyay doorashadii Trump, waxaa cadaatay in raggaas ku saxsanaayeen saadaalintii ay akhrisyaasha la wadaageen toban sano ka hor.

Sababta ugu weyn ee dabada ka riixaysa qalaalasaha ku dhacay shaqsiyadda dabiiciga ah ee qofka nool waqtigan casriga ah ayaa lagu sheegay faafidda dhaqanka cuskan in la qiimeeyo oo waliba la qaddariyo shaqsiyaadka caanka ku noqday warbaahinta iyo filimada la jilo “Celebreties.”

Qarniyadii hore waxaa caan noqon jiray qof maqaadiirta u qoondeysay karti iyo karaamo u gaar ah. Wixii ka danbeeyay kacaankii warshadaha iyo teknoolajiyada, waxaa billowday dhaqan ku baaqaya in qof walba uu karaamo iyo karti gaar ah leeyahay, qasabna ay tahay in karaamadaas laga guul gaaro “Individualism”.

Dhaqanka noocan ah ee ku baaqaya in qof walba gaarkiis qataroos u yahay iyo waliba qaddarinta iyo qiimaynta xad dhaafka ah ee ay heleen shaqsiyaadka caanka noqday “Celebreties” waxaa ka dilaacay daacuunka la magac baxay “faafiddii nafta-isla dhacsan”- The Narcissim Epidemic” Qayb ka mid ah cilmi baarista ku xusan buuggan waxaa lagu ogaaday in tiro aad u badan oo ka mid ah dadyowga ku nool waddamada hormaray, ay baadigoob ugu jiraan muujinta burhaantooda gaarka ah. Baadi-goobka noocan ah waxaa laga dhaxlay farxad la’aan iyo xanaaq badan waayo wuxuu qof walba wuxuu tartan adag kula jiraa guud ahaan bulshada oo dhan.

Dhanka kale, qorayaasha buuggan waxay sidoo kale tilmaameen, in qarnigan la joogo la arki doono shaqsiyaad magac iyo maamuus ka raadiya waxyaabo waayadii hore laga xishoon jiray. Mar haddii muhiimaddu tahay in magac la yeesho, qofka qaba cudurka “nafta isla dhacsan” wuxuu aaminsanyahay in sheeko walba iyo dhacdo kasta ka buuxaan fursado caan lagu noqon karo ama lagu muujin karo karaamada iyo kartida u gaarka ah. Dooda noocan ah waa mid cuskan xaqiiqooyinka ka muuqda nolosha casriga ah marka la eego waalida ka socota warbaahinta bulshada “Social media.”

Inkastoo buuggan laga qoray qalaalasha qarsoon ee ku soo maqan dhaqmada ka jira waddamada hormaray, haddana waa buug wax badan ka tilmaami kara buufiska iyo waalida ka socota waddamada soo koraya. Tusaale ahaan qarnigan la joogo, dalalka soo koraya iyo waddamada burburay sida Soomaaliya oo kale waxaa magac iyo manfac ka soo raadiyay shaqsiyaad dadnimadoodii ay naafeesay cudurka uu buuggan sida cilmiyaysan u soo bandhigayo. Shaqsiyaadka noocan ah waxay magac iyo maamuus ka raadinaan magac xumada iyo duruufaha adag ee dalka ka jira.

Soomaalida kuma badna aqoonyahanno si fiican u bartay cilmi-nafsiga iyo aqoonta cilmiga bulshada kuwaas oo ka sii digi kara qalalaasaha ku qarsoon shaqsiyadda qofka Soomaaliga ah ee nool qarnigan la joogo. Nasiib wanaag

Soomaalida waxay leeyihiin abwaano iyo fanaaniin aad uga fiiro dheer ugana horreeya kuwa la midka ah ee ku nool wadamada Afrika.

Tusaale ahaan, fannaaniinta Soomaalida ayaa dhawaan bilaabay riwaayad caan noqotay oo si yaab leh u gudbinaysa farriinta cilmiga ah ee buuggan lagu qoray. Qofkii fahma farriinta riwaayada Qooto-qooto, uma baahna inuu buuggan akhriyo waayo wuxuu si fudud ku fahmay calaamadaha u gaarka ah cudurka nafta isla-dhacsan ee qarnigan la joogo qalaalasha qarsoon ka wada dunida!

## 47. Gaajada iyo Gacan ka Hadalka

Waxaan ogaaday in gaajada iyo isu gacan-qaadka qaraabo yihiin. Maqaayad Soomaalida leedahay oo Toronto ku taalla oo aan ku sugnaa ayaa waxaa ka dhacay dhacdo yar oo labo dhallinyaro ah ku sigteen in gacanta iyo shanta farood iskula tagaan.

Mayaaqaddan oo caan ku ah dalabka oo lala soo daaho ayaa dalab-qaadihii wuxuu dalab qaldan u geeyay nin markaas soo fariistay maqaayadda. Ninkii dalabkii qaldamay loo geeyay ma diidin, ee inta bisinka uu qabsaday ayuu bilaabay in wixii Rabbi u qoray qararamsado asaga oo waliba qoslaya!

Dalabka qaldamay waxaa daqiiqado badan sugayay nin kale oo fadhiyay miis aad iigu dhowaa. Markii ninkii ogaaday in dalabkiisii lagu hor qararamsanayo ayuu inta xanaaqay asaga oo qaylinaya wuxuu indhaha faraha ka galiyay ninkii kale ee maqaadiirta u qortay in raashin uusan ku tashan la sheekaysto.

Labadii nin hadalkii ayaa ka taagtaagmay, waxayna ku sigteen in ay isku gacan qaadaan. Aniga waxaan rabay in la isku gacan qaado oo waliba si fiican la isku feero si aan u daawado qaabka maqaadiirta madaxa iskugu galiso akhiyaarta gaajaysan. Balse akhiyaar kale oo maqaayadda dhinac ka fadhiyay ayaa raggii kala dhex galay. Waxaana lagu dhawaaqay xabad joojin deg-deg ah!

Isla markiiba, ninkii odayga ee dalabkiisa la duudsiyay daqiiqado ka hor ayaa dalab-qaadihii wuxuu hor keenay saxan hilib iyo bariis ka buuxo. Ninkii xanaaqsanaa markii uu billaabay qararamsiga bariiska iyo hilibka is barkan wuu qaboobay, wuxuuna u muuqday inuu ka sii xoroobayo xanaaqii lama filaanka ahaa.

Markii aan arkay ninkii xanaaqsanaa ee dalabka lagala soo daahay oo bariis iyo hilib ku qaboobay ayaan ku fekeray in aan is xanaajiyo oo waliba laad ku qaado kursi ii dhowaa si aan u muujiyo mudaaharad ku aaddan gaajada igu qaboobi rabta waayo qudheyda dalabka daqiiqado badan ayuu iga soo daahay.

Nasiib wanaag, intii aan xanaaqin ka hor waxaa la ii soo xawilay saxan qoslaya oo waliba camiran sida masaajid laga xadreynayo oo kale! Muddo markii aan ku mashquulsanaa caleema saarkii ka socday saxankii camirnaa, ayaa waxaan arkay labadii nin ee sida lama filaanka ah iskugu xanaaqay oo is xaalmarinaya, ayaga oo waliba midba midka kalena ka cudur daaranayo qaladkii dhacay.

Dhacdadan lama filaanka waxaan ku ogaaday in gacan qaadka iyo gaajada xiriir weyn ka dhaxeeyo. Haddaba waxaa macquul ah ragga ku dagaalama Tukaraq in ay gaajaysan yihiin. Waxaa sidoo kale macquul ah haddii gaajada meesha laga saaro in ciidamadaas dar Alle u qaboobi lahaayeen, isla markaana uga xorroobi lahaayeen xanaaqa sababay in sannado badan dhul oomane ah la isku gacan saaro!

## 48. Caafimaadka Maskaxda iyo Caqliga Madaxda

Mid ka mid ah madaxda ummadda Soomaaliyeed ayaa maanta jeediyay khudbad lagu xusay taarikhihii iyo dhibaatooyinkii xannuunka lahaa ee ka dhex dhacay bulshada Soomaaliyeed. Masuulkaas madaxda ah wuxuu khudbad u jeedinayay dumar Soomaaliyeed oo u dabaal dagayay maalinta caalamiga ah ee haweenka Adduunka.

Sida badanaa ay qabaan aqoonyahanada ku takhasusay cilmi nafsiga "psychology" iyo dhaqaatiirta dhimirka " psychiatrists", bulshooyinka ka soo jeeda Geeska Afrika gaar ahaan Soomaaliya waxay la ildaranyihiin cudurro nafsi ah oo laga dhaxlay dhaawacyo "Truama" dhimirka ka soo gaaray dagaalladii iyo gabood falladii is daba joogga ahaa ee muddooyinkan danbe lagu mashquulsanaa.

Inkastoo aan la samaynin baaritaanno iyo cilmi baarisyo buuxa, haddana hay'adda qaramada midoobay u qaabilsan caafimaadka (WHO) waxay dhowr sanno ka hor sheegtay in saddexdii qof ee Soomaali ah qof ka mid ah uu qabo xanuunnada maskaxda ku dhaca marka la eego baaxada dhibaatooyinkii dalka ka dhacay.

Haddii loo kuurgalo doodaha ay soo gudbiyeen dhaqaatiirta dhimirka iyo qaylo dhaanta ka timid hay'adda WHO waxaa lagu baraarugayaa muhiimadda ay leedahay in madaxda ummada Soomaaliyeed aad uga fiirsadaan khudabadaha siyaasadaysan ee shacabka u jeedinayaan waayo waxaa dhici karta in khudbad ku saabsan xusuusta taarikhihii foosha xumaa in shacabka qaar ka dhaxlaan gocasho iyo dhaawacyo cusub oo dhanka dhimirka ah (Retraumatization).

Tusaale ahaan, muuqaal laga soo duubay khubad uu jeediyay madaxweynaha Somaliland uu kaga warbixinnayay xusuusta maalinta ay go'een iyo sababaha ka dambeeya gooni isu-taagooda waxaa ka soo dhex muuqday dumar badan oo ka calool xumaaday xusuusta dhibaatooyinkii ka dhacay gobollada waqooyi Galbeed ee Soomaaliya dhammaadka qarnigii dhammaaday!

Qaar badan oo dumarkaas ka mid ah waxay la ilmeeyeen errayo calool xumo ah oo madaxweynaha uga jawaabayay hadallo siyaasadaysan oo ka soo yeeray mid ka mid ah madaxda faraha badan ee ummadda Soomaaliyeed.

Aqoonyahannada cilmiga bulshada "Sociologists" waxay qabaan in caqliga qofka madaxda ah badanaa uusan ka madax bannaanayn garashada guud ee bulshada markaas u garbo duubantahay. Nasiib darro Garashada guud ee Soomaalida "collective consciousness" waxay muddo soddon sano ka badan u garbo duubnayd dareenno dhaawacan oo cudurro qarsoon ku riday siyaasadda guud ee dalka.

Haddii aad doonaysid in aad wax ka ogaatid noocyada ay yihiin cudurradaas qarsoon ee ku dhacay siyaasadda Soomaaliya waxaad dib u aqrisaa maqaalkii cinwaakiisa ahaa: Cudurrada aan laga caafimaadin ee siyaasadda Soomaaliya oo ka qeyb ah maqaallada buuggani ka qeybta ah.

Haddaba haddii aan ogaannay in caqliga madaxda badanaa u lug xiranyahay garashada guud ee bulshada waxaa la is weydiin karaa sidee lagu heli karaa madax nasiibsatay garasho iyo dareen ka madax bannaan dhaawacyada laga dhaxlay dhibaatooyinkii dhacay? Jawaabta su'aashan badanaa cilmiga bulshada iyo cilmi nafsiga kama jawaabi karaan.

Nasiib wanaag, suufiyada Ilaahay ku xiran ee muddada dheer qolalka mugdiga ah ku marqaamayay ayaga oo khalaaweynaya waxay su'aashan uga jawaabaan sidan: marka muddo bulshada iyo madaxdeeda ku raagaan xanuunnada dhimirka waxaa nasri lama filaan ah laga soo xawilaa caalamka mucjisooyinka.

Tusaale ahaan suufiyada muddooyinkan u kuurgalayay siyaasadda Soomaaliya waxay qabaan in Febraayo 2017-dii ummadda Soomaaliyeed heleen nasri lama filaan ah waayo waxaa markii ugu horreysay la doortay madaxwene u muuqda nin ka badbaaday dhaawacyadii dhimirka ee laga dhaxlay dhibaatooyinkii dhacayay muddooyinka dheer!

Dhanka kale, aqoonyahannada cilmiga bulshada waxay dood ku celiyeen suufiyada qabta in nasri laga soo xawilay caalamka mucjisooyinka ka dib markii la doortay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka waayo waxay sheegeen in madaxweyanaha uu nasiib u helay in uu dalka ka dhoofo asaga oo aan maqli xabad qush tiri.

Sidaa daraadeedna, caafimaadka ka muuqda caqliga madaxweynaha Farmaajo waxaa loo tiirin karaa xasiloonidii uu ku barbaaray dhallinyaranimadiisa iyo nabaddii uu qurbaha kala kulmay. Suufiyadu dooddaas rogaal celiska ah kuma aysan qancin waayo waxay qabaan in mucjiso iyo nasri cusub tahay in 2017-dii loo doorto nin dalka ka dhoofay ka hor inta aysan dhibaatadu dhicin!

Marka laga soo tago doodaha caatada ah ee u dhaxeeya aqoonyahannada cilmiga casriga ah iyo suufiyada aaminsan mucjisooyinka, waxaa muuqanaya muhiimadda ay leedahay in ummadda Soomaaliyeed hesho madax caqligooda uusan u garbo duubnayn garashada guud ee bulshada si looga caafimaado dhaawacyadii garashada qofka Soomaaliga ah ka soo gaartay dhibaatooyinkii dhacayay soddonkii sano ee la soo dhaafay.

# Cutubka Saddexaad: Cilmiga Bulshada iyo Siyaasadda Soomaalida

## 49. Aqoon Baaris: Waa maxay Dhaqan?

***Hordhac***

Qof walba oo qaan gaar ah wuxuu ogyahay xaqiiqda ah in bulsho walba oo deegaan gaar ah ama waqti gaaar ku nool in ay leeyhiin dhaqan u gaar ah oo ay kaga duwan yihiin dhammaan dhaqamada kala duwan ee caalamka ka jira. Marwalba oo aan kororsanno waayo aragnimo waxaan ku baraarugaynaa astaamaha u gaarka ah dhaqanka bulshada aan ku dhex noolnahay markaas. Bulshadaas waxay noqon kartaa bulsho aan ka dhalanay ama bulsho aan waqti danbe ku soo biirnay ka dibna aan la dhaqannnay.

Sidoo kale qof walba oo maskax furan wuxuu dareemaa baahi ku bixisa in uu u kuurgalo samaanta iyo xummaanta dhaqanka uu markaas ku dhex noolyahay. Hormarka farsamada casriga ah ee qarnigan iyo isku socodka dadka ayaa waxay sahashay isku furfurnaansho iyo iska warqab bulshooyin badan oo ku kala nool deegaanno aad u kala fog kuwaas oo ku kala duwan dhaqamada iyo sooyaalka nolosha.

Arrintan ayaa waxay sababtay baahi ah in si cilmi ah loo eego guud ahaan dhaqanka iyo kala duwanaanshaha dhaqamada bulshooyinka adduunka ku wada nool. Laamaha kala duwan ee cilmiga ayaa isku dayay in ay si cilmi ah uga jawaabaan waxa uu dhaqan yahay, balse cilmiga sida gaarka ah loogu tixgaliyo daraasaynta guud ahaan dhaqamada dadka iyo isbaddallada dhaqanka ku yimaada ayaa ah cilmiga bulshada “ Sociology”.

Qoraalkan kooban wuxuu isku dayi doonaa in uu si guud uga jawaabo su’aasha ah: Waa maxay dhaqan? Siyaabo kala duwan oo isku dheelitiran ayuu qoraalka u cuskan doonaa ogaanshaha waxa uu dhaqan yahay kuwaas oo laga soo dhiraandhiriyay cilmiga bulshada “ Sociology”.

Sidoo kale qoraalka waxaan ku ogaan doonnaa muhiimadda ay leedahay in si cilmi ah loo ogaado dhaqanka wuxuu dheef iyo dhibaato u leeyahay guud ahaan nolosha dabiiciga ah ee dadka iyo duunyadaba.

Inta aan ku guda jirno ogaanshaha waxa uu dhaqan yahay, waxaan si gaar u eegi doonnaa weydiin muhiimad gaar ah leh marka si cilmi ah loo daraaseenayo dhaqamada kala duwan ee adduunka ka jira. Waa su’aasha ah: dhaqamada ma kala fiican yihiin mise dhammaan dhaqamadu waa isku mid oo si guud ayay u wada wagaangsan yihiin. Qaybta danbe ee qoraalka waxaan is barbadhig ku sameen doonnaa waxa Soomaalida u taqaan dhaqan iyo hiddo iyo waxa uu dhaqan yahay cilmi ahaan.

*Dhaqan muxuu yahay?*

Marka si guud looga jawaabo su'aashan, cilmiga-bulshada wuxuu ku soo koobaa, dhaqan in uu yahay wax walba oo ka baxsan deegaanka dabiiciga ah " Natural environment" ee aadanaha ku noolyahay. Noolaha kale ee adduunka ku nool waxay ku noolyihiin deegaanka dabiiciga ah ee nolosha. Bani'aadamka wuxuu xayawaanka kale kaga soocanyahay samaysashada deegaan u gaar ah oo ka duwan midka dabiiciga ah. Deegaanka aan dabiiciga ahayn wuxuu noqon karaa magaalooyinka iyo guryaha ay sameysteen aadanaha, aragtida- ideology nolosha laga aaminsanyahay, farsamada nolosha lagu furdaamiyo, iyo waliba hadalka.

Si kale marka loo qeexayo dhaqan waxaa lagu qeexaa xasuusta deegaanka aan dabiiciga ahayn ee bulsho " social environment" ee dad ama bulsho gaar ah ay wadaagto. Bulsho kasta waxay leedahay xasuus ku saabsan deegaan bulsheedkii ay ku soo dhaqmayeen muddo. Waa xasuus faca hore u gudbiyo faca soo koraya. Xasuustan la isku gudbinayo waxaa ugu muhiimsan aragtida nolosha laga qabo ee laga soo dhiraandhiriyay dhaqanka gaarka ah ee bulshadaas. Sidoo kale farsamada nolosha lagu furdaamiyo ayaa ka mid ah xusuusta ay bulsho kala dhaxasho. Qaabka xasuus dhaqameedka la iskugu gudbiyo waxaa fududeeya hadalka uu aadanaha kaga soocan yahay noolaha kale.

Dhaqamada adduunka ka jira waxay ku kala duwan yihiin arrimo badan. Si aan u ogaanno dhaqan waxa uu guud ahaan yahay, waxaa habboon in aan is weydiinno su'aasha ah ma jiraan waxyaabo ay ka wada siman dhammaan dhaqamada adduunka ka jira annagoo maanka ku hayna kala duwanaanshahooda.

Su'aashan waxaa isku dayay in uu ka jawaabo caalimkii cilmiga Anthropology mudane George Murdok. Baaritaan dheer kadib, mudane Murdok wuxuu tilmaamay arrimo badan oo dhammaan dhaqamada adduunka ay si guud u wadaagaan kuwaas oo kala ah "Ciyaaraha kala duwan ee jirka laga sameeyo kuwaas oo inta badan loo galo tartan laga helo madadaalo iyo abaalmarin, karinta iyo diyaarinta cunto lagu wada cuno si wada jir ah, niikada iyo qoobka ciyaarka kuwaas oo lagu soo bandhigo muujinta dareenka hoose ee qofnimo, duugidda qofka dhinta iyo in loo tacsiyeeyo qoyska qofka uu ka dhintay, is gudoonsiinta haddiyado lagu muujinayo qalbi wanaag iyo mahadcelin iyo adeegsiga hadalka si loogu wada xariiro wixii aragti ah iyo in la iskugu tilmaamo la iskuna wargaliyo arimaha markaas taagan.

Dhaqankasta oo adduunka ka jira waxaa laga helayaa arrimaha kor ku xusan. Sidoo kale daraasaynta dhaqamada waxaa lagu ogaadey baahi guud oo aadanaha wadaago kuwaas oo kala ah: ciyaaraha, diimaha iyo guurka.

Saddexdan baahi oo aadanaha wadaago wuxuu qofku kaga baahi bogtaa dhaqanka u gaarka ah ee bulshada uu markaas ku dhex noolyahay.

Isticmaalka dabka ayaa ahaa barta ay ka bilaabatay dhaqan u gaar ah aadanaha. Taarikhyahannada u kuurgala sooyaalka nolosha dadka, waxay tilmaamaan in aadanaha uu hal'abuuray dhaqan u kaga soocan yahay noolaha kale wixii ka danbeeyay markii uu ogaaday faa'idada dabku nolosha u leeyahay. Sida aan kor ku so xusnay dhaqan waxaa lagu qeexaa deegaanka aan dabiiciga ahayn ee bani'aadamku ku noolyahay. Deegaankaas wuxuu noqon karaa magaalooyinka lagu noolyahay, Qalabka casriga ah ee loo aadeegsado nolosha casriga ah, hay'addaha qofka u diyaariya ama ka caawiya nolosha sida qoyska, goobaha waxbarashada, dawladda iyo waliba goobaha lagu cibaadaysto.

Wixii ka danbeeyay isticmaalka dabka, aadanaha wuxuu bilaabay in uu si tartartiib ah kaga soocmo deegaanka dabiiciga ah ee uu la wadaagay noolaha kale asagoo sameesanaya dhaqan deegaan aan dabiici ahayn. Nolosha casriga ah ee maanta dunida ka jirta waxay kaga duwantahay noloshii hore ee dadka in qofka uu xiriir kooban la leeyahay deegaanka dabiiciga ah ee nolosha. Tusaale ahaan qofka ku nool magaalooyinka waaweyn waxaa adag in uu la falgalo ama wax kaga ogaado degaanka dabiiciga ah ee nolosha halka qofka ku nool baadiyaha ama magaalooyinka yar-yar uu waqti badan ku tabiyo la falgalida uu la leeyahay deegaanka dabiiciga ah. Aqoonyahannada iyo maskax-shiilka naqdiya dhaqanka casriga ah ee aadanaha waxay tilmaamaan in dhaqanka casriga ah dhibaato u geesatay deegaanka dabiiciga ah "Natural Environment" iyo xiriirkii dabiiciga ahaa ee aadanaha iyo deegaanka ka dhaxeeyay.

Nuxurka hoose ee dhaqankasta leeyahay waxaa lagu ogaadaa waxa afka qalaad lagu dhaho "values" oo ah waxyaabaha ay bulshadu si wada jir ah ugu aragto run, samaan iyo guul. Sidoo kale astaamaha dhaqan leeyahay waxaa ugu toolmoon waxa afka qalaad lagu dhaho " Norms" oo ka dhigan hidde ama caado soo jireen ah oo qofka ku haga qaabka ay bulshadu ka filayso in uu u dhaqmo. Marka la eegayo kala duwanaanshaha dhaqamada, waxaa si gaar ah loogu kuurgalaa hiddaha soo jireenka ah " Norms" iyo arrimaha qiimaha leh " Values".

Arrimaha la qiimeeyo ama caadooyinka soo jireenka ah ee dhaqan leeyahay waxay qaabeeyaan shaqsiyadda hoose ee qofka iyo sida uu arko nolosha. Qofkasta oo si iskiis ah maaankiisa uga hela dookh ka duwan waxa bulshadiisa qiimeyso ama caadada u ah, wuxuu la kulmaa cadaadis iyo ciriiri ku qasba in uu bulsha ka soocmo asagoo noqonaya tuke canbaar leh oo kale.

Badanaa dadka wax ka baddela ama wax ku soo kordhiya dhaqamada adduunka ka jira waxay u badan yihiin qof qof ku dhiiraday in uu dhaqanka bulshadiisa u soo jeediyo dhaliilo, dhib badan ka dib na xal u raadiya dhaliisha uu arkayo. Tusaale ahaan, raggii cilmiga casriga ah dhidibada u taagey, waxay ahaayeen dad su'aalo cilmi cuskan iska waydiiyay arrimaha bulshada ay qiimeyso " Values" ama caadooyinkii soo jireenka ahaa "Norms".

***Dhibaatada iyo Dheefta dhaqamadu leeyihiin.***

Marka la darsayo dhibaatada iyo dheefta dhaqamadu leeyihiin, Cilmiga bulshadu" Sociology" , wuxuu adeegsadaa aragtiyooyin "Theories" kala duwan oo u gaar ah. Anagoo soo koobayna aragtiyooyinka kala duwan, waxaan ku hormaraynayaa aragtida "Functionalism" oo ah aragti cilmiga bulshadu ku eego shaqada iyo faa'idada laga helo waxa kasta oo bulsho sameeyso.

Aragtidan waxaa halabuuray caalmikii weynaa Emil Durkhiem. Shaqada iyo faa'iidada dhaqan laga helo, waxay aragtida "functionalism" ku soo koobaysaa sidan: dhaqanku wuxuu kaalin weyn ka qaataa midnimada iyo isku soo dhawaanshaha bulshada. Sidoo kale dhaqanku wuxuu fududeeyaa kala danbeynta iyo wada jirka ay bulsho leedahay asagoo u u sahlaya in ay ku midoobaan waxyaabo la qiimeeyo "Values" iyo caadooyin soo jireen ah "Norms". Bulsho ku mideysan dhaqan u gaar ah waxay nolosha ku xaqiijisaa xasilooni siyaasadeed iyo hormar dhaqaale. Sidaa daraadeed ragga aragtida "functionalism" ku eegga dhaqanka, waxay aaminsanyihiin in dhaqanku yahay astaanta midnimo ee bulsho leedahay.

Inta badan aragtida functionalism waxay ku doodaan in wada jirka bulsho ay ku xirantahay arrimaha la qiimeeyo dhaqan ahaan iyo caadooyinka soo jireenka ah ee bulshadaas leedahay. Tusaale ahaan, dhaqanka laga qiimeeyo arrimo ay ay ka midyihiin ka qaybqaadashada talo wadaagga siyaasadeed,wuxuu bulshada u sahlaa in ay ku midoobaan dhaqan siyaasadeed dimoqoraadi ah oo dadku ay kaga go'aan gaaraan nolol maalmeedkooda iyo aayaha ubadkooda.

Inta badan aragtida functionalism dan kama gasho samaanta ama xumaanta asal ahaan qaybaha kala duwan ee dhaqanka, kaliya waxay ka eegtaa faa'idada iyo ujeeddada lagu gaarayo fulinta arrimaha la qiimeeyo ama caadooyinka soo jireenka ah ee dhaqankaas.

Tusaale ahaan Soomaalida dhaqan diimeedkoodii hore wuxuu ahaa in ay raacaan aragtida suufiyada oo ah koox ka mid ah kooxaha badan ee diinta Islaamka fasira. Wixii ka danbeeyay burburkii dalka, dhaqan diimeedkii suufinnimada waxaa suuqa ka saaray dhaqan diimeed kale oo carabaha laga soo safriyay kaas oo ah aragtida ay wahaabiyadu ka qabto diinta islaamka.

Adeegsiga aragtida cilmiga bulshada ee functionalism waxay ku sahlaysaa in aad si fudud u qiimeenayso dhibaatada iyo dheefta laga dhaxely dhaqan diimeedyada kala ah Suufinnimada iyo Wahaabiyonnimada. Marka la fiirinayo wada jirka ummada Soomaaliyeed iyo xasiloonida siyaasadeed ee dalka, waxaad ogaanaysaa in dhaqan diimeedka suufinnimada uu marwalba dan u yahay Soomaalida mar haddii suufinnimada tahay mid dhiira galisa is jaceylka iyo isku naxariisashada kuwaas oo ah arrimo udub dhexaad u ah wada jirka.

Waxaan ognahay in dhaqan diimeedka wahaabiyada uu bulshada Soomaaliyeed ku soo kordhiyay kala qoqobnaan iyo kala tag halis ku ah wada jirka bulshada. Sidoo kale aragtidan functionalism waxay dhanka kale kaa tusi kartaa faa'idada laga dhaxley wahaabiyonnimada!

Dhaqan diimeedka wahaabiyannimadu wuxuu dalka ku soo kordhiyay in dadka Soomaaliyeed aysan ku mashquulin aakhiro oo ay xoogga saaraan sadbursiga nolosha gaaban ee adduunka. Taas waxay keentay faa'ido badan oo ah in ganacsi xawaare sare ku socdo oo ay wahaabiyadu hormuud ka yihiin in uu dalka ka hana qaado, taas oo la dhihi karo waa guul dhanka dhaqaalaha iyo ganacsiga ah oo u soo hoyatay shacabka Soomaaliyeed. Sidoo kale faa'idada dhaqan diimeedka wahaabiyada laga dhexlay ayaa ah in gabdho badan guursadaan niman garar waaweyn ka dib markii ay guur ka ka waayeen suufiyada ku macluulsan mawlacyada!

Dhanka kale waxaa jirta aragti kale "theory" oo cilmiga bulshada ku eego guud ahaan arrimaha u baahan in si cilmi ah loo darso. Aragtidan waxaa lagu magacaabaa afka qalaad Critical Theory- aragtida naqdiska. Aragtidan waxaa dhidibada u taagey caalimkii weynaa ee cilmiga dhaqaalaha, siyaasadda iyo waliba falsafadda mudane Karl Marx. Aragtida naqdiska, "Critical theory" waxay wax walba ka eegtaa hal dhinac oo ah dhanka awoodda. Su'aasha asaasiga ah ee aragtidan is weydiiso ayaa ah: yaa haysta awoodda dhaqaale dhaqan iyo midda siyaasadeed.

Haddaba marka aragtidan lagu eeggo dhibaatada iyo dheefta dhaqan leeyahay, waxaa mudan in la isweydiiyo qaybta bulshada awoodda ku leh ee danta gaarka ah ay ugu jirto hadba dhaqanka markaas jira. Aragtidan waxay ku dooddaa in bulsho walba ee meel ku wada nool ay u qaybsan yihiin kooxo awood leh iyo kuwo laga itaal roonyahay.

Haddaba dhaqanka bulsho waxaa hal-abuura kaddib na haga kuwa awoodda dhaqaale iyo midda siyaasadeed markaas ugu tunka roon. Si aan aragtidan u fahamno, waxaa habboon in aan tusaale ahaan eegno dhaqanka Soomaalida. Sida aan ognahay, bulshada Soomaaliyeed waxay u badanytahay xoolo dhaqato, sidoo kale waxaa jira qayb bulshada ka mid ah oo beeraley iyo qayb kale oo badaha ka qaraabta. Saddexdan qaybood ee bulshada Soomaalida u qaybsan tahay waxay kala leeyihiin dhaqamo hoosaadyo kala duwan oo ku saabsan farsamada nolosha lagu furdaamiyo, suugaanta iyo aragtida nolosha laga qabo iyo waliba adeegsiga errayo iyo lahjado kala duwan oo ku soo wada aroora Af-Soomaaliga.

Wixii ka danbeeyay dawladnimadii Soomaalida, waxaa awood siyaadeed iyo mid dhaqaale helay xoolo-dhaqatadii bulshada Soomaaliyeed. Awoodda ay heleen waxay sahashay in dhaqankii xoolo-dhaqatannimada uu noqdo halbeega

lagaga shidaal qaato dhaqan weynaha guud ee Soomaalida ayadoo la malawaaley in Soomaalidu isku dhaqan, isku diin iyo isku Af ba yihiin.

Dawladdii kacaanka oo ay hormuud ka ahaayeen rag askar ahaa oo noloshoodii hore ku soo qaatey dhaqanka geeljironnimada ayaa waxay meel walba ku faafiyeen suugaan, taariikh, arrimaha la qiimeyo “values” iyo caadooyinkii hore ee xoola raacatadii Soomaaliyeed ayagoo ku sheegay in uu yahay dhaqanka guud ee Soomaaliya.

Aragtida naqdiska- critical theory la yaab kuma ahan in sidaas wax u dhacaan, waayo waxay si fudud ku ogaaneysaa in xoolo dhaqatadii heleen awood ay dhaqankooda kaga dhigiaan hormuudka dhaqan hoosaad-yada kala duwan ee bulshada Soomaaliyeed.

Awoodda ay heleen xoolo dhaqatadii Soomaaliyeed waxay dib dhac weyn ku keentay in dhaqanka guud ee Soomaalida noqdo mid hormara oo la qabsada nolosha casriga ah ee dhanka siyaasadda iyo dawladnimada.

Waxyaabaha laga qiimeyo “ values” iyo caadooyinka soo jireenka ah ee dhaqanka xoolo-raacatada ayaa ah kuwo aan marna la jaan qaadi karin siyaadda iyo dawladnimada casriga ah ee dunida maanta ka jira Qabyaalladda oo ah nuxurka waxyaabaha laga qiimeeyo “ Values” dhaqanka xoolo raacatannimada ayaa ah midda qasabtay in raggii hormuudka ka noqday siyaasadda Soomaalida in ay fahmi waayaan dawladnimda casriga ah. Haddii la rabo in la garto musiibada Soomaalida u diiday in dawlad dhexe helaan waa in aragtida naqdiska “ Critical Theiroy” lagu eego dhibaatada laga dhexlay dhaqanka hoose ee xoolo raacatannimada ee lagu hagayay siyaasadda Soomaalida mudada qarniga ku dhow.

Aragtida critical theory waxa lagu eegi karaa dhaqan kasta oo dunida ka jira ayadoo la isweydiinayo yaa awoodda leh. Adduunka aan maanta ku noolnahay waxaa awoodda siyaasadeed iyo midda dhaqaale gacanta ugu jiraan reer galbeedka. Awooddaas ayaa u sahashay in dhaqanka reer galbeedku noqdo mid dhaqamada adduunka ka jira ku milma ama isku daya in uu qabsado. Taas micnaheedu ma ahan in dhaqanka reer galbeedku wanaagsan yahay ama xunyahay, kaliya waa in ay fursad u heleen awood ay ku meel mariyaan dhaqankooda.

Dadka madow ee ku nool qaaradda afrika waxaa ku dhacay musiibo daran oo dhanka dhaqanka ah. Qolo walba oo awood siyaasadeed iyo mid dhaqaale hesha waxay soo beegsatay qaaradda Afrika. Tusaale ahaan, wixii ka danbeeyay markii carabaha shidaalka laga helay qarnigii dhammaadey bartamihiisii, dhaqanka carabta wuxuu isku dayay in uu harowsado dhaqamada qawmiyadaha kala ah Soomaalida iyo Oromoda.

Arrinta koowaad ee dhaqan carbeedka u soo beegsaday Soomaalida iyo Oromada ayaa ah in waqtigaas carabtu ka awood roonaayeen oo kaliya Soomaalida iyo Oromada! Wiilal geel jirayaal u badan oo carabaha soo booqday ayaa garwadeen ka noqday in ay dhaqan carbeedka ka dhigaan mid

muqaddas ah oo Ilaahey raali ka yahay.Wixii ka danbeeyay burburkii dalka, waxaa soo baxdey itaal darrida siyaasadeed iyo midda dhaqaale ee Soomaalida. Waana marka ay heleen fursad qaali ah wiilasha carabta u adeega si ay sinjiga Soomaalida uga dhigaan wax silloon oo dhaqan carbeedka caabuda! Waxaa murugo ah in awoodda ay heleen carabta uu noqday in lagu xaalufiyo deegaanka aan dabiiciga ahayn- dhaqanka Soomaalida.

Dad badan oo u ololeeya ka hortagidda xaalufinta deegaanka dabiiciga ah waxay qaylo dhaan ka muujiyaan sida ganacsiga dhuxusha ee carabaha u xaalufiyay deegaanka dabiiciga ah " Natural environment" ee Soomaalida. Si la mid sidaas culimada cilmiga bulshada ee Soomaaliyeed waa in ay qaylo-dhaan iyo baaq ka soo saaraan sida ganacsiga masaajidyada ee laga hago waddamada khaliijka u xaalufiyeen deegaanka aan dabiiciga ahayn " Dhaqanka" ee qawimyadda Soomaalida.

***Dhaqamadu makala wanaagsanyihiin mise waa isku mid?***

Doodda culus ee maskax-shiilka daalisay waqtigan casriga ah ayaa ah su'aashan: dhammaan dhaqamadu ma wada simanyihiin dhanka wanaaga iyo samaanta mise way kala fiicanyihiin? Su'aashan waxay dhalisay doodo waaweyn oo aad u kiciyay caadifadda bulshooyin badan oo adduunka ka jira.

Aqoonyahanno badan oo isir nacayeb ku dilooday ayaa waxay ku dhiiradeen in ay si aan gabasho lahayn u weeraraan dhaqamo qayb libaax ka soo qaatay taariikhda aadanaha. Weerarkaas waxaa ka mid ah in dhaqamadu qaar lagu tilmaamo in ay yihiin kuwo liita asal ahaan oo u baahan in laga guuro. Dhaqamada sida gaarka ah loo ugaarsado waqtiyan danbe waxaa ka mid ah dhaqamada ka jira dalalka wali awooddooda dhaqaale iyo siyaasadeed ay liidato. Sida aan horey ku soo ogaanney, aragtida naqdiska ah " critical theory" la yaab kuma ahan in dhaqamadaas la ugaarsado ayadoo loogu marmarsiyoonayo itaal daraddooda.

Dooddan oo ah mid mug weyn, waxaan wax kaga ogaan doonnaa aragtida cilmiga-bulshada ka qabo jawaabta su'aashan.

Inta badan dhaqamadu waxay ka jiraan goobo iyo waqtiyo kala duwan, waxaana ku kala dhaqma dad ku kala duwan deegaanka dabiiciga ah ee aagaas ka jira kaas oo badanaa qaabeeya dhibcaha ugu muhiimsan ee dhaqan- deegaanka aan dabiciiga ahayn yeelanayo. In is barbardhig lagu sameeyo dhammaan dhaqamada sidaas u kala duwan ma ahan arrin sahlan.

Cilmiga-bulshada si uuga jawaabo su'aashan, wuxuu dajiyay qaaciddo weyn oo ku saabsan kala fiicnaanshaha dhaqamada. Qaacidadaas waxay tahay in dhaqan kasta oo ogolaada isbaddel in uu ka wanaagsan yahay dhaqan kasta oo diida isbaddel cusub. Qaacadidan ayaa ah halbeega uu cilmiga bulshada u dajiyay samaanta ama xumaanta dhaqamada. Waa qaaciddo la socoto nolosha dabiiciga

ah mar haddi aan ognahay in isbaddelku yahay mid waajib ku ah geedi socodka nolosha.

Dhaqamada hormaray ee maanta dunida ka jira waxay ku dhiiradeen in ay si geesinnimo leh u ogolaadaan isbaddelka ku dhaca nolosha iyo waqtiga. Waxay la yimaadeen firfircooni cusub oo dhiig cusub galisay nuxurka hoose ee dhaqankaas leeyahay. Sida aan horey u soo sheegnay nuxurka dhaqan leeyahay waa waxyaabaha la qiimeeyo " values" iyo caadooyinka soo jireenka ah "norms".

Dhaqanka ogolaada in nuxurka hoose wax laga baddalo ama wax lagu soo biiriyo wuxuu dhankasta kaga hormaraa dhaqanka fadhiidka ah ee aan ogolaanin in wax ku soo kordhaan ama wax laga badalo. Bulsho kasta oo ka gaabisa in ay dib u eegis ku sameeyaan dhaqankooda guud waxay u dulowdaa bulshada ogolaata isbaddelka lama huraanka u ah dhaqamada. Tusaale ahaan dunida maanta waxaa loo wada rigeysan yahay dhaqanka reer galbeedka marka ay timaado farsamada casriga ah, waxyaabaha la qiimeeyo" values" iyo waliba siyaalaha dawladnimada casriga loo dhisto. Dhaqanka reer galbeedka ma ahan in uu ka horreeyo dhaqamada kale ama ka wanaagsan yahay asal ahaan, kaliya waa dhaqan ku caano maaley in uu si geesinnimo leh u soo dhaweeyo isbaddallada aan nolosha looga maarmin.

Dadka aan aqoonta durugsan u lahayn waxa uu dhaqan yahay, waxay ku doodaan in dhaqamada iyo cilmiga casriga ah ay kala duwan yihiin. Waxay aaminaan sheekada ah in dhaqanku yahay wax gooni ah oo u baahan in la ilaaliyo ayadoo laga faa'idaysanayo hormarka farsamada iyo aqoonta carsiga ah ee maanta dunida ka jirta. Dadka sidan ku dooda waxaysan ogeyn in farsamada casriga ah, aqoonta cilmiga sayniska iyo waliba hanaanka furan ee dawladnimada-dimoqoraadiyadda ay yihiin qaybo ka mid ah dhaqanka guud ee reer galbeedka.

Waxaa arrin lagu qoslo ah in qof diidan dhaqanka reer galbeedka kuna tilmaamaya in uu yahay dhaqan xun uu haddana daqiiqad kasta ku dhaqmayo qaybo ka mid dhaqanka reer galbeedka. Tusaale ahaan waxaad arkeysaa wadaad xanaaqsan oo marwalba habaara dhaqanka reer galbeedka oo haddana ku raaxeysanaya gaari qurux badan, saacad casri ah iyo waliba mobile qaali ah. Marka aad wadaadka waydiisid waxa uu ku falayo qalabka iyo agabka reer galbeedka laga keenay wuxuu ku leeyahay waxani waa farsamo, ma ahan dhaqan, qof walba ayaana ka faa'ideysan kara.

Wadaadkan wuxuusan ogayn in qalabka casriga ah ee uu ku raaxeysanayo laga soo dhiraandhirayay waxyaabaha la qiimeeyo"values" iyo caadooyinka soo jireenka ah " norms" ee dhaqanka reer galbeedka. Tusaale ahaan dhaqanka reer galbeedka waxaa laga qiimeeyaa "Value" ah in heersare laga gaaro ku raaxeysiga nolosha aduunka . Waana taas sababta farsamada reer galbeedka xoogga u saaraan hal-abuurka qalabka casriga ah ee lagu gaari karo nolol sahlan oo lagu raaxaysan karo. Haddaba waxaa yaab leh wadaad sheeganaya in

dhaqankiisa lagu qiimeeyo sidii aakhiro xoogga loo saari lahaa uu haddana daqiiqad kasta dabo ordo qalab casri ah oo laga keenay dhaqan aan dan ka galin nolosha aakhiro!

Dhaqamada fahmey muhiimadda ay leedahay isbaddelka lagama maarmaanka u ah nolosha si ay ula tartamaan dhaqamada kale ee asaagood ah waxaa ka mid ah dhaqaka ka jira dhulweynaha China. Dhaqanka shiinaha wuxuu muddo dheer ku caan baxay dhaqan xiran oo waxa afka qalaad lagu dhaho “closed culture”. Wuxuu ahaa dhaqan is mahdiyay oo aan cidna u baahnayn.

Dhaqanka shiinaha wuxuu iskaga filnaanaday farsamada nolosha lagu furdaamiyo, wax soo saarka dhaqaalaha, aqoonta casriga ah iyo waliba sugaanta iyo qoraalka. Muddo dheer ayuu dhaqanka shiinaha ka caaganaa in uu isbaddel cusub la yimaado. Arrintaas waxay keentay in dhaqamadii kale ay soo weeraraan siyaasad ahaan iyo dhaqaale ahaan dhulweynaha China.

Waxaa la yaab leh in dhaqamada soo weeraray oo markii danbe siyaasad ahaan ku qabsaday dhulweynaha china ay ahaayeen dhaqamo dhankasta uga liitay nuxurka hoose ee dhaqanka China. Nasiib wanaag hormuudkii iyo hoggaankii China waxay ku baraaruugeen halista ay leedahay in la diido isbaddelka qasab ka ku ah nolosha.

Waa markii ay go’aansadeen in ay dib u eegaan nuxurka hoose ee dhaqankooda ayagoo la imaanaya firfircooni cusub oo dhan kasta ah kaas oo markii danbe ku caanbaxay waxa ay taariikhyannadu u yaqaaniin kacaankii dhaqanka China “ China cultural revolution”. Maanta cidna loogama sheekaynayo hormarka uu gaaray dhaqanka guud ee China oo la filayo in muddo gaaban gudahood kala wareegi doono dhaqanka reer gabeedka kaalinta hoggaaminta dhaqamada adduunka.

***Soomaalida maxay u taqaannaaa dhaqan?***

Dhaqanka guud ee Soomaalida waa mid facweyn oo muddo dheer lagu soo noolaa. Waa dhaqan caan ku noqday waxyaabo badan oo nolosha qiimo u leh sida farsamo fac weyn oo nolshii hore si qurux badan loogu soo furdaamiyay. Sida aan kor ku soo xusnay dhaqanka guud ee Soomaalida wuxuu u qaybsamaa dhaqan hoosaadyo kala duwan oo bulshada Soomaaliyeed ka dhaxleen hadba deegaanka ay ku noolyihiin.

Xoola-dhaqatada Soomaalida waxay leeyhiin dhaqan u gaar ah oo ka kooban waxyaabaha la qiimeeyo “ values’ iyo caadooyin soo jireen ah oo ka duwan dhaqan hoosaadka kale ee beeralleyda. Nasiib wanaag dunta hoose ee dhaqan-weynaha Soomaaliyeed isku xira ayaa noqday Af- Soomaaliga oo ah luqadda kaliya ee dadka Soomaaliyeed wadaagaan. Taas waxay fududeysay in dhaqan hoosaadyada bulshada Soomaaliyeed isku soo dhawaadaan, noqdaanna kuwo wax badan wadaaga si kasta oo ay ugu kala duwanyihiin deegaanka dabiiciga ah ee markaas lagu kala sugan yahay. Dhaqanka guud ee Soomaalida waxaa kale

oo xoojiyay diinta oo ah qayb ka mid ah dhaqanka guud ee bulsho leedahay. Soomaalida oo ah dad wada muslim ah ayaa waxay noqdeen dad dhaqankooda ku mideeya diinta Islaamka si ay u daboolaan baahida diimeed ee bulsho dareento.

Waqtigan la joogo waxaa dhibaato weyn ka taagan tahay waxa ay Soomaalida dhaqan u taqaan iyo dhab ahaan waxa uu dhaqan yahay. Bulshada Soomaaliyeed ee waqtigan nool waxaa dhaqan loogu sheegay kaliya fanka iyo suugaanta oo ah qayb ka mid ah dhaqanka guud. Warbaahinta waxaad ka maqlaysaa waa barnaamijkii dhaqanka iyo hidaha ee maalin hebla soo gali jiray. Markaad dhageysatid marnaamijkaas waxaad ogaanaysaa in dhaqankii guud ee Soomaalida lagu soo koobay gabay, hees iyo ciyaaro kala duwan. Sida uu mudane Murdok sheegay, dhaqakasta waxaa laga helaa ciyaaro kala duwan iyo suugaan. Haddaba in dhaqankii guud ee Soomaaldia lagu soo koobo suugaan iyo heeso waxay muujinaysaa sida aanan ugu baraarugsaneen deegaanka aan dabiicigi ahayn "Dhaqan" ee aan ku dhex noolnahay.

Noloshii hore ee Soomaalida waxay ahayd mid qurux badan waayo waxay ku noolaayeen waqti ay wax walba ka baadi goobi jireen dhaqankooda. Dhaqankii hore ee Soomaalida wuxuu kulansanayay: Farsamada nolosha lagu furdaamiyo, arrimaha la qiimeeyo, caadooyinka qofka ka caawiya sida uu noolaan lahaa, hanaanka maamul iyo midka dhaqaale, xeer hoosaad wax walba laga dajiyay, goobo garta lala tago oo xeer-beegti fadhiyaan, iyo Af iyo Suugaan dunida laga tixgaliyo.

Waqtigaas dahabiga ah waxaa ku xigay xilligii dawladnimdda casriga ah laga dhaxley gumeystihii oo noloshii hore looga suu guurey midda magaalooyinka. Waa xilliga ay musiibada ku dhacdey dhaqankii Soomaaliyeed. Waa waqtigii uu dhaqanka Soomaaliyeed u baahnaa in uu si tartartiib ah isku baddelo asagoo la jaanqaadaya waqtiga iyo waayaha cusub ee nolosha aadmiga u bilowday. Nasiibdarro dadkii Soomaalida hormuudka u noqday waxay u qaybsameen kooxo wali dhaqankii hore iskaga dhagan oo nuxurkii hore ee qabyaaladda la soo galey dawladnimada casriga ah, kuwo dhaqankii sanka ka qabsaday oo wadamada reer galbeedka kala soo noqday quursi iyo qabweyni, iyo niman carabta ka soo waaridey dhaqan carbeed lagu sinji caynayo dhaqamada soo jireenka ah ee dadka madow. Kuwan carabta ka yimid waxayba kaga sii dareen sheeko waalan oo ah in Ilaahey uusan raali ka ahayn dhaqankii hore ee Soomaalida!

Soomaalidii hore waxay muujiyeen karti iyo dadnimo ay deegaanka dabiiciga ah ka dhinac sameeyeen deegaan u gaar ah – dhaqan kaas oo noloshooda ka dhigay mid sharaf leh oo ummadaha kale ee adduunka ku qaddariyaan.

Soomaalida hadda nool waxay ku fashilmeen in ay hal-abuuraan dhaqan casri ah ayagoo ka shidaal qaadanaya dhaxalkii uu ka tagey dhaqankii hore ee

Soomaalida, lana imaanaya hal-abuur cusub oo lagu baadi goobo dhaqan casri ah oo u taagan danaha Soomaalida hadda iyo kuwa mustaqbalka iman doona.

Soomaalida hadda waxay ku sugantahay xaalad jaantaa rogan ah oo qof walba ku riday tiih iyo wareer daran. Mar la weydiiyay nin faylasoof ahaa oo magaciisa la dhihi jiray Abwaan Cabdulaahi Macalin Dhoodaan, sababta abwaannada uga gaabiyeen in ay talo cusub keenaan maadama ay yihiin hormuudkii dhaqanka wuxuu ku jawaabay “Dhaqanka hormuud waxaa u ah xeer beegti talo cusub curiya ee nin gabya waxba talo ma hayo. Ninka gabya wuxuu hadba dadka ku dhiira galiyaa talada guud ee hogaamiyaasha dhaqanka guddoomiyaan ee adeer sidaa garo” Abwaan dhoodaan wuxuu noo sheegayaa in Soomaalida dhaqankii guud ku soo koobeen fanka iyo suugaanta!

Hadda waxaaba jirta musiibo kale oo cusub oo ah in ay soo baxeen odayaal sheegta in ay yihiin odoyaasha dhaqan ee beesha hebel. Mararka qaar odayaashaas waxaa laga yaabaa in ay u taagan yihiin difaacidda dhaqan hoosaad ah sadbursi iyo boob ay beeshooda ku caan baxeen, balse in loo maleeyo in ay yihiin odayaal u taagan dhaqan guud ayaa ah musiibo ka daran abaartii Dabo dheer!

Dadka Soomaaliyeed waa in ay dib u eegis ku sameeyaan aragtida ay ka haystaan waxa uu dhaqan yahay, waa in ay ogaadaan dhib iyo dheef waxa uu dhaqankooda leeyahay sidoo kale waa in ay ku baraarugaan in isbaddel joogto ah aan looga maarmeen dhaqanka si nolosha casriga ah aan loogu dulloobin.

**Tixraac:** Giddens, Anthony, et al. Introduction to sociology. WW Norton, 1996.

## 50. Dhiraandhirin: Dhoofka iyo Dhaqanka Soomaalida!

Geeddiga iyo socodka aan joogsiga lahayn wuxuu qayb weyn ka ahaa nolosha Soomaalidii hore. Wuxuu ahaa geeddi socod looga fursan waayay noloshii qallafsanayd ee xoola dhaqatanimada. In la guur guuro oo hadba barin cusub iyo deegaan hor leh xoolaha loo foofsado ayaa iska ahayd dhaqan maalmeed ku lammaansan nolosha caadiga ee qoyska Soomaaliyeed. Socod dheer iyo mid gaabanba wuu lahaa geeddigaas, waxayna ku xirnayd hadba aagga laga helo naq iyo daaqsiin xoolaha lagu samata bixiyo.

Noloshu ma ahayn mid la saadaalin karo maadaama aysan jirin deegaan lagu nagi yahay. Maalin walba muuqaal iyo dhacdooyin u gaar ah ayay gaarkeed u wadan jirtay. Geeddigaas joogtada ah waxaa laga yara nasan jiray xilliyada barwaaqada ah ee roobabku ka da’aan deegaanka reerku ku sugan yahay. Noloshii reer guuraannimada waxay ahayd nolol shaqo iyo daal badan laga muto. Kumanaan sanno iyo dheeraad ayay Soomaalida sidaas ku dabari jireen noloshooda.

Si kasta oo noloshaas u adkeyd, haddana waxay ahayd nolol farxad badan oo qofku ku kalsoon yahay deegaankiisa iyo duunyada uu dhaqdo. Sida laga dheehan karo suugaanta iyo hiddaha Soomaalida, noloshii reer guuraanimada waxay ahayd mid ku caanbaxday iskaashi si wada jir ah loo wada qabto hawl maalmeedka reerka.

Qoys walba wuxuu ku tiirsanaa xoogga xubnihiisa. Waxaana noloshaas u babac dhigi karay qoyskii xubno badan ka kooban, waana taas sababtii uu oday walbaa ugu taami jiray in uu dhalo xayn carruur ah oo wiilal u badan.

Aqoonyanno badan waxay ku doodaan in noloshii hore ee bilowga ee aadanaha ay ahayd mid sahlan oo iska fudud marka la barbar dhigo nolosha casriga ah. Dooddaas ma ahan mid ku dhisan cilmi, waxaa isa soo taraya cilmi baarisyada lagu ogaanayo in noloshii hore ee bani’aadamka ay ahayd nolol dhammeystiran oo aan wax badan uga duwanayn noloshan casriga ah.

Arrintan waxay si weyn uga muuqan kartaa noloshii reer guuraanimada ee Soomaalida. Waxay ahayd nolol ku dhisan dhaqan adag iyo xeerar marwalba la cusboonaysiiyo kuwaas oo u dhigma ama kaba sarreeya xeerarka caalamiga ah ee maanta dunida looga dhaqmo.

Tusaale ahaan, arrin walba oo la soo gudboonaata noloshii hore ee reer guuraanimada waxaa la is weydiin jiray su’aashan “Ma ugub baa oo wax aan hore innoo soo marin oo cusub, mise waa arrin horey innoo soo maray oo curad ah oo xeer ka yaallo?”(Abwaan shaacir). Jawaabta su’aashan ayay ku xirneyd sida loo abbaarayo wax walba oo la soo darsa.

Reer guuraagii hore ee Soomaaliyeed, waxay safka hore kaga jireen bulshooyinkii xilligoodii joogay ee gobannimada ku caanbaxay. Isku filnaansho dhaqaale iyo mid dhaqan ayaaa ku xusan qoraalladii laga diyaariyay Soomaalidii hore. Sidoo kale marti soor aad u sarreeya iyo gacan furnaan ayaa ku xusan qoraalladaas. Tusaale ahaan Ibnu Batuuta wuxu qoralladiisa ku xusay in Soomaalidii uu ku arkay magaalooyinkii xeebaha ku teedsanaa ay ahaayeen dad ku martisoora martida hillib iyo caano ay hodan ku ahaayeen.

Ereyga "Qorshe" wuxuu ka soo jeedaa noloshii reer guuraannimada. Inkastoo ereygan adeegsigiisa ku badan yahay xafiisyada maamulka ee Soomaalida, haddana waxaa xusid mudan in Reer guuraagii Soomaaliyeed ay qorsheyn jireen halka reerka lagu furayo iyo sida loo dagayo. Arrintan waxaa si fiican u faahfaahiyay madexweynaha Somaliland mudane Siilaanyo, mar uu ka qayb galayay xafladdii afartan guurada qorista Af- Soomaaliga ee lagu qabtay Jabuuti.

Mudane Siilaanyo wuxuu xusay in asagoo ka faa'idaysanaya noloshiisii hore ee reer guuraannimada, in uu talo ku soo jeediyay in wasaaraddii uu joogay sannadkii 1972, loogu magacdaro Wasaarradda Qorsheynta Qaranka.

Nasiib wanaag, sida uu sheegay Siilaanyo, guddigii qorista Af- Soomaaliga way ka guddoomeen taladiisii, wuxuuna noqday errey bixin si weyn u dhaqan gashey. Reer guuraagii hore iyo geeddigoodii wuxuu ahaa mid qorsheysan oo aad looga baaraan dagay. Ma jiri jirin geeddi aan sahan ka sii horreyn. Aqoon baxaali ah oo reer guuraagii hore ka barteen deegaanka iyo cimilladii ay ku noolaayeen ayay ku salayn jireen qorshaha geeddigooda.

Dad badan ayaa ku doodda in Soomaalidii hore ay jeclaayeen geeddiga iyo guur- guurka. Marka si fiican loo darso noloshii hore iyo duruufihii ku xeernaa, geeddigii joogtada ahaa ma ahayn mid ku yimid rabitaan iyo jaceyl midna, ee waxaa qasbayay habka nololeed ee miyiga.



Faa'idooyinka laga dhaxley geeddigii joogtada ahaa ee reer guuraaga Soomaaliyeed, waxaa ka mid ah: Soomaalida oo tiro ahaan ah dad yar in ay ku baahaan dhul ballaaran oo ka mid ah Geeska Afrika, xoojinta iyo baahinta Af-Soomaaliga ayadoo la adeegsanayo suugaan hodan ah. Sidoo kale Iska warqab guud oo dhaqan iyo mid dhaqaale cuskan ayaa laga dhaxley geeddigii joogtada ahaa.

Geeddigaas joogtada ah wuxuu kaloo horseeday wada-dagid iyo wax wadaag lagu maareeyo duruufaha adag ee la soo darsa deegaanka sida abaaraha iyo colaadaha oo kale. Noloshii hore ee reer guuraanimada ayaa badanaa loo tiiriyaa arrinta sida hoose u sababtay is gacanqabashada iyo isku gurmashada guud ee Soomaalida ay kaga duwan yihiin dhammaan bulshooyinka ku nool Geeska Afrika.

Xog raadin iyo war isku tabin joogto ahaa ayaa ka mid ahaa waxyaabihii lagu hagi jiray noloshii reer guuraannimada. Aqoonyahanno badan ayaa qaba in war-raadinta iyo xog is weydaarsiga Soomaalida hadda joogta ay salka ku hayso dhaqankii hore ee miyiga.

Qarnigii labaatanaad bartamihiisi ayay Soomaali badan oo xoolo dhaqato ah bilaabeen in ay u soo wareegaan magaalooyinka. Arrimo badan ayaa sabab u ahaa in reer guuraa badan ay nolol ka bilaabaan magaalooyinka. Sababahaas-bulsho waxaana ka xusi karnaa curashadii qarannimada iyo dawladnimada cusub oo laga heley shaqooyin rasmi ah oo laga qaato mushaaro.

Shaqooyinkii sida weyn loogu daatey waxaa ugu caansanaa kamid noqoshada qaybaha kala duwan ee ciidamada Qaranka. Geel jirayaal badan ayaa qortey ciidamada, inta badan saraakiisha caanka ahaa ee Soomaaliya soo marey waxay noloshoodii dhallinyarannimada ku soo qaateen baadiyaha.

Waxaa jirta aragti ku doodda inta badan reer guuraagii ku soo yaacay magaalooyinka ay u badnayaayeen kooxo sabool iyo suxud saaxud ku ahaa nolosha miyiga. Aragtidan waxaa ka hor imaanaya dood kale oo qeexaysa in qarnigii labaadanataad bartimihiisa, magaalooyinka waaweyn ee dalka lagu arkey dhallinyaro badan oo ka soo jeeda reero ku ladnaa nolosha reer guuraannimada ee miyiga.

Marka laga reebo reer magaal kooban oo magaalooyinka Soomaaliya horay ugu sii noolaa, qoysaskii iyo carruurtii ay dhaleen dhallinyaradii qortay ciidamada qaranka ayaa nasiibsaday in nolol ka duwan noloshii reer guuraannimada ka billaabaan magaalooyin ay ka mid yihiin Muqdisho, Baledweyne, Hargaysa, Kismaayo, Baydhabo iyo kuwo kaloo badan.

Bartamihii qarnigii labaatanaad ayaa Soomaali asalkoodii reer guuraa ahaa si lama filaan ah ku noqdeen reer magaal noloshooda ku dabara xirfado ay ku xamaashaan. Halkaas na waxaa ka abuurmay facii ama jiilkii ugu horreeyay ee nolosha reer-guuraanimada uga soo wareega nolosha magaalada.

Jiilkii labaad ee si xawli ah nolosha miyiga uga soo hayaama ee magaalooyinka soo beegsada, ayaa soo qalab qaatay xilligii dawladdii kacaanka. Hoggaankii dawladdii kacaanka oo u badnaa geel jirayaal heer fiican ka gaarey darajooyinka kala duwan ee ciidamada qalabka sida, ayaa waxey tusaale wanaagsan u noqdeen qaraabadii iyo xigtadii ay baadiyaha uga soo tageen.

Guryihii iyo qoysaskii raggii ciidamada ka tirsanaa waxaa soo buux dhaafiyay dhallinyaro wiilal iyo gabdho iskugu jira oo qaraabada ah kuwaas oo baadiyaha uga yimid sii ay nolol cusub uga bilaabaan magaalooyinka dalka. Kacaankii dalka ka hanaqaadey wuxuu isbaddel weyn ku keeney xiriirkii ka dhaxeeyay noloshii baadiyaha iyo magaalooyinka waaweyn.

Reer guuraa badan ayaa si dag dag ah iskugu dayay in ay ula jaan qaadaan nolosha magaalada, taasna waxay dhibaato weyn u keentay nolosha dabiiciga ah ee magaalada oo u baahan waqti iyo barasho. Waxaana laga yaabaa in

waqtigaas ay ku beegnayd xilligii ay soo shaac baxdey oraahda ah "dhar magaalo si fudud ayaa lagu qaataa, balse dhal magaalo sahal laguma noqdo".

Karti iyo dadaal badan oo ay muujiyeen qayb ka tirsan dhallinyaradan miyiga ka timid, waxaa u suura gashey in muddo yar gudahood uga aflaxaan xarumihii waxbarashada, ayagoo ku kala biiray qaybaha kala duwan ee laamaha dawladda.

Sidoo kale waxaa xusid mudan in ay jireen qeyb kale oo badan oo qaab musuq maasuq ah maamulkii kacaanka uga dhigay shaqaale dawladeed, iyo askar. Aqoonyanno badan oo darsa burburkii dawladnimada Soomaaliya, waxay tilmaamaan in sababta ugu weyn ee tolweynaha Soomaaliyeed uga aamin baxeen dawladnimada in ay tahay soo dhaweyntii ka badbadiska ahayd ee dawladdii kacaanka u fidisay reer miyi badan oo magaalooyinka qaab habqan ah ugu soo yaacay.

Dhanka kale waxa jira qayb kale oo mudan in si fiican loo xuso. Kooxdan waa dhallinyaro miyiga ka timid oo aan soo dhaweyn iyo shaqooyin wanaagsan midna aan ka helin magaalooyinkii ay soo galeen. Dhallinyaradan miyiga ka timid iyo kooxo reer magaal ahaa oo magaalooyinka waaweyn ku busaaradaysnaa waxay u dhoofeen waddamada carabaha si ay diinta uga soo bartaan.

Dhallinyaro u badnaa ciidamada iyo qaybo kala duwan oo iskugu jiray shaqaalaha dawladda iyo arday ayaa ahaa kooxihii ugu horreeyay ee waddamada Galbeedka nolol ardaynimo iyo mid shaqo ka bilaaba. Inta badan shacabka Soomaaliyeed aragti iyo fikrad kama haysan nolosha, taariikhda iyo dhaqamada waddamada Galbeedka. Waddamadii waxbarashada ciidan loo aadi jiray waxaa ka mid ahaa Maraykan iyo Ruushka oo xiligaas ku tartamayay dagaalkii qaboobaa.

Raggii iyo dumarkii waxbarashada iyo shaqada uga soo laabtey Galbeedka, intooda badan waxay ka soocmi jireen bulshada inteeda kale ayagoo la dhuumanaya biyaha kulul oo ay kaban jireen. Sidoo kale raggii carabaha ka soo guryo-noqday waxay ka soocmeen bulshada ayagoo bilaabay in ay carabi caato ah kula murmaan waalidkii soo barbaariyay iyo xoola dhaqatadii Soomaaliyeed!

Tusaale ahaan, dhallinyaradii Carabaha u dhoofay ee diin barashada doontay waxey dalka ku soo laabteen ayagoo aaminsan in dhaqanka, hidaha, iyo taariikhda Soomaalida yihiin wax fadareysan oo ay waajib muqaddas ah tahay in laga fogaado. Raggan iyo saameynta ay ku yeesheen xiriirka ka dhaxeeya dhaqanka iyo dhoofka Soomaalida waxaan si faahfaahsan ugu xusi doonaa qaybaha danbe ee qoraalka.

Bulsho weyntii Soomaaliyeed ma aysan helin rag si fiican uga warbixiya dhib iyo dheef noloshii ay kala soo kulmeen Qurbaha. Inkastoo ay jireen aflaan iyo riwaayado aan badnayn oo aan la tarjumin, ma jirin qoraallo laga baran karo dhaqamada iyo xadaaradaha ummaddaha kale.

In dalka laga dhoofo oo dalal kale nolol qaxootinimo ah laga bilaabo ayaa soo shaac baxdey billowgii sideetamaadkii qarnigii labaatanaad. Rag u badnaa mucaarad iyo qoysaskooda ayaa ugu horreeyay dadkii Soomaaliyeed ee qaxooti ku noqda dalalka dariska ah. Dhanka kale, maamul xumo iyo shaqo la’aan ku baahdey dalka ayaa sidoo kale dhiira galisay in dhallinyaro badan dhoof u hanqal taagaan dhammaadkii qarnigii labaatanaad.

Marka la eego aragtida bulshada Soomaaliyeed ee waqtigaas joogtay, dad aan badnayn ayaa u arkey xalka caburinta siyaasadeed iyo shaqo la’aanta in dhoofitaan uu ku jiro, waayo dadka intiisa badan way ay ka soo hor jeedeen in dalka laga baxo oo dibaddaha dan la moodo. Suugaantii xilligaas ayay arrintan ka muuqan kartaa.

Heesta “Degmo” ee ay wada qaadaan Maxamed Aadan Dacar iyo Hibo Nuura ayaa u soo qadaan karnaa tusaale. Erayada heesta waxaa ka mid ah “Dacar: Raggu socodku waa u door haddii uu mawdku daayee. Darbi lama fariisto iyo halkii kuu darnaatee kol haddaan wax daaqiyo duunyo iga foofayn, doqonniimo weeyaan innagoo is dul joognaa…. Jawaabtii Hibo: Duunyo meel ku oodnayd soo dareerin maysidee. Dal kale taad ka dayi lahayd halkan innooga doonoo!”

Erayada ay ku luuqaynaso Hibo, waxay u taaganyihiin dareen xoog leh oo lagu diiddanaa in dalka laga hayaamo, sidoo kale waxay tilmaan u ahaayeen in aan nolol dhaanta midda waddanka laga heli karin waddamo kale.

Reer baadiye badan oo si tartartiib ah ula qabsanayay noloshii magaalada, iyo reer magaal aan badnayn ayay dadka Soomaaliyeed iskugu jireen markii ay dawladii kacaanka burburtay. Dagaalladii sokeeye iyo colaadihii waxaa laga dhaxley qax iyo qaxootinnimo aad u baahey oo qoysas badan oo Soomaaliyeed ku kala firdhisay dacallada adduunka.

Dad badan oo Soomaaliyeed ayaa u soo qaxay waddamada Galbeedka ayagoon aragti ka haysan dhaqanka iyo nolosha waddamada ay u soo qaxeen. Arrintan waxaa laga dhaxley dhibaato aad u weyn oo laga gaashaaman lahaa haddii wax uun laga ogyahay taariikhda, falsafadda nolosha lagu hago, iyo dhaqamada waddamada galbeedka.

Dhoofkii iyo qaxii lagu soo beegsanayay waddamada galbeedka wali wuu socdaa. Dagaaladii sokeeye ee dalka ka dhacay waxay is baddal weyn ku sameeyeen xiriirkii ka dhaxeeyay miyiga iyo magaalada. Xoola- dhaqatadii oo miyiga ku waayay daryeel dawladeed ayaa ku soo yaacay magaalooyinka.

Nasiib darro, Inta badan reer miyigii soo galay magaalooyinka waaweyn ee dalka lama aysan kulmin reer magaal ay ka bartaan ilbaxnimada looga baahanyahay nolosha magaalada waayo dadkii magaalooyinka ku noolaan jiray waxay waa hore ka ka qaxeen dagaaladii dalka ka dhacay dhowr iyo labaatan sano ka hor.

Waqtigan la joogo, magaalooyinka waaweynaa ee Soomaaliya waxa ku badan, reer miyi qaab qasab ku reer magaaloobay. Dadaal aad u badan ayay sameeyeen dadkii miyiga ka soo galay burburkii ka dib. Waqtigan la joogo, magaalooyinka waaweyn ee dalka waxaa kala wada dhaqaale iyo dhaqan ahaanba reer miyigii soo galay labaatan iyo dhowr sanno ka hor.
Arrintan waxay saameyn weyn ku yeelan doontaa ilbaxnimada jiilasha soo socda waayo magaalooyinkii waaweynaa ee dalka waxaa lagu kala wadaa qabyaaladdii iyo dhaqankii tuulada.

# 51. Cudurrada aan laga Caafimaadin ee Siyaasadda Soomaaliya

## ***<u>Hordhac</u>***

Qof walba wuxuu ka dheregsanyahay dhibaatada lagala kulmay in dib loo dhiso dawladnimadii la burburiyay labaatan iyo dheeraad sanno ka hor . Waa tiro dhaaf shirarka caalamiga ah ee loo qabtay Soomaalida si shaydaanka ay iskaga naaraan ka dibna ugu heeshiiyaan siyaasada dalka.

Dhammaan shirarkii caalamiga ahaa way wada fashilmeen marka laga reebo midkii ugu danbeeyay ee lagu qabtay Nayroobi oo maamulkii ka soo baxay lagu soo galbiyay kumaanaan ciidan ah kuwaas oo laga soo kala aruuriyay waddamo isku jira kuwo Soomaalida sinji ahaan u neceb, qaar tartan deegaan kula jira iyo dalal u dhaarsan in ay dhadhamiyaan quruxda iyo qaayaha ka muuqda gabdhaha Soomaaliyeed!

Dawaladdii federaalka ee loo soo galbiyay Muqdisho waxay ka bixi weysay fadhiidnimo iyo in madaxdii qaranka sida gabdhaha foodlayda oo kale isku haruufaan marwalba. Sannadkii 2013-ka Waxaa la eryay Raysulwazaare xafiiska joogay muddo ka yar sanad, waqti yar gudahoodna waxaa la magacaabay rayzulwazaare cusub oo qudhiisa isla sannad gudihii lagu eryay. Haddaba su’aasha cilmiga ah ee mudan in si geesinimo ah looga jawaabo waxay tahay waa maxay sababta dhabta ah ee ka danbeysa waalida diidan in dawladnimadii burburtay dib loo hanto?

Qoraalkan kooban wuxuu sawir ka bixin doonaa caadifadaha ugu waaweyn iyo dareennada dhaawacan ee diidan in dadka Soomaaliyeed ay isla fahmaan

muhiimadda ay nolosha u leedahay in la dhisto maamul dhexe oo danahooda guud ka shaqeeya si aan looga sii habsaamin hormarka iyo ilbaxnimada qarniga 21aad ee waa hore laga haray.

Sidoo kale qoraalka wuxuu isku dayi doonaa in garashada Soomaalida ku soo biiriyo aragti ka duwan doodaha caanka ah ee dadka Soomaaliyeed ku mashquulaan marka la gorfeynayo siyaasadda Soomaaliya. Dadka fakera ee Soomaaliyeed waxay garowsan yihiin in caqliga guud “collective mind” ee soomaalida uu noqday maxbuus u afduuban dareennada malaayiinta ah ee laga dhaxlay dhibaatadii iyo burburkii dalka ka dhacey.

Dood iyo daraasad xeeldheer ayay u baahantahay in lagu gorfeeyo sida qofka Soomaaliga ah u noqday dhibane noloshiisa u horseeda burbur iyo guuldarro asagoo adeegsanaya dareeno “emotions” aan maangal ahayn. Nasiib wanaag, culimada nafsiga ee adduunka waxay aruuriyeen cilmi badan oo loo adeegsan karo daawaynta iyo baxnaaninta caqliga iyo dareennada u afduuban caadifadaha aan caadiga ahayn “normal” ee dhaliya xanuunada dhimirka. Marka la darsayo xanuunada ku dhaca maskaxda, culimada nafsiga “ Psychologists” iyo dhaqaatiirta dhimirka “ Psychatrist” waxay adeegsadaan dhiraadhirin dhimireed “Psycho analysis” lagu ogaanayo sababaha daahsoon ah ee ka danbeeya waalida iyo is diidka ka muuqda nolosha bukaanka.

Ujeeddada ugu weyn ee laga leeyahay dhiraandhintan ayaa ah in si cilmi ah lagu ogaado dhaawaca gaaray dareennada dabiiciga ah ee qofka ku abuuran si loo helo sawirka dhabta ah ee ku aaddan maxbuusnimada garashada qallalan “inetellect” ee qofka.

Haddaba daaweynta iyo baxnaaninta aan looga maarmeyn garashada iyo dareennada dhaawacan ee qofka Soomaaliga ah waxaa ka horreeya in dhiraadhirin dhimireed lagu sameeyo waali wadareedka (collective madness) ka muuqda siyaasadda guud ee Soomaaliya. Waalida noocan ah waxay sababtay in si guud Soomaalida u taageeraan xumaanta iyo nacasnimada ayagoo nolosha ka rajeynaya wanaag iyo hormar.

Caalmikii weynaa mudane Erich Fromm ayaa buuggiisii caanka ahaa- bulshada miyirka qabta “The sane society” si cilmiyaysan ugu sharaxay qaababka bulsho ugu waalan karto si wadar ah. Dagaalladii sokeeye ee Soomaaliya ka socday waxay horseedeen in qarannimadii laga dhexlay gumeystaha si wadar ah loo burburiyo ayadoo qabiil walba tirsanayso dhib u gaar ah oo aan looga garaabin. Culimada taariikhda ee mustaqbalka ayaa looga fadhiyaa in xog ururin cilmayaysan ku sameeyaan wixii gar ama gabood fal ah ee qolo kasta ugu keydsan kaydka taariikhda marka ay timaado burburintii qarannimada Soomaaliya.

Soddonkii sanno ee dagaaallada sokeeye socdeen, siyaasaddii lagu burburiyay dawladnimadii dalka waxay saldhigatay saddex xarumood oo caasimado u

noqday cudurrada aan wali laga caafimaadin ee siyaasadda Soomaaliya. Sida qoraalka ku dooddi doono, sababaha daahsoon ee ka danbeeya waalida ka muuqata siyaasadda Soomaaliya waxaa lagu tilmaami karaa: Cuqdada Hargaysa, Ciilka Muqdisho iyo Cabsida Garoowe.

Magaalooyinkan Soomaaliyeed ee la ildaran xanuunnada laga dhaxlo dareennada dhaawacan ee kala ah cuqdad, ciil iyo cabsi waxay xarumo u yihiin qabiillo sheegtay in ay ka soo farcameen oday aan la hubin halka uu ka soo jeedo asal ahaan. Sida qoraalka ku dooddi doono, haddii aan daawo cilmiyaysan iyo cawil celinta Rabbi loo helin dareennada dhaacawan ee magaalooyinkan, dawladnimada Soomaaliya waxay noqon doontaa riwaayad lagu maadsado oo kale.

Haddaba maxay kala yihiin tusaalayaasha taariikhda ku kaydsan si aan u muujino dareenada daahsoon ee sababi kara xanuunnada wali aan laga bogsoon ee bukaan socodka ka dhigtay siyaasadda Soomaaliya?

## ***Afeef***

Inta aynaan qoraalka guda galin, waxaan habboon in la iska baraarujiyo buufiska badanaa Soomaalida u diida in ay fahmaan qoraallada noocan oo kale ah. Baraarujinta ugu horreeysa waxa weeye in qoraalku ahayn mid ku doodaya dhabnimada qodabada uu soo bandhigi doono. Sida ugu fiican ee qorallada noocan ah lagu akhrin karo waa in aad muujisid maskax furan oo dhinacyo badan ka eegi karta maangalnimada doodda qoraalka gudbinayo. Arrinta labaad ayaa ah in aaddan maleynin in qodob gaar ah uu si guud u qabanayo magaalo ama qabiil guud.
Tusaale ahaan, haddii aad qoraalka ku aragtid qodob ku doodaya “Farxadda Baydhabo” waa in aaddan malawaalin in dadka Baydhabo jooga oo dhan ay wada faraxsanyihiin waayo waxaa laga yaabaa in Baydhabo lagu arko dad ka xanaaqsan doorashadii 2014-tii ee madaxweyne Shariif Xassan iyo dhacdooyin kale!

## ***Cuqddada Hargaysa***

Sida taariikhda ku xusan, midowgii Koonfurta iyo Waqooyiga Soomaaliya waxaa sabab u ahaa qabiillada dagan Waqooyiga Soomaaliya oo si qiiro iyo qalbi furnaan ah ugu yimid qabiilladii kale ee deganaa Koonfurta dalka. Nasiib darro, may dhicin in qiimayntii iyo waliba qaddarintii ay mudnaayeen walaalaha waqooyi la garowsado. Taas baddalkeed waxaa laga qadiyay kuraastii qiimaha lahaa ee qarannimadii laga dhaxlay gumeystaha. Qadinta noocaas ah waxay qalbiyada qabiiladii waqooyiga malaha ku beeertay **cuqdad** oo ah dareen badanaa laga dhaxlo dhacdooyinka nolosha ee lama filaanka kugu noqda.

Baaritaanno badan ka dib, culimada nafsigu waxay ogaadeen in dareenka cuqdada horseedo dhibaatooyin ay ugu toolmoon yihiin gooni isku taag uu wehliyo qalbi jab. Sida ay ku doodaan culimada nafsigu, qofka cuqdadaysan wuxuu gaar ka noqdaa ama ka dhex baxaa dadka asagoo dareemaya faquuqid iyo in dadku aysan ahayn kuwo la aamini karo. Sida muuqata, wixii ka danbeeyay burburkii dawladda dhexe, siyaasadda Hargaysa waxay ahayd mid lagu baadigoobayo gooni isku taag iyo ka go'itaanka dalka intiisa kale.

Haddaba qoraalkan wuxuu muujinayaa in sababta daahsoon ee siyaasadda noocan ah ay noqon karto cuqdad aan maangal ahayn oo laga dhaxlay caddaalad darro lama filaan ku noqotay walaalaha waqooyiga. Sidoo kale culimada nafsiga waxay ku doodaan in qofka uusan gaari karin go'aan maangal ah haddii garashadiisa maxbuus u tahay dareenno dhaawacan.

Nasiib wanaag, burburkii dalka ka dib, goballada waqooyi waxaa hoggaanka u qabtay nin magaciisa la dhihi jiray Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal oo ahaa siyaasi ku baraarugsan dhaawaca gaaray qalbiyada dadkiisa. Sidoo kale wuxuu ogaa in ay laga maarmaan tahay in qabiillada waqooyiga helaan maamul ay ku nastaan, kagana caafimaadan dhaawacii iyo dhibaatadii ka soo gaaray la midowgii Koonfurta dalka. Marar badan ayuu gole fagaare ah ka sheegay mudane Cigaal in dadkiisa ay waajib ku tahay in ay cafiyaan walaalaha Koonfurta si looga caafimaado cuqdadda deegaanka ka jirta ka dibna nolosha horay loogu sii dhaqaajiyo. Tusaale ahaan,waano taariikhi ah oo ku saabsan cawaaqib xumada cuqdaddu leedahay ayuu mudane Cigaal jeediyay mar uu ka hadlayay xabaale wadareed laga helay meel u dhow magaalada Hargaysa.

Nasiib darro, asagoo ku guda jira baxnaaninta dhaawaca soo gaaray qalbiyada dadkiisa ayuu mudane Cigaal alleystay. Wixii ka danbeeyay geerida marxuumka, deegannada waqooyiga kama soo bixin siyaasi ama hoggaamiye dabiici ah oo deegaanka ka badbaadin kara dareenka cuqdadda ah ee laga dhaxlay burburkii qarannimadi dalka. Magaalada Hargaysa waxay caasimad u noqotay siyaasiyiin, aqoonyahanno, wadaaddo iyo waliba ganacsato u midoobay ka miro dhallinta siyaasadda gooni isku taagga ee soddon gaartay.

Arrinta ugu naxdinta badan ayaa ah in dhallinta soo koreysa ee gobollada waqooyiga dhaxleen dareenka aan kor ku xusnay. Haddii aan cawil celin la helin, arrintan waxay horseedi doonta in mustaqbalka waqooyiga Soomaaliya ka soo baxaan jiil cusub oo wada cuqdadaysan.

***Ciilka Muqdisho***

Soomaaliya qaybtii uu Talyaanigu gumeysan jiray waxaa qaab teel teel ah u dagan qabiilooyin siyaabo kala duwan dareenkoodu u dhaawacanyahay. Sida taariikhda dhow ku xusan, waqtigii gumeystaha waxaa fursad yar oo awood siyaasaddeed ah helay qabiillada dagan Waqooyi Bari ee Soomaaliya.

Awoodaas siyaasaddeed waxay u sahashay in qaab dhuumaalaysi ah u soo dagaan aaggagii hoose ee Koonfurta Soomaaliya ka dibna isku ballaariyaan dhul badan. Is balaarintaas waxay u fududeysay in siyaasad ahaan ay si dadban ama si muuqata u haggaan dawladihii rayidka ahaa ee la yagleelay gumeystaha ka dib. Arrintan waxay sababtay in qabiiladii kale ee Koonfurta Soomaaliya daganaa ay **ciil iyo calool xumo** dareemaan ka dib markii ay ku baraarugeen sadbursiga qabiillada ka soo naqraacay Waqooyi Bari ee dalka. Ciilkii dawladahii rayidka ahaa waxaa ka horeeyay ciil kale oo aan wali laga caafimaadin kaas oo laga dhaxlay boqortooyadii boobka ku dhisnayd ee suldaan Cali Yuusuf ee gobolka Mudug.

Culimada nafsiga waxay ku doodaan in ciilku yahay dareen halis ah oo haddii aan laga caafimaadin sababi kara dhibaatooyin ay ka mid yihiin in qofka ciishooday uu caro darteed la qarxo ka dibna la waayo caqli iyo awood lagu xakameeyo. Sida la wada ogyahay, labaatan iyo dheeraad sano ka hor, qabiilladii ku ciishoonaa Koonfurta dalka ayaa si lama filaan ah u qarxay ayagoo dagaal washamsi camal ah ku soo qaadey caasimaddii hore ee dalka. Waxaa barqo cad si lama filaan ah loo eryay dawladdii milateriga ahayd oo muddo dalka ka talinaysay.

Qabiilladii ciishoonaa waxay guda galeen in ay boob iyo bililiqo ugu dhaqaaqaan hantidiii qaranka ayagoo maleeyay in qarannimadu tahay wax u gooni ah qabiilladii laga eryay caasimadda. Sidoo kale, ciilkaas gaamuray wuxuu horseeday in Soomaali badan loo dilo heyb qabiil, hantidoodana lala wareego. Haddii cilmi nafsiga lagu eeggo saameynta ciilku leeyahay, wax lala yaabo ma ahan in sidaa wax u dhacaan waayo ciilku wuxuu horseedaa in qofka ciishoon uu si la yaab leh u aarsado.

Intii lagu guda jiray aargoosigaas lagu rajeynayay in looga caafimaado ciilka gaamuray, waxaa dalka ka dhacay musiibooyin aan dabiici ahayn oo sababay in beesha caalamku soo gurmato sida abaarihii dadka badan ku laayay koonfurta dalka billowga sanadihii sagaashanaadka. Qabiilladii ku midoobay dareenka ah ciilka gaamuray waxaa hoggaaminayay nin magaciisa la dhihi jiray Jeneraal Maxamed Faarax Caydiid oo ahaa siyaasi ku baraarugsan in ciilka socda uusan maangal ahayn. Dhowr jeer ayuu Jeneraalka meel fagaare ah ka sheegay in aysan habboonayn in maato masaakiin ah la laayo. Waxaa jira dhacdooyin badan oo muuninaya in Jenanku ahaa ahaa nin ka madaxbanaan ciilka dadkiisa ay ku wayraxeen.

Tusaale ahaan, waxaa dhacday mar Jananka su’aalay odayaashii tolka sidii laga yeeli lahaa maxaabiis madax ah oo laga qabtay qabiilladii ka cararay caasimadda. Odayaasha qabiilladii ciishoonaa waxay ku taliyeen in birta laga aslo maxaabiista la hayo. Jenanka asagoo ku baraarugsan halista ciilka reer tolkiis ayuu wuxuu sheegay in taladu aysan xumeyn, balse uu gartay in cafis u fidiyo maxaabiista xiran. Muddadii lagu guda jiray dagaalladii aargoosiga ah ayuu Janaraalku wuxuu ku baraarugay in la gaaray waqtigii ciilka laga

caafimaadi lahaa, waana taas baa la dhihi karaa sababtii ka danbeeysay inuu dhiso dawladdii salbaraal si maamulkii iyo kala danbeytii loo soo celiyo.

Nasiib darro taladii mudane Caydiid ma hirgalin, waxaana ka horyimid xoogag ciishoon oo la galay dagaallo muddo socday oo markii danbe sababay in mudane Caydiid xabbad ku disho mid ka mid ah waddooyinka Muqdisho. Geeridii mudane Caydiid ka dib, qabiilladii ciishoonaa waxay iska sii wateen boob iyo bililiqo aan bartilmameed gaar ah lahayn. Nasiib darro, qabiillada ciishoon uma soo bixin siyaasi sida Jeneraal caydiid oo kale fahmi kara in la gaaray waqtigii ciilka la soo afjari lahaa. Wali ciilkii waa socdaa, oo sida lawada ogyahay caasimadda dalka wali waxaa jooga odayaal dhaqameed iyo rag siyaasiyiin ah oo aaminsan in wali tolka uusan ciil bixin. Tusaale ahaan, mar dhaxdaas ah waxaan warbaahinta laga dhageystay nin sheegay in uu yahay siyaasi tolka ku baraarujinaya halis ku soo aaddan. Ninkaas magaciisa waxaa lagu sheegay Shiikh Ciise Dalabey. Muxaadaradii uu shiikha jeediyay waxay ahayd baraarujin ku aaddan in la abaabulo qaabka ugu fiican ee tolka ku ciil bixi karo! Qoddobadii uu mudane Dalabey u cuskaday dooddiisa siyaasadeed waxay u badnaayeen godobta taariikhiga ah ee tolka dhaxalsiisay ciilka aan dhammaadka lahayn!

## ***<u>Cabsida Garoowe</u>***

Soddonkii sanno ee dawladnimada dalka ka jirtay, siyaasadda waxaa ku xoogganaa oo hadba isku cayrsanayay qabiilo la sheegay in ay ka soo farcameen oday qaab tahriib camal ah uga soo tallaabay badda u dhaxeysa Yemen iyo Soomaaliya. Lama yaqaan sida odaygaas uu baddaas uga soo gudbay waayo sida aan ognahay badda cas waxay qabtaa tahriibayaal badan! Waxaa laga yaabaa in doon shiraac fiican leh uu soo raacay, sidoo kale waxaa laga yaaba in uu ahaa nin dabaasha yiqiin oo qaab dabaal joog ah badda uga soo gudbay! Qabiilladii siyaasadda dalka ku xoogganaa muddada dheer waxaa mar kaliya weerar wadajir ah kaga naxsaday qabiilladii waqooyiga dalka ku cuqdadaysnaa iyo kuwii kale ee muddada dheer ciishoonaa. Weerarkaas wuxuu dhaliyay in dawladnimadii ku dhisnayd sadbursiga si fudud loo burburiyo ka dibna la baacsado qabiilladdii ku gabanayay awoodda dawladnimada.

Guuldaraddan lama filaanka ah, waxay argagax iyo casbi ku abuurtay qalbiyada qabiilladii la sheegay in ay ka soo farcameen odaygii carabka aha. Sida taxanaha taariikhda ku cad, qolo kasta oo ismahdisa waxaa qabta sharciga dabiiciga ah ee nolosha. Dharbaaxdii ku dhacday qabiilladii ku daabanaa awoodda dawladnimada sheeko iyo sharaxaad midna uma baahna. Sida la ogyahay, waxay u qaybsameen qaar qaxooti ayagoo ah ka tallaabay xuduudaha dalka, qaar aan badnayn oo lahayste ku noqday magaalooyinka Koonfurta dalka iyo qaar kaloo badan oo si dhuumaalaysi ah ugu qaxay dhulkii ay markii hore ka soo naqraaceen.

Dareenka dhaawacan ee qabiilladan ayaa noqday **cabsi iyo argagax** laga dhaxlay cararkii lama filaanka ahaa. Sida culimada nafsiga ay sheegaan, dareenka casbida ah waa kan ugu halisan ee laga dhaxlo dhacdooyinka lama filaanka ah ee nolosha ku lamaansan. Cabsida waxay garashada qofka galisaa xabsi aan daaqado iyo irid midna lahayn. Haddii qofka muddo dheer ku soo jiro nolol cabsi leh, waxaa maankiisa si dadban ugu sawirma humaag si joogto ah u xasuusiya argagixii uu kala kulmay waqtiga iyo waayaha. Sidoo kale, qofka cabsanaya wuxuu qaataa go'aanno fuleynimo ah marka uu wajahayo caqabadaha ku gudban nolosha waayo wuxuu lumiyaa kalsoonida kartidiisa iyo awoodda garashadiisa.

Waxgaradkii iyo siyaasiyiintii qabiilladan waxaa ku adkaaday in ay ka soo kabsadaan argagaxii ay ka qaadeen cararkii lama filaanka ahaa. Intooda badan waxay u qaybsameen qaxooti naf iyo nolol biday qurbaha. Nasiib wanaag nin magaciisa la dhihi jiray Cabdullaahu Yuusuf Axmed ayaa si lama filaan ah uga soo baxay xabsi Itoobiya ku yaalla. Waxaa la sheegay in markii mudane Yuusuf Soomaaliya yimid, inuu la fajacay argagaxa ka muuqda wajiyada reer tolkiisa. La yaabka mudane Yuusuf la yaab malaheyn waayo qudhiisa wuxuu ka mid noqon lahaa dadka argagaxsan balse nasiib wanaag wuxuu argagaxa ku dhacay tolkiisa kaga badbaaday xabsigii xabashida!

Haddaba, arrintan waxay mudane Yuusuf u fududeysay in uu noqdo hoggaamiye dabiici ah oo ka caafimaad qaba cabsida reer tolkiis ku habsatay. Sidoo kale waxay fursad u siisay in uu dib u abaabulo tolka asagoo dadaal dheer u galay sidii cabsida dhaawacday dareenka dadkiisa looga caafimaadi lahaa. Nasiib darro taas ma aysan dhicin, waayo asagoo halgaankaas ku guda jira ayuu mudane Yuusuf howl gab noqday. Dadaalka ugu badan ee mudane yuusuf galay sida uu buuggiisa (Halgan iyo Hagardaamo) ku sheegay ayaa ah in tolka laga ilaaliyo in ay hoggaamiyaal u noqdaan siyaasiyiin aan wali ka soo kabanin argagaxii ay ka qaadeen cararkii lama filaanka ahaa. Sidii uu ka baqayay mudane Yuusuf ayay noqota waayo maanta waxaa deegaannada Dal-udug madax ka ah rag cabsi daraadeed cimaamadaha carabta madaxyada ku duubtay.

Sidoo kale, cabsida aan laga caafimaadin waxay saameyn ku yeelan kartaa arrimaha bulshada gaar ahaan sida diinta Rabbiga loo fasiro. Tusaale ahaan, qabiilladii sida lama filaanka ahaa u cararay ee cabsidu dilootay, waxaa ka soo baxay wadaaddo diinta argagax ka dhigay kuwaas oo ku caan baxay fuleynimo aan maangal ahayn.

Sida aan la socono, wadaad caan ah oo cidahan cararay ka soo jeeda ayaa maalin dhoweyd wuxuu ka digay sheydaan laga yaabo in masaajidyada soo galo ka dibna suuq xir ku sameeyo xirfadda wacdinta ee wadaaddadu badankood biilasha reeraha ka dhacsadaan. Haddii culimada nafsiga ay dhageystaan qaylo dhaanta wadaadkaas, waxay si sahlan ku garan karaan in uu yahay dhibane aan ka bogsoon dhaawacii gaaray dareenka dadkiisa sida fudud loo cayrsaday!

***Gunaanad***

Qoraalkan aan ku qaada dhignay dhiraadhirin dhimireed (Psychoanalysis) ku aaddan waalida ka muuqata siyaasadda Soomaaliya waxaan ku ogaannay in ay jiraan cudurro soo jireen ah oo wali aan laga caafimaadin kuwaas oo aan ku soo sheegnay in kala yihiin: **Cuqadada Hargaysa, Cabsida Garoowe iyo Ciilka Muqdisho**. Akhristaha qiimaha badan wuxuu is weydiin karaa su'aashan: magaalooyinkan kor ku xusan iyo qabiillada dagan maxay kaga duwanyihiin magaalooyinka kale ee Soomaaliyeed sida Baydhabo marka laga hadlayo caqabahada hortaagan in dawladnimadiii dib loo helo? Jawaabta oo kooban waxay noqon kartaa: siyaasidihii lagu burburiyay dawladnimadii dalka iyo cudurradii sababay siyaasadaha noocaas ah waxay saldhigteen magaalooyinkan aan kor ku xusnay iyo deegaannada hoosyimaada maamuulada ka jira magaalooyinkaas.

Haddaba dadka Soomaaliyeed iyo bulshada caalamka ee jecel dawladnimada iyo nabadda Soomaaliya waa in ay ku baraarugaan in ciilka, cuqdada iyo cabsida aan wali laga caafimaadin ay noqon karaan caqabadaha daahsoon ee marwalba fashiliya maamul kasta oo si guud soomaalida loogu dhiso. Sida aan kor ku soo xusnay, saddexdan magaalo waxaa ka soo baxay saddex siyaasi oo ku baraarugsanaa cudurrada dhaawacay qalbiyada reer tolkood. Waqtigii ay hoggaamiyaashaas dabiiciga ah noolaayeen waxa jirtay rajo laga qabay in Soomaaliya ay dawladnimadeedii dib u dhisato waayo waxay karti iyo farsamo u lahaayeen in dadkooda ka bogsiiyaan cuqdadda, ciilka iyo waliba cabsida dhaawacday dareenkooda.

Tusaale ahaan, mudane Cigaal wuxuu alleystay asagoo ku mashquulsan sidii cuqddada deegaanada Waqooyi Galbeed ka jirta looga caafimaadi lahaa dadka Soomaaliyeedna ay dib iskugu soo laaban lahaayeen. Sidoo kale Mudane Caydiid waxaa la toogtay asagoo ku guda jira dagaal ujeeddadiisu ahayd soo celinta maamukii iyo kala danbeyta si looga caafimaado ciilka jira. Sidaa si la mid ah, mudane Yuusuf wuxuu xoogga saaray sidii looga caafimadi lahaa cabdsiidii ka jirtay deegannadii uu ka soo jeeday asagoo dagaal adag la galay siyaasiyiintii argagaxsanaa ee rabay in siyaasad cabsi ah tolka ku hoggaamiyaan. Ugu danbeytii mudane Yuusuf wuxuu hawl gab noqday asagoo ku fashilmay hankiisii ahaa in siyaasadda Soomaaliya laga bogsiiyo cuqdada, ciilka iyo cabsida hortaagan qaranimadii dalka.

Geerida saddexdaas siyaasi ka dib, lama arag oo lama maqal hoggaamiye dabiici ah oo siyaasadda Soomaaliya ka samata bixin kara cudurrada aan wali laga caafimaadin ee horseedi kara waalida fadhiidka ka dhigtay Dawladda Federalka ee Muqdisho fadhisa. Dhammaan dadka Soomaaliyeed oo ay ugu horreeyaan madaxda qaranka ee dawladda federaalka, hoggaamiyaasha bulshada, aqoonyannada iyo waliba wadaaddada diinta badankood waa bukaan

socod la ildaran xanuunnada nafsiga ah ee laga dhaxlay dagaalladii sokeeye ee mudada socday.

Si dhibaatada jirta looga baxo, waxay ku qumanaan lahayd in xoogga la saaro sidii loo bogsiin lahaa qalbiyada jiran ee qabiillada Soomaaliyeed ka hor inta aan lagu mashquulin dhisida maamul dawladeed iyo waliba muxaadaro diimeed.

Qaabka ugu wanaagsan ee qalbiyada dhaawacan ee qabiillada Soomaaliyeed ku caafimaadi karaan ayaa ah in la qabto shirar lagu qiranayo cudurka qolo walba u gaarka ah. Tallaabada ugu horreysa ee culimada nafsiga kula taliyaan bukaanada dhimirka ayaa ah qirashada xanuunnada daahsoon ee nafta ku lamaansan. Ogolaanshaha in bukaanku xanuunsanyahay waxay horseed u noqotaa ogaanshaha qaababka ugu fudud ee lagu caafimaadi karo.

Sidaa si la mid ah, cudurrada aan laga caafimaadin ee siyaasadda Soomaaliya waxaa looga bogsan karaa in qabiil walba garowshiiyo ka muujiyo in aysan maangal ahayn dareennada dhaawacan ee diiday in ay fahmaan in la gaaray waqtigii dalka lagu soo dabaali lahaa maamul dhexe oo shaqeeya.

## 52. Hormarka iyo Waxbarashada

Markasta oo la damco in la higsado hormar waxaa habboon in la isla qiro waddada kaliya ee lagu gaari karo hormarka loo hamuunka qabo in ay tahay waxbarasho oo kaliya. Runtii faa'iidada ay waxbarashada u leedahay qofka bani aadamka ah ma ahan mid lagu soo koobi karo maqaal iyo wax la mid ah. Sidoo kale waxaan si fudud u sharixi karnaa waxa ugu wayn ee ay waxbarashadu keeni karto in ay tahay hormar dhinac maskaxda ah oo ah runtii waxa ugu qaalisan ee uu qofku heli karo. Dhammaan noocyada kale ee hormarka waxaa sal iyo asaas u ah hormarka maskaxda oo haddii la waayo ay aad u adkaan doonto in lagu riyoodo wax uun hormar ah.

Dhammaan ummadaha dunida ku nool waxay ku sugan yihiin xaaladdo aad u kala duwan oo dhanka nolosha ah, sidoo kale waxaan ognahay in dunida maanta ay u qaybsan tahay labo qayb oo waxkasta ku kala duwan, waana dunida hormartay iyo dunida soo koraysa. Xaqiiqda dhabta ah ee dunida u kala qaybisay sidaas ayaa ah waxbarashada. Waddamada aadka looga qaddariyo waxbarashada waxay gaareen hormar la taaban karo halka waddama aan laga danayn waxbarashada ay yihiin kuwa aad u danbeeya marka dhinac kasta laga eego. Si la mid ah sidaas waxaa aad ku kala duwan dadka waxbarta iyo kuwa aan marna qiimayn waxbarashada.

Arrinta ugu wayn ee waxbarashada laga dhaxli karo ayaa ah sida aan sheegnay hormar dhinaca maskaxda ah oo ah furaha farxada nolosha. Qofku wuxuu nolol sharaf ah oo farxad ay ku dheehantahay heli karaa marka uu barto xirfad uu ku shaqaysan karo. Sidoo kale dal wuxuu hormari karaa oo kaliya marka ay jiraan dadkii hormarin lahaa, dadkuna waxba ma ay qaban karaan haddii aysan jirin aqoontii ay wax ku hormarin lahaayeen, waana taas sababta kaliya ee uu dalkeeni Soomaliya uga bixi la'yahay burburka muddada dheer.

Aqoondaridu ama jahliga ayaa ah cadowga ugu wayn ee uu qof yeelan karo inta uu noolyahay, jahligu wuxuu qofka u diidaa markasta in uu ka fakero waxa dantiisa ah. Sidoo kale aqoon la'aantu waxay dadka dhaxalsiisa in ay garan kari waayaan siyaabaha fudud ee loo noolaan karo. Markasta oo uu jahligu bato waxaa aad u adkaada nolosha, sidoo kale waxyaabaha laga dhaxlo aqoon la'aanta waxa ugu daran in dhammaan dadku ay ku mashquulaan wax aan marnaba dan ugu jirin, sida in lagu xiiqo wax aan la fahamsanayn.

Haddii aad u kuur gashid dhammaan dalalka gaaray hormar la taaban koro, waxaa kuu soo baxaya in ay waqti iyo hanti badan galiyeen sidii ay wax ku baran lahaayeen. Tusaale ahaan dalka Kenya waxay dadkiisu aad u qadariyaan aqoonta, waana taas sababta ay Kenya u noqotay dalka ugu hormarsan dalalka Geeska Afrika ku yaal.

Dad badan ayaa aaminsan in sababta ugu wayn ee ay Soomaaliya u burburtay ay tahay aqoon dari ku habsatay dadka intiisa badan, waana dood gar ah oo xaqiiqda u dhow marka aad fiirisid taariikhda dalalkii soo maray burburka.

Mararka qaar waxaa dhici karta in colaado sokeeye ay si kadis ah dal uga qarxaan, balse aqoon la'aanta ayaa keenaysa in nolosha burburka loo arko in ay tahay wax iska caadi ah oo la iskaga sii jiri karo intii la rabo. Waana sida haysata dalkeena Soomaliya oo ah runti dal aad u qiimo badan marka la fiiriyo qayraadkiisa dabiiciga ah .

Waxaan kaloo dhihi karnaa hormarka ugu muhiimsan ee uu qofku ka dhaxli karo waxbarashada ayaa ah xorriyad xaga maskaxda ah. Qof kasta oo aqoon leh waxuu sameen karaa fakar uu u madax bannaan yahay halka qofka aqoontiisa ay liidato uu ku tiirsanyahay marwalba fekarka ama aragtida dadka kale. Sidoo kale qofka aqoonta leh wuxuu si sahlan ku curin karaa aragti ama fikrad hormarin karta nolosha dadka guud ahaan ama noloshiisa gaar ahaaneed.

Aqoonta dhabta ah waxay dadka siisa kalsooni buuxda. Kasloonidana waxay qofka u fududaysaa in uu si hagaagsan u guto waajibaadka ka saaran nolosha. Sidoo kale aqoon la'aantu waxay ku beertaa nafsadda qofka in uu ka baqo wax kasta oo ku cusub noloshiisa, taaso mararka qaar laga yaabo in uu kala hor yimaado waxkasta oo hormar keeni kara diidmo iyo baqdin is barkan. Farriinta ugu wayn ee ay aqoontu xanbaarsan tahay ayaa ah isbaddel dhinac kasta ah oo taabanaya qaabka loo noolyahay markaas. Markasta oo ay aqoontu kororto

waxaa badanaya isbaddelka xagga nolosha ah. Markasta oo uu isbaddel jiro waxaa fududaanaya in la hormaro.

Waxbarashadu ayaa ah hanitida kaliya ee ay dhallinyardu dhaxli karaan si ay u sii hormariyaan nolosha markaas lagu sugan yahay. Haddii ay dhallinyaradu dhaxlaan jahli ama aqoon daro waxaa mugdi aad u wayn galaya mustaqbalka dalka. Waana taas baan dhihi karna sababta markasta dunida looga digo in dhallinyaradu ay aqoon la'aan noqdaan. Balse dhallinyarada soomaaliyeed waxay dhaxleen jahli daran oo sababay in mustaqbalkooda uu mugdi galo.

Akhristaha sharafta leh wuxuu is waydiin karaa waxbarasho noocee ah ayaa lagu hormari karaa, haddii aan si fudud uga jawaabno su'aashaas waxaa malaha lagu soo koobi karaa in nooc kasta oo waxbarasho ah ay kaalin wayn ka ciyaari karto hormarka aynu u baahanahay. Sidoo kale hormar degdeg ah malahayga waxaa keeni kara anagoo ubadka iyo dhallinyarada siina fursado ay ku baran karaan cilmiga ay markaas jecelyihiin in ay bartaan ama maaddooyinka ay ku fiicanyihiin.

## 53. Asalka Xumaanta iyo Samaanta Qofka

Su'aalaha waaweyn ee ay ku rafteen maskax-shiilka waxaa ka mid ah waydiimaha ku saabsan asalka xumaanta iyo samaanta qofka. Aqoonyahannada uu isir naceybka dilooday waxay ku doodaan in xiriir weyn ka dhaxeeyo xumaanta ama samaanta iyo isirka qofku ka soo jeedo, Waxay qabaan in isirada qaar ay si dabiici ah u xun yihiin ama wax uga dhimanyihiin. Aragtigan waxaa ku fogaadey rag uu hormuud u ahaa nin lagu magaacabi jiray Francis Galton oo dhidibada u taagey aragtida afka qalaad lagu dhaho "Eguinics" oo ah aragti lagu baneestay gumeynta ummaddo badan oo aadanaha ka mid ah.

Doodaha ku saabsan asalka xumaanta iyo samaanta qofka waxaa aragtiyo miigan ka dhiibtay inta badan ragga diimaha. Tusaale ahaan qayb ka mid ah culimada muslimiinta waxay qabaan In qofka asagoon dhalan ka hor go'aan laga gaaray oo xumaan iyo samaan wixii uu fali lahaa lowxul maxfuudka lagu xusay. Sida ay culumadan qabaan, qofkii xumaan loo qoray wuxuu ka dhul-bilaabayaa dhilaysi iyo qayilaad halka kii wanaag loo qorayna uu wardi iyo wayso wadayo ilaa inta uu ka god galayo.

Doodda kale ee ku saabsan asalka xumaanta iyo samaanta qofka waxaa ka mid ah aragti ka mid ah cilmiga bulshada "Sociology" oo qabta in xumaanta iyo samaanta qofka ay ku xirantahay hadba xaaladda markaas jirta. Waana aragtiga afka qalaad lagu dhaho "Structural Theory". Qoraalkan kooban wuxuu isku dayi doonaa in aragtida ugu danbeeysa "Structural Theory" u cuskado waayo aragnimo shaqsi ah oo ku saabsan xumaanta iyo samaanta qofka.

Nasiib wanaag maanta dunida waxaa si weyn loola dagaalamay aragtida "Eugenics" oo ah aragti isir naceyb ku salaysan. Waxaa la ogaaday in isirka qofka uu saameyn ku lahayn shaqsiyadda qofka iyo hab- dhaqankiisa. Nimankii caddaa ee Eugenics ku doodaday waxay aaminsanaayeen in isirada qaar sida isirka madow yihiin dad dhiman garasho iyo damiir ahaan, loona baahanyahay in xil la iska saaro sidii loo sixi lahaa ama loo hagaajin lahaa dhimanaanta iyo damiir xumada dadka madow. Aragtidan Eugenics waxay halbeeg uga dhigtay samaanta iyo xumaanta hadba isirka qofka ka soo jeedo, ayaagoo aaminsan in qofka cad uu marwalba ka garasho iyo damiir wanaagsan yahay qofka madow. Siyaasadihii gumeysiga iyo dhulbalaarsiga reer Yurub waxaa lagu baneestay aragtidan Eugenics. Xasuuqii Naaziga Jarmarmalka waxaa looga shidaal qaatay aragtida Eugenics. Hitler iyo raggiisii waxay aaminsanaayeen in yaahuudda iyo dadka madow ay asal ahaan xun yihiin, ayna waajib tahay in laga ciribtiro aadanaha.

Waqtigan ilbaxnimada iyo hormarka la sheegto, waxaa jira rag cilmiga sayniska ku xeeldheer iyo siyaasiyiin aaminsan in ay jiraan kooxo asal ahaan fadareysan oo u baahan in wax laga qabto. Tusaale ahaan siyaasiyiinta qaar ee reer galbeedka waxay ku doodaan in dadka madow ama guud ahaan dadka dunida saddexaad ka yimid in aysan la qabsan karin nolosha galbeedka maadama ay yihiin dad ka soo jeeda dhaqamo iyo isiro asal ahaan aan wanaagsanayn!

Culimada iyo maskax-shiilka muslimiinta si xooggan ayay iskugu khilaafeen doodda diinta Islaamka ka qabto asalka xumaanta iyo samaanta qofka. Doodaha ka dhex aloosan muslimiinta waxaa lagu soo koobi karaa labo aragti oo dooddo milgo culus leh dhaliyay. Aragtida koowaad waxaa ku tagey kooxda aaminsan in Eebbe weyne uu go'aan ka gaarey qof walba inta uusan dhalan ka hor halka uu ku danbeen doono samaan iyo xumaan. Kooxdan waxay aaminsantahay in dadaal kasta oo wanaag ama xumaan lagu doonayo yahay wax ka baxsan awoodda qofka. Tusaale ahaan waxay qabaan in qof la wacdiyo in aysan macno sameynaynin mar haddii qofka go'aan laga garay inta uusan dhalan ka hor wixii uu noqon lahaa. Kooxda kale ee dooddan ka hortimid waxay aaminsantahay in qofwalba la siiyay xornimo uu ku kala doorto xumaanta iyo wanaaga. Qofkii xumaan doortana in la maxkamadeyn doono halka qofka wanaag la yimaadana laga abaalmarin doono wanaaggiisa maalinta qiyaame. Qoraal sidan u kooban loogama bogan karno doodaha waawayn ee labadan aragti dhaliyeen. Waxaa fiican sida diintu sheegtay in qofku rumenyn la yimaado oo uusan isku dayin in uu baar-baaro arrin ay diintu si guud uga hadashay.

Xaaladda iyo duruufta markaas jirta ayaa ah ah waxa qofka ku haga in uu samaan ama xumaan la yimaado sida ay qabto aragtida cimiga bulshada "Structural Theory". Ninkii aragtidan dhidibada u taagay wuxuu ahaa Emil Durkheim oo ka mid ahaa raggii aasaasay cilmiga-bulshada "Sociology". Qaab dhismeedka xaaladda markaas jirta " Structural and systematic conditions"

ayaa ah waxa qofka ku bixiya in uu wanaag ama xumaan sameeyo. Aragtidan waxay daaqadda kala baxday aragtidii Eugenics ee ahayd in dadka qaar isir ahaan xun yihiin ama wanaagsan yihiin. Emil Durkheim wuxuu aragtidiisa u cuskaday daraasad cilimyaysan oo caan noqotay. Waa daraasaddiisi ku saabsanayd is-dilidda "Suicide." Wuxuu si cilmiyaysan u soo bandhigay in isdilidda ay sababto xaaladda nololeed ee hadba markaas jirta. Wuxuu u sababeeyay nolosha casriga ah ee gooni noolaanshaha in ay tahay sababta ugu weyn ee ka danbeeysa is-dilitaanka. Tusaale ahaan wuxuu soo ogaadey in isdilka ku yaryahay dadka guursaday halka uu ku badan yahay kuwa aan guursan. Guurka oo ah qaab dhismeed "Structural entity" ayaa qofka ka caawin kara in uu is-dilo sida ay daraasaddan ku dooddayso. Aragtidan "Structural Theory" waxaa si weyn u sii hormariyay rag badan oo sociologist ah oo aan ka xusi karno caalimka weyn ee Robert Merton.

Waxaa fiican in aragtida "Structural Theory" lagu faahfaahiyo waayo aragnimo shaqsi ah si aan iskula fahamno aragtidan qiimaha badan. Magaalada aan ku noolahay ee Toronto waxaa maalin dhexdaas ah ka da'ay roob dabeylo iyo daadad wata oo qal-qal galiyay noloshii magaalada. Inta uusan roobku bilaaban ka hor, noloshu waxay ahayd mid dagan oo si ilbaxnimo ah ku socota. Tareenka aan ka soo raacey magaalada waxaa saarnaa dad ilbax ah oo aan ku xasuusto in qof walba ku mashquulsanaa aamusnaan ama wax akhris. Intii tareenku u socday ayaa waxaa sii xooggaystay danabka iyo daadadka roobka, taas oo qasab ka dhigytay in tareenadii la joojiyo, dadkana lagu wargaliyo in qof walba is dabaro.

Xaaladdii dagganayd waxay isku baddashey mid jawareersan. Dadkii daqiiqado ka hor ilbaxda ah ahaa ee is ixtiraamayay waxay noqdeen dad is dardara oo mid walba isku dayo in uu midka kale kaga hormaro hadba basaska tirada yar ee waddada maraya. Waxaan arkay waayeel iyo carruur laga xooggay leen ay ku jireen. Xaaladdii iyo daruufihii dadka u saamaxayay in ay ilbax noqdaan ayaa meesha ka baxay. Gaadiid la'aanta iyo daadadka magaalada harqiyay ayaa qof walba ku qasbay in uu si laga fiican yahay u dhaqmo. Xaaladdan waxay i soo xasuusiyay noloshaydii Afrika. Waxaan ogaadey in dadkii aan Afrika kaga imid aysan xumeen ama wanaagsaneen. Waxa qaldan ama xun in ay yihiin daruufaha qalafsan ee Afrika ka jira.

Qof walba oo xaalad qalafsan ama adag la galiyo wuxuu u dhaqmaa si qar-iska tuurnimo ah oo ilbaxnimada ka fog. Haddii dadka ilbaxnimada sheegta ee waddamada hormaray ku nool ay la soo daristo daruufo iyo qaabab nololeed qalafsan, waxaa hubanti ah in ay si xun oo laga fiican yahay u dhaqmayaan sidii aan goob joogga ka ahaa.

Aragtidan waxaa laga baran karaa asalka xumaanta ama samaanta. Qofna asal ahaan uma xuma ama uma wanaagsana. Daruufaha nololeed ee qofka ku xeeran ayaa ah kuwa xun ama wanaagsan. Hab-dhaqanka qofka waxaa jaangooya daruufaha nololeed ee degaanka ka jira. In dadka madow ama dadka qaaradda

Afrika ku nool ay u dhaqmaan si laga fiicanyahay ama ilbaxnimada ka fog waxaa sababay daruufaha deegaankooda ka jira. In la canaanto ama la caayo dadkaas waa iska dawdarnimo. Aragtidan structural theory waxay nagu baraarujinaysaa in aan is weydiinno qaab dhismeedka nololeed ee ay ku suganyihiin dadka lagu eedeeyo xumaantaa iyo ilbaxnimo la'aanta. Tusaale ahaan, dadka jooga qurbaha ee Soomaaliyeed waxay dhaqan xumo iyo liidnimo ku eedeeyaan qaraabada ay lacagta ugu diraan Soomaaliya.

Ka hor inta aaddan qaadanin eedda ah in qofka Soomaaliya joogo uusan wanaagsanayn, waxaad is weydiisaa qofka wax eedaynaya xaaladda u saamaxday in uu wax eedeeyo. Nolosha galbeedka uu fursadda ku helay ayaa ah xaalad ka dhigtay in uu ka jeeb roonaado xigtada wali Afrika joogta. Sidaas oo kale xumaanta lagu eedeeyo xaasaskii baariyaasha ku ahaa Afrika ee san-taagga ku bilaabay qurbaha waa in aad aragtida Structural theory u cuskataa, adigoo qiimeynaya xaaladaha is baddaley. Waxaad ogaanaysaa in aysan jirin xaasas xumaaday ama wanaagsan ee waxa is badaley kaliya ay yihiin xaaladdii nololeed. Aragtida Structural theory waxay naga caawinaysaa in aan si cilmiyaysan u qiimayno xaaladaha dhaqan, dhaqaale iyo siyaasadeed ee dadka ka dhiga kuwa wanaagsan ama xun.

## 54. Faa'iidooyinka Xanta

Wax yaabaha ugu horreeya ee ilmaha si dadban ama si toos ah loogu sheego waxaa ka mid ah xumaanta xanta ay leedahay. Waa arrin wanaagsan in carruurta la baro dhibaatada laga dhaxli karo in laga qayb qaato warar aan sal iyo raad midna lahayn. In kastoo carruurta lagu barbaariyo xan nacayb, haddana waxay ku baraarugaan bulshada qaybaheeda kala duwan oo ku mashquulsan xan xawaare sare ku socota. Sidoo kale qof kasta oo fakeraya wuxuu is weydiiyaa sababta dadka ku bixisa in ay warar ku tiri-ku-teen ah ay waqti qaali ah ku lumiyaan. Qoraalkan kooban wuxuu akhristaha ku ogaan doonaaa sababta ka danbeysa in bulshadu is xamato iyo faa'idooyinka ay bulshada u leedahay in dhabarka la iska qaniino ayadoo qofba qofka kale ka hal abuuro sheeko been ah oo wanaag iyo xumaan ba yeelan karta. Qoraalka waxaan u cuskan doonnaa daraasad cilmi ah oo xanta laga sameeyay qarnigii dhammaadey bartamihiisa.

Diimaha kala duwan dhammaantood waxay bandow ku soo rogeen warxumo-tashiilnimada. Tusaale ahaaan diinta Islaamka waxay ku tilmaamtay xanta in ay la mid tahay adigoo cunay hilibka walaalkaa oo mayd ah. Aad bay culumadeena barakaysan iskugu mashquuliyeen in dadka ay ka wacdiyaan xanta. Lama qiyaasi karo muxaadarooyinka lagu bahdilay ragga iyo dumarka afka ka falan ee danahooda ku seegay in ay qof kale ku mashquulaan. Sidoo kale cilmi-

nafsiga, wuxuu ka dayriyay caafimaadka maskaxda qofka ku foogan werarka been abuurka ah.

Buuggii *The psychology of rumor* (1974) ee ay qoreen Gordon Allport iyo Leo Postman ayaa ahaa daraasaddii ugu horreesay ee cilmi nafsi ah oo ka dayrisa caafimaadka dadka ku mashquulsan wararka kutiri-kuteenta ah. Si kasta oo dadka loo wacdiyo ama caafimaadka maskaxdooda looga dayriyo, xawaaraha ay ku socoto xanta waa sii korortaa. Waana midda keentay in la isweydiiyo faa'idada xanta u leedahay bulshada mar haddii laga quustay wacdigii diiniga ahaa iyo talooyinkii culumada nafsiga.

Cilmiga-bulshada "Sociology", ayaa isku dayay in uu soo bandhigo waxtarka ay xanta u leedahay bulshada. Ninkii ugu horreeyay ee si cilmi ah ugu kuur galay waxtarka wararka been ka abuurka ah wuxuu ahaa mudane Tamotsu Shibutani asagoo daraasaddiisa u bixiy "*The improvised News: Sociological Study of Rumor".* Sannadkii 1966 ayuu mudane Shibutani ku baraarugay faa'idada guud ee xanta u leedahay bulshada mar uu joogay xarun u gaar ah bulshada reer Jaban ee haysta dhalashada America. Mudane Shibutani wuxuu cilmi baaristiisii wararka ku tiri ku-teenta ah ku soo koobay sidan: marwalba oo ay adkaato in xog dhab ah laga helo arrin markaas taagan, xubnaha bulshada waxay hal-abuuraan warar mala-awaal ah si ay u xalliyaan xog la'aanta ka haysata arrimaha ugubka ah ee ku soo biiray deegaanka. Marwalba oo ay jirto xaalad jahwareer iyo dhibaato wadata, xubnaha bulshada waxay madadaalo iyo warar xiiso leh ka helaan noocyada kala duwan ee xanta. Waqtiyada ay xaaladuhu cakirmaan, xanta waxay noqotaa mid dadka isku soo jiida oo wada jirkooda gacan ka geesata. Inta xantu socoto, dadku waxay u qaybsamaan: kooxo fariinta xanta gudbiya, kuwa fasira, kooxo kale oo ka soo horjeesta iyo kuwo go'aan ku qaata farriinta ay xantu gudbineyso

Si aan u fahamno qoddobada uu mudane Shibutani ku dooddayo, waxaa fiican in aan qoddob walba ku lifaaqno xan tusaale ah. Siyaasaddii ka socotay caasimadda Muqdisho xilligii madaxweyne Xassan Sheekh Maxamuud waxay dalka galisay jahawareer iyo dhibaato ugub ah. Dadka Soomaaliyeed xog dhab ah kama haynin cidda sida rasmiga ah u hagta siyaasadda dawladda federaalka ah ee xilliggaas. Si loo xalliyo xog la'aantaas, xubno bulshada ka tirsan ayaa waxay allifeen sheeko xan ah oo yaab leh oo ku saabsan cidda sida rasmiga ah siyaasadda waddanka u hoggaaminaysay. Si xog la'aanta jirta fasiraad macno leh loogu sameeyo, waxaa madexweynahii dawladda federaalka ah lagu xantay in uu maxbuus u yahay koox diimeed lagu sheegay in ay la baxeen " Dammu Jadiid." Cid caddeyn karta ma jirto jiritaanka xantan, balse markii la arko sida uu madexweyanaha iskaga dhoola-caddeeyo marwalba, micno badan ayay xantan sameenaysaa. Haddii la adeegsado xantan, waxaa lagu fasiri karaa dhoola caddeenta joogtada ah ee madaxweynaha in ay tahay qosol gariir uu ku muujinayo maxbuusnimadiisa!

Xaaladdaha jahawareerka ah ee la soo gudboonaada bulshooyinka qaar, xantu waxay u noqotaa madadaalo looga nafiso culeyska ay leedahay nolosha cakiran. Tusaale ahaan xanta Soomaaliya ka socota waxay oodda jabsatay wixii ka danbeeyay burburkii dalka. Waxaa waddanka ka bilowday dhaqan cusub oo ah in labo kasta oo Soomaali ah oo sheekaysansa in ay qof saddexaad ku mashquulaan. Markii la waayay arrimo kale oo madadaalo laga helo, xanta waxay yeelatay xaraarad aan ka dhicin xaaladda ay leedahay riwaayad ama sheeko faneed aad u sarreysa. Dhaqanka noocan ah Soomaalida waxay ula soo hayaameen waddamada galbeedka. Waxaad arkeysaa dumar badan oo Soomaaliyeed oo muddo ka badan dhowr saac ku xantamaya telefoonnada. Gabdhaha Soomaaliyeed ee qurbaha jooga kuma qaldana in ay telefoonka iyo xanta barkadaan waayo sida kaliya ee lagu soo barbaariyay ayaa ahayd in wareerka nolosha looga dhuunto madadaalada xanta laga heli karo. Wadaaddada dadka wacdiya waa in ay dumarka Soomaaliyeed u damqadaan oo aysan wacdigooda ku weerarin gabdhaha isku dayaya in ay nolosha micno iyo xiiso u yeelaan waqtiyada adag.

Waqtiyada ay xaaladdaha cakirmaan xanta waxay noqotaa mid dadka isku soo jiida oo ka shaqeysa midnimadooda inta xantu socoto. Tusaale ahaan, sannadkii 2006, Muqdisho waxaa lagu faafiyey xan dadkii magaaladaas ku noolaa mideysay. Xantaas waxay ahayd in qabiilladii magaaladaas laga eryay dhowr iyo toban sanno ka hor ay damacsanyihiin in markale dib u qabsadaan Muqdisho ayagoo magac dawladnimo adeegsanaya. Dadkii xantaas faafiyay waxay ahaayeen dad ka cabsanayay in dawladnimadii Sooomaaliya ay soo laabato. Nasiib wanaag qabiilladii Muqdisho isbaarada u taalley waxay ku midoobeen wax loo bixay midowga maxaakiimta islaamiga ah. Xantaas waxaa laga faa'iday in Muqdisho muddo lix bilood ah ay ka nasato isbaaradii iyo kufsigii dhaqanka ka ahaa. Nasiib darro qabiilladii Muqdisho waxay muddo yar ka dib jihaad lagu hoobtay ku qaadeen dawladdii curdunka ahayd ee dhibka badan laga soo marey sidii loo dhisi lahaa. Jihaadkii lagu abaabulay xantii ay allifeen niman wax magarato ah, wuxuu sababay in waddanka Soomaaliya uu gacanta u galo waddamo shisheeye ah iyo argagaxiso caalami ah.

Inta xantu socoto, dadku waxay u qaybsamaan: kooxo faririnta xanta gudbiya, kuwa fasira, kooxo kale oo ka soo horjeesta iyo kuwo go'aan ku qaata farriinta ay xantu gudbineyso. Tusaale ahaan Xer aan ka mid ahaa ayaa waxaa lagu faafiyay sheeko xan ah oo aad u xallad badnayd. Xanta waxay ku saabsaneed xerow la sheegay in uu islaamaha xusul baruurta ugaarsado asagoo kaga mashquula barashada diinta iyo cibaadada ilaahey. Xirtii waxay u qaybsantay qayb xantii faafisay, kuwo ka soo horjeesta iyo qaar badan oo go'aan ku gaarey xantaas la faafiyay. Shiikhii madaxda noo ahaa wuxuu ka mid noqday kooxdii go'aanka ku qaatey farriintii xanta ay gudbineysay. Wuxuu muddo kooban gudahood eryay xerowgii si uusan u fadareyn xerta kale ee daacadda u ah barashada diinta. Waxaan ka mid ahaa kooxdii marna faafin jirtay xantaas marna isku dayi jiray in fasiraado ka bixiyaan. Nasiib wanaag muddo kooban gudahood waxaan ogaanney in xerowgii la eryay uu ahaa nin fiqiga diiniga aad

ugu xeel dheer, wuxuu ahaa nin sidayda oo kale aan kitaab gaablow ahayn. Sababta ugu weyn ee xerowga saaxiibkeen ah u bartilmaamsanayay islaamaha xusul baruurta ah waxay ahayd in uu u meel daydo guur qudbo siro ah oo uu damacsanaa!

Qoraalkan kooban waxaan ku ogaanney in xanta aysan ahayn caafimaad darro maskaxeed iyo dhaqan xumo diineed. Kaliya xanta waxay ka mid tahay qaab dhismeedka bulsheed ee wararka la iskugu tabiyo. Markii la waayo ilo wareedyo lagu kalsoonaan karo oo warar sugan laga helo, bulshadu waxay ku mashquulaan warar ku tiri ku teen ah si ay macno ugu sameeyaan xaaladaha cakiran. Xanta waxay leedahay cawaaqib xumo weyn haddii go’aan dag-dag ah lagu qaato. Sidoo kale haddii si dagan loo qaada dhigo oo aanan bandow lagu soo rogin, xantu waxay u gogol xaartaa ogaanshaha wararka runta ah. Haddii aad taariikhda dib u fiirisid, dadka wan-wanaagsan, iyo dhammaan fikradaha wax ku oolka ah waxaa la ogaadey ka dib markii lagu xuurtooday xan nacasnimo ah oo laga faafiyay. Bulshada Soomaaliyeed ee waqtigan joogta waa in ay si daggan uga qayb qaataan xanta socoto ayagoo ku raaxaysanaya madadaalo kasta oo ay ka heli karaan. Waa in aysan go’aan ku qaadanin farriimaha ay xanta gudbineyso balse ay waqti galiyaan si ay u gaaraan runta ka danbeeysa xan walba oo la soo xawilo.

## 55. Saadaashii Faylasuuf Suuleey

Cutubka koowaad ee buuggan akhristayaasha waxaa la wadaagey casharro falsafadaysan, oo qaar aan ka bowsaday oday Falasafadda ku fiicnaa oo yaraantaydii qaab kedis ah aan ula kulmay. Duruustii uu bixin jiray Faylasuuf Suuley waxay u badnaayeen dooddo ku aaddan: nolosha, dhimashada, nacasnimda, qabyaaladda, cirweynida, qarannimada, diinta, suugaanta, qayilaadda iyo waliba qaababka ugu fiican ee duqeyda ula heeshiin karaan gabdhaha loo soo qoor-qabtay si ay uga naastaan buuqa islaanta bahweynta ah. Dooddahaas waxay la mid ahaayeen badweyn uu ka bixi karo qof diyaar u ah in uu garashada ruxo asaga oo adeegsanaya shaq-shaq ama caano-miir si loo kala sooco quwadda maskaxda iyo qashinka ku dahaaran. Qofkii daneenaya in uu wax ka ogaado qayb ka mid ah casharadii aan ka bowsaday iyo qaabkii aan ku bartay mudane Suuleey, wuxuu akhrin karaa maqaalkii la magac baxay “ Suuleey: Faylasuufkii la Toogtay.” Oo kamid ah maqaallada ku qoran cutubka 1aad ee buuggan.

Dood ku saabsan munaasabadda 8 March oo ah maalinta dumarka adduunka ayaa facebook ka socota. Intii ay doodda socotay ayaan waxaan soo xasuustay qoddob mudane Suuleey uu si dulmar ah uga dooddi jiray. Dhaqanka dadka caqliga leh waxaa ka mid ah in aan lagu mashquulin afaaraha gaarka ah ee dadka, balse la isku dayo in garashada “intellect” lagu jeex-jeexo sababaha cilmiyaysan ee ka danbeeya in dadku ay u

dhaqmaan si u gaar ah ama hab ay kaga daydeen duulal kale. Nasiib darro, raggii shaaha iyo sheekada u soo doonan jiray maqaayaddii Suuleey ku qayili jiray, waxay u badnaayeen rag aragti dheer aan lahayn oo badanaa ka hela in lagu mashquulo nolosha shaqsiga . Tusaale ahaan, waxaa dhici jirtay in ay sheeko ka furaan dakhliga oday Suuleey iyo qaabka uu nolol maalmeedka ku dhacsado.

Waqtigaas waxay ku beegnayd billowgii sagaashanaadka oo ah saban rag badan ay shaqo la'aan ku dhacday ka dib markii la burburiyay dawladnimadii laga dhexlay gumeystaha. Xilligaas, hooyooyinka iyo hablaha Soomaaliyeed ayaa dhexda u xirtay soo dhicinta biilasha reeraha ka dib markii ay galeen ganacsi iskugu jira :qararaf, shaah-karis, miis suuqa la dhigto, ha-i-wareerin, iyo waliba kabarro qaadka lagu iibiyo. Intii lagu jiray dagaallada sokeeye, rag badan waxay noqdeen suxud- saaxud gacan maran oo qadada aan iska bixin karin. Suuleey raggaas ayuu ka mid ahaa, balse waxaa u dheeraa garasho fog oo saadaalin ka bixin karta halka ay riwaayadda nolosha ku dhammaan doonto.

Waxaan xasuustaa, marka qaadka soo dhaco waxaa is qabsan jiray buuq iyo bullaan ka dhashay seyrida baabuurta qaadka iyo sawaxanka qaadwalayaasha. Mar alla marka uu Suuleey maqlo dhawaaqa gaadiidka qaadka lagu soo raro, ayuu inta boodo, asagoo mararka qaarna bakooradda iyo cimamaddaba hilmaamay ayuu orod isa sii dayn jiray, wuxuuna u dhaqaaqi jiray dhisme qaadka lagu dajin jiray oo aan naga dheerayn. Waa tiro dhaaf inta jeer oo oday Suuleey bootin iyo orod isku daray ayada oo dhexda looga jiro dooddo adag oo xiiso iyo xallad gaar ah lahaa. Dagaalladii sokeeye ka hor falyasuuf Suuleey wuxuu ahaa qaadwale caan ah oo dad badan gacan qabtay.

Waqtigan uu musullafay waxaa caawiya gabar ka mid ah gabdhaha qaadka u soo dago, waxayna u qoondeysay labo marduuf, mid uu ku qayiliyo iyo marduuf uu iibsado si biilka reeraha halkaas uga dabarto. Haddii qoondadan iyo busaaraddii jirtay la is barbardhigo, orodka iyo xuurtada ka baxaysa Fayalsuuf Suuleey waxay noqonayaan maangal garashada ay ka garaabi karto.

Raggii ku shaah cabi jiray maqaayaddii Suuleey fadhiga u ahayd, waxay shaactiro iyo sheeko ka raadin jireen orodka iyo bootinta odayga. Raggaas Rabbiga uma qorin garasho dhaafsiisan in lagu mashquulo nolosha gaarka ah ee qofka, waayo maankooda kama ay heli karin malawaal kale oo ay isku madadaaliyaan. Faylsuuf Suuleey wuxuu hibo iyo hoodo u lahaa curinta dooddo waaweyn markasta oo doqomadu ku maagaan noloshiisa gaarka ah. Tusaale ahaan, mar lagu maagay qoondada uu ka helo gabadha qaadka u soo dago, wuxuu curiyay dood saadaalin ka bixinaysa sida mustaqbalka Eebbe weyne adduunka ugu qaybin doono quudka

“Arzaaqda.” Saadaalintaas waxay ahayd mid laga soo dheegtay saansaanta socota iyo silsiladda taxan ee taariikhda.

Wuxuu dooddiisa ku bilaabay mala-awaal qurux badan oo ah in keydka quudka “Arzaaqda” loo kala qaybiyay labo khaanadood. Khaannada hore waxaa loogu magacdaray Awoowe Aadan, halka khaanadda labaadna loogu wan qalay Abooto Xaawo. Suuleey wuxuu sheegay in adduunka intii la soo noolaa in dadka iyo duggaaguba isticmaalayeen wixii calaf ahaa ee ku jiray keydka khaanadda Awoowe Aadan, sidaa daraadeedna, hadda waxaa qaab hor-u dhac ah u billowday isticmaalkaca calafka dhex ceegaagga khaanadda Abooto Xaawo. Wuxuuna hadalkiisii ku soo gabo gabeeyay in labada marduuf ee loo qoondeeyay faracooda galo barakada ka buuxda khaanadda Abooto Xaawo!

Mala-awaalkan duur xulka ah, wuxuu Suuleey ku saadaaliyay in dumarka hoggaanka u qaban doonaan dhaqaalaha mustaqbalka ee adduunka, si ay u baxnaaniyaan burburka baaxadda leh ee laga dhaxlay damaca iyo waalida ragga. Mala-awaalkaas quruxda badan, qarnigan 21-aad saadaal kaliya ma ahan ee waa xaqiiqo ka muuqata nolosha bulshooyinka qaar, tusaale ahaan, dhaqaalaha Soomaaliya waxaa laf dhabar u ah dumarka Soomaaliyeed meelkasta oo adduunka ay ka joogaan. Qurbaha qoyskii gabar u soo dhoofsaday waa ka barako badan yihiin reerka toban qawsaar soo dirsaday! Ma is tiri, ragga waxaa qowsaaro ka dhigay khaanadda maran ee Awoowe Aadan!

Dhibaatada waxay tahay in raggu wali garowsan awoodda dumarka ee maanta isa soo taraysa. Qaar badan ayaa indhaha xanjo marsada ayagoo ku marmarsiyooda dhaqan duug ah iyo afkaar diimeed lagu doonayo in dumarka lagu adoonsado. Tusaale ahaan, xawaaladaha Soomaalida waxaa ka shaqeeya niman garar waaweyn la baxay oo muddo aan fogeyn ahaa moorayaantii kilkilaha ku sidan jiray qoryaha qabiilka. Ugu yaraan boqolkiiba lixdan 60%, dhaqaalaha xawaaladaha Soomaalida wuxuu ku tiirsanyahay shilimaadka ay gabdhaha Soomaaliyeed shaqeeyaan ama hagbadda u galaan, balse gabdhaha shaqaalaha ka ah xawaaladahan, ma gaaraan boqolkiiba 2%. Caddaalad darradan waxay marag ka tahay damaca iyo waalida ragga Soomaaliyeed.

Faylasuuf Suuleey qudhiisa waa ina-rag, sidaa daraadeed sharaxaadiisa si buuxda loogama bogan karo xuquuqda xaawalayda ka maqan. Maadaama aan ku guda jirno dabaal dagga maalinta dumarka aduunka (8, March,2015), waxaa habboon in aan jalleecno dhaxalka ay ka tagtay mid ka mid ah haweenka heerka sare ka gaaray “ Aqoonta- qallalan “Academia”, hormuudna u ahaa aqoonyahanka afka qalaad lagu dhaho “ feminist ‘ ee u dhaqdhaqaaqa xuquuda dumarka. Ardayda barata cilmiga bulshada “sociology” waxay u badantahay in ay is bartaan Drs Gerda Lerner marka la gorfeenayo

taariikhda “Dulmiga Dumarka” ku dhacay. Buuggeedii Caanka ahaa *The Creation of Patriarchy* (1987) waxay Gerda Lerner daaha kaga qaadey taariikhda qaabkii Aabbe-ku abtirsiga “ Patriarchy” ku billowday. Maaddaama ay ahayd Taariikhyahand laga qayliyay, waxay dul istaagtay faahfaahinta waqtigii uu dulmiga dumarka ina-rag guddoonsaday.

Sida buuggeeda qaybo badan ugu sharaxday, maamo Gerda Lerner waxay hoosta ka xariiqday in la soo maray waqti ragga iyo dumarku ka sinnaayeen, marashada, masruufka, shaqasha, hantida,hoggaaminta iyo waliba xuquuda guud ee nolosha. Bari samaadkaas wuxuu ku beeganyahay ka hor intii kacaanka" beeraha “agricultural revolution” uusan bilaabanin.
Culumada taariikhada waxay sheegaan in kacaanka beeraha uu billowday muddo laga joogo dhowr kun oo sanno ka hor. Qodoshada beeraha ka hor ma jirin hanti gaar loo leeyahay “ private property” sidaa daraadeed, wax walba waxay ahaayeen walax la wadaago. Arrintan waxay is baddashay markii dadku inta dagay beero la qotay oo shaqadii la qaybsaday. Sida ay ku dooddayso maamo Gerda Lerner, “ Aabbe- ku Abtirsiga” waxaa sababay ka dib markii ay bilaabatay kala dhaxlida hantida gaarka ah sida beeraha, guryaha iyo waliba xoolaha “Private Properties.” Nimanka ayagoo ka baqaya in carruur aysan dhalin xoolaha ka dhaxlaan ayuu wuxuu go’aansaday in dumarka guryaha lagu xabiso oo waardiyeen bandow oo kale ah lagu soo rogo. Bartaas ayay ka bilaabatay “Dulminta Dumarka” sida ay ku doodday maamo Lerner ayadoo adeegsanaysan qaab cilmiyaysan oo waliba maangal ah. Dhidhiraadhirintan cilmiyaysan waxay ku qaada dhigtay dhammaan dheelitir la’aanta ka muuqata ragga iyo dumarka, marka ay timaado aragtida diimaha, awoodda dhaqaale, siyaasad iyo waliba dhaqan ee maanta adduunka ka ka jira.

Culumada taariikhda iyo kuwa culumada bulshada waxaa ka yaabiyay sida dunida u ahayd nabad, bawaaqo, iyo farxad ugu jirtay ka hor “Kacaankii Beeraha”. Nabadda iyo farxadaas lagama dhaxlin dhaqaalo iyo waliba hormar kale oo jiray barigaas, balse waxaa sabab u ahaa sida ay ku dooddayaan aqoonayahannda sinaanta nafsiyadeed ee labka iyo dhadiga ee jirtay waqtigaas maadaama aysan jirin hanti, iyo waliba dhaqan dadka ragga iyo dumarka kala qoqoba. Si la mid ah sidaas, cilmi baarisyada adduunka ee casrigan waxay caddeenayaan in goobaha looga naaloonayo nabad, hormar iyo waliba xasilooni nafsiyadeed ay yihiin waddamada ku dadaalay in ay yareeyaan caddaalad darrada u dhaxeysan ragga iyo dumarka “Gender inequality.” Sidoo kale, cilmi baarisyadu waxay sheegayaan in cadaadinta dumarka iyo foolxumada nolosha xiriir weyn uu ka dhaxeeyo. Tusaale ahaan, qaran ama dal hormar dhaqaale iyo mid aqooneed ma gaaro inta gabdhaha iyo dumarka laga horjoogo xuquuqdooda, waxbarasho, shaqo, dookh iyo waliba ka go’aan qaadasha mustaqbalkooda sida guurka iyo waliba tirada carruurta ay dhali doonaan

Haddaba ragga Soomaaliyeed waa in ay wax ka bartaan saadaalintii Faylasuuf Suuleey, iyo casharada ku duuggan taariikhda aasantay. Waa in ay garab istaagaan gabdhaha Soomaaliyeed ee doonaya inaysan ka harin halganka ay ku jiraan haweenka adduunka.

Ragga caqliga leh sida Suuleey oo kale waxay wax ka bartaan is baddelka waayaha, waayo waxay ogyihiin in shaley iyo maanta wixii dhacay aysan muhiimad sidaa u sii badan lahayn marka la fiiriyo sawirrada iyo saadaasha ay sidaan daruuraha mustaqbalka. Riyaawadda nolosha waxay ku dhammaan doontaa micno u sawir eg hummaaga ku jira, heesta ay qaado maamo Nakruuma ee ah ‘Dib baa loo noqonayaa.. waa la noqonayaa.” Saansaanta iyo saadaasha muuqata waxay tilmaamayaan in dumarka dib ugu laaban doonaan adduunkii ay kula sinnaayeen duqayda, haddaba ina- rag waa inuusan is ceebaynin, nolosha cusubna soo dhaweeyo!

**Tixraac:** Gerda Lerner (1987) *The Creation of Patriarchy,* Oxford University Press. New York

## 56. Saaxiibtinimada Soomaalida iyo Korontada Kenya

Muddo laga joogo dhowr iyo toban sano ka hor ayaan soo iibsaday buuga caanka ah ee Saaxiibbo Kasbo oo lagu tarjumay Af Soomaali kaas oo afka qalaad ku noqonaya sidan “ How to win Friends and Influence People.” Waqtigaas waxaan xiisayn jiray sheekada asxaabta iyo shukaansiga foodleyda waayo waxaan ahaa igaar qooqan oo raadinaya qaraabo uu la qaybsado qooqa iyo qaraaxada! Markii aan dhammeeyay akhriska buugga, ayaan damcay inaan fuliyo talooyinkii farsamaysnaa ee qoraha buuga mudane Dale Carnegie ku taliyay si aan u kasbado saaxiibbo cusub.

Talooyinka badan ee buugga ku qoran waxaa ka mid ah farsamo yaab leh oo ku baaqaysa sidan: qof walba oo aad la kulantid weydii magaciisa, dabadeedna xasuusnow magacaas marwalba, waayo qof walba wuxuu jecelyahay in magaciisa loogu yeero.

Maalin ka mid ah waqtigii aan buugga dhammeeyay ayaa waxaa u qaraab iyo qaraaxo doontay suuqa Bakaaraha. Qoraxda oo kululeed darteed, waxaan go’aansaday inaan iibsado Qare si aan u qaboojiyo dhuunta qalalan. Markiiba

waxaan ku leexday nin da' dhexaad ah oo gaari-gacan ku dul iibinaya qaro la jeex jeexay kuwaas oo u safan qaab qurux badan.

Aniga oo qarihii aan gatay qararamsanaya ayaan waxaa soo xasuustay taladii mudane Dale Carniegie ee ahayd in qof walba oo kugu cusub aad weydiisid magaciisa. Markiiba xariifkii qaraha gadayay ayaan waxaan weydiiyay magaciisa. "Aryaa xaad ka rabtaa magacayga?" Sidaas waxaa ku jawaabay ninkii oo wajigiisa laga dareemayo shaki uu ka qaaday su'aashaydii lagu sahminayay saaxiibtinimada cusub.

Isla markiiba waxaan ku baraarugay in baaqyada ku qoran buugga Saaxiibbo Kasbo aysan ka soconayanayn Soomaaliya waayo talooyinka iyo farsamooyinka buugga xambarsaanyahay waxaa laga soo xawilay dhaqanka reer galbeedka oo ah mid dhinacyo badan uga duwan dhaqanka Soomaalida. Qofkii damcay inuu saaxiibbo cusub ka kasbado waddan burburay oo dhaqan maalmeedkeeda ka jira uu yahay boob iyo bililiqo joogto ah, asagaa cirka roob ku og ma istiri!

Qofkaas ma qaldana waayo waa miskiin akhriyay buug ka mid ah buugaag badan oo buburkii ka dib aad loo baahiyay kuwaas oo aan ku banaanayn dhaqanka Soomaalida. Buuggaagtaas waxaa bulshada ku dhex baahiyay aqoonyahan Soomaaliyeed oo laga habaaray feker la falgali kara dhaqanka ay ku dhex noolyihiin, kuwaas oo la mid ah dameerkii diintu sheegtay ee kutubta ku rarnaa.

Baraarugaas caatada ah waxaa ii xigay safar dheer oo looga jawaabayo su'aallo falsafadaysan oo ku saabsan saaxiibtinimada Soomaalida. Marka la doonayo in aragti loo furfuro qaab falsafadaysan, waxaa laga dhul bilaabaa qeexida aragtidaas iyo soo qufida macnooyinka kala duwan ee ku duuggan aragtida la doonayo in dubaha falsafada lala dul-istaagto.

Sidaa daraadeed, qoraalkan kooban wuxuu si guud u qeexi doonaa waxa loola jeedo "Saaxiibtinimo" dabadeedna wuxuu ka jawaabi doonaa, su'aalaha kala ah: Saaxiibtinimada Soomaalida maxay ku salaysantahay? iyo Maxaa lagu tilmaami karaa muuqaalka iyo macnaha ku duugan saaxiibtinimada Soomaalida?

Qaamuusyada luqadaha qaarkood, saaxiib waxay ku qeexaan sidan: qof aad si fiican u taqaanid kaas oo idin dhaxeeyo dareen ku qotomada qaddarin iyo jaceyl ka madax banaan damac galmo iyo xiriir qoys ama qaraabanimo. Dhanka kale cilmiga nafsiga wuxuu xiriirka saaxiibtinimada u qeexaa sidan: xiriir dhex mara labo qof kaas oo jira muddo dheer ayadoo labada qof ee asxaabta ah isku muujinayaan ixtiraam, iyo isku damqasho laga dhaxlay mabaadii iyo arrimo ay wadagaan ama waqti iyo waayo ay soo wada qaateen.

Qeexitaanka luqaddeed iyo midka cilmiyaysan ee errayga saaxiib, waxaa laga la soo dhex bixi karaa qoddob saldhig u ah saaxiibtinimada kaas oo ah: waqti dheer oo asxaabta wada qaataan si loo dhaxlo dareen u horseeda isku damqasho, ixtiraam iyo waliba jaceyl. Haddii qeexitaanka Saaxiib la barbardhigo sida

Soomaalida u saaxiibaan waxaa soo baxaya sawir gaar ah oo tilmaamaya waxyaabaha saldhiga u ah saaxibtinimada Soomaalida.

Bulsho ahaan, Soomaalida waa dad qaybsan oo sababo ay qabyaalad ugu weyntahay iskugu xanaaqsan. Qaybsanaanta Soomaalida ma ahan mid la saanqaaday burburkii dawladnimada sida ay ku dooddaan aqoonyanahada qaar, balse waa mid dabiici ah oo laga dhaxlay deegaanka qalafsan iyo duruufaha adag ee ku lamaansan dhaqanka reer guuraaga ah. Dabeecadaha laga dhaxlo dhaqanka reer guuraaga waxaa ka mid ah, in qofku ku na gaanin deegaan rasmi ah, dad gaar ah iyo waliba dareen gooni ah.

Sidaa daraadeed, bulsho aan ku nagayn deegaan rasmi ah, ama duruufaha jira daraadood ku mashquulsan baadigoobka baad iyo biyo, uma sahlana saaxiibtinimo saldhig looga dhigay ixtiraam, iyo isku damqasho laga dhaxlay mabaadii iyo arrimo guud oo la wadaago.

Soddonkii sano ee dawladnimada ka jirtay Soomaaliya, waxaa magaalooyinka qaar sida magaalada Muqdisho oo kale ka hana qaaday jawi daggan oo lagu ababin karo saaxiibtinimo ka madax banaan duruufaha adag ee nolosha reer guuraanimada iyo qaybsanaanta qabyaaladda.

Nasiib daro, duruufaha dhaqan, dhaqaale ee laga dhaxlay burburkii dawladnimada, dantu waxay noqotay in saaxiibtinimada Soomaalida saldhig looga dhigo danaysi joogto ah oo sida harka labadiisa galin isku baddala. Mar haddii qofka Soomaaliga ah lagu saliday nolol aan saldhig lahayn iyo qax joogto ah, layaab ma lahan in saaxiibtimada Soomaalidu noqoto mid aan ka gudbi karin danaha iyo duruufaha maalintaas taagan.

Waqtigii aan ka fakerayay waxyaabaha saldhiga u ah saaxiibtinimada Soomaalida waxaan ku sugnaa waddanka Kenya. Waqtigaas waxaan xiisayn jiray in iftiinka nalka aan wax ku akhriyo habeenkii waayo waxaan ahaa qaxooti ka soo qaxay magaalada mugdiga ah ee Muqdisho. Xiisaha korontada Kenya waxaa ii xigay xanaaq joogto ah waayo qiyaas ma lahayn inta jeer anigoo akhris macaan ku marqaansan korontadu si lama filaan ah iiga tagtay.

Kenya oo ah waddan musuq-maasuq iyo maamul xumo ku caan baxay, Korontadu ma ahayn mid isku haleyn gasha. Maalin ka mid ah maalmihii aan ka fakerayay mowduucan ayaan ku baraarugay in muuqaalka iyo macnaha ku duugan saaxiibtinimada Soomaalida lagu mataali karo korontada Kenya waayo labadoodaba isku halayn ma galaan!

## 57. Soomaalida iyo Sawirrada Sakiinta ah

Marwalba oo Facebook aan soo dhigo sawir qatarasoos ah oo aan iska soo qaaday waan qosolaa. Waxaan ku qoslaa masaafada u dhaxeeysa muuqaalka uu sawirkaas gudbinayo iyo xaaladda dhabta ah ee aan ku suganahay. Tusaale ahaan, badanaa waxaan isa soo sawiraa anigoo dhex fadhiya buuggaag, maktabad iyo guud ahaan goobaha kala duwan ee waxbarashada. Sawiradayda waxay qaldi karaan naftayda iyo dad badan waayo waxay muuqaalkayga u muujiyaan in aan ahay aqoonyahan buugaagta barkada. Markaan la kumo aqoonyahanada aqoonta loogu qubeeyay, ama si gaar ah naftayda aan ula faqo, waxaan ku baraarugaa in aqoonta aan Qaado la iiga darin, balse aan ahay xerow ku dhex xaragooda xarumaha waxbarasahda! Markaas ayaan ku qoslaa sida sawiradayda Facebook u noqon karaan sakiin si aayar loogu qalan karo qalbiyada dadka aqoonta jecel.

Soomaalida u soo qaxday waddamada qurbaha, gaar ahaan reer galbeedka waxaa lagu saliday faqri iyo faro marnaan laga dhaxlay shaqo la'aan, cunsiriyad, iyo waliba caajis. Intooda badan waxay quutaan shilimaad cayr ah oo Rabbi uga soo qaaday gaalada buurya qabta ah. Inkastoo duruufahaas qalafsan ay badi Soomaalida ku nool yihiin, haddana sawirrada Soomaalida qurbaha ay soo dhigaan baraha bulshada ee Internetka waxay gudbinayaan muuqaalo qurxoon oo muujinaya in qurbaha lagu barwaaqoobay. Tusaale ahaan, waxaad arkaysaa dumar iyo rag sawirro iska soo qaaday ayagoo bariis iyo hilib ku qararamsanaya maqaayad qatar ah oo ku taala bartamaha magaalooyinka waaweyn.

Sidoo kale sawirro qurxoon oo Soomaali badan iskaga soo qaadeen xafladdo aroos ama ayagoo ku socdaalaya baabuur kala jiidan ayaad ku arkaysaa Facebook. Dhab ahaantii muuqaallada sawirradaas iyo duruufaha dhabta ah ee Soomaalida qurbaha ku noolyihiin waa kaaf iyo kala dheeri. Sidaa daraadeed sawirada Soomaalida qurbaha ay soo galiyaan internetka waxaa lagu tilmaami karaa sakiin si dhib la'aan ah loogu dhaawici karo qalbiyada dadka ku gaajeysan Geeska Afrika. Dhallinyaro badan oo baddaha ku dhammaanaya si ay ugu soo tahriibaan waddamada galbeedka ayaa ah masaakiin qalbiyadooda lagu dhaawacay sawirrada sakiinta ah ee qurba -joogta Soomaaliyeed internetka soo galiyeen.

Waxaa aad u yar tirada Soomaalida ah ee Rabri iyo Rasuul ka xishooda ama ixtiraama farriimaha asaasiga ah ee diinta. Tusaale ahaan, waxaan ognahay in Rabbi iyo rasuulkiisii suubbaana NNKH ay ka digeen beenta iyo balan-xumada si loo helo bulsho badbaada adduun iyo aakhiro. Wadaad iyo waranlaba, inta

badan Somaalida meel walba oo ay joogaan waxaa balwad u ah been iyo balanxumo oo ah balaayooyinka ugu halisan ee burburiya nolosha bulshooyinka. Inkastoo ay yaryihiin Soomaalida sida dhabta ah u haysta xarigga Rabbi, haddana waxaad arkaysaa Soomaali badan oo qushuucsan oo sawirro iskaga soo qaaday goobaha lagu cibaadaysto sida masaajidyada iyo mawlacdyada.

Dhawaanahan waxaa suuqa iyo baraha bulshada ee Internetka qabsaday wadaaddo Soomaaliyeed oo qamiisyo qurxoon ku labisan kuwaas oo sawirro ku soo gala masjidka Xaramka ee Makka al Mukarama ayagoo u muuqda in martiqaad gooni ah looga fidiyay guriga ugu weyn guryaha Rabbi. Qushuuca ka muuqda Sawirrada lagu soo galo masaajidyada iyo sida farriimaha asaasiga ah ee diinta saameyn ugu leeyihiin nolosha wadaadka Soomaaliga ah waxaa u dhaxeeya masaafo u dhiganta mida u dhaxeysa labada cirif ee dhulka. Sidaa daraadeed sawirrada ay iska soo qaadaan wadaaddada iyo qolyaha ku dhex qushuucsan masaajidda kuwaas oo si waali ah loogu baahiyo baraha inernetka waxay ka dhiganyihiin sakiin saamixi karta in si fudud loo saqiir-suujiyo gabdhaha yar-yar ee hadda soo kacaya.

Laga soo bilaabay waqtigii dadku ka soo dageen doontii Nebi Nuux ilaa xilligan la joogo, Soomaalidu way dagaalamayeen! Colaadda iyo cadowtinimada dhex taala dadka Soomaaliyeed maalinba midab gaar ah ayay lahayd. Kontankii sano ee ugu danbeeyay dagaalada aan dhammaadka lahayn ee u dhaxeeya qabiillada Soomaaliyeed waxaa loo soo xawilay qaranimadii laga dhaxlay gumeystaha. Sodon sano oo hadba dhan la isku cayrsanayay ka dib, qabiillo ka xanaaqay qaranimadii laga qadiyay waa tii ay soo qamaameen, dabadeedna horseed ka noqdeen burburka, boobka iyo bililiqada lagu soo jiray labaatan iyo dheeraadka sanno.

Dagaalada aan dhammaadka lahayn ee Soomaaliya ka socda mudada labaatanka sano ka badan waxaa lagu barbarwaday in marba siyaasiyiinta Soomaalida sawirro qurxoon ku soo galaan madal lagu sheegay in lagu heeshiinayo ama lagu wada tashanayo. Sawarrida qurxoon ee laga soo qaado goobaha ay ku shiraan siyaasiyiinta Soomaaliyeed iyo damaca u qarsoon siyaasi walba oo Soomaali ah waxaa lagu mataali kataa shukaansiga ay Caasho shilimaadka uga daadsato Xaaji Cali! Sidaa daraadeed, sawirrada qurxoon ee badanaa siyaasiyiinta Soomaaliyeed ku soo galaan shirarka dib u heeshisiinta ama wada tashiga lagu sheegay waxay ka dhiganyihiin sakiin lagu jeexi doono jeebabka deeq bixiyayaasha caalamiga ah!

## 58. Qaladaadka mudane Qaad-diid

Ilbaxnimada iyo garashada oo laga qaangaaro waxay kugu qasbaysaa in dadka balwadahooda aan la faragashanin waayo waa basarxumo aan geed loogu so gabanin. Waxaa dadkii wareeriyay nin la magacbaxay Qaad-diid oo muqayiliin badan qaati bilaahi ka taaganyihiin. Ninkan odayga ah wuxuu shaqo ka dhigtay qaylo dhaan ku aaddan in qaadka laga joojiyo waddamada qurbaha ee Soomaali badan u qaxeen. Qaylo dhaantiisa ma dhaafsiisna caadifad caato ah waayo qoddobo maangal ah oo dadka fakera ay ku qanci karaaan lama uusan soo shirtagin. Sidaa daraadeed, haddii aan nahay culimada bulshada "Sociologist " ee Soomaaliyeed waxaa qasab nagu ah in toosh afar qaad ah lagu ifiyo qaladaadka mudane Qaad-diid.

Waxaa la malayn karaa in Qaad-diid iyo inta badan Soomaalidu in madax faluuq ay qabaan waayo casharrada taariikhda waxba kaba bartaan. Keydka taariikhda dhow iyo midda fog ee aadanaha waxaa ka buuxa dhacdooyin iyo siyaasado lagu doonayay in balwadaha qaar qaab xoog ah lagu joojiyo. Tusaale ahaan, taariikhda Soomaalida cusub waxaa ku kaydsan siyaasaddii kacaanka ku doonayay in qaadka qaab qasab ah lagu joojiyo iyo guuldaradii lagala kulmay.

Sidoo kale bilowgii qarnigii dhammaaday waxaa dalalka galbeedka gaar ahaan Maraykanka ka bilowday olole ay hormuud ka ahaayeen dumar iyo rag sida mudne Qaad-diid oo kale wayraxsan. Ujeeddadoodu waxay ahayd in balwadaha qaar sida qamriga oo kale dawladdu danbi ka dhigto. Fashil fool xun oo ardayda cilmiga siyaasadda iyo cilmiga bulshada bartaa ay ka warqabaan aya lagala kulmay.

Haddaba, is weydiintu waxay tahay, waa maxay sirta ka danbeysa in xoog iyo xanaaq aysan xal u ahayn la dagaalanka balwadaha qaar. Jawaabta su'aashan waxay nagu hagaysaa garashada ah sababta cilmiga ah ee ka danbeysa in marka hore dadka qaar ay balwad yeeshaan qaarna bariis iyo hilib kaliya ku kaaftoomaan. Sababtaas cilmiga oo la garto waxay sidoo kale sahli kartaa in qaladaadka mudane Qaad-diiiq si fudud lagu fahmo.

Inta aynaan afka saarin dhabaha uu qoraalka ku aroori doono, waxaa qasab ah in afeef caato ah aan jeediyo si aan loo maleynin in aan ahay afhayeenkii muqayiliinta. Marka hore waligay laan qaad ah afka uma kala qaadin, lagamana yaabo mustaqbalka in aan marqaamo waayo habeen aan qalaaweeyay sida

Shiikh Cabdulqaadir Jeylaani oo kale, waxaa kashfi la igu tusay in lowxul maxfuudka muqayilnimo aan la iigu qorin!

Xumaanta iyo samaanta dadka waxay ku xirantahay xaaladda markaas jirta. Sida aan ku dooday maqaal ku xusan isla cutubkan oo ku saabsan asalka xumaanta iyo samaanta, ma jiro qof asal ahaan u xun ama u wanaagsan. Haddii la garto duruufaha dadku ay ku noolyihiin, waxaa la ogaan karaa xaaladdaha horseeda xumaanta iyo wanaagga dadka. Tusaale ahaan, haddii la arko Soomali badan oo muqayiliin ah oo haddana wada qayrul masuul ah, waa in markiiba la is weydiiyaa duruufaha nololeed ee dumar iyo rag badan maxbuuska ugu yihiin marfishyada ku yaalla qurbaha ama Laasqoray. Haddii jawaabta su'aashan cilmiga ah laga waji dadbado, dabeedna eed iyo waliba dhaleeceyn lagala dul dhaco wiilasha iyo gabdhaha is dhaafinaya waqtiga adag, waxaa la noqonayaa fulayo sida mudane Qaad-diid oo kale meelaha ka qayl qayliya!

Qoddobkaas kor ku qoran ayay ka anba qaadayaan dhammaan qaladaadka nooga muuqda ololaha mudane Qaad-diid. Cilmi baarisyada ugu danbeeyay waxay sheegayaan in xiriir weyn uu ka dhaxeeyo xaaladda dhaqaale "socioeconomic status' iyo isticmaalka balwadaha qaar. Tusaale ahaan, billowgii qarnigii dhammaaday, cabista sigaarka waxay ahayd astaan muujisa ilbaxnimo iyo reer magaalnimada sigaar-cabaha "Smoker". Sidaa daraadeed dabaqadda dhexe iyo dadka dhaqaalaha leh ayaa sigaar cabistu ku badnayd. Markii la ogaadey xanuunnada laga dhaxlo sigaarka, dabaqadda dhexe iyo dadka dhaqaalaha leh waxay yareeyeen cabistii sigaarka. Maanta sigaar cabistu waxuu ku badany ahay garabraratada " working class" iyo waliba dadka aqoonta aan lahayn, waayo ma aysan helin aqoontii loo baahnaa in ay ku joojiyaan. (Waa laga yaaba in la helo qof aqoon leh oo sigaar caba ama xamaali waligii xabad sigaar ah shidanin. cilmi baaristu waxay sheegaysaa sida loo badan yahay " avarage").

Haddaba, ololaha mudane Qaad-diid wuxuu ku qaldanyahay in aqoon iyo cilmi baaris midna loo cuskan ee loo adeegsaday kaliya caadifad maran oo dumarka iyo carruurta lagu harowsado. Haddii la garab maro dood aqoon iyo cilmi cuskan, waxaa sida muuqata shaqo laga dhigan doonaa wacdi diimeed iyo weerar wayraxsan oo muqayiliinta lagu qaado. Sida qaladaadkii dhacay ee taarikhiga ahaa oo kale, sharci kasta oo dawlad ka soo saarto balwadaha dadka, ayadoon waxba laga qabanin duruufaha nololeed ee horseeday isticmaalka maandooriyaasha qaar, waxaa hubanti ah in uu ku danbeynn doono guul darro.

## 59. Cilmiga Calaacalaha

Hadda ka hor waxaan la kulmay sawir suuqgeyn ah oo xayaysiis u sameynaya caalim ku takhasusay cilmiga calaacalaha. Sida ku xusan xayaysiiskaas, caalimka wuxuu ku andoocanayaa in uu calaacalahaada iyo waliba wajigaada ka akhrisan karo taariikhdaadii hore, waxyaabaha aad mudan kartid mustaqbalka iyo waliba duruufaha kuu gaarka ah sida: cudarrada, himilooyinkaada waxbarasho, guur, shaqo, ganacsi iyo guulaha aad ka gaari kartid dacwooyinka kaaga furan maxkamadaha, dagaalka idiin dhaxeeya cadowgaada, sixiroolayaasha iyo waliba kooxaha faafiya sirahaada.

Waxaa aad ii soo jiitay sawir tusaale ka bixinaya adeegyada uu bulshada u qabto caalimkan ku takhusasay cilmiga calaacalaha. Waa sawir muujinaya humaag khalaaweynaya kaas oo dusha sare ka daawanaya waxyaabaha ka guuxaya caloosha dhammaan caalaamka muuqda iyo caalamyada qarsoon. Sidoo kale caalimka cimiga calaacalaha wuxuu xayaysiiskan ku balanqaadayaa in adeegyadiisa boqolkiiba boqol la isku halayn karo walibana uu damaana qaadayo in qaab i tus oo i taabsii ah danahaada kuugu dhammaan doonaan.

Waagii aan wahaabiga ahaa, waxaan si fudud u weerari jiray culumada ku andacooda inay u dhuun-daloolaan awoodaha dhuumaalaysta. Waqtigaas waxaa la ii tabobaray inaan gaalnimo iyo shirki ku shaabadeeyo culumada ku andacooda in shati gaar ah loo siiyay daawashada awoodaha dhuumaalaysta. Waqtigan la joogo waxaan ahay arday rajeynaya mustaqbalka dhow inuu noqdo aqoonyahan ku takhusasay cilmiga-bulshada (Sociology). Sidaa daraadeed iima furna in sida Wahaabi ah oo kale aan ka xanaaqo xayaysiisyada noocan ah, waayo waxaa la iiga fadhiyaa in cilmiga-bulshada aan ku qaada dhigo duruufaha iyo damaca gadaal ka riixaya caalimka cilmiga calaacalaha.

Mar walba oo xirfad lagu soo xayaysiiyo suuqa iyo goobaha kale ee la iskugu yimaado, aqoonyahanka cilmiga-bulshadu waxay is weydiiyaan su'aal ku saabsan xiriirka ka dhaxeeya xirfadda la soo xayaysiiyay iyo baahida ka jirta bulshada. Su'aalaha waaweyn ee la is weydiiyo waxaa ka mid ah muuqaalka dhaqan-dhaqaale (socio-economic status) ee bulshada ku nool deegaanka lagu soo badhigay xirfada la xayaysiinayo si loo ogaado in xirfadaas baahi loo qabo iyo inkale. Si looga jawaabo su'aalahan, cilmiga-bulshada wuxuu adeegsadaa aragtiyooyin " theories" kala duwan sida aragtida "functionalism” si loo kala qaado xirfadaha shaqaynaya iyo kuwa aan shaqaynaynin.

Dhanka kale, cilmiga-bulshada xoogga ma saaro ogaanshaha in xirfadahaasi yihiin xalaal ama xaaraan waayo doodaha noocaas ah waxaa looga fadhiyaa inay ka jawaabaan aqoonyahanka ku takhasusay culuumta sharciga iyo qawaaniinta.

Cilmi baarisyo badan oo culumada-bulshadu sameeyeen, waxaa lagu ogaaday in culumada cilmiga calaacalaha ay shaqooyin iyo adeegyo muhiim ah u qabtaan bulshooyinka ku liita aqoonta iyo dhaqaalaha. Tusaale ahaan, bulshooyinka dhaqaalahooda hooseeyo ama aqoontooda ay liidato waxay si ba'an uga baqaan ama u baryaan awoodaha dhuumaalaysta si dhibaatada haysatada uga baxaan. Sidaa daraadeed, culimada cilmiga calaacalaha waxay suuqa ku soo bandhigaan adeegyo looga bogsanayo dhibaatootinka laga dhaxlay baryada iyo baqdinta joogtada ah.

Waxaa yaab leh sida cilmiga-bulshada u soo bandhigo muuqaalka dhaqan-dhaqaale bulshada ku nool deegaan gaar ah asagoo u kuurgalaya xirfadaha lagu dhex xayaysiisyo bulshdaas. Tusaale ahaan habeen habeennada kamid ah waxaan ku baraarugay in xaafadaha Toronto ee badanaa xayaysiisyada noocan ah aan ku arko in ay daganyihiin dadka dhaqaalahooda uu hooseeyo. Dhanka kale, xaafadahan, waxaa dagan dad soo galooti ah oo badanaa ka soo kala jeeda dhaqamada ka jira qaarada Aasiya ama Afrika. Sidaa daraadeed, bulshooyinka ku nool deegaanadan waxay baahi u qabaan aqoonta ku duugan cilmiga calaacalaha si awoodaha dhuumaalaysta ugu bandhigaan baahidooda gaarka ah iyo baqdintooda joogtada ah.

## 60. Tirada Tolka ku Taageersan

Maqaadiirta ayaa malaayiin sanno ka hor qorshaysay tirada dadka iyo tolka ku taageeri doona illaa qiyaamaha laga gaarayo. Nasiib darro dad badan ayaa aaminsan in tolka taageeri doona ay ku xirantahay hadba sida ay u dadaalaan iyo inta tabartooda gaarsiiso. Waana taas sababta tiro badan oo dadka ka mid ah ugu mashquulsan yihiin magac raadis iyo is muujin laga dhaxlay madax-xanuun.

Qoraalkan kooban wuxuu dadka daqiiqad walba baadigooba taageerada tolka la wadaagi doonaa tirada iyo xisaabta dhabta ah ah ee maqaadiirta u qorsheysay qof walba marka laga hadlayo taageerada niyadda laga soo xawilay ee tolka. Si tirada dhabta ah ee ku taageersan ama ku taageeri doonta aan u muujinno, qoraalka wuxuu cuskan doonaa laan ka mid ah cilmiga xisaabta oo lagu magacaabo "statistics". Xisaabta waa luqadda badanaa maqaadiirta kula xariirto makhluuqaadka ay maamusho.

Sidaa daraadeed, xisaabta "statistics" ayaan u adeegsan doonnaa tirada likes ee badanaa loo soo xawilo dadka laandheerayaasha ah ka ah Facebook si aan u helno tirada dhabta ah ee ku aaddan taageerada tolka ee laga soo xawilay xaggaa iyo lowxul maxfuudka! Ninka ugu laandheeraysan Facebook waa wiilka yahuudka ah ah ee lahaa fikraddii lagu asaasay Facebook. Wiilkaas waxaa tol iyo ood wadaag kula ah Faceboogiisa malaayiin qof oo tiradooduu ka badan tahay 78, 043, 843. Haddii la eego tirada likes ee uu ka helay farriin kamid ah kuwa uu dhageystayaashiisa la wadaagay waa 512000 likes. Haddii xisaabta boqolleyda la adeegsado, dadka sida niyadda ah u taageersan wiilka facebook ugu laandheeraysan waa boqolkiiba wax ka yar 1%. Dhanka kale, qowmiyada Soomaalida, intooda ku falaada Facebook waxaa ugu caansan wadaad aftahan ah oo lagu magacaabo Shiikh Dabcasar. Qaraabada Facebook ee Shiikh Dabcasar waxaa lagu qiyaasaa dad gaaraya todobaatan iyo dhowr kun oo qofood. Muuqaalkii kamid kuwa uu Shiikhu la wadaagay qaraabadiisa Facebook, wuxuu ka helay likes gaaraya 974. Maqaadiirtu waxay go'aansatay in 1.34% oo ka mid ah qaraabada shiikh dabacasar ee Facebook in niyadadooda uga soo xawilaan taageero niyad ah.

Adiga oo maanka ku haya tirada dhabta ah ee tolka taageersan wiilka facebook ugu laandheeraysan iyo shiikha ugu caansan Soomaalida ku falaada facebook haddii aad u fiirsatid xisaabta likes ah ee badanaa loo soo xawilo asxaabta magaca ka raadiya Facebook waxaa ku soo baxaya mucjiso ku aaddan sida maqaadiirta u maamusho tirada dhabta ah ee ku aaddan taageerada laga heli karo tolka.

Tusaale ahaan waxaad ogaanaysa, si kasta oo aad isku muujisid ama magac u raadisid, in taageerayaasha dhabta ah ee tolka aysan ka badan doonin tiro u dhaxeysa boqolkiiba hal ilaa toban. Waxaad fahmaysaa in ay isku mid tahay in 10 qof ama kun qof lagula saaxiibo Facebook. Haddaba qoraalkan wuxuu ku dooddayaa in maqaadiirta kuu qorshaysay malaayiin sano ka hor taageero aan ka badnayn boqolkii hal illaa tobon qof ee tolkaada ka mid ah. Waxaa laga yaabaa siyaasiyiinta Soomaalida ee laaluushka ku raadinaya kursiga xildhibaanimo ee tolka looga qoondeeyay baarlamaanka in ay fahmeen go'aanka maqaadiirta ee ku aaddan tirada dhabta ah ee taageerada tolka.

Haddaba waxaa fiican in sheydaanka iska naaraan dadka marwalba ku mashquulsan magac-raadis iyo is muujin waayo cilmiga xisaabta ee "statistics" waxaan ka helnay xog ku aaddan sida maqaadiirta u qoondaysay taageerada tolka ee qof walba uu heli doono illaa qiyaamaha laga gaarayo. Mar haddii maqaadiirta malaayin sanno ka hor gaartay go'aanno kama danbeys ah, waxaa fiican in muranka iyo is muujinta lagu mashquulsanyahay la joojiyo oo maqaadiirta lala shaqeeyo.

Ugu danbeyntii, mar haddii tolka ku teegeeri doona illaa qiyaamaha aysan ka badnayn, boqolkiiba hal illaa toban, gobanimida iyo geesinimadaba waxay ku jirtaa in runta aan laga baqin ayadoo la rajeynayo taageerada guud ee tolka!

## 61. Faca Cusub ee Soomaalida Facebook

Sannado badan oo la soo dhaafay waxaan dhex fadhiyay Facebook. Muddadaas aan Facebook dhex fadhiyay waxaa sheeko iyo shukaansi isku darsannay dhallinyaro iyo odayaal Soomaali ah oo dacallada adduunka ku rafaadsan ama ku raaxaysanaya.

Saacadihii badnaa ee Facebook aan ku dhex falaadayay waxaan isku arkay karaamo iyo mucjisooyin badan. Tusaale ahaan, waxaan sannadihii u danbeeyay isku arkay in aan u dallacay faalallow siii saadaalin kara dabeecadaha iyo damaca qarsoon ee dadka Facebook ku falaada!

Waxaa la yaab igu noqotay dhowr jeer oo faal aan dhigay Facebook dhexdiisa la iigu feeday kashfi ku saabsan shaqsiyada hoose iyo sheekooyinka ay xiiseeyaan ama ka xanaaqaan asxaabtayda Facebook.

Dhowr jeer ayaan damcay in aan faafiyo waxyaabaha ka soo baxa faalka aan dhigto Facebook. Balse waxaan ka baqay in ay igu soo qamaamaan wadaaddo maalmahan ku mashquulsanaa faafinta khuraafaad ku saabsan siyaabaha Facebook la iskaga sixri karo ama la iskaga sasaban karo. Xattaa waxaa jira faal ii sheegay damaca hoose wadaadda sheekada noocan ah faafinaya.

Faalkaas wuxuu sheegay in wadaadan ay raadinayeen gabdho ay ka sixradaan suuqa Facebook. Sidoo kale faalka loogu fiirsanayay wadaaddada sixirka ku gabanaya wuxuu sheegay in wadaaddada ka qaraabta facebook qaar ka mid ah buufis ama baqdin ka qabaan in suuqa shukaansiga ee internetka xirtaan niman Facebook ka suurooda gaar ahaan rag ka tirsan qabiilka dhowaan la magac baxay reer Qaad-diid ama kooxaha kale ee ku midoobay calaacalka ah Bad baan difaacaynaa!

Mar baan waxaan dhigtay faal lama filaan ah. Faalkii aan dhigtay Facebook dhexdiisa waxaa ka soo baxay sawir aan laga aamusi karin ama la qarin karin. Sawirkaas wuxuu ku saabsanyahay calaamadaha faca cusub ee bulshada Soomaaliyeed uga farcami doona Facebook.

Farqi weyn ayaa u dhaxeeya qaab dhismeedka bulsho ee Soomaalida Facebook dhex-fadhiya iyo ummaddaha kale ee Facebook ku dac falaada. Bulshada Soomaaliyeed waxay muddo ku soo jirtay burbur dhinacyo badan oo midka dhaqanka iyo dhimirka ugu toolmoonyihiin. Wadajir la'aantii laga dhaxlay

dawladnimadii burburtay waxay sababtay in Soomaalida waddamo badan ka raadiyaan nolol iyo nabad.

Xaaladdaha qallafasan ee dhaqan, dhaqaale iyo qalalaasaha siyaasaddeed ee qabsaday bulshada Soomaaliyeed waxaa laga dhaxlay shaqsiyad qabyo ah taas oo aad uga shakisan naftadeeda iyo noolaha kale. Qofkii Soomaaliga ahaa oo naftiisa ka shakisan ayaa wuxuu nafis ka soo raadiyay Facebook si uu la baashaalo shaqsiyaad iyo bulsho uu ka shakinsanyahay.Sidaas waxaa lagu sheegay hordhaca faalkii aan dhigtay!

Markii faalkii la guda galay, waxaa soo muuqday fac dhan oo ka farcami doonaa shaqsiyaadka shakisan ee Facebook ku soo qamaamay sannadihii ugu danbeeyay. Calaamadaha ugu weyn ee faca farcami doona dhowaan waxaa ka mid ah in qofka Soomaaliga ah aamino in Facebook yahay meesha kaliya ee laga heli karo nabad iyo nolol. Dhowaan waxaa soo socda fac cusub oo adeegyadii dawladnimada u soo doonaan doona Facebook.

Maadama inta badan qofka Soomaaliga ah ku noolyahay deegaan uusan ka helin karin nabad iyo xasillooni maskaxda ah, Facebook wuxuu soo saari doonaa fac dhan oo farxadooda ku xirantahay Like, love  iyo kuwa kale ay ka soo shaxaadeen asxaabtooda Facebook.

Sidoo kale, mar haddii qofka Soomaaliga ah luqunta loo galiyay qoys, qaraabo ama qabiil ku mashquulsan xaqiraada qofnimadiisa, sida faalku timlaamay waxaa wadaadda ku soo jira fac dhan oo Facebook ka heli doona fursado ay ku faanaan ayagoo xoogaa xawaaji ah ku dari doonaa guulaha ay ka gaareen nolosha.

Waxaan ognahay in Soomaalida safka hore kaga jiraan ummadaha diinta u qaatay ama u fahmay qaab labo shub ah. Haddaba waxaa soo muuqda fac cusub oo Facebook ka soo raadin doonan wadaad ilbax ah oo dhallinyarada u xalaalayn kara ama u fasixi kara in mararka qaar la niikin karo si dhibaatada nolosha xoogaa looga yara nafiso!

Soddonkii sano ee la soo dhaafay Soomaaliya kama jirin waxbarasho dhab ah oo looga bixi karo dhibaatada taagan. Haddaba waxaa Soomaalida Facebook uga farcami doona jiil cusub oo aqoon u malayn doona qoraallada Facebook ay ku faafiyaan rag sidaydoo kale ah Qorayaal qooto-qooto ah!

# 62. Doqonniimada iyo Duruufaha Qabyaalada

Maalmo kamid ah sannadkii 2016-dii waxaa isbaaro lama filaan ah tiillay waddo aan jeclahay in aan ku lugeeyo subaxii hore marka qorraxdu si fiican u qososho. Waddadan waxaa isbaarada dhigtay qabiil shinbiraha ka mid ah oo lagu magacaabo laandheerayaasha luqunta-dheer.

Danta laga lahaa isbaaradan waxay ahayd in qabiilka laandheerayaasha luqunta-dheer ee shinbiraha u bahoobaan bililiqaysiga iyo gurashada miro ka baxay geed waddada dhinaceeda ku yaala. Maalin isla sannadkaas kamid ah, mar waddadii aan soo maray waxaan arkay isbaaradii oo la qaaday iyo laba ka mid ah shinbirahii luqunta dheeraa oo wali meesha soo luqun dheer!



Muuqaalka labadan shinbirood ee ku haray meeshii isbaarada laga qaaday ayaa sababay in xoogaa aan ka fekero xiriirka ka dhaxeeya doqonniimada iyo duruufaha u gaarka ah qabyaaladda!

Ka hor inta aan mowduucan aan ka fekerin waxaan aaminsanaa in dadka, dugaagga iyo waliba duurjoogta isku bahaysta qabyaaladda si ay u gaaraan dano gaar ah sida bililiqo ama boob in ay u badan yihiin doqomo maqaadiirtu waa hore ka dishay damiirkii.

Waxaanse ogaaday in doqomadu ku yaryihiin jufooyinka shinbiraha iyo qabiillada dadka ah ee badanaa ku bahooba dhigashada isbaarada ama bililiqaysiga magaalooyinka iyo geedaha gaarka ah. Waxaan ku baraarugay in tirada dhabta ah ee doqomada ama kooxaha aan damiirka lahayn ee ku jira qabiilladalaandheerayaasha ah ee dadka ama shinbiraha aysan ka badnayn tiro u dhaxeeysa boqolkiiba labo illaa saddex 2-3%.

Dadka xubnaha ka ah qabiilada ku bahoobay billiqaysiga magaalooyinka waaweyn iyo shinbiraha laandheerayaasha ah ee isbaarada dhigta aaggaga ay ka baxaan geedaha qaar waxaa dabada ka riixaya duruufo qallafsan oo deegaanka dabiiciga ah laga dhaxlay sida gaajo cadow ah oo marwalba caloosha iyo iimaanka gardaraysata!

Markii gaajada xoogaa lala garramo oo geedaha iyo magaalooyinka la bililiqaysto ayaa badanaa garaadka ku soo laabtaa aqlabiyada ama tirada badan ee qabiilka iyo shinbiraha laandheerayaasha ah. Sida badan, dumarka iyo ragga ka tirsan qabiilkii iyo shinbirihii laandheerayaasha ah waxay garowsadaan in la gaaray waqtigii shiddada la joojin lahaa oo shaydaanka la iska naari lahaa!

Nasiib darro qabiil walba iyo shinbiro kasta waxaa ku jira boqolkiiba labo ama saddex maquustayaal ah oo iimaanka waa hore laga qaaday oo had iyo jeer ku mashquulsan in boobka iyo bililiqada lugta lagu sii walaaqo illaa qiyaamaha laga gaarayo. Tusaale ahaan, labadan shinbirood ee meesha soo luqunta dheer wali kama aysan quusan bililiqadii joogsatay iyo isbaaradii laga qaaday wadada dhinaceeda.

Haddaba hal-xiraalaha ugu weyn ee la doonayo in la xalliyo waa su'aashan: Qaabkee ugu macquulsan ayaa aqlabiyada garashada u saaxiibka ah ee ka tirsan qabiillada iyo shinbiraha laandheerayaasha ah ugu caqli celin karaan maquustayaasha doqomada ah ee aan garan karin in duruufihii qabiilka ku qasbay isbaarada iyo bililiqada waa hore laga bogsaday?

## 63. Bulshada iyo Boosteejooyinka Garashada

Marka aad baratid cilmiga-bulshada waxaa kugu waajibaya in aad yeelatid karti aad ku mala-awaali kartid sawirrada guud iyo kuwa qarsoon ee ku saabsan qaab dhismeedka bulshada markaas kawaanka kuu saaran. Qoraalkan kooban wuxuu aqoonyahanada daneeya isbaddaladii ku dhacay bulshada Soomaaliyeed la wadaagi doonaa muuqaallada qarsoon ee bulshada Soomaaliyeed ee loo baahanyahay in si cilmiyaysan loogu baraarugo.

Magaalooyinka waaweyn ee dal walba waxaa ku yaala boosteejooyin ama xarumo laga raaco baabuurta aada gobolada dalka iyo dalalka dariska ah. Aqoonyanada qaabeeya ama qorsheeya muuqaalada magaalooyinka "Urban Planners" waxay aad u ogyihiin muhiimadda ay bulsho walba u leedahay boosteejooyinka baabuurta laga raaco. Sidaa daraadeed, waxay badanaa qorsheeyaan in la dhiso ama la dayactiro boosteejooyin u dhigma gaadiidka iyo waddooyinka dalka ka jira. Tusaale ahaan, haddii gaadiidka dalka laga isticaamo ka mid yihiin tareeno casri ah, waa in xarumo waaweyn oo tareenada ka baxaan loo sameeyo magaalooyinka dalka.

Sidaa si la mid ah, bulsho walba waxay leedahay boosteejooyin ay ka raacaan gaadiid isku xira garashada guud ee dadka ku nool dalkaas. Aqoonyahanada bartay cilmiga-bulshada ayaa daraaseeya gaadiidka isku xira garashada guud ee badanaa bulsho walba adeegsato. Tusaale ahaan, aqoonyanada cimiga-bulshada waxay cilmi baaris ku sameeyaan boosteejooyinka ay ka baxaan gaadiidka iskaga goosha garashada guud ee bulshada sida: dhaqanka, hidaha, diinta,

aqoonta, suugaanta iyo fanka si loo ogaado tayada iyo nooca gaadiidka dadka adeegsadaan marka ay doonayaan in garashada "intellect" ay ka wada xariiraan.

Sida aan horey u soo sheegnay tayada iyo noocana gaadiid ee badanaa ka baxa boosteejooyinka magaalooyinka waxaa saldhig u ah waddooyinka ka jira waddanka iyo dhaqaalaha guud ee dalka. Sidaa si la mid ah, aragtiyooyinka "ideas" oo ka dhigan gaadiidka garashada ee ka baxa boosteejooyinka bulshada waxaa qaabeeya isbaddalada ku dhaca dhaqanka, diinta, suugaanta, iyo fanka.
Tusale ahaan, burburkii ka dib, tayo ahaan iyo tiro ahaanba aad bay u liiteen gaadiidka iskaga goosha magaalooyinka waaweyn ee Soomaaliya waayo waxaa burburay waddooyinkii waddanka iyo dhaqaalihii dalka. Sidoo kale, buburkii ka dib gaadiidka garashada "aragtiyooyinka" iskaga goosha garashada guud ee Soomaalida tayo ahaan iyo tiro ahaanba aad bayu u liiteen waayo waxaa la burburiyay ama la bililiqaystay boosteejooyinka kala ah: dhaqanka, diinta, fanka iyo suugaanta.

Haddaba su'aashu waxay tahay maxaa la gudboon aqoonyahanka ama hoggaamiyaha doonaya inuu wax ka baddelo tayada iyo tirada gaadiidka garashada "aragtooyinka" ee bulshada Soomaaliyeed u adeegsadaan socdaalka guud ee garasashada?

Inta aynaan u gudbin waxyaabaha la gudboon aqoonyahanka ama hoggaamiyaha daneeya isbaddalada bulshada, waxaan ku hormaraynaa arinta laga doonayo inuu ku baraarugsanaado marwalba. Marka hore waa in aqoonyahanku ku baraarugo muhiimadda bulshadu u leedahay boosteejooyinka ay ka baxaan gaadiidka garashada ee markaas shaqeynaya. Tusaale ahaan: burburkii ka dib boosteejada diinta ee magaalooyinka Soomaaliya waxaa ka gooshayay gaadiid " aragtiyooyin" lagu soo farsameeyay dalalka carabta. Gaadiidkaas waxaa dalka keensaday ganacsato ku xiran Carabta oo doonaya in ay u adeegaan kana adeegtaan bulshada u baahan aragtiyooyin diimeed oo buuxin kara kaalinta gaadiidka garashada ee bulsho kasta uu baahantahay.

Dhanka kale, ganacsatada dalalka Carabta ka soo dajiyay gaadiidka garashada “aragtiyooyinka diimaysan" waxay dhiseen boosteejooyin u gaar ah oo gaadiidkaas ka bixi karaan. Tusaale ahaan masaajido iyo xarumo cusub oo diinta si cucusb loogu barto ayaa dhisay magaalooyinka Soomaaliya.

Maalmahan waxaa bulshada Soomaaliyed ku soo badanaya aqoonyahan dhaleeceeya boosteejooyinka ay ka baxaan gaadiidka garashada "aragtiyooyinka diimaysan" ayagoo dalbanaya in gabi ahaanba la joojiyo isticmaalka gaadiidkaas. Qalad-weyn ayay aqoonyahanadan galayaan marka la eego qawaacida cilmiga-bulshadu adeegsado si loo darso baahiyooyinka u gaarka ah bulsho walba.

Waxaa hubaal ah in qalad iyo sal-fudeyd lagu qiri lahaa aqoonyanahada qorsheeya muuqaalada magaalooyinka “Urban Planers” haddii waqtigan la

joogo ku baaqaan in la burburiyo boosteejooyinka ay ka baxaan baabuurta iskaga goosha Soomaaliya ayadoon waxba laga qaban waddooyinka ka jira waddanka iyo dhaqaalaha dalka.

Sidaa si la mid, ah waa in la qiro qaladaadka ay galayaan ragga iyo dumarka aqoonta ku soo barta qurbaha dabadeedna doonaya in la burburiyo boosteejooyinka ay waqtigan ka gooshaan gaadiidka garashada sida aragtiyooyinka diimaysan ayadoon waxba iska baddelin duruufaha siyaasadeed, dhaqan, dhaqaale ee dalka ka jira.

Aqoonyahanada la dhacsan gaadiidka casriga ah ee iskaga goosha garashada guud ee bulshooyinka casriga ee doonaya in gaadiidka noocaas ah ee garashada la geeyo dalka Soomaaliga wuxuu la mid yahay ganacsade ku fekeray in gawaarida casriga ah ee shirkada Tesla lagu ceyriyo bosteejooyinka iyo waddooyinka burbursan ee Soomaaliya!

## 64. Su'aal Saaxiib: Xaaska Maxay iiga Nixisaa?

Maalin maalmaha ka mid ah, waxaa qadka telefoonka ku wada hadalnay saaxiib ka mid ah asxaabta xiiseeya sheekooyinka falsafadaysan ee lagu lafa-guro wanaagga iyo waalida ku lamaansan nolosha. Sheekadii oo socota ayaa xaajiga waxaa u soo galey xaaska oo xoogaa kacsan, ka dibna waxa ka war helay saaxiibkeen oo si lama filaan ah igu macsalaamayeeyay asaga oo sheekadii socotay ku soo afjaray su'aashan: xaaska maxay iiga nixisa mararka qaar?

Jawaabta ku habboon su'aashan waa mid ballaaran oo laga baadi goobi karo laamaha kala duwan ee cilmiga sida: cilmi nafsiga, cilmiga bulshada, iyo keydka ka buuxa taariikhda xanuunka badan ee ka soo bilaabatay shukaansigii laga shallaayay ee abooto Xaawo iyo Awoowe Aadan.

Haddii aan ku hormarno aqoonta cilmi nafsiga, badanaa kooxaha, iyo shaqsiyaadka dareensan in ay tabar daran yihiin waxay adeegsadaan xeelado kala duwan oo cabsi galintu ka mid tahay. Waxaan ognahay kooxaha looga itaal roonaado awooda ciidanka, siyaasada iyo dhaqaalaha in ay adeegsadaan dagaalo hoos ka tuur ah. Dagaalada ay adeegsadaan dadka iyo shaqsiyaadka dareemaya tabardarida waxaa ka mid ah argagixisnimada" terrorism."

Dumarka Soomaalida waxaa lagu barbaariyay dhaqan bahdil ah oo ku baaqaya in ragga ka maskax iyo garasho liitaan. Dhaqanka noocaas ah haweenka Soomaaliyeed waxay ka dhaxleen niyad jab aan ka xusi karno aaminaadda ah in hormar fiican aysan ka gaari karin dhanka siyaasadda iyo dhaqaalaha. Sidaad daraadeed, gabdhaha Soomaalida waxay guursadaan ragga ayaga oo qaab nafsiyan ah u dareensan in fursadahii kale ee xaqa u lahaayeen loo diiday sida hormarka dhanka waxbarashada, dhaqaalaha iyo siyaasadda.

Dareenka noocaas ah ee laga dhaxlay niyadjabka nafsiga ah ee ku aaddan hormarka dumarka ayaa laga yaabaa inuu horseedo in mararka qaar xaasaska Soomaalyeed ee sida xaaska saaxiibkeen adeegsadaan xeelado cabsi galin ah ah oo ragga looga nixiyo!

Haddii Jawaabta su'aashan dhanka cilmiga- bulshada "sociology" laga eego, bulshada Soomaaliyeed waxay ka mid yihiin ummadaha iska caleema saartay ragganimada beenta ah "patriarchal societies". Aqoonta cilmiga bulshada waxaa lagu ogaaday in haweenka ka soo jeeda bulshooyinka qiimeeya ragganimada beenta in har iyo habeen ku jiraan dagaal qabow oo la magac baxay maahmaahda ah nin iyo naagtiis colna maahan nabadna maahan. Sidaa daraadeed, saaxiibkeen waa inuu ogaadaa in ragganimada beenta ah “patriarchal system" ee bulshadu Soomaaliyeed ku dhaqanto inay tahay sabab ka danbeysa in mararka qaar xaaska si lama filaan ah uga nixiso!

Haddii keydka taariikhda la eego, shukaansigii laga shallaayay ee abooto Xaawo iyo Awoowe Aadan waxaa ka dhashay shaki joogto ah oo marwalba sheydaanku ku furo xiriirka u dhaxeeya dumarka iyo ragga. Shakigaas joogtada ah waxaan ka xusi karnaa eedaha aan dhammaadka lahayn ee ragga iyo dumarka isku soo jeediyaan marwalba.

Tusaale ahaan awoowe Aadan wuxuu abooto xaawo ku eedeeyay in jannada u qoonsatay ka dib markii ay ula timid sheeko sheydaan. Sidaa daraadeed, su'aasha saaxiibkeen ee ku aaddan sababaha xaaska uga nixiso mararka qaar waxaa lagu tilmaami karaa eed barkuma taal ah oo salka ku haysa shakiga uu sheydaanku ka abaabulo daaha shishadiisa. Haddaba saaxiibkeen waxaan kula talinaynaa inuu sheydaanka iska naaro, xaaskana si fiican ula sheekeysto. Waxaa u badantahay sheekada uu saaxiibkeen ka argagaxay in ay tahay sheeko xiiso leh oo ku saabsan qorshaha caawa shuunka looga xiiri doono!

## 65. Maxaa Talo ah Marka Lagu Takooro?

Maalin maalmaha ka mid ah waxaa ila soo xariiray labo arday oo sannadkii 2015 aan wada qaadanay maado laga bixiyo Jaamacadda Toronto oo cinwaankeedu yahay habdhismeedka hanaanka feker ee Afrikaanka (African Systems of Thought). Waa maado ay qaataan ardayda daneeya daraasada Afrika (African Studies) si ay u bartaan in bulshooyinka ku nool Afrika lahaan jireen falsafado, diimo iyo aragtiyooyin u gaar ah oo ka tarjumaya duruufaha dhaqan, dhaqaale ee ka jira qaaradda Afrika.

Ujeeddadii ay iila soo xariireen labada arday waxay ku sheegeen labo arrin oo xiriir hoose leh. Ujeedada hore waxay ahayd xasuus ku saabsan dood adag oo hadda ka hor na dhex martay. Waxaa dhacday in macallinki dhigayay maadadaas oo ah faylasuuf ka yimid Kenya uu maalin na soo dhex dhigay dood

ku saabsan midab takoorka dadka madow kala kulmaan ummadaha oogada ka cad iyo caqabadaha dadka madow ku soo fool leh mustaqbalka. Dooddaas waxay ahayd mid kulul oo markii danbe isku baddashey buuq iyo qaylo.

Ujeeddada labaad ee asxaabtaas iila soo xariireen waxay ahayd wargelin ku saabsan kulan weyn oo dhici doona kaas oo ay soo abaabuleen ururka ardayda madow ee Jaamacada Toronto iyo aqoonyahanno madow oo kala yimid jaamacadaha ku yaala waqooyiga America. Mowduuca lagu lafa gurayo kulankan waa isla mowduucii hadda ka hor uu na soo dhex dhigay macallinkii dhigayay maadada kor ku xusan. Sidaa daraadeed, waxaan go'aansaday in asxaabta ila soo xariiritay aan kala qayb galo kulan- aqooneedka ay qabanayaan aqoonyannada iyo ururka ay ku midaysan yihiin ardayda madow ee Jaamacadda.

Markii aan tagey goobta shirkaas uu ka dhacayay waxaa aad ii soo jiiday quruxda iyo agaasinka ka muuqda madashada. Marti sharaf aad u badan oo midabkoodu madow yahay ayaa goobta soo camiray. Muuqaal muujinaya aqlabiyad madow in aad ku aragtid Jaamacadda Toronto waa dhif iyo naadir. Sidaa daraadeed, muuqaalka marti sharaftii soo buux dhaafiyay shirka wuxuu la mid ahaa marqaanka mar soo dhaca ah ee muqayiliinta ku xisaabtamaan!

Maadaama shirka si kedis ah aan kaga war helay, xog fiican kama hayn aqooyahanada madasha ka qudbeyn doono. Qadar daqiiqado ka dib oo aan gaaray goobtii shirka, xiriiriyihii shirka ayaa hadalka bilaabay. Wuxuu ku dheeraaday taariikhda aqooneed iyo halganka uu soo marey aqoonyahanka noogu qoran qudbada xulka ah. Isla markiiba waxaan ku baraarugay sirta ka danbeysa in madasha ay soo camiraan marti sharaf aad u badan oo ka kala yimid qaybaha kala duwan ee bulshada madow ee ku nool magaalada Toronto.

Madashii sida quruxda badan loo soo camiray waxaa qudbada xulka ah ku qornaa taariikhyahan caan ka ah Jaamacadaha waqooyiga Ameerica, isla markaana ah halgamaa magac iyo sumcad ku leh dhaq-dhaqaaqyadii waqooyiga America ee u dagaalamay xuquuqda ka maqan dadka madow.
Prof. Robert Hill, wuxuu sannadihii lixdameeyada ka qalan jabiyay Jaamacadda martida u yahay ee University of Toronto asagoo ka mid ahaa dufcadihii ugu horreeyay ee arday madow ah ee Jaamacaddan ka baxa. Wixii intaa ka danbeeyay wuxuu u wareegay, kuna noolaa waddanka Mareykanka asagoo bare sare oo cilmiga taariikhda ka noqday jaamacaddo kala duwan sida University of California, Los Angeles( UCLA) oo hadda uu ku suganyahay.

Hordhacaas caatada ah markii aan ogaaday, ayaan si lama filaan ah ugu baraarugay in khudbadda Prof. Robert Hill yeelan doonto miisaan mudan in maanka la amaahiyo. Malahaas ma qaldanayn waayo billowgiiba rug-cadaaga wuxuu qudbadiisa ku daah furay su'aallo cul-culus oo maskaxda ka shaqeysiinaya. Dadka jecel khudbadaha cuskan aqoonta iyo waayo-aragnimada waxay markiiba dareemi kareen in Prof. Robert khudbadiisa u qoondeeyay

qaybo kala duwan oo si qurux badan iskugu qoofalan. Tusaale ahaan, wuxuu hordhaca khudbadiisa ku xusay in u soo qalab qaatey falanqaynta saddex qoddob oo saldhig u ah saadaalinta guusha mustaqbalka laga gaari karo soo afjarida midab takoorka maalin walba ay la kulmaan dadka madow ee ku nool dalalka galbeedka, gaar ahaan ardayda madow ee ku nool Waqooyiga Amerika. Saddexdaas qoddob wuxuu ku sheegay in ay kala yihiin: ogaanshaha taariikhda dadka madow ee Waqooyiga Amerika, dhiraandhirinta isbaddaladii ku dhacey dhaqanka reer galbeedka, iyo muhiimadda ay leedahay in laga shaqeeyo sharafta iyo shaqsiyada qofka madow.

Haddii dhinac kale laga eego, saddexda qoddob ee mudane Robert u qorsheeyay Khudbadiisa waxa lagu tilmaami karaa jihooyinka la abaaro marka la darsayo mushkiladaha waaweyn ee ku habsada bulshooyinka dunida sida gumeysiga laga dhaxlo midab- takoorka. Jihooyinkaas kala duwan ee khabiirka khudbadiisa ku qaada dhigay waxay aqoonyahanada wax ku barta afka qalaad u yaqaaniin ( history, culture, and self).

Asaga oo ka bilaababaya waqtigii uu ardeyga ka ahaa Jaamacadda Toronto sannadihii lixdamaadkii, mudane Robert wuxuu xusey in is baddalo iyo waxyaabo badan oo dhanka wanaagga ah dhaceen intii uu noolaa. Tusaale ahaan wuxuu ardeydii kulanka joogay u sheegay in waqtigii uu ardeyga ahaa in Jaamacadda Toronto aqoonsaneen jiritaanka ardey madow oo xuquuq u leh urur ka shaqeeya danahooda gaarka ah. Wuxuu ku dheeraaday, in qofka madow ee maanta ku nool Waqooyiga Amerika uu haysto fursado iyo wanaag aad u badan marka la eego midab takoorkii darnaa ee dadka madow ku soo maray Waqooyiga Amerika qarnigii dhammaaday.

Sidoo kale wuxuu dul maray guulihii taariikhiga ah ahaa ee ay soo hoyiyeen guud ahaan dhaq-dhaqaaqyadii u dagaalamay xuquuqda dadka madow ee qarnigii labaataanaad ka hana qaaday dacalada dunida. Haddii laga shidaal qaato shumaca daaran ee taariikhda, mudane Robert wuxuu marti sharaftii shirka ka soo qayb galay ku baraarujiyay in mustaqbalka dhow qofka madow guulo waaweyn ka gaari karo mushkiladaha u gaarka ah sida midab takoorka oo kale.

Doodda aqoonyahanka ee ku aaddan in taariikhda laga shidaal qaadan karo marka la saadaalinayo mustaqbalka wanaagsan ee ku soo maqan bulshooyinka madow ma ahan dood si guud u qabta dhammaan guulaha mustaqbalka ka filan karaan qaar ka mid ah ummadaha madow sida Soomaalida oo kale. Haddii taariikhda lala sheekeysto, Soomaalidii hore ayaa ka nolol iyo niyad wanaagsanaa Soomaalida maanta nool. Sidaa daraadeed, Soomaalida waxay u baahanyihiin saadaalin gooni ah oo ka madax banaan hormarka laga dhaxley keydka taariikhda ee qofka madow.

Kaalinta dhaqanka uu ka qaato xoreynta maskaxda ummadaha la gumeysto ayuu ahaa qoddobka labadaad ee aqoonyahanka u qorsheeyay khudbadda lagu

saadaalinayo guulaha mustaqbalka laga gaari karo midab takoorka u gaarka ah qofka madow. Prof. Robert wuxuu ku dheeraaday in dadka madow ee ku nool guud ahaan waddamada galbeedka, gaar ahaan Waqooyiga Amerika waqti hore bilaabeen kacaan lagu samata bixinnayo dhaqankooda u gaarka ah ayagoo isla markaa ka qayb qaadanaya dhaqanka guud ee ay ku dhex nool yihiin. Wuxuu xusay in bulshooyinka madow ee ku nool waqooyiga America kaalin weyn ka ciyaareen dhaqaajinta dhaqanka guud sida suugaanta, fanka iyo heesaha.

Dhaqanka nool ee qofka madow waa hubka ugu halisan ee lagula dagaalami karo midab takoor walba oo jira. Sidaa daraadeed, mudane Robert wuxuu si xamaasad leh ugu nuux nuuxsaday in xoogga la saaro kobcinta dhaqanka bulshooyinka madow si looga badbaado gunnimada sababtay gacan hoorsiga horseeday midab takoorka! Markii uu aqoonyahanka qaada dhigayay qoddobka ku saabsan muhiimadda dhaqanka leeyahay, waxaa horteyda ka soo muuqday dhaawaca gaaray dhaqanka qiimaha badan ee qawmiyadda Soomaaliyeed!

Qoddobkii lagu soo gunaanaday khudbaddii qiimaha badnaynd ee Prof. Robert Hill wuxuu ahaa in sharafta iyo shaqsiyadda qofka madow laga shaqeeyo si loo yareeyo dhaawaca nafsiga ah ee laga dhaxli karo midab takoorka jira. Sidoo kale wuxuu ku dheeraaday in qof walba oo madow mas'uuliyad weyn ka saran tahay dhisidda shaqsiyad adag oo u babac dhigi karta dhibaatooyinka ku hor gudban. Mar haddii qofka madow ee ku nool qaaradda Waqooyiga Amerika haysanin awood dhaqaale ama mid siyaasadeed, mudane Robert wuxuu ku dooday in dunta hoose ee shaqsiyadda qofka (the self) tahay raasumaalka kaliya ee haray.

Asaga oo cuskanaya cadeymo cilmi ah ayuu Prof. Robert sheegay in hal-ganka qofka madow ugu jiro gobannimada nolosha ku guulaysan karo oo kaliya marka uu ku hubaysan yahay shaqsiyad si fiican loo soo shiilay, oo waliba sii fiican looga soo shaq-shaqay sheekooyinka quraafaadka ah. Waxaan cabbaar ka fakeray sida qodobkan ku aaddan muhiimadda ay leedahay in laga shaqeeyo sharafta iyo shaqsiyada qofka madow u noqon karo sir badbaadin karta qofka Soomaaliga ah ee ku dhiban dalka gudihiisan iyo waliba dalalka qurbaha.

Gabagabadii, khudbaddii qiimaha lahayd ee Prof. Robert Hill waxaa lagu soo gunaanaday ka jawaabidda su'aashan: Maxaa talo ah marka lagu midab takooro? Jawaabta dhabta ah ee su'aashan waxay ku xirantahay waqtiga iyo duruufaha ay ku sugan yihiin dadka dareemaya midab takoorka, balse talooyinka la gudboon ama ku habboon duruufaha jira markaas waxaa laga heli karaa jihoohinka kala ah: ogaanshaha taariikhaha kala duwan ee midab takoorku dunida uu soo maray, dhiraandhirinta kacaanka dhaqanka uu ka qaadan karo xoreynta ummadaha la midab takooro, iyo waliba muhiimadda ay leedahay in laga shaqeeyo sharafta iyo shaqsiyadda qofka dareemaya midab takoorka.

# 66. Maxay Wadaagaan Maraykanka iyo Mudug?

Dhammaadka Sannadkii 2017-dii waxaa safar gaaban oo markii labaad ah ku tagey dalka Maraykanka si aan u booqdo dhowr ka mid ah magaalooyinka waaweyn ee Maraykanka sida Chicago, Columbus, iyo Minneapolis. Maalmahii koobnaa ee Maraykanka aan joogay waxay dib ii xasuusiyeen muuqaallo iyo dhaqan maalmeed aan ku soo arkay gobolka Mudug ee Soomaaliya.

Habeenkii loo dabaal dagayay sannadka cusub ee 2004-tii waxaan ku jiray safar ka soo bilaabmay Muqdisho kuna dhammaaday magaalada Gaalkacyo. Sannadkii 2004-tii oo dhan waxaan ku noolaa xarunta gobolka Mudug.

Qoraalkan kooban wuxuu qaada dhigi doonaa saddex qodob oo ay wadaagaan dadka ku nool dalka adduunka ugu xoogga badan ee Maraykanka iyo gobolka Mudug oo ah deegaan ay ku badanyihiin dumar iyo rag bolo-xoofto darteed bannaanka dagay!

Qoddobka ugu horreeya ee dadka Maraykanka ah iyo reer Mudugga wadaagaan waa iimaan ku baaqaya rajo wanaagsan oo mustaqbalka ku aaddan.

Markii aan gobolka Mudug imid sannadkii 2004-tii waxaa la yaabay sida qofka reer Mudugga ah ugu rajo weyn yahay maalmaha ku soo maqan mustaqbalka si kasta oo duruufaha markaas taagan u qallafsanyihiin. Tusaale ahaan waqtigaas waxaa magaalada Gaalkacyo nagu soo booqday marxuum Cabdulaahi Yuusuf oo aaminsanaa in marnaba aan laga quusan rajada dhismaha dawlad federaal ah oo qaranimadii iyo kala danbayntii soo celisa.

Sidoo kale maalmahii aan joogay waddanka Maraykanka waxaa i soo jiitay sida qofka Maraykanka ah ugu rajo weyn yahay in uu ka gun gaaro riyada saldhiga u ah nolosha iyo dhaqanka Maraykanka ee loo yaqaan American Dream.

Dalka Canada oo aan daganahay waxaa ku yar rajada wanaagsan ee qofku ka qabo in mustaqbalka ka duwanaan doono maalmaha iyo waqtiga la joogo markaas.Canada iyo Muqdisho waxaa ku arkay dad iska qabow kuwaas oo isu dhiibay waqtiga iyo waayaha halka Maraykanka iyo Mudug aan kula kulmay dad dhiiran oo rajo wanaagsan ka qaba mustaqbalka in wax badan la baddali karo haddii Maqaadiirta si adag loola garramo!

Alex Tocqueville oo ahaa taariikhyahan iyo diblumaasi u dhashay dalka Fransiiska ayaa rajo wanaagga dadka Maraykanka caanka ku yihiin ku xusay

buuggiisa Democracy in America mar uu is barbardhigayay bulshada Yurub iyo dadkii uu ku soo arkay Maraykanka qarnigii 18aad.

Qoddobka labaad ee reer Mudugga iyo shacabka Maraykanka wadaagaan waa in qof walba ku kalsoonaado kartidiisa gaarka ah isla markaana cidna aan la isku hallaynin.

Waqtigii magaalada Gaalkacyo aan imid waxaa la kulmay dhallinyaro badan oo ka guuray qoysaskooda kuwaas oo aaminsan in karti la isku dabaro halka magaalada Muqdisho ee aan ka imid markaas ku arki jiray rag ciyaalka xaafadda ah oo wali canjeelo ka cuna guryihii ay ku barbaareen. Sidaa si la mid ah, markii aan imid Maraykanka waxaan arkay dal qof walba ku dadaalayo sidii uu isku dabari lahaa asaga oo aaminsan kartidiisa gaarka ah. Qofka ku nool Maraykanka iyo Mudug waxay wadaagaan aragtida ah in nin walba xaniinyihiisa bannaanka soo dhigo.

Waddanka Canada qofku aad uguma kalsoona kartidiisa gaarka ah waayo inta badan qofku haddii uusan dhinac ku haynin ama ku tiirsanayn koox ama qolo kale way adagtahay in aqoontiisa iyo kartidiisa uu ku caano maalo. Sidoo kale dadkii aan ku arki jiray magaalada Muqdisho iyo guud ahaan koonfurta Soomaaliya sida reer Canada oo kale, qofka shaqsiga ah aragtidiisa iyo waliba dadnimadiisa kama madax banaanayn qoyska iyo qoloda uu ka tirsanyahay markaas.

Sidaa daraadeed qofka Maraykan ama Mudug ku nool wuu ka indho adagyahay ama ka dhiiranyahay qofka koonfurta Soomaaliya ama dalka Canada ku nool waayo labaatan jir Maraykan ama Mudug jooga Rabbi uma xilqarin!

Sidoo kale Alex Tocqueville buuggiisa Democracy in America wuxuu ku xusay in dhaqanka reer Maraykan uu dhiirigaliyo aragtida qofka shaqsiga ah in la dhagaysto isla markaana la qiimeeyo. Arrintan wuxuu oday Tocqueville ku tilmaamay mid ka mid ah sababaha ka danbeeya in hal-abuur cuskan aqoon iyo dimoqoraadiyad baahsan ka hana qaadaan America.

Qodobka saddexaad ee reer Maraykan iyo reer Muduga wadaagaan waa fur-furnaan lagu maagayo isla markaana lagu so dhaweynayo qofka ku cusub dalka ama deegaanka.

Tusaale ahaan, maalmahii aan ku cusbaa magaalada Gaalkacyo waxaa i maagay oday ii sheegay inuu gartay in magaalada aan ku cusbahay waayo qaabka aan u socdo wuu ka duwanyahay sida reer Mudugga tallaabada u qaadaan. Odayga wuxuu intaas ii raaciyay asaga oo kaftamaya in aan u laafyoonayo sida dumarkii ama wadaad muraad leh!

Maalmaha kooban ee Maraykanka aan joogay dhowr qof ayaa qaab fur-furnaan ah ii maagay ayaga oo doonaya in ay ogaadaan halka aan ka imid iyo qofka aan ahay. Tusaale ahaan mar safar dhulka ah aan ku jiray waxaa kaftan ku saabsan burcad badeedka Soomaaliya igu maagay Islaan i garab fadhisay.

Koonfurta Soomaaliya iyo waliba Canada waa lala yaabaa ama waa laga xanaaqaa haddii qof aan ku aqoon uu kula qabsado oo waliba kula kaftamo. Oday Tocqueville waagii uu bulshada Maraykanka darsayay wuxuu la yaabay fur-furnaanshaha guud ee ka muuqda reer Maraykan iyo sida ay u xirxirnaayeen dadkii uu kaga yimid Yurub.

Guud ahaan fur-furnaanshaha iyo kaftanka la isku maago waxay fududeeyaan in qaab sahlan dadku isku bartaan dabadeedna xog iyo waayo-aragnimo badan la is weydaarsado. Waa tii Soomaalida ku maahmaahday markii war la helaa talo la helaa!

Canada iyo koonfurta Soomaaliya waxaa xaddidaan talooyinka iyo wararka la heli karo halka Maraykanka iyo Mudug sahlantahay helitaanka warar badan oo horseedi kara talooyin wax ku ool ah. Dhanka kale, furfurnaata iyo kaftanka la isku maago waxaa mararka qaar ka dhasha faduul iyo is fahamwaa isku baddali kara gacan ka hadal.

Sidaa daraadeed Maraykanka iyo reer Muduga waxay mararka qaar galaan dagaalo lagu riiqmo ka dib marka ummadaha kale u fahmaan furfurnaata iyo kaftanka la isku maago faduul iyo daandaansi qaawan. Ugu danbayntii saddexdan qodob oo reer Maraykan iyo reer Mudugga wadaagaan waa saddex arin oo saldhig u ah fanka hoggaaminta.

Aqoonyahannada darsa aqoonta hoggaaminta waxay qabaan in qofka hoggaamiyaha ah laga doonayo: rajo wanaagsan oo mustaqbalka ku aadan, kalsooni ku aadan kartidiisa iyo waliba fur-furnaan dad badan lagu kasban karo ama lagula dagaallami karo. Sidaa daraadeed la yaab ma lahan in Maraykanka si fufud hogaanka ugu qabto siyaasadda iyo dhaqaalaha dunida. Sidoo kale la yaab ma lahan in siyaasadda cakiran ee Soomaaliya kaalin weyn ka qaataan siyaasiyiin reer mudug ah oo Maraykanka ku soo ilbaxay!

**Tixraac:** De Tocqueville, A. (2003). Democracy in America (Vol. 10). Regnery Publishing.

## 67. Baranbarada Canada iyo Burcadda Congo

Habeen ka mid ah habeennada mar guriga aan imid waxaan arkay xabbad baranbaro ah oo isbaaro dhigatay bariga fog ee qolkayga. Ciidamo xoog badan oo uu hoggaaminayo Jeneraal lagu magcaabo Xaaqin ayaa qaab qasab ah ku qaaday isbaaradii baranbarada. Ka dib markii isbaaradii baranbarada la qaaday ayaa bilaabay in wararka caalamka aan akhriyo. Markiiba waxaan arkay cudurka Ibola oo ku soo laba kacleeyay dalka Congo iyo burcad weeraraya isla markaana afduubaya shaqaalaha caafimaadka ee hay'adaha caalamiga ee ka shaqeeya waddanka Congo.

Waxaan is weydiiyay su'aalahan soo socda: Maxaa keenaya in baranbaro isbaaro dhigato guri ka dhex dhisan waddan hormarsan sida Canada oo kale. Sidoo kale maxaa sababaya in burcad afduubtaan shaqaale u gargaaraya shacabka ku xanuusanaya dalka ballaaran ee Congo?

Feker kooban ka dib, waxaan ogaaday in baranbarada isbaaro dhigan karto dhammaan guryaha caalamka kuwooda hormaray iyo waliba waddamada soo koraya. Isbaarada baranbarada waxaa sababa ka caajiska nadaafadda ee caanka ku yihiin qolooyinka deggan guryaha. Tusaale ahaan baranbarada waxay soo ogaatay in aan ahay nin neceb oo ka caga jiida shaqada iyo nadaafadda guriga, sidaa daraadeed waxay is tustay in si fudud isbaaro la iigu dhigan karo.

Waxaa macquul ah qof ku nool waddan burbursan oo dagaallo ka soo kabanaya sida dalka Congo oo kale in gurigiisa baranbaro isbaaro dhigan karin waayo qofkaas waa qof nadaafadda ku dadaala oo ka caaggan caajiska. Maalintii la abuurayay baranbarada waxaa amar lagu siiyay inta qiyaamaha laga gaarayo in ay beegsato goobaha ay ku noolyihiin dadka neceb shaqada guriga ee badanaa ka caajisa nadaafadda.

Haddaba waxaan ogaaday in baranbarada laga heli karo dhammaan waddamada hormaray iyo waddamada soo koraya oo dhan. Sida kaliya ee baranbarada lagu bara kicin karana ay tahay nadaafadda oo lagu dadaalo iyo caajiska oo laga duceysto.

Dhanka kale, burcadda waa sida baranbarada oo kale, waxayna ka dillaaci karaan dhammaan waddamada hormaray sida Canada iyo dalalka burbursan sida Congo iyo Soomaaliya oo kale. Ma jirto waddan ka caagan burcadnimada. Tusaale ahaan burcad badan ayaa maalin walba dad ku laaya kuna baada dalka Amerika oo ah waddanka ugu xoogga badan adduunka.

Waddamada ka badbaada burcadda ama ay ku yaryihiin waa dalalka ay ka jiraan sharci adag iyo waliba dhaqaale ku dhisan caddaalad loo simanyahay.

Tusaale ahaan waddanka Canada ama dalka Norway way adagtahay in burcad maalin cad ay baartaan ama afduubaan shaqaalaha hay'adadha Samafalka sida ka dhacda dalka Congo oo kale.

Haddaba waxaan ogaaaday in isbaarada ay dhigtaan burcadda Congo iyo Soomaaliya lagu qaadi karo dhaqan dhaqaale oo ku dhisan caddaalad iyo qawaaniin shaqeenaya. Dawladaha ka jira waddamada burbcaddu ku badan tahay waa dawladdo ka caajisa waajibaadka qaran ee saaran sida amniga iyo kobcinta dhaqaalaha.

Dawladda Congo iyo anigaba waxaan wadaagnaa cago jiid iyo caajis naga saaran waajibaadka nolosha sida nadaafadda iyo amniga. Waana taas sababta ka danbaysa in burcadda weeraraan shaqaalaha caafimaadka ee dalka Congo iyo in baranbaro isbaaro dhigato bariga fog ee qolkayga ka dhex dhisan dalka Canada!

**Tixraac:** https://www.vanguardngr.com/…/ebola-hit-congo-to-deploy-se…/

## 68. Boqol Boqol Boosaaso

Billowgii dagaaladii sokeeye illaa dhammaadkii sannadihii sagaashamaadka, bulshada Soomaalida intooda badan waxay ku wada xariiri jireen oo waliba lacagta iskugu xawili jireen qalab lagu magacaabi jiray Taar oo aad ugu baahay dhamaman gobolada dalka. Wuxuu ahaa qalab fudud marka la eego isticmaalkiisa kaas oo u baahan kaliya in loo dhiso anteeno lagu qotomiyay ul dheer iyo batariga baabuurta oo koronto ahaan loo isticmaali jiray. Dhallinyaro badan ayaa shaqada taarka oo waqtigaas lahaa suuq fiican nolosha ka dabaran jiray.



Dhanka kale Taararkii ka furnaa magaalooyinka dalka waxaa iskugu iman jiray dad kala duwan oo la xiriiraraya eheladooda oo ku kala baahsan dalka gudihiisa iyo dalalka dariska ah. Waxyaabaha xiisaha lahaa waxaa ka mid ah in qofka taarka ku hadlaya dadka oo dhan ay maqli jireen arrimaha ay ka wada hadlayaan qofka kale ee uu la hadlayo.

Maadama aysan jirin sheeko u qorsoon dadka taararka yimaada, ayaa anigoo magaalada Kismaayo jooga waxaan balwad ka dhigtay in aan dhegaysto oo waliba u soo dhuunto goobaha Taararka ka furan yihiin. Waxaa aad ii soo jiidan jiray sida labada qof ee taarka ku wada hadlaya isku raadin jireen haddana isku heli jireen.

Waxay ahayd hal-abuur u gaar ah hormarka Soomaalida marwalba ka muujiyaan qaabka ehelada kala maqan u xariiraan. Tusaale ahaan, haddii oday magaalada Boosaaso jooga uu damco in islaantiisa oo Kismaayo joogta la hadlo dabadeedna xoogaa biil ah u soo diro wuxuu tagi jiray taar caan ka ahaa magaalada Boosaaso oo lagu magacaabi jiray boqol-boqol Boosaaso!

Marka uu taarka tago ka dib waxaa laga qori jiray magaca qofka uu doonayo, qabiilkiisa iyo waliba magaalada uu joogo qofkaas. Tusaale ahaan maalin anigoo fadhiya oo iska dhageysanaya macaamiil ku sugnayd Taar Kismaayo caan ka ahaa oo uu lahaa nin lagu magacaabi jiray Cilmi Dheere ayaa waxaa Boosaaso naga soo wacay taarka caanka ah ee boqol boqol Boosaaso.

Badanaa Taarka la wacayo waxaa loogu yeeri jiray magaca qofka milkiilaha ah iyo magaalada uu joogo. Tusaale ahaan Taarkii aan joogay ee la soo wacay waxaa loogu yeeray oo cinwaan u ahaa: Cilmi Dheere Kismaayo! Markiiba Cilmi Dheer Kismaayo waxaa la weydiiyay in ay diyaar tahay oday hebel xaaskiisa oo labo maalin ka hor laga soo dalbaday!

Taarwalihii Kismaayo ayaa ku jawaabay "waan ku maqlaa boqol boqol Boosaaso, waa diyaar maamada ee soo daa odayga" Inkastoo badi taararka dalka ka shaqeeya loogu yeeli jiray magaca qofka milkiilaha ah iyo magaalada la joogo haddana taarka boqol boqol Boosaaso waxaa loogu magac daray numberka mowjaddii uu ka soo gali jiray oo ahayd: 100 100.

Maalmahii aan sida dhuumaalaysiga ah u dhagaysan jiray sheekooyinka ay is dhaafsadaan dadka taararka ku hadla ayaa ku baraarugay saddex arrimood oo u gaar ah sheekooyinka dadka ka soo hadli jiray waqtigaas taarkii boqol boqol ee Boosaaso.

Arrinta koowaad, waa in dadka Boosaaso ka soo hadla balaayo iyo baas badan sheegi jirin marka la eego dhibaatadii baahsanayd ee dalka ka jirtay waqtigaas. Tusaale ahaan odaygii islaantiisa kala soo hadlayay Boosaaso wuxuu sheegay nabad iyo barwaaqo halka xaaska ay ka warrantay xaaladahii qallafsanaa iyo colaadihii ka jiray magaalada Kismaayo.

Arrintan labaad ee dadkii Boosaaso ka soo hadli jiray kaga duwanaayeeen dadka kale waxay ahayd jeeb roonaan iyo dhaqaale ay ku caawin jireen eheladooda. Odaygii soo hadlayay wuxuu xaajiyaddiisa ugu bishaareeyay in busaaraddii uu ka bogsaday sidii Boosaaso u tagay maadama uu shaqo helay; dhowaanna u bilaabi doono biil joogto ah!

Qoddobka saddexaad ayaa ah in dadkii Bosaaso ka soo hadli jiray iskugu jireen dad kala duwan oo nolol iyo nabad u doontay Boosaaso ka dib markii ay ka qaxeen colaadihii ka jiray Koonfurta Soomaaliya. Tusaale ahaan odaygii ka soo hadlayay Boosaaso wuxuu xaaskiisa u sheegay in uu qorsheeynayo in reerka loo soo raro Bari mar haddii balaayo ay dagtay dhul weynihii Waamo la isku dhihi jiray.

Marka la eeggo dhismihihii maamulka Puntland, waxaa fiican in la xuso in saddexdan qoddob ee kor aan ku soo qaadaa dhignay in maamulka Puntland uu ka dhaxlay magaalada Boosaaso. Dhaxalkaas wuxuu maamulka Puntland ka sii dhaxlay in dhulka Puntland noqdo deegaan nabdoon oo Soomaaliya inteeda kale kaga soocan nabad dad badan oo gobolada dalka ka soo hayaamay soo beegsadeen iyo dhaqaale shaqo abuur fiican sameeyay. Inkastoo wax qabadka dawladda Puntland ahayn boqol boqol sida waxqabadka taarkii boqol boqol ee Boosaaso, haddana waa maamul wax badan qabtay marka la eego duruufaha qallafsan ee ka jira Geeska Afrika!

## 69. Maktabado Camiran iyo Miisas Cidlo ah

Haddii aad la socotid warbaahinta Soomaalida, waxaa marwalba indhahaada qabanayaan xarun cusub oo buuggaagta lagu akhriyo oo laga furay magaalo ka mid ah Soomaaliya. Shan iyo toban sano ka dib markii aan Puntland ku laabtay waxaan xiisaynayay in maktabadaha cusub ee la furay aan booqdo aniga oo u kuurgalaya tayada buuggaagta iyo tirada akhristayaasha.

Booqashadaas waxaan ka billaabay tagidda xarumaha buuggaagta ee Jaamacadaha qaar. Tusaale ahaan, waxaan booqday xarunta buuggaagta ee Jaamacadda Puntland faraceeda Gaalkacyo. Maktabadda oo ka kooban hal qol kaliya waxaa ka buuxay buuggaag casri ah oo isku jira laamaha kala duwan ee cilmiga.

Buuggaagta cilmiga casriga ah ee xaruntaas aan ku arkay waxaa ka mid ahaa buuggaag tayadooda sarreyso oo si fiican looga baran karo cilmiga bulshada-Sociology. Nasiib darro watigaas akhristayaal buuggaagtaas ka barakaysanaya ma joogin maktabadda.

Gabar ka mid ah mas'uuliyiinta maktabadda oo halkaas aan kula kulmay ayaan weydiiyay in maktabadda maanta kaliya cidlo tahay iyo in marwalba sidan looga maqan yahay. Gabadhii waxay ii sheegtay in badanaa miisaska Maktabadda cidlo yihiin. Waqtigaas hal arday xattaa maktabbadda kuma sugnayn.

Dad badan oo isugu jira macallimiin Jaamacadeed ayaan ka wareystay in maktabaddaas aan tagay kaliya in miisaskeeda cidlo yihiin iyo in mushkiladdan tahay muuqaalka guud ee xarumaha buuggaagta ee Soomaaliya, gaar ahaan Puntland. Dadkaas aan waraystay waxay isku raaceen in miisas cidlo ah iyo maktabado camiran yihiin muuqaalka guud ee maalmahan laga daba dhacay.

Miiisaska cidlada ah ee maktabaddaha camiran ee Soomaaliya waxaa ku qarsoon macnayaal badan oo mudan marba mid in la dul istaago.

Macnaha koowaad waxaa lagu tilmaami karaa magac muuqda iyo macno maran. Wixii ka danbeeyay burburkii ka dib, Soomaaliya waxaa ka hana qaaday dhaqan ah in lagu mashquulo magac iyo muuqaal ka maran macno la taaban karo. Tusaale ahaan, maktabadaha cusub ee Soomaaliya magac ahaan kaliya ayay u jiraan, balse buuggaagta yaalla kama tarjumayaan baahida guud ee bulshada iyo xiisaha ardayda Jaamacadaha.

Macnaha labaad wuxuu noqon karaa in xarumaha buuggaagtan yihiin billow wanaagsan balse ardayda Soomaalida u baahanyihiin waqti badan si ay ugu baraarugaan qiimaha buuggaagta cilmiga casriha ah.

Macnaha saddexaad ee maktabadaha camiran iyo miisaska cidlada wuxuu noqon karaa in guud ahaan bulshada uu ka jiro dareen duug ah oo ka caaggan cilmiga casriga ah. Dareenkan duugga ah ee ka caagan cilmiga casriga ah waxaa dabada ka riixi kara dhaqanka qallafsan ee caanka ku yihiin xoola dhaqatada adduunka.

Qofka xoola dhaqatada ah badanaa uma sahlana in buug nin asaaggiis ah uu qoray in xoolo iyo waqti ku bixiyo waayo sidaas waxay muujinaysaa in laga xoog iyo xeelad badan yahay. Xoola dhaqatada badanaa kuma baraarugsana in xikmadda iyo xeeladda kaa maqan xoog iyo xoolo lagu bixiyo.

Ugu danbayntii, maktabadaha camiran iyo miisaska cidladaha waa billow wanaagsan haddii lagu baraarugo wax yeellada laga dhaxli karo magaca lagu mashquulsanyahay iyo mashaariicda aan macnaha lahayn. Sidoo kale haddii buuggaag ka tarjumaya baahida iyo xiisaha ardayda la keeno, waxaa macquul ah in miisaska cidlada ah ee maktabadaha soo camiri doonaan akhrisyataal raba in maskaxda ka xoroobaan.

# 70. Danbi-baarihii ila Dardaarmay

Mar aan dhageystay khudbad uu jeediyay madaxii hore ee nabad sugidda Soomaaliya mudane Sanbaloolshe ayaan soo xasuustay sheeko na dhex martay sargaal sare oo ka tirsanaa ciidankii nabad sugidda Soomaaliya muddo labaatan sanno ka badan laga joogo.

Waxaa la yaab igu noqotay in sheekadaas qiimaha badan aan si sahlan ku hilmaamo. Ma ahayn sheeko mudan in la illaawo marka la eego sida sargaalkaas deeqsi ugu ahaa ka sheekeynta waayo aragnimadiisa iyo aqoontii loo soo tabo baray.

Sargaalka asaga oo adeegsanaya aqoontiisa iyo waayo aragnimadiisa ayuu qaab cilmiyaysan u saadaaliyay amni xumada ugu daran ee ku soo fool leh Soomaaliya haddii aan la helin ciidan dhisan iyo cawil celin deg-deg ah.

Waxaa mudan in aan xuso xaaladdii iyo goobtii sababtay in sargaalka sheekadaas cilmiyeysan ila wadaago. Waxay ahayd maalin qoraxdu ay kulushahay oo badanaa ragga shaqo la’aanta ah ee magaalada Kismaayo jooga ku gaban jireen buushashka shaaha lagu cabo. Billowgii sannadihii sagaashamaadka, waxaa magaalada Kismaayo dhoobnaa saraakiil ciidaa ka badan oo aqoon dhab ah ka dhexlay qarankii burburay ama la burburiyay.

Shaqola’aanta iyo duruufihii adkaa ee magaalada ka jiray ayaa sababay, in aniga oo ahaa wiil yar oo waxbarashadii ka saaqiday iyo askari cid ku shaqeysata waayay si qalbi furnaan ah ugu sheekaysanno goob shaaha lagu cabo.

Maalintaas waxaa si kadis ah maqaayad aan fadhinney u yimid nin ay is garanayeen sargaalka ii sheekayn doona. Sida aan gadaal ka ogaan doono, ninka noo yimid wuxuu ahaan jiray saddex-xidigle hore oo ka tirsanaan jiray ciidamadii xooga dalka “Maliteriga.” Balse waqtigaas wuxuu u xuubsiibtay wadaad si dhuumaalaysi ah ugu tufa dumarka garoobada ah.

Qadar daqiiqado ah ayuu saddex-xidiglihii noo yimid ku boobsiiyay koob kulul oo shaah ah asaga oo noo sheegay in uu deg-dagsan yahay uuna ka daahey qado Islaan ardaydiisa ka mid ah ugu sameesay mid ka mid ah xaafadaha magaalada. Sargaalkii nabad sugida ahaan jiray ayaa weydiiyay saaxiibkiis in uu qadada u raaci karo iyo in kale, balse saddex-xidiglihii maliteriga ahaa ayaa ku jawaabey in qadadu tahay mid culumo soocan kaliya lagu marti soorey!

Markii uu naga tagey saddex-xidiglihii kitaab gaablowga u xuubsiibtay, ayaa sargaalkii nabad sugidda ahaa asaga oo qoslaya yiri: “haddii dawlad dhisan ay jiri lahayd, saaxiibkey waan xiri lahaa.” Waxaan u maleeyay in hadalkaas uu ka keenay xanaaq uu ka qaaday qadada looga cudur daartey. Balse intaas kuma uu ekaanine, sarkaalka wuxuu guda galey badweyn cilmi ah oo ku saabsan noocyada kala duwan ee danbiyada ee halista ku ah wadajirka, xasilloonida, iyo wada noolaanshaha bulsho kasta.

Si gaar ah wuxuu uga faallooday nooca danbi ee uu saaxiibkiisa saddex xidiglaha ah uu ku tuhmayo asaga oo isla markaana saadaalinaya in danbigan yahay midka loogu dawgali doono xasilooni darrida ku soo fool leh Soomaaliya mustaqbalka dhow iyo midka fog.

Sargaalka oo xasuusanaya waxbarashadiisii ku saabsanayd qaababka danbiyada loo baaro, ayaa guda galay sharrixida qaababka guud ee danbiyada loo kala qaado. Sida uu ii sheegay, guud ahaan danbiyada oo dhan waxaa loo kala qaybiyaa labo khaanadood" categories" oo kala ah: fal-danbiyeed" criminal act" iyo danbi-garasheed ama danbiyada la galo ayadoo la adeegsanayo garashada- "theoretical crimes." Danbiga garashada oo tababarkiisa u ahaa ayuu asaga oo aftalyaani adeegsanaya sidan ugu dhawaaqay- Kiriminaale Theory!

Danbiyada ugu halista badan ee la rabo in dawlad walba ama maamul kasta xil gaar ah iska saaro ayuu ku sheegay danbiyada laga galo garashada shaqsiga. Wuxuu xusay in dadka ku howlan danbiyada garashada (theoretical crimes) badanaa dadweynaha ku dhex baahiyaan been inta badan lagu beegsanayo burburinta nolsha shaqsiga iyo bulshada si shilimaad badan jeebabka looga buuxsado.

Tusaale ahaan, wuxuu xusay in saddex xidiglaha saaxiibkiis ah ee militeriga ahaan jiray uu faraha kula jiro danbi ku saabsan garashada. Wuxuu intaas raaciyay in saaxiibkiis asaga oo ka dhuumanaya busaarada ka jirta magaalada u xuubsiibtay kitaab gaablow dumarka masaakiinta ah ee magaalada ku dhibaataysan ku baarta been sida inuu yahay nin karaamaysan oo ku fiican tufta iyo tahliisha!

Wuxuu aad ugu dheeraaday duruufaha badanaa dabada ka riixa danbiyada garashada laga galo. Tusaale ahaan wuxuu sheegay in burburka dawladnimo iyo sharci la'aanta ay sababaan in bulshada lagu dhex arko dad badan oo ka ganacsada sheekooyin been ah oo ka halis badan fal-danbiyeedyada caadiga ah sida dhaca iyo dilka waayo sheekooyinkaas beenta ah ee bulshada lagu dhex baahiyay waxay badanaa barakac iyo burbur u horseedaan shacab dhan oo magaalo dagan halka fal-danbiyeedyada caadiga ah lagu beegsado shaqsiyaad kooban.

Sidaa daraadeed, sargaalka wuxuu sheegay in nabad sugidda dal walba xoogga saarto danbiyada laga galo garashada si amniga guud ee dalka iyo kala danbaynta loo ilaaliyo. markii aan dhageystay khudbadii mudane Sanbalooshe ayaan soo xasuutay hadalkii sargaalkaas. Tusaale ahaan mudane Sanbalooshe wuxuu sheegay in wiilasha masaakiinta ah ee fal-danbiyeedyada geesta ay ka daranyihiin kuwa bulshada beenta iyo khuraafaadka ku dhex baahiya ee haddana aaminsan in ay yihiin lama taabtaan!

Sargaalkii nabad sugidda ahaa asaga oo ila dardaarmaya wuxuu ii sheegay inta burburka iyo dawlad la'aanta lagu jiro in aad aan iskaga ilaaliyo in burcadda garashada sheeko been ku baartaan ama ku burburiyaan awoodda caqligayga. Dardaarankaas qiimaha badan waxaan ku xasuustay khudbadda qiimaha badan ee uu jeediyay mudane Sanbaloolshe mar uu ka hadlayay in la gaaray waqtigii dalka laga qaban burcadda badanaa sheekooyinka beenta ah ku baarta garashada qofka Soomaaliga ah.

## 71. Qado iyo Qarannimo

Qoraalkan wuxuu igu dhashay mar qado aan ka dalbanayay maqaayad ku taalla Jaamacadda Toronto. Intii aan qado doonanin ka hor waxaan ka fekerayay muuqaallada ku qarsoon doorasho madaxweyninimo oo ka dhacaysay Muqdisho. Markii aan miiskii qadada laga dalbanayay dul imid, ayaa waxaa hortayda ka muuqday muuqaallada qarsoon ee ay wadaagaan ama wadaagi karaan qadada, iyo qarannimada!

Muuqaallada qarsoon ee qadada iyo qarannimada waxaa hormuud u ah gaajo ama baahi. Haddii caloosha aysan mudaaharaadi lahayn baahi daraadeed, waqtigan la joogo ma soo qado doonteen. Sidaa si la mid ah, haddi bulshooyinka waqtigan casriga ah nool aysan ku baraarugi lahayn baahi ku aaddan maamul dadka ku hoggaamiya sharci iyo kala danbayn, qaran madax banaan lama noqdeen. Sidaa daraadeed, dareenka baahida ayaa ah muuqaalka ugu horeeya ee mudan in la dul istaago marka la sharraxayo sida ay qaraabo u yihiin qadada iyo qarannimada.

Haddii muuqaalkaas guud ee baahida laga soo tago, waxaa kuu muuqanaya qaybaha qadada iyo qarannimada u qaybsamaan. Sida aan ognahay qado waa magac guud oo tilmaamaya waxyaabo badan oo la isku walaaqay. Tusaale ahaan, qadadii aan qararamsaday waxaa loo kala qaadi karaa qaybo isku jira khudaar dhowr nooc ah iyo baasto la isku shiilay. Waxaa yaab leh, haddii la sii daawado muuqaallada qarsoon ee baastada, in ay muuqanayaan qabiilo dhowr ah oo raashinka ka tirsan oo ku midoobay magaca baasto.

Tusaale ahaan, baastada waxaa ku midoobay ukun, bur, saliid iyo biyo ka kala yimid qaybo kala duwan oo ka mid ah qaaradaha adduunka. Haddii baastada laga soo tago oo la dul yimaado khudaartii ka dhex qaylinaysay qadadii maanta, waxaa kuu muuqanaya dhowr nooc o ka mid ah laandheerayaasha khudaartda sida basal, yaanyo, barbarooni, iyo balaayo kale oo aynaan garanaynin!

Marka la daawanayo muuqaallada iyo qaybaha kala duwan ee qadada ka koobantahay waa in maanka lagu hayo ujeeddada guud ee qadada la iskugu walaaqayo. Waxaan ognahay sababta ugu weyn ee qadada loo karinayo ama loo

dalbaday in ay tahay in la iskaga laaluusho caloosha mudaaradaysa dabadeedna lala heeshiiyo baahida la dareemayo.

Ujeeddadaas haddii aan la garan waxaa dhici karta in lagu mashquulo qaybaha kala duwan qadada ka koobantahay. Waxaa laga yaabaa in saaxiibkay iyo aniga aan muran ka billowno cida mudan in laga caleemo saaro qabiilada qadada ka koobantahay. Tusaale ahaan, waxaa macquul ah in aniga aan caleemo saarto burka baastada laga sameeyay halka asagana ay kaga dhagto basasha isku ballaarisay bartamaha qadada. Haddii muranka sii socdo waxaa laga yaabaa in qadada naga qabowdo anagoo wali sidii u gaajaysan.

Sidaa si la mid ah, qarannimada waxay ka koobantahay dhowr qaybood oo qaab garbo siman ah u wada shaqeeya si loo helo maamul casri ah oo dadka ka saara baahida loo qabo kala danbaynta iyo sharciga. Tusaale ahaan, qaybaha ugu muhiimsan qarannimada waa baarlamaan sharciga dajiya, madaxdii maamulka iyo maxkamadihii sharciga ilaalin lahaa.

Nasiidarro, dhowr iyo afartankii sano ee ugu danbeeyay ummada Soomaaliyeed ma helin Qaran dhisan oo qaybihiisa kala duwan ay si siman u shaqeynayaan. Dhibaatadii dhacday waxaa lagu sawiri karaa dad gaajaysan oo ku murmay muhiimadda qaybaha kala duwan ee qadada ka koobantahay. Tusaale ahaan, waqti aad u dheer ayay Soomaalida ku dagaalameen cida madaxweyne noqonaysa ayagoo aaminsan in qaybta ugu muhiimsan qarannimada in ay tahay madaxweynenimada. Qaar qabiillada Soomaalida ka tirsan waxaa laga kari la'yahay jagada madaxweynennimada oo muddo labaatan sano ka badan la isku dilayay. Intii dagaalkaas uu socday waxaa la hilmaamay baahida guud ee qarannimada loo sameeyay oo ah in nolosha casriga ah aan looga maarmayn maamul iyo kala danbayn.

Berri waxaa dhici doonta doorasho madaxweyenimo oo rag badan u soo galeen dagaal dhiig ku daatay ama dhaqaalo badan lagu gubay. Haddii qarannimada dalka aysan u taagnayn ka jawaabida baahida guud ee shacabka Soomaaliyeed, madaxwene la doorto macno badan ma lahan waayo qarannimada waxay la mid noqonaysaa qado looga mashquulay cunideeda muran ku saabsan laandheeranimda basasha iyo baastada!

## 72. Barakada Obama iyo Abaabulka Bulshada

Madaxweyne Obama wuxuu ka mid yahay aqoonyahanka iyo khubarada wax laga weydiio marka ay timaado qaabka dad badan loogu abaabulo fahmida iyo u istaaga dan guud oo markaas aan lagu baraarugsanayn ama laga jiiftay. Shaqadii ugu horreysay ee Obama qabto waxay ahayd abaabule bulsho "Community Organizer."

Maadaama waayadan danbe bulshada Soomaaliyeed ku soo badanayaan hoggaamiyaal iyo aqoonyahanno ku mashquulsan qaabka ugu habboon ee bulshada loogu abaabuli karo dib u dhiska qarankii buburay, waxaan jeclaystay in akhristayaasha aan la wadaago nuxurka wareysi uu madaxweyne Obama ku sheegay afar qoddob oo sahli kara in si fudud dad badan loogu abaabulo dan guud (Public Interest).

Qodobka koowaad ee madaxweyne Obama xusay waa in dhallinyaradu adduunka laf dhabar u yihiin abaabul walba oo ku saabsan isbaddal bulsho. Obama wuxuu xusay asaga oo jalleecaya taariikhda fog iyo midda dhow, in hoggaamiyaashii horseeday isbaddaladii ku dhacay dhaqanka, dhaqaalaha iyo siyaasadda dunida in dhallinyaro u badnaayeen. Sidaa daraadeed dhallinayaradu waa shidaalka kaliya ee lagu dhaqaajin karo abaabul walba iyo dhaq-dhaqaaq kasta oo bulsho lagu badalayo!

Haddii qodobkan la dul istaago, waxaa muuqanaya in aqoonyahanka iyo hoggaamiyaasha Soomaalida ah ee ku mashquulsan abaabulka bulshada in ay haystaan fursad qaali ah maadaama aqlabiyada bulshada Soomaaliyeed yihiin dhallinyaro (75%). Sidaa daraadeed, abaabulka bulshada Soomaaliyeed waa in uu ka billowdaa kuna dhammaadaa in dhallinyarada loo abaabulo qiimaha qarannimada iyo foolxumada qabyaaladda!

Qoddoba labaad ee Obama ku xusay waraysigan waa in meel walba dunida maanta ay gaartay dabeesha Dimoqoraadiyada. Waxaa dunida maanta ku sii yaraanaya xukunka kaligii talisnimada waayo fekrad ahaan waqtigan la joogo ummadaha adduunka waxay ku qanceen in sharcinnimada xukunka loo soo celiyo shacabka " Democracy."

Sidaa daraadeed, Obama wuxuu aaminsanyahay in dabeysha Dimoqoraadiyada ee dunida ka socota ay sahli karto in waqtigan la joogo si fudud loo abaabulo dad badan oo doonaya in ay ka shaqeeyaan danta guud ee bulshada. Mar haddii uusan jirin ciriiri ka imaanaya maamullada dunida ka dhisan badankood, dadka waxaa loogu baaqi karaa abaabul cusub oo duruufaha taagan wax ka baddali kara.

Aqoonhanka iyo hoggaamiyaasha isbaddaldoonka ah ee Soomaalida waxaa u furan fursad ay si fudud bulshada ugu abaabuli karaan dib u dhiska

Qarannimada marka la eego Dimoqraadiyadda curdunka ah ee ka hana qaaday Soomaaliya iyo sida shacabka Soomaaliyeed ugu qanceen in sharcinnimada xukunka loo soo celiyo dhankooda.

Sidoo kale Obama wuxuu xusay in nidaamka Dimoqoraadiga ah uu dalbayo in siyaasad walba ama mashruuc kasta oo la doonayo in la meelmariyo loo hayo aqlabiyad taageerta. Haddaba abaabulka bulsho wuxuu noqday xirfad lama huraan ah marka la doonayo in la suuq geeyo aragti iyo mashruuc cusub.

Qoddobka saddexaad wuxuu Madaxweyne Obama in Internetka gaar ahaan baraha-bulshada kaalin weyn ka qaataan abaabulka bulsho ee lagu beegsanayo in xaalad markaas taagan wax looga baddalo. Marka la eego sida Soomaali badan u adeegsadaan baraha bulshada, hoggaamiyaasha doonaya in bulshada ku baraarujiyaan danaha guud waxaa u furan fursado qaali ah oo dadka si dhib yar loogu abaabuli karo.

Qoddobka ugu danbeeya oo ah qoddob aad muhiim u ah marka la abaabulayo bulsho ayuu Obama ku sheegay baahinta iyo adeegsiga sheekooyin ku saabsan shaqsiyaad bulshada ka mid ah oo dhibaaato ama dheef ka dhaxlay xaaladda markaas taagan waayo sheekada shaqsiyaadka way ka awood badantahay sheeko walba oo si guud loo sheego!

Bulshada Soomaaliyeed waxaa loo sheegi karaa sheekooyin ku saabsan shaqsiyadaad dadaalay oo aan isku dhiibin duruufaha markaas taagan kuwaas oo guulo la taaban karo ka gaaray nolosha. Tusaale ahaan faafinta sheekada ku saabsan guusha uu Ahmed Ismaacil ka gaaray waxbarashada asaga oo naafo ah waxay sahli kartaa in dhallinyaro badan oo ka niyad jabsan waddanka loo abaabulo in dalka wax badan oo hormar ah laga qabsan karo.

Ugu danbeyntii, aqoonyahanka iyo hoggaamiyaasha Soomaaliyeed ee daneeya in bulshada Soomaalida loo abaabulo danaha guud ee dalka iyo dadka wuxuu madaxweyne Obama u noqon karaa macallin ay ka bartaan cilmiga abaabulka Bulshada!

## 73. Qaladaadka Aqoonta Qallalan

Lagama sheekeyn karo sida aqoonta casriga ah " Science" loogu barwaaqoobay wixii ka danbeeyay markii garashada loo garaabay. Waqtigan la joogo meel kasta adduunka, waxaa laga bogaadiyaa sida aqoonta u tahay barako dadka kaga bogsan karaan dhibaatooyinka nolosha ku lammaansan.

Qoraalkan koobani, wuxuu isku dayi doonaa in aqristaha uu la wadaago aqoonta sidaa loo mahadiyay marka ay foolxumo iyo fashil ku noqoto nolosha caadiga ah ee dadka.

Siyaasadda iyo hoggaaminta oo ah xirfado si dabiici ah ama qaab kasbasho ah qofku ku baran karo, ayaa horseedda burbur iyo fool-xumo nololeed haddii aqoonta-qallalan "Academia " kaliya la adeegsado. Fool-xumadan ku timaadda siyaasadda iyo hoggaamintu waxay si ba'an uga muuqataa guud ahaan Soomaaliya, gaar ahaan deegaanka Dhul-Udug "Puntland" .oo dhawaantan ka hana qaaday maamul ay garwadeen ka yihiin aqoonyahanno qurbaha ka yimid.

Haddaba foolxumadii ugu danbeysay waxay dhacday markii ay isku dhaceen shacabkii Garoowe iyo siyaasi aqoonyahan ah oo si fiican u dhex dabbaashey laanta uu cilmiga ka bartay. Siyaasigan oo lagu magacaabo Dr Saadiq Eenow wuxuu ka mid yahay ragga faro ku tiriska ah ee Soomaaliyeed ee aqoonta dhabta ah leh. Aqoonta qallalan "Academia", waxaa u dheer Dr Saadiq Eenow in uu yahay, qoraa si xalladeysan fikradihiisa ugu gudbin kara dhigaalka Af-Soomaaliga. Ardayda sidaydoo kale ee jecel in hal-abuur sare ay ku akhriyaan Af- Soomaaliga, Dr Saadiq Eenow wuxuu u yahay macallin ay ka bartaan ereybixinta iyo farshaxanka qoraalka.

Warbaahinta Soomaalida waxaa laga baahiyay isbuucan odayaal dhaqameed iyo siyaasiyiin sheegay in ay matalaan shacabka Garoowe oo eed iyo dacwo u haysta Dr Saadiq Eenow. Nuxurka cabashada raggaas waxaa ugu muhiimsanaa in Dr Eenow uu qadaf iyo meel ka dhac u geystay shacabkii Garoowe ka dib markii uu ku tilmaamay in ay yihiin badow toorey isla dhacda marka ay qooqaan! In tolka xumaan laga sheego, ayaa ah meel ka dhac weyn iyo gef aan geedna loogu soo gabban marka wax lagu qiimeynayo dhaqanka Soomaalida.

Haddaba su'aasha isweydiinta mudan ayaa waxay tahay maxaa sababay in ay iska horyimaadaan oo hadalku ka taagtaagmo shacabkii Garoowe iyo siyaasi ku hubeysan aqoon dhab ah sida Dr Eenow oo kale?

Muddo laga joogo qarni ku dhowaad, su'aashan oo kale waxaa isku dayay in uu ka jawaabo caalimkii cilmiga bulshada "Sociology" Md. Marx Weber. Sidoo kale mudane Weber wuxuu ahaa Faylasuuf cilmiga siyaasadda looga danbeeyo " Political philosopher" Billowgii qarnigii labaatanaad waddanka Jarmalka waxaa ka jiray jahawareer ku saabsan fahamka xiriirka ka dhexeeya siyaasadda

casriga ah iyo aqoonta qallalan “Academia”. Mudane Max Weber wuxuu ka mid ahaa waagaas raggii reer Jarmal ee aqoonta lagu tuhmayay. Dad badan, ayaa aaminsanaa in aqoonyahanka looga fadhiyo farsamadii lagu hoggaamin lahaa siyaasaddii reer Jarmal oo waqtigaas ahayd mid cakiran.

Khudbaddiisii caanka ahayd “ Politics as vocation” ee uu u jeediyay ardaydii Jamaacadda “Munich University” sanadkii 1919kii, ayuu mudane Weber ku sharraxay qeexitaanka, macnaha, muuqaalka iyo shaqooyinka siyaasadda casriga ah ee qaran lagu hago.

Haddaba qaybta naga quseysa khudbaddaas, ayaa ah xiriirka ka dhaxeeya aqoonta- qallalan iyo fanka siyaasadda casriga ah. Weber, wuxuu aad ugu dheeraaday in qofka Siyaasiga ah laga doonayo in uu ku baraarugsanaado mas’uuliyadda ay leedahay culeyska hoggaamintu. Wuxu khudbaddiisa ku xusay siyaasiga in uusan ahayn aqoonyahan aqoontiisa-qallalan kaliya ku mashquula marka uu gudanayo xilka hoggaaminta. Siyaasiga dabiiciga ah wuxuu hoodo u leeyahay in fanka hoggaaminta u adeegsado farsamooyin isku dhafan si loo gaaro hiraalka ” vision” siyaasadeed ee uu higsanayo.

Sida uu sheegay mudane Weber, haddii ay dhacdo in qof siyaasi ah uu ku fashilmo fanka hoggaaminta waxay u badantahay in uu adeegsaday farsamo siyaasadeed laga soo dheegtay aqoon-qallalan, hal aragti, ama diin qudha. Baraarugga arrintani waxay u sahlaysaa in qofka siyaasiga ah uu yeesho dareen xilkasnimo oo ka tallaabsada aqoonta-qallalan ee loo tabobaray, aragtida la saxan markaas, ama diinta uu aaminsanyahay si loo hal-abuuro siyaasad guud oo bulshada kala duwan u cuntanta oo ay ku soo hiran karaan.

Tusaale ahaan, Dr Saadiq Eenow waa dhaqtar loo tabobaray in uu daaweeyo cudurrada ku dhaca dhimirka “Psychiatrist.” Haddii uu hoggaaminta iyo xilka uu hayo u adeegsado xirfaddiisa dhaqtarnimada kaliya. waxaa laga yaabaa in ay u muuqato in dadka Dhul-Udug, gaar ahaan shacabka reer Garoowe in ay dhimirka ka bukaan. Sidaa daraadeedna ay qasab tahay in tallaabo laga qaado badowda waalan ee tooreyda isla dhaca marka ay qooqaan!

Dhanka kale, waxaa laga yaabaa haddii uu Dr Saadiq Eenow ku baraarugsanaan lahaa dareenka xilkasnimo ee ku habboon siyaasadda carsiga ah, in uu wasaaraddiisa caafimaadka u dejin lahaa siyaasad lagu daweeyo dadka dhimirka ka xanuunsan ee reer Garoowe, ayadoon odayaasha iyo siyaasiinta waallan ama qooqan aan meel fagaare ah laga ceebayn!

Haddii uu ahaan lahaa dhaqtar madax bannaan oo aan xil hoggaamineed haynin, ma dhici lahayn in si weyn looga xumaado hadalka Dr Saadiq Eenow. Waxaa loo arki lahaa kaliya aqoonyahan qurbaha ku soo wareeray oo aflagaaadeynta ehelka ilbaxnimo ka raadinaya! Haddase ma ahan aqoonyahan madax bannaan, waa hoggaamiye hadalladiisa ama dareenka uu muujiyo laga dhaxli karo qal-qal

ama xasillooni siyaasaddeed. Waa dareenka la rabo in uu marwalba ku baraarugsanaado aqoonyahan walba oo siyaasadda casriga ah damac kaga jiro.

Aqoonyahannada Soomaaliyeed ee dhawaanahan siyaasadda soo galey, waxaa dhib ka haystaa muujinta dareenka xilkasnimo ee ku habboon xilka siyaasaddeed ee ay raadinayaan ama looba doortay. Dareenka hoggaamintu ma ahan mid aqoonta-qallan Academia lagu barto. Waa dareen ku yimaada si dabiici ama baraarug muddo badan la joogteeyay.

Burburkii dawladnimada ka dib, Soomaaliya waxaa soo marey saddex siyaasi oo dareenkan xilkasnimo siyaabo kala duwan u muujiyay. Saddexdaas siyaasi way alleysteen. Geerida saddexdaas siyaasi ka dib siyaasadda Soomaaliya, waxaa isku cayrsanayay wadaaddo iyo aqoonyahanno aan ku baraarugsanayn dareenka ku habboon siyaasadda carsiga ah.

Fahamka iyo guusha siyaasadda carsiga ah kuma xirna aqoon sare oo laga barto jaamacadaha waaweyn. Qofka siyaasiga dhabta ah waa in uu leeyahay mala'awaal maskaxeed "Imagination" oo sawir guud ka siin kara muuqaalka bulshada uu rabo in uu hoggaamiyo. Nasiib wanaag siyaasi dabiici ah oo sawirkan oo kale heli kara, ayaa mar loo magaacabay caasimadda Muqdisho, kaasoo lagu magaabo Muungaab.

Duqii hore ee Muqdisho mudane Muungaab, wuxuu muujiyay dareenka ku habboon xilkii loo magacaabay 2014-tii. Tusaale ahaan, khudbad si xamaasadaysan loo jeediyay, ayuu Muungaab qabiillada Muqdisho meel fagaare ah ugu sheegay in waqtigii bililiqada la soo dhaafey, lana joogo waqtigii magaalada caasimad noqon lahayd oo dadkii Soomaaliyeed dib ugu soo laaban lahaayeen. Khudbaddii uu jeediyay Muungaab wuxuu ku gaarey guul siyaasaddeed ah in uu isku xiro dareenka guud ee shacabka Soomaaliyeed iyo caasimaddii la bililiqaystay in ka badan labaatan sanno ka hor.

Aqoonyannada siyaasadda Soomaaliya la soo galey aqoonta-qallalan kaliya waxay cashar ku saabsan muujinta dareenka xilka hoggaamineed ka baran karaan mudane Muungaab. Haddii aysan casharkan baran mustaqbalkooda siyaasaddeed wuxuu ku danbeyn doonaa guul darro. Waaba aragnaa hadda saansaanta guuldaradaas. Tusaale ahaan, waxaan aragnaa madaxweyne Barofasoor ah oo iska qoslaya dadkii Soomaaliyeed oo dhibaataysan. Dhaqaalayahan madaxweyne ka ah maamul goboleed oo safar caano cabid ah hadba tuulo ku tagaya iyo dhaqtar wasiir ah oo xoola-dhaqatadii Soomaaliyeed bodow qooqday ku tilmaamay!

## 74. Qaab-dhismeedka Qalbiga Farmaajaysan

Inta aqoonta casriga ah aan la helin ka hor, waxyaabaha bulshadu la yaabto sida is-badalada qaabka deg-dega ah ku dhaca waxaa lagu fasiri jiray shirqoolo ay ka danbeeyaan awoodo qarsoon sida Jin deegaanka ku soo duulay ama sixir laga soo xawilay caalam aan la aqoon.

Soomaali badan oo aqoonta casriga ah aan ka warqabin ama ku qanacsanayn qiimaha aqoonta sayniska ayaa guushii lama filaanka ahayd ee mudane Farmaajo ku macneeyay faal iyo sixir lagu shirqoolay qalbiga qofka Soomaaliga ah. Qaar badan oo ka mid ah dadka sidan qaba waxay ku doodeen in Farmaajo uu yahay saaxir qatar ku ah sida loo xado qalbiyada xildhibaannada iyo bulsho-weynta Soomaaliyeed.

Maadama aadanaha ka soo gudbay waqtigii mugdiga ahaa ee faal ama sixir loo saarin jiray dhacdooyinka sida lama filaanka ah u dhaca, bulshada Soomaaliyeed waxay u baahanyihiin faallo cuskan aqoonta casriga ah oo si fudud u faah-faahin karta muuqaallada ku qarsoon qalbiga qofka Soomaaliga ah ee dar-alle iskaga farmaajaysan.

Qoraalkan oo ka shidaal qaadan doona aqoonta cilmi-nafsiga "Psychology" wuxuu qaada dhigi doonaa qaab-dhismeedka qalbiyada farmaajaysan ee ku nafisay guushii lama filaanka ahayd ee madaxweyne Farmaajo!

Laan ka mid ah cilmi-nafsiga oo lagu magacaabo kasmo-nafeeda bulshada " Social Psychology" ayaa aqoonyannada adeegsadaan marka la qaadaa dhigayo dareenka iyo dabeecadaha guud ee ka muuqda bulshada. Inta badan aqoonyahannada adeegsada cilmiga kasmo-nafeeda bulshada waxay xiriiriyaan dareenka qofka ka muuqda iyo muuqaalka guud ee bulshada. Waxayna ku doodaan in wanaagga iyo waalida qofka ka muuqda ay sidoo kale qaab wadareed uga soo daahiri karaan bulshada.

Tusaale ahaan, mudane Erich Fromm wuxuu ku xusay buuggiisa The Sane Society- bulshadii miyirika qabtay, in sida qofka shaqsiga u waasho in si la mid ah bulshaduna qaab wadar ah ugu waalan karto. Sidaa daraadeed, dhiraandhirinta muuqaallada ka muuqda bulshada sida qalbiyada farmaajaysan ee bulshada Soomaaliyeed ku soo badanaya oo kale waxaa loo cuskan karaa dhiraandhirinta qaab dhismeedka iyo dhaawaca u gaarka ah qalbiga qofka Soomaaliga ah.

Qofka Soomaaliga ah ee waqtigan jooga waxaa lagu saliday masiibooyin badan oo qoraal sidan oo kale u kooban aan lagu soo gudbin karin. Balse musiibada ugu weyn ee ku habstay qalbiga qofka Soomaaliga ah waa kalsooni xumo dhan walba saameysay. Qofka Soomaaliga maalintii uu dhashay ilaa saacadda uu ka

dhimanayo waxaa qalbigiisa lagu duqeeyay hub culus oo lagu beegsanayay kalsoonida naftiisa.

Hubka culus ee lagu duqeeyay kalsoonida qofka Soomaaliga ah waxaa badanaa laga soo daabulaa dhaqanka guud ee Soomaalida oo ah dhaqan ka dhashay nolosha qalafsan iyo dhaqaalaha liita ee Geeska Afrika. Dhaqankaas qallafsan inta badan wuxuu qalbiga qofka Soomaaliga ah kala dagaallamaaa inuu noqdo shaqsi hansare leh oo ku kalsoon in nolosha uu ka gaari karo himilooyin waaweyn.

Inta badan dhaqanka qallafsan ee bulshada Soomaaliyeed wuxuu qofka ku qasbaa in uu aragti gaaban yeesho waayo waqti badan looma hayo qalbi ku mashquula mala-awaalka mustaqbalka marka la eego duruufaha adag ee ka jira deegaanka. Sida uu ku dooday aqoonyahankii Soomaaliyeed ee cilmi-nafsiga mudane Daa'uud Ali, qofka Soomaaliga ah wuxuu badanaa ku mashquulsanyahay maanta maxaa cunaa iyo sidee doodda maanta socota aan la iiga raynin (Said Samatar, 2014).

Mashquulka noocan ah ee aan dhaafsiisnayn dhacdooyinka maalinlaha ah waxaa sabab u noqon kara dhaawaca qalbiga Soomaaliga ah ka soo gaaray dhibaatooyinka is daba jooga ah ee ka jira deegaanka iyo dhaqanka qalafsan ee la dagaalama kalsoonida nafta. Dhaawaca noocan ah wuxuu sii laba lixaadsaday wixii ka danbeeyay burburkii dalka dhacay.

Waqtigan la joogo qofka Soomaaliga ma ahan oo kaliya qof kalsoonidiisa dhaawacantahay, balse waa qof inta badan la dagaalama shaqsi kasta oo kalsooni ku baaqa ama ay ka muuqato qab Soomaalinimo. Tusaale ahaan, waxaan maalin walba aragnaa wadaaddo Soomaaliyeed oo aan ku kalsoonayn kartida dadkooda oo weerar ku ah aqoonyahannada ku baaqa in Soomaalinnimadii la soo nooleeyo ayada oo laga anba qaadayo xoojinta madaxbanaanida maskaxda qofka Soomaaliga ah.

Bulshada Soomaaliyeed oo dhan walba u niyad jabsan ayuu mudane Farmaajo u jeediyay baaq kalsooni ku abuuri kara qalbiga qofka Soomaaliga ah. Farriinta ugu weyn ee farmaajo gudbiyay ayaa ah in qofka Soomaaliga ah u noolaan karo si la mid ah sida ummadaha kale ee adduunka u noolyihiin. Sidaa daraadeedna Soomaalida looga baahan yahay in ay naftooda ku kalsoonaadaan ka dibna ay dhistaan dawlad soo celisa kalsoonidii guud ee bulshada.

Farriinta oo ah mid sixir uga daran qofka Soomaaliga ee la ildaran kalsooni xumada naftiisa ayaa soo dhufatay dhammaan qalbiyada Soomaaliyeed ee dar-alle iskaga farmaajaysan. Sidaa daraadeed marka la eego qaab-dhismeedka qalbiga farmaajaysan iyo farriintii uu mudane Faarmaajo gudbiyay, waxaa si

fudud ku ogaan karnaa in madaxweynaha Soomaaliya uusan ahayn saaxir ku soo duulaan tagay duulal Jinni ah!

Qofka Soomaaliga ah kama karti iyo dadnimo liito qofka Afrikaanka ah ee ku nool qaaradda madow. Kaliya qofka Soomaaliga ah waxaa ka maqan kalsooni guud oo ku qabi karo naftiisa iyo nolosha deegaankiisa. Kalsooni xumada noocan ah waa sababta kumanaan dhallinyaro oo Soomaaliyeed ah ku qasbaysa in baddaha isku biimeeyaan ama nolosha isku qarxiyaan!

Nolosha casriga ah ee waqtigan waxaa saldhig u ah shuruuc qoran oo lagu damaana qaadayo kalsoonida iyo karaamada qofka. Haddii Farmaajo ku guuleysto farriintiisa ku aaddan helitaanka dawlad sharci ku shaqaysa oo soo celisa kalsoonida iyo karaamada qofka Soomaaliga ah, waxaa hubanti ah in muddooyinka soo socda qaluubta Soomaalida iska farmaajaysnaan doonaan!

**Tixraac**:

Alla Bisaddu Basar Xumaa, Ma Soomaali Baa?” « Alas, Why is The Cat So Ill-Mannered, Is She Next of Kin To Somalis (Samatar, 2014) Wardheernews.com.

Stark, W., & Fromm, E. (1957). The Sane Society.

## 75. Dooddii Diyaaradda

Safarkaygii Geeska Afrika waxaan sii raacay oo haddana soo raacay diyaaradda Ethiopian Airline oo calanka u sida diyaaradaha Afrikaanka ah ee duulimaadyada caalamiga ah sameeya! Duulimaad toos ah oo Toronto illaa Addis Ababa ah ayuu safarkeennii ku billowday. Qof walba oo Afrikaan ah oo rakaabka ka tirsanaa waxaa farxad iyo faan ugu filnaa in dhammaan shaqaalaha iyo duuliyaasha diyaaradda wada yihiin dad madow oo caalamka duulimaadyada ee dunida cizi iyo sharaf ballaaran ku leh. Kursigii aan fadhiyay waxaa ila fadhiyay nin Soomaali ah oo ii sheegay in magaalada Ottawa ee dalka Canada uu ka soo safray.

Sheekada guud ee Soomaalida caanka ku yihiin marka laga soo tago, ninkii odayga ahaa ee i garab fadhiyay waxaa na dhex martay dood dheer oo dhinacyo badan taabatay. Tusaale ahaan, waxaa ka doodnay taariikhda Soomaalida, dhibaatooyinkii dhex maray Itoobiya iyo Soomaaliya; iyo waliba mustaqbalka geeska Afrika.

Waxaa xusid mudan jawigii doodda ku bilaabatay. Markii muddo kooban hawada aan ku jirnay ayaa gabdhihii Itoobiyaanka ahaa ee diyaaradda ka shaqeynayay billaabeen in raashin u qaybiyaan rakaabka. Gabadhii raashinka dhinaceenna ka qaybinaysay waxay ahayd qof dhuuban oo midabkeedu yahay maarriin dhalaalaya.

Aniga oo la dhacsan quruxda iyo dhoola caddaynta loo cuskaday xirfad aad u sarreysa- professionalism ee gabadha raashinka qaybinaysa nagu salaantay ayaa ninkii odayga ahaa ee i dhinac fadhiyay waxaan u sheegay in walaallaheen Itoobiya naga hormareen intii burburka aan ku jirnay. Waxaa laga yaabaa daqiiqadahaas in hormarka iyo dhoolaca caddeynta gabdhaha dhuudhuuban iskaga kay qaldameen!

Ninkii odaygaa ahaa oo muujinaya xushmad iyo xanaaq wada socda ayaa dhankayga u soo jeestay wuxuuna asaga oo hadalka hoos u dhigaya igu yiri: kuwaan waligood nagama hormarayaan haddii Soomaali aan nahay waayo waa dad qalbadda la' oo dhego xiran!

Aniga oo ka jawaabaya xaqiraadda laga soo xawilay dhanka odayga isla markaana ixtiraamaya aragtidiisa ayaan u sheegay in shacniga iyo wanaagga ka muudqa diyaaradda aan saaranahay marqaati u tahay hormarka Itoobiyaanka gaareen labaatan iyo dhowrkii sano ee la soo dhaafay.

Dhinac kale oo lama filaan ah ayuu ninkii odayga ahaa dooddii billowga ahayd u raray. Intii uu ogolaan lahaa ama diidi lahaa hormarka Itoobiya gaartay, ayuu wuxuu ku dooday in burburka iyo baalayada ku dhacday Soomaaliya in Itoobiya mas'uul ka ahayd. Doodda noocan ah ma ahayn mid igu cusub.

Waana dood caan ah marka la fiiriyo sida ay u fekeraan jiilkii ku barbaaray dagaalladii 1977 dhex maray Itoobiya iyo Soomaaliya. Odayga wuxuu sidoo kale sheegay in Soomaalida ka maskax badan yihiin dhammaan qawmiyadaha kala duwan ee Itoobiya.

Aniga oo la dhacsan sida odayga ugu weyntahay Soomaalinnimada isla markaana dhaliilaya xaqiiqada odayga xaqirayo ayaa ku jawaabay: hadalka noocan ah waxaan u fahmay faanka xoola dhaqatada caalamka caanka ku yihiin! Odaygii wuxuu i weydiiyay waligaa Itoobiya ma tagtay. Maya ayaan ku jawaabay.

"Haddaba marka Itoobiya aad tagtid ayaad rumeysan doontaa waxyaabaha aan ku sheegayo" sidaa waxaa yiri odaygii oo laga dareemayo in doodda uu ku daalay. Sheekooyin kale oo guud ayaa billownay sida nolosha guud ee Soomaalida Canada, gaar ahaan jaaliyadda reer Ottawa ee asaga uu ka soo jeedo.

## 76. Waalida iyo Wareerka Waddaniyiinta

Guud ahaan dadka oo dhan saddex qolo ayaa loo qaybin karaa. Qaybta hore waa rag iyo dumar aqoonta loogu qubeeyay oo ku sifoobay astaan ama calaamada ay caanka ku yihiin dadka caqliga leh. Astaanta qoladan waxaa horay u sheegay faylasuufkii wenyaa mudane Aristotle mar uu yiri: Ku madadaalashada ama koolkoolinta aragti ayadoonan la aqbalin ayaa ah calaamada lagu garto caqliga waxbartay " It is the mark of an educated mind to be able to entertain a thought without accepting it.”

Kooxda labaad ee dadka ka mid ah waa qolo qalbi xabxab ah oo iska caashaqsan dhammaan noolaha iyo nolosha kuwaas oo marba reero islaameed guryahooda ku hoyda. Halka qolada saddexaad lagu sheegay duul madax-faluuq qaba oo hadba sheekadii lagu shubto ku colaadiya dadka la nool iyo dadyowga dariska ah.

Qoraalkan wuxuu ku saabsanyahay kooxda saddexaad waayo waa aqlabiyada bulsho walba oo adduunka ku nool. Sidoo kale waalida iyo wareerka laga dhaxlay madaxfaluuqa qoladan ayaa badanaa xiiso gaar ah u yeela dhacdooyinka nolosha waayo la'aantood noloshu dhadhan ma yeelateen. Sidaa daraadeed, waxaa fiican in marwalba la isku baraarujiyo qaababka kala duwan ee qoladan isku abaabulaan ama u soo bandhigaan doqonimada uu Rabbi ugu deeqay. Inta badan Aragti magaceeda lagu sheegay Waddaniyad ayaa ah dalad ay ku midaysan yihiin doqomada oo sida aan soo sheegnay ah aqlabiyada bulsho walba. Haddaba waxaa fican in la qeexo waa maxay waddaniyad si loo qaada dhigo waaalida iyo wareerka waddaniyiinta.

Jiritaanka waddamo dadka ku kala qoqoban yihiin kuwaas oo xuduudo leh ayaa ah aragti casri ah oo dunida ka hana qaaday labadii qarni ee la soo dhaafay. Aragtidan badanaa waxay salka ku haysaa caqli xumada guud ee aadanaha uu kaga soocanyahay dugaaga waayo bani'aadamku waxaa lagu ibtiliyeeyay buufis iyo baqdin joogta ah oo waa hore habar-dugaagu ka bogsadeen. Sidaa daraadeed, baqdinta joogtada ah waxaa laga dhaxlay in dadku dagaalo lagu doonayo gumeysi isku baabi'iyaan dabadeedna qolo walba deyr dal lagu sheegay isku soo oodo.

Labadii qarni ee la soo dhaafay dadka caqliga leh iyo qolooyinka qalbi xabxabka ah waxay wadeen dadaal ah in cilmiga cusub iyo nolosha casriga ah looga bogsado cabsida iyo colaadaha ka danbeeya in dadku waddamo u dagaalamaan. Haddadan la joogo filinkaas Eey ayaa cunay waayo dunida casriga ah waxaa dul hoganaya daruuro mugdi ah oo ay ka da'ayaan dareen lagu sheegay waddaniyad iyo dal jecayl. Sida kor ku xusan bulsho walba waxaa ku badan dadka madax faluuqa qaba ee sida fudud sheeko walba loogu shuban karo.

Qolooyinka danaha siyaasadeed ka raadiya isku gacan qaadka iyo iska dhiijinta dadka ku nool waddamada kala duwan ayaa marmar suuqa siyaasadda soo galiya sheeko ah waddanka ha laga difaaco shisheeyaha!

Aqlabiyada madax-faluuqa qabta sheekadaas aad baa loogu shubtaa waayo taarikhda laguma sheegin bulsho aqlabiyadeedu ay ka badbaaday waalida noocan ah. Haddaba aqlabiyada bulsho walba waxay waddaniyadu ama dal jaceylku uga dhigantahay shaar ama dabo gaab la soo gashado marka la doonayo in boga iyo beerka la iska tumo. Soomaaliya oo ka mid dalalka ay ku badan yihiin waddaniyiinta waalan waxaa ka dhacay weeraro ba'an oo waddaniyiin kale oo gumeytayaal ah ku soo qaadeen. Sidoo kale waddaniyiinta Soomaalida ayaa qarnigii dhammaaday weeraro lagu hoobtay ku qaaday waddamo dariska ah.

Waalida waddaniyiinta waxaa ka mid ah in waddaniyiintu aysan dan iyo heelo ka lahayn nolosha iyo danaha dadka ku nool dalka ay jecelyihiin. Tusaale ahaan, waddaniga Soomaaliga ah wuxuu jecelyahay difaaca iyo u dagaalanka dalka Soomaaliya, balse haddii qof Soomaali oo dhibaataysan uu arko wuxuu waydiinayaa qabiilkiisa ama jufadiisa si qaaraan loogu aruuriyo. Dhanka kale waalida waddaniyiinta Soomaalida waxaa ka mid ah in ay jecel yihiin magaca Soomaaliya balse nolosha qofka Soomaaliga ah dan iyo heelo badanaa kama lahan.

Sida badan wali taariikhda Soomaaliya laguma hayo waddani u istaagay hormarinta siyaasad lagu hormariyo dhaqaalaha iyo nolosha qofka Soomaaliga ah, balse waxaa badan waddani dalka dagaal ku difaacay. Waalida noocan ah kuma koobna waddaniyiinta Soomaalida oo kaliya, balse waa waali ay la wadaagaan wadaniyiinta adduunka oo dhan.

Mar waxaa socday abaabul ay wadeen waddiniyiin Soomaali ah si dalka Soomaaliya looga difaaco Oromo soo galooti ah oo qaab habqan ah ugu soo qulqula magaalooyinka waaweyn ee dalka. Waxaa yaab leh in waddaniyiinta wareersan ee Soomaalida inaysan ku baraarugsanayn in Soomaali badan oo ka barakacay burburkii dalka ka dhacay inay ku noolyihiin dalalka dariska la ah Soomaaliya.

Qofka waddaniga ah badanaa wuxuu ku mashquulsanyahay difaaca magac maran sida aan kor ku soo xusnay. Tusaale ahaan, waqtigan la joogo nolosha qofka Soomaaliga ah waxay ku xirantahay nolosha dadka ku nool dalalka dariska ah balse waddaniyiinta Soomaaliyeed dan kama lahan nolosha qofka Soomaaliga ah, waayo waxay ku mashquulsanyihiin difaaca qaranimo waa hore lagu kala qaxay. Waddinnimada lagu colaadiyo dariska waa mid ka mid ah calaamadaha lagu garto waalida iyo wareerka ay waddiniyiintu adduunka caanka ku yihiin.

## 77. Dhaxalkii Xerownimada

Xerownimada oo ah qaab nololeed dhallinyaro badan oo Soomaaliyeed soo mareen ayaa waxaa laga dhaxlay wanaag iyo xumaan wada socda. Dad badan ayaa xoogga saaray in qoraallo laga sameeyo xumaanta iyo xaasidnimada laga dhaxlo nolosha Xerownimada. Waxaa aad u yar qoraalada tilmaamaya wanaagga iyo hormarka laga helay dhaxalkii xerownimada. Sidaa daraadeed waxaa habboon in la tilmaamo wanaagga iyo waxqabadka ay muujiyeen rag badan oo noloshoodii dhallinyaranimo ku soo qaatay qaab nololeedka xerownimada.

Maadaama aan soo maray nolosha xerownimada, waxaa fiican inaan qeexo erayga xerownimo si aan toobiyaha u saarno dhabaha qoraalka ku aroori doono. Waddamada iyo deegaanada sida xooggan looga taageero diimaha waxaa ka jira xiiso iyo xod-xodasho gaar ah oo loo muujiyo barashada diinta. Xiisaha iyo ixtiraamka diinta loo hayo daraadood, bulshadu waxay si gaar ah u qaddarisaa dumarka iyo ragga u banbaxa barashada diinta, dabadeedna waxaa loogu yeeraa xer u caleemo saaran in mustaqablka ay noqdaan culimadii diinta.

Nolosha xerownimada waxay inta badan ku xirantahay duruufaha guud ee ka jira deegaanka xerta ay ku xaraysantahay. Sidaa daraadeed xerownimada Soomaaliya waxay la soo jaanqaaday marxaladihii kala duwanaa ee dalka ka jiray. Taariikh ahaan, xertii hore ee diinta Islaamka ku baran jiray geeska Afrika, waxay kaalin weyn ka ciyaareen isbaddaladii siyaasadeed, kuwii dhaqan iyo dhaqaale ee ka dhacay Soomaaliya kontankii sano ee ugu danbeeyay. Sidoo kale buburkii dalka ka dhacay xertii diinta oo siyaabo kala duwan isku soo abaabulay ayaa ka qayb qaatay burburintii qaranimada iyo waliba dadaaladii lagu doonayay in dadka lagu heeshiisiiyo si dalka loo dajiyo.

Qoraallo aad u badan oo aan ka qayb qaatay ayaa lagu qaadaa dhigay qaybta ama kaalinta wadaaddadu ku leeyihiin burburkii dalka iyo dhibka waqtigan ka taagan waddanka. Doodaha lagu dhaliilayay wadaaddada waxaa ugu cod dheeraa dood ku baaqaysa in wadaaddadu ka dhiganyihiin dhagxaan aan la dhaqaajin karin marka ay timaado siyaasadaha casriga ah ee dunida looga dhaqmo waayo wadaaddu waxay u badanyihiin rag nolosha ka soo dhul bilaabay hanaanka xerownimada oo ah qaab nololeed xirxiran oo qofka xerowga ah u horseedi kara xirxirnaansho iyo xagjirnimo ay adagtahay in laga ilbaxo!

Waqtiyadan danbe, waxaa siyaasadda Soomaaliya ka soo muuqanayay caddeymo ka hor imaanaya doodda ka dhanka ah wadaaddada kuwaas oo muujinaya in nolosha xerownimada laga dhaxli karo maskax furan oo fahmi karta sirta iyo nuxurka siyaasadda casriga ah inay tahay sidii la isku ogolaysiin

lahaa danaha is diidan ee bulsho meel kuwada nool. Mid ka mid ah cadeymaha iyo xaqiiqooyinka ka hor imaanaya doodda ka dhanka ah wadaaddada ayaan habeen habeennada kamid ah la kulmay mar aan ka qayb galay xaflad loo sameeyay wadaad waqti aan dheerayn siyaasadda Soomaliya la soo galay ilbaxnimo iyo firfircooni lala yaabay.

Xaflad Toronto ka dhacday ayaa waxaa lagu soo dhaweeyay wasiirkii hore ee waxbarashada Puntladn mudane Cali Xaaji Warsame. Dadka siyaasadda la socda, safarka iyo soo dhaweynta Cali Xaaji Warsame waxay ula muuqatay dhoola tus siyaasaddeed uu wadaadka ku muujinayo damaciisa ku aaddan doorooshooyinka dalka ka dhici doona dhawaan.

Balse dadka daneeya arimaha bulshada iyo isbaddalada ka socda siyaasadda Soomaaliya, soo dhaweyntii Cal Xaaji Warsame waxaa uga muuqanayay sawir muujinaya wanaagga iyo waxqabadka wadaaddadu ku soo biirin karaan siyaasadda Soomaaliya waa haddii ay fahmaan in sirta iyo farsamada siyaasadda casriga ah ay tahay, dhisidda dawlad ay wadaagaan dad deegaan gaar ah dagan balse laga yaabo in ay ku kala duwan diinta, isirka, taariikhda, duruufaha nololeed iyo waliba danaha gaarka ah.

Inkastoo khudbadii Cali Xaaji Warsame ka jeediyay xafladdii Toronto ahayd mid aad u dheer oo dhinacyo badan taabanaysa, hadana dadka daneeya isbaddalada socda waxaa aad u soo jiitay mar u dul istaagay farsamada iyo fahamka laga doonayo siyaasiga jooga waqtigan casriga ah. Mar uu ka hadlayay qaladaadkii ay galeen wadaaddadii siyaasada ku soo dhalandhoolay, wuxuu sheegay in siyaasaddu aysan ahayn suuq u xiran koox gaar ah sida kooxaha daneeya in diinta u maraan damacooda xukun. Wuxuu intaa raaciyay in qofka siyaasiga ah laga doonayo inuu ku baraarugsanaado inuu hoggaamiye u yahay dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada oo ay ka mid yihiin kuwa tukada, kuwa aan tukan, fanaaniinta kuwa balwadaha leh ee marfishyada ku qayila iyo waliba qaybaha buufiska qaba!

Khudbadii uu jeediyay Cali Xaaji Warsame waxay ahayd mid aad u qurux badan oo ay ka muuqato aftahanimo iyo waliba wacyi aad u sarreeya oo sawir guud ka bixin kara waxqabadka laga doonayo siyaasiga doonaya in uu siyaasadda Soomaaliya wax ka baddalo.

Mudane Cali uguma horreeyo xerow ilbaxay oo ku baraarugay farsamayooyinka looga fadhiyo siyaasiga jooga waqtigan casriga ah. Tusaale ahaan madaxweynihii hore ee Soomaaliya Shiikh Shariif Shiikh Axmed oo ka mid ahaa dhallinyaradii ka soo dhulbilaabay nolosha xerownimada ayaa wuxuu muujiyay maskax furnaan ay ka yaabeen dadka jecel in nolosha marwalba dhan cusub laga eego.

Caddeymaha kale ee iska soo dabo dhacaya ee muujinaya guulaha uu gaari karo xerow ilbaxay waxaa ka mid ah waxqabadkii iyo wanaaggii uu muujiyay wasiirkii hore ee caddaalada mudane Faarax Sh. Cabudlqadir. Waxaa la sheegay in wadaadka wasiirka noqday uu ka soo jeedo qoys caan ku ah barashada diinta iyo nolosha xerownimada. Wareysi lala yeeshay wadaadka oo hadda ah xildhibaan ka tirsan baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayuu ku qaada dhigay siyaasadaha xasiloon iyo hormarka laga filan karo hoggaaminta wadaaddada ilbaxda ah.

Madaxweyne Madoobe ayaa sidoo kale laga hayaa caddeyntii ugu danbaysay ee muujinaysa waxqabadka iyo wanaagga uu horseedi karo hoggaamiye horay u soo maray nolosha xerownimada. Madaxweynaha Jubbaland oo ka ka mid ahaa wadaaddo madax adag oo dhana aan loo dhaqaajin karin ayaa la soo baxay maskax furnaan ay ku farxeen dhammaan dadka jecel in Soomaaliya loo horseedo siyaasad xasiloon oo isku soo jiidi karta danaha is diidan ee qabiillada Soomaaliyeed. Khudbad uu madaxweyne Madoobe ka jeediyay madashii caleema saarkiisa ayuu xoogga ku saaray in madaxda iyo siyaasiyiinta Soomaaliyeed laga doonayo inay muujiyaan maskax furnaan si looga baxo mashaqada dabo dheeraatay.

Waxyaabaha wanaagsan ee qofka xerowga ah uu nasiibsado waxaa ka mid layli adag oo nafta looga ilaaliyo in ay la mid noqoto sida laan geed ka laalaada oo hadba hawada dhan ula dheelisa. Layligaas adag ee laga dhaxlay nolosha xerownimada haddii lagu lamaaniyo maskax u furan aqoonta, diyaarna u ah fahmida isbaddalada ku yimaada nolosha, qofka xerowga wuxuu dhaxlaa shaqsiyad adag oo ka soo dhalaasha shaqo kasto oo loo diro. Wadaaddada iyo dhallinyarada Soomaaliyeed ee soo maray nolosha xerownimada haddii ay muujiyaan maskax furnaan lagu fahmi karo siyaasada casriga ah iyo faa'idada ku jirta wada noolaanshaha, waxaa hubanti ah in noloshoodii xerownimada ay ka dhaxli doonaan shaqsiyad lagu badbaadin karo dalka iyo dadka.

## 78. Libintii Laangabyada

Laangaabnimda ayaa ah xaqiiqo dabiici ah oo si muuqata ama qaab dadban ugu lamaansan nolosha iyo noolaha. Marka la eego silsilada taxan ee taariikhda aadmiga, dhaqankasta, qolo kasta, iyo aragti walba oo loo arko in ay yihiin laangaab “minority” waxaa lagula kici jiray bahdilid iyo xadgudub joogta ah. Taariikh ahaan, Laangaabnimada waxaa lagu barbar waday halgan iyo harjad joogteysan oo loo galay sidii looga badbaadi lahaa tacadiga iyo xadgudubka ka yimaada qolooyinka markaas muruqa iyo tiradu u hiilisay. Waqtigan la joogo, halganka laangaabyadu wuxuu noqday mid libin caalami ah laga gaarey, gaar ahaan wadamada galbeedka.

Guusha ugu tolmoon ee mudan in loo dabaal dago ayaa ah in isirrada, diimaha, iyo waliba dhaqamada laga tirada badan yahay heleen sharci adag oo ilaaliya xuquuqda asaasiga ah ee qofka ayadoon la eegaynin laangaab iyo laandheere midka uu yahay. Inta badan, dhaqamada iyo dadyowga wali u nool sida habar dugaagga ayaa ku guul daraystay in ay joojiyaan tacadiyada lagula kaco dadka laga tirada badan yahay. Dhaqamadaas waxaa safka hore uga jira dhaqanka Soomaalida iyo kan Carabta oo ah dhaqamo ka-ab ka-ab illaa abooto xaawo u taagnaa bahdilka iyo barakicnta dadka laga itaal roonyahay.

Nasiib wanaag, qolooyinka iyo kooxaha muruqa iyo tirada ku awood sheegta ee dhaqamadaas ka soo jeeda waxaa qabta sharciga dabiiciga ah “Natural Law” ee u taagan u caqli celinta iyo caabinta noolaha iyo nafleyda awoodda is bida. Tusaale ahaan, geedaha yar-yar ee laangaabyada ah marka ay cadceeda iyo hawada ka xiraan geedaha dhaadheer waxaa u hiiliya dabeylo mar soo dhac ah oo baararka iyo salka ka rifa geedaha dhirirka ku faana ee isbaarada u dhigtay cadceeda iyo hawada ay u baahnaayeen geedaha kurtunka ah si ay u koraan.

Dabaylahan waxay u taagan yihiin sharciga dabiiciga ah ee nolosha aan looga maarmin. Sida la ogyahay burburkii dalka ka dib qabiillada tirada iyo awoodda is biday ayaa barakicin, layn iyo waliba bahdilid kula kacay qabiillada dhaqanka Soomaalida ku suntay “Laangaabnimada.” Markii caqliga shaqeeyn waayay oo xooggagii awoodda lahaa u dhaqmeen sidii dugaaggii, waxaa si kadis oo lama filaan ah ku shaqeeysay gacanta qarsoon ee hagta sharciga dabiiciga ah “Natural Law” ee aan kor ku soo xusnay.

Qoraalkan kooban wuxuu sahmin iyo saadaalin ugu dhaqaqi doonaa jihooyinka lama filaanka ah ee laga dareemi doono libinta laangaabyada Soomaaliya. Sidoo kale qoraalka wuxuu bogaadin iyo baaq u soo jeedin doonaa raga iyo dumarka laangaabyada ah ee hoggaanka u haya guushan foolanaysa! Waxaan ognahay in qabiillada sheegta in ay laandheere yihiin in ay ku fashilmeen siyaasadda Soomaaliya ka dib muddo dheer oo ay ku soo jireen loolan siyaasaddeed loo adeegsaday layn joogto ah iyo barakicin baahsan. Intii xasuuqa nacasnimada ah socday, qabiillada yar yar ee Soomaaliya waxay u qaybsameen qaar duco iyo habaar maciin biday, kuwo qaxay iyo qaar badan oo waddanka ku haray ayagoo muujinaya baraarug lagu daabey dadaal si ay uga faa’ideystaan fursadaha siyaasadeed ee mustaqbalka furmi kara.

Nasiib wanaag, sannadii 2000 waa tii uu Ismaaciil Cumar Geelle – madaxweynaha Jabuuti abaabulay shir la sheegay in Soomaalida ay ku u heeshiinayaan. Baaqii Ismaaciil Cumar Geelle waxaa laga dhexlay shirkii ugu shaactirada badnaa ee soo mara taariikhda siyaasaddeed ee Soomaaliya. Shuruudhihii shirkaas waxaa buuxin karey qof walba oo Soomaali ah oo daneenaya madal uu si fudud uga sallaxan karo qado iyo qayilaad bilaash ah. Sidoo kale dumar iyo rag badan oo nolosha ku caajisay ayaa u sheeko iyo qaraaxo doontay shirkaas.

Shirkii Carta wuxuu ka dhignaa dabeyl dabiici ah oo baararka ka riftay awoodda laandheerayaasha siyaasadda Soomaaliya. Intii shirku socday, ayaa rag iyo dumar iskugu jiray qaar marqaansan iyo kooxo iska qiiraysan waxay si fudud qalinka ugu duugeen qaacido saldhig u noqon doonta halbeega awood qaybsiga siyaasaddeed ee qabiillada sida nacasnimada ah isku xasuuqey. Ayadoo la adeegsanayo halbeega caanka ah ee afar iyo bar waa tii la guda galey in qabiillada laga soo xulo xubnihii noqon lahaa baarlamaanka Soomaaliya.

Burhaanta awoodda dabiiciga ah ayaa si fudud u soo shaac baxdey Intii lagu guda jiray xulitaanka xubnaha baarlamaanka ee shirkii Carta. Raggii iyo dumarkii loo soo xuley in ay matalaan afarta qabiil ee mala-awaaley in ay laandheere yihiin ayaa noqday dad tayo iyo karti ahaan aad u liita marka ay timaado farsamada iyo baraaruga looga baahanyahay siyaasadda casriga ah. Dawladdii kacaanka oo si xun ula dagaalantahay garashada madaxa banaan iyo sharafta shaqsiga iyo dagaalladii awoodaha loo adeegsaday ayaa lagu tilmaami karaa sababaha dhaxalsiiyay tayo xumada iyo karti darrida xubnahii qabiillada afarta ahaa u matalay baarlamaankii Carta.

Dhanka kale, dumarkii iyo raggii u galay baarlamaankii Carta qabiillada la sheegay in ay laangaab- yihiin .05 ayaa ahaa xubno caafimaad qaba caqli ahaan iyo dareen ahaan oo si uun uga badbaadey waalida iyo nacasnimada qabiillada waaweynka lagu sheegay. Arrintan waxay horseeday in xubanaha baarlamaanka ugu jira laangaabyada noqdaan siyaasiyiin ku baraarugsan barakada ay leedahay adeegsiga siyaasada casriga ah.

La yaab ma lahan kala duwanaashaha garashada xubnana baarlamaanka ee qabiillada muruqa sheegta iyo xubnaha qabiillada looma ooyaanka ah. Waxaa jirta xaqiiqo cilmi nafsi ah oo muujisa xiriirka ka dhaxeeya adeegsiga caqliga iyo itaal darrida ka muuqata jirka ama nolosha qofka. Tusaale ahaan waxaan ognahay in dumarku ka xeelad iyo siyaasad badan yihiin ragga waayo raggu siyaasad badan uma baahna mar haddii muruqooda u shaqeynayo. Sidoo kale Curudka reerka waxaa badanaa ka caqli badan yaraanka oo noloshiisa ku dabara xeelad uu kaga badbaado nacasnimada curadka. Sidoo kale aadanaha wuxuu ka caqli badan yahay maroodiga waayo maroodigu uma baahna caqli lagu mashquulo marka ay timaado maareynta noloshiisa mar haddii uu haysto muruq iyo itaal ku filan.

Haddaba xubnihii qabiillada waaweyn u galey baarlamaanka shirkii Carta kuma ay mashquulin dajinta siyaasaddo casri ah oo loo kaashaday garashada si nabad iyo dawladnimo loogu soo dabaalo dalka iyo dadka waayo waxay si hoose "unconscious" u rumeysnaayeen in awoodda qabiilka ku filan tahay oo aan qarannimo loo baahneyn. Sidaa daraadeed shaqadii xubinnimada baarlamaanka waxay u adeegsadeen qayilaad, shaxaad iyo in hadbda xaafad laga soo qadeeyo.

Shirkii Carta oo iska ahaa madal maalmo laga soo qadeeyay, laga na soo saxay qayilaadda iyo shaxaadka si looga baxsado busaarada Geeska Afrika ka jirta ayaa ka dhigan libinta ama guusha ugu weyn ee laangaabyada Soomaaliya siisay fursad ay siyaasadda Soomaaliya ugu soo xaluushaan ayagoo garasho iyo dadnimo ku hubeysan.

Tobankii sanno ee ugu danbeeay ee dalka dibada looga keenayay dawladihii isdaba jooga ahaa ee lagu soo dhisay qaacidada Afar iyo bar (4.5) ayaa waxaa si kedis ah loogu baraarugay in xubinihii baarlamaanka ee qabiillada laga tirada badanyahay la soo baxeen firfircooni iyo feejignan siyaaddeed aan marnaba laga filanynin. Cidna loogama sheekeynayo calaacalkii iyo cabaadkii ka baxey qabiillada waaweyn marka ay ku baraarugeen in siyaasaddii waddanka ay u gacan gashey dumar iyo rag ka soo jeeda qabiillada lagu suntay laanbaagnimada. Calaacalkaas waxaan ka xasustaa siyaasi hebel waa Sakiin ama waziir hebel waa Topaz!

Libinta laangaabyada waa mid mudan in la hanbalyeeyo. Hormarka dalka walba ama dad walba waxay ku xirantahay sida loola dhaqmo dadka laga tiro badanyahay. Dadka laga tiro badan yahay ee laangaabyada ah ma ahan oo kaliya wax ku salaysan qabiil ama dagmo. Tusaale ahaan dumar iyo rag faro ku tiris ah oo Soomaaliyeed oo aan aqaano waxay jecelyihiin in falsafadda u kaalmeystaan noloshooda. Waxaan oganahay in falsafadda iyo dadka la sheekaysta ay laangaab yihiin marka la eego dhaqanka Soomaalida oo badanaa ku saleysan waali iyo waa layiri! Soomaali badan ayaa si uun laangaab ah u ah. Haddii aad ka badbaadid laangaabnimada qabiilka, macnaheedu ma ahan in aadan laangaab ahayn.

Sida daraadeed waxaa habboon in la taageero guusha laangaabyadu ay ka gaareen siyaasadda Soomaaliya mar haddii aan la hubin in mustaqbalka adiga ama carruurtaada noqotaan dad si uun looga tiro badanyahay dhaqanka Soomaalida. Sharci madani ah oo si fiican loo soo diyaariyay ayaa ah sida kaliya ee laangaabyadu ama dadka laga tiro badan yahay u heli karaan awood ilaalisi xuquuqdooda.

Sida la wada ogyahay waqtigan la joogo waxba gacanta uguma jiraan qabiillada awoodda isbiday ee qarannimadii ku burburiyay damac guracan oo loo cuskaday dhaqan badownimo ah. Dalka iyo dadka Soomaaliyeed maanta waxaa ku loollamaya quwado caalami ah oo u qaybsan aragagaixiso carabaha laga soo dhoofiyay iyo afrikaan qalbiga iyo ludda ka madow oo reer galbeedku soo kiraysteen. Sidaa daraadeed, laangaabyada waxay haystaan fursad qaali ah oo lagu hormarin karo sharciyada iyo xeerarka dalka lagu dhaqi doono mustaqbalka marka ay naga guuraan balaayada dalka iyo dadka isku haysta.

Haddii la dajiyo xeerar casri ah oo difaaca xuquuqda shaqsiga waxaa hubanti ah in qofkasta heli doono caddaalad ilaalisa xuquudiisa asaasiga ah. Xaqa shaqsiga oo la ilaaliyo waxaa laga dhaxlaa nabad iyo barwaaqo waayo iridda laga galo

cadaabta nolosha ayaa ah caddaalad darrada lagula dhaqmo qofka ayadoo la cuskanayo laan dheere iyo laangaab midka uu yahay! Sid ka muuqata saansaanta siyaasadda dalka, laangaabyada Soomaaliya waxay soo wadaan guul lagu barwaaqoobi doono oo caddaalad iyo nabad horseedi doonta. Sida la filayo, libinta laangaabyada ee la gaaray waxay beenin doontaa maahmaada been abuurka ah ee dhahda" laangaab labo jeer ayaa la cadaabaa aakhiro!

## 79. Farmaajo iyo Foolxumeynta Federaalka

Facebook waxaa ka daawaday Madaxweyne Farmaajo oo madaxda maamul goboleedyada ku ceebaynaya damac ay ku doonayaan in caalamka wareegaan si madaxda adduunka ula kulmaan. Tusaale ahaan Farmaajo wuxu yiri "Madaxweyne maamul goboleed muxuu kala kulmayaa Salva Kiir ka South Sudan." Hadalka Farmaajo wuxuu daaha ka qaadayaa tuhun weyn oo ah in dawladda hadda jirta si hoose uga soo horjeedo nidaamka Fedearaalka ee Soomaaliya ka hana qaaday.

Madaxweyne Farmaajo wuxuu asaga oo is moodsiinaya u bareeray in la foolxumeeyo faa'idooyinka u gaarka ah ee nidaamka federaalka ee dawladda Soomaaliya ku dhisantahay. Sidaa daraadeed, hadalka madaxweynaha waa in lagu raddiyo caddeymo muujinaya in madaxda maamullada federaalka ee adduunka si madax bannaan ula kulmaan madaxda caalamka si loo xaqiijiyo faa'idooyinka nidaamka federaalka.

Tusaale ahaan, sida sawirka hoose ka muuqata, Islaan madax ka ahayd maamul goboleedka Ontario ee dalka Canada ayaa sannadkii 2017-dii la kulantay madaxweynaha dalka Ukrain si ay ugala hadasho danaha ka dhaxeeya Ontario iyo dalka Ukrain.



Kulanka noocan ah qatar kuma ahayn qarannimada Canada, waayo nimaadka federaalka ee Canada ka jira wuxuu qabaa in maamul goboleedyada wixii hormar ah kala xiriiraan dawladaha caalamka. Kulamada noocan ah waxay ka mid yihiin faa'idooyinka u gaarka ah nidaamka Federaalka.

Marka tusaalahan laga soo tago, waxaa mudan in la is weydiiyo maxaa sababaya in madaxweyne Farmaajo u bareero foolxumeynta faa'idooyinka u gaarka ah nidaamka federaalka ee Somalia?

Waxaa jira tuhun weyn oo ah in ay jiraan kooxo badan oo aaminsan in si dadban loo fashiliyo nidaamka federaalka ee Soomaaliya ayada oo lagu marmarsiyoonayo waddaniyad wareersan.

Kooxaha doonaya in nidaamka Federaalka la fashiliyo waxay iskugu jiraan labo koox. Qoloda koowaad waa dad aaminsan in qabiilladooda ay ku qadi doonaan wax qaybsiya nidaamka Federaalka halka qolada labaad yihiin jiilkii ku soo barbaaray waqtigii kacaanka kuwaas oo aaminsan in la guulwadeeyo oo qof kaliya loo nacamleeyo marka ay timaado xukunka iyo siyaasadda dalka.

Waxaa macquul ah in madaxweyne Farmaajo uu ka mid yahay jiilkii ku soo barbaaray waqtigii kacaanka kuwaas oo ku indho qaaday talada dalka oo qof kaligii taliye ah loo dabo fariisto. Jiilka noocan ah waxay aad u jecelyihiin guulwadeynta iyo waddanniyad dadka lagu wareeriyo mararka qaarna dalalka dariska ah lagu weeraro.

Foolxumeynta iyo fashilinta nidaamka federaalka wuxuu soo maray labo marxaladood oo kala duwan. Marxaladdii ugu horreysay waxay ahayd in maxkamado islaami ah la adeegsado si loo fashiliyo dawladdii ugu horreysay ee damacday in nidaam federaal ah dalka laga hirgaliyo.

Mashruucaas markii u fashilmay, waxaa billowday barnaamij kale oo lagu damacsanaa in duminta nidaamka federaalka loo maro u tartamida jagooyinka ugu sarreeya ee talada dalka ka dibna halkaas laga fashiliyo ama lagu faraxumeeyo nidaamka federaalka.

Tobankii sano ee ugu danbeeyay, talada dalka waxaa ku guuleystay siyaasiyiin ka mid ah labadii qolo ee horay aan u soo xusnay ee damacsanaa in nidaamka federaalka lagu fashiliyo kursiga ugu sarreeya dalka dushiisa. Tusaale ahaan, Farmaajo ka hor waxaa talada dalka gacanta ku hayay siyaasiyiin aaminsan in qabiiladooda ku qadi doonaan qaab qaybsiga nidaamka federaalka.

Qoladaas markii uu waqtiga ka dhammaaday, waxaa talada la wareeragay koox u badan carruurtii ku barbaartay kacaankii kaligii taliska ahaa ee bulshada ku barbaariyay guulwadeynta iyo in shaqsiga markaas talada haya kabo qaad loo noqdo.

Qoladan danbe waxay adeegsadaan waddaniyad shacabka lagu wareerinayo taas aan lahayn hiraal fog "Vision" oo dib u yagleeli karta dimoqraadiyaddii la afduudaby sannadkii 1969 kii. Badanaa guulwadayaasha waxay soo tashaan shaarar dhowr nooc ah marka shacabka la wareerinayo. Shaarkii ugu danbeeyay ee hadda soo tashadeen waxaa la ii sheegay in loo bixiyay Nabad iyo Nolol.

Ugu danbeytii, waxaa fiican in madaxweynaha Soomaaliya laga wacdiyo foolxumeynta faa'idooyinka u gaarka ah nidaamka Federaalka ee dawladdiisa lagu soo doortay. Madaxweynaha waa in uu fahmaa in shacabka Soomaaliyeed ka soo daaleen kacaannimo iyo guulwadeyn. Sidaa daraadeed, waxaa la joogaa waqtigii la baahin lahaa nidaam hoos ka dhis, iyo kor u dhis ah oo awoodda dawladnimo lagu gaarsiinayo dhammaan gobollada dalka si loo wada xaqiijiyo dhammaan faa'idooyinka nidaamka Federaalka!

## 80. Garashada iyo Gefafka Guulwadayaasha

Maalmahan waxaa si kedis ah baraha-bulshada uga billaabatay dood ku saabsan guulwadeynta ka socota siyaasadda guud ee dalka Soomaaliya. Akhristayaal badan ayaa iga codsaday in dooddan ku saabsan guulwadeynta qaab cilmiysan loo dhiraandhiriyo, lagana dhaafo kaftanka hooska tuurka ah.

Haddii doodda qaab cilmiyaysan loo guda galayo waxaa fiican in la qeexo erayga guulwadeyn, dabadeedna doodda lagu gorfeeyo cilmiga siyaasadda iyo taxanaha taariikhda nolosha. Marka laga hadlayo cilmiga siyaasadda, erayga ugu macnaha dhow guulwadeyn waa "populism." Marka cilmiga siyaasadda la baranayo, erayga "populism" waxaa lagu qeexaa siyaasad taageero looga raadsado dadka caadiga ah ee la daalaa- dhacaya duruufaha adag ee dalka ka jira waqtigaas la joogo.

Marka shacabka caadiga ah taageerada laga raadinayo, siyaasiyiinta adeegsada siyaasadda guulwadaynta "populism" waxay isku muujiyaan dad fahamsan ama u damqanaya duruufaha iyo danaha u gaarka ah dadka aan ku faraxsanayn xaaladda dhaqaale iyo midda siyaasadeed ee markaas taagan.

Taxanaha taariikhda waxaa ku xusan dhaq-dhaqaaqyo siyaasadeed oo adeegsaday siyaasadda guulwadeynta "populism." Qarnigii dhammaaday waxaa dunida ka hana qaaday nidaamyo badan oo ku dhisan guulwadeyn "populims" kuwaas oo afganbiyay maamullo horseed ay u ahaayeen hormuudka bulshada " elite."

Siyaasadda cuskan guulwadeynta "populism" waxay ka billaabataa shacabka caadiga ah oo laga horkeeno dadka hormuudka u ah dalka sida dadka dhaqaalaha, siyaasadda iyo aqoonta ku haga bulshada dabadeedna shacabka loo sheego haddii qoladaas laga takhaluso ama xukunka laga qaado in la gaari doono dawladnimo wanaagsan oo u taagan danta dalka iyo dadka.

Siyaasiyiinta suuqa siyaasadda ku soo gala baaqyada guulwadeynta "populism" waxay ogyihiin in dadka caadiga ah ee shacabka u badan in ay ku xun yihiin ama ka xanaaqsanyihiin xaaladda dhaqan- dhaqaale iyo marxaladda siyaasadeed ee dalka ku suganyahay waqtigaas la joogo.

Garashada noocan ah ayaa siyaasiyiinta adeegsada guulwadeynta waxay u saamaxdaa in bulshada caadiga ah si fudud loo abaabulo dabadeedna laga horkeeno sida aan horay u soo sheegnay hormuudka bulshada. Siyaasadda guulwadeynta waxay ku billaabataa kacaanno dalka ka curta kuwaas oo shacabka loogu qaybinayo qayb cadow ku ah qaranka iyo qolo qaranka ka badbaaniyaysa cadowga gudaha iyo dibadda.

Siyaasiyiintii ugu danbeeyay ee guulwadeynta noocan ah ku caano maalay waxaa ka mid ah madaxweynaha dalka maraykana mudane Trump.

Qarnigii dhammaaday, dunida waxaa ka curtay kacaanno badan oo hormuud u ahaayeen rag askar u badnaa kuwaas oo siyaasadda ku soo galay guulwadeyn " populims" lagu afganbiyay maamullo lagu eedeeyay musuqmaasuq iyo maamul xumo. Gefka ugu weyn ee guulwadayaasha galaan waxay tahay kala qaybinta shacabka iyo baahinta been ku baaqaysa in kaligood shacabka ka badbaadin karaan marxaladda qallafsan ee waqtigaas dalka ku sugan yahay.

Shacabka caadiga ah ee lagu indho sarcaadiyay siyaasadda guulwadeynta waxay aamminaan in madaxda kacaanka markaas curtay yihiin macsuumiin cirka laga soo caleemo saaray kuwaas oo dalka iyo dadkaba u horseedi doona barwaaqo. Sidaas marka shacabka loo indho sarcaadiyo, siyaasadda guulwadeynta waxay guda gashadaa in si gaar ah loo ugaarsado hormuudkii bulshada kuwaas oo loo qaybiyo qaar la dilo, qolo xabsiga laga buuxiyo iyo qaar badan oo la tarxiilo.

Dhaammaadkii qarnigii dhamaaday markii burbur lama filaan ah ku yimid dawladdii Soviet ka, waxaa hoos u dhacay siyaasadda guulwadeynta adduunka. Waxaana la guda gulay falanqaynta iyo faallaynta casharrada laga baran karo garashada iyo gefafka u gaarka ah siyaasadda guulwadeynta.

Casharadii laga bartay siyaasadda guulwadeynta iyo kacaannadii soo maray dunida qarnigii labaatanaad waxaa ka mid ah: billowga hore guulwadeynta waxay bulshada u abaabushaa hormar aysan qayb ka ahayn hormuudka bulshada. Hormarkaas oo badanaa ku dhisan qaab iskaa wax u qabso ah waxaa garwadeen ka noqda dadkii caadiga ahaa ee suuqyada laga soo aruurshay.

Muddo kooban gudahood, hormarkaas wuxuu noqdaa sida hal bacaad lagu lisay oo kale. Sheekada yaa maali jiray marka ay gaarto oo loo baahdo aqoon cuskan waayo-aragnimo iyo farsamo ku qotonta xikmad dadka caadiga ah ee suuqyada laga soo aruuriyay si ay u guulwadeeyaan way ku fashilmaan howlaha iyo shaqooyinka waaweyn ee Qaranka.

Fashilka noocaas ah marka uu yimaado, dawladnimadii iyo kacaankii muddo lagu soo guulwadeeyay waxaa laga dhaxlaa dawladnimo lagu dhaco hantida dadweynaha, warbaahin dadka been u sheegta, maxkamado musuqmaasuq ku shaqeeya oo sharciga aan ilaalin iyo kaligii talisnimo lagu diidan yahay xornimada fekerka iyo hannaanka dimoqoraadiyadda. Intaas waxaa dheer qofkii xumaantaas ka dhiidhiya oo lagu tilmaamo khaa'inul waddan lagu xukumo dil iyo xabsi daa'in.

Gefafka kor ku xusan waxaa wadaaga dhammaan kacaannadii dunida soo maray ee ay abaabuleen siyaasiyiintii aaminsanayd siyaasadda guulwadeynta "populism." Soomaaliya waxay ka mid ahayd waddamadii lagu soo tijaabiyay siyaasadda guulwadeynta. Muddo kooban Soomaaliya waxay gaartay hormar la taaban karo oo dadka caadiga ah hormuud u ahaayeen. Balse nasiib darro, sida

taxanaha taariikhda ku xusan, guulwadeyntii Soomaaliya waxaa laga dhaxlay guuldarro dhashay in soddon sano dawlad la'aan la noqdo.

Sidaa daraadeed, siyaasiyiinta talada dalka haya waqtigan la joogo waxaaa laga doonayaa in ay wax ka bartaan taariikhda siyaasadda guulwadeynta ee adduunka. Siyaasiyiinta dawladda nabad iyo nolol waa in aysan guulwadeyn ayaga oo ka faa'idaysanaya duruufaha haysta dadka caadiga ah. Waa in ay aad uga fogaadaan iska horkeenka shacabka iyo dadka hormuudka u ah dhaqaalaha iyo siyaasadda dalka. Waa in ay ku baraarugsanaadaan in xaaladda qallafsan ee dalka ka jirta iyo dib-uheeshiisiinta loo baahanyahay lagu xaqiijin karo oo kaliya marka dhammaan qaybaha kala duwan ee shacabka iyo siyaasiyiinta Soomaaliyeed ka wada qayb noqdaan hannaanka dawladnimo ee dalka iyo dhammaystirka dastuurka federaalka ee dawladda hadda jirta lagu soo doortay.

# Cutubka Afaraad: Diinta Islaamka iyo Fahamka Nolosha

## 81. Bandhiga Diinta iyo Duruufaha Bulshada!

Badanaa diinta iyo duruufaha bulsho walba u gaarka ah siyaabo kala duwan ayay isku saameeyaan. Tusaale ahaan, qaabka diinta loogu soo bandhigo bulshada ama loo baro dadka waxaa inta badan dabada ka riiixa xaaladaha dhaqan dhaqaale ee ka jira deegaanka lagu noolyahay. Isa saameynta diinta iyo duruufaha ka jira deegaan walba waxaa sida badan lagu qaadaa dhigaa cilmiga-bulshada oo si gaar ah u daneeya mowduucan.

Qoraalkan wuxuu is dul taagi doonaa xiriirka ka dhaxeeya duruufaha u gaarka ah bulshada Soomaaliyeed iyo siyaabaha kala duwan ee diinta Islaamka loogu soo bandhigo ama loo baro qofka Soomaaliga ah. Qoddobka ugu weyn ee qoraalkan ku doodi doono ayaa ah in badanaa wadaaddada Soomaaliyeed ee wacdiya aysan ku baraarugsanayn xiriirka ka dhaxeeya baahida guud ee bulshada iyo soo bandhigida diinta.

Aqoonyahanka cilmiga bulshada "sociologists" waxay badanaa xoogga saaraan in ay mala-waalaan muuqaalka guud ee bulshada ka dibna cilmi baaris ku sameeyaan waxyaabaha markaas dadku ku mashquulsanyihiin ama ku midaysanyihiin. Diinta iyo siyaabaha loogu dhaqmo ayaa ka mid ah arimaha muhiimka ah ee dhaqanka bulsho kasta tiir dhaxaadka u ah; waana taas baa la dhihi karaa sababta ka danbaysa in aqoonyahanka cilmiga bulshada si gaar ah u daneeyaan kaalinta diinta ka ciyaarto qaab dhismeedka guud ee bulshada.

Tusaale ahaan, Emile Durkheim oo ka mid ah raggii dhidibada u taagay cilmiga-bulshada ayaa buuggiisii caanka ahaa- Muuqaalada asaasiga ah ee nolosha diimaysan " The Elementary Forms of the Religious Life " ku qaada dhigay in diintu ka dhigantahay tiirka asaasiga ah ee bulsho kasta ku taagantahay. Mudane Durkhiem wuxuu diinta ku qeexay asaga oo cuskanaya qawaacida cilmiga-bulshada sidan: diintu waa hannaan ama qaabdhismeed isku dheelitiran oo qeexaya waxyaabo la aaminsanyahay ama lagu dhaqmo kuwaas oo cuskan qoddobo muqaddasaad ah " sacred" kuwaas oo si gaar ah loo qiimeeyo.

Qaabka mudane Durkheim u qeexay diinta ayaa badanaa aqoonyahanka cilmiga bulshada adeegsadaan waayo muuqaallada bulshooyinka waxaa ku hoos qarsoon qoddobo gaar ah oo bulsho kasta u aragto barako ama muqaddas lama taabtaan ah. Waxyaabaha ama qoddobada muqaddaska ah halka ay ka yimaadeen asal ahaan iyo dhabnimadooda badanaa cilmiga bulshada kuma

mashquulo; kaliya aqoonyahanka cilmiga bulshada waxay diiradda saaraan xiriirka ka dhaxeeya muqaddasaadka iyo muuqaalka guud ee bulshada.

Tusaale ahaan, waxay u kuurgalaan kaalinta iimaanka iyo cibaadaadka ka cayaaraan wada jirka bulshada iyo waxqabadka guud ee aan looga maarmin duruufaha ka jira deegaanka bulshadu ku sugantahay. Mudane Durkheim mar uu dul istaagay qoddobkan wuxuu ku doodday in baahida ka muuqata nolosha qofka shaqsiga ah badanaa qasabto in bulshadu noqoto hanaan guud oo qof walba ku hagta ama u tilmaanta waxyaabo muqaddasaad ah oo barako laga heli karo si nolosha qallafsan ee deegaanka ka jirta loogu yara dulqaato.



Sida uu ku doodayo mudane Durkhiem, shaqada ugu weyn ee diin walba laga doonayo ayaa ah inay fududayso in bulshadada qaab wada jir ah u wayraxaan "Collective effervescence" ayaga oo si joogta ah u kulmaya si ay u dareemaan barakada ku duugan waxyaabaha muqadasaadka ah. Tusaale ahaan, salaadaha jamaacada ah ee masaajidda lagu oogo marwalba waxay bulshada muslimka ah u sahli karaan in si wada jir ah u dareemaan jiritaanka iyo ku xirnaanshaha Ilaaahay, isla markaana qaab wada jir ah ugu midoobaan duruufaha ka jira deegaanka iyo baahida guud ee bulshada.

Maadama bulshada Soomaaliyeed muslimiin yihiin, waxaa mudan in su'aal cuskan cilmiga bulshada la iska weydiiyo kaalinta diinta Islaamka ka cayaari karto wada jirka iyo dib-uheeshiisiinta bulshada Soomaaliyeed. Tusaale ahaan waxaa la is weydiin karaa wadaaddada Soomaaliyeed ma ku baraarugsanyihiin in qaabka diinta loo soo bandhigayo iyo baahida guud ee bulshadu xiriir ka dhaxeeyo?

Badanaa wadaaddada Soomaaliyeed kuma baraarugsana mas'uuliyadda ka saaran in soo-bandhigidda diinta u cuskadaan duruufaha iyo baahida u gaarka ah bulshada Soomaaliyeed. Wada jir la'aan iyo nabad galyo xumo ayaa ah duruufaha u gaarka ah bulshada Soomaaliyeed meel kasta oo dunida ay kaga

noolyihiin. Baraaruga la'aanta ku aaddan baahida guud ee bulshada Soomaaliyeed waxay sababtay in wadaadada Soomaaliyeed u dhaqmaan sida carab dharagtay oo kale.

Tusaale ahaan, waxaad arkaysaa wadaad Soomaali ah oo qamiis qurxoon oo qaali ah ku dhex wata waddan burburay oo dadkiisu baahanyihiin. Haddii aadan arag wadaad u dhaqmaya sida carab dhargay oo kale, waxaad la kulmaysaa wadaad sida carabtii oo kale u xanaaqsan oo dad masaakiin ah ku qaylinaya ama isku qarxinaya. Wadaaddada kaliya ma ahan kuwa aan ku baaraarugsanayn baahida guud ee bulshada Soomaaliyeed u qabaan nabadda iyo wada jirka waayo waxaa jira rag iyo dumar bartay aqoonta-qallalan oo meelaha ku qayila kuwaas oo garashada uga garba duuban dhaqamada u gaarka ah reer galbeedka.

Wadaadadu waxay aqoonyahanka wareersan kaga duwanyihiin musuqmaasuqa diintii dadka u midayn lahayd danahooda guud iyo duruufaha ka jira deegaanka. Tusaale ahaan, waqtigan adag waxay ahayd in wadaaddada soo bandhigaan waxyaabaha muqadasaadka ah ee diinta ku baaqday sida wada jirka iyo walaalnimada guud ee Soomaalida u gaarka ah. Baaqa noocan ah waxay bulshada Soomaaliyeed uga bogsan karaan buufiska iyo qalbi xumada ay ka qaadeen qalaalasaha iyo dagaalada muddada dheer lagu soo jiray.

Nasiib darro badanaa wadaadada waxay ku mashquuleen soo bandhigida qaybaha diinta u qoondeesay dagaallada iyo daandaansiga kuwaas oo waqtigan la jooga aan looga baahnayn Geeska Afrika. Sida badan, nolosha qofka Soomaaliga waligeed waxay ahayd mid ku dhisan halgan iyo harjad joogto ah. Qofka Soomaaliga ah uma baahna in waqtigan la baro Jihaad diin cuskan waayo waligiis wuxuu kusoo jiray jihaad joogto ah oo lala galo jifooyinka ay is hayaan. Sidaa daraadeed, wadaadada Soomaaliyeed waxaa la gudboon in diinta ka baaraan jihaad ka duwan midkii lagu qaaday abuu-jahal oo kale si xabbada iyo qaraxa socda xoogaa looga xasilo.

Waxaan ognahay in waqtigan la joogo dadka Soomaaliyeed faqri iyo faro marnaan ba'an faro kulul ku hayaan. Waxaa aad u badan dadka Soomaaliyeed ee maqaadiirtu u qorsheeysay in ay noqdaan sabool suxud saaxud ah. Haddaba waxay ahayd in wadaaddadu diinta ka baaraan baaqyo ku aaddan sidii bulshada loogu dhiira galin lahaa wax soo saarka iyo shaqada. Inta badan wadaaddadu waxay soo bandhigaan qaybaha diinta u qoondeesay in nolosha iyo shaqada adduunka aan lagu mashquulin oo aakhiro loo shaqaysto.

Waayadan waa tii odaygii malakul-mowt ahaa Soomaali badan si qasab ah aakhiro ugu tarxiilay. Sidaa daraadeed, waxaa la qiyaasi karaa in Soomaalida badankeed xiiso iyo niyad u hayn nolosha aakhiro. Haddaba wadaaddada waxaa laga doonayaa in ay ku baraarugsanaadaan soo bandhigidda qaybta diinta u qoondaysay guulaha laga gaari karo nolosha

adduunka. Tusaale ahaan, wadaadaddu waxay bulshada u sheegi karaan in la gaaray waqtigii la dhisi lahaa dawlad casri ah oo ka madax banaan muranka wadaaddada.

Waxaa aad u badan tusaalayaasha muujiya in wadaaddada aysan ku baraarugsanayn xiriirka ka dhaxeeya baahida guud ee bulshada iyo soo bandhigida diinta. Marka la eeggo baahida waqtigan bulshada Soomaaliyeed u qabaan nabad iyo xasillooni, wadaaddada Soomaaliyeed waxaa ku waajibaya in xirfadooda soo bandhigidda diinta u cuskadaan duruufaha adag ee hadda jira. Wadaadadu waa in bulshada la wadaagaan sida ay muqaddas u tahay wada jirka iyo walaalnimada ummada Soomaaliyeed maadama diintu tahay hanaan ama qaabdhismeed isku dheelitiran oo qeexaya waxyaabo la aaminsanyahay ama lagu dhaqmo kuwaas oo cuskan qoddobo muqadasaad ah.

**Tixraac:** The Elementary Forms of the Religious Life (1912)

## 82. Sumcadda Islaamka iyo Su'aalaha Sayniska

Waxaan mar booqday Matxafka Taariikhda Sayniska ee Jaamacadda caanka ah ee Oxford. Intii aan dhex wareegayay matxafka waxaan ku arkey qayb dhan oo loo gaaryeelay kaalinta iyo taariikhda Islaamka ka qaatay hormarka cilmiga Sayniska. Taariikhda qoran waxay xusaysaa waqti dunida Islaamka loo soo doonan jiray sayniska iyo culuumta casriga ah. Tusaale ahaan sannadihii u dhaxeeyay 900- 1200 AD, ayaa ah waqti dahabi ah- golden age oo saynisku si fiican uga bullaalay dunida muslimka. Waqtigaas muslimiinta ayaa ahaa hormuudka guud ahaan hal-abuurka iyo cilmiga sayniska.

Qoraalkan wuxuu ku saabsanyahay doodaha cilmiga ah ee ku saabsan sumcadda diinta Islaamka ku leedahay hormarinta sayniska. Sidoo kale qoraalka wuxuu dul istaagi doonaa doodaha cilmiga ah ee ku aaddan sababaha ka danbeeya dib u dhaca dhanka cilmiga sayniska ah ee waqtigan ka jira dunida muslimka.

Waxaan ognahay waqtiyadan la joogo in dunida muslimka aad uga danbeeyaan hormarka laga gaaray aqoonta sayniska. Tusaale ahaan, cilmi baarisyadii sayniska ahaa ee Jaamacadda Harvard kaliya ay soo saartay sannadkii 2005 ayaa ka badnaa dhammaan cilmi baarisyadii ay soo saareen toddobo iyo tobanka waddan ee carabta oo la isku daray (Economist, 2013).

Aqoonyahannada waqtigan joogaa qaar baa ku doodda in diinta Islaamka iyo Sayniska si lama filaan ah col iyo cadaawo u noqdeen; balse dooddaas waxaa daaqada kala baxaya taarikhda qotoda dheer ee Islaamka iyo sayniska ee aan ku soo arkay matxafka Jaamacadda Oxford. Taariikhdan waxay muujinaysa in muslimiinta hadda ka hor qaab miyir qab ah maskaxdooda ugu fureen fursadaha

laga heli karo falsafadda iyo aqoonta Sayniska. Tusaale ahaan, magaalooyinka Baqdaad, iyo Dimishiq ayaa ahaa magaalooyin loo soo doonan jiray culuumta kala ah caafimaadka, xisaabta iyo cilmiga beeraha muddadii u dhaxeysay 900-1200 AD. Haddaba su'aasha is weydiinta mudan ayaa ah maxaa qaldamay oo daaqada kala baxay hormarkii sayniska ee dunida Islaamka ka hanaqaaday?

Aqoonyahanno badan oo u jeeddooyin kala duwan leh ayaa isku dayay in su'aashan qaab cilmi ah uga jawaabaan. Tusaale ahaan, Muzaffar Iqbal ayaa buuggiisa Sayniska iyo Islaamka"Science and Islam" ku qaada dhigay saddex marxaladood oo Islaamka iyo sayniska isla soo mareen.

Marxaladda koowaad wuxuu mudane Muzaffar ku sheegay in ay bilaabatay waqti ku beegan qarnigii sideeddaad. Waana markii si fiican falsafadda iyo sayniska looga soo dhaweeyay dunida islaamka. Waqtigaas qaaradda yurub waxaa ka jiray aqoon darro iyo dagaalo faraha looga gubtay oo qaaradda ka dhigay deegaan mugdi ah.

Marxaladda labaad waa waqtigii reer Yurub mugdiga ka baxeen oo murqaha la soo baxeen si ay u adoonsadaan ummadaha kale. Waqtigan waxaa dunida muslimka soo booqday aqoonta sayniska oo ku daaban gumeysigii reer Yurub. Halka marxaladda saddexaadna bilaabatay wixii ka danbeeyay bartamihii qarnigii labaatanaad oo ku beegan waqtigii waddamo badan oo muslim ah xornimada ka qaateen waddamada gumeysigii reer Yurub.

Saddexda marxaladood ee mudane Muzaffar ku doodday in Islaamka iyo Sayniska isla soo mareen, waxaa ku hoos qarsoon in Sayniska marwalba marti ama kooyto ku ahaa dunida muslimka. Haddii si fiican loo sii guda galo taariikhda muslimiinta iyo sayniska waxaa kuu soo baxaya in qaybo badan oo xisaabta ka mid ah in ay ka hanaqaadeen dunida muslimka. Sidaa daraadeed doodda mudane Muzaffar ma ahan dood dhamaystiran.

Waxaa jira dooddo kale oo qaba in muslimiinta iyo sayniska waligood isku dhibanaayeen. Aqoonyahanada dooddan soo bandhiga waxay ku doodaan in su'aalaha sayniska is weydiiyo yihiin kuwo ku qotoma xaqiiqooyinka ka muuqda nolosha iyo deegaanka dabiiciga ah- positive statements, halka su'aalaha diinta islaamka badanaa ku mashquusho u badanyihiin su'aalo ku saabsan waxyaabo la sheegay in ay fiicanyihiina ama xunyihiin sida xaaraan iyo xalaal oo kale – Normative statements.

Tusaale ahaan sayniska wuxuu ka jawaabaa su'aalaha cilmiga ah- positive statement sida: waa maxay sababaha dabiiciga ah ee danbeeya dhul-gariirada ka dhaca qaybo ka mid ah dhulka? Aqoonyahannada qaba in islaamka iyo sayniska isku dhiban yihiin waxay qiil ka dhigtaan in qarnigan la joogo qaar badan oo ka mid ah culimada fiiskiska ee reer Pakistan aaminsayihiin in dhul-gariirada ka dhaca gobollo ka tirsan Pakistan sababeen danbiyo xaaraan ah sida galmo iyo tumasho lagu dufoobay- Normative statements.

Dhanka kale, waxaa jira dood kale oo aqoonyahanka qaar soo gudbiyaan taas oo ku doodaysa in Islaamka iyo Sayniska dhibaato sidaa u buuran u dhaxeynin. Aqoonyahanka sidan ku doodaya waxay qabaan in buuqa iyo is qab-qabsiga ka dhex socda sayniska iyo diinta islaamka ay ka danbeeyeen duruufo gaar ah oo la soo darsay muslimiinta iyo wadaaddo wareersan oo dhaawacay sumcadda Islaamka ku dhex leeyahay kacaanka casriga ah ee culuumta sayniska. Aqoonyahanka doodda noocan ah qaba waxay soo qaataan dhacdooyin taariikhi ah oo sababay dib u dhaca muslimiinta ka muuqda marka ay timaado hormarka sayniska.

Tusaale ahaan, arrimo ay ka mid yihiin burburkii ku yimid qarnigii 13aad hannaankii iyo hormarkii laga gaaray beerashada, weeraradii dunida muslimka ay ku soo qaadeen Mangooliyiintii, qalalaasihii iyo is qabqabsigii siyaasadeed ee muslimiinta ka dhex dhacay iyo soo shaac bixiddii kooxo mayal adag oo aan u dul-qaadan karin kala duwanaanshaha fikirka diinneed ayaa tilmaamay in ay sababeen in hormarkii sayniska ee dunida muslimka hakad galo!

Dhanka kale ragga qaba aragtida ah in duruufo adag oo la soo darsay muslimiinta daaqadda kala baxeen dadaaladii sayniska ee socday waxay ku sii daraan dood kale oo lagu duqeynayo qaar ka mid ah culumaa'udiin ilbax ah oo muslimiinta u soo baxay Qarnigii 11aad. Ragga sida weyn loo duqeeyo ayadoo lagu eedaynayo in ay isbaaro u dhigteen hormarkii sayniska ee dunida muslimka ka socday waxaa ka mid ah Caalimkii diinta ee lagu magacaabi jiray Hamid Muhammad al-Ghazali. Mudane al-Ghazali wuxuu noolaa sannadihii u dhaxeeyay 1059-1111 AD.

Doodaha loo haysto caalimka weyn ee al-Ghazali waxaa ugu culus in uu adeegsaday farasamooyinkii aqoonta falsafadda asagoo isbaaro u dhiganaya faa'idooyinka u gaarka ah falsafadda. Tusaale ahaan buuggiisa caanka ahaa is diidka falaasifada wuxuu ku weeraray su'aalaha iyo weydiimaha cilmiga ah ee sayniska kaga jawaabi karo xaqiiqooyinka ka muuqda nolosha iyo deegaanka dabiiciga ah.

Aqoonyahanka weerara oday al-Ghazali waxay ku doodaan in muslimiinta waa hore reer galbeedka kula tartami lahaayeen in doodaha falsafadda ku tijaabiyaan farsamooyinka casriga ah ee Sayniska –scientific inquiry kuwaas oo lagu kala soofo runta iyo beenta haddii aysan jiri lahayn isbaarada uu dhigtay Shiikh al-Ghazali. Waa eed aad u culus oo u baahan in si caddaalad ah loo qaada dhiho.

Waxaan soo ogaanay doodaha ugu waaweyn ee laga qabo dib-u dhaca aqoonta sayniska ee ka muuqda dunida muslimka. Haddii doodahaas kala duwan la is bar-bar dhigo, waxaa ugu miisaan culus doodda ku baaqaysan in Islaama iyo Sayniska dhibaato sidaa u buuran aysan ka dhex aloosnayn marka la eego

taariikhda qotoda dheer ee muslimiinta isla soo mareen hormarintii sayniska. Sida ku cad taxanaha taariikhda, dhibaatooyinkii dhacay qarniyadii 11aad illaa 12aad iyo waliba soo shaac bixii wadaaddo xoogaa wareersan oo diinta Islaamka ka dhigtay dukaan ay ku ganacsadaan ayaa ah sababaha ugu waaweyn ee ka danbeeya laangaabnimada ka muuqata Sayniska marka la joogo dunida muslimka.

**Tixraac:** Iqbāl, M. (2007). *Science and Islam*. Greenwood Publishing

## 83. Is Bar-Bardhig: Diinta iyo Shaqsiyadda Qofka

Dadka waxaa si guud loogu sheegay muhiimadda iyo doorka ay diintu ku leedahay abaabulka iyo ababinta shaqsiyadda hoose ee qofka. Inta badan waxaan la isku raacsanyahay in barashada iyo ku dhaqanka diintu tahay sida kaliya ee lagu soo saari karo dad ama bulsho ay dadnimadooda iyo shaqsiyadooda hoose ay dhisan tahay. Dhan kale waxaa jirta aragti diinta cuskan oo ku doodaysa in samayska shaqsiyadda iyo dunta hoose ee qofka ay halbeeg u tahay hadba sida uu qofka u fahmo ama ugu dhaqmo diinta. Qoraalkan kooban wuxuu si cilmiyaysan u soo gudbin doonaa doodda ah in fahamka diinta magan u tahay samayska dunta hoose ee shaqsiyadda iyo damiirka qofka. Aragtidan waxaa ku kaabi doonaa tusaaleyaal badan oo laga soo dheegtay muuqaalka ay diinta qiimaha badan ee Islaamka ku dhex yeelatay bulshada Soomaaliyeed wixii ka danbeeyay bur-burkii qarannimada.

Mar haddii doodda aan soo gudbinayno ay tahay mid diinta ku saabsan, waxaa fiican in aan ka dhul-bilowno daliil diinta cuskan si aan toobiyaha u saarno dhabaha uu qoraalka ku aroori doono. Waxaa jira xadiis caan ah oo laga soo wariyay Nabi Muxamed NNKH.

Suubbanaha wuxuu noo sheegay, muslimiinta waxaa ugu akhiyaarsan oo ugu macquulsan qofkii akhiyaar ahaa xilligii aysan diintu soo dagin ka hor oo dadku ay juhalada ahaayeen. Si aan uga faa'idaysanno xikmadda qiimaha badan ee xadiiskan ku duugan waxaa fiican in aan guda galno tusaalayaal cilmi ah. Cilmiga casriga ah ee cilmu-nafsiga ayaa wuxuu soo bandhigay xaqiiqooyin yaab leh oo ku saabsan samayska dunta hoose ee shaqsiyada qofka.
Cilmi baaris dheer ka dib waxaa la ogaadey in ay jiraan boqolaal nooc oo ay u kala baxaan sameyska dunta hoose ee shaqsiyadda qofka. Waa cilmi bad ah oo u baahan in si dagan loo dhex-dabaasho, balse waxaan ku kaaftoomaynaa qayb kooban oo si weyn u ifinaysa xikmadda qiimaha badan ee Nabi Muxamed la wadaagay muslimiinta afar iyo toban qarni ka hor.

Baaritaan dheer ka dib, culimada nafsiga iyo kuwa cilmiga-bulshada waxay ogaadeen in shaqsiyadda qofka ay ku xirantahay barbaarintiisi hore, gaar ahaan sida qofka loo soo barbariyay shanta sano ee noloshiisa ugu horraysay. Dhanka cilmu nafsiga, ninkii ugu horreeyay ee ku baraarugay xaqiiqadan waxa magaciisa la dhihi jiray Sigmund Freud. Sida uu mudane Freud ku doodayo, shanto sano ee ugu horraysa noloshaada waxaa samaysmaya dunta hoose ee isku xiri doonta nooca qofeed ee aad noqonaysid inta noloshaada ka dhiman. Tusaale ahaan, haddii nasiibku kuugu dhaco waalid ku daryeela oo si habsami leh kuu xanaaneeya shanta sano ee ugu horraysa noloshaada, waxaa laga yaabaa in aad yeelatid shaqsiyad ku tilmaaman isku kalsoonaan iyo deganaan nafsiyadeed oo kuu sahlaysa in aad si geesinnimo leh u maaraysid arrimaha isku murugsan ee mustaqbalka la soo darsa noloshaada.

Dhanka kale waxaa jirta aragti kale oo cuskan cilmi- nafsiga oo ku dooddaysa in nooca shaqsiyadeed ee qof ahaan aad yeelan doontid ay ku xirantahay deegaanka iyo bulshada aad sannadihii ugu horreeyay noloshaada ku soo qaadatay. Dabciga iyo dadnimada aad ka dhaxashid deegaanka aad ku barbaartay ayaa haggi doona hab-dhaqankaada iyo sida aad u fakertid mustaqabalka. Tusaale haddii waayahaagii hore ee noloshe aad ku soo qaadatay dhul oomane ah oo deegaan fog biyaha looga soo dhaamiyo, waxaa laga yaaba in mustaqbalka aad yeelatid shaqsiyad aan dabacsanayn oo go'aano qallafsan ka gaara duruufaha nolosha ku xeeran.

Sida uu nabi muxamed NNKH noo sheegay, qofkii dabacsanaa ama naxariis badnaa xilligii Islaamka ka hor, ayaa noqday qofka ugu dabacsan uguna naxariista badan waqtigii uu islaamka cusbaa. Xadiiska nabiga iyo xaqiiqooyinka cilmiga ah waxay tilmaamayaan in qof walba fahamka iyo ku dhaqanka diinta ula soo shirtago muuqaalka qarsoon ee shaqsiyaddiisa.

Maqaalka wuxuu ku saabsanaa xiriirka ka dhaxeeya shaqsiyadda qofka iyo diinta. Si aan u muujinno xiriirkan waxaan ku qasbannahay in aan adeegsanno tusaalayaal badan oo ku saabsan xiriirkan si aan u xoojinno aragtidan cilmiyaysan. Burburkii dalka ka dib waxaa lagu baraarugay koox diimeedyo kala duwan oo siyaabo kala jaan ah u fasiray diinta Islaamka oo ay Soomaalidu ku soo dhaqmayeen qarniyaal badan. Dadka wax ka bartay noocyada kala duwan ee shaqsiyadeed ee sida cilmiga ah lagu ogaaday, waxay si fudud ku fahmi karaan in hal qaab oo diinta loo fasiro ay yeelan karto muuqaallo kala duwan. marka la eego deegaannada kala fog iyo shaqsiyaadka kala duwan ee qaab fasirkaas taageera ama ku qanacsan. Tusaale ahaan, faraqa u dhaxeeya suufiyada difaaca kaga jira gobolka Gal-gaduud ee Soomaaliya iyo Suufiyada ku dhuumaaleysta gobolada dhoobayda ah ayaa ku ogaan karnaa xaqiiqadan cilmiga ah.

Waxaad arkeysaa in Suufinnimada oo ka mid noocyada kala duwan ee Rabbi loogu dhawaado in ay yeelatay muuqaallo kala midab ah marka la eego kala duwanaanshaha deegaannnada iyo shaqsiyaadka taageera aragtida

suufinnimada. Ragga la magac baxay "Ahlu Sunna Wal Jamaaca" ee gobolada dhexe waxay qabaan in dhiig lagu fara xasho si dhulka barakeysan ee Soomaaliya looga sifeeyo argagixisada. In sidaad suufinnimada looga fasiro gobollada dhexe waxay muujinaysaa xiriirka ka dhaxayn kara nooca shaqsiyada qofka iyo fahamka farriinta ay diinta gudbineyso. Daruufaha ka jira deegaannada gobolada dhexe oo ah kuwo qallafasan ayaa sahlaya in suufiyada halkaas joogta si fudud caalamka ugu abaabulo dagaal diimaysan.

Dhanka kale Suufiyada joogta dhulka dhoobayda ah uma fududa in ay diinta u fahmaan dagaal joogto ah oo aan dhammaad lahayn. Ragga canbuulada iyo bunka ku cuna tuulada Baladul-Kariim (magaaladii uu ku duugnaa Shiikh Nuur allaha u naxariistee) uma fududa in ay jihaad galaan waayo qaabkii ay u soo barbaareen ayaa ah qaab ka hormarsan kana ilbaxsan habka loo soo barbaariyay suufiyada gobolada dhexe.

Dadka ku dhex barbaara musuq-maasuqa iyo boobka hantida dadweynaha waxay u badan tahay in ay ku biiraan kooxaha diinta ka dhigta waddo ay u maraan xukunka dalka. Burburkii dalka ka dib, dadka wax garadka ah waxay la yaabeen sida fudud ee askartii loo yaqiin koofiyo- castii Siyaad Barre ugu biireen urur weynihii Itixaad al -Islaami ee Soomaaliya kaga dhawaaqay jihaadka ilaa hadda socda. Burburkii dawaladnimada ka dib, askartii kacaanka gaar ahaan ciidankii guulwadayaasha, waxaa aad u soo jiitay qaabka ay diinta u fasireen raggii aragtida wahaabiyda dalka u soo dhoofiyay. Rag badan oo kacaanka taageerayaal u ahaa ayaa wahaabiyada isku dhiibay ayagoo sheeganaya in hadda hanuuneen. Halkan waxaan ka arki karnaa sida ay isku saameeyaan habka qofka u soo barbaaro iyo kooxaha uu mustaqbalka ku biiri doono.

Mar aan u kuur gulay xubno ka tirsan koox diimeedka loo yaqaan Takfiirka, waxaan ogaaday in xubnahaas ay u badnaayeen rag iyo dumar casual-waalidiin ah ka dib markii ay waa hore ka soo dhuunteen waalidkii dhalay. Si fudud waxaan ku ogaan karnaa in aysan la yaab lahayn in qof labadii dhashay aan ka warqabin geeri iyo nolol in uu gaalaysiiyo ummad muslimiin soo ahayd waqti dheer. Qof waalidkii u naxariisan waayay way ku adagtahay in uu faham dabacsan oo naxariis cuskan in uu ka dhex helo diinta barakeysan ee islaamka.

Ragga ku gaamurey xerownimada ee jecel in ay si deg-deg ah u ilbaxaan si ay uga wardoonaan baashaalka nolosha waxaa soo jiita qaabka ay diinta u fasiraan kooxo diimeedyada ilbaxda iska dhiga sida ururka Islaax iyo midka hadda lagu xanto in uu si dadban dalka u xukumo ee loo yaqaan Damul-Jadiid. Tusaalayashaan aan soo taxnay waxay naga caawinayaan ogaanshaha deegannada dadka ku noolyihiin iyo barbaarintii hore ee qofka in ay halbeeg u tahay boqolaalka nooc ee diinta loo fasiro.

Haddii aad u kuur gashid dadka aad sida gaarka ah u taqaanid, waxaa ku soo baxaya xiriirka ka dhaxeeya sida qofka u fahmo diinta iyo shaqsiyadda qofkaas.

Intii aan waddanka ka soo tagin, waxaan lahaa saaxiib qaali ah oo aad u qalbi wanaagsan. Wuxuu ahaa nin jecel in uu mar walba safro oo hadba deegaan cusub soo booqdo. Socod jaceylkii saaxiibkay waxay sababtay in uu ku qanco sida ay diinta u fasiraan kooxda loo yaqaan "Jamacaatul Tabliiq" oo ah koox had iyo jeer ku jira safar aan joogsi lahayn. Lama qiyaasi karo farxada uu saaxiibkey ka heli jiray in la guureeyo oo hadba magaalo cusub la tago ka dibna lagu gaaf wareego reero islaameed guryahooda. Sidoo kale waxaan aqaan niman aan dood wadaag nahay oo ka hela in dumarka la cadaadiyo. Waxay goorwalba isku mashquuliyaan in ay daliil diinta cuskan u raadiyaan ciilka ay dumarka uu qabaan. Carada ay raggaas dumarka u qabaan waxay gaarsiisan tahay heer ay aamineen in ay diintu banaysay in xaaska loo galmoon karo waqtiga foosha. Raggan haddii ay si maskax furnaan ah siirada Nabiga NNKH u baran lahaayeen waxay ka dawoobi lahaayen xumaanta ay xaawalayda u qabaan. Qofki barashada siirada nabiga u kaalmaysta shaqsiyad caafimaad qabta, wuxuu ogaanayaa qofkii ugu horreeyay ee Islaamka ku taageera dhaqaale, talo iyo waliba niyad dhis in ay a tahay Hooyadii muslimiinta "Khadiija" Rabbi ha ka raali noqdo.
Su'aasha aan badanaa is weydiin jiray waxay tahay, burburkii ka dib, maxaa loo arki waayay fanaaniin badan oo ku biira kooxo diimeedyada ka jira Soomaaliya.

Waxaan ka murgi jiray in hanuunka iyo baraaruga ka bilowday waddanka ay ka qadeen ragga iyo dumarka jecel in ay heesaan si bulshadu u dareento farxad. Ogaanshaha sida ay iskula falgalaan ku dhaqmida diinta iyo dunta hoose ee qofka ayaan kaga qancay murugadaas. Waxaan ogaaday in jaceylka fanka iyo suugaanta qalbigaada ku abuuro naxariis guud oo loo qaado dhammaan noolaha iyo nolosha. Haddaba way adagtahay in shaqsiyadda hoose ee qof hoobal ah ku qanacdo koox diimeed carabaha laga maalgaliyo. Waxaa laga yaabaa in la arki lahaa fanaaniin badan oo wadaaddo ah haddi ay jiri lahaayeen koox diimeed dadka xasuusiya kuna baraarujiya bandhig faneedka lagu qaban doono Jannada si muslimiinta looga abaal mariyo dadaalkii iyo adkeysigii ay muujiyeen intii adduunka la joogay.

Muddo aad u dheer ayay nagu qaadatay aniga iyo rag aan saaxiibbo nahay in aan helno Sheekh Soomaali ah oo si dagan oo la fahmi karo Qur'aanka u fasira. Waxaan xasuustaa inta jeer ee aan iskaga huleelnay tafsiir socda ka dib markii aan dareenay argagax iyo cabsi xoog leh.

Inta badan ragga Qur'aanka ku fasira Af- Soomaaliga waxay u badan yihiin rag culumo ah oo noloshoodii hore ku soo qaatay nolosha adag ee miyiga. Waxaa laga yaabaa in cabsidii iyo argagixii ay dareemi jireen carruurnimadoodii ay si dadban u saamaysay habka ay quraanka u fasiraan. Qaar badan ayaaba xanaaq iyo xabeeb codkooda laga dareema marka ay tarjumayaan hadaladda Eebbe weyne u soo dajiyay in dadka ku xasilaan.

Nasiib wanaag, aniga oo Nairobi qaxooti ku ah ayaan waxaan si kadis ula kulmay tafsiirka Shiikh Maxamed Macallin oo lagu dhageysano mowlac aan ku tukan jiray. Markiiba waxaa I soo jiitay xasilloonida aan innaba caadiga ahayn ee laga dareemi karo hadalka Shiikh Maxamed Macalin. Halkaas waxaa iiga bilowday safar dheer oo ah in quraanka markale aan si dagan oo xasiloon u barto. Shiikha wuxuu hibo iyo hoodo u lahaa in uu hanto qalbiga iyo maskaxda qof walba oo fakaraya. Raggii aan asxaabta ahayn ayaan ku wargaliyay in tafsiirka Shiikh Maxamed Macalin laga wardoono. Waa danbe waxaan ogaadey sababta ka danbaysa anagoo ciyaalka xaafadda ah in aan ka helno tafsiirka Sheekh Maxamed Macallin. Sababtu waxay tahay in Shiikha uu noloshiisii carruurnimada uu ku soo qaatey gobollada Baay iyo Bakool oo ah dhul barwaaqo ah oo carruurta ku barbaarta ay u badantahay in ay nasiibsadaan shaqsiyad xasilloon oo si miyir qab ah ku barata Qur'aanka Eebe weyne.

Qoraalkan dheer waxaan ku soo ogaannay in shaqsiyada qofka ay saamayn ku leedahay qaabka uu u dhaqmo ama u fakaro gaar ahaan sida uu u fahmo farriinta ay diinta gudbinayso. Dunta hoose iyo dadnimada qofka ayaa qaabaysa sida uu ula falgalo ama u dhaqan galiyo aragti walba oo qofku ka aamino nolosha. Waxaan ogaanney in sameyska iyo dhismaha dunta hoose ee shaqsiyada qofka ay ku xirantahay sida ay labada waalid u soo barbaariyaan ubadka iyo daruufaha ka jira deegaanka.

Diinta oo ah farriin aan is baddalayn illaa qiyaamaha laga gaarayo waxay magan u tahay nooca shaqsiyadda fasiraysa. Haddii la rabo in Soomaalida ay diinta si fiican u fahmaan, waxaa lagama maar maan ah in carruurta si fiican loo barbaariyo si mustaqbalka loo helo culumo daggan oo farriinta diinta si xasilloon dadka ugu gudbiya. Mustaqbalka Soomaaliya waxaa ku gadaaman daruur mugdi ah marka la fiiriyo qaabka liita ee Soomaalida isku guursadaan ka dibna carruurta u dayacaan. Haddii aan daruufaha qallafsan ee deegannada waddanka ka jira iyo habka ubadka loo barbaariyo waxba laga baddalin, waxaa hubanti in jiilasha iyo faca soo socda dhaxli doonaan wadaaddo iyo culumo shacabka laaya ayagoo akhrinaya aayado ka mid ah quraanka kariimka ah.

## 84. Qadarta Ilaahay iyo Qorshaynta Nolosha

Waqti kasta waxaa suuqa haysta erayo gaar ah oo ka tarjumaya muuqalka nolosha ee markaas muuqda. Dhowr iyo labaatankii iyo dhowrkii sanno ee burburka lagu jiray, erayada aadka loo adeegsaday waxaa ka mid ah "Qadarta Ilaahay." Waxaa dhaqan iyo nolol maalmeed laga dhigtay in calaacal-kasta lagu soo bilaabo hadal sidan ah" Ilaah baa mahadsan, qadartiisa ayaa ku qanacsannahay." Hadalka intaas kuma ekaado, ee waxaa la sii guda galaa erayo lagu tuugsado umahada noloshooda qorshaystay ee aan qadarta ilaahay ku mashquulin. Haddii qadarta ilaahay lagu qanacsanyahay maxaa keenay in qaylo dhaan dawarsi ah loo jeediyo beesha caalamka? Haddii Eebbe weyne qadaray abaaraha aalaba ka dhaca gobolka Baay ama Mudug, beesha caalamka in loo calaacalo maxay qadarta Eebbe weyne ka qaban kartaa?

Ujeeddada ugu weyn ee qoraalkan kooban ayaa ah in lakala furdaamiyo ama laka furto calaacalka joogtada ka noqday Soomaaliya iyo qadarta Ilaahay. Wadada ugu dhow ee qoraalka u mari doono ujeedadaas ayaa ah is barbardhiga qadarta Ilaahay iyo qorsheynta nolosha si aan uga jawaabno su'aalaha kor ku xusan. Inta aynaan toobiyaha saarin dhabbaha uu qoraalka ku aroori doono, waxaa habboon in aan qeexno errayada kala ah "qorshe iyo qadar."

Erreyga "Qorshe" wuxuu ka soo jeedaa noloshii reer guuraannimada. Reer guuraagii Soomaaliyeed waxay qorsheyn jireen halka reerka lagu furayo iyo sida loo dagayo. Arrintan waxaa si fiican u faahfaahiyay madexweynaha Somaliland mudane Siilaanyo, mar uu ka qayb galayay xafladdii afartan guurada qorsita Af- Soomaaliga ee sannad ee lagu qabtay Jabuuti. Mudane Siilaanyo wuxuu xusay in asagoo ka faa'idaysanaya noloshiisii hore ee miyiga, in uu talo ku soo jeediyay in wasaaraddii uu joogay sannadkii 1972, loogu magacdaro Wasaarradda Qorsheynta Qaranka.

Nasiib wanaag ,sida uu sheegay Siilaanyo, guddigii qorista Af- Soomaaliga way ka guddoomeen taladiisii, wuxuuna noqday erey bixin si weyn u dhaqan galay. Nolosha reer guuraagii hore waxay ahayd mid qorsheysan oo aad looga baaraan dagay. Aqoon qoto dheer oo xoola dhaqatadii hore ka barteen deegaanka iyo cimilladii ay ku noolaayeen ayay ku salayn jireen qorshaynta noloshooda. Halkan waxaan ka ogaan karna in qorsheynta nolosha miyiga ahayd farsamo Soomaalida ay ku fiicnayd waqtiyadii hore. Wixii ka danbeeyay waqtigii la magaaloobay iyo dawladnimada ayay Soomaalida ka gaabiyeen qorsheynta nolosha. Qaybaha danbe ee qoraalka ayaan ku faah-faahin doonaa fashillka ku yimid fanka qorsheynta.

Marka si guud loo qeexo erayga "qadar" waa eray diini ah oo aan garashada caadiga ah lagu fahmi karin. Sida diinta ku xusan, qadarta waxaa lagu sheegay in ay tahay go'aan uu Rabbi ka gaaray: wixii dhacay, arrimaha taagan markaas iyo wax kasta oo dhici doona mustaqbalka dhow iyo midka fog.Wax walba inta aysan dhicin ka hor, Rabbi ayaa lowxul maxfuudka ku qoray sida ay diinta laga

xusay. Tusaale ahaan, Ilaahay ayaa malaayin sanno ama kumaanan sano ka hor qoray qarax ka dhacay madaxtooyada Soomaaliya!

Ragga diinta fasira aad ayay iskugu maandhafeen fahamka ku habboon qadarta Ilaahay. Rag baa qaba in qadartu nolosha ka dhigayso ciyaar oo kale. Sababta ay sidaas ugu maleeyeen ayay ku sheegeen: mar haddii la qadaray wax walba oo dhici doona , in doonista iyo dadaalka qofka aysan qiimo lahayn.Tusaale ahaan, waxay sheegeen in waqti lumis iyo ciyaar tahay in ciidamo afrikaan ah dalka la keeno si ay u difaacaan madaxtooyada Soomaaliya. Mar haddii Ilaahay qadaray qarax walba oo ka dhici doona madaxtooyada Soomaaliya, ma jirto sabab maan gal ah oo loo baqo ka dibna loo soo kireesto askar shisheeye ah oo aan waxba ka qaban karin qadarta dhici doonta.Waa tacab qasaar iyo waali haddii qadar dhici doonta laga magansado askar afrikaan oo ludda iyo oogada ka madow. Ragga aragtidan ka qaba qadarta Ilaahay waxaa loo yaqaan “Jabirayah”.

Rag kale ayaa qaba aragti kale oo ku aaddan qadarta Eebbe weyne, waa aragtida ah in doonista qofka ka madax bannaan tahay qadarta Ilaahay. Raggan waxay ku doodeen in Eebbe uusan faro gashanin rabitaanka iyo waxqabadka abuurkiisa. Kooxdan waxay rumeysan yihiin in qof walba u madax banaan yahay ka meel gaaridda doonistiisa gaarka ah. Dhacdooyinka nolosha ka dhaca waxay ku dhaceen doonis iyo sabab loo kaashaday awoodda iyo garashada noolaha. Tusaale ahaan raggan waxay rumeysan yihiin qaraxii 2014-tii ee ka dhacay madaxtooyada in uusan Rbabi qadarin waayo ilaahay kuma mashquulo Soomaali nacasyo ah oo is qarxinaya! Sababta dhabta ah ee qaraxa u dhacay waxay ku sheegi lahaayeen in ay ay tahay fuleynino iyo feejignaan la’aan dhanka ciidanka madaxtooyada ah iyo arxan darrada kooxihii fuliyay qaraxa. Wixii qaldamay ama wixii saxmay waxaa eed ama abaal ku leh dadka falka fuliyay sida ay raggan ku doodayaan. Kooxda sidan u fahamtay qadarta Eebbe waxaa lagu magacaabaa “ Al Qadariyyah”. Raggan waxay magaca iskaga egyihiin kooxda taageerta shiikh Cabdulqaadir Jeylaani ee loo yaqaan – Al qaadiriya” balse waa labo koox oo wax kasta ku kala duwan.

Labadan aragti ee ku u aaddan qadarta waxay dhaliyeen dooddo waaweyn oo lagu xiiqay marka ay timaado rumaynta qadarta Eebbe weyne. Dooddaha raggan dhaxmeray waxay horseedeen buuq iyo jaha-wareer ka abuurmay muslimiinta dhexdooda. Si xaaladda loo dajiyo, waxaa taageero badan helay koox u dhaxaysa labada aragtiyood ee qadarta laga bixiyay. Kooxdan waxaa lagu magacaabaa Ehlu-Sunna, waxayna soo bandhigeen in buuqa caqiidada lagu furay laga waantoobo. Kooxdan waxay hal-abuureen aragti dhexdhaxaad ah oo qadarta ku saabsan. Aragtidan Ehlu-Sunna waxay qabtaa in Rabbi wax walba qaddaray, islma markaasna dadka ay leeyihiin awood ay doorasho ku sameeyaan. Tusaale ahaan, raggan waxay ku doodayaan in qaraxii madaxtooyada ka dhacay uu Rabbi qadaray isla markaana mas’uuliyada qaraxa leeyihiin raggii qorsheeyay ka dibna fuliyay qaraxa.

Si maangal ah uma aysan faah-faahinin Ehlsunnada aragtidan. Waxayna ku kaaftoomeen in rumeyn guud lala yimaado oo aan la baarbaarin sida la isku qabadsiin karo qadarta Eebbe iyo doonista dadka. Halkaas waxaa ka abuurmay jahawareer ku saabsan xiriirka ka dhaxeeya qadarta iyo qorshaha qofka u dajiyo noloshiisa. Tusalale ahaan, dad badan oo fulayo ah ayaa ku marmarsiyooda in qaladaadka ka dhacay aysan mas'uul ka ahayn waayo arrin kasta waxay ay ku dhacaan qadarta Ilaahay.

Sidoo kale dadkan waxay ku andacoodaan in Rabbi u qoray wixii markaas ay xeelad iyo xoog ku hantaan. Waxaa fiican in aan tusaaleyaal cilmi ah ku eegno sida dad badan uga leex leexdaan sababaha dhabta ah ee way wax u dhaceen ayagoo qadarta ku gabanaya.Tusaale ahaan, waxaan xasuustaa markii uu madexweyne Xasan Shiikh Maxamuud ku guuleestay doorashadii madaxweynannimada, in uu ku andacooday in uu Rabbi uga mahadcelinayo guusha uu gaaray. Sidoo kale wuxuu codsaday mar haddii kursiga uu Rabbi u qoray in lala shaqeeyo intii laga maseeri lahaa ama la mucaaradi lahaa! Marka laga soo tago qadarta Ilaahay ee aalaba lagu marmarsiyoodo, waxaan habboon in la xuso sababaha u suurta galiyay in uu ina- Culusow mar uu madaxweyne noqdo ayadoo qaab falsafadeysan la adeegsanayo.

Sababta koowaad ee suurta galisay guusha doorashada madaxweyne Culusow ayaa ah in uu ka dhashey mid ka mid ah qabiilladii bililiqaystay caasimadda Muqdisho" Soomaali badan ayaa xal u aragtay in madaxweynaha laga dhigo nin ka dhashey ama ka yimid qabiilladaas. Sababta labaad ee madaxweynaha u suurta galisay guusha doorashada ayaa ah adeegsiga lacag laaluush ah oo carabaha ay ku maalgaliyaan ragga aamisan karaamada carabta. Haddii qadarta kaliya lagu mashquulo, waxaa imanaysa in si cilmi ah lagu ogaan waayo sababaas aan soo sheegnay.

Sidoo kale waxaa habboon in sababo maangal ah oo cilmi cuskan lagula garramo haddii ninka Raysul wasaare ka ah Soomaaliya ku doodo in uu Rabbi u qoray ama u qadaray jagada raysul wasaarannimada. Badanaa raggii raysul-wasaarayaasha noqoday waayahan waxay u badnaayeen rag ka soo jeeda qabiil qaxooti ku ah dalalka dariska la ah Soomaaliya. Marwalba oo la magacaabayo raysul wasaare waxaa la sheegaa in qofka raysul- wasaaraha noqday uu Rabbi u qoray. Ma habboona in qadarta ilaahay lagula soo gal-gasho raysul-wasaare lagu soo magacaabay qabyaalad raqiis ah oo lagu qancinayo qabiillo qaxooti ah.

Tusaalayaashaas cilmiga ah ee kor ku xusan waxay nagu baraarujiniyaan in loo dhabo galo sababaha ka danbeeya wax kasta oo dhaca. Haddii qadarta Ilaahay si guud difaac looga galo waxaa adkaanaya in aan helno sawirka dhabta ah ee nolosha iyo kaalinta doonista iyo doorashada dadka ay ka ciyaarto xaaladda markaas taagan. Sidoo kale waxaa lumaya la xisaabtanka ku habboon qof walba oo ku fashilma shaqadii loo igmaday.

Qorsheynta nolosha ayaa ah farsamada kaliya ee aadanaha ku kala hormareen waqtigan la joogo. Waqtiyadii hore ma jirin hormar la taaban karo oo dadku ay ku kala duwanaayeen, waayo fanka qorsheynta nolosha ayaa ahaa farsamo fudud oo bulshooyinka oo dhan ay si guud u wada garanayeen. Tusaale ahaan Soomaalidii noolayd dhowr qarni ka hor fanka qorsheynta nolosha waxay kala mid ahaayeen dadkii qarniyadii hore noolaa. Waana sababta aysan u dhicin waqtiyadaas Soomaali aduunweynaha u soo gurmaday si macluul looga badbaadiyo.

Waqtigan la joogo nolosha waxay noqotay mid garasho fog la'aanteed lagu fashilmayo. Fanka qorsheynta mustaqbalka fog ayaa ah barta ay ka saan qaaday nolosha casriga ah. Bulshadii aan fanka qorsheynta mustaqbalka adeegsan waxay u dulowdaa ummadaha ka baarandagay muuqaalka ay nolosha yeelanayso. Bulshooyinka la sheego in ay hormareen, waxay xoogga saaraan in qorshe fog iyo mid dhow nolosha laga dagsado. Sidoo kale qorshaha waxaa la daba dhigaa talaabooyin is xig-xiga si loo gaaro barta la qorsheystay. Haddii qorshaha shaqeyn waayo, qadar laguma marmarsiyoodo ee waxaa la is weydiiyaa sababaha cilmiga ah ee fashiliyay qorshihii la dagsaday. Tusaale ahaan, haddii masuul loo igmaday fulinta qorshaha nabad galyo ee degmo ku fashilmo ilaalinta amniga, si adag ayaa loola xisaabtamaa, waxaana lagu qasbaa in uu si dag-dag ah isku casilo.

Madaxweynaha Soomaaliya iyo dawladiisa waxay ku fashilmeen in ay ilaaliyaan amniga naftooda inta aan la gaarin nabadgalyada bulshada Soomaaliyeed. Maalin walba waxaan maqalnaa in Muqdisho laga fuliyo qaraxyo iyo shirqoollo ka dhan ah nabadgalyada guud. Wali lama arag masu'uul lagula xisaabtamay fashilka ku yimid hay'adda qaranka ee uu joogo. Intii lala xisaabtami lahaa waxaa dadka loo sheegaa in qadarta ilaahay lagu qanco ka dibna la duceysto. Soomaaliya waxay noqotay waddanka kaliya ee hay'adaha qarankiisa lagu maamulo duco iyo qadar lagu marmarsiyoodo.

Qawmiyada ku silicsan geeska afrika waxaa loogu dowgalay qorshe la'aaan ama qorshe xumo. Dad badan oo aan aqoon sida ay u shaqeyso naxariista Eebbe ayaa ku andacooda in nacasnimada Soomaaliya ka dhacday uu Ilaahay qadaray. Dadkaas waxaa ugu daran kooxo wadaaddo ah oo carabaha batariga looga soo guro. Kacdoonka dhabta ah ee Geeska Afrika looga baahanyahay ayaa ah mid dadka lagu barayo in Eebbe weyne uusan qorin ama u qadarin nolol xumada haysata qawmiyadaha kala ah Oromada iyo Soomaalida. Qawmiyad kasta oo aan qorshe fog iyo ficil la imaan sida Soomaalida waxaa ka soo ifbaxaya foolxumada nolosha.

Qorshaynta Nolosha waa farsamo fudud oo u baahan garasho qaan gaar ah. Haddii qorshe cilmiyaysan oo lagu jaangooyay duruufaha dhabta ah ee deegaanka ka jira la dajiyo, waxaa laga guulaysan karaa: qaraxyada joogtada noqday, abaaraha soo noqnoqda, nabadgalyo la'aanta jirta, faqriga iyo faro marnaanta baahsan, cudurrada halista ah ee cid ka badbaaday aysan jirin iyo

waliba qalbi xumada iyo xaasidnimada dhaqanka laga dhigtay. Sidoo kale haddii qorshe si fiican looga baaran dagay la hal-abuuro, waxaa laga guulaysan karaa kooxaha dad qalatada ah ee dadka ku harowsada qadarta Eebbe weyne.

## 85. Cilmaaniyiinta Cusub iyo Cabsida Carruurta

Maalin dhexdaas ah waxaan akhriyay qoraal ku saabsan taariikhda iyo sababaha cilmiyaysan ee dabada ka riixaya baqdinta aan caqliga cuskanayn ee reer Galbeedka iyo cilmaaniyiinta cusub ka qabaan Islaamka “Islamphopia.” Qoraalkan waxaa loogu tala galay dadka jecel in aqoonta-qallalan “Academia” kala soo dhex baxaan qoddobo cilmiyaysan oo sharraxaya siyaabaha kala gedisan ee Aadanaha isku faquuqo iyo waliba midabyada kala duwan ee midabtakoorku yeesho.

Aqoonyahanka qoraalkan qoray waa bare-sare oo culuumta dhaqamada iyo isgaarsiinta ka dhiga Jaamacada North Illinois ee dalka Mareykanka. Qoraalkiisan wuxuu ugu magac-daray: Baqdinta- Islaamka, Dhaqanka, Iyo Midabka ee Waqtiga Imbiraadooriyadda (Islamphopia, Culture and Race in the Age of Impire.) Doodda ugu weyn ee qoraalkan gudbinayo waa in midabtakoorkii dunida ka jiri jiray lagu baddalay dhaqan-faquuq maadama waqtigan casriga ah ee la joogo ay adagtahay in si toos ah dadka loogu takooro midabkooda dabiiciga ah ” racism.”

Bare-sare Mehdi wuxuu ku dooddayaa in dawladaha reer galbeedka waligood ku mashquulsanaayeen siyaasad-goboleed “geopolitical” saldhig looga dhigay aragti ummadaha kale ku tilaamaysa in ay yihiin dad ku habboon in la darso, wax la baro, laga danaysto haddii ay suurta gal tahayna la gumeysto. Sida uu sheegay mudane Mehdi, dooddan wuxuu u cuskaday aragtida caanka ah ee “Orientalism” taas oo aqoonyahankii carbeed Edward Said uu curiyay qardhigii dhammaaday.

Aragtida “Orientalism” waxay qeexaysaa dabeecada hoose ee reer Galbeedka ku qaabilaan dhaqannada ka soo jeeda qaarada Asia gaar ahaan bariga dhexe. Dawladaha iyo aqoonyahanka reer galbeedka ayagoo ka duulaya aragtidan waxay duulaan gumeysi ah ku qaadeen madaxbannaanidii iyo aqoontii ummadaha ka soo jeeda dadka kale “ The Other.”

Mudane Mehdi qoraalkiisa wuxuu ku xusay in sababaha cilmiyaysan ee cabsida aan caqliga cuskanayn ee Islaamka laga qabo waqtigan la joogo laga dhex baadi goobi karo saddex xagalka kala ah: Dhaqanka, Midabka, iyo Qaabka cusub ee isbahaysiga dawladaha galbeedka ku doonayaan in dunida lagu maamulo “The Age of Impire”.

Sida uu qabo mudane Mehdi, Isbahaysigan cusub “Empire” wuxuu marwalba adeegsadaa farsamo cusub oo aragtida “Orientalism” looga shidaal qaatay. Tusaale ahaan, waqtigii dagaalada qabooba socdeen, “Cold War” isbahaysiga hadda dunida ka taliya wuxuu sharta iyo shaydaanimada u xawilay xagaa iyo midowgii soofiyeetka. Waqtigaas waxaa waajib muqaddas ah ahaa in lala dagaalamo shuuciyadda oo dunida si xawli ah ugu faafeysay.

Markii daaqada lagala baxay xooggii shuuciyada oo midowgii dowladihii soofiyeetka burbureen, Isbahaysiga hadda dunida hor booda wuxuu baadigoob ugu dhaqaaqay faquuqida dhaqamada adduunka ee laga yaabo in ay ka horimaadaan siyaasadda is habaysiga. Faquuqa noocan ah waxaa loo cuskaday isla aragtida duuga ah ee “Orientalism” ee kor aan ku soo xusnay. Waqtigan waxaa bilowday in duulaan af iyo adin ah lagu qaado qaababka ay u noolyihiin dadyowga loo arko in aysan asal ahaan ka tirsanayn isbahaysiga.

Bare-sare Mehdi wuxu qoraalkiisa ku qaada dhigayaa sida midabtakoorkii dunida laga yaqaanay qarniyadii hore iskugu baddalay dhaqan-takoor. Tusaale ahaan waqtiyadii gumeysiga ee qarnigii dhammaaday, isbahaysiga dunida ka taliya wuxuu midabtakoor iyo faquuqid kula dhaqaaqi jiray dadka loo arko in midab ahaan madowyihiin. Dadaal badan oo lagalay ka dib, faquuqida noocan ah waa socon weysay, wuxuuna isbahaysiga go’aansaday in midabtakoorka iyo gumeysiga lagu baddalo madax bannaani magac ah.

Sida uu qabo mudane Mehdi, dhaqan-takoorka baddalay midab-takoorka wuxuu xooggaystay billowgii qarnigan. Tusaale ahaan, qarnigan waxaa la arkay dawladaha reer galbeedka oo quursanaya qaababka ay u noolyihiin ama u dhaqmaan bulshooyinka kale. Waxaa warbaahinta dunida lagu arkay duulaan af ah oo lagu quursanayo qaababka ay u labistaan, ama isku guursadaan dadka aragtida “orientalism” looga qoondeeyay khaanada lagu magacaabo kuwa-naga duwan “ the other.”

Wixii ka danbeeyay qaraxyadii September 11, Islaamka iyo muslimiinta ayaa noqday mowduuc xiiso gaar ah leh oo isbahaysiga ku bartilmaamaysan karo dhaqan-faquuq loo cuskaday aragtida “Orientalism.” Mudane Mehdi wuxuu ka soo horjeeda in sababaha ka danbeeya dhibaatada dunida ka tagan, gaar ahaan dhibaatada argagaxisnimada laga baadi goobo dhaqamada iyo diimaha.Tusaale ahaan, mudane Mehdi wuxuu ku talinayaa in sababaha rasmiga ah ee qalaalasaha taagan qarnigan la joogo laga baadi goobi karo siyaasadda guud isbahaysiga dunida ka taliya iyo tartarnka loogu jiro kheyraadka dabiiciga ah ee adduunka

Dooddan waa dood xoog badan oo xiiso gaar ah leh, waayo mudane Mehdi wuxuu qoraalkan ku qaada dhigayaa in siyaasadda cusub ee isbahaysiga u xuubsiibatay aragti ah in dhaqamada dunida isla jaan qaadi karin oo ay qasab tahay in dhaqamada qaar laga takhaluso. Haddaba aragtidan ayaa ah sababta qarsoon ee Islaam ka-cabsiga cusub “Islamphopia” gadaal ka riixaysa.

Maadaama aysan macquul ahayn in dadka degan bariga-dhexe midab-takoor toos ah loo muujiyo, isbahaysiga wuxuu door biday in siyaasad dhaqan-faquuq ah la cuskado.

Dhanka kale, mudane Mehdi wuxuu qoraalkan kula garramayaa cilmaaniyiinta cusub ee sida duuduubka ah u liqay doodda isbahaysiga "Impire" ee ku baaqaysa in Islaamka iyo muslimiinta shaqo adag laga qabto maadama ay shido ka wadaan aduunka. In doodda noocan ah si duuduub ah la iskaga liqo ayuu mudane Mehdi ku tilmaamay carruurnimo iyo caajis maskaxed. Dhanka kale, mudane Mehdi wuxuu qabaa in cilmaaniyiinta cusub ee doonaya in la fuliyo siyaasadda Isbahaysiga ee dhaqamada muslimiinta lagu faquuqayo in ay wax ka bartaan aqoonta –qallalan iyo taariikhda aduunka. Tusale ahaan, mudane Mehdi wuxuu ku doodayaa in ay caajisnimo maskaxeed tahay in muslimiinta iyo islaamka lagaliyo hal-khaanad waayo muslimiinta adduunka waxay u nool yihiin malaayin nooc oo la jaan qaadaya duruufaha ka jira degaanka ay ku noolyihiin. Sida daraaadeed mudane Mehdi wuxuu aaminsanyahay in aysan maan-gal ahayn, in cilmaaniyiinta cusub duuduub u liqaan siyaasad iyo sumad lagu quursanayo dhaqamada iyo diinta ummad bilyan ka badan.

Gaba-gabadii, mudane Mehdi wuxuu cilmaaniyiinta cusub kula talinayaa in ay ka caafimaadaan cabsida carruurnimo ee caqliga aan ku dhisnayn ee ku wajahan Islaamka iyo Muslimiinta. Sida fudud ee looga caafimaadi karo cabsida noocan ah ayuu mudane Mehdi ku sheegay in wax laga barto sida midabtakoorkii loogu baddalay dhaqan-faquuq iyo taariikhda aragtida duugga ah ee " Orientalism" ee saldhiga looga dhigay siyaasadaha isbahaysiga reer galbeedka " The Impire"!

## 86. Karaamada iyo Kartida Kabanka

Muddo laga joogo dhowrsano ayaan ku baraarugay in erayga "barako" loo adeegsan karo maqaallada farshaxamaysan si loo muujiyo waxyaabo badan oo barakaysan balse dadku aysan ku baraarugsanayn. Waqtigaas dad badan baa igala doodday in qoraal Soomaali ah loo adeegsado erayga "barako" waayo dadkaas waxay aaminsanaayeen in barakadu u badantahay dhanka luqada carabiga mar haddii Rabbi cirka ka soo barakeeyay Af carbeedka oo kaliya.

Dooddaas looma joojin, waxaana xoogga saarnay in la muujiyo in barakadu ka balaarantahay deegaan ama dhaqan u gaar ah qowmiyad sida carabta oo kale. Nasiib wanaag, waqtigan la joogo ereyga barako aad buu u bulaalay waayo qalinley badan oo Soomaali ah ayaa qoraalladooda ku barakeeya erayga "barako" si loo muujiyo waxyaabaha barakada badan ee ka buuxa Af Soomaaliga.

Waxaa la gaaray waqtigii eray bixin kale oo carabtu dadka ku harowsato loo adeegsan lahaa qoraalada farshaxamaysan ee Af Soomaaliga si loo yareeyo harowsiga Carabta. Soomaali badan ayaa aaminsan in Rabi si gaar ah u

karaameeyay Carabta. Errayga Karaamah wuxuu Af soomaali ku noqonayaa errayo sidoo kale carabta laga soo amaahday sida, sharaf, cizi iyo mucjiso.

Karaamadu ma ahan wax qolo ama qowmiyad gaar ah ku kooban. Waxaa sharaf iyo cizi yeelan qof kasta iyo shay walba oo shaqadii loo igmaday kaga soo dhalaala qaab karti iyo hufnaan ku dheehantahay. Tusaale ahaan Kabanka oo ka mid ah qalabka dadka qalbiga wanaagsan ee Soomaaliyeed "Fanaaniinta" u kaalmaystaan qurxinta heesaha dabacsan ayaa wuxuu muujiyay karaamo cuskan karti lala yaabay.

Kabanka oo dadka qaar u yaqaniin cuud wuxuu karti yaab leh u leeyahay soo saarida dhawaaq macaan oo meel dheer laga soo dhuftay kaas oo qalbiga dhagaystaha u kaxeyn kara deegaanada ay daganyihiin ama ku dhuuntaan dhammaan dareenada nolosha ee qarsoon. Kartida noocan ah ma ahan mid kabanku kaliya u gaar ah balse marka la barbardhigo qalabka kale ee la tumo si loo hal-abuuro cod macaan oo musik noqon kara, kabanku wuxuu muujijyaa mucjisooyin madaxbanaan oo lagu soo saari karo musik aad u macaan.

Mar haddii Kabanku kaalimaha hore ka galay soo saarida mucjisooyin karaamo noqon kara sida cod macaan oo musik ah, waxaa fiican in qaab falsadaysan loo fahmo macnaha iyo mucjisooyinka ku duugan codadka ciidaa ka badan ee kabanka musik ahaan u mala-awaali karo.

Guud ahaan codadka macaan ee musika waxay muujiyaan jiritaanka macno ka qoto dheer nolosha caadiga ah ee dadku badanaa ku mashquulsan yihiin. Macaansiga macnaha madaxa banaan ee codwalba oo musik ah ku duugan ayaa ah sababta ka danbeysa in muusika noqdo luqad caalami ah oo dhammaan carruurta iyo cirooluha wada fahmaan.

Haddii qaab falsafaysan loo fakero, muusigga wuxuu muujiyaa labo mucjiso oo indhaha aan laga qarsan karin. Marka hore muusika wuxuu muujinayaa jiritaanka macno ka madax banaan mashquulka nolosha caadiga ah oo afka qalaad sidan ku noqonaya - transcendental meaning. Tusaale ahaan, codadka macaan ee muusika waxay kugu marti qaadayaan macno ka mug weyn muranka iyo maalaayacniga badanaa lagu mashquulsanyahay.

Mucjisada labaad ee dhammaan codadka kala duwan ee musika tilmaamayaan ayaa ah jiritaanka dareen caalami ah oo dhammaan aadanahu ka midaysanyihiin. Tusaale ahaan Kabanka laga tumo Geeska Afrika, wuxu soo saaraa codad macaan oo ka marqaati kacaya in qawmiyadaha Soomaalida iyo Oromadu yihiin dad dhiig iyo wada dhalasho asal ah ka dhaxeeyaan.

Isu geynta labadaas mucjiso waxaa ka dhalanaya xaqiiqo caalami ah oo muusika kaliya uu ka marqaati kaci karo. Xaqiiqdaas ayaa ah in nuxurka hoose ee nolosha aan lagu macnayn karin garasho maangal ah oo kaliya- rationality.

Badanaa bani'aadamku wuxuu adeegsaa luqaddo iyo aqoon kala duwan si nolosha loogu mareeyo garasho maangal ah - intellect. Mar walba oo la dhageysto cod muusik ah, waxaa la maqlaa luqad aan garashada maangalka ah lagu fahmi karin, balse dhageystaha ku martiqaadaya dhadhansiga macno maanka iyo qalbiga soo dhufanaya. Haddaba, codadka kala duwan ee muusika waxay ka marqaati kacayaan jiritaanka macno aan maangal ahayn oo ku lamaansan nolosha taas oo ka madax banaan doodaha lagu xiiqay ee nolosha caadiga ah ka socda.

Sidaa daraadeed, Kabanka iyo qalabka kale ee muusika waxay kasbadeen karaamo waayo waxay hab karti huwan u muujiyeen in dareenno badan sida jaceylka, naceybka iyo waliba mucjisooyinka nolosha aan lagu macnayn karin dooddo maangal ah- rational discourse. Ugu danbeyntii, karaamada iyo kartida kabanka waxaa ka mid ah in keydka taariikhda iyo qalbiyada bulsho kasta oo dunida ku nool qiraan ciziga iyo sharafta u gaarka hal-abuurka iyo fanaaniinta uu Rabbi karaameeyay.

## 87. Heesaha Iyo Hannuunka Nolosha

Hannuunka aakhiro aad baa la iskugu khilaafaa. Sidaa daraaddeed, hannuunka aakhiro iyo sida looga badbaado qarracanka qiyaamaha waxaan fiican in diinta Islaamka ee xaqa ah kaligeed looga danbeeyo. Inkastoo hannuunka aakhiro bulshooyinka adduunka ku muran sanyihiin, haddana hannuunka nolosha labo Cali kuma muransana.

Hannuunka nolosha wuxuu ka billowdaa nabad wuxuuna ku dhamaadaa naxariis waayo noolaha oo dhan waxay ogyihiin in nolosha adduunka aan looga maarmin nabad iyo naxariis.

Haddaba su'aasha mudan in la is weydiiyo waxay tahay kaalin noocee ah ayay heesaha iyo muusiga ka qaataan in la haleelo hannuunka nolosha maadamaa aan ognahay in waqtigan la joogo bulshooyinka Geeska Afrika, gaar ahaan Soomaalida u ooman yihiin nabad iyo naxariis?

Qaybta hore ee qoraalka, jawaabta su'aasha kor ku xusan waxaa u cuskan doonaa waayo aragnimo shaqsi ah oo ku saabsan sida heesaha iigu saamaxeen in aan haleelo hannuunka nolosha; halka qaybta labaad ee qoraalka jawaabta u cuskan doono qawaacidda cilmiga bulshada marka la dhiraandhirinayo xiriirka ka dhaxeeya heesaha iyo hannuunka nolosha.

Dhammaadkii sannadihii sagaashamaadka waxaa ku sugnaa magaalada Kismaayo. Waqtigaas waxaa magaalada ka socday dagaallo qaraar oo qabiillada qaar ku ciilbaxayeen. Waagaas waxaan ahaa xerow ku dadaala barashada

hannuunka aakhiro. Tusaale ahaan habeennada qaar waxaan xaadiri jiray tafsiir laga dhegaysan jiray cajalado uu duubay sheekh ka soo jeeda Soomaalida Itoobiya oo caan ku ahaa cod xabeebnimo!

Inkasta uu sheekha xoogga saari jiray in xerta fahamto hannuunka aakhiro, haddana casharradiisa kuma jirin hannuunka nolosha oo dadkii magaalada Kismaayo waqtigaas joogay aad ugu oomanaayeen. Maadaama waqtigaas aan ahaa xerow jecel in uu diinta Rabbi si fiican u fahmo, isla markaana hannuunka aakhiro uu san ka qadin, waxaa u gacan galay koox wadaaddo ah oo heesaha ku xanaaqay, kuwaas oo aamisanaa in dhammaan heesaha yihiin xaaran maqdac ah.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaan munaafaqeeyay, waxaana qaab qarsoodi ah ku dhageystay heeso laga soo dayn jiray idaacad lagu magacaabi jiray codka Nabadda oo waqtiyada duhurada ka soo gali jirtay degaanka Soomaalida Itoobiya. Heeso aad u macaan ayaa muddo idaacadaas qaab qarsoodi ah uga dhageysan jiray. Intii heesahaas aan dhegaysanayay waxaan fahmay in dadka Soomaaliyeed oo dhan walaallo yihiin. Sidoo kale waxaan ogaaday In haddii heesaha iyo ciyaaraha la baahiyo in colaadaha ka socda magaalada Kismaalo la joojin karo, dalkana nabad iyo naxariis lagu soo dabaali karo.

Fahamkaas wuxuu ahaa mid curdun ah oo cilmi aan cuskanayn. Maalin maalmaha ka mid aayaa raadiyihii aan idaacadda ka dhageysan jiray iga hallaabay, waxaana samays ugu geeyay goob rikooradda uu ku samayn jiray waddaad kutubta aan wada raacan jirnay.

Waddaadkii wuxuu ii sheegay inuu ka tirsanaan jiray kooxdii Halgan ee booliiska Soomaaliyeed u qaabilsanayd fanka iyo heesaha. Wadaadkaas oo hadda la iigu sheegay in uu dhintay wuxuu ahaa ninkii Kabanka u garaaci jiray kooxdii Halgan ee booliska Soomaaliyeed. Muusikiistahaas wuxuu ii sheegay in kooxdii Halgan kaalin weyn ka ciyaari jireen in bulshada Soomaaliyeed lagu hanuuniyo nabadda iyo naxariista!

Muddo markii qaab qarsoodi ah heesaha uga dhegaysanayay idaacadda kor ku xusan, waxaa i soo weeraray wiswis iyo sheydaan ii sheegay in aan ahay munaafaq heeso xaaraan ah la dhuumanaya. Mar kale ayaa muddo heesaha ka caagganaa, aniga oo hilmaamay macnaha iyo murtida u gaarka ah hannuunka nolosha!

Billowgii qarnigan ayaa magaalada Nayroobi waxaan u imid buufis lagu baadi goobayo dhoofitaan. Waqtigaas waxaan ahaa xerow xanaaqsan oo aaminsan in heesaha bandow lagu soo rogo. Hoteelkii Nairobi aan ka degay waxaa qol wada deganayn oday reer Hiiraan ah oo lagu magacaabi jiray Shire. Oday shire wuxuu ahaa nin farxaan ah oo aad u soo dhoweeya dhallinyarada.

Oday shire farxaannimada waxaa u wehliyay in uu ahaa nin fahamsan hannuunka nolosha oo keydiya heesaha xulka ah ee Soomaalida. Marwalba oo qolka hoteelka aan soo galo, Oday Shire waxaa u daarnaa heeso qaraami ah oo ka mid ah labeenta heesaha Soomaalida. Boorso weyn ayuu Oday shire ku keydin jiray boqollaal cajaladood oo duug ah. Maalmahaas ayaan fursad u helay in aan dhegaysto dhammaan heesihii ku duubnaa cajaladihii Oday shire boorsada uga buuxay. Waqtigan ma munaafaqayn waayo waxaan billaabay in dhegaysiga heesaha aan la dhuumanin. Nasiib wanaag si fudud ayaan ku haleelay hannuunka nolosha, waxaana fahmay in heesaha yihiin albaabka laga galo naxariista iyo nabadda aan looga maarmaynin nolosha.

Waqtigaas hannuunka nolosha kaliya xoogga ma saari jirin waayo waxaa fahamsanaa muhiimadda ay leedahay in la isku barbarwado hannuunka aakhiro iyo hannuunka nolosha. Maalmahaas waxaan billaabay in dhageysiga heesaha aan ku barbarwado dhegaysiga cajalado tafsiirka Quraanka kariimka ah oo laga duubay shiikh aad u cod dabacsan una xikmad badan kaas oo lagu magacaabo Shiikh Maxamed Macallin.

Sidaa daraaddeed, labo nin oo reer Hirshabelle ah" Oday Shire iyo Shiikh Maxamed Macallin" ayaa iga caawiyay in markii ugu horreysay noloshayda aan is waafajiyo hannuunka nolosha iyo hannuunka aakhiro. Xaggaagii 2018-dii mar aan Kenya ku laabtay ayaan ogaaday in Oday Shire dhintay. Marxuum Shire iyo Marxuum Shiikh Maxamed macallin waxay igu leeyihiin abaal weyn oo halkan aan lagu soo koobi karin, waxaana u rajeynayaa naxariista Eebbe weyne.

Markii Canada aan imid, waxaan billalabay barashada cilmiga bulshada " Sociology." Intii aan baranayay cilmiga bulshada waxaa fursad u helay in qaab cilmi ah u baaro xiriirka ka dhaxeeya heesaha iyo hannuunka nolosha. Waxyaabihii aan ogaaday waxaa kamid ah kaalinta weyn ee heesaha ka qaataan nabadda bulshada iyo naxariista ku beeranta qalbiga qofka shaqsiga ah.

Buuggaagtii aan akhriyay waxaa ka mid ah buug caan ah oo cilmiga bulshada u gaaryeelay daraasaynta heesaha iyo muusigga " Sociology of Music." Qoraaga buuggan oo lagu magacaabo mudane Siobhan McAndrew wuxuu ku dooday in muusigga iyo heesaha yihiin udub dhexaadka nolosha bulshada.

Qoraalladii kala duwanaa ee aan akhriyay waxaa lagu lafa guray dhowr qoddob oo tilmaamaya xiriirka ka dhaxeeya heesaha iyo hannuunka nolosha. Tusaale ahaan, qoraalladaas waxay tilmaameen in muusiga iyo nolosha mataano yihiin. Dhanwalba oo nolosha dabiiciga ah aad ka jalleecdid waxaa maqlaysaa shinbiro heesaya, geedo sharqamaya iyo dhawaawaqa macaan ee dabaylaha dhacaya ku dhaanteenayaan.

Sidoo kale dhan walba oo laga eego dhammaan dhaqamada adduunka, heesaha iyo muusigga waxay bulshada iyo qofka shaqsiga ah u sahlaan macno u samaynta nolosha; la haasaawidda nafta; qeexitaanka shaqsiyadda qofka iyo calaamaynta astaamaha dhaqan ee bulsho gaar u leedahay. Tusaale ahaan, mudane Emile Durkheim oo ka mid ah raggii dhidibada u taagay cilmiga-bulshada ayaa buuggiisa caanka ahaa- Muuqaallada asaasiga ah ee nolosha diimaysan. The Elementary Forms of the Religious Life ku qaada dhigay in heesaha iyo muusigga ka dhiganyihiin tiirka asaasiga ah ee bulsho kasta ku tiiriso dareennada la xiriira barakada ku duugan damaashaadyada iyo bandhigyada u gaarka ah diinta.

Ugu danbayntii, waxaan soo ogaannay in in heesaha iyo muusiga qaab wadareedka loo soo bandhigo yihiin hannaan ama qaabdhismeed isku dheellitiran oo qeexaya wadajirka ummada iyo muhiimadda ay nabadda iyo naxariista u leedahay nolosha guud ee bulshada. Haddaba qoraalkan dheer waxaa ku soo qatimaynaa xikmad laga hayo faylasuufkii reer Swiss mudane Henri Fredrick Amiel taas oo tilmaamaysa xiriirka ka dhaxeeya Muusigga iyo hannuunka nolosha. Mudane Ameil wuxu yiri: "Music is harmony; harmony is perfection' perfection is our dream, Our dream is heaven" oo macnaheedu noqonayo sidan:" Muusigga waa dheelitirnaan; dheelitirnaanta waa dhammays; dhammayskuna waa riyadeena; riyadeennana waa Jannada"!

# Cutubka Shanaad: Khalaawada Qalinka iyo Quruxda Nolosha

## 88. Sheekadii iyo Shaxaadkii Shinbirka

Maalin maalin ka mid ah mar aan iska laaluushayay mudaaharaadka caloosha ayaa waxaa sheeko iyo shaxaad iigu yimid shinbir shaxaari ah! In shaxaari uu yahay waxaan ku gartay wuxuu horay u soo kaxeystay naago shinbiro ah oo sheekada iyo shaxaadka u camira. Shaxaadkii ka dib, shinbirkii waxaa na dhax maray sheeko falsafadaysan oo ku saabsan sababta ku kalliftay inuu shaxaari noqdo. Wuxuu iga codsaday in hadalka aan u jilciyo waayo erayga shaxaari kuguma jiro luqadda shinbiraha!



Waxaan u sheegay in dadku shaxaari u yaqaaniin xarfaanta sidiisa oo kale sheekada ay isku shushubtaan gabdhaha iyo garoobada! Intuu qosol la dhacay, ayuu wuxuu shinbirkii yiri" dadka waan la yaabaa, wax walba oo dabiicii ah oo nolosha ku saabsan magac ayay ula baxaan" Intaas markaan shinbirka ka maqlay ayaan gartay in sheeko falsafadaysan igu soo foodleedahay waayo shinbirka wuxuuu u hadlay sida faylasuufyada oo kale!

Ma hadda ka hor ayaad dadka ka maqashay erayo kaa yaabiya ayaan shinbirkii waydiiyay. Asagoo liqaya qayb ka mid ah barradho "chips" uu iga shaxaaday ayuu wuxuu yiri "Haa.. Tiro ma leh inta jeer aan maqlay errayo muujinaya waalida dadka, balse waxaa jira saddex magac oo shinbaraha oo dhan ay ku shaactiraystaan mar alla marka ay dadka ka maqlaan".. Hadalkii ayaan ka dhex galay anigoo leh "maxay kala yihiin saddexdaas magac?...." Waa erayada kala ah: shaqo, shar iyo shahiid" ayuu iigu war ciliyay shinbirkii asagoo baradho la

wadaagaya shinbir garoob ah oo garabkiisa taagnayd! Wuxuu ii sheegay in saddexdan eray iyo waxa loola jeedo ay ku adagtahay in ay fahmaan shacabka iyo waliba maskax- shiilka shinbiraha!

Waxaan ka codsaday shinbirkii in sharraxaad kooban uu iga siiyo sababta ka danbaysa in saddexdaas eray aan laga adeegsan adduunka shinbiraha. Maxaad ku taqaan shinbir sheeko ku bilaabay, markay sheekada meel fiicann idin mareyso ayuu hawada sare iskaga duulaa! Daqiiqado kooban ka dib ayuu miiskii aan ku qadaynayay ku so dul dagay, isla markiina wuxuu guda galay sharaxaaddii aan ka sugay asagoo ku bilaabay hadalkii "Adduunka shinbiraha lagama yaqaan shaqo waayo dhan walba oo aad eegto waxaa ka muuqda Quud uu Rabbiga diyaariyay, sidoo kale shinbiraha waligood shar ma aysan la kulmin waayo waxay arkaan oo kaliya naxariista Rabbiga iyo quruxda nolosha, ugu danbayntiina shinbir shahiiday lama sheegin waayo sabab maangal ah oo loo shahiido maba jirto mar haddii muran kasta lagu xallin karo wada hadal lagu kala gar qaato ka dibna la iskugu garaabo!"

Anigoo yaaban ayaa shinbirkii waxaan weydiiyay su'aal sidan ah" Ma jiraan erayo uu dadka ka maqlay oo shinbiraha ay fahmaan ama ku farxaan. Markale ayuu shibirkii duulay, balse wuxuu ii sheegay in wadatashi uu shinbiraha kale la soo sameyn doono si jawaab fiican looga bixiyo su'aasha.

Daqiiqadoo kooban ka dib shibirkii wuu soo dagay, wuxuuna asagoo ku xabeebsanaya basbaas ku jiray baradhadii uu iga shaxaaday ku jawaabay sidan " Haa way jiraan, waxaan si gaar u fahamnaa, uguna faraxnaa markaan maqalno erayada kala ah; Sheeko iyo Shukaansi, waayo nolosha shinbraha waxay ka bilaabataa kuna dhammaataa sheeko iyo shukaansi, sidoo kale waxaan jecelnahay markaan aragno dadka oo sheekaysanaya ama is shukaansanaya waayo waa marka kaliya oo ay ka nastaan shaqada, sharka iyo waliba shahiidnimada"!

## 89. Cabashadii iyo Cashadii Shinbiraha

Maalin dhexdaas ah mar aan booqday adduunka shinbiraha ayaa ergo ahaan waxa iigu yimid shinbiro ka cabanaya caqli xumada aadanaha. Waxaan arkay shinbiro shan gaaraya oo hortayda ku soo saftay. Shinbir afhayeen ahaa ayaa cabashadii shinbiraha ku bilaabay hadal sidan ahaa: waxaan ka cabanaynaa caqli xumo u gaar ah dadka oo misana saldhig u ah caddaalad darada guud ee ka jirta guud ahaan nolosha oo dhan.

Shinbirikii afhayeenka ahaa oo hadalka sii wata ayaa yiri: “Caqli xumada u gaarka ah dadka waa magac bixinta beenta ah ee dadku marwalba ku mashquulsan yihiin. Dadka waxaa maaro looga waayay in sumad iyo calaamado gooni ah oo muddo ka dib magacyo ciidaa ka badan isku baddala in ay ku kala soocaan nolosha iyo noolaha.”



Hadalkii afhayeenka shinbiraha marka uu halkaas marayo ayaan damcay in cabashada shinbiraha aan dood falsafadaysan ka furo. Waxaan ku doodday in magac iyo sumad gaar ah loo qoondeeyo qolo kasta in ay tahay arin lagama maar maan ah waayo waa sida kaliya ee dadka iyo noolaha kale ku wada xariiri karaan. Mar haddii adeegsiga hadalku yahay astaan dadka kaga soocan yahay noolaha kale, magac bixinta waxay noqonaysa saldhiga luqadaha ay dadku ku hadlaan si ay u fahmaan macnaha ku jira magac kasta.

Dooddaydii caatada ahayd waxaa daaaqada kala baxay shinbir kale oo maalin dhexdaas ah loo caleemo saaray ugaasnimo uusan codsan. Calaamad cagaaran oo muujinaysa ugaasnimada loo caleema saaray ayaa luquntiisa ka laalaaday.

Shinbirka ugaaska ah wuxuu hadalkii ku bilaabay sidan "Sida kuu muuqata, calaamadan cagaaran ee luquntayda ku xiran waxaa ka danbeeyay shaqaalaha ka shaqeeya xaruntan aad nagu soo booqatay maanta. Magac aanan codsan iyo waliba madaxnimo aanan doonayn ayay luqunta ii galiyeen. Adduunka shinbiraha lagama yaqaan madaxnimo iyo waliba magac been ah waayo nolosha shinbiraha waxaa saldhig u ah caddaalad iyo sinaan. Sidaa daraadeed, sabab maangal ah oo magacyo loola baxo, dabadeedna shinbiraha loo kala sooco maba jirto. Sida aad sheegtay dadku waxay ku doodaan in magacyadu yihiin lagama maarmaan waayo waxay ka dhigan yihiin sumad iyo calaamado dadku isku af gartaan, sidoo kalena ku aqoonsadaan noolaha kale, balse dadku badankiis waxay nolosha ka aamineen been ka dib markii ay run biyo kama dhibcaan ah ka soo qaadeen magacyo u gaar ah mala-awaalka dadka." Shinbirkii ugaaska ahaa oo hadalkii wata ayaan weydiiyay "Maxaad ula jeedaa magacyo u gaar ah mala-awaalka dadka?"

Cabbaar ayuu aamusay dabadeedna wuxuu hadalkii ku wareejiyay shinbir kale oo si gaar ah ugu fiirsaday falsafadaha kala duwan ee dadka nolosha ka aaminsanyihiin. Shinbirkii daraaseeyay falsafadaha dadka wuxuu su'aashaydii

kaga jawaabay sidan " Dhamnaan dhaqamada u gaarka ah bulshooyinka adduunka waxaa laga soo dhiraandhiriyay mala-awaalka aadahana kaga soocanyahay noolaha kale. Dhaqamada dhammaantood waxaa saldhig u ah adeegsiga hadalka oo ah awood u sahasha dadka in nolosha ay si fudud ku dabaraan. Dhibaato weyn ayaa ka dhex dhaca nolosha iyo noolaha kale marka dadku run ama xaq u aaminaan magacyada iyo dhaqamada ay ka soo dhiraadhiriyeen malawaalkooda u gaarka ah."

Ma faahfaafin kartaa dhibaatada ka dhex aloosanta nolosha iyo noolaha kale marka dadku aaminaan magacyada ay mala-awaaleen? Su'aashan ayaan weydiiyay shinbirka daraaseeyay falsafadaha dadka.

"Dhibaato kasta oo dadka ka dhex dhacda waxay salka ku haysaa magac ama calaamad dadku u qaateen run biyo kama dhibcaan ah. Dhammaan muranada adduunka ka socda oo mararka qaar horseeda dagaalada iyo colaadaha waxaa sabab u ah magacyo la isku maandhaafay macnayaasha ku jira. Tusaale yaal badan oo aad fahmi kartid oo muujinaya dhibaatada laga dhaxlay magacyada iyo calaamadaha la aaminay ayaan ku siin karaa haddii aad ii shegtid dalka aad ka soo jeedid" Sidaa waxaa yiri shinbirkii oo biyo kabanaya.

Aniga oo ka shakisan in shinbirka aqoon u leeyahay Soomaaliya ayaa su'aashiisii ugu jawaabay sidan: "waxaan ka so jeedaa qaaradda Africa gaar ahaan dalka ku yaala Geeska Afrika."

Qosol shinbireed ayuu la dhacay shinbirkii sheekada noo socotay asagoo dhahaya "Dal iyo dad caan ku ah magacyo been ah oo la iska caleemo saarto ayaad ka soo jeedaa. Maalin walba waxaan shaashadaha shinbiraha ka daawanaa magacyo cusub oo Soomaaliya looga dhawaaqay."

Magacyada beenta ah ee Soomaalida caanka ku yihiin maxaa ka mid ah ayaan shinbirkii waydiiyay. Su'aashaydii wuxuu shinbirka kaga jawaabay sidan: "magacyada beenta ee lala baxo Soomalida kaliya kuma koobna. Bulsho walba oo adduunka ku nool iyo qolo kasta oo bulshadaas ka tirsan waxay ku mashquulsanyihiin magac bixin been ah sida: dalkii hormarka, ururka halgamayaasha, diintii naxariista, firqatul naajiyah iwm. Soomaaliduna bulshooyinkaas ku waashay magacyada cusub dabeedna iska aaminay ayay ka mid yihiin. Balse waxaa jirta dhibaato u gaar ah dadka Soomaaliyeed oo ah in magacyada beenta ah lagu dagaalamo, mararka qaarna la isku bahdilo ama la isku boobo. Haddii aan nahay shinbiraha shaashadaha caalimiga ah kala socda magacyada cusub ee Soomaaliya looga dhawaaqo maalin walba, waxaan ka digaynaa in magacyadaas run loo maleeyo dabadeedna difaacidooda la isku dilo"

Halkaas marka ay sheekada marayso ayaa waxaan ka war helnay shinbir cad oo cod dheer ku dhawaaqaya asagoo leh: Waxaa la gaaray waqtigii cashada, waxaa diyaar ah malaay malakul mowtku soo tarxiilay."



Daqiiqadiiba shinbirihii iyo anigaba waxay u dhaqaaqnay dhankii uu shinbirka cad ka dhawaaqayay. Malaay weyn oo malakul mowtku nafta ka qaadey iyo shinbirkii cadaa oo faraxsan ayaa noo muuqday. Mid ka mid ahaa shinbirihii shanta ahaa ee ee cashada loogu yeeray ayaa yiri" Kaaley horta shinbiraha cad cad maxay marwalba cunto iyo cabitaan kaliya ugu mashquulsanyihiin?"

Shinbirkii cadaa oo ka xanaaqsan hadalka abaal dhaca ah ayaa yiri " Shinbiraha madow ee faro dheerta ah kibir badanaa horta, adinkoo gaajaysan oo calaacal iyo muran micno daro ah ku mashquulsan ayaan casho idin soo helay, intii la ii mahad celin lahaa ayaa bilowdeen in shinbiraha cad cad lagu caayo cunto jaceyl. Adduunkaan shinbirkii nool maxaa aragti u laaban !"

"Sida dadka oo kale ayaa u dhaqmaysaan maanta. Shinbir cad oo cunto jecel iyo shinbir madow oo faro dheer ah ma jiraan. Waa magacyo been ah oo dadku ay bixeen. Dhamaanteen waxaan nahay shinbiro awood u leh in ay hawada sare si xor ah u mushaaxaan Hadaba shinbarayahow sheekada dadka iyo magacyada beenta ah yaysan idinka mashquulinin farxada iyo quruxda nolosha" Sidaa waxaa ku baaqay shinbir waddani ah oo ka mid ahaa shantii shinbirood.

## 90. Farriintii Fududayd

Magaalada Toronto, ragga iyo dumarka baabuurta gaarka ah aan wadanin ee lugta maala sida ciidamo enfantari ah oo kale, waxaa waqti badan kaga lumaa sugitaanka basaska magaalada, gaar ahaan maalmaha Axadda sida maanta oo kale. Muddo badan ayaan bus ku sugayaa goobta qoraalkan caatada ah ku curtay. Labo arrimood midkood ayaa ii furan in aan sameeyo. Arrinta koowaad waa in aan is waalo oo hadba saacadda eego si aan u muujiyo dhararsiga daqiiqadaha ka dhiman waqtiga uu buska iman doono, anigoo markas ku dayanaya dhaqanka dadka reer Toronto marka ay busaska sugayaan. Arrinta labaad ee ii furan waa inaan caadi iska dhigo, dabadeedna inta buska uu ka imaanayo aan bilaabo u kuur galida deegaanka dabiiciga ee ah ee igu

hareeraysan si aan ula falgalo farxadda iyo falsafasadda nolosha ee aadanaha badankiis sida fudud ku il-duufaan.



Doorashada labaad ayaan guddoonsaday. Hoos baan eegay, mise waxaaba maraya doox sida biyo durdur ah oo malaha ka dhashey roobab ma hiigaan ahaa oo ka da'ayay magaalada. Markii aan hareerahayga fiiriyayna waxaa ii muuqday doog cagaar ah oo si qurux badan uga dul baxay geedo dhir ah oo iskugu jira kuwo dhaadheer iyo qaar gaagaaban. Muddo daqiiqad aan ka badnayn ayaan geedaha iyo aniga si gacaltooyo leh isku marxabaynay anagoo is moogaysiinayna xad beenaadka u dhaxeeya dhirta iyo noolaha kale ee dadku ka mid yahay. Daqiiqadaas sida dabiiciga ah aan iskugu hilownay dhirtaas iyo anigaba, waxaa ii xigay dareenka iyo damaca doqoniimada ah ee dadka u diiday farxadda nolosha.

Damaca iyo dareenka igu dhashey waxaa u sabab ahaa fekrad danaysi ah oo maangayga si kadis ah ugu soo duushay ka dib markii aan ku taamay in geelii reerka ku fiicnaa lahaa in maanta uu daaqo dooga iyo barwaaqada hortayda ka muuqda! Waxaan is weydiiyay sababta cilmiyaysan ee ka danbaysa in Ilaahay, gaaladan aan geela lahayn ugu deeqo dhulkan barwaaqada ah, asagoo geellayda muslimiinta badankood dajiyay dhul qorfe ah oo baad iyo biyo midna aan lahayn? Markiiba waan acuudu billeystay, waxaana soo xasuustay in bil ramadan lagu jiray, lagana fiican yahay in su'aalo falsafadaysan aan lagu fiirfiirinin nolosha. Haddana waxaa ii xigay xasuus kale oo ah in aysan maangal ahayn in bil ramadaan la- cuudu billaysto, waayo waa tii odaygii shaydaan ahaa xabsi loo taxaabay bishan.

Daqiiqadihii aan dul taagnaa dooxii siday biyaha durdurka ah iyo daawashada dhirtii quruxda badnayd iigama darin. Waxaan ka faa'iday farxad fudud iyo su'aalo falsafadaysan oo maaweelo ii noqon kara saacadahii ka dhinnaa afurka. Markii uu ii muuqday buskii aan sugayay ayaan damcay inaan dhaqaaqo si safka dadka buska sugaya aan dhexda uga dhaco mar haddii Soomaali saf

ilaalisay la maqal, horayna loo arkin. Intii aanan dhaqaaqin ayaa waxa ii dhawaaqay mid ka mid ah dhirtii dhaadheerayd si uu farriin fudud u gaarsiiyo dadka orodka iyo waalida dunida ku il duufay farxadda iyo falsafadda nolosha. Farriinta fudud waxay tahay waligaa u kuurgal waxa hoostaada iyo hareerahadaa ka dhacaya waayo waxaa laga yaabaa in aad heshid farxad kaa maqan ama fahamka falsafad kuu sahli karta safarka nolosha!

## 91. Qalbi Xab-xabkii Xanaaqay

Habeen ayaa ku riyooday xaflad looga hadlayo arrimaha Soomaaliya oo lagu qabtay barxad u dhaxeysa Janada iyo Naarta. Xubnihii xafladda ka soo qayb galay waxay u badnaayeen marxuumiin reer aakhiraad ah oo qiyaamaha ku sugaya nolosha loo yaqaan barzaq oo ka dhigan barin u dhaxeeya adduun iyo aakhiro iyo marti sharaf kooban oo nolosha dunida laga soo martiqaaday kuwaa oo xafladda ka soo qayb galay ka dib markii ay soo raaceen diyaarado riyo ah.

Ragii aan isku baranay riyadaas waxaa ka mid ahaa nin aad u qalbi wanaagsan oo si dhab ah u jecel Soomaalida iyo Soomaalinimada. Sheeko kooban iyo barasho guud ka dib, ninkaa odayga ah waxaa noo bilowday dood socotay shan saac oo riyo ah. Nuxurka dooddaas waxay ku saabsanayd su'aashan: Soomaalida ma la badbaadin kara haddii baraarujin iyo beerjileec is biirsaday lagu bar-baryo.

Waligay sheeko iyo shaahid kuma arag qof Soomaali ah oo ka qalbi xab-xabsan marxuumkaas waayo marwalba wuxuu muujinayay yididiilo ah in Soomaalida silica iyo saxariirta mar-uun ka samata bixi doonto. Wuxuu ahaa nin gaaban oo caloosha u buuran, midabkiisuna yahay madow dhalaalaya oo la moodo laami hadda gacanta laga qaaday oo kale. Daqar weyn ayaa ka muuqday dacalka bidix ee madaxiisa, wuxuuna ii sheegay in dagaal lagu difaacayo diinta iyo Soomaalinimada ka soo gaaray daqarkaas qarnigii sagaalaad ka hor inta uusan u dhiman xabbad uu ku dhuftay nin ay isku jufo ahaayeen mar ay ku murmeen qaybsiga geel laga soo dhacay gaalo dagi jirtay Geeska Afrika!

Ninkaa odayga ah wuxuu ii sheegay inuu ka muraaro dilaaco darxumada ku haysata Soomaalida nolosha adduunka waayo marwalba wuxuu aakhiro kula kulmaa Soomaali badan oo qaab silica ah u geeriyooday ka hor inta aysan aakhiro usoo guurin. Fursad aan kaga wareysto fursadaha ka jira aakhiro ima siinin waayo wuxuu aad ugu mashquulsanaa sheekada ku saabsan sida Soomaalida loogu samata bixin karo nolosha adduunka. Tusaale ahaan waqti walba wuxuu ku mashquulsanaa mala-awaalka mowduuc cusub oo u rajeynayo in Soomaalida adduunka ku sugan silica looga saari karo. Inkastoo dadka qalbi xab-xabka ah waxyaabo badan ku fiicanyihiin, hadana marka ay timaado doodaha maangalka ah waxay dareemaan jahawareer iyo juuc waayo qalbi xab-

xabnimada waxaa lagu qaadaa washamsi inta lagu guda jiro doodaha caqliga iyo cilmiga kaliya loo cuskado.

Tusaale ahaan, waxaan xasuustaa mar ninkan odayga aan ka doodnay sida qaar wadaaddada kamid ah Soomaalida u wareeriyeen. Dooddiisa waxay ahayd in Soomaalida sidan dhaami lahayd haddii ay heli lahaayeen culumo dabacsan oo Qur’aanka si miyir qab ah dadka u bara. Markiiba dooddaas waxaan kala hor imid cadeymo taariikhi ah oo dhacay dhimashadiisii ka dib kuwaas oo cadeenaya in Soomaalida soo mareen culumaa'udiin ku caan baxay dabacsanaan iyo dad jaceyl, balse dabciga Soomaalida uu ka caaganyahay culimada noocaas ah. Qalbi xab-xabkii reer aakhiraadka ahaa waxaan u sheegay in shiikh Maxamed Macalin oo qudhiisa marxuum ah uu ahaa caalim aan laga hoos qaadin qaababka la isku qabadsiiyo Qu’raanka iyo qalalaasaha nolosha.

Waxaa dhacday in qalbi-xab-xabkii markale la soo shirtagay dood kale oo ah in Soomaalida sidan dhaami lahayd haddii ay heli lahaayeen siyaasiyiin waddaniyiin ah iyo madax daacad ah. Markiiba dooddan caatada ah waxaa daaqada kala baxay cadeymo taariikhi ah oo muujinaya in Soomaalida soo mareen qaar ka mid ah madaxda dunida ugu maamuuska wanaasan sida madaxweyne Aadan cadde, balse dabciga Somaalida uu ka caaganyahay in la daneeyo madaxda daacada ah.

Muddo markii la joogay ka dib, ayuu haddana qalbi xab-xabkii dood cusub curiyay. Dooddan waxay ahayd in Soomaalida sidan dhaami lahayd haddii ay heli lahaayeen waxgarad iyo Abwaano dadka ku baraarujiya qiimaha waddaniyada iyo wadajirka. Dooddan lagumaba daahin, waayo qalbi xab-xabkii waxaan xasuusiyay in Soomaalida soo mareen abwaano ku xiiqay gabayo iyo suugaan kala duwan si bulshada looga digo cawaaqib xumada laga dhaxlo qabyaaladda iyo qolo-qolaysiga. Waxaan u sheegay reer aakhiraadkii waddaniga ahaa in ay tiro beeleen abwaanada suugaanta iyo guubaabada aan ka hagran Soomaalida sida Abwaan Tima Cade oo kale.

Doodihii xal raadinta ahaa kama uusan quusan qalbi-xabxabkii waayo wuxuu markale sheegay qoddob ah in Soomaalida sidan dhaami lahaayeen haddii la heli lahaa hoggaamiye adag oo gacan bir ah ku qabta. Intaan qoslay ayaan u sheegay in marxuum magaciisa la dhihi jiray Siyaad Barre oo ahaa hoggaamiye kaligii talis ah Soomaalida soo marey. Sidaa daraadeedna Soomaliya aysan ka suurta galanaynin madax macangag ah oo dadka maquuniya.

Cabbaar inta uu aamusay ayuu haddana dood cusub bilaabay. Markan dooddiisa waxay ku saabantahay in Soomaalida sidan dhaami lahayd haddii fanka iyo heesaha heer ka gaari lahaayeen. Wuxuu sheegay in cudarrada nafisga ah sida ciilka iyo caqli xumada laga nafisi lahaa haddii la heli lahaa Soomaali ku fiican

qoob ka ciyaarka iyo niikada kuwaas oo dadka bara qaababka looga caafimaado cudurrada nafsiga ah. Waxaan u sheegay doodan in ay maangal tahay waayo sodonkii sano ee Soomaalidu qaranka ahaayeen waxaa caawiyay hormarkii laga gaaray fanka iyo heesaha. Waqtigaas Soomaalida waxaa u soo baxay dumar iyo rag kaalin weyn ka qaatay qoob ka ciyaar caalamka sida Shiikh Abuukar oo kaalimaha hore ka galay tartanka niikada qaarada Afrika!

Qalbi xab-xabkii reer aakhiraadka ahaa waxaan ku wargeliyay in nasiib daro weyn ku habsatay hormarkaas ka dib markii fanka iyo heesaha weerar ba'an ku soo qaadeen wiilal shilimaad shaxaad ah ka soo qaatey Carabta si loola dagaalamo farxad ka hana qaada Geeska Afrika. Waxaa la yaab igu noqotay sida lama filaanka ah ee Qalbi- xab-xabkii u xanaaqay ka dib markii uu maqlay weerarka ba'an ee ku socda fanka iyo suugaanta Soomaalida. Koobab shaah lagu cabay oo miiska shirka saarnaa ayuu laad ku qaaday asagoo ku qaylinaya Soomaali waa ku daysay haddiiba Carabtii aan ku ogaa nacasnimada u shaxaad doonteen. Riyaddii waxaan ka soo toosay qalbi- xabxabkii oo xanaaq la qaylinaya!

## 92. Madaxbannaanida Malaa'ikta, Maalqabeennada iyo Mukulaalaha

Habeen habeennada ka mid ah mar aan soo hoyanayay ayaa xoogaa ku soo lugeeyay dhul bannaan oo dhanka danbe kaga beegan dhismaha aan dagannahay. Markii aan guriga u soo dhowaaday ayaan waxaan ishaydu qabatay mukulaal ku mushaaxaysa barxad ka danbaysa bir shabaq ah oo wadada dhinaceeda lagu sharraxay!

Markii aan arkay kalsoonida ka muuqata mukulaasha ku caweeynaysa goobta cidlada ah ayaan waxaan muddo daqiiqado ah ka fekeray macnaha ku jira egayga madaxbannaani. Waxaan ognahay in dadka oo dhan iyo dawladaha ka jira adduunka in ay aad u daneeyaan in si buuxda loo dareemo ama loogu dabaal dago madaxbaani aan muran ku jirin.



Maadama madaxbannaanida tahay mowduuc ballaaran oo laga yaabo in qolo walba si gaar ah u qeexdo, waxaan go'aansaday in fekerkayga uusan dhaafin madaxbanaanida ay dareemaan maalqabeennada, malaa'ikta iyo waliba mukulaalaha. Sababta aan u xushay madaxbanaanida ay dareemaan saddexdan noole ee kala duwan waa in fekerka iyo qoraalka uusan nala sii fogaan.

Sidoo kale saddexdan noole ee kala duwan waxay noo matali karaan madaxbanaanida ka jirta saddex caalam oo si yaab leh isku dulsaaran. Saddexda caalam waxay kala yihiin caalamka ay ku dhuuntaan awoodaha qarsoon, caalamka laga qayliyo ama la isku qarxiyo iyo waliba caalamka qaabka aamusan looga qaraabto!

Tusaale ahaan, waxaan su'aalo kooban iska weydiin karnaa marka la joogo caalamka laga qayliyo ama la isku qarxiyo, maalqabaneedu madaxbannaani noocee ah ayay dareemaan maadama la ogyahay in caalamkan lacagta laga caabudo. Dhanka kale waxaa laga fekeri karaa madaxbaanida ay dareemaan malaa'igta marka la joogo caalamka qarsoon waayo sida la sheegay malaa'igta waa madaxda caalamka ay ku qarsanyihiin awoodaha dhuumaalaysta. Ugu danbayntii waxaa maskaxda lagu mala-awaali karaa madaxbanaanida u gaarka ah mukulaalaha marka la joogo caalamka aamusnaanta lagu maareeyo!

Marka la eego buuqa iyo is qab-qabsiga ka jira caalamka laga qayliyo ama la isku qarxiyo, maalqabeennadu waxay marwalba ku mashquulsanyihiin bixinta lacago joogto ah si la iskaga laaluusho qolooyinka abaabula qaylada iyo qaraxyada socda. Sidoo kale maalqabeenadu waxay laaluush badan ku bixiyaan sidii xoogaa qosol iyo qaraaxo ah uga heli lahaayeen xaasaska iyo saaxiibbada jeebka.

Sababta ugu weyn ee lacagta looga caabudo caalamkan laga qayliyo waa in dadka iyo dawladaha dareemaan madaxbanaani aan muran ku jirin. Haddaba waxaa muuqata in maalqabeenadii ku guuleystay lacagta laga heli karo caalamakan, ku mashquulsanyihiin laaluush joogto ah si nafta u dareento xoogaa xasilooni ah. Sidaa daraadeed , waxaa lagu baraarugi karaa in madaxbanaanida maalqabeenada tahay mid qabyo ah waayo waa madaxbaani magan u ah shilimaad laga yaabo in shaxaad ama shukaansi ku dhammaadaan.

Dhanka kale, malaa'ikta oo madax ka ah caalamka qarsoon waxay marwalba ku mashquulsanyihiin fulinta amaro malaayiin sano ka hor maqaadiirta qorsheeysay. Tusaale ahaan malakul-mowtka wuxuu daqiiqad kasta ku mashquulsanyahay inuu nafta ka jaro masaakiin la harjadaysa mowjadaha aan dhammaadka lahayn ee nolosha. Waxaa yaab leh sida malakul-mowtka uusan marnaba isku weydiin maangalnimada amarada maqaadiirta laga maqlay ee ku aaddan geerida joogtada ah ee mudada fog ka socota Geeska Afrika.

Tusaale ahaan, malakul-mowtka isma weydiiyo maangalnimada in sannadkii dhow jeer maqaadiirta madaxa isku galiso qabiillada dariska ku ah degmada Gaalkacyo si dad badan u geeriyoodaan. Haddii malaa'ikta madaxda ka ah caalamka ay ku dhuuntaan awoodaha qarsoon haystaan madax-bannaani buuxda, malakulmowta ayaa wuxuu talo ku soo jeedin lahaa inuu maalmo ka nasto daalka ka soo gaaray dilka iyo geerida ka socota Geeska Afrika.

Waxaa laga yaabaa sidoo kale in malakul-mowtka ku talin lahaa in maqaadiirtu qorsheyso qaab qabiillada marwalba ku dagaalama degmada Gaalkacyo garashada u adeegsan lahaayeen si nabad loogu soo dabaalo gobolka, dabeedna maqaadiirtu madaxa isku galiso qabiilalda Shiinayska ah ee quruumaha noqday waayadan si bal maalmo malakul-mowtka dalxiis iyo fasax ugu tago degmooyin ka tirskan dalweynaha Shiinaha.

Haddaba waxaa cad in malaaikta aysan marnaba ka madaxbanaanayn amarada joogtada ah ee maqaadiirta malaayin sano ka hor qorsheeysay! Sidaa daraadeed, waxaa si fudud lagu ogaan karaa in madaxbaani buuxda aysan ka jirin caalamka qarsoon ee malaa'ikta garaadaha ku safan ku gaardiyaan!

Marka laga hadlayo madaxbanaanida ka jirta caalamka lagu maareeyo aamusnaanta, waxaa fiican in maanka la furo oo maskaxda si fiican looga shaqeysiiyo waayo farriimaha laga heli karo caalamkan waa muuqaalo maskaxdu ku mala-awaali karto sawirro badan oo qarsoon.

Noolaha kala duwan ee ku sugan caalamka laga aamusanyahay waxaa ka muuqda xasillooni iyo kalsooni buuxda. Tusaale ahaan, mukulaasha ku caweynaysay barxadan cidlada ah waxay muujisay madaxbaani buuxda oo dan iyo heelo aan la lahayn buuqa ka socda caalamka laga qayliyo iyo amarrada joogtada ah ee ka jira caalamka qarsoon.

Sida muuqaalka mukulaasha laga aqrisan karo, madaxbanaanida noocan ah waxaa la gaaraa marka maskaxda laga xoreeyo beenta waqtiga ee ku baaqaysa jiritaanka shalay, iyo berri. Mukulaalaha iyo nafleyda kale ee caalamka laga aamusan yahay ku mushaaxa waxay mar hore ogaadeen in waqtiga dhabta ah ee jira uu yahay daqiiqadda markaas la joogo. Madaxbanaani ka weyn ma jirto sida muuqaalka mukulaalaha laga akhrisan karo in daqiiqadda markaas taagaan nolosha loogu dabaal dago si gobanimo ku jirto.

Mar haddii caalamka laga aamusan yahay uusan ka jirin muran ku saaban wixii shalay dhacay ama waxa dhici kara berrito, ma jirto sabab maangal ah oo loogu mashquulo laaluush joogto ah iyo fulinta amaro aan dhammaad lahayn. Sidaa daraadeed, mukulaalaha kaliya ayaa madaxbanaani buuxda u dabaal dagi kara marka la eego xorriyada qabyada ah ee maal-qabeenada ku xeeran iyo waliba madaxbannaanida ka maqan malaa'ikta!

Gabagabadii, qoraalkan dheer waxaa ku qaada dhignay macnayaasha kala duwan ee erayga madaxbannaani marka la joogo saddexda caalam ee is dulsaaran. Waxaan ogaannay in maalqabeenada ku guuleystay lacagta laga caabudo caalamka laga qayliyo in aysan haysan madaxbanaani buuxda. Sidoo kale waxaan ogaannay in madaxbannaani buuxda aysan ka jirn caalamka qarsoon ee malaa'ikta ku maamuusaan Rabbiga wax walba abuuray. Ugu danbeyntii waxaan ogaananay in mukulaalaha muujiyeen in macnaha dhabta ee erayga madaxbaani laga baran karo oo kaliya caalamka laga aamusanyahay!

## 93. Khilaafkii iyo Qirashadii Khudaarta

Khilaaf adag ayaa dhex maray khudaar ka buuxday danbiil la dhigay dhanka waqooyi ee jikada. Khilaafka khudaarta ayaa si lama filaan ah ku billowday ka dib markii saddex moos ah oo ka laallaaday danbiisha dusheeda ku doodeen in ay yihiin laan-dheereyaal aan laga dabo hadli karin.

Xabad yaanyo ah oo bartanka danbiisha fadhisay ayaa qosol la dhacday ayada oo quursanaysa saddexda mooska ah ee la soo shirtagay laan-dheeranimada. Waxayna ku doodday in yaanyadu tahay laandheere aan laga maarmin waayo dhammaan dallac bilaashka iyo shak-shuukada adduunka laga dallaco waxay ka soo farcameen yaanyo.

Ansalaato daganayd dhanka waqooyi bari ee danbiisha ayaa dooddii dalaq soo tiri, waxayna ayada oo suuroonaysa tiri: Heedhe bilaash baad u dooddaysaan, waligiin miyaad aragteen asalaanto la'aanteed raashin dhadhan leh.

Dhowr mirood oo Canab ah oo waqooyi galbeed ka dagan danbiisha ayaa dusha sare ka daawanayay khilaafka sida lama filaanka u curtay. Markii muddo ay daawanayeen khilaafka socda waxay dooddii socotay ku darsadeen in miraha Canabka laga maarmo oo aysan qasab ahayn in marwalba la cuno, sidaa daraadeedna muranka danbiisha ka dhex socda ay ka madax banaanyihiin.



Khilaafkii khudaarta ee ka billowday danbiishii la dhigay dhanka waqooyi ee Jikada wuxuu u soo dhaadhacay khudaar daadsanayd miis yaallay dhanka koonfureed ee jikada.

Khudaarta daadsan miiska ka muuqda dhanka koonfureed ee jikada uma kala soocnayn sida khudaartii ku jirtay danbiisha oo kale waayo waa khudaar loo diyaariyay in lagu qararamsado xilliga cashada oo markaas soo food lahayd.

Murankii danbiisha ka socday mid ka daran ayaa ka dhex billowday khudaartii daadsanayd miiska. Dhowr bas-baas gaduud ah oo gees ka daganaa miiska ayaa ku doodday inay ka awood badanyihiin basasha iska buuran ee marwalba booska ku ciriirisa khudaarta kale.

Xabad basal oo huruday dhanka kale ee miiska ayaa soo booday waxayna tiri ayada oo hamaansanaysa: bas-baas waa lagu yaqaanaa, bootadaada oo dhan waa daqiiqadaha ugu horreeya oo aad iska dhigtid wax kulul balse waan ognahay in karti kale aaddan meesha ku haynin.

Khilaafkii u dhaxeeyay khudaarta wuu xoogaystay. Khudaar walbana waxay quursi iyo qab weyni u muujisay khudaartii kale marka laga reebo Toon muddo badan khudaarta kale u tilmamaysay in haddii si falsafadaysan loo fakero in qaab fudud lagu fahmi karo kaalinta iyo doorka dhabta ah ee khudaar oo dhan ka ciyaaraan ciyaarta guud ee nolosha ka socota. Tusaale ahaan Toontu waxay arkaysay in muranka ka dhex socda khudaarta uusan muhiim ahayn waayo waqtiga cashada marka la gaaro dhammaan qudaarta miiska daadsan oo dhan waxaa qararamsan doona qoyska muslimiinta ah ee maanta dhan ilaahay dartiis u soomanaa.

Muddo badan ayay Toontii ku dadaashay in khudaarta ku mashquulsan khilaafka micno darada ah la wadaagto farriimaha falsafaddu ka gubdinayso mustaqbalka dhabta ah ee khudaarta.

Nasiib darro markii maqribkii soo dhawaaday oo islaantii qoyska hooyada ka ahayd oo mindi wadata jikada soo gashay si loo diyaariyo cashadii lagu afuri lahaa ayaa dhamman khudaartii ku mashquulsanayd khilaafkii macno darada ahaa isla qireen in aysan waxba is dhaamin waayo saacado kooban gudahood waxay u hoyan doonaan caloosha mugdiga ah ee dadka.

## 94. Qushuucii iyo Qosolkii Quraanjada

Xilli aroor ah mar aan sugayay bus ayaa indhahaygu waxay qabteen Qaran madax banaan oo quraanjo kaliya ay ka taliso. Dalkaas quraanjadu dagantahay ayaan daqiiqado kooban dul taagnaa. Hooskeyga ayaa sababay in mugdi ku habsado dalkaas madaxa banaan ee ka tirsan dawladaha xasharaadka. Marna kuma baraarugsanayn in hooskeyga uu sababay mugdi daran oo dul dagay dalka quraanjadu dagantahay waayo tayda ayaaba i haysatay oo waxaan ka fekerayay daqiiqadaha buska uu soo daahi doono. Si kadis ah ayay indhahaygu u qabteen dalkii quraanjada oo shaqo joojin laga sameeyay si loo tukado salaadaha loogu tala galay marka hooska dadka uu dalka quraanjada ka qariyo iftiinka qorraxda.



Shiikh ka mid ah culumada ugu caansan dalkaas quraanjadu daggan tahay ayaa dadkii salaada ka bixinayay. Muuqaal ahaan wuxuu ahaa shiikh suufi ah waayo waxaa ka muuqday qushuuca iyo qiirada ay caanka ku yihiin awliyada Ilaahay ee xiiseeya in ay fahmaan siraha ku qarsoon koonka iyo guud ahaan nolosha.

Maadama shiikha quraanjada ahaa wali Ilaahay, muddo badana ku mashquulsanaa ogaanshaha siraha qarsoon ee koonkan, waxaa si lama filaan ah xilligaas ugu suura gashay kashfi kooban oo lagu tusay in hooska ku habsaday dalkiisa inuu sababay anigan meesha ku sugaya mid ka mid ah gawaarida casriga ah ee laga isticmaalo caalamka ay ku caajiseen dadka!

Shiikhii quraanjada ahaa oo si daran u qushuucsan ayay indhaheenu is qabteen. Sida la ogyahay, awliyada Ilaahayey meelwalba oo ay joogaan waxaa loo suurta galiyaa in ay ku hadlaan luqadaha looga hadlo caalamka markaas daaha looga feeday inta lagu guda jiro daqiiqadaha kashfiga socdo. Sidaa daraaadeed shiikhii quraanjada ahaa wuxuu igula hadlay English!

Markiiba asaga oo ka argagaxsan baaxada muuqaalkayga ee ka qariyay cir iyo dhul ayuu i weydiiyay shaydaan ama malak midka aan ahay! Waxaan u sheegay in midna aan ahayn, oo aan ka mid ahay abuur lagu magacaabo dad oo tiro ahaan todobo bilyan ah. Waxaan kaloo u sheegay inaan ka xumahay mugdiga hooskeyga uu sababay ee ku habsaday dalkiisa. Maadama waqtigu koobnaa waxaan ku wargaliyay inuu i weydiiyo su'aalaha ugu muhiimsan ee looga dooddo caalamka quraanjada. Asaga oo ka xun waqtiga kooban ee loo qoondeeyay kashfiga, ayuu shiikha i wediiyay labo su'aal oo aad looga xiiseeyo adduunka quraanjada.

Su'aasha koowaad waxay ahayd, dadka waa noole noocee ah halka su'aasha labaadna ka ahayd xogta ugu muhiimsan ee dadku ka hayaan siraha ku qarsoon nolosha iyo koonka?

Sida laga garan karo qoto dheerida su'aalaha shiikha u xushay kafshiga lama filaanka ah, waxaan u baahnaa waqti fiican oo aan ku faah-faahiyo jawaabaha ku habboon weydiimahaas. Haddana aniga oo xasuusan waqtiga ciriiriga ah ayaan go'aansaday in aan dulmaro qoddobada muhiimka ah ee jawaabahaas loo qoondayn karo.

Waxaan u sheegay shiikha in dadku yahay abuur danayste ah oo badanaa ku mashquulsan manfac luqunta la mariyo si loo aamusiyo calool ku mashquulsan mudaaharaad joogto ah! Waxaan sidoo kale u sheegay in mashquulka dadka ee ku aaddan manfac luqunta la mariyo badanaa yahay calaamad lagu garto caalamyada nolosha ciriiriga ka tahay sida dunida dadku ku noolyihiin oo kale.

Jawaabta su'aasha labaad waxaan ku soo koobay in dadku xog dhameystiran oo dhaafsiisan huuhaa in aysan ka haynin siraha ku qarsoon nolosha iyo koonka waayo tabar darrida ka muuqata adduunka quraanjada waxaa ka daran itaal darrida ku lamaansan garashada gaasiran ee dadka.

Shiikhii quraanjada ahaa oo qoslaya ayaa yiri illeen dadkan marwalba naga qariya iftiinka qorraxda waxba ma awood dhaamaan quraanjada bilaashka u qushuucsan marka la eego baaxadda iyo ballaca koonka.

Aniga oo la yaaban sida qushuucii quraanjada iskugu badalay qosol qadaadka laga qoslay ayaan soo xasuustay in awliyada Ilaahay ee dadka ka mid ah mar-mar loo feydo kashfi kooban. Waxaan u sheegay shiikhii quraanjada ahaa in xogta ugu xiisaha badan ee dadku ka hayaan siraha ku qarsoon koonka in laga

dhaxlay kashfi goos- goos ah oo mararka qaar soo booqda awliyada Ilaahay ee ka midka ah dadka.

Shiikhii quraanjada ahaa wuxuu iga codsay in uu ila galo sawirro selfie ah waayo caalamka quraanjada lagama yaqaan kashfi aan caddeymo loo haynin. Sida badan sharciga u yaalla dunida quraanjada waa i tus oo i taabsi, sidaa daraadeedna wuxuu shiikha sheegay in xertiisa aysan rumaysan doonin haddii uusan tusin caddeymo muujinaya kashfiga maanta uu nasiibsaday.

Sawirkii ugu horreeyay markii aan la galay shiikha ayaa waxaa soo istaagay baskii aan sugayay. Sidaas ayuuna kashfigii daqiiqadaha kooban ee shiikha quraanjada ku daawanayay caalamka dadka ku soo gabagaboobay!

## 95. Shaydaanka ma soo galaa Facebook

Ma xasuusto markii ugu horeysay ee aan shaydaan maqlo, laakiin waxaan xasuustaa maalintii ugu horreysay ee aan ninkii shaydaan ahaa ka fakero ama aan su’aalo iska weydiiyo shaqooyinka uu qabto. Waxaan xasuustaa carruurnimadaydii in xilli arooryo ah oo qoraxdu aysan wali si fiican u soo bixin ayaa waxaa si qaylo iyo handadaad ah hurdada iiga kiciyay nin xerow ahaa oo aan guri wada jiifnay. Xerowga wuxuu ka xanaaqsanaa hurdada ila tagtey oo salaaddii subax i dhaafsiisay. Cod qaylo iyo canaan iskugu jira ayuu hurdada iiga salaliyay, waxaana errayadiisa ka mid ahaa “Waryaa ka kac meesha, sheydaan baa xaley oo dhan dhegaha kaaga kaadinayay, waa taas sababta aad salaadda subax ugu kici waysay.”

Markii uu waagii baryay ayaan waxaan aadey dugsi Quraankii si aan u soo loox jiito. Badanaa marka dugsiga Quraanka la joogo waxaa dhici jirtay in ay carruurta ii soo dhuuntaan, maadama aan aahaa ilmo sheeko badan oo carruurta madadaaliya saacadaha qallafsan ee dugsiga la joogo. Macallin Jimcaale oo ahaa nin dabeecad xun ayaa wuxuu arkey anigoo carruurta sheeko maad miiran ah uga sheekeenaya. Intuu dhengad soo qaatey ayuu si arxan daro ah ii xanuujiyay asagoo ku qaylinaya: Waxaad tahay sheydaan yar oo dugsiga ku soo dhuuntey si uu carruurta Qur’aanka iyo Kheyrka uga mashquuliyo!

Maalintaas waxay ii ahayd maalin murugo iyo ciil aan waligey illoobi doonin. Anigoo aad u careysan ayaan waxaan is weydiiyay su’aalo badan oo sheydaanka ku saabsan. Su’aalihii badnaa ee aan isweydiiyay waxaa ka mid ahaa: Sidee ku dhacday in macallin Jimcaale uu kugu eedeeyo in aad tahay sheydaan? Soo tii sheydaanku ahaa wax xun oo dadka iyo carrrurta marka ay hurdaan dhegaha uga kaleetiya? Sidee u noqon kartaa Sheydaan dadka habeenkii dhegaha uga kaadsha, subaxiina carruurta Kheyrka ka duufsada? Soo taan ahaa miskiin dhibane ah ka dib markii xaley shaydaankii runta ahaa

dhegaha iiga kaadshey oo salaadii fadliga badneed ee fajriga I seejiyay? Ma aanan helin cid iga caawisa jawaabaha su'aalahii badnaa ee maskaxdeyda ka guuxayay maalintaas. La yaab ma lahayn in aan waayo cid iga caawisa jawaabahaas waayo carruurta ku silicsan geeska Afrika ma helaan cid uga jawaabta su'aalaha waaweyn ee ay nolosha iyo naftooda ka qabaan. Maalmo badan ayaa waydiimahaas maskaxdeyda wareerinayeen.

Nasiib wanaag, maalin ayaa anigoo wareersan waxaan soo booqday Ayeeyo oo ahayd qof garasho dabiici ah Eebbe weyne ugu deeqay. Inta badan markaan nolosha ku so wareero waxaa caado ii ahayd inaan Ayeeyo soo booqdo si bal aan uga nafiso wareerka iyo welwelka waayahayga nololeed ee carruurnimada. Inta aan Ayeeyo la joogo, waxaan heli jiray fursad dahabi ah oo aan ku dhageesto sheekooyinkii waayo waayo ee ku saabsanaa sooyaalka Soomaalida. Maalintan aan ayeeyo soo booqday way ka duwanayd maalmaha kale. Ayeeyo waxay dareentay in si wax iga yihiin oo aanan faraxsaneen. Intay ii soo dhawaatey ayay tiri " waryaa yaa ulahan jirkaada ka muuqda kugu dhuftay?

Ayeeyo macallin Jimcaale ayaa si xun ii garaacey ayaan ku jawaabey aniga oo ciishoon. "Ma wax xun baad sameysay, macallin Jimcaale nin fiican buu ahaaye" sidaa waxaa yiri Ayeeyo oo yaabban. Waxaan u sheegay Ayeeyo in la igu eedayay in aan ahay sheydaan yar oo dugsiga ku soo dhuuntay si uu carruurta uga mashquuliyo kheyrka iyo quraanka. Ayeeyo Intay cabbaar aamustay ayaa waxay hadalkii ku bilowady hadal sidan ahaa oo aan waligey iloowbi doonin " Maandhow sheydaan shaqo kale miyuu waayey markuu carruurta ku mashquulayo, sheydaan waqti iskagama lumiyo carruuta iyo dadka waalwaalan midna, ee ninkii ilmo yar shaydaanimo ku eedeeyay waxba kalama oga, wuxuuna la mid yahy Rati mici gamaarre ah oo dhul cidlo ah iska durduriyay".

Hadalka Ayeeyo wax weyn baan ka fahmay, waxaana ogaadey in eedda macallin Jimcaale in ay tahay waxba kama jiraan iyo in macallin Jimcaale uusan waxba dhaamin Awrta lagu guuro!

Waqti ka mid ah carruurnimadaydii ayaa waxaan jaceyl qoto dheer isku qaadney gabar aan ku kulaney mid ka mid ah makiinadaha cajiinka lagu shiido ee xaafaddeena ku yaaley. Inkastoo ay iga yara wayneed Deeqa, haddana waxay I siisay fursad aan ku dhadhamin karo dareenka dabiiciga ah ee kalgacalku leeyahay. Heer aynaan filanayn labadeena ayaan isla gaarney, ilaa uu qofba qofka kale daqiiqad moogaan kari waayo. Waxaan xasuustaa in habeenno badan luuq luuqyada mugdiga ah ee xaaafadda isku weydaarsannay errayo xanbaarsanaa dareen qoto dheer oo aan ka dhicin midkii dhex maray Qays iyo Leyla.

Maalin maalmaha ka mid ah waxaa ii timid Deeqa oo aan faraxsanayn oo si u yara sirgaxan. Markii aan weydiiyay waxa dhacayna, waxay ii sheegtay sheeko yaab leh si kalana qalbi jab u ahayd. Waxay tiri ayadoo hiinraagaysa hadal aan

ka xasuusto “Xaley waxaan soo dhageystay muxaadaro masaajika ka socotay. waxaana soo ogaadey in sheekadeena ay tahay sheeko shaydaan! Sababtoo ah waxaan isku noqonay shaydaan oo Kheyrkii iyo cibaadadiiba waxaa na seejiyay shukaansi iyo jaceyl xaaraan ah”. Anigoo naxsan ayaan waxaan soo xasuustay hadalkii Ayeeyo ee ahaa in shaydaanku carruurta waqti iskaga luminin, waxaana isku dayay in xaqiiqdaas aan la wadaago Deeqa. Nasiib darro Deeqa kuma aysan qancin xaqiiqdaas. Wixii maalintaas ka danbeeyay, kalkacalkii qiimaha badnaa wuxuu eersaday muxaadaradii sheydaanka looga been abuurtay!

Sheeko xiiso badan oo sheydaanka ku saabsan ayaa waxay ka dhacdey magaalada Nairobi. Si kadis waxaa hal mar lagu baraarugey wadaaddadii wahaabiyada ee Nairobi oo masaajidyada kaga digaya qaxootigii Soomaaliyeed ee Kenya joogay sheydaan weyn oo ku soo fool leh magaalada. Shaydaankaas weyn ee ay wadaaddadu ka digayeen wuxuu ahaa nin aan waa danbe ogaaney in uu yahay fanaan ka mid ah fanaaniinta waaweyn ee Soomaalida.

Wadaadka ugu weyn wahaabiyada Kenya ayaa wuxuu si waalli ah uga dabo qaatey booqashada gaaban ee fannaan Samatar ku soo booqanayay dadkii Soomaaliyeed ee Kenya ku casuumay.

Khudbooyin isdaba joog ah ayuu wadaadku wuxuu ku sheegay in bandhig faneedka uu qaban doono mudane Samatar uu yahay bandhig uu shaydaanku rabo in uu Soomaalida Nairobi ku fadareeyo. Cidna ma dhageysan qaylo dhaantii wadaadka. Dhammaan dadkii Soomaaliyeed ee Nairobi joogey waxay si wadajir iyo qalbi furnaan ah uga wada qaybqaateen badhig faneedkii hoobal Samatar ku madadaaliyay dadkiisa ay mudada is moogaayeen.

Nasiib wanaag waxaan ka mid ahaa dadkii Soomaaliyeed ee sida fiican ugu soo nafisay xafladdii qoob ka ciyaarka ahayd ee mudane Samatar ku qabtay Nairobi. Dadkii habeenkaas xafladda ka soo qayb galay waxay iskugu jireen, dumar, carruur, iyo rag ka koobnaa cirroole iyo garmadow.

Intii lagu guda jiray qoob ciyaarka iyo farxadda ayaan waxaan si kadis ah su’aal u weydiiyay nin aan meesha kula kulmay. Wuxuu ahaa nin da’ dhexaad ah ah oo diihaal iyo daruuf adag ay dhafooradiisa ka muuqdaan. Wuxuu ii sheegay in uu ka yimid gobolka Soomaalida ee Itoobiya. Su’aashii kadiska ahaa ee aan weydiiyay waxay ahayd” Sidee u aragtaa wadaadkii ku tilmaamay xafladdan kulan shaydaan?” Jawaabtii uu i siiyay asagoo jidbaysan waxay ahayd “Ina aabbow, marka hore nacalla shaydaan ku yaal, marka xigtana kobtan oo kale ayaaba shaydaanka lagu naaraa!”

Nin aan saaxiib nahay oo aan muddo is moogayn ayaan waxaan si kadis ah ugu kulanay Facebook. Sheeko guud ka dib, sheekadii waxay nala gashay falsafad iyo in aan is weydiino su’aalo cilmi ah oo ku saabsan buburka Soomaaliya ka dhacay. Dooddii saaxiibkay waxay u badnayd in sababaha burburka Soomaaliya uu ka danbeeyay sheydaan Soomaalida ka adeegtay.

Anigoo aragtida saaxiibkay ixtiraamaya ayaan waxaan waydiiyay muxuu shaydaanku ku falayaa Soomaaliya asagoo heli kara in uu ka adeegto ama burburiyo dhulweynaha Shiinaha oo ka dad iyo qayraad badan Soomaaliya. Jawaabtii saaxiibkey waxay noqotay in shaydaanka iyo Shiinaysku ay tol iyo xigaalo yihiin, sidaa daraadeed na aysan dhacayn marnaba in shaydaanku barakiciyo dad ay qaraabo yihiin sida Shiinaha.

Sheekadii dhankale oo xiiso badan ayay nala aadey. Waxaan is weydiinay sababta uu shaydaanku u ruxo ama uga adeegto qaarka danbe ee naagaha buur-buuran. Su'ashaas waxaan uga jawaabnay si waafaqsan sida ay diintu sheegtay oo ah in shaydaanku rabo in uu rag badan oo waxmatarayaal ah uga mashquuliyo salaadaha iyo kheyrka. Cabaar ayaan ka nasanay su'aalihii baas ee shaydaanka ku saabsanaa. Waxaan iska wareesanay hawlaha shukaansiga iyo facebook.

Saaxiibkay wuxuu ii sheegay in dhawaan uu gabar ka caashaqay Facebook ka dib markii ay muddo sheekaysanayeen. Sida uu saaxiibkey ii sheegay, shukaansiga Facebook ma ahan arrin sahlan wuxuuna halis u yahay in shaydaanku ka dhax shaqeeyo mucaashaqiinta kala fog. Qorshaha saaxiibkey wuxuu ahaa in uu mar walba ku dadaalo in uusan fursad siinin shaydaan ka dhex adeegta asaga iyo gacaladiisa. Anigoo yaaban ayaan waxaan saaxiibkey weydiiyay: Shaydaanka ma soo galaa facebook?

## 96. Wareerka Gabdhaha iyo Gad-gaddoonka Wiilasha

Waqtigii aan qaan gaaray ee suuqa shukaansiga aan ka wardoonay waxaa iga hor timid xaqiiqo xannuun badan. Xaqiiqadaas waxay tahay in gabdhaha badankood wareer ka muuqdo waayo waxaa aad u adag in qaab maangal ah loo ogaado waxyaabaha gabdhaha ay ka doonayaan wiilasha.

Gabdhihii tirada badnaa ee aan sheekaysannay ama is shukaansannay waxay ii sheegi jireen waxyaabaha ay jecelyihiin ama nolosha uga caleema saaran. Balse muddo kooban marka la joogo waxaan arki jiray in waxyaabahii ay sheegeen in ay jeclaayeen in haddana si lama filaan ah u naceen ama ugu xanaaqeen. Tusaale ahaan, gabar aan sheekaysan jirnay qarnigii dhammaaday ayaa ii sheegtay in ay ka hesho ragga garka daysta. Maaddaama waligay gar xiir aan ahaa waxaan isku dayay in garka aan sii daayo bal si gabadhaas wadaadda ah qalbigeeda aan ugu dhawaado.

Maalmo ka dib gabadhii waxay ila wadaagtay xaqiiqo ah in ay ku baraarugtay in garka dheer ee sunnada lagu sheegay in la isku gaado. Sidaa daraaddeedna ay ku kacsantahay ragga garka dheer sii daysta. Halkaas waxaa ku fashilmay mashruucii aan ku mashquulsanaa ee ku saabanaa gar sii daynta waayo waxaan ogaaday in garkayga dheer uu iga sii dheerayn doono gabadha aan rabo in qalbigeeda aan u dhowaado! Nasiib darro, garkii aan gaabiyay mararka qaarna aan xiiri jiray waxba iima qaban waayo waxaa maalin walba is baddali jiray mawduucyadii u caleema saarnaa gabadha ku wareersan waxa ay rabto.

Casharro badan oo cilmi nafsi ah ayaan akhriyay tobankii sano ee la soo dhaafay bal si aan u fahmo sababaha cilmiga ah ee ka danbeeya wareerka gabdhaha iyo gad-gaddoonka wiilasha!

Dooddaha cilmi nafsiga ah wax badan kama tilmaami karaan mawduucan waayo cilmiga casriga ah waa carruur marka la eego taariikhda qotoda dheer ee nolosha aadanaha. Tusaale ahaan wareerka gabdhaha iyo gad-gaddoonka wiilasha wuxuu soo billowday waqtigii Abooto Xaawo iyo Awoowe Aadan Jannada ku wareereen.

Nasiib wanaag, xilli xilliyada kamid ah aniga oo dhagaysanaya mid ka mid ah heesaha faca weyn ee Soomaalida ayaan helay sababta falsafadaysan ee ka danbeeysa wareerka gabdhaha iyo gad-gaddoonka wiilasha. Waxaan aad ugu farxay in hees Soomaaliyeed aan ka helo cilmi aan ka waayay buuggaagta casriga ah.

Heestan waxaa qaada fannaanada qiimaha badan ee Luul Jeylaani. Heesta waxaa lagu magacaabaa Macaanoow. Erayada cajiibka ah ee heestan ah waxaa ka mid ah:

Macanow maanta maxaa ku daaray ii macneey

Murugtaan ku hayso, meel aan lahayn aa ku mashaakilaystee

Masuul iga qaadee, i maaweeliyee

Murugtaadaa I heysee makaa maarmiyee

Erayada heestan waxaa qoraalkan ka quseeya meeriskan: Masuul iga qaadee, i maaweeliyee. Marka la darsayo qofka wareersan waxaa la darsaa waxyaabaha qofka uu ku wareersanyahay.

Sida erayada heestan ka muuqata, gabdhaha waxay doonayaan in hal dhegax labo shinbir ku dilaan. Tusaale ahaan waxay rabaan wiil mas'uul ah oo haddana maaweelada iyo madaddaalada ku fiican. Haddaba waxaa dhihi karnaa damaca noocan ah waa barta ay ka soo billaabato wareerka gabdhaha ka muuqda.

Sida dabiiciga ah ragga waxay u qaybsanyihiin qaar mas'uul ah oo danaha guud iyo kuwa gaarka ah ka shaqeeya iyo qayb kale oo waxar jabtay aan lagu aamini karin balse maaweelada iyo madaddaalada ku fiican. Dhanka ka kale, heestan waxay muujisay in gabdhaha ay rabaan in wiilka mas'uul uu noqdo, isla markaana uu maaweeliyo.

Gad-gaddoonka wiilasha ka muuqda waa in ay mar walba isku dayaan in gabdhaha ay jeceliyiin qanciyaan. Tusaale ahaan waxaad arkeysaa wadaad caan ahaan jiray oo reerkisa mas'uul ka ahaa in markii danbe uu noqday fannaan xafladaha ka ciyaara.

Waxay u badantahay in dadka la yaabaan ga-gaddoonka ka muuqda wadaadka sida lama filaanka ah fannaanka iskugu baddalay. Balse dadka ma oga in sababta cilmiyaysan ee ka danbaysa ga-gaddoonka wadaadka ka muuqda in ay tahay wareerka xaaskiisa oo doonaysa in wadaadkeeda marna uu noqdo mas'uul marna uu dadka maaweeliyo.

Gabdhaha waxay doonayaan in wiilasha laga helo labo arrin ama astaamood oo ay adagtahay in ragga isku mar laga wada helo. Labadaas arrin waa mas'uuliyad iyo maaweelo. Ninka mas'uulka ah waqti uma hayo maaweelo iyo madaddaalo halka ninka maaweelada iyo madaddaalada ku fiican uu ka caaggan yahay mas'uuliyadda. Sidaa daraadeed, wareer ka gabdhaha iyo gad-gaddoonka wiilsha waxaa lagu xallin karaa in gabdhaha go'aan cilmiyaysan qaataan dabadeedna kala doortaan mas'uuliyadda iyo maaweelada midda muhiimadda u leh markaas.

Haddii kale wiilasha masaakiinta ah waxay ku jiri doonaan gabdhidhaclayn aan dhamaad lahayn. Tusaale ahaan waxaa la arki doonaan wiilal marna garka sii daysta si caadi iskaga dhigaan, dadkana u maaweeliyaan, marna garka dheer la baxa si ay ugu muuqdaan mujaahidiin aan soo jeesan oo ummadda dhan mas'uul ka ah!

## 97. Warqaddii lagu Furay Waddada ( Sheeko Gaaban)

Labaatan sano ka hor ayaa ka soo safray magaalada Kismaayo. Waxaan safar u ahaa caasimadda dalka ee magaalada Muqdisho. Wadaad daris aan ahayn ayaa maqlay in Muqdisho aan u safri rabo. Subaxii aan soo safrayay ayuu wadaadkii guriga iigu yimid.

Wuxuu ii sheegay in uu doonayo in warqad iigu dhiibo xaaskiisa oo Magaalada Muqdisho maqaayad ku haysata.Waan ka aqbalay. Waxaana wadaadkii ka soo qaaday warqaddii.

Suuqa Imbiritooriya ee magaalada Kismaayo oo waagaas ahayd barta (boosteejada) ay ka baxaan baabuurta Muqdisho aadda ayaan ka soo raacay Xaajiyo Khamsiin shiraacan. Shirka hore ee Xaajiyo khamsiinta waxaa la fariisiyay labo islaamood oo ka mid ahaa ganacsatada shidaalka ee magaalada Kismaayo. Rakaabkeennii kale, waxaa qaab aan qurxoonayn looga buuxiyay qaybta danbe ee Xaajiyo Khamsiinta.

Markii magaalada aan ka baxnay oo xoogaa soconnay ayaa waxaa gaarnay isbaaro u dhoweyd tuulada Goobweyn. Goobweyn waxay 18 km dhanka waqooyi u jirtaa magaalada Kismaayo. Waqtigaas Goobweyn waxaa ka talinayay ciidamo ka tirsan dawladdii salballaar ee madaxweynaha uu ka ahaa marxuum Jeneraal Caydiid.

Muddo ayaan isbaarada ku xannibnayn waayo waxaa si xun lacagtii baadda ahayd iskugu maandhaafnay dawaralkii Xaajiyo Khamsiinta iyo maleeshiyadii isbaarada dhigtay. Sida mar danbe aan ogaaday, darawalka wuxuu ahaa nin reer Galmudug ah oo ka tirsanaan jiray dhallinyaradii Jeneraal Caydiid ka soo raacay magaalada Cadaado.

Habeenkii oo dhan markii aan sii soconnay ayaa waxaa roob badan nagu helay meel u dhow tuulada Kuunyo-Barrow. Rakaabka intooda badan, waxay aad u dhararsanayeen tuulada Kuunyo-Barrow waayo waxaa halkaa ka furnaa maqaayado badan oo caan ku ahaa hilib aad u macaan oo noocyo kala duwan loo shiilay.

Waxaa xusid mudan in habeenkii intii aan sii soo soconnay aan ku dhacnay Isbaaro waagaas caan ka ahayd gobollada Jubbooyinka. Isbaaradaas waxay taallay tuulada Xaramka. Waxaan xasuustaa in rakaabka oo dumar u badnaa in faataxo badan ay akhiriyeen markii aan u soo dhowaannay tuulada Xaramka. Isbaaradaas lacag kaliya laguma qaadan jirin, ee waxaa sidoo kale lagu fara xumeyn jiray dumarka safarka ah!

Nasiib wanaag habeenkaas dhibaato badan kalama aynaan kulmin isbaaradii Xaramka. Markii aan cabbaar soconnay oo Kuunyo-Barrow u dhowaannay ayaa gaarigii wuxuu naga galay dhiiqo aad u daran oo dhanna aan looga dhaqaaqi

karin waayo waxaa deeggaanka ka da'ayay roobab mahiigaan ah. Waxay noqotay in habeenkii bartaas aan ku barrino. Waxaa xusid mudan in goobtaas roobka badan nagu helay in ay ahayd dhul keyn ah oo caan ku ah libaaxyo aad u xanaaqsan oo ka xun burburka dalka ka dhacay.

Waagii markii uu baryay ayaa rakaabkii isku dayeen in Xaajiyo Khamsiintii dhiiqada ka saaraan. Muddo markii dhiiqada lala raftay ayaa lagu guulaystay in dhiiqadii inteedii badnayd laga gudbo. Markii daqiiqado kooban la socday, maqaadiir kale ayaa dhacday. Matoorkii Xaajiyo Khamsiinta ayaa duqeeyay. Halkaasnaa waxaa ku soo afjarantay rajadii ahayd in hilibka shiilan ee Kuunyo-Barrow la qararamsado!

Saddex maalin ayaa halkii ku xayirnayn. Labo nin iyo darawalkii gaariga waxay go'aansadeen in ay u lugeeyaan tuulada Kuunyo-barrow si ay halkaas uga soo qaadaan qalab ama farsamo lagu furdaamiyo matoorka duqeeyay.

Rakaabkii gaariga ku haray iyo aniga waxaan billownay in waqtiga aan ku dilno sheeko loo kaalmaystay buskut iyo sabaayad safarka dartiis loo soo dubay.

Waqtigaas sheekada guud kuma fiicnayn, waxaana ahaa gaban yar oo dadka ka waaweyn la doodda. Wax walba oo sheeko iyo baashaal ah waxaan u qaadan jiray mowduuc laga doodi karo. Labaatan sanno ka dib ayaan ku baraarugay in sheekada iyo doodaha kala madax bannaanyihiin. Maadaama rakaabka iyo aniga sheekada isku kaaya bixi weysay, shaydaanka ayaa talo yaab leh ii soo jeediyay! Taladaas waxay ahayd in aan akhriyo warqaddii uu wadaadka ii soo dhiibay! Shaydaanka wuxuu ii qurxiyay in wax walba la akhrin karo. Dhowr jeer ayaa talada shaydaanka ku diiday. Balse maadama dhul geeri go'an ah la joogo, rakaabkiina aan is fahmi weynay, wuxuu sheydaanka ii sheegay in aysan dhib lahayn in warqaddii wadaadka aan ku furo waddada dhexdeeda!

Warqaddii markii aan furay waxaan ugu tagey farriin jaceyl ah oo filan waa igu noqotay. Wadaadku wuxuu warqadda ku xusay in jaceylka qalbigiisa buuxa uu la mid yahay wabi karaaraha jabsaday oo biyo badan ka soo butaacayaan. Wadaadka wuxuu xaaskiisa qaaliga ah u sheegay in uu yahay maxbuus ku xiran xabsiga weyn ee mucaashqiinta! Warqadda wadaadka waxaa lagu qoray far aan qurxoonayn, balse waxay xambaarsanayd farriimo kalgacayl ah oo aad u qiimo badan.

Dhanka kale, wadaadka wuxuu qoraalka ku xusay xasuuso dhowr ah oo ku saaban siyaabihii kala duwanaa ee xaaska u raaxaysteen sannadkii hore mar uu magaalada Muqdisho ku soo booqday. Qaybaha ku saabsan sida wadaadka iyo xaaskiisa u raaxaysteen waxay ahaayeen qoraalkii ugu horreeyay ee abid noociisa ah ee aan akhriyo. Waxaan xasuustaa in qaybtaas dhowr jeer aan ku ceshaday.

Aqriska warqaddaas waxaan ku ogaaday in ragga qaar qoorta ka qaniinaan xaaska xillayada xaraaradda iyo xiisaha sariirta cirka isku shareeraan! Sidoo kale warqaddaas waxaan ka bartay in ragga ku jiraan qaar qalbi xab-xab ah oo xaaska ka xiira meelo ragga kale ka xishoodaan!

Markii aan Muqdisho gaaray, waxaan raadiyay xaaskii wadaadka uu qabay si warqaddii waddada lagu soo furay aan ugu wareejiyo. Waxaa la ii sheegay in xaaskii magaalada ka safartay oo ay aaday tuulo hooyadeed oo xanuunsan ay ku noolayd- (Magaca tuulada waan hilmaamay). Warqaddii oo furan ayaan dib ugu soo celiyay magaalada Kismaayo saddex bilood ka dib.

Akhlaaq ahaan ' ethics' waxay ahayd qalad weyn in warqad qof kugu soo amaannaystay waddo dhexdeeda lagu furo. Way dhacdaa in talada sheydaanka noqoto mid loo qaateen ah marka shaydaanka kula taliyo adiga oo ku safraya waddo dhiiqo ah iyo waddan burbursan.

Ugu danbeyntii, wadaadkii warqadda ii dhiibay iyo aniga waxaan ku kullanay magaalada Kinshasa, caasimadda Democratic Republic of the Congo. Waqtigaas wadaadku wuxuu isku baddalay muqayil weyn oo ku xanaaqay kooxaha diinta Rabbi ka ganacsada. Habeen ayaa wadaadka oo qayilaaada ka nasanaya sheekayannay, waxaana soo xasuusiyay warqaddii uu ii dhiibay dhowr iyo toban sano ka hor. Markii uu xasuustay ayaan u sheegay in warqaddii uu ii dhiibay wadada aan ku furay dabadeedna ku akhriyay. Sidaa daraadeedna aan ka codsanayo in uu iga cafiyo khiyaamadii aan ku kacay!

Asaga oo qoslaya, ayuu ii sheegay in uu i cafiyay. wuxuuna iga wacdiyay in wax walba aan akhriyo! Cafiskaas ka dib, waxaa igu dhacay buufis ku saabsan warqadaha la isku diro!

Marwalba oo aan safrayo, waan ka diidaa in qof aan u qaado warqad waayo ma hubo in shaydaankii labaatan sano ka hor ila taliyay inuu noolyahay iyo in kale. Sidoo kale waligay qof safraya ma u dhiibo warqad waayo waxaan ka baqaa maqaadiirta iyo nabsi wada socda in ay ii tashadaan.

# 98. Geeridii Gaashaanle Githeri (Sheeko Gaaban)

Githeri waa gaashaanle sare oo ka tirsan ciidamada cuntooyinka ee dadka reer Kenya ka difaaca cadowga caalamiga ah ee gaajada. Gaashaanle Githeri wuxuu ka soo jeedaa qabiil ka soo furcamay oday lagu macaabi jiray Canbuulo iyo islaan loogu yeeri jiray marwo Galley kuwaas oo dhowr kun oo sanno ka hor isku guursaday gobolka dhexe ee waddanka Kenya- Central Province of Kenya.

Inkasta oo gaashaanle Githeri ka howl galo dhammaan gobollada dalka Kenya oo dhan, haddana Githeri iyo guutadiisa waxay si gaar ah uga howl galaan deegaannada ay ku noolyihiin qawmiyadaha kala ah Kikuyu, Meru iyo Embu.

Waagii qaxootiga aan ku ahaa dalka Kenya ayaa Gaashaanle dhexe Githeri si lama filaan ah u saaxiibnay. Mucjiso yaab leh ayaa arki jiray marwalba oo mudane Githeri aan sheekaysanno. Mucjisadaas waxay ahayd in errayga Geeri oo meel dheer ka soo lugeeyay soo garaaco albaabka hore ee maskaxdayda .

Waqtigaas waxaan is weydiin jiray waxa ka dhaxeeya Gaashaanle Githeri iyo Geeri oo aan ka ahayn xarafka "G". Marar badan ayaa aniga oo qoslaya diidi jiray in erayga Geeri aan ka furo albaabka hore ee maskaxdayda waayo iima muuqan jirin wax macno ah oo ku jira in Geeri laga fekero marka mudane Githeri iyo guutadiisa lala marqaamayo!




Dhowr sanno ka dib, markii Kenya aan ku laabtay waxaa billaabay in aan la kulmo asxaabtii muddada dheer aan kala maqnayn. Asxaabtaas aan raadiyay waxaa ka mid ahaa Gaashaanle dhexe Githeri! Sawirka idiin muuqda ee saxanka ah waxaa laga soo qaaday xafladdii loo qabtay kulankii ugu horreeyay ee na dhex mara - Githeri iyo aniga muddo lixsano ah ka dib!

Markii muddo aan sheekaysannay mudane Githeri ayaa waxaan si lama filaan ah ku arkay errayga Geeri oo ka tuugsanaya albaabka hore ee maskaxda si la mid ah sida masaakiintii Muqdisho ee magan alleyda ku tuugsan jirtay marka

xaafadaha lagu dhigto sabatul abaay abaay! Waan yaabay, waayo waxaan soo xasuustay waayo waayo iyo maalmihii aan isku cusbayn mudane Githeri.

Maadaama markan aan ahaa dalxiise isku tuntay oo dalka Canada beerka u jiifa (erayada isku tuntay iyo beerka u jiifa waxaan ka bartay barnaamijka calaf-doon ee Facebook live ka uga baxa), waxaan go'aansaday in albaabka hore ee maskaxda aan ka furo erayga Geeri dabadeedna kursi u dhigo qolalka danbe ee maskaxda waayo diinta waxay na fartay in masaakiinta tuugsata la soo dhaweeyo!

Gaashaanle dhexe Githeri kuma farxin in erayga Geeri ee tuugsanaya albaabka laga furo waayo wuxuu ogaa in tiisa iman karto maadaama geerida iyo asaga is gaad gaad adag ka dhaxeeyo. Sidii Gaashaanlaha uu ka baqayay ayaa dhacday waayo daqiiqado kooban gudahood wuu alleystay asaga oo ashhaadanaya! Waxaan ogaaday in Gaashaanle Githeri soo Islaamay lixdii sano ee aan kala maqnayn mar haddii uu ashhaatay daqiiqadihii naftu ka sii baxaysay. Maadaama Gaashaanlaha muslim uu ahaa, duugta maydkiisa lama daahin, waxaana lagu aasay qubuuraha calooshayda qaybta muslimiinta loo qoondeeyay!

Geeridii dishay Gaashaanle Githeri ee kursiga ku fadhisay ayaan damcay in aan la garramo. Intii aan la garramin Geerida ka hor waxaan si lama filaan ah u xasuustay magaca nin caan ka ah caalamka cilmi-nafsiga -psychology oo lagu magacaabo Sigmund Freud. Sababta aan u soo xasuustay mudane Freud waxay ahayd in uu ahaa aqoonyahan xiiseeya martida kuraasta loo dhigo qolalka danbe ee maskaxda "Unconscious Mind."

Oday Freud wuxuu ku dooday in martida jiifta qolalka danbe ee maskaxdaada kuu wadaan farriimo waaweyn oo u baahan in si fiican loo fahmo. Waxaan markiiba isku dayay in aan fahmo macnaha ku jira erayga Geeri ee fadhiya qaybaha danbe ee maskaxdaya iyo geerida deg-deg ah ee ku timid saaxiibkeeygii qaaliga ahaa Gaashaanle Githeri.

Markiiba waxaa maskaxdayda la soo hordhigay sawir duug ah oo labaatan sano ka soo wareegtay. Sawirkaas waxaa maskaxdeyda lagu dhex qaaday sannadkii 1997. Sida sawirka ka muuqda waxaan fadhiyaa geed tallaal hoostiisa. Waxaana dhegaysanayaa Idaacadda BBC oo ka warramaysa fatahaadii biyo badanta ahaa ee dhulka dhoobayda ee Soomaalida ka dhacay. Sida idaacadda laga sheegayo dad badan oo masaakiin ah ayaa ku geeriyooday fatahadahaas!

Sida sawirkaas duugga ah ku xusan, marka idaacadda aan ka dhegaysanayo geerida fatahaada socda u geysteen shacabka masaakiinta ah waxaan qararamsanayaa Canbuullo Galley si fiican aan loo karinin. Sida uu ku doodayo mudane Freud, dhacdooyinka naxdinta leh marka ay dhacaan ama la dhegaysto

-trauma waxay ku dhuuntaan qaybaha danbe ee maskaxdaada. Waxaana dhacaysa in xusuustooda la hilmaamo.

Si xusuusahaas murugada leh loo soo dhufto, maskaxdana looga sifeeyo mudane Freud wuxuu qabaa in la adeegsado farsamo uu ugu magac daray xiriirin- association inta lagu guda jiro dhiraandhirinta dhimirka- psycho analysis. Freud waa ninkii ugu horreeyay ee dhiddibada u taaga cilmiga dhiraandhirinta dhimirka!

Haddaba aniga oo xasuusanaya casharadii Freud ayaa waxaan xiriirin u sameeyay Geeridii naxdinta lahayd ee dadka masaakiinta ah ee idaacadda BBC aan ka dhegaystay labaatan sano ka hor iyo Canbuulo Galleydii aan cunayay waqtigaas. Xusuustaas waxaan ku fahmay macnaha ku jira mucjisadii yaabka lahayd ee dhici jirtay marwalba oo marxuum Gaashaanle dhexe Githeri aan sheekaysanno. Mucjisadaas waxay ahayd in erayga Geeri oo u labisan sida masaakiinta tuugsata oo kale in albaabka hore ee maskadayda soo garaaci jirtay!

Ugu danbayntii, farsamada dhiraandhirinta dhimirka ee mudane Freud dhidibada u taagay- psycho analysis waxaa lagu fahmi karaa oo waliba lagu daweyn karaa xusuuso xanuun badan oo si dadban saaxiibbada isku dheer sheekada uga qasa! Waan ka xumahay in geerida saaxiibkeey Gaashaanle Githeri ka dib in aan fahmo macanaha iyo murtida ku jirtay xusuusta erayga Geeri ee i soo salaanta marwalba oo Canbuullo Galley aan cunayo!

## 99. Dareenka Awliyada iyo Amniga Diyaaradaha

Waxaa daawaday muuqaal la sheegay in laga soo duubay diyaaradda Jubba oo cillad farsamo ku timid ayada oo hawada sare maraysa. Ma jirto cid madax bannaan oo xaqiijisay muuqaalkaas la duubay. Dhanka kale muuqaalkaas wuxuu muujinayay argaggaxa iyo naxdinta ay dareemi karaan rakaabka saaran diyaarad cillad ay ku timid ayada oo hawada sare heehaabaysa!

Codadkii muuqaalkaas la duubay laga maqlayay waxaa ka mid ahaa shahaadada iyo tasbiix lagu muujinayo xaaladda hawada sare ku mururgsan.

Markii muuqaalkaas cabbaar aan daawaday waxaa maskaxdayda hor yimid wiil yar oo aan ku qiyaasay inuu ahaa wali Ilaahay oo is qarinaya kaas oo magaalada Gaalkacyo aan ka soo wada raacnay diyaarad u socotay Muqdisho. Wiilkaas isku kursi ma aynaan wada fadhinin, balse markii diyaaraddii caga dhigatay Muqdisho ayaa waxaan naloo sheegay in dadka Muqdisho u socda kaliya diyaaradda ka dagi karaan.

Maaddaama wiilka awliyada ahaa iyo aniga aynaan Muqdisho u socon waxay noqotay in diyaaradda cabbaar aan ku sii jirno oo kuraastii cidlada ahayd marba mid dul is taagno. Waqtigaas kooban ayaa waligii Ilaahay ee is qarniyay iyo aniga waxaa na dhex maray sheeko kooban oo ku saabsan dareenka awliyada ee ku aaddan amniga guud ee diyaaradaha adduunka, iyo kalsoonida lagu qabi karo diyaaradaha duugga ah ee Soomaaliya ka dhex shaqeeya.

Wiilkii waliga ahaa wuxuu ii sheegtay in guud ahaan diyaadaradaha adduunka yihiin "wad socda" oo aan laga warqabin. Intii waligaas Ilaahay iiga sheekaynayay dareenkiisa gaarka ah ee diyaaradaha waxaan daawanaayay dareenka qarsoon ee awliyada Ilaahay ka qabaan guud ahaan duulimaadyada caalimaga ah. Dareenka awliyada ma ahan mid la mid ah kan dadka caadiga ah waayo awliyada Ilaahay waxay arkaan waxyaabo dadka caamada ah aysan arki karin. Tusaale ahaan dadkii diyaaradda saarnaa ee aan ka mid ahaa waxay ku mashquulsanayaayeen goorta diyaaradda Muqdisho tagi doonto iyo waqtiga maqaayad hebla laga qadayn doono.

Balse waligii ilaahay wuxuu ii sheegay intii diyaaradda la soo saarnaa oo dhan inuu ka fekerayay cajaa'ibta u gaarka ah bani'aadamka iyo sida wadka socda oo cirkaas maraya bani'aadamka iskugu biimayn karo! Sidoo kale waligaas Ilaahay wuxuu ii sheegay markii ugu horreeysay ee diyaarad arko in uu ku sugnaa mid ka mid ah baaddiyaha fog ee dhulka Soomaalida ee dalka Itoobiya. Waqitaas wuxuu ahaa wiil yar oo ari la jooga!

Waxaa laga yaabaa awliyada Ilaahay in mararka qaar ayaga oo is qarinaya iska soo dhigaan wiilal iyo gabdho yar yar oo waxaro la jooga! Markii cabbaar aan ka sheekaysanay cajaa'ibta iyo cabsida ku qarsoon safarka cirka ayuu waligii ilaahay wuxuu ii billaabay sheeko dulmar ah oo ku saabsan tacadiyada ka socda deegaanka Soomaalida ee dalka Itoobiya.

Maadaama awliyada Ilaahay mararka qaar kashfiga laga feedo oo waliba si fudud u saadaalin karaan mustaqbalka guud ee dadka ku mashquulsan nolosha caadiga ah ayaa waligii is qarinayay waxaan weydiiyay su'aal sidan ah “Dhibka ka socda deegaanka Soomaalida ee Itoobiya goormuu dhammaan doonaa?"

Waligii Ilaahay oo degennaanta caanka ay ku yihiin awliyada Ilaahay muujinaya ayaa ii sheegay in dhibaatada ka jira deegannadaas dhowaan dhammaan doonto. Sidii waligaas uu saadaaliyay ayay noqotay oo maalmo ka dib isbaddalo waaweyn oo dhibaatadii jirtay looga nafisay ayaa ka dhacay degaanka Soomaalida ee Itoobiya!


Sheekadii oo noo socota ayaa waxaa loo yeeray rakaabkii u socday Nairobi halka rakaabkii u socday Kismaayo laga codsaday in diyaaradda ku sii jiraan.

Sidaas ayuuna ku soo gabagaboobay kulankii koobnaa ee na dhex maray mid ka mid ah awliyada Ilaahay ee Geeska Afrika. Markii aan soo raacay diyaadaraddii u socotay Nairobi ayaan ku baraarugay in qatar cadiim ah aan ku suganahay maadaama aan dul saarannahay "wad socda"!

Waxaan kaloo ogaaday marka la raacayo "wadka socda" ee cirkaas duulaya in ay fiicantahay in awliyada ilaahay ee is qarinaysa lala safro maadaama macquul ay tahay in dareenka guud ee awliyada lagu sugo amniga diyaaradaha. Sidaa daraadeed, waxaa shirkadaha diyaaradaha ee Soomaaliya ka shaqeeya kula talinaynaa in duulimaad kasta tikidyo lacag la'aan ah loo qoondeeyo awliyada Ilaahay ee Geeska Afrkia ku dhuumaalaysanaya!

## 100. Quruxda Dhimashada

Waxaa daaqadda guriga ka daawaday geedo dhaadheer oo caleemo qurxoon oo midabyo iskugu jira huruud iyo gaduud ku badalanaya muuqaalkii cagaarka ahaa ee caleemaha geedaha caanka ku yihiin. Markii muddo aan daawaday caleemaha midabyada qurxoon nagu martiqaaday, ayaan ku baraarugay xaqiiqo kale oo yaab leh. Xaqiiqadaas waxay tahay in caleemaha muujiyay midabyada qurxoon in yihiin kuwo sii dhimanaya. Badanaa xilligan oo kale Waqooyiga America waxaa aakhiro u guura caleemihii waqtigii xagaaga ku soo xaroogaday midabka cagaarka ahaa- Fall.



Xaqiiqadaas waxay ii horseeday in muddo aan ka fekero quruxda ku qarsoon dhimashada dadka. Waxaan is weydiiyay: ma laga yaabaa marka dadku dhimanayaan in geedaha iyo duunyada kale ay daawadaan midabyo ama muuqaallo qurxoon oo ka farxiya.

Waa hubaal in qofka dhimanaya iyo qoyskiisa ay ka muragaysanyihiin geerida taagan albaabka guriga. Sidoo kale waxaa laga yaabaa caleemihii cagaarnaa ee iminka sii dhimanaya in qudhooda ay ka xunyihiin geerida dul taagan.

Haddii laga soo tago dareenka u gaarka ah abuurka sii dhimanaya, waxaa macquul ah in noolaha kale qurux indhaha ku doogsadaan ama qalbiga u riyaaqo uu ka dhaxlo dhimashada quruumaha kale! Tusaale ahaan, dadka nolosha ku daalay ee daaqadaha ka daawada geedaha dhaadheer, waxaa laga yaabaa in qurux ay kala soo dhexbaxaan midabyada u gaarka ah caleemaha murugaysan ee geerida dul- taagantahay.

Sidoo kale aboorka mudada dheer ku soo rafaadsanaa abaaraha dabiiciga ah waxaa laga yaabaa in uu qalbiga ka riyaaqo marka uu daaqadda qolkiisa ka daawado quruxda ku qarsoon dhimashada dadka. Sidaa daraadeed guud ahaan dhimashada waxaa ku qarsoon qurux u gaar ah. Quruxdaas waxaa daawan kara noolaha kale ee ka madax banaan magac ahaan iyo muuqaal ahaanba quruumaha markaas daruuraha geerida dul hoganayaan!